Siiradii Rasuulka Muxammed (scw)

Mahad Naq:

Mahad oo dhan waxaa leh Allaha awooda sare leh ee noo suurta geliyey in aan casharadan si fudud idinku soo gaarsiino; waxa kale oo aan u mahad celineynaa qoraaga waqtiga dheer ku bixiyey isku dubaridida casharadan. Waxa kale oo aan u mahad celineynaa qof kasta oo akhrista; kana faa'iida.

Lnkiga casharada ee website-yada tooska loogu xiriirin karaa
waa: **http://www.somalitalk.com/siiro/**

NASABKII RASUULKA SCW

Sida la wada ogsoon yahay nasabka Rasuulka SCW ama abtirisiinyihiisu wuxuu galaa nabiyullaahi Ismaaciil oo uu dhalay nabi Ibraahim. Abtirsiinyada nabiga SCW waxay u qaybsantaa saddex qaybood: Qaybta u hooreysa marka nabiga SCW laga soo bilaabo waxay ku eg tahay ilaa Cadnaa, waana qayb culimada islaamka oo dhan ay isku waafaqsan tahay isla markaasna la hubo sixadeeda; Qaybta labaad oo iyaduna ka bilaabato Cadnaan waxay ku eg tahay ilaa nabi Ismaaciil, hase yeeshee waa qayb ay culimadu isku khilaafsan tahay sixadeeda in badan oo culimada ka mid ihina way ka gaabsadaan, qaar kalena way ka hadlaan; Qaybta saddexaad oo ka bilaabata nabi Ismaaciil ilaa laga gaaro nabi Aadan aad ayaay u adag tahay xaqiijinteeda iyo sixadeeda waxana wanaagsan in laga dhowrsada oo aan la dhex dabaalan.

Waxaan markaa soo qaadaneynaa qaybta ugu horreysa ee ay culimada islaamku isku waafaqsan yihiin dhabnimadeeda hadday noqon lahaayeen kuwii hore iyo kuwii dambeba, waxaana weeye sidatan:

Maxammed binu Cabdullahi binu Cabdimudhalib (Shaybah) binu Haashim (Camar) binu Cabdimanaaf (Muqiira) binu Qusayi (sayd) binu Kilaab binu Murra binu Kacab binu Nadar (Qays) binu Kinaana binu Khuseyma binu Mudrik (binu Ilyaas binu Mudar binu Nisaar binu Macad binu Cadnaa.

Rasuulka SCW jilibkiisa waxaa la oran jirey reer binu Haashim, waxaana loogu magac daray awoowgiisii labaad, Haashim binu Cabdimanaaf. Haashim wuxuu ahaa nin ka sheegganaa reer Makka, wuxuu waraabin jirey xujeyda oo uu aabbihiis Cabdimanaaf ka dhaxlay, sidoo kale wuxuu ahaa ninkii ugu horreeyey ee jideeyey labadii safar ee suuratul Quraysh sheegtay oo ay qurayshtu u kala safri jirtay Shaam iyo Yamaan.

Haashim Wuxuu dhalay afar wiil oo kala ahaa: Asad, Abu Seyfi, Nadla' iyo Cabdimudhalib iyo shan gabdhood oo kala ahaa: Sharaf, Khaalida, Daciifa, Ruqiya iyo Junna. Waxaa sagaalkooda ugu yaraa Cabdimudhalib oo ahaa nibiga SCW awowgiis.

Cabdimudhalib siduu ku dhashay waxay ahayd aabbihiis Haashim ayaa Safar ugu kacay Shaam, wuxuuna sii maray Madiina oo uu ku guursaday kulana aqalgalay Salma bintu Camar. Haashim wuxuu sii watay safarkiisii Shaam. Markuu Shaam tegey ayuu xanuunsaday, muddo dabadeedna wuxuu ku geeriyooday magaalo la yiraahdo Qusa oo Falastiin ku taala. Salma, oo uur lahayd markuu Haashim tegey, waxay dhashay wiil ay u bixisay Sheyba. Haashim markuu dhintay waxa mas'uuliyaddii waraabinta xujeyda qaaday walaalkiis Mudhalib. Mudhalib markuu hawshaas muddo hayey ayuu Madiina aaday si uu u soo wado wiilkii uu walaalkiis Haashim ka tegey (Sheyba). Markuu Madiina yimid ayuu Salma ka codsaday inay wiilka ku darto hase yeeshee way u diidday,

markaasuu ku yiri "waxaan u dhiibayaa hawshii aabbihiis iyo xaramkii Alle", sidaa ayeyna ugu dartay. Mudhalib markuu Makka ku soo noqday isagoo wiilkuu adeerka u ahaa wada, ayaa waxaa arkay dadkii Makka joogey markaasey wiilkii u maleeyeen addoon uu Mudhalib soo iibsaday sidaas darteed ayey wiilkii ku dheheen Cabdimudhalib (addoonkii Mudhalib), markaasuu mudhalib ku yiri "war hooggiinee, waa wiilkii walaalkay Haashim". Sidaas ayaa wiilkii Sheyba ahaa kula baxay naaneystaas Cabdimudhalib.

Cabdimudhalib wuxuu dhalay toban wiil iyo lix gabdhood, waxaana tobanka wiil lakalal oran jiray: Xaarith, Subayr, Abuu Dhaalib, Cadullahi, Safar, Cabbaas, Xamsa, abuu Lahab, Qiyidaaq, Muqawim. Lixda Gabdhoodna waxay kala ahaayeen: Safiya, Arwa, Ummu Xakiim, Bara'Caatika iyo Ummayma. Cabdimudhalib wuxuu noqday nin cajiib ah oo qureysh oo dhan ka tilmaaman, wuxuu noqday odeygii qureysheed sida lo ogsoon yahayna wuxuu leeyahay qisooyin caan ah oo kala duwan, halkanna aynaan ku soo wada koobi karin, waxaana ka mida ahaa Duullaankii Abraha iyo Qodiddii Samsamka, kuwaas oo isaga iyo qureyshba Ilaahay ugu gargaaray.

DUULLAANKII ABRAHA UU KU SOO QAADAY KACBADA

Abraha oo ahaa nin xabashi ah oo yaman wakiil uga ahaa boqorkii xabashida ayaa markuu arkay sida carabbi kacbada ugu xajineyso waxaa galay maseyr markaasuu magaalada Sanca ka dhisay kaniisad aad u weyn isagoo raba inuu carab ka jeediyo xajkii ay kacbada u xajin jireen.

Arrintii ayaa waxaa maqlay nin reer bani kinaana ah markaasuu kaniisaddii tegey oo qibladeedii wasakheeyey. Abraha markuu arrintaa ogaadey wuu ka xanaaqay wuxuuna go'aansaday inuu kacbadda dumiyo. Wuxuu soo kaxaystay ciidan gaadhaya 60,000 oo askari oo wata sagaal ama saddex iyo toban maroodi, maroodigii ugu weynaana isaga ayaa saarnaa. Abraha iyo ciidankiisii waxay soo socdaanba markay Makka ku soo dhow yihiin ayey geel Cabdimudhalib lahaa qabsadeen markaasaa Cabdimudhalib ergo ugu tegey isagoo doonaya in geeliisii loo soo daayo. Abraha wuxuu yiri: "kacbadiinnii ayaan duminayaa, adna geel baad dooneysaa!" Cabdimudhalib wuxuu ugu jawaabey: "geela anigaa leh, kacbadana Rabbi baa leh isagaan kaa difaacanaya" wuxu markaa Abraha yiri "haddii aydan ila dagaallamaynin Makka isaga baxa" qureyshna sidii ayey yeeshay, geeliina waa loo sii daayey Cabdimudhalib.

Ka dib markuu Abraha soo gaaray togga Xasar ee Musdalifa iyo Mina u dhexeeya ayaa maroodigii istaagey oo diiday inuu u dhaqaaqo dhinicii kacbada, marka dhinaca kale loo jeediyana waa ordayey. Xaaladdu markey muddo sidaa ahayd ayaa Ilaahay markii dambe u soo diray shimbiro mid walba waddo saddex dhagax oo ay ku kala waddo afka iyo labada lugood. Ninkii uu dhagaxaasi ku dhacana wuu googo'ayey oo wuu dhimanayey. Dhagaxaantii dadkii dhammantood kuma wada dhicin ee waxay ku dhacday intuu Rabbi u qaddaray, intii kalena waa carareen iyagoo isjiiraya. Ninkii Abraha ahaa isagoo naf xumi ku jirto ayuu tegey Sanca oo uu ku dhintay. Qureysh oo markii ciidanku yimid buuraha ku kala carartay, markeey Abraha iyo ciidankiisii waxa qabsaday arkeen ayey guryohoodii ku soo laabteen. Qisadan waxaa ka warrantay suuratul-Fiil waxayna dhacday sannadkii uu Rasuulku SCW dhashay. waxaana loo bixiyay sannadkaas; sannadkii maroodiga (Caamul fiil).

QODIDDII SAMSAMKA IYO NADARKII ABDI MUDHALIB

Maalin ayaa Cabdimudhalib oo hurda manaam loogu yimid lana amray inuu faago ceelka samsamka oo muddo hore duugmay, meel uu ahaana aan la garanayn. Manaamkii ayuu ku weydiiyey meeshuu ceelku ahaa waana loo sheegay. Goortuu hurdadii ka kacay ayuu meeshii tegey isaga oo uu la socdo wiilkiisii Xaarith oo uu markaas carruur ka qabay wuuna qoday. Markii ceelkii la helay ayaa qureysh kula

doodday oo tiri: "Cabdimudhalibow waa ceelkii aabahayo Ismaaciil waxaana ku leenahay xaq ee aan kula wadaagsano." Hase yeeshee Cabdimudhalib wuu ka diidey arrinkaa oo wuxuu yiri: "mayeelayo arrinkaan aniga ayaa la igu khaas yeelay". Muddo markii la dooday oo arrinkii lagu kala bixi waayey ayaa la go'aansaday in loo xukun tago habar wax sheegsheegta. Habartii ayaa la wada aaday. Goortii meel cidla ah oo dhexe la marayo ayaa Cabdimudhalib iyo nimankii jifadiisa ahaa, ee reer Cabdimanaf, biyihii ka go'een markaasey raggii kale ee qureysh oo la socday weyddiisteen, hase ahaatee wey u diideen iyagoo ka baqaya in ay dhammaantood oon u wada dhintaan.

Cabdimudhalib markuu arkay xaaladdu meeshay marayso iyo inay halis ku jiraan, meesha ay marayaanna ay tahay saxaraa wax ka dhowna uusan jirin, ayuu ku yiri raggii jifadiisa ahaa "nin walba qabrigiisa ha qoto hana dul fariisto, hadba kii dhintana waa aasaynaa". Sidii ayey yeeleen laakiin markay muddo joogeen ayaa Cabdimudhalib yiri "ma wanaagsana inaan meeshan iska fadhino ee aan soconno". Markuu hashiisii fuulay oo ay dhaqaaqday ayaa biyo ka soo burqadeen meeshay lugta ka qaadday, biyihii ayuu cabbay dhammaan raggii qureysh ee la socdeyna wuu ugu yeeray. Markay kulligood cabbeen, weelashiina ka buuxsadeen ayey Cabdimudhalib ku yiraahdeen" Ilaah baan ku dhaarannaye arrinkii waa laguu xukumay, dib dambana Samsamka kugula doodi mayno, Ilaahii meeshaan saxaraha ah biyaha kaa siiyey yaa Samsamkana ku siiyey ee u noqo waraabbintaadii, waxba habar u tegi maynee".

Markaa ayuuu Cabdimudhalib wuxuu ku nadray in haddii Ilaahay toban wiil siiyo oo ay wada hona qaadaan uu midkod Kacbada agteeda Alle darti ugu gowraco, halkaas ayaa markaas dib looga soo laabtay, meeshii markii hore loo socday.

Cabdimudhalib markii Ilaahay tobankii wiil siiyey oo ay wada hanaaqaadeen ayuu isugu yeeray oo u sheegay nadarkiisii, markay ku wada raalli noqdeenna sanamkii Huda ahaa ayuu ag geeyey una qori tuuray tobankoodii markaasaa waxaa soo baxay qorigii Cabdullaahi oo ahaa wiilkii uu carruurtiisa ugu jeclaa, Cabdimudhalib middi ayuu soo qaatey, wiilkiina gacanta ayuu soo qabsaday oo kacbada dhinaceeda la aaday si uu u gowraco hase yeeshee qureysh ayaa wiilkii ku dhegtay oo u diiday inuu gowraco siiba abtiyaashiis reer bani makhsuum, Cabdimudhalib wuxuu yiri sidee baan nadarkaygii yeelayaa, markaasay kula taliyeen inuu aado habar wax sheegta. Habartii markuu u tegey ayey ku tidhi "magtiinnu waa meeqa?" markaasuu ugu jawaabay "toban halaad", ka dib ayey tidhi "toban halaad iyo isaga u qori tuur, haddii ay tobanka halaad soo baxaan gowrac, hadduu isagu soo baxana geelii kordhi oo toban kale ku dar. Ka dib sidaa geela u kordhi oo hadba toban ku dar ilaa uu geelu soo baxo oo Rabbigiis ka raalli noqdo". Cabdimudhalib waa soo laabtay wuxuuna u qori tuuray toban halaad iyo wiilkii hase yeeshee waxaa qorituurkii ku dhacay Cabdullaahi, ka dib geelii ayuu hadba toban ku darayey qorituurkuna ku dhacayeye Cabdullaahi illaa uu gaadhsiiyey boqol geel ah oo qori tuurkiina ku dhacay geelii. Ka dib Cabdmudhalib wuxuu gowracay boqolkii geela ahaa.

Markaa wixii ka dambeeyey magtii qureysheed ee tobanka geelo ah ahayd waxaa noqotay boqol geel ah, islaamkuna markuu yimid boqolkii ayuu u sugay, oo uddaayey, Rasuulka SCW wuxuu yiri: "Anigu waxaan ahay ina labo gowrac" oo uu ula jeedo nebi Ismaaciil iyo aabbihiis Cabdullaahi.

Waxaa aan qisadaan iyo kuwa la midka ahba ka fahmeynaa sida qureyshu ahaayeen dad diin lahaa hase ahaatee shirki iyo inxiraaf galay, arrimo badanna waxay ku dhaameen dad badan oo maanta islaamka u nasab sheeganaya. Arrimahaas oo aannaan halkan ku koobi karin oo u baahan in iyaga kaliya qoraal ama baaritaan laga sameeyo waxaa tusaale inoogu filan sida markay dhib ku timaaddo ay Ilaahay keliya u baryi jireen ama siday ballanta u ilaalin jireen ammaanadana u xifdin jireen, beentana uga xishoon jireen, nadarkana u oofin jireen. Waxaana xaqiiqa ah in dad badan oo maanta islaamnimo

sheegnaya aanan arrimahaas oo dhan laga wada helaynin aysanna nadar oofintiis u gowracayn ilmohooda ama boqol geel ah.

Cabdullaahi, oo sidaan soo sheegnayba ahaa nebiga aabbihiis, waxaa hooyadiis la odhan jirey Faadumo bintu Caa'id binu Cimraan binu Makhsuum. Cabdullaahi wuxuu guursaday Aamino bintu Wahab binu Cabdimanaaf binu Suhra bin Kilaab, waxayna isku dhisteen magaalada Makka, muddo yar ka dibna, Aamino oo uur leh, ayaa Cabdullaahi arrin u baxay oo aadey Madiina, halkaas oo uu ku geeriyoodey. Da'diisu waxay markaas ahayd 25 sano.

Abdul A.K. DHALASHADII & BARBAARINTII RASUULKA SCW

Wuxuu Rasuulka SCW dhashay sannadkii Caamul-fiil, maalin Isniin ah oo bisha Rabbiicul-awal ahayd laba iyo toban, 53 sano hijrada ka hor. Markuu dhashay waxay hooyadiis u cid dirtay awaawgiis Cabdimudhalib oo ay ugu bishaareyneysey dhalashada Nabiga SCW, Cabdimudhalib waa uu bishaareystey wuxuuna tegey kacbada oo uu Alle ku baryey wuuna ku shukriyey, Rasuulka SCW wuxuu u dooray magaca Maxammed oo ahaa magaca aan carabtu la bixi jirin, wuxuu guday maalinkii toddobaad. Waxaa kale oo la yiraahdaa wuxuu dhashay asaga oo gudan.

Waxaa Rasuulka SCW nuujisey dhowr maalmood Suweyda oo ahayd jaariyaddii Abii-lahab markaas ka horna adeerkiis Xamsa nuujisey hase yeeshee intii badnayd waxaa Rasuulka SCW nuujisey Xaliima binti abi-du'ayd (Xaliimatul sacdiay) oo uu qabay Xaarith binu Cabdul-cusaa oo kunyadiisa la odhan jirey Abi-kabshe, kunyadaas oo mararka qaarkood ay qureyshi Rasuulka ku magacaabi jireen ayna dhihi jireen ina Abi-kabshah. Habka ay ku nuujisey Xaliimo, waxaa jirtey caado ay carabtu lahaayeeen oo ahayd iney dumarku ka imaan jireen baadiyaha oo ay soo aadi jireen magaalooyinka si ay uga qaataan carruur ay nuujiyaan oo ay ujro (xoolo ama lacag) ku helaan, Xaliimo waxay tidhi: "Annagoo dumar badan ah ayaa magaalada Makka soo aadnay si aan carruur uga qaadanno, markaasaa loo bandhigay dumarkii oo dhan iney qaadaan wiilkan agoonka ah hase yeeshee dhammaantood wey diideen waxayna dheheen: "Maxaa ku samayneynaa inanka agoonka ah". Dumarkii oo dhan waxay heleen carruur markaas ayey Xaliimo ku tidhi ninkeedii: "Wiilkaan agoonka ah ayaan qaadayaa", isagiina wuu ka yeelay. Isla markiiba dameerkeedii socon waayey awal ayaa dameerradii kale oo dumarku wateen ka dheereeyey ilaa ay dumarkii Xaliimo ku yidhaahdeen: "noo tartiibi". Xaliimo naaseheediina caano ayey yeesheen, xoolihiina waa u darareen ilaa dadkii la degganaa ay la yaabeen barwaaqadaas oo ku yiraahdeen xoolo raacadoodii: "soo daajiya xoolaha meesha ay xoolo raacyada Ina Abi-Du'ayd daajiyaan.

Ka dib markay Xaliimo labo sano soo nuujisey Nabiga SCW ayey u soo celisey hooyadiis laakiin waxay ka codsatay iney sii hasyo, hooyadiis Aaminana way ka yeeshey, sidaa ayeyna ku ceshatay mar labaad. Ka dib Rasuulka SCW markuu afar ama shan sano jirey isagoo weli la jira Xaliimo ayaa maalin isagoo wiilal la ciyaaraya ayaa waxaa u yimid Jibriil markaasuu qabtay oo legday oo intuu qalbigiisa jeexay ka soo bixiyey cad yar markaasuu ku yiri: "tani waa dheeftii sheydaanku kugu lahaa", ka dib intuu dhaqay yuu meeshii ku celiyey. Wiilashii la joogey ayaa iyagoo ordaya u yimid reerkii oo ku yiri: "Maxammed waa la dilay", markaasey u yimaadeen isagoo miyir doorsoon, markii uu miyirsadayna waxaa uu u sheegay qisadii, markaasey reerkii go'aansadeen iney hooyadiis u celiyaan, weyna u celiyeen.

Ka dib Nabiga SCW hooyadiis ayuu la noolaa illaa lix sano ka gaarey markii uu lix sano jirey ayaa hooyadiis aaddey Madiina si ay u soo booqato qabriga ninkeedii Cabdullaahi iyadoo ay la socdaan soddogeed Cabdimudhalib jaariyaddeedii Ummu-ayman iyo Nabiga SCW. Bil ayey soo joogeen Madiina ka dibna dhammaantood wey soo laabteen hase yeeshee markii dhexda la marayo ayey Nabiga SCW hooyadiis xanuunsatay ka dibna

wey geeriyootey, waxaana lagu xabaalay meel la yiraahdo Abwaa oo Makka iyo Madiina u dhexaysa. Halkaas ayuu Nabigu SCW ku noqday agoon iyo rajayba, waxaana kafaala qaaday awowgiis Cabdimudhalib oo aad u jeclaa una dhaqaaleyn jirey. Hase yeeshee labo sano ka dib markii uu Nabiga SCW siddeed sano jirey ayuu awowgiisna geeriyoodey, wuxuuna markuu dhimanayey kala dardaarmay Abii-dhaalib oo ahaa Nabiga SCW adeerkiis. Ka dib waxaa Nabiga SCW kafaala qaadey adeerkiis Abii-dhaalib oo uu la joogey ilaa uu ka hanaqaaday.

QISADII BAXIIRA

Markuu Rasuulka SCW 12 sano jirey ayaa adeerkiis Abii-dhaalib iyo rag kale oo qureysh ka mid ah ay safar ugu kicitimeen dhinaca Shaam, wuxuu markaa Rasuulku scw ka codsadey adeerkiis inuu raaco, adeerkiisna waa uu ka yeelay. Dabadeed markuu safarkii baxay waxaa uu sii maray meel la yiraahdo Busra oo ay safarrada qureysheed ee Shaam u socda sii mari jireen uuna degganaa nin raahib (suufi) ahaa oo Baxiira la oran jiray heystayna diinta masiixiga, cilmina u lahaa waxyaalihii uu ilaahay ku sheegay Tawreet iyo Injiil.

Ninkaas raahibka ah safarrada qureysheed waa ag mari jireen danna kama geli jirin; laakiin maanta waxaa uu arkay calaamooyin ku saabsan wiilkan yar oo safarka la socda, calaamooyinkaas oo kutubtii hore lagu sheegay, markaas
ayuu ninkii martiqaad u sameeyey safarkii oo dhan. Waa ay la yaabeen waxayna yiraahdeen "weligayo waannu ku ag mari jirney martiqaadna nooma aadan samyn jirin ee maanta maxaa jira?", wuxuu ku yiri waa sax laakiin marti baad tihiine imaada. Markii ay u yimaadeen wuxuu yiri "Ma cid baad ka soo tagteen?", waxay ku jawaabeen yar ayaannu rarkii uga soo tagnay. Baxiira ujeeddadiisu waxay ay ahayd wiilka yar markaasu ku yiri "u yeera gabanka".

Markii la qadeeyey ayuu Baxiira su'aal weyddiiyey Abii-dhaalib oo uu ku yiri "wiilkan mxaad u tahay"? wuxuuna ugu jawaabey "Aabbe ayaan u ahay". Baxiira waxa uu yiri "suurogal maaha in wiilkan aabbihiis nool yahay ee maxaad u tahay?". Abii-dhaalib waxaa uu yiri "Adeer baan u ahay", intaa ka dib Baxiira wiilkii ayuu gees ula baxay wuxuuna weyddiiyey su'aalo, ugu dambeyntiina wuxuu ka arkay khaatumkii nebinimda oo nabiga scw garbihiisa dhexdooda ku yaalley.

Baxiira wuxuu ku yiri Abii-dhaalib "wiilkani arrin weyn ayuu yeelan doonaa, waxa aan anigu ka fahmeyna haddey nimanka yahuudda ihi ka fahmaan waa ay dilayaan ee ku celi magaaladiisii kana ilaali yahuudda", Abii-dhaalib markii uu alaabtiisii soo gateyba si degdeg ah ayuu ugu soo rogmaday Makka. Markaas ka dib waxaa uu Rasuulku SCW Makka ka baxay hal mar oo kale illaa hijrada laga gaarey. Rasuulka SCW markuu soo barbaaray waxa uu bilaabey inuu buuraha Makka ariga ku ilaaliyo.

GUURKII KHADIIJA

Markuu Rasuulka SCW 25 sano gaaray wuxuu guursaday Khadiija bintu Khuweydlad. Khadiijo waxay ahayd qof maalqabeen ah quruxna leh oo ka sheegganayd haweenkii qureysheed, waxayna da'deedu ahayd markaas 40 sano. Ka hor waxay soo guursatay nin ay laba carruur ah u soo dhashay. Khadiijo maalkeeda ayay hadba qof u dhiibi jirtey si uu ugu tijaareeyo waxayna wax ka siin jirtey faa'iidada. Waxay maqashay Maxammed binu Cabdullahi scw runtiisa, dabeecaddiisa wanaagsan iyo ammaanadiisa oo Makka oo dhan caan ka ahayd oo loogu magac daray loona bixiyey Maxammed Aammiin. Markaas ayey u yeertay Nabiga SCW una soo badhigtay inuu xoolaheeda maanta u tijaaro geeyo.

Rasuulka SCW waa uu ka yeelay oo tijaaradii ayuu qaaday, waxayna ku dartay wiil u joogey oo la yiraahdo Maysara.

Nabiga SCW iyo Maysara waxay xoolihii u qaadeen Shaam halkaas oo uu Nebiga SCW ku soo iibiyey xoolihii uu kexeeyey isla markaasna wuxuu soo gaday wixii Makka looga baahnaa. Faa'iido aad u badan ayuu Nebiga SCW Khadiijo u soo hooyey taasoo u keentay kalsooni dheeraad ah iyo in ay aragtay ammaanadii iyo akhlaaqdii Rasuulka SCW.

Maysara wuxuu u sheegay Khadiijo waxyaabo mucjiso ah oo uu Nebiga SCW ku arkay, sidaa daraadeed Khadiijo markay ka aragtay Nebiga SCW arrimahaas iyo waxa la midka ah, waxay Rasuulka SCW u soo bandhigtay iney is guursadaan. Rasuulka SCW wuxuu la soo tashaday adeerradii wayna ka aqbaleen weyna u dooneen oo labadii eheyl ayaa isku yimid, halkaas ayaana Rasuulka SCW loogu meheriyey Khadiijo.

Khadiijo, oo uu Nebiga SCW qabay ilaa uu 50 sano dhaafay, waxay Nebiga SCW u dhashay carruurtiisa oo dhan marka laga reebo Ibraahim oo ay dhashay Maariyatul Qibdhiya. Waxayna Nabiga carruurtiisu ahaayeen saddex wiil oo la kala oren jirey: Ibrahim, Qaasim iyo Cabdullaahi (oo la oran jirey Dhayib iyo Daahir) iyo afar gabdhood oo la kala oran jirey: Seynab, Ruqiyo,
Ummu-khalthum iyo Fadumo. Saddexda wiil wey saqiireen hase yeeshee gabdhihii way hanaqaadeen oo islaamka ayey la kulmeen weyna wada islaameen.

Gabdhaha waxaa loo kala guursaday sidatan: Seynab waxaa guursaday Abil Caas; Ruqiya iyo Ummu-kalthum waxaa kala guursaday laba wiil oo Abii lahab oo Nebiga SCW adeerkiis ahaa uu dhalay. Ninkaas oo Rasuulka SCW aad u dhibay caqabadna ku noqday dadkii iney islaamka qaataan ayaa markay soo degtay suuratu lahab wuxuu, Abii lahab u yeedhay labadiisii wiil wuxuuna ku yiri: "u fura Maxammed labadiisa gabdhood" wayna fureen ka dibna waxaa labadii gabdhood iska daba guursaday Cismaan binu Cafaan oo ay labadiiba k dhinteen; Faadumo waxaa iyada guursaday Cali bin Abii Dhaalib oo ahaa Nabiga scw ina adeerkiis.

Nebiga SCW carruurtiisa oo dhan way ka wada hor dhinteen Faadumo oo lix bilood ka dambeysey maahane, waxaana carruurtiisa ugu waynaa Qaasim, waxaa ku xigtay Seynab, waxaa ku xigtay Ruqiya, waxaa ku xigtay Umu-kalthum, waxaa ku xigay cabdullaahi oo ugu yaraa bah khadiija. Rasuulka scw carruurtiisu waxa ay dhasheen Naginimada ka hor Cabdullaahi iyo Ibraahim maahane, Cabdullaahi waa la isku khilaafaa in uu nabinimada ka hor dhashay iyo in uu ka dib dhashay, waxaase loo badan yahay in uu Nabinimada kadib dhashay. Ibraahim isagu wuxuu ku dhashay madiina sannadkii 8aad ee hijriga waxaana dhashay maariyatul qibdhiya saan soo tilmaanayba.

DHISITAANKII KACBADA

Sida la sheego waxaa la yidhaahdaa kacbada waxaa dhisay malaa'ig ama Nebi Aadam laakiin Qur'aanka iyo axaaddiista midna kama hadlin arrinkaas, sidaa darteed waxaa xaqiiqo ah oo Qur'aanka iyo axaaaddiistuba sheegeen in Nabi Ibraahiim iyo wiilkiisa Nabi Ismaaciil ay dhiseen. Waqtigii qureysheed, Nebiga oo 35 sano jira ah ayey qureysh waxay dheheen kacbadii maaddaama ay duugowday waa in aan dhisnaa oo aan maal u ururinaa, waxayna isku dhaarsadeen in aysan kacbada ku dhisin illaa wax xalaal ah maahane iyo in aysan gelin naag saaniyad ah xoolaheeda iyo xoolo Riba ah iyo wax qof bani aadam ah laga dulmiyey.

Nimankii qureysheed markii ay kacbada dhisaayeen waxaa ka go'ay xoolihii xalaasha ahaa ee ay haysteen sidaa daraaddeed waa ay ka soo soka mariyeen kacbada dhismihii

Nabi Ibraahim labada tiir ee Shaam xigay. Markii ay dhismihii dhammeeyeen ayey isku khilaafeen ciddii xajarul-aswadka booskiisii dhigi lahayd maxaa yeelay qabiil walba wuxuu rabay inuu isagu magaca qaato.

Markuu arrinku qir iyo qir daadhey ayey waxay go'aansadeen qofka ugu horreeya ee albaabkaas ka soo galaa inuu kala saaro. Nasiib wanaag qofkii ugu horreeyey ee albaabkii ka soo glay wuxuu noqday Nabiga SCW markaas bay ku farxeen oo waxay dheheen waa Max'ed Aammiin kulligayo raalli baan ka nahay. Arrinkii bay Nagiba SCW u sheegeen markaas buu wuxu yir: "ii keena go", markii go'ii loo keenay buu yiri: "qabiil walba nin ha keeno" markii qabiil kasta nin keenay ayuu dhagaxii go'ii ku dhex riday nin walbana uu dhinac qabtay, markii meeshii la gaarsiyeyna intuu kor u qaaday ayuu saaray.

Arrintaan oo kale meelaha ay qureyshtu ku dhaantey dad badan oo maanta islaam u nasab sheeganaya maxaa yeelay qureyshi waxay garatay in cibaadada Alle iyo beytkiisa aan lagu dhisin xoolo xaaraam ah laakiin in badan oo muslimiin ahi waxaa laga yaabaa ineysan taas fahmin oo cibaadada ilaahay ay xaaraam u adeegsadaan, wax badan oo khayr ahna ay xaaraam geliyaan sida masaajiddada iwm.

Sidoo kale Ilaah way rumeysnaayeen, sida marka la yidhaahdo yaa abuuray cirka iyo dhulka, idinkana yaa idin irsaaqa, roobkana yaa keena waxay dhihi jireen "Allaah". Asnaamtana waa ay ogaayeen in aysan Ilaahyo ahayn laakiin waxay u sameeyeen suurado dad wanwanaagsan sida Nabi Ibraahiim iyo Nabi Ismaciil waxayna dhihi jireen Ilaah baannu ugu dhowaaneynaa, sida maantaba dadka u yiraahdaan awliyada Ilaah baannu ugu dhawaaneynaa. Sidoo kale markay ku safraan badda oo dhibi ku timaaddo Ilaahay ayey baryi jireen, laakiin maanta dad muslimiin sheeganaya ayaa hadday dhibi ku timaaddo awliyada keliya baryaya ama Ilaah iyo awliyada amaba Ilaah iyo Nabiga SCW. SOO DIRITAANKII RASUULKA SCW

Markii ugu horreysey ee Rasuulka uu waxyiga ku bilaabanayey waxaa lagu bilaabay riyo wanaagsan oo hurddada ugu imaaneysey oo u cad sida oogga waabberi oo kale. Riyaadaas waxay socotey muddo lix bilood ah Rasuulku SCW wuxuu jecleystey inuu meel gaar ah ku cibaadeysto wuxuuna tegi jirey god la yiraahdo Qaaru Xiraa oo ku yaalley buurta Nuur oo Makka laba mayl u jirta, halkaas oo uu soo joogi jirey habeeenno intuu sahaydiisa (cuntaddiisa)

qaato, waxaa uu Rasuulka SCW ku cibaadeysan jirey iney diintii Nabi Ibraahiim aheyd iyo in kale ma kala cadda, laakiinse waxaa cad in shirkigii iyo asnaamtii taalley Khaliijul-carab uu ilaahay ka dhowray uuna nacay.

Wuxuu Nagiba SCW hadba sahaydiisa qaato oo uu godkaas ku khalweeyaba, maalinkii dambe ayaa Malag u yimid wuxuuna ku yiri: "akhri", markaasuu Nabigu SCW ku yiri: "wax ma akhriyo", ka dib intuu qabtey oo majuujiyey ayuu mar labaad yiri: "akhri" Nabiguna wuxuu yiri: "wax ma akhriyo", mar saddexaad intuu qabtey ayuu yiri: "ku akhri magaca Rabbigaagii abuuray (koonka), akhri Rabbigaana waa kan sharafta lehe, oo baray (dadka) qalimka, dadkana baray waxaysan ogeyn). (Suuratul-Calaaq 1-5) Markaasuu Rasuulku ka daba akhriyey, intaa ka dibna malagii waa uu tegey.

Rasuulku SCW isagoo naxsan oo wadnihiisu boodboodayo ayuu gurigiisii yimid markaasuu ku yiri xaaskiisii Khadiija: "I deda I deda" iyana wy dedday ilaa uu argagaxii ka tegey, markii naxdintii ka ba'day ayuu qisadii u sheegay Khadiija kuna yiri: "naftayda ayaan maanta u baqay" markaasay tiri: "ilaah baan ku dhaartaye Alle ku hoojin maayo weligaa mxaa yeelay martidana waad soortaa, xaqana waad u kaalmaysaa", markaa ka

dib ayey Khadiijo wadday Rasuulka SCW waxayna u tageen Waraqata ibnu Nawfal oo ahaa Khadiijo ina adeerkeed, diintii Nebi Ciisena haystey ahaana nin oday ah oo aad u da'weyn oo indho la'kuna turjumi jiray kitaabka Injiil luuqadda Carabbiga. Markay u tegeen ayaa Khadiijo tiri: "ina adeer bal dhegayso wiilka aad adeerka u tahay", Waraqa wuxuu Nabiga ku yiri: "maxaad aragtay?" markaasuu Rasuulku SCW u sheegay qisadii. Waraqa markuu qisadii dhegaystey ayuu fahmay arrintii wuxuuna yiri: "kaa kuu yimid waa kheyr wadihii Nabi Muuse u imaan jirey" wuxuuna intaa sii raaciyey "shallaytadeydee maan noolaado marka qoomkaagu ku bixinayo".

Rasuulka SCW waxa uu la yaabay wanaagga iyo jaceylka uu dadkiisa dhexdiisa ku leeyahay iyo hadalkan ah Makka ayaa laga saari doonaa, markaasuu yiri: "oo ma i bixinayaan", Warqaa wuxuu yiri: "Haa, qof lama imaan waxa aad la timid ilaa waa lala colleytamay, haddii aan maalinkaa gaarana waan kuu gargaari" hase yeeshee Waraqa markaa ka dib muddo badan ma sii noolaan, waxyigiina waa is raacraacay. Ka dib Rasuulka SCW waxyigii muddo ayuu ka kala go'ay si argagaxu uga tago, debadeed wuxuu yiri Rasuulka SCW: "anigoo soconaya ayaan samada markaan arkay malaggii Qaaru Xiraa iigu yimid oo kursi ku fadhiya samada iyo dhulka dhexdooda markaasaan ka argagaxay ilaa aan dhulka ku dhacay.

Ka dib reerkaygii ayaan u tagay oo ku iri: "I dede i deda" markaasay i dedeen. Alle ayaa markaa soo dejiyey aayadahan: "(NABIGA) IS DADAYOW, KAC OO DIG RABBIGAANA WAYNEE, DHARKAAGAN DAAHIRI, WAXA XUNNA KA HIJROOD" (sida asnaamta) (Suurat Al-Mudathir)

HABABKII UU WAXYIGU UGU IMAAN JIRAY RASUULKA SCW

wuxuu waxyigu ugu imaan jiray Rasuulka SCW toddoba nooc oo kala ahaa sidatan:

1) Riyo wanaagsan oo hurdada ugu imaanaysay, taasoo u caddayd sida oogga waabberi waana tii waxyigu ugu bilaabmay.

2) Arrimo uu malaggu qalbigiisa ku rido isagoon malagii arag.

3) Malagga ayaa nin isugu soo matali jiray oo la hadli jiray ilaa ay mararka qaarkood asxaabtu ka arkeen.

4) Waxyiga ayaa ugu imaan jiray sida qaylada gambaleelka waxayna taasi ahayd habka ugu daran Rasuulka SCW ee waxyiga ugu imaan jiray oo wuu dhididi jiray.

5) Malagga ayaa ugu imaan jiray suuraddiisii Alle abuuray oo u waxyoon jiray, waxayna arrintaani dhacday labo jeer sida ay tilmaantay suuratu Wannajmi.

6) Alle ayaa uga waxyooday samawaadka dushooda sida habeenkii la dheelmiyey ee salaadaha lagu soo farad yeelay Alle ayaa toos ula hadlay siduu Nabi Muuse ula hadlay.

DADKII DIINTA UGU SOO HORREEYEY

Rasuuka SCW markii Allaah subxaanahu wataacaalaa soosaaraymas'uuliyaddaa weynanka badan oo ah mid qof bini aadan ah la saaro tii ugu cusleyd una baahan juhdi, dadaal iyo sabir, waxa uu bilaabay u qumitaankeedii isagoo ka bilaabaya meeshii laga soo direy ee Makka oo ahayd xaruntii diinta ee carbeed, kacbadiina ay ku taalley dadkii ku noolaana ahaayeen dad aad uga fog xaqa iyo islaamka. Wuxuu markaa Rasuulku SCW markii ugu horreysey dacwadii ku bilaabay si qarsoodi ah maxaa yeelay waxa dhici kari lahayd haddii uu markii u horreysey kala dhex kici lahaa inay dhib u keeni lahayd

dacwada, sidaa dareeed Allaha Xakiimka ah ayaa ku ilhaamiyey Rasuulkiisa inuu bilowgii dacwada qarsoodi u guto, waxayna dacwadu sidaa ku soo socotey saddex sano.

Ugu horreyntii wuxuu Rasuulku dacwada ka bilaabay ehelkiis (gurigiisa), qaraabadiis iyo saaxiibbadiis intii ugu kheyrka badneyd ee uu wanaagga ku yaqaanney isna lahaa wey ajiibayaan xaqa. Waxaa dacwadii ajiibey oo noqday dadkii ugu horreeyey ee islaamka qaatay xaaskiisii Khadiijo bintu Khuweylad, saaxiibkiis Abubakar alsidiiq, mowlihiisii Seyd binu Xaarith iyo ina adeerkiis Cali binu Abii-dhaalib oo wiil yar ahaa.

Ka dib Abubakar alsiddiiq oo ahaa nin magac iyo sharaf ka leh Makka dhexdeeda, ahaana nin ganacsade ah ayaa markuu xaqa qaatey waxa uu sameeyey habkii lagu yaqiin qofka daaciga ah oo ahayd inuu markuuu xaqa qaato uu naftiisa ku tadbiiqiyo dabadeedna dadka kale u gudbiyo, wuxuu markaa Abuubakar dacwadii gaarsiiyey qaar ka mid ahaa saaxiibbadiisii uu ku kalsoonaa, waxaana isla markiiba dacwadiisii ku islaamay shan saxaabi oo Ilaahay diintiisa ku ciseeyey kana mid ahaa tobankii jannada loogu bishaareeyey, waxayna kala ahaayeen:

1. Cusmaan Binu Cafaan
2. Subyr binu Cawaama
3. Cabdiraxmaan binu Cawf
4. Sacad binu abii waqaas
5. Dalxa binu Cubeydillah

Ka dib waxaa ku soo xigsaday oo soo islaamay Bilaal binu Rabaaxa, Abuu Cubeyda Caamir ibnu Jarraax, Abuu Salama binu Cabdilasa, Arqaam ibnu abii Arqam, Cusmaan binu Madcuum iyo laba walaalihiis ah Quddaama iyo Cabdullaahi, Cubeyda binu Xaarith binu Mudhalib, Siciid binu Seyd iyo xaasikiisii Faadumo bintu Khadaab (Cumar binu Khadhaab walaalishiis), Khabaab ibnul-arat, Cabdullaahi binu Mascuud iyo kuwo kale waxaa uuna ibnu Haashim gaarsiiyey illaa 40 qof. Intaasoo dhan waxay ahaayeen dadkii islaamka ugu horreeyey, dabadeedna qof ayaa loo soo gelayey ilaa uu islaamkii magaaladii Makka ku fidey o lagu sheekeystey.

Odeyaashii qureysheed markii ay maqleen arrinkaas dan kama gelin oo waxay iska dhaadhiciyeen in Maxammed raacay diin ka mid ah diimihii jirey sidii markaa ka horba ay niman qureysh ka mid ahi u raaceen diimihii kale, laakin markay maqleen in dad badani Nabi Maxammed raaceen, maalin walbana ay sii siyaadayaan ayay baraarugeen hase yeeshee tallaabo weyn ma aysan qaadin saddexdii sano ee dacwadu qarsoodiga ahayd.

MUUJINTII DIINTA & DIGITAANKII RASUULKA SCW

Waxay dacwadii islaamku qarsoodi ku socotaba markii saddex sano la marayo ayaa Allaah Rasuulkiisa SCW amray inuu dacwadiisa muujiyo ummaddana uga digo cadaabka Alle waxaana ka mid ahaa aayadihii soo degay waqtigaas aayaddan.

Wuxuu Allah SW yiri: (U DIG QARAABADAADA KUU SII DHAW). (Suuratu-Shucaraa:214).

Rasuulka SCW markay aayaddani soo degtay wuxuu fuulay buurta Safa wuxuuna yiri: "Waa saabaxaa (waa wareey)", markaas ayaa dadki Makka joogay oo dhan ay soo yaaceen oo meeshii yimaadeen qofkii imaan kari waayeyna qof ayuu soo dirsaday oo ku

yiri: "soo eeg wuxuu yahay". Markii meeshii la iskugu yimid ayuu Rasuulka SCW yiri: "ka warrama haddaan idin iraahdo toggaan fardo duullaan idinku ah ayaa soo maraya ma rumaynaysaan", markaasey dheheen "haa been kuguma aannaan baran", markaasuu yiri Rasuulka SCW "waxaan idinkaga digayaa cadaab daran oo idinka horreeya", Sidoo kale Rasuulku SCW wuxuu u yeeray qabiil walba oo qureysh ka mid ah illaa uu ka soo gaarey qabiilkiisii oo uu isna reer ugu sii dhawaaqay ilaa uu kasoo gaaray gabadhiisii Faadumo ahayd oo uu ku yiri "faaduma bintu Maxammedey naftaada ka badbaadi naar anigu Allaah ayaan ku dhaartaye inaanan Alle waxba kaaga tarayn". Sidoo kale muslim waxa uu wariyay in markii ay aayaddaani soo dagtay uu Rasuulku si guud iyo si khaas ahba ugu yeeray (quraysh) wuxuuna yiri qurayshey ka badbaadiya naftiina naar reer baniii kacabow ka badbaadiya naftiina naar. Arrintaas dadkii qureysheed way ka caraysiisey waxayna kicisey buuq magaaladii oo dhanna waa la isla dhex maray. Adeerkiis Abii-lahab oo ka mid ahaa dadkii meesha isugu yimid wuxuu Rasuulka SCW ku yiri: "halaag ha kuu sugnaado maalinta inta ka hartaye ma waxaan baad noo soo kulmisay". Allaah ayaa u jawabey oo ku soo dejiyey Suuratu Tabbad.Wuxuuna Allaah ugu bishaareeyey ninkaas iyo xaaskiisa cadaab daran maxaa yeelay Alle iyo Rasuulkiisa iyo dintiisa ayey la colleytameen. Ka dib Allaah wuxuu soo dejiyey aayadan.

Wuxuu Allaah SW yiri: (Muuji waxa lagu amrayo, Isagana jeedso Mushrikiinta). (Suuratul-Xijri:94)

Aayaddan waxa uu Allaah Rasuulka ku amray inuu muujiyo xaqa, gaaladana ka jeesto, Rasuulkuna SCW waa uu u qumay meel walbana waxa uu ka caddeeyey shirkiga iyo khuraafaadka ay ku jiraan iyo xumaatada ay asnamtu leedahay iyo iney Allah keliya waxidaan oo Ilaahnim u qiraan.

Odeyaashii qureysheed markey arkeen Maxammed SCW iyo diinta cusub ee uu la yimid iyo inuu khilaafay diintoodii iyo ilaahyadoodii kuna sheegay iney yihiin baadi ayeye olole qaadeen si ay dacwadaas iyo nuurkaas Alle u damin lahaayeen, baaddilka iyo xumaatada ay ku jiraanna u difaaci lahaayeen. Odeyaashii qureysheed tallaabooyinkii ay qaadeen waxaa ka mid ahaa in qaar ka mid ah ay u tageen Abii-dhaalib kuna dheheen "Abii-dhaaliboy, wiilka aad adeerka u tahay ilaahyadadii ayuu caayey, diintayadiina wuu ceebeeyey, waxgaradkayagiina wuxuu ka dhigey maangaab, aabbayaashayona wuu baadiyeeyey, marka ama naga qabo ama isku kaaya daa, adiguna annagaad nala mabda' tahay oo waad is khilaafsan tihiin makra aan kaa kaafino'. Abii-dhaalib wuxuu ugu jawaabay hadal jilicsan", odeyaashina wa laabteen.

Rasuulku SCW isagu waxaas uma jixinjixin dhegna jalaq uma siin wuxuuna gudayey dacwadiisii, maxaa yeelay cid aan Ilaahey aheyn oo uu maqlayaa ma jirto meel walbuuna xaqii kala istaagey. Odeyaashii qureysheed markii ay arkeen in tallaabadii hore ay waxba ku socon waayeen uuna soo dhowaadey waqtigii xajka, waxay bilaabeeen tallaabo kale waxayna isugu yimaadeen shir ay uga hortegayeen Nabiyullaah Maxammed SCW inuusan dacwada gaarsiin dadkaas tirada badan ee xajka u imaanaya waxayna u tageen nin duqowdoodii ka mid ah o la oran jirey Waliid ibnu Muqiira inuu keeno arrinkii Maxammed dadka looga ceyrin lahaa. Waliid wuxuu yiri: "hal arrin isku raaca hana is khilaafinina si aan qarkiin qaarka kale u beenin, si aysan dadku idiin fahmin, maxaa yeelay hadday qaarkiin dhahaan waa saaxir, qaarna dhahaan waa waalan yahay dadku way idin fahmayaan", markaasey dheheen adigu noo go'aami (middii aan isku raaci lahayn) wuxuu yiri: "bal idinku wax keena waan idin dhegaysanayaaye", odeyaashii ayaa warkii bilaabey oo yiri: "waa wax sheege (kaahin)", Waliid wuxuu yir: "Ilaah baan kudhaartaye ma aha kaahin, waana naqaannaa kuhannada iyo wax sheeggooda", waxay dheheen aan dhahno waa waalan yahay" wuxuu yiri "ma waalna, waana naqaannaa waallida iyo isku dhexyaaceeda" waxay dheheen aan dhahno waa saaxir" wuxuu yiri "ma aha saaxir, waana naqaannaa sixirleyda iyo sixirkooda", waxay dheheen aan dhahno waa gabyaa" wuxuu yiri "maaha gabyaa, waana naqaanna gabayga qeybihiisa oo dhan", waxay dheheen "maxaan marka dhahnaa", wuxuu yiri "hadalkiisu

waa macaan yahay, wax kastoo aad tiraahdaanna wa la fahmeyaa inaaan waxba ka jirin ee bal muddo i siiya waan k a soo fekerayaaye', muddadii ka dib ayuu soo laabtay wuxuna yiri "saaxir baa ugu whow", taas ayaa markaas la go'aansaday oo la isku raacey. Ninkaas fekerkiisaasna waxa ka hadashey Suuratul-mudathir laga bilaabo aayaddaa 11 ilaa 30.

Ka dib markii go'aankii Waliid la isku raacey waxay bilaabeen sidii ay ku dhaqan gelin lahaayeen waxayna isku qeybiyeen waddooyinkii Makka soo gelayeye si qof walba oo soo mara ay ugu digaan arrinta uu wata Nabiga SCW iyagoo ku sheegaya saaxir. Sidoo kale waxay ka hadlayeen meelihii ay dadka xujeda ihi isugu imaanayey. Dadkii arrimahas aadka uga qeyb qaateyna waxaa ka mid ahaa Abii-lahab oo Nabiga scw adeerkiis ahaa wuxuuna samaynayey ninkaasi intuu Nebiga SCW daba galo ayuu cid kastoo Nabiga SCW u tago oo xaqa gaarsiiyo isagoo ka daba hadlaya ku lahaa "ha u rumeynina waa beenlowe, diintiisii buu ka iishee", qureyshna jidadkii Makka iyo meel walba intey tagaan ayey lahayeen 'iska jira waa saaxir dadkii kala geeyaye" laakiin arrintoodaasi waxay noqotay dacwo oo dad badan oo aan ogeyn Nabi Maxammed SCW dacwada uu wato ayaa ogaadey, cidohoodiina gaarsiiyey Nabiga cusub oo soo baxay.

Qureysh weli ma gaarin iney gacan ula tagaan Nabiga SCWiyo dadkii raacsanaa laakiin waxay ku jireen dacaayad iyo jeesjees iyo in dadka lagu diro oo la yiraahdo iska jira. Sidoo kale waxay mararka qaarkood Rasuulka SCW u soo bandhigayeen fikrado ay ku leeyihiin Ilaahaaga iyo diintaada qaar ka soo tanaasul oo ka soo dabac annaguna qaar baan ka tanaasuleynaaye. Waxay kaloo sameynayeen iney Rasuulka SCW rag u soo diraan oo dhahaan "haddaad madaxtinnimo rabto madax baan kaa dhiganeynaa, haddaad maal rabto waan kuu ururineynaa ilaa aad noqoto kan noogu taajirsan, haddaad jirran tahay maalkayaga ayaannu kugu bixineynaa ilaa aad ka caafimaaddo, haddaad gabar rabto gabdhaha qureysheed tan ugu quruxda badan ayaannu ku siineynaa" hase yeeshee arrimahaas oo dhan lagama yeelin. Ka dib markey arkeen in Nabiyullaahi Maxammed SCW diintiisa iyo dacwadiisa marna ka tanaasuleyn, shirkigooda iyo khuraafaadkoodana uusan ka aamuseyn ayey waxay aad u kordhiyeen dacaayadohoodii kala duwanaa maxaa yeelay Rasuulka SCW gacan ulama aysan tegi karin oo Abii-dhaalib ayey uga baqaayeen. Dacaayadohoodu waxay u qeybsanaayeen dhowr qeybood oo kala ahaa:
1) Rasuulka oo ay ku jeesjeesaan, xaqiraan, caayaan, ku oriyaan, wax kastana dhahaan. Arrimahaasna Allah isagoo tilmaamaya wuxuu ku soo dejiyey aayado kala duwan, waxaana ka mid ah:

((WAXAY DHEHEEN KAN QUR'AANKA LAGU SOO DAJINAYOW ADIGU WAAD WAALAN TAHAY)), (Suuratul-Xijir:6)

Sidoo kale Allaah isagoo inooga warramaya markay muslimiinta ku jeesjeesayaan wuxuu yir:

((KUWII DAMBAABAY WAXA AY AHAAYEEN KUWA KU QOSLA KUWII XAQA RUMEEYEY, HADDAY SOO MARAANA WAY IS QANJARUUFAN JIREEN, MARKAY EHELKOODA U LAABTAANA WAXAY AY LAABAN JIREEN IYAGOO (MUSLKIMIINTA) KU RAAXAYSANAYA, MARKAY MUMINIINTA ARKAANA WAXAY DHAHAAN WAA BAADIYEYSAN YIHIIN, LOOMANA DIRIN IYAGA IN AY (MUSLIMIINTA) ILAALIYAAN))

2. Waxaa ka mid ahaa dacaayadihii iyo been abuurashadii ay Rasuulka iyo qur'aanka ka fidin jireen iney dhahaan "waa been uu abuurtey ama dad kale ayaa soo baray" arrintaasna Allaah oo tilmaamaya wuxuu yiri:

3. Sidoo kale waxaa ka mid ahaa dacaayadihii ay qur'aanka iyo Rasuulka SCW kula dagaallami jireen iyagoo raba iney dadka u tusiyaan inuu Nabigu SCW wato sheekooyinkii ummadihii hore laga soo guuriyey in nin la oran jirey Nadir binu Xaarith uu

aadey Faaris uuna soo bartey taariikhdii boqorradii Faaris ka dibna uu Makka ku soo laabtey, wuxuuna ninkaaas samayn jirey markii Rasuulka SCW meel ka istaago oo dadka dacwada gaarsiyo ayuu ka daba hadli jirey oo keeni jirey sheekooyinkaas dhihina jirey "Maxammed igama sheeko qurxoona".

Qureysh markey arkeen ineysan nooc walba oo dacaayad iyo xumaan ah waxba ku qaadi karin ayey waxay bilaabeen wada hadallo ay rabaan iney isugu soo dhowaadaan iyaga iyo Nabiga SCW oo isna xoogaa soo dabco iskana daayo diinta uu ku adag yahay iyana iiney tooda ka soo dabcaan oo meel dhexe la isugu yimaaddo waxna la wada qeybsado. Hase yeeshee Allaah subxaanahu watacaalaa oo had iyo jeer Rasuulka SCW tarbiyeynayey ayaa soo dejiyey aayado uu ku tilmaamayo inaan xaqa iyo baadilku wax wada qeybsan karin iyo inaan xaqu marna tanaasul oggoleyn.

Wuxuu yiri Allaah: ((WAXAAD DHAHDAA GAALOOY, MA CAABUDAYO WAXAAD CAABUDAYSAAN, IDINNA MA CAABUDAYSAAN CIDDA AAN CAABUDAYO, MANA CAABUDIN WAXAAD CAABUDEEN, IDINKUNA MA CAABUDAYSAAN CIDDAAN CAABUDAYO, DIINTIINAAD LEEDIHIIN ANNA DIINTAYDAAN LEEYAHAY)), (Suuratul-Kaafiruun).

Sidoo kale waxaa ka mid ahaa waxyaalahay Rasuulka SCW u soo bandhigi jireen oo ay rabeen in la isugu soo dhowaado in qaar odeyaashoodii ka mid ahaa ay Rasuulka SCWu soo jeediyeen in ilaahiisana sannad la caabudo, kuwoodana sannad la caabudo hase yeeshee Allaah ayaa soo dejiyey jawaabtii loogu jawaabi lahaa ehlu-baadilka.

Wuxuuna yiri: ((WAXAY JECELYIHIIN IN AAD U SOO DABACDO OO AY SOO DABCAAN)), (Suuratu-Qalam: 9)

Qureyshi markii intaas oo tallaabo ah ay waxba ku qaadi waayeen; dacwadii islaamkuna ay dhowr sano soo socotey, dadkii raacayeyna ay marba marka ka dambeysa sii siyaadayeen, ayey waxay saareen guddi ka kooban 25 nin oo ka mid ahaa odeyaashii qureysheed waxayna madax uga dhigeen Abii-lahab, waxayna u xilsaareen iney soo dejiyaan wixii Maxammed iyo asxaabtiisa lagula dhaqmi lahaa. Abii-lahab iyo ragiisii waxay soo go'aamiyeen in dadka Maxammed raacey gacan loola tago oo la ciqaabo. Dhibkii gacanta ayaana halkaas ka bilaabmay oo aad ayaa dhib loogu geystey Nabiga SCW iyo asxaabtiisa haba u sii darnaadeen dadkii masaakiinta ahaa ee qabiilka yar ka dhashay ama addoomada ahaa ee Nabiga raacay sida Bilaal, Suheyb iyo reer aala Yuusir iwm. Nabiga SCW isaga dhib badan oo loo geysan lahaa waxaa looga baqayeey adeerkiis Abii-dhaalib iyo shacabka laftooda oo uu sumcad weyn ku lahaa oo qof walba ka xishoonayey inuu gacan ula tago, hasa yeeshee sidaas oo ay tahay haddana dhib wayn ayaa ku dhacayey.

Dadkii dhibka Nabiga SCW ugu darnaa waxaa ka mid ahaa adeerkiis Abii-lahab oo aan soo marnay dadka kulmiyey Rasuulka SCW inuuku yiri "halaag ha kuu sugnaadee ma waxan baad noo soo kulmisey". Sidoo kale laba wiil oo uu Abii-lahab dhalay lana kala oran jirey Cutba iyo Cuteybaa waxay kala qabeen laba gabdhood oo Nabiga SCW uu dhalay kuwaas oo kala ahaa Ruqiya iyo Ummu-kalthum sidaan soo sheegnayba Abii-lahab oo Nabiga SCW ku colaadinaya wuxuu amray labadiisii wiil inay gabdhaha Rasuulka scw furaan, iyaguna way ka yeeleen. Waxaa kale oo ay siiradu werisey in markuu dhintey wiilkii Nabiga SCW ee Cabdullaahi ahaa uu Abii-lahab u tegay odeyaal qureysheed oo meel fadhiya kuna yiri: "bishaareysta Maxammed wiilkii ayaa ka dhintey oo waa abtar (gablan)". Dhibkaas Abii-lahab keligiis ma maamuli jirin ee reerkiisa oo dhan ayaa ka qeyb qaadan jirey oo sida la ogsoon yahay haweentii Abii-lahab oo la oran jirey Ummu Jamiil binu Xarbin waxay ahayd mid qodxaha dhigta dariiqa Rasuulka SCW isla markaasna aflagaaddo u geysata Nabiga SCW. Ummu Jamiil waxa ahayd haeen aad u carrab dheer oo dhib badan, markii ay soo degtay suuratu Lahab oo ilaahay iyada iyo ninkeeda cadaab ugu bishaareeyay, dhagax ayaey soo qaadatey waxayna u timid

Rasuulka SCW iyo Abuubakar oo kacbada wada fadhiya iyadoo rabta iney dhagaxa Rasuulka SCW ku dhufato. Hase yeeshee Ilaahay wuu ka indha saabay Rasuulka SCW oo Abuubakar keliya ayey indheheedu qabteen markaas ayey ku tiri: "meeyey Maxammed waatuu hadda kula fadhiyaye, waana maqlay inuu i caayey ee haddaan arki lahaa dhagaxan ayaan ku dhufan lahaa", intaas keliya kuma harine waxay tirisay gabay yar oo leedahay "Mudamamaan waan caasinney amarkiisana waan diidney diintiisana waan nacney". mudamaman waxay ula jeeday Maxammed oo ay si khalad ah ugu dhawaaqaysay Allaah ayaana ka dhawray magaca Rasuulka caydeedii; Rasuulka SCW isagoo ka hadlaya sida Alle uga dhawray cayda nacaladda qureysh waxay caayayaan oo nacaladayaan mudamam maxamed ayaan ahay.

Sidoo kale dadkii Rasuulka aad u dhibi jirey waxaa ka mid ahaa Xakam ibnu Abil-Caas, Cuqba ibnu abii Muceydh, Cadiyyi ibnu Xamraa iyo kuwo kale. Dadkaasi waxay Rasuulka SCW ku dhibi jireen xitaa gurigiisa; maxaa yeelay qaar ka mid ah ayaa Rasuulka SCW deris la ahaa. Ibnu Isxaaq wuxuu weriyey Xakam ibnu Abil-Caas maahane intoodii kale inaan midna ka islaamin. waxaana ugu xumaa Cuqba ibnu Muceydh.

Waxa uu Bukhaari ka werirey Cabdullaahi ibnu Mascuud in maalin odeyaashii qureysh oo Abii Jahal madax u yahay kacbdana fadhiya ay arkeen Nabiga SCW oo kacbada ku tukanaya. Markaasay dheheen "yaa noo keenaya mandheerta geela reer hebel oo Maxammed markuu sujuudo dhabarka ka saaraya", waxaa si halhaleel ah u boodey Cuqba ibnu abii Muceydh, mandheertii ayuu keenay markaasuu sugey ilaa uu Rasuulka SCW ka sujuuday. Markuu Rasuulku SCW wejiga dhulka la helya ayuu garbaha ka saarey mandheertii. Abii-jahal iyo raggiisii markey arkeen qosol ayey iskula daateen, Rasuulkuna SCW sujuuddiisii ayuu iska sii watay. Cabdullaahi ibnu Mascuud wuxuu yiri: "arrinkaas waan u jeeday hase yeeshee far ma dhaqaajin karin", sidaa darteed waxaa timid Nabiga SCW gabadhiisii Faadumo oo k qaadday mandheertii iyagiina cayday. Rasuulka SCW markuu salaaddii dhammaystey ayuu Ilaahay baryey oo yiri saddex jeer "Allow qureysh qabo", dabadeedna mid mid ayuu u magacaabay raggii goobta joogay yiri: "Allow qabo Abii-Jahal. Cutba ibnu abii Rabbiica, Sheyba ibnu abii Rabbiica, Waliid ibnu Cutba, Ummaya binu Khalaf, Cuqba ibnu abii Muceydh", markaasey naxeen maxaa yeelay waxay rumeysnaayeeen ducada xaramku ay mustajaabo tahay. Cabdullaahi ibnu Mascuud wuxuu yiri "waxay ahaayeen toddoba, waxaana arkay toddobadoodii oo goobtii Badar la dhigay oo lagu guray ceelkii lagu gurayey meydkii gaalada", Cuqba ibnu Abii Muceydh (oo asna ka mid ahaa dadkii bader lagu qafaashey oo dhex lagu dilay) maahane. Sidoo kale waxaa Muslim weriyey in maalin Abuu-Jahal dadkii ku yiri "weli ma dhexdiinnaa Maxammed wejigiisa ciidda ku camcaminayaa" markaasey dheheen "haa", wuxuu yir "Laata iyo Cussa ayaan ku dhaartaye haddaan arko isagoo wejiga dhlka ku camcaminaya inaan qoorta uga istaagayaa oo wejigiisa si fiican u booreynayaa". Maalin dambe ayuu markaa arkay Nabiga SCW oo kutanaya, markaasuu ku soo dhaqaaqay si uu go'aankiisii u fuliyo, markuu ku dhaqaaqay ayaa dadkii arkeen isagoo gadaal gadaal u soo bodey oo gacmaha taagaya. Markaasay dheheen: "maxaa kugu dhacay", wuxuu yiri "god naar ah ayaa dhexdayada ka samaysmay". Nabiga SCW markii arrintaa la weydiiyey wuxuu yiri "haddii uu ii soo dhowaan lahaa malaa'igta yaa xubin xubin u kala dafi lahayd".

Allaahna isagoo ninkaas ficilkiisa tilmaamaya waxa uu qur'aankiisa ku yiri: ((ARRINKU SAAS MA AHANE DADKU (GAALADU) WAA XAD GUDBEEN, MARKUU ISKU ARKAY (GAALKANI) QANINIMO, RABBIGAA XAGIISAASE LOO NOQON, KA WARRAN MIDKA KA REEBAYA ADDOON (RABBIGIIS) U TUKANAYA, KA WARRAN HADDUU HANUUN KU SUGAN YAHAY (KAN LAGA REEBAYO) AMA UU AMRAYO TAQWO, KA WARRAN HADDUU (KAN WAX REEBAYAA UU ALLE) BEENIYEY OO KA JEESTAY (XAQII), MA WUUXAN OGAYN IN ALLE ARKAYO)), (Suuratul-Calaaq: 6-14)

Ka dib Abii-Jahal waxa uu yimid Rasuulka SCWwuxuuna ku yiri: "ma waanan kaa reebin arrinkaan? markaasaa Rasuulka SCW si adag ula hadlay isagan dhaqaaqay

markaasuu Abii-Jahal ku yiri Nabiga: "waad ogtahay inaysan jirin cid iga gurmad badan: Allaah ayaa ninkaas u jawaabay waxa uuna qur'aankiisa ku yir:

((ARRINKU SAAS MA AHANE HADDUUUSAN JOOGIN WAXAANNU QABAN FOODDA, FOOD BEENTEEY AH OO GAF BADAN, HA U YEERTO (MARKAAS) GARGAARIHIISA, WAXAANUNA (UGU) YEERIN MALAA'IKTA SABAANIYA, ARRINKU SAAS MA AHANE HE MAQLIN (RABBIGAANA U) SUJUUD UNA DHAWOW)), (Suuratul-Claaq: 15-19).

Rasuulka SCW markii ay quraysh beenisay oo ay aad ula colaytantay si xunna ula dhaqantay Ayuu Ilaahay uga baryay in uu abaar ku rido wuxuuna yiri: "Allahayow iigu kaalmee in toddoba (sano oo abaar ah) oo toddobadii (nabi) Yuusuf oo kale ah ay dushooda ahaato: Alle waa uu ka aqbalay Nabigiisa baryadii wuxuuna quraysh ku riday abaar, markii abaartii haleeshay oo ay hal sano hasyay oo ay cirkii waxaan qiic iyo hunri ahayn ka waayeen aadna u rafaadeen ilaa ay bakhtiga ayo hargaha ka cuneen, ayaa Abii Sufyaan Rasuulka SCW u yimid oo ku yiri: "waxaad amraysaa hoggaansamidda Alle iyo in riximka la xiriiriyo, tolkaana way halaagsamayaan marka Alle u bar". Waxayna sheegeen (Quraysh) in haddii Alle ka qaado (abaarta) ay mu'miniiin noqonayaan markaasaa Rasuulka SCW Alle u baryey Allena waa ka aqbalay oo Quraysh dhibkii waa ka feydey, hase yeeshee kufrigoodii iyo gaalnimadoodii ayey sii wateen, ballantiina way ka baxeen. Allen isagoo arrinkaas tilmaamaya waxa uu yiri:

((SUG MAALINTA CIRKA LA IMAAN QIIQ CAD, OO DABOOLAYA DADKA KAASOO AH CADAAB DARAN, (WAXAY DHEHEEN) RABBIYOW NAGA FAYD CADAABKA WAXAAN NAHAY MUMINIINE, GOORMAY WAANTOOBIN, WAXA U YIMID RASUUL AY (RASUULNIMADIISU) CADDAHAY, MARKAASAY KA JEESTEEN ISAGII AYNA DHEHEEN WAA WAX LABBARE WAALAN)), (Suuratu-Dukhaan: 10-14).

DHIBAATOOYINKII ASAXAABTA LAGU HAYEY

Kufaartii qureysh markay maqlaan qof maal ama magac leh ama qabiil xoog leh ka dhashay ayaa islaamay waxay sameyn jireen iney canaantaan, caayaan oo ku diraan eheladiisa, inta badanna gacanta ulama aysan tegi jirin. Hase yeeshee markay maqlaan waxaa islaamay qof aan qabiil xoog leh ka dhalan ama addoon ah ama cid difaacaysa aysan jirin aad ayeey u ciqaabi jireen dhibaatooyin xunxunna wey u geysan jireen. Dadkii sidaa oo kale ahaa oo aadka loo ciqabay waxaa ka mid ahaa Bilaal, Cammaar binu Yaasir iyo aabbihiis Yaasir iyo hooyadiis Sumaya, Nahdiya iyo gabadheedii Ummu Cumeyr, Khabaab, Muscab ibnu Cumeyr iyo kuwo kaleba.

Bilaal wuxuu addoon u ahaa oo ciqaabi jirey Ummaya ibnu Khalaf. Siduu u ciqaabi jireyna waxay ahayd intuu xarig qoorta ka geliyo ayuuu ku jiidi jirey ama qorrax kuleylka duhurkii intuu seexiyo oo dhagax weyn xabadka kasaaro ayuu dhihi jirey "ama waad dhiman ama Maxammed baad ku kufrin". Bilaal wuxuu ku dhihi jirey "AXAD" oo uu ula jeedo Ilaah keliya baan rumays nahay oo aan caabudayaa, dhib kasto loo geystana wax kale afkiisa waa soo mari waayeen. Maalinkii dambe ayaa isagoo sidii loo cadaabayo waxaa soo maray Abuubakar Al-siddiiq, markaasuu ku yiri ninkii ciqaabayey: "maad Ilaahay uga baqdid ninkaan miskiinka ah", markaasuu yiri: "wax u qabo adigaa diintiisii ka fasahaadiyee', markaasuu Abuubakar yiri: "waxaan ku siinayaa addoon aniga ii jooga oo aad isku diin tihiin, kanna waan xoreynayaa", sidaas ayuuna ku xoreerey Bilaal. Markuu Abuubakar xoreeyey Bilaal waxaa suuqa loo geliyey inuu axsaan hore ka dhexeeyey (labadooda) hase yeeshee Allaah ayaa difaacey oo u jawaabey dadkii waxaa ku hadlayey. Wuxuuna ku soo dejiyey aayadahan:

Wuxuu Alle SW yiri: ((Waxaa ka fogaada (naarta) kan cabsada, waa kii bixiyey maalkiisa si uu isu dahiriyo, ruux wax siiyey ee u u gudayana ma jirin ee wuxuu u bixiyey Rabbiga sarreeya dartii, dib dambuuna u ralli noqon doonaa)), (Suuratul- layl 17-21).

Sidoo kale Cammaar ibnu Yaasir iyo Aabbihiis Yaasir iyo Hooyadiis Summaya, oo ka mid ahaa dadkii dhibaatooyinka dardaran loo geystey, ayaa maalin iyadoo la ciqaabayo waxaa soo maray Nabiga SCW markaasuu ku yiri: "sabra reer Yaasirow, mowcidkiinnu waa jannee", Odeygii Yaasir iyo habartii Sumayaba waxay u dhinteen ciqaabkaas oo weliba habarta waxaa gacantiisa ku diley Abii-jahal oo iyadoo la ciqaabayo ayuu waran farjiga uga dhuftay halkaas oo ay ku naf baxday kuna noqotay qofkii u horreeyey ee ummaddaan Nabi Maxammed SCW Alle dartiis loo dilo. Willkoodii Cammaarna intay aad u ciqaabeen ayey ku dheheen "hadaad Maxammed caydid, Ilaahyadayada Laata iyo Cussana ammaantid waan ku sii deyneynaa markii uu xanuunkii ka batay ayuu sameeyey siday ku dirqiyeen, ka dib markay sii daayeen ayuu Nabiga SCW u tegey una sheegay waxay ku dirqiyeen, Allaah ayaa markaas soo dejiyey aayaddaan:

Alle SW wuxu yiri: ((WAXAA ABUURTAY BEEN KUWA AAN RUMAYN AAYAADKA ALLE, KUWAASI WAA BEENALAYAAL, KUWA ALLE KU KUFRIYEY IIMAANKOODII KA DIB (WAA HLAAGSAMEEN), RUUX LAGU KHASBAY QALBIGIISUNA KU XASILAN YAHAY IIMAANKA MOOYEE, RUUXIISE XABADKIISU U WAASIC NOQDO GAALNIMADA WAXAA KORKOODA AHAADAY CARO XAGGA ALLE KA AHATAY, WAXAYNA LEEYIHIIN CADAAB WAYN)), (Suuratu-Naxli 105-106).

Sidoo kale dadkii la ciqaabi jirey waxaa ka mid ahaa Sumayra, Nahdiya iyo gabdheedii Ummu Cumeyr oo wada ahaa addoomo dad gacantood ku jirey, hase yeeshee waxaa wada xoreeyey Abuubakar Al-sidiiq. Markuu Abuubakar dadkaas xoreeyey ayaa aabbihiis abu-quxaafa oo aan weli islaamin ku yiri: "Maandhow maad xoolahaaga ku bixisid dad xoog leh oo ku difaaci kara hadhow intaad dad ducafa ah ku bixineysid, hase yeeshee Abuubakar waxa uu caddeeyey in uu arrinkaas Alle dartiis ula jeedo.

Sidaan soo sheegnay Muscab ibnu Cumeyr oo ku jirey dadkii aadka loo ciqaabay oo ay dhashay islaan maalqabeen ah, ahaana nin dhallinyaro ah oo qurxoon oo aad u xarrago badan, maalinba dhar nooc ah qaata, kana tilmaannaa Makka. Muscab markay hooyadiis maqashey inuu islaamay ayey xabbistay oo cuntadii u diiddey aadna u cadaadisay hase yeeshee markay intaas oo dhan wax uga qaadi weydey ayey dayrisay, ka dibna waxaa u dambeysey inuu rafaado oo uu jirkiisii jilif yeesho, wuxuuna ku jrey dadkii u hijrooday Xabashida. Markuu xabashida ka soo laabteyna waxaa Rasuulku SCW dacwo ahaan ugu direy Madiina halkaas oo uu muddo yar ka dib dacwadii wada gaarsiiyey guryihii reer Madiina kuna noqday macallinkii reer Madiina.

Sidoo kale Khabaab wuxuu isna ka mid ahaa dadkii ay gaaladu dhibka ku hayeen ilaa uu maalin u tegay Rasuulka SCW oo Kacbada hooskeeda jooga isagoo doonaya in uu Ilaahay u baryo si dhibka looga fududeeyo wuxuuna ku yiri Rasuulkii Allow maad Alle noo baridid, markaasaa Rasuulku SCW fariistay oo ku yiri: waxay ahaayeen dadkii idinka horreeyey (muminiinta ahaa) kuwo loogu shanleeyo hilibka iyo lafta dhexdooda shanlo bira, arrinkaasna kamana kala dhambali jirey, kamana reebi jirin diintooda, Allena wuu taamyeelin isagoo Alle maahee aan cid kale ka baqayn, sidoo kale waxa uu Khabaab shaqo u qabtay Caas binu Waa'it oo ka mid ahaa kufaartii Quraysheed, markaasaa Khabaab ku yeeshay xoolo markaasuu u tegay oo ku yiri: "isii waxaygii hase yeeshee Caas waa diiday wuxuuna yiri, ku siin mahayo ilaa aad Maxamed ku kufridid. Khabaabna waxa uu guu jawaabay ku kufrin maayee ilaa aad ka dhimato oo misna lagu soo bixiyo, Caas wuxuu yiri: "ma intaan dhintaa qiyaamaha la i soo saarayaa,? Khabaab ayaa ugu jawaabay "haa," waxa uu yiri: "halkaasna waxa aan helayaa maal iyo ilmo oo markaasaan kuu gudayaa. Allena isagoo ninkaas ficilkiisa iyo waxa la midka ah tilmamaya waxa uu Qur'aankiisa ku yiri:

((KA WARRAN KAN KU KUFRIYEY AAYAADKAYAGII OO YIRI(AAKHIRO) LA I SIINAYAA MAAL IYO CARRUUR, MA WUXUU DAALACDAY QAYBKA, MISE ALLAHA RAXMAANKA AH AGTIISA AYUU BALLAN KA YEESHAY, SAAS ARRINKU MA AHANE WANNU QORIN WUXUU LEEYAHAY, WAXAANA U FIDINAYNAA CADAABKA FIDIN, WAAN DHAXLAYNAA WAXA UU

SHEEGANAYO (EE UU KU FAANAYO) WUXUUNA NOO IMAANAYAA ISAGA OO KALIGIIS AH)), (Suuratu-Maryam 77-80).

Dhibaatooyinkaas aan soo tilmaannay oo isugu jiray dil, ciqqab, cadaaadis, dulmi, boob, iyo aflagaaddo ayaa dadkii asxaabta aha lagu hayeysiiba kuwoodii taagta darraa ee cid difaacaysa aysan jirin aad ayuuna dhibkaasi uga batay wax walba ayaana lagula dhaqmay, hase yeeshee Alle iyo Rasuulkiisa ayaa intaas amrayey inay dhibka ku samraan oo taqwada iyo daacada Alle ku dadalaal dagaalna aysan samyn ee ay gacmahooda laabaan, hase yeeshee asxaabtu waxay jeclaayeen in ay is difaacaan oo iska celiyaan cadowga Alle, marar badanna waxa ay u yimaadeen Rasuulka iyagoo ka sheeganaya dhibka lagu hayo oo jecel inay is difaacaan, sida dhacday maalin in Cabdiraxmaan bin Cawf iyo koox kale oo asxaabta ka mid ahayd u yimaadeen Rasuulka kuna dheheen: "Nabi Allow markaan shirkiga ku jirnay awood baan lahayn, markaan iimaanka qaadanayna xaqiiriin baan noqonnay". Markaasaa Nagibu SCW ku yiri: "waxaan idin amrayaa iska dhaafid hana la dagaalinina qowmka, sidaas ayaa asxaabtii Rasuulku u fuliyeen amaradii Alle iyo kuwii Rasuulka SCW uguna samreen dhibkii iyo cadaadiskii ka imaanayey acdaadii Alle, Allena mar walba waxa uu soo dejinayey aayado uu ku amrayo inay ay samraan oo gacmahooda laabaan, Rasuulkuna arrintaas ayuuu ku boorrinayey, Cabdullaahi bin Cumar isagoo tilmaamaya dhibaatadii asxaabta lagu hayey waxa uu yiri: 'Islaamku waa yaraa sidaa darteed ninka diintiisa ayaa laga fidnaynayeey, way dili jireen ama wa cadaabi jiree".

DAARTII ARQAM BINU ABII ARQAM

Daarta Arqam binu abii Arqam waxay ahayd rugtii ay Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu ku kulmi jireen oo uu diinta ku bari jirey kuna tarbiyeyn jirey, kuna kala war qaadan jireen intii Makka la joogey.

In kastoo ay dacwadu jahri (qarsoodi) aheyd, haddana xikmadda dacwadu waxay keentay in meel qarsoodi ah la isugu tago oo ay diinta ku bartaan howlahoooda khaaska ahna ku qabsadaan, maxaa yeelay haddii ay bannaanka ku shiri lahaayee ama ay diinta isku bari lahaayeen dhib weyn ayaa soo food saari lahaa, sidii dhacdayba maalin ay Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu tageen buuraha Makka oo ay ku tukanayeen, waxaa markaa arkay gaaladii oo dagaal ku soo qaadday halkaasoo dhibaatooyin la isku gaarsiiyey sida saxaabiga la yiraahdo Sacad ibnu abii Waqaas oo muslimiinta ka mid ahaa uu laf madaxa ugu jeexay nin mushrikiinta ka tirsanaa oo caayey diintiisa, dhiiggaasuna wuxuu ahaa dhiiggii u horreeyey oo Alle dartiis loo daadsho intii Rasuulka SCW la soo diray.

HIJRADII U HORREYSEY EE XABASHA LOO HIJROODAY

Sidaan soo sheegnayba dhibkey qureysh ku heysey dadkii rumeeeyey Rasuulka scw ee qaatey caqiidada islaamka ayaa marba marka ka dambeysa aad u sii siyaadayeey ilaa la gaarsiiyey asxaabtii Rasuulka scw heer aad u adag oo ay xammili kari waayeen iney ku noolaadaan magaaladii Makka oo ay ku dhasheen tolkoodna degganaa, iyadoo waxa

lagula dagaallamayaana ay ahayd caqidadaas islaamka oo ay qaateen iyo iyagoo ka baxay wixii qabiilkoodu ku dhex jiray ee shirkiga iyo caadooyinka foosha xun ahaa Xaaladdu markay halkaa marayso ayaa Allaah subxaanahu watacaalaa sheegay muslimiintii in uu dhulka Alle waasic yahay.

Rasuulku scw markuu arkay heerka adag ee asxaabtiisu marayso iyo dhibaatooyinka daran ee soo gaaraya dadkii islaamka qaadanayey siiba kuwoodii masaakiinta ahaa ayuu u sheegay iney u hijroodaan dhulka xabashida oo uu ka talinayey boqor caaddil ah si fiicanna u heystey diintii Nabi ciise magaciisana la oran jirey Najaashi. Sidaa darteed ayaa waxaa baxay bishii Rajab ee sannadkii ee sannadkii shanaad kooxdii ugu horreysey oo u hijroota xabashida. Kooxdaas oo ka koobnayd 12 rag ah iyo 4 dumar ah waxaa hoggaaminayey Cismaan binu Caffaan oo ay la socotey xaaskiisii Ruqiya oo ahayd gabadhii Rasuulka. Wuxuuna Rasuulku scw yiri isagoo ka hadlaya labadooda "waa ehelu-beytkii u horreeyey ee u hijrooda jida Alle intii ka dambeysey Nabi Ibraahiim iyo Nabi Luud". Waxay kooxdaasi ku baxday si qarsoodi ah iyagoo baxaya habeennimo maxaa yeelay si caddaan ah uma bixi karin, gaaladii qureysheed markay ogaadeen in kooxdaasi baxday waxay ka daba direen ciidan si loo soo qabto, maxaa yeelay baadilku waqti kasta oo u joogo iyo meel kasta oo u joogo waa isku af, raallina ugama ahan xaqa inuuu ku fulo gudaha dibeddaba.

Nasiib wanaag kooxdii muslimiinta ahayd waxay isla markiiba tageen baddii Ilaahna wuxuu uga sahlay doonyo ijaar ah oo meesha marayey, waxayna tageen dhulka Xabashida iyagoo Nabad qaba. Ciidankii gaaladu soo dirtey waxay tageen baddii oo cidla ah dabadeedna waxay ku soo laabteen Makka, xaaladdu markay halkaas marayso laba bilood ka dib, bishii Ramadaan ee isla sannadkii shanaad ee soo diriddii Rasuulka scw, ayaa maalin Rasuulka scw uu ugu yimid madaxdii qureysheed oo kacbada gabren, markaasuu sidii caadadiisa ahaan jirteyba inuusan xaqa cidna uga cabsoon cid walbana gaarsiiyo diinta Alle ha yeesho ama ha diiddee, ayuu odeyaashii ku dul akhriyey suuratu al-najmi oo ah suurad aad cajiib u ah. Odeyaashii meesha joogay markay maqleen suuraddaas waa is hanan kari waayeen markaasay si fiican u dhegaysteen uguna khushuuceen, maxaa yeelay in badan fursad ma siin iney qur'aanka dhegaysteen oo waxay iska ilaalin jireen iney maqlaan wayna ku buuqi jireen, laakiin maanta ilaahay ma haleeshiin iney ku buuqaan. Rasuulku scw markuu dhammeeyey akhriskii suuraddaas ayuu sujuuday sida mashruuca ah in la sujuudo marka suuraddaa la dhammeeyo.

Odeyaashii qureysh ee dhageysanayey iyagoon is ogeyn ayey hal mar sujuud la wada daateen dhammaantood, markay sujuuddii ka soo kaceen ayey is haaraameen waliba kuwii meesha ka maqnaa ayaa canaantay kuwii dhagaystey oo sujuudey kuna yiri: "ma maantaad qur'aankiisii iyo ilaahiis u sujuuddeen!?". Odeyaashii waxay isla markiiba degsadeen jawaab been ah si ay isu difgaacaan waxayna yiraahdeen: "ilaahyadayaduu ammaanay oo markuu marayey Laata, Cussa iyo Manaat ayuu yiri "kuwaasu waa asnaamtii sarreysey, shafeecadoodana la rajaynayey", sidaa darteed ayaannu u sujuudney". Waxaa kale oo culimada qaarkood yiraahdaan hadalka ay sheegayaan shayaaddiintoodii ayaa dhegahooda ku akhrisey, markaasey sujuudeen.

Markii qisadaani dhacday ayaa kooxdii muslimiinta ahayd ee dhulka Xabashida u hijrootey waxaa la gaarsiiyey warkii oo la bddelay oo waxaa lagu yiri: "odeyaashii qureysheed waa islaameen" markaasay si halhaleel ah uga soo laabteen dhulkii Xabashida maxaa yeelay awalba waxaa geeyey dhul aysan garaneyn dadkiisa iyo dhaqankiisa carar ay diintooda la cararayeen. Muddo markay soo socdeen oo ay soo gaareen duleedka Makka ayey ogaadeen xaqiiqdii iyo in warkii sidii loogu sheegay uusan ahayn cadaadiskii iyo dulmigii Makka yaalleyna uu sidii hore kaba daran yahay, markaasaa talo ku caddaatey waxayna ka tashadeen waxay samayn lahaayeen. Ugu dambeyntii waxay u kala qeybsameen saddex qeybood: Qeyb ku noqotay dhulkii Xabashida, qeyb dhuumasho ku soo gashay Makka iyo qeyb magangelyo weyddiisatey qaar ka mid ah odeyaashii qureysh. Qureysh markay arkeen in dadkii shalay fakaday ay

soo laabteen ayay kordhiyeen dhibkii iyo cadaadiski ay muslimiinta ku hayeen waxayna soo saareen go'aanno cusub oo ah: in qabiil walba uu wiilkooda ama gabadhooda ku filnaado oo ciqaabo cadaasna saaro.

Kooxdaan dhowr iyo tobanka ahayd ee xabasha u hjrootay waxaa ka mid ahaa Abuu Bakar siddiiq hase yeeshee markay sii marayeen Barkul Qimaad ayaa waxaa la kulmay nin la oran jiray ibnu Daqinna oo oday u ahaa reer Qaara markaasuu Abuu Bakar ku yiri: "xaggee u socotaa, Abuu Bakar ayaa markaa ku yiri: tolkay ayaa isoo bixiyey waxaana doonayaa in aan dhulka ku socdo oo (tago meel aan) Rabbigay ku caabudo. Ibnu Daqinna ayaa hadlay oo yiri: "adigoo kale ma baxo lamana bixiyo ee laabo oo baladkaaga Rabbigaa ku caabud anigaa ku meggan geliyeye, markaasuu Abuu Bakar Ibnu Daqinna la soo noqday, Ibnu Daqinnana ogeysiis ayuu bixiyey inuu Abuu Bakar meggan geliyey. Qureyshna wa ay ka aqbashay (laakiin waxay Abuu Bakar u ogalaadeen) in uu gurigiisa dhexdiisa ku caabudo Rabbigiisa oo uusan muujisan. Sidaas ayuu markaa Abuu Bakar ahaa ilaa muddo wuxuuna sameyn jirey Qur'aanka ayuu kor u qaadi jirey isagoo gurigiisa joooga markaasaa waxaa ku soo ururi jirey dumarka iyo carruurta gaalada iyagoo eegaya oo la yaabban, wuuna ooyi jirey Abuu Bakar marka uu Qur'aanka akhrinayo, arrinkaasi wuxuu dhibay Qureysh waxay markaa u tegeen Ibnu Daqinna oo ka codsadeen inuu ka laabto (meggan gelyadii uu Abuu Bakar u fidiyey), Ibnu Daqinna ayaa markaa Abuu Bakar u tegey oo kala doorransiiyey inuu (Abuu Bakar) cibaadada siraysto ama kala noqdo meggan gelyadii, Abuu Bakar ayaa markaa u celiyey meggan gelyadiisii kuna yri: "waa kuu celiyey meggan gelyadaadii, waxaana ku raaali ahay meggan gelyada Alle.

HIJRADII LABAAD EE DHULKA XABASHIDA

Markuu cadaadiskii iyo ciqaabkii lagu hayey dadkii muslimiinta ahaa ee joogey Makka oo aad u kordhay iyadoo waxa lagula dagaaallamayey ay ahayd tawxiidka iyo ciqiidada saliimka aha oo ay qaateen ayaa Rasuulku scw amray asxaabtiisii mar labaad iney dhulka Xabashida u hijroodaan oo sidaan soo sheegnayba uu ka talinayey boqor caaddil ah. Waxaa marka baxay oo hijroday 83 rag ah iyo 18 dumar ah oo ku baxay si qarsoodi ah. Ilaahna waa u fududeeyey jidkii oo nabad qab ayey ku gaareen dhulkii Xabashida.

Madaxdii qureysheed markay maqleen in dadkii muslimiinta ahaa ay dhulka xabashida u hijroodeen iyagoo ah caddad tiro badan, oo tegey meel ay diintooda iyo naftooda ku ammaan helayaan, aad ayay u caroodeen waxayna isla markiiba qaateen tallaabo degdeg ah oo ay uga hortegayaan arrintaas. Waxay direen laba nin oo la kala oran jirey Cumar binu Caas iyo Cabdullaahi ibnu abii Rabbiica, waxayna u dhiibeen hadiyad badan, waxayna ku dheheen "waxaad hadiyaddan u geysaan boqorka Najaashi iyo wasiirradiisa, kuna hormara wasiirrada oo intaad arrinka ka dhaadhicisaan u kaxaysta boqorka, boqorka markaad la kulantaanna waxaad u sheegtaan inuu gacanta idinka soo geliyeo dadkaas isagoo aan ka hadalsiin".

Labadii nin waa ay baxeen iyagoo xoolo badan oo hadiyaad ah daadihinaya, siday arrintu ahaydna waxay ku hormareen wasiirradii, nin walba oo ka mid ahaana waxay siiyeen hadiyad fiican, go'aankii ay wateen way ka dhaadhiciyeen, ka dibna labadii nin iyo wasiirradii oo wada socda ayaa u wada tegey boqorkii ahaa Najaashi, hadiyaddiisiina waa loo geeyey. Ka dibna labadii nin ee wafdiga ahaa mid ka mid ah ayaa istaagay si uu barnaamijkii ay boqork iyo dowladda Xabashida ugu yimaadeen u soo gudbiyo, wuxuu yir "boqorow waxaa dhulkaaga soo galay niman dhallinyaro ah oo aan caqli lahayn oo diintoodii kuwii u sharaf badnaa oo ahaa odeyaashoodii noogana ogaal badan xaalkooda iyo waxa ay ku ceebeynayaan". Intaa markay soo bandhigeen labadii nin ayaa waxaa

hadalkii qaatey wasiirradiii, oo sidaan soo sheegnayba ahaa niman xoolo cunay waxayna yiraahdeen: "boqoroow run bay sheegayaane u dhiib ha celiyaane".

Najaashi oo siduu Rasuulka scw sheegayba aha boqor caaddil ah, markuu dhegaystay hadalkii ay soo jeediyeen nimankii wafdiga ahaa ee hadiyadda keenay iyo ayiditaankii wasiirradiisa ma uusan qaadan hadalkoodii kumana kedin arrimaahaasi inu caddaaladda ka tago oo hal dhinac keliya dhegaysto ee wuxuu yiri: "ha la ii keena dhinaca kale".

Markii loo tegey dadkii muslimiinta ahaa oo loo sheegay in boqorku rabo ayna yimaadeen niman loo soo diray ayey ka wada hadleen siday u qaabbili lahaayeen arrinkaas, ugu dambeyntiina waxay qaateen go'aankii lagu yaqaanney qofka iimaanka macaankiisa dhadhamiya inuusan qofna uga cabsoon Ilaahay diintiisa waxayna go'aansadeen wax kasta oo ku yimaada ineysan diintooda marna ka soo dabcin.

Waxayna af-hayeen ka dhigteen Jacfar binu abii-dhaalib oo ahaa Nabiga scw ina adeerkiis, dabadeed boqorkii ayaa loo yimid, hadalkiina waxaa bilaabay Jacfar wuxuuna yiri: "boqoroow waxaan ahaan jirnay dad jaahiliya ah, sanamkaan caabudi jirney, bakhtigana waan cuni jirney, faaxishadana waan la imaan jirney, qaraabadana waan goyn jirney, deriskana waan xumeyn jirney, midkayaga xoogga lehna wuxuu boobi jirey kan tabarta daran, sidaas ayaan ahayn, markaasaa Ilaahay wuxuu no soo diray Rasuul annaga naga mid ah, oo aan naqaan nasabkiisa, runtiisa, ammaanadiisa iyo dhowrsanaantiisa, wuxuuna noogu yeeray Ilaahay keliya inaan waxidno oo aan caabudno kana dhex baxno wixii annaga iyo aabbayaashayo aannu caabudi jirney; sido kale wuxu na amray inaan warka ka run sheegno, ammaanadan gudanno, qaraabdana xiriirinno, deriskana wanaajinno, xaaraamta iyo dhiigga dadkana ka fogaanno; sidoo kale wuxuu naga reebay xumaan oo dhan, markhaati beenaalaha, xoolaha agoonta oo la cuno, gabdhaha dhowrsoon oo la af-lagaadeeyo (qadfo); sidoo kale wuxuu na amray Allaah keliya inaan caabudno oo aanan u shariik yeelin; haddaba Rasuulkaas ayaannu rumeyney waana raacnay wuxuu noo keenay oo Ilaahay diintiisa ah; Ilaah keliya ayaanna caabdunay, waxna ugu shariik yeeli mayno, waanna xarrimnay wuxuu Ilaahay naga xarrimay, waana xalaalaynay wuxuu Alle noo xalaaleeyey; sidaa markaan yeelnay waxaa nagu xad gudbay dadkayagii, way na cadaabeen, diintayadii ayey naga fitneeyeen, waxayna doonayaan inaan bannaysanno xumaataan bannaysan jirnay, markay na dirqiyeen, na dulmiyeen oo ay na ciririyeen oo annaga iyo diintayadii ay kala dhex galeen ayaan waddaankaaga u soo baxsannay oo adiga ku doorannay, derisnimadaadaanna jecel nahay, waxaanna rajayney inaan agtaada nalagu dulmineyn", intaas markuu Jacfar ku soo koobay hadalkiisii aadka u qiimaha badnaa dhinac walbana wax ka ishaaray, ayaa Najaashi su'aal weydiiyey Jacfar oo ku yiri: "waxa uu Nabigaasi xagga Ilaahay ka keenay wax ma ka haysaa", Jacfar wuxuu yiri haa, Najaashi ayaa yiri "akhri", markaasuu Jacfar akhriyey Suuratu Maryam oo si fiican uga hadahsya qisadii Maryam iyo wiilkeedii Nabi Cise.

Najaashi markuu dhegaystey suuraddaas oohin ayuu la dhacay ilaa uu gadhkiisii ka qoyey, wasiirradii meesha fadhiyeynaa sidoo kale way ooyeen markay maqleen Ilaahay aayaatkiisaas. Najaashi ayaa markaas hadlay oo yiri: "waxaad akhriday iyo wixii Nabi Ciise la yimid hal dariishad bay ka soo baxeeen", ka dibnay wuxuu ku jeestey labadii nin ee qureysh soo dirsatay oo ku yiri "Ilaahay ku dhaartaye inaanan idiin dhiibayn dhibna looma geysan karo".

Intaas markuu fadhigii ku dhammaaday oo lagu kala dareeray ayaa Camar binu Caas ku yri saaxiibkiisii Cabdullaahi ibnu Rabbiica "Ilaah ayaan ku dhaartaye shirqool ayaan u samaynayaa dadkaas berrito aan ku dabargooyo markaasoo Cabdullaahi ku yiri "ha samynin arrintaa, maxaa yeelay waa tolkeen haba na khilaafaane', hase yeeshee Camar waa ku adkeystey go'aankiisii wuxuu mar labaad ku laabtay Najaashi isaga iyo saaxiibkiis waxayna ku dheheen "boqoroow dadkaani Ciise ibnu Maryama waxay ka sheegaan hadal weyn", markaasaa mar kale loo yeeray muslimiintii, markay

yimaadeenna Najaashi ayaa hadlay oo yiri "maxaad ka aamminsan tihiin Nabi Ciise?", Jacfar ayaa u jawaabay oo yiri 'waxaan ka aamminsannahay wixii Nabigayagu noo sheegay oo ah inuu yahay Ilaahay addoonkiisii, Rasuulkiisii, ruuxdiisii iyo kalimmaddiisii uu Maryama ku riday", markaasaa Najaashi qori yar kor u qaaday oo yiri "iska taga aammin baad ku tihiin dhulkayga qofkii dhib idiin geystana waa dambiile, mana jecli in la siyo buur dahab ah oo qof idinka mid ah dhib loo geysto", labadii nin ee qureysh ka socdeyna wuxuu u yiri "ha loo celiyo hadiyaddooda uma baahniye".

Ka dibna isagoo hadalkiisii sii wata wuxu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye hadda ka hor markii inqilaabka la igu sameeyey ee Ilaahay iiga gargaaray laaluush igama uusan qaadan, qof bini aadan ahna arrinteyda kalama uusan tashan, aniguna arrintiinna laaluushna ku qaadan maayo qof binu aadan ahna ku raaci maayo". Hadalkaas oo ula jeedo in Ilaahay u gargaaray, asna Ilaahay diintiisa iyo xisbigiisa uu u gargaarayo, sidaas ayaana arrintii ku dhammaatay, wafdigii qureyshna ku laabtay isagoo la murug geliyey, hadiyaddiina lagu soo celiyey, muslimiintiina waxaa Ilaahay siiyey cisso iyo wanaag, waxayna dhulkii Xabashida ku joogeen nabadgelyo iyo wanaag.

Madaxdii qureysheed markii wafdigoodii ku soo laabtay una warramay wixii uu dhulka Xabashida kala soo kulmay ayey aad u caroodeen kana xumaadeen, waxaa kaloo murugo kale ku sii noqotay in Ilaahay diintiisii ay Makka dhaaftay oo ay gaadhay Afrika ammaanna ku heshay, ayna baab'day arrintii ay doonayeen oo ahayd in diintu aysan Makka dhaafin oo ay halkaas ku cabburiyaan. U TEGITAANKII ABII-DHAALIB

Qureysh markay tallaabo walba oo ay qaadday, oo ay rabtey in ay dacwada islaamka ku joojiso, ay u suurtageli wayday, dacwadii islaamkuna ay marba marka ka dambeysa sii fideyso, dadka raacayana sii badanayo, ninka ka dambeeyaana uu yahay Nabi Maxammed SCW oo ay uga heybeysanayeen adeerkiis Abii-dhaalib oo ay hore ugu tageen waxna aan ka qaban Nabi Maxammed ayey mar labaad ku noqdeen waxayna ku dheheen "Abii-dhaalibow waxaad tahay nin oday ah oo sharaf agtayada ka leh hadda ka horna waan kuu nimid annagoo kaaga dacwooneyna wiilkaad adeerka u tahay, hase yeeshee nagama aadan qaban oo kaalintaadii waad ka soo bixi weydey, haddaba ilaah baan ku dhaarannaye ku sabri mayno mar dambe wuxuu nagu samaynayo wiilkaad adeerka u tahay, oo ah aabbeyaashayo oo la caayo, ilaahyadayada oo wax laga sheego iyo caqligayaga oo la duro, marka ama naga qabo ama noo daa", Abii-dhaalib dacwadaas ay odeyaashu ula yimaadeen oo ka dhex taagan wiilkiisa iyo tolkiis aad ayey u cusleysey, wuxuuna u yeeray Rasuulka SCW oo ku yiri "adeer reer tolkaa waa ii yimaadeen sidaasayna i yiraahdeen baaqi yeel naftayda iyo naftaada, waxaanan awood u lahaynna ha igu kallifin". Rasuulka SCW markuu dhegaystey fikraddii adeerkiis u soo jeediyey, arkayna in adeerkiis ka soo dabcay mowqifkiisii hore ayna dhici karto inuu ka baxo garabkiisa, cadaadiska tolkiis uga yimid awgiis ayuu ku yiri "adeer Ilaah ayaan ku dhaartaye ma awoodo in aan ka tago arrinka la ila soo diray, markaasuu abii Dhaalib yiri: "Ilaah baan ku dhaartaye ben ma sheegin wiilkaan adeerka u ahay weligiis e iska noqdo".

Ka dibna Rasuulka SCW meeshii ayuu ka istaagay isagoo ilmo ay indhihiisa ku soo joogsatay waayo arrinka uu maanta adeerkiis soo jeediyey waxaa weeye in xaqa iyo diinta laga haro oo kufri la raaco. Abii-dhaalib markuu arkay go'aanka kama dambaysta ah ee uu Rasuulka SCW qaatay ayuu u yeeray oo ku yiri "adeer Ilaah baan ku dhaartaye kuma ay soo gaarayso awooddoodu (dhibkoodu) ilaa ciidda la igu xabaalo ee amarkaaga la jahar wax dhib ahi korkaaga ma ahaanayso, kuna bishaarayso indhahaaguna ha ku qaboobaan sidaas".

Madaxyaweyntii qureyshee d markay arkeen Abii-dhaalib inuusan waxba ka qaban arrinkii ay ula tageen, Nabi Maxammedna SCW uu weli ilaahyadoodii iyo diintoodii uu ku sheegayo baadi uguna yeerayo iney Ilaah kaliya caabudaan ayey mar saddexaad Abii-

dhaalib ku laabteen waxayna ku dheheen "Abii-dhaalibow waxaad tahay nin akhyaar ah wiilkaagana wuxuu samaynayo waad la socotaa, adiga laftaaduna nala diin baad tahay oo m araacsanid diintiisa haddaba wiilkaan dadkiieennii kala geeyey oo diinteennii ku ciyaaray noo dhiib aan kaa kaafinnee, (dilnee) adigana waxaan kuugu beddelaynaa wiil kale oo uu dhalay Waliid abnu Muqiira oo la yiraahdo Cimmaara, oo ah wiil aad u fiican, marka qaado wiilkaas noloshiisa iyo diyaadiisaba", Abii-dhaalib wuu ku qoslay wuxuuna yiri "ma waxaad iigu timaaddeen inaan wiilkiina idiin koriyo, keygana aad dishaan", meeshiina waa lagu kala tegey

DHIBAATOOYINKII QUREYSHI KU HAYSEY RASUULKA SCW

Qureysh markii ay intaas oo tallaabo ah qaadeen, Nabi Maxammed SCW iyo dacwadi islaamkana ay wax ka qaadi kari waayeen oo maalinba maalinka ka dambeeya ay sii xoogeysaneyso, Nabigana SCW ay difaacayaan reerkuu ka dhashay ee reer binu Haashim oo Abii-dhaalib u weyn yahay, ayey waxay go'aansadeen iney Nabiga SCW ka takhalusaan. Abii-jahal oo ahaa hoggaamiyihii qureysh ayaa qureysh la hadlay oo ku yiri: "waad u jeeddaan waxa uu Maxammed samaynayo, wuuna diidey xal kale inuu arrintiisaa ku socdo maahee, Abii-dhaalibna inuu wax ka qabto wuu diiday, haddaba ilaah baan ku dhaartaye haddaan arko Maxammed oo tukanaya intaan dhagax soo qaato ayaan madaxa bujin oo ka takhalusin, markaa qureyshey ama reer binu Haashim ii dhiiba ama i difaaca", dadkii qureysh waxay dheheen "waa ku difaacaynaa abal-xakam".

Abii-jahal maalin dambe ayuu arkay Rasuulka SCW oo tukanaya markaasuu dhagax soo qaatay oo ku soo dhaqaaqay si uu u fuliyo go'aankiisii, sidii loo dhowrayey inuu ficilkiisii fuliyo ayuu gadaal gadaal u soo boodey, markaasaa la yaabay oo la yiri "maxaa kugu dhacay", wuxuu yiri "waxaan arkay neef rati ah oo weligey wax luquntiisa oo kale leh aanan arag, anigana igu soo dhaqaaqay", Rasuulka SCW wuxuu yiri "kaasi malaku Jibriil buu ahaa, hadduu Abii-jahal ii soo dhowaan lahaana wuu dafi lahaa".

Sidoo kale ninka la yiraahdo Cuqbata ibnu abii Muceydh ayaa maalin arkay Rasuulka oo kacbada ku tukanaya, markaasuu inta mara soo qaatey luqunta ka geliyey oo ku ceejiyey, markaasaa Abuubakar al-siddiiq meeshii yimid oo ka qabtey kuna yiri "ma waxaad dileysaan nin yiri Rabbigey waa Allaah", markaasey qureyshtii meesha joogtey Abuubakar ku jeesteen oo rifeen. Abuubakar waxaa meesha laga qaaday isagoo tacbaan ah.

Arrimahaas oo dhan waxay ku tusinayaan in markey wax walba oo ay sameeyeen ku joojin waayeen Ilaahay diintiisa afna wax uga qaadi waayeen ay gacan ula tageen Rasuulka SCW iyagoo ay ujeeddaddoodu tahay iney dilaan Nabi Maxammed SCW oo ay joojiyaan Ilaahay diintiisa, Allese waa diiday.

ISLAAMIDDII XAMSA BINU CABDI MUDHALIB

Xamsa binu Cabdimudhalib oo ah Nabiga SCW adeerkiis sida uu ku islaamay waxay ahayd, maalin ayuu ugaar doontay intuu gammuunkiisii iyo qaansadiisii qaatey, goor uu ugaarashadii jiro ayuu Abii-jahal Rasuulka SCW aad u caayey gacanna ula tegey.

Markuu Xamsa soo laabtay ayaa arrintii loo sheegay oo lagu yiri "haddaad arki lahayd maanta Abii-jahal waxa uu ku sameeyey wiilkaad adeerka u ahayd waad yaabi lahayd", Xamsa markii arrintii loo sheegay loo sheegay ayuu xanaaqay markaasuu dhaqaaqay isagoo qaansadiisii iyo gammuunkiisii wata wuxuuna tegay kacbada oo ay fadhiyaan Abii-jahal iyo rag kale oo qureysh ah, markaasuu caayey Abii-jahal dhinaciisa fadhidey soo yaacday si ay Xamsa u waxyeelleeyaan.

Abii-jahal ayaa markaa hadlay oo yiri "iska daaya waa gartiise, anigaa wiilkii uu adeerka u ahaa dhib u geystaye", iyadoo Abii-jahal sababtuu sidaa u yeelayey ay ahayd biqid uu ka baqayey in Xamsa islaamo ama ay arrintu gaadho heer laboa qabiil loo kala safto.

Xamsa oo xanaaqsan ayaa hadlay oo yiri "wiilkaan adeerka u ahaa baad dhibaysaa, anigu diintiisaan qaatay", sidaas ayuu Xamsa ku islaamay.

ISLAAMIDDII CUMAR BINU KHADHAAB

Cumar wuxuu ka mid ahaa raggii markii hore islaamka iyo muslimiinta aadka u dhibi jirey, Sannadkii lixaad ee soo diriddii Rasuulka SCW ayuu maalin soo kacay isagoo raba inuu Rasuulka SCW dilo, goor uu dhexda marayo ayaa nin ka hor yimid oo ku yiri "Cumar xaggee u socotaa?", wuxuu yiri "waxaan rabaa inaan Maxammed soo dilo, maxaa yeelay dadkii buu kala geeyey", markaasuu ku yiri "ma waxaad u malaynaysaa haddii aad disho inaad reer binu Cabdimanaaf ka nabadgelaysid, haddiise aad wax tarayso walaashaa Faadumo iyo ninkeedii Siciid way islaameene maad iyaga wax ka qabatid!".

Cumar ayaa markaa aaday gurigii walaashii isagoo xanaaqsan, markuu gurigii irriddiisii soo marayo ayuu maqlay qur'aan la akhrinayo waxaana guriga joogey walaashiis, ninkeedii iyo Khabaab oo qur'aan u akhrinayey. Albaabka ayuu tegey oo ku garaacay, dadkii guriga ku jirey markay ogaadeen inuu Cumar yahay ayaa Khabaabna dhuuntay, gabadhiina waraaqihii qur'aanku ku yiilley xaseysey (qarisay).

Cumar markii guriga laga furay ayuu gabadhii ku yiri "keen wixii aad akhrineyseen", markey u diideenna Siciid ayuu la dagaallamay, markaasay gabadhii difaacday ninkeedii ilaa uu iyadii dakharro gaarsiiyey. Markii la dagaallamay oo nabarro la is gaarsiiyey, la iskuna xanaaqay ayey dheheen "waxaad doonto samee annagu Ilaah ayaannu rumeyney waannuna islaamnay". Cumar markuu arkay meeshay xaaladdu marayso iyo dhibkuu reerka u geystey siiba walaashiis, ayaa naxariis qabatay, markaasuu tartiib ula hadlay oo yiri "i tus waxaad akhrineyseen", waxay dheheen "waxaad tahay nijaas ee soo qubeyso haddaad rabtid inaan ku tusno", wuu soo meyrtay markuu soo taabtayna waraaqdii ay akhrinayeen oo ay ku taallay suuratu Dhah ayey u dhiibeen. Cumar markuu suuraddii akhireyey ayuu yiri "hadalkaan waa hadal cajiib ah".

Khabaab oo dhuumanayey ayaa markuu maqlay hadalka Cumar iyo siduu u soo dabcay ayuu soo baxay oo ku yiri "Cumarow waxaan rajaynayaa iney kugu dhacday ducadii Rasuulka SCW kolkuu lahaa "Ilaahow laba Cumar (Cumar binu Khadhaab iyo Abii-jahal) midkaad kheyr ku og tahay islaamka ku xooji". Cumar intuu durba aad isu beddelay oo Ilahay qalbigiisa hanuun ku soo riday ayuu yiri "xaggee joogaa Nabigii?", markaas ayaa loo tilmaamay meeshuu joogo. Cumar isagoon weli hubkiisii iska dhigin ayuu meeshii tegey oo ku garaacay gurigii Rasuulka SCW iyo asaxaabtiisu ay joogeen. Asxaabtii markay arkeen Cumar, ayaa la yiri "waa Cumar", markaasaa Xamsa oo muddo yar ka hor sii islaamay meeshana joogey yiri "soo daaya, hadduu wanaag u socdana waan arkaynaa, hadduu xumaan u socdana seeeftiisaan ku dileynaa'. Cumar gurigii ayuu galay, ka dibna halkaa ayuu ku soo islaamay.

Cumar iyo Xamsa markay soo islaameen Ilaahay wuxuu muslimiintii siyaadiyey Cissi iyo xoog, xaaladdii Makkana way is beddeshay. Cumar isla markiiba wuxuu qaadey tallaabooyin wuxuuna yri "waxaan is weydiiyey ninka dadka ugu neceb islaamak markaasaan xasuustay inuu Abii-jahal yahay, markaasaan gurigiisii ugu tegey oo ku garaacay, albaabka ayuu iga furay oo i soo dhoweeyey yirina "maxaad iigu timid Cumar", waxaan ku iri "waxaan kuugu imid inaan ku ogeysiiyo inaan islaamay oo rumeeyey Alle iyo Rasuulka SCW , waxaan haysan jirneyna aan beeniyey", Abii-jahal intuu naxay ayuu yiri "waxaad la timid baa xumaaday" gurigii buuna ku cararay. Sidoo

kale wuxuu Cumar yiri "waxaan is weydiiyey ninka ugu warqaadka badan reer Makka oo dadka oo dhan hadalka gaarsiin kara, waxaan xasuustay inuu yahay Sumeyn ibnu Camar al-juhani", markaasaan u tegay oo ku iri "waan islaamay " markaasuu u qeyliyey isagoo leh "Cumar ibnu Khadhaab waa iishay" Cumarna wa ka daba hadlay isagoo leh "ma iilane waan islaamay".

Waxaa kale oo Cumar sameeyey markuu islaamay ayuu Rasuulka SCW ku yiri "Rasuulkii allow sow xaq kuma taagnin, waa inaan baxnaa oo dhammaanteen aan kacbada ku soo tukannaa", Rasuulkuna SCW waa ka yeelay, markaasaa waxaa soo baxay asxaabtii oo laba saf ah oo safna Cumar ku jiro safna Xamsa. Qureysh talo ayaa ku caddaatay waxayna ka caroodeen waxyaalaha uu Cumar sameeyey, waxay markaa ku tashadeen ineyba dilaan hase yeeshee waxaa arrintaa is hor taagay Cumarna gaarsiiyey Caas ibnu Waa'il.

Allaah wuxuu u soo hooyey dadkii muslimiiinta ahaa cissi waxayna bilaabeen in waxyaalo badan oo ay la dhuuman jireen ay bannaanka soo dhigaan siduu Bukhaari ka weriyey Cabdullaahi ibnu Mascuud inuu yiri "kama aannaan suulin cissi intuu Cumar islaamay".

ERGEYGII QUREYSHEED EE RASUULKA SCW U TEGEY

Duqowdii qureysheed markay arkeen xaaladdu meesha ay ka sii degeneyso iyo ineysan waxba ku joojin karin dagaal iyo xumaan ayey beddeleen go'aankoodii ahaa in Rasuulka SCW la dilo, waxayna bilaabeen iney tartiib iyo wada hadallo ku wadaan hawsha sidaa darteed ninkii la oran jirey Cutba binu abii Rabbiica, oo ka mid ahaa hogaamiyayaashii qureysh ayaa ku yiri odeyaashii "ka warrama haddaan Maxammed u tago ooarrimo u bandhigo, waxa la arkaa inuu naga aqbalee", odeyaashii waa ku farxeen waxayna dhaheen waa yahay.

Cutba wuxuu u tegey Rasuulka SCW wuxuuna ku yiri "i dhegeyso wiilkaan adeerka u ahaayow, waad la socotaa sharafta iyo wanaagga aad tolkaa ku lahayd iyo meeshaad ka joogtay, sidaad sidaa u ahayd waxaad la timid arrin weyn oo is haysigii tolkaa kala geeyey, caqligoodiina waa durtay, ilaahyaashoodiina waad ceebaysey, aabbayaashoodii tegeyna waad baadiyeysey, haddaba dhowr arrimod baan kuu soo bandhigayaaye dhegeyso" Rasuulka SCW wuxuu yiri "dheh Abaa Waliid, waan ku dhegeysanayaaye" wuxuu yiri Cutba "wiilkaan adeerka u ahaayow haddaad arrinkaan u samaynaysid maal badsasho, maal ayaan kuu ururineynaa ilaa aad ka noqoto kan noogu xoolo badan, haddaad dooneyso sharafna sayid baan kaa dhiganaynaa, haddaad boqornimo dooneyso boqor ayaan kaa dhiganaynaa, haddii waxa kuu imaanaya uu yahay jinni oo aad jirran tahay dhakhtar ayaan kuu geynaynaa, maalkaygana waa kugu bixineynaa ilaa aad ka caafimaaddo".

Rasuulka SCW wuxuu ku yiri "ma dhammaysatay abaa Waliid?", wuxuu yiri "haa", markaasuu Rasuulka SCW yiri "anna bal i dhegayso" markaasaa Rasuulka SCW bilaabay oo ku dul akhriyey suuatu Fusilat. Cutba markuu qur'aankii dhegaystay ayuu aad ugu khushuucay ka dibna wuxuu yiri "iga jooji". Rasuulku SCW markuu aayaatkii dhammeeyey odeyaashii ayuu ku laabtay isagoo beddelan. Odeyaashii markay arkeen Cutba oo cagajiid ah oo soo laabtay ayey isu dheheen "Ilaah ayaan ku dhaaranaye, wejigii uu idin kala tegey weji aan ahayn ayuu la soo socdaa". Ka dib markuu yimid ayaa la yiri "maxaad waddaa?" wuxuu ku jawaabay waxaan soo maqlay hadal aanan weligey maqal isagoo kale, Ilaah baan ku dhaartaye inuusan ahayn sixir, mana ahan curraafinnimo, ee nimanyohow maanta hadalka igu raaca oo ninkaas iyo arrintuu wato faraha ka qaada, waxa uu akharinayana wuxuu la imaan doonaa sha'ni weyn, ninkaasna faraha ka qaada oo isu daaya isaga iyo carabta kale oo hadday dilaan oo ay idinka kaafiyaan waa sidaad rabteen, haduu isagu guuleystana boqortooyadiisu waa tiinna, cissigiisuna waa cissigiinna oo idinkaa iska leh, waxaadna noqon doontaan kuwa dadka ugu nasiib badan".

Odeyaashii qureysh oo ahaa niman aan Ilaahay xaqa la doonin si walba oo wax loo tusaaleeyana aan ku qancayn, wax walbana ka hor keenaya madax adayg iyo caniidnimo markay dhagaysteen fikraddaas wanaagsan ee ninkaa odeyga ihi u soo jeediyey waxay dheheen "wuu ku soo sixray oo carrabku kugu soo sixray". Cutba wuxuu yiri "waa taas aniga taladaydii ee waxaad doontaad sameeya".

CUNAQABATAYNTII REER HAASHIM IYO REER MUDHALIB

Odeyaashii qureysh markay arkeen in aan Nabiga SCW marna u soo dabcayn, boqortooyo iyo wax walba oo loo ballanqaadana uusan doonayn, diintiisiina ay soo xoogeysanayso, rag khatar ahna ayba raaceen, hadday sidaa ku sii socotana ay rag badan oo kale raaci doonaan, ayey ku laabteen ficilkoodii hore oo kordhiyeen dhibkii ay Nabiga SCW ay u geysanayeen gacanna ula tageen.

Abii-dhaalib markuu arkay waxay qureysh samaynayso iyo go'aanka ay gaareen oo ah iney Nabiga SCW dilaan, wuxuu isugu yeeray reer Haashim iyo reer Mudhalib wuxuuna ku yiri "xaal meeshuu marayo waad aragtaan iyo in la rabo Maxammed la dilo, Maxammedna idinkuu idinka dhashay cid kale oo difaaceysaana ma jirto haddaba waa inaan difaacnaa dhammaanteen". Go'aankii Abii-dhaalib waa la qaatay oo labadaas reer waxay go'aan ku gaareen in kooda muslimka ah iyo kooda gaalka ahi ay difaacaan Nabiga SCW Abii-lahab oo diidey maahee. Qureysh markay go'aanka labadaas reer ay wadajirka u qaateen oo ah iney Nabiga SCW difaacaan waxay isugu yimaadeen shir ay arrintaa ku falanqeynayaan, ugu dambayntiina waxay soo saareen go'aan adag oo ah in cunaqabatayn lagu soo rogo labadaas reer, warqado ayeyna go'aammadii ku qoreen kuna dhejiyeen kacbada. Go'aammadaa waxaa ka mid ahaa: inaan wax laga gadan karin lagana iibin karin, inaan loo guurin karin lagana guursan karin, inaan lala macaamaloon karin lana caawin karin.

Labadii reer waxay iyaguna go'aansadeen in aan loo jixinjixin arrimahaas ay qureysh soo saartay, mowqifkoodiina waxba ka beddelin, Abii-dhaalibna wuxuu go'aamiyey in la dego kayntii uu degganaa iyo in la ilaaliyo Rasuulka. Abii-dhaalibna wuxuu sameyn jirey, habeenkii Rasuulka SCW ayuu gogoshiisa ku seexin jirey, gogosha Rasuulka SCW qof kale ayuu seexin jirey. Cunaqabatayntan oo bilaabatay bilowgii sannadki 7aad ee soo diriddii Rasuulka SCW waxay socotay saddex sano ilaa laga gaaray sannadkii 10aad. Waxaa labadaas reer la soo gudboonaatay dhibaato iyo baahi aad u daran ilaa ay caleenta iyo haragga ka cuneen, dhawaqa carruurtuna uu guryahooda ka baxayey.

Sannadkii 10aad horraantiisii ayey cunaqabataytii dhammaatay oo laga takhalusay. Habka looga takhalusayna wuxuu ahaa, nin la oran jirey Hishaam ibnu Camar ayaa markuu arkay dhibaatada iyo dulmiga lagu hayey reerahaasi meesha ay gaartey iyo inaan loo dulqaadan karin waxay qureysh samaynayso ayuu is xilqaamay oo u istaagay siduu arrintaa ku tirtiri lahaa, wuxuuna uu ugu horreyntii u tegey nin la oran jirey Suheyr ibnu abu Ummaya oo ay dhashay Caatika bintu Cabdimudhalib markaasuu ku yiri "waxa aan samaynayno ma wax loo dulqaadan karayo ayey kula yihiin, mase ku raalli noqotay inaad dheregto abtiyaashaa iyo habaryarahaana ay meeshaa ku gaajoodaan." Markaasuu Suheyr yiri "Anigaa nin keliyaan ahaye maxaa samayn karaa." Hishaam wuxuu yiri "Anigaa kula jira cid kalena waa raadineynaa". Wuxuu u tegey saddex nin oo kale oo arrintii ka dhaadhiciyey dabadeedna shantoodii ayaa tashaday.

Subixii dambe markii kacbada la isugu yimid ayaa Suheyr intuu si fiican u soo lebbistay oo kacbada dawaafay ayuu yiri "warqaddaas xunta ah oo daallimadda ah dadkana baabi'isay bari baan ka nahay." Abii-jahal baa soo boday oo yiri "been baad sheegtay lamana baabi'inayo", shantoodii mid kale oo ka mid ah ayaa ka daba hadlay oo ku yiri Abii-jahal "adigaa ka been badan " intuusan Abii-jahal weli hadlin ayaa midkii saddexaad yiri "labadaas nin ayaa run sheegay wax kale ninkii ku jawaabaana been ayuu sheegay,

kii shanaad ayaa sidoo kale u hadlay. Abii-jahal markuu arkay intaas oo nin oo iska daba hadashay oo weliba xamaasadaysa, wax kale oo ka dambeeyana uusan garanayn ayuu yiri "arrinkaan meeshaan meel aan ahayn ayaa lagu soo qaatay xalay baana loo soo dhiray" sidaa ayaa warqaddii kacbada ku dhegganayd oo qodabbadii cunaqabtayntu ay ku qornaayeen loo baabi'iyey, cunaqabatayntiina ku dhammaatay. Waqtigaasu wuxuu ahaa bishii Muxarram sannadkii 10aad marka laga soo bilaabo soo diriddii Rasuulka SCW.

GEERIDII ABII-DHAALIB

Abii-dhaalib wuxuu ahaa Nabiga SCW adeerkiisii soo koriyey toban sanana difaacayey oo qureysh uga biqi jirtey, muddo badanna ay odeyaashii qureysheed ku soo noqnoqdeen iyagoo uga dacwoonaya Rasuulka SCW dhibaatooyin badanna ka soo gaadheen difaaciddii Nabiga SCW iyadoo sababta uu u difaacayeyna ahayd ficilo qabiil iyo inaan wiilkuu adeerka u yahay lagu xad gudbin intuu nool yahay.

Tobankaa sano ee uu Rasuulka SCW difaacayey ma uusan qaadan islaamka isagoo ujeeda inuu xaq yahay oo xitaa gabay ku sheegay in islaamku yahay diin xaq ah sababta uu u rumeyna waxay ahayd Ilaah oo aan la damcin hanuunka.

Sannadkii 10aad ee soo diriddi Rasuulka SCW markay cunaqabatayntii dhammaatay ka dib ayuu Abii-dhaalib xanuunsaday, xanuunkaas oo ahaa kii uu u geeriyooday. Odeyaashii qureysh markay maqleen xanuunkaas Abii-dhaalib ayey shir qaateen waxayna is dheheen "waad maqasheen in uu Abii-dhaalib xanuunsan yahay waxaana la arkaa inuu u dhinto, annaga iyo Maxammedna is gefi mayno oo xaaladdiisu meel adag ayey taagan tahay, haddaan waxyeelleyno markii Abii-dhaalib dhintana carab ayaa na ceebeynaysa oo dhahaysa "intii Abii-dhaalib noolaa wax way yeeli kari waayeen laakiin markuu dhintay ayey waxyeelleeyen" sidaa darteed waa hadda u tagnaa Abii-dhaalib oo ku dhahnaa annaga iyo wilkaaga arrin cad nakala sii oo ha nabad geliyo ilaahyadayada iyo diintayada annaguna waa nabad gelineynaaye." waxay markaa Abii-dhaalib u direen 25 nin oo odeyaashoodii ka tirsanaa oo go'aankaas ula tegey. Abii-dhaalib markuu arrinkoodii dhegaystay ayuu Rasuulka SCW u yeeray oo ku yiri "adeer reer tolkaa arrintaan bay la yimaadeene ka warran" Rasuulka SCW wxuu yiri "adeer hal kalimad keliya ha ii dhahaan", Abii-jahal ayaa hadlay oo yiri 'hal keliyaa.. iyada iyo toban la mid ah ayaan kuu dhahayaa". Rasuulka SCW wuxuu yiri waxaad dhahdaan "LAA ILAAHA ILLA LAAH". Nimankii qureysheed markay maqleen "ninkaani wax uu idiin oggol yahay ma jirtee naga soo kiciya meesha".

Ibnu Hishaam wuxuu yiri arrintani waa qisada ay ka warramayso suuradda la yiraahdo SAAD bilwgeeda. Waxaa is weyddiin leh sababtaa ay u diideen iney hal mar yiraahdaan kalimmadaas tawxiidka, maxay se toban jeer intay afka ka dhahaan ay howshooda isaga wadan waayeen? Su'aalahas jawaabtoodu waxay weeye, waxay ogaayeen macnaha ka dambeeya kalimaddaas iyo iney dhaqankooda oo dhan beddelayso, mana aysan rumeysneyn sida ay maanta in badan oo muslimiin sheeganayaa ay ku kadsomeen oo kalimmadaas iney afka uga dhawaaqaan ahayn maxaa yeelay islaamku waxaa weeye inu qofku qalbiga ka ictiqadiyo xubnahana uga dhaqmo Ilaahna si toos ah ugu xirnaado. Sidaa kale Allah isagoo tilmaamaya in markii allah keliya la sheego ay dhabarka jeedinayaan waxuu yiri:

"((Waxaan quluubtooda yeelnay dabool in ay fahmaan qur'aana, dhagahoodana culays, haddii aad (Nabiyow) qur'aanka dhexdisa ku xusto Rabbigaa kaligii waxay jeedinayaan dabada iyagoo cararaya), (Suuratul-Israa 46).

Ugu dambayntii Abii-dhaalib xanuunkii ayaa ad ugu siyaaday, Rasuulka SCW wuxuu aad isugu hawlay siduu adeerkiis uga badbaadin lahaa cadaabka Alle, laakiin Alle ayaan

hanuun la damcin. Maalinkii ugu dambeysey ee sakaraadku hayey ayaa waxaa u yimid Rasuulka SCW isagoo ay la joogaan Abii-jahal iyo Cabdullaahi ibnu abii Ummaya oo doonaya in Abii-dhaalib ku dhinto diintii aabbayaashood, markaasuu Rasuulka SCW adeerkiis ku yiri "adeerow dheh LAA ILAAHA ILLA LAAH kalimmad aan Ilaahay agtiisa kaaga doodo" Abii jahal iyo Cabdullaahi ibnu abii Ummaya ayaa ka daba hadlay o yiri "Abii-dhaalib, ma diintii Cabdimudhalib baad ka tegeysaa?", kama aysan suulin iney ka daba hadlayaan mar kasta oo uu Rasulka SCW u bandhigo adeerkiis kalimmaddaas tawxidka ilaa uu markii dambe ka yiri "waxaan ku dhimanayaa diinta Cabdimudalib".

Abii-dhaalib waa uu ogaa in diinta Nabi Maxammed SCW uu wataa ay xaq tahay sida uu ku caddeeyey gabayaduu tiriyey, laakiin wuxuu xaqa u diiday armaa lagu yiraahda markuu dhimanayey buu baqdin daraaddeed u islaamay. Calla kulli xala ilaah ayaan hanuun u qorin sidaa ayuuuna ku geeriyooday. Allaah markuu arkay Rasulka SCW sida uu u jecel yahay adeerkiis isaguna hawlay hanuunkiisa ayuu aayaddaan ku soo dejiyey Rasulka SCW, oo ku yiri:

((Adigu ma hanuunin kartid ciddaad jeceshahay laakiin Alle ayaa hanuuniya ciddduu doono, isagaana og kuwa hanuunaya)), (Suuratul-Qasas 56).

Markii uu kufrigaas ku dhintay ayuuu Rasuulka SCW yiri "wan kuu dambi dhaaf weyddiin intaan la iga reebin" Hase yeeshee muddo ka dib markii Madiino loo wareegay ayaa Allaah soo dejiyey aayaddaan looga reebayo Rasuulka SCW iyo mu'miniinta iney gaalo dambi dhaaf u dalbaan.

((Uma haboona Nabiga iyo kuwa rumeeyey in ay Mushrikiin u dambi dhaaf wayddiiyaan, haba ahaadeen (mushirikiintaasi) qaraabadood, ka dib intay u caddaatay in ay yihiin (gaalo) ehelu Jaxiima), (Suuratu-Tawbah 113).

DHIMASHADII KHADIIJA

Sidaan ogsoon nahay Khadiija waxay ahayd xaaskii Rasuulka SCW ee ugu horreysey haweenkiisa, carruurtiisa oo dhanna u dhashay Ibraahim maahane, Rasuulka SCW aad ayuu u jeclaa, aad beyna u garab istaagtay Rasuulka SCW mar kasta oo u murugoodana way ka baabi'in jirtey nafteedii, maalkeedii iyo waqtigeediina waxay u hurtay diinta islaama waxayna ahayd qofkii labaad ee ay gaaladu ku qaddarin ugana baqi jireen Rasuulka SCW. Waxay Khadiijo dhimatay waqtigii uu Abii-dhaalib dhintay wax yar kadib.

Khadiijo waxay lahayd fadli aad u tira badan oo aan la soo koobi karin haddiise aan wax ka mid ah soo qaadanno. Maalin ayaa malaku Jibriil u yimid Rasuulka SCW markaasuu ku yiri "Rasuulkii Allow tani waa Khadiijo oo wadda weel uu ku jiro cunto ama cabbitaan ama iidaan, hadday kuu timaaddo gaarsii salaan xagga Alle ka timid uguna bishaaree guri Jannada ku yaalla oo ka samaysan Lu'Lu' oo aan dhib iyo daal lahayn".

Ugu dambayntii Khadiijo wuxu Ilaahay oofsaday sannadkii 10aad ee soo diritaankii Rasuulka SCW iyadoo jirta 65 sano, Nabiguna wuxuu jirey 50 sano, waxayna wada joogeen 25 sano. Sannadkaas ay iyada iyo Abii-dhaalib dhinteenna waxaa la yiraahdaa Sannadkii Murugta, waxaana Rasuulka SCW soo foodsaartay dhib aad u weyn maxaa yeelay waa labadii qof oo ay gaaladu Rasuulka SCW ugaga hakan jireen.

Hase yeeshee Rasuulku SCW iyo asxaabtiisu uma jixinjixin dhib kasta oo ku timaaddda, Allahna qur'aank ayuu intaa ku soo dejinayey uu ku boorrinayey iney ku sabraan dhibka ogaadaanna iney ciribta dambe iyagu iska leeyihiin. Rasuulka SCW wuxuu sannadkaas 10aad markay Khadiijo dhimatay Sawda bintu Samca oo ka mid ahayd muslimiintii hijradii labaad ee dhulka Xabash

DHIBAATADII REER DAA'IF

Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu markay Makka dacwadii ka soo wadeen 10 sano, juhdi nooc walba ahna ku bixiyeen, shacabkii reer Makkana wax yar maahee ay ka wada hor yimaaddeen islaamkii, Nabiga SCW iyo asxaabtiisiina ay Makka ka noqdeen tuke cambaar leh, ayaa Rasuulku SCW wuxuu ku dhaqaaqay tallaabo kale oo ah in uu dacwadii gaarsiiyo magaalooyinka kale ee Makka u dhowaa oo laga yaabi karey iney islaamka qaataan, taasoo ah arrinta had iyo jeer lagu yaqaanno qofka daaciga ah inuusan quusan haddii irrid ka xiranto irrid kale uu garaaco, haddii ay meel dacwadii iyo xaqii diiddana ay meel kale qaadato. Sidaa darteed Rasuulka SCW wuxuu aaday Daa'if oo Makka u jirta 60 mayl isagoo uu la socdo seyd binu Xaarith wuxuuna doonayey inuu dacwada gaarsiiyo shacabka reer Daa'if.

Rasuulka SCW intuu dhexda sii socday qabiil kasta oo uu sii maro wuxuu ugu yeerayey islaamka hase yeeshee cidna ma ajiibin. Markuu gaaray magaaladii Daa'if wuxuu ugu horreyntiiba u tegey madaxdii reer Daa'if raggii ugu sarreeyey oo ahaa saddex nin oo walaala ahaa oo la kala oran jirey Cabdiyaaliin, Mascuud iyo Xabiib ilma Camar ibnu Cumeyr Al-thaqafi ayey ahaayeen. Wuxuu Rasuulka SCW saddexdaa nin u bandhigay dacwadii islaamka hase yeeshee waxay noqdeen kuwo ka shar badan kuwii Makka, wuxuuna ku jawaabay kii u horreeyey "haddaad run sheegeyso oo Ilaah adiga ku soo direy waxaan jeexjeexayaa maryaha kacbada", kii labaadna wuxuu yiri "Ilaahay ma waayey cid kale oo uu soo diro", kii saddexaad wuxuu isna yiri "kuu jawaabi maayo haddaad run sheegayso, maxaa yeelay Rasuul uma jawaabi karo, haddaad Alle ku been abuuranaysana ma mudnid in laguu jawaabo".

Rasuulka SCW markuu saddexdaa nin jawaabohoodii arkay iyo ineysan xaqa diyaar u ahayn ayuu dadkii u tegey oo dacwadii u bandhigay uguna tegey qof qof iyo koox koox waxayse noqdeen kuwo ka dhib badan reer Makka waxayna is gaarsiiyeen inuu Makka ka yimid nin waalan oo Maxammed la yiraahdo, waxayna ku direen wax ma garatadii, dumarkii, carruurtii iyo dadkii waalnaa. Markuu Rasuulka SCW damcay inuu ka baxo magaaladiina way daba galeen iyagoo ku orinaya oo dhagaxyeynaya ilaa uu Nabiga SCW ka baxay Daa'if isagoo uu dhiiggu ka tifqahayo lugihiisa oo dhibaateysan.

Markuu muddo sii socdey ayuu galay beer dhexda ku taalley oo 3 mayl u jirtey Daa'if oo ay lahaayeen Cutba ibnu abii Rabbiica iyo walaalkiis Sheyba ibnu Rabbiica oo odeyaashii Makka ka mid ahaa. Geed ayuu Nabigu SCW hoos fariistay, Cutba iyo Sheyba markay arkeen Nabiga SCW oo dhib aad u weyni ka muuqdo geedna hoos fariistay ayey wiil nasraani (christian) ahaa oo uu shaqeynayey magaciisana la oran jirey Caddaas ugu dhiibeen xoogaa canab ah oo ku dheheen "ninka geedkaas hoos fadhiya u gee". Rasuulka SCW markii canbkii loo keenay ayuu ku bilaabay BISMILLAH, wiilkii ayaa yaabay oo yiri 'waa kalimad aan halkaan laga aqoon", markaasaa Rasuulka SCW ku yiri "xaggee ka timid?", Caddaas ayaa yiri "waxaan ka imid Neynawi (magaalo shaam ku taal)", markaasaa Rasuulku SCW ku yiri "waxaad ka timid magaaladii ninkii saalixa ahaa ee Yuunis ibnu Mataa". Caddaas intuu yaabay ayuu yiri "sidee ku ogaatay?", Nabiga SCW wuxuu yiri "waa walaalkay, isna waa Nabi, aniguna Nabi baan ahay' markaasaa Caddaas Rasuulka SCW ku soo boodey oo lugaha iyo gacmahaba ka dhunkaday. Cutba iyo Sheyba oo meeshoodii ka daawanayey ayaa midkood kii kale ku yiri "Maxammed wiilkii waa kaa fasahaadiyey". Markuu Caddaas iyagii u soo laabtay waxay ku dheheen "war hooge maxaad samaynaysey?" Caddaas wuxuu yiri "ninkaas wax ka kheyr roon dhulka ma joogo maxaa yeelay arrinkuu ii sheegay nin aan Nabi ahayni kama war hayo" markaasay ku dhaheen "diintaadaa ka wanaagsan diintiisee yuusan kaa jeedin".

Intaas ka dib Rasuulka SCW meeshii ayuu ka tegey isagoo dhinaca Makka u sii luudaya, waxaa markaa Rasuulka SCW u yimid malaku Jibriil oo ku yiri: "Maxamedow, Alle waa la socdaa waxa dhib ah ee ku soo gaaray iyo waxay dadkaasi kugu sameeyeen, wuxuuna Alle kuuu soo direy malaggii Buuraha si aad u amarto waxaad (qowmkaaga) ka

damacdo, malaggii buuraha doonto, haddaad doonto waan ku gambin labada buurood, (reer Makka), Rasuulku SCW markii amarkaas la siiyey wuxuu ku jawaabay akhlaaqdiisii naxariista iyo wanaagga badneyd wuxuuna yiri "iska daaya hadday iyagu xaqii qaadan waayeen waxaa la arkaa kuwo dhabarkooda ku jira iney ilaahay caabudaan", sidii ayeyna noqotay oo in badan oo iyaga ka mid ah ayaa aakhirkii xaqii qaatay.

Dabadeed Rasuulku Makka ayuu soo aadey, markuu marayo Makka duleedkeeda ayuu meeel fariistay isagoo ka fekeraya siduu Makka ku geli lahaa, maxaa yeelay odeyaashii qureysheed ma aysan oggoleyn in Nabiga SCW ay dacwadiisu Makka dhaafto, sidaa darteed haddii ay maqlaan in Nabiga SCW uu Makka dhaafay oo reer Daa'if iyo qabaa'ilkii baadiyaha u tegey arrintu way qaraar tahay, sidaa darteed Rasuulka SCW wuxuu u cid dirsaday oo uu magangelyo weydiistey Akhnas ibnu Subery hase yeeshee wuxuu Akhnas yiri "waxaan ahay xiliif, xiliifna wax ma magan geliyo", ka dib Rasuulku wuxuu la xiriirey Suheyr ibnu Camar oo uu magangal weydiistey hase yeeshee Suheyr dib Rasuulka SCW wuxuu yiri "Bini Caamir wax kama magan geliyaan bini Kacab". Markaa ka dib Rasuulka SCW wuxuu la xiriirey Mudcim ibnu Cadiyyi oo uu sidoo kale magangal weydiistey, Mudcam wuu ka yeelay wuxuuna qaatay hubkiisii, wiilashiisiina wuu hubeeyey, Rasuulkana wuxuu ku yiri "soo gal", markuu Rasuulku soo galay oo kacbada dawaafayey isaga iyo wiilashiisii ayaa hareeraha ka istaagay ogeysiisna wuu bixiyey oo wuxuu yiri "Maxammed aniguu magantayda yahay", markaasaa Abii-jahal, oo siduu Rasuulku SCW sheegayba ahaa fircoonkii ummaddaan, aadna u necbaa inuu qof islaamo, ayaa Mudcim ku yiri 'ma magan gelisay mise waad raacday?". Mudcim wuxuu yiri 'maan raacine waan magan geliyey', markaasaa Abii-jahal yiri "waa yahay ninkaad magan gelisey waa magan gashan yahay.

Rasuulka SCW wuu qiray Mudcim abaalkaas uu u galay maalinkii Badarna markuu qafaashay 70 gaalo ah wuxuu yiri "hadduu Mudcim noolaan lahaa oo kuwaan iga codsan lahaa waan u sii deyn lahaa".

da aaday ninkeediina halkaas ku dhintay.

DHEELMINTII RASUULKA SCW ISRAA-WAL-MICRAAJ

Dheelmintii Rasuulka SCW waa la isku khilaafaa waqtigii ay ahayd ama sannadkii ay dhacday. Waxayna culimada qaarkood weriyaan inay hal sano ka hor hijrada ahayd, qaarna waxay weriyaan in ay hal sano iyo laba bilood ka horreysey hijrada, qaar kalena waxay weriyaan waqtiyo kale oo kala duwan. Hase yeeshee Allaah ayaa garanaya waqtiga saxa ah, mana ku soo aroorin qur'an iyo axaadiis saxiix ah oo ka hadlaya waqtigay ahayd.

Sidoo kale waxaa la isku khilaafaa inta jeer oo Nabiga SCW la dheelmiyey, laakiin sida saxiixa ah oo culimadu u badan tahay, adilladana laga fahmayo waxa weeye in hal mar la dheelmiyey. Sidoo kale waxaa iyadana khilaaf ku jiraa habkii loo dheelmiyey iyo waxyaabihii uu Rasuulku SCW habeenkaa soo arkay, kutubaha qaarkood markay arrimahaas ka hadlayaan waxay soo arooriyaan arrimo badan oo sixadooda aan la hubin loona baahnayn in la iska dhex dabbaasho.

Rasuulka SCW waxaa la dheelmiyey jasadkiisa iyo ruuxdiisa sida saxiixa ah. Waqti habeennimo ah ayaana la dheelmiyey, waxayna saxiixaynku wariyeen in Rasuulka SCW markii la dheeelminayey malaku Jibriil uu guriga saanqaafkiisa ka soo galay oo jeexay xabadka Rasuulka SCW soona bixiyey galbigiisa kuna dhaqay biyo samsam ah oo ka buuxiyey xikmad iyo iimaan. Waxaana laga dheelmiyey masjidka Xaramka ah ilaa Beytul-Maqdis. Rasuulku SCW wuxuu sarnaa Buraaqo, waxaana la socday Jibriil. Wuxuu Nabiga SCW ku degey Baytul-Maqdis oo uu halkaa ku tujiyey anbiyadii, buraaqadiina waxaa lagu xiray masaajidka albaabkiisa. Ka dib wuxuu ka baxay Baytul-Maqdis isaga

iyo Jibriil isla habeenkiiba, waxayna tageen oo koreen samadaan dhow. Ka dib Jibriil ayaa dalbay in laga furo (Albaabka samada) waana laga furay.

Nabiga SCW wuxuu samada 1aad ku arkay Nabi Aadam, wuuna salaamay, isna wuu ka qaaday oo wuu soo dhoweeyey.

Wuxuuna Allaah Rasuulka SCW tusay dadkii wanaagsanaa arwaaxdoodii oo dhinaca midig ka taalla Nabi Aadan, iyo kuwii xumaa oo dhinaca bidix ka yaalla. Ka dib wuxuu tegey samada labaad oo uu ku arkay Nabi Yaxye iyo Nabi Ciise. Markaasuu la kulmay oo salaamay, iyaguna waa ka ajiibeen salaantii wayna soo dhoweeyeen. Samada saddexaad ayuu markaas u gudbay wuxuuna ku arkay Nabi Yuusuf, wuu salaamay isna waa ka ajiibey, waana soo dhoweeyey. Ka dib wuxuu koray samada 4aad, wuxuuna ku arkay Nabi Idriis, wuu salaamay, isna waa ka aqbalay, wuuna soo dhoweeyey.

Ka dib samada 5aad ayuu koray oo uu ku arkay Nabi Haaruun, wuu salaamay, isna waa ka qaaday waana soo dhoweeyey. Samada 6aad ayuu dabadeed koray halkaas oo uu ku arkay Nabi Muuse, wuuna salaamay, isna waa ka ajiibay waana soo dhoweeyey. Markuu Rasuulku SCW ka tegey Nabi Muuse ayaa ooyey. Markaasaa lagu yiri "maxaa kaa oohiyey", wuxuu yiri "waxaa iga oohiyey wiil gadaashay la soo diray oo ummaddiisa jannada gelaysaa ay ka badan tahay ummaddayda jannada gelaysa". Ka dib wuxuu Rasuulka SCW koray samada 7aad oo uu kula kulmay Nabi Ibrahim, wuu salaamay, isna waa ka qaaday waana soo dhoweeyey.

Nebiga SCW ka dib waxaa loo kor yeelay Sidratul-Muntaha dabadeedna waxa lo sii kor yeelay Baytul-Macmuur. Intaa ka dib Allaah ayuu u sii koray oo la hadlay. Waxaa asxaabtii Rasuulka SCW isku khilaafeen in Nabiga SCW arkay habeenkaas Rabbigiis iyo in kale. Waxayse asxaabta badankoodu ku tageen, nusuusta iyo adilladuna tusinayaan in uusan Nabigu SCW Rabbigiis arag ee uu nuur arkay, sidaa xadiiska ay saxiixaynku wariyeen markii la waydiiyey Rasuulka oo lagu yiri: "Rabbigaa ma aragtay? Wuxuu yiri nuur baan arkay.

Rasuulka SCW markuu Ilaahay u tegey waxaa isaga iyo ummaddiisa lagu soo farad yeelay 50 salaadood, hase yeeshee markuu la soo laabtay ayuu la kulmay Nabi Muuse. Markaas ayaa Nabi Muuse ku yiri "maxaa lagu soo amray?" wuxuu Rasuulku SCW yiri "50 salaadood". Wuxuu yri Nabi Muuse "ummaddaadu ma karto intaas ee Rabbigaa ku laabo oo weydiiso in laga fududeeyo ummaddaada". Rasuulka SCW sidii ayuu yeelay oo Rabbigiis ayuu la hadlay, waxaana laga soo dhimay 10 salaadood. Hase yeeshee markuu Muuse ku soo laabtay ayuu Muuse mar labaad sidii oo kale celiyey, Nabiguna SCW waa laabtay. Sidaa ayuuna Rasuulka SCW waa laabtay. Sidaas ayuu Rasuulka SCW ugu dhexeeyey Muuse iyo Rabbigiis ilaa 5 salaadood laga soo reebay. Markaasuu mar kale Muuse celiyey, hase yeeshee Rasuulka SCW wuxuu yiri "waan ka xishoonayaa Rabbigay, intan ayaanna ku raalli ahay oo ugu hoggaansamayaa".

Rasuulku SCW isla habeenkiiba wuxuu ku soo laabtay Makka, subixii markuu waagu baryeyna wuxuu u tegey qureysh oo u sheegay in la dheelmiyey. Laakiin qureysh waxay arrintaas ka qaadeen carar, waxayna weydiiyeen Nabiga SCW inuu u tilmaamo Baytul-Maqdis oo ay aqoon u lahaayeen. Allaah ayaa markaas Rasuulkiisa u muujiyey Baytul-Maqdis, Rasuulkuna waa uga warramay oo si fiican ayuu ugu tilmaamay, iyaguna wax tilmaamahaa ka mid ah kuma diidin, noloshiisana Rasuulka SCW ma tegin Beytul-Maqdis markaan mooyee. Waxaa kale oo Nabiga SCW uu qureysh uga warramay safarkoodii oo uu dhexda ku soo arkay iyo weliba waqtiga uu ku soo beegan yahay Makka iyo ratigii u soo horreeyey. Intaas oo dhan waxay noqdeen siduu Nabigu SCW u sheegey, hase yeeshee qureysh uma siyaadin wax aan ka ahayn kufri iyo gaalnimo, waxaa kale oo shakiyey markay qisadaan maqleen kuwa muslimiinta ka mid ahaa wayna riddoobeen, waxaana lala laayey Abii-Jahal.

Hase yeeshee dadkii iimaanku dhabta ka ahaa oo yaqiinsanaa in Allaah subxaanahu watacaalaa uu wax walba awoodo, Maxamedna SCW uu yahay Rasuulkiisii, aysanna dhici karin in uu Allaah ku been abuurto waxa ay arintaani u siyaadisay imaan iyo taqwo sida Abuu-Bakar siddiiq oo markii ay gaaaladu warkii ula yimaadeen ku yiri: "waa run", waxay dheheen: "ma waxaad u rumaynaysaa in uu xalay tagay Baytul Maugdis kana soo laabtay waagii oo aan baryin" wuxuu yiri: "waxaan u rumeeyaa wax taa ka fog oo ah khabarka samada uga yimaada subax iyo galaba", sidaas ayaa marka Abuu-Bakar kula baxay siddiiq.

Rasuulka SCW wuxuu habeenkaas la dheelmiyey soo arkay arrimo waa weyn oo Ilaahay aayaadkiisa ka mid ah siduu Alleba ku sheegay aaayaddaan.

((XAQIIQDII WUXUU ARKAY AAYAADKII RABBIGIIS EE WAAWAYNAA)), (Suuratu-Najmi 18).

Arrimuhuu Rasuulka SCW arkay habeenkaas waxa ka mid ahaa malaku Jibriil oo uu ku arkay suuraddii Alle ku abuuray isagoo leh lix boqol oo garab, sidoo kale wuxuu arkay oo tilmaamay webiga Kawthar ee Jannada ku yaal, sidoo kale wuxuu tilmaamay Siiratul Muntahaa iyo caleenteeda, Beytul Macmuur oo ku yaal samada toddobaad iyo habkay malaa'iktu u takto oo ugu tukato. Allena isagoo arrimahaas wax ka tilmaamaya waxa uu yiri:

((XAQIIQDII WUXUU (NABIGA) ARKAY JIBRIIL MAR KALE, (OO UU KU ARKAY) SIDRATUL-MUNTAHAA AGTEEDA, AGTEEDANA WAXAA AH JANNATUL-MA'WAA, WAQTI UU DABOOLAY SIDRADA WIXII DABOOLAY, (NABIGA) ARAGIISUNA MATAGIN MANA XAD GDUBIN)), (Suuratu-Najmi 13-17).

Sidoo kale Rasuulka SCW wuxuu soo arkay habeenkaas la dheelmiyey dad la cadaabayo sida kuwa dadka xanta, iyagoo leh ciddiyo bir ka samaysan oo wejiga iyo xabadka iska diiranaya.

Sidoo kale waxaa Rasuulka SCW habeenkaas malaku Jibriil u keenay saddex weel oo ay ku kala jiraan caano, malab, iyo khamri wuxuuna cabbay kii caanuhu ku jireen markaasaa malaku Jibriil ku yiri: "waa fitradii", sidoo kale wuxuu Rasuulku SCW habeenkaas maqlay sharqanta qalimaanta maal'igta.

MU'MINIINTII AAN REER MAKKA AHAYN

Rasuulka SCW markuu arkay in reer Makka ay xaqii qaadan la'yihiin, ilaa intii hore u islaamtay maahane, ayuu bilaabay inuu xoogga saaro dadka meelaha kale duwan ka imaanaya oo xajka u imaanaya. In kastoo ay shayaadiintii Makkana faafinayeen dacaayaddoodii, haddana Rasuulka SCW kama suulin inuu dadkaas dacwada gaarsiinayo.

Maalin ayuu wuxuu la kulmay nin la oran jiray Suweyd ibnu saami oo ahaa nin caan ku ahaa gabayga oo ka yimid magaalada Madiina. Wuxuu Nabigu SCW ninkaas u bandhigay islaamka hase yeeshee Suweyd wuxuu ku jawaabay: "Waxa aad taqaanno aniguba waaan aqaannaa". Rasuulka SCW wuxuu yiri: "maxaad taqaanaa?", Suwedna wuxuu yiri: "waxaan aqaannaa xikmaddii Luqmaan". Rasuulku SCW wuxuu ku yiri: "akhri', Suweydna, wuxuu akhriyey gabaygiisii iyo wuxuu yaqanney. Rasuulka SCW markuu ka dhegaystay ayuu ku yiri "warkaad sheegayso waa wanaagsan yahay laakiinse waxaan hayo ayaa ka wanaagsan waana qur'aan Ilaahay igu soo dejiyey oo hanuun iyo nuur ah".

Nabigu SCW qur'aankii ayuu Suweyd ku dul akhiryey. Suweyd markuu dhegaystay wuxuu yiri: "waa war wanaagsan wuuna islaamay, markuu Madiiina ku laabtayna wuu geeriyooday.

Abii-darr Al-qafaari, oo ka mid ahaa dadkii degganaa agagaarka Madiina, ayaa markuu maqlay in Makka uu Rasuul Ilaahay soo diray joogo wuxuu soo diray walaalkiis oo uu ku yiri: "u tag ninkaas oo khabar fiican iiga keen". Ninkii markuu soo laabtay wuxuu ku yiri: "waxaan soo arkay nin dadka kheyrka ugu yeeraya, sharkana ka celinaya". Abii-dar warkaasi waa ku filnaan waayey sidaa darteed ayuu aadey Makka isagoo doonaya inuu la kulmo Rasuulka SCW soo baxay.

Abii-darr markuu Makka yimid wuxuu degay Xaramka biyaha Samsamkana wuu ka cabbayey oo uu saas yahay ayaa maalinkii dambe waxaa soo maray Cali Binu Abii-Dhaalib, markaasaa Cali la hadlay oo ku yiri: "waxaa la arkaa inaad soo galooti tahay, Abii-Darr ayaa markaa ku jawaabay "haa", Cali wuxuu yiri "soo bax aan guriga aadnee, Abii-Darrna wuu ka yeelay oo wuu raacay, hase yeeshee Abii-Darr uma uusan sheegan, Calina waxba ma weydiin sidaas ayeyna ku kala tageen. Maalinkii dambe ayaa Cali mar kale soo maray Abii-Darr markaasuu ku yiri: "wali arrintaadii kuuma hirgelin miyaa?" Haa ayuu yiri Abii-Darr, markaasuu Cali yiri, nakici Abii-Darrna waa raacay. Markaasaa Cali weydiiyey oo ku yiri, maxay ahayd dantaad lahayd oo aad u timid magaaladaan? Markaasaa Abii-Darr yiri: "waan sheegayaa haddaad ii qarinayso". Calina wuxuu yiri: "waan kuu qarin". Abii-Darr dantiisii ayuu sheegay, markaasaa Cali ku yiri: "waad heshay, halkaasaan gelayaaye iga soo daba gal, hadiise aan arko cid aan kaaga cabsado bannaankaan istaagayaa, waxaana iska dhigayaa sidii wax kabta hagaasanaya, ee adigu iska gudub". Cali gurigii ayuu toos u galay, abii-Darr waa ka daba galay. Wuxuuna meeshii ugu tegay Rasuulkii SCW markaasuu ku yiri, Islaamka ii sharax, markii uu Rasuulku SCW u sharaxayna wuu Islaamay. Wuxuu markaa Rasuulku ku yiri: "Iska tag oo carradaadii aad, oo noo imow markaad maqasho inaan guulaysanay". Wuxuu markaa Abii-Darr Rasuulka ku yiri, Ilaahii xaq kugu soo baxshaan ku dhaartaye, inaan Qureysh kala dhex kicin (Islaamnimadayda) markaasuu baxay oo u tegay Qureysh oo Xaramka ka buuxda wuxuuna ku yiri: "Qureysheey waxaan qirayaa Alle mooye Ilaah kale inuusan jirin, Maxammedna yahay adoonkiisii iyo Rasuulkiisii". Qureysh markay kalimaddaas maqashay ayey hal mar ku yaaceen iyagoo leh "kan iishay qabta", wayna garaaceen. Waxaa markaa u yimid oo ka qabtay Cabbaas binu Cabdi mudhalib, kuna yri: 'war hooggiinee, ma waxaad dilaysaan nin reer Qafaari ah. Ma idiin badbaadayaa safarkiinna aad reer Qafaari sii martaan". Markaasay iska daayeen. Maalin labaaddii ayuu Abii-Darr mar kale Xaramkii tegay oo sidii oo kale ku yiri, iyaguna sidii oo kale ayey ku sameeyeen. Markaasaa Cabbaas mar kale ka qabtay oo sidii ooo kale ku yiri. Dabadeedna Abii-Darr wuu iska tegay oo dhulkiisii ayuu ku laabtay.

Sidoo kale dadkii dacwadaa ku soo islaamay waxaa ka mid ahaa Dammaan Al-Asadi oo ahaa reer Yaman, ahaana nin cudurka dabaysha ku tufa oo daweeya. Markuu Dammaan yimid Makka ayuu maqlay iyadoo la leeyahay nin waalan oo Maxammed la yiraahdo ayaa halkan jooga ee iska jira, markaasuu run mooday hadalkaas wuxuu yiri: "waxaa la arkaa in Ilaahay gacantayda ku daweeyo haddaan u tago oo aan ku tufo". Dammaan Rasuulka SCW ayuu u yimid oo ku yiri: "Maxammed dabaysha ayaan ku tufaa ee ka waran haddaan wax kugu tufo, waxaa la arkaa in Ilaahay kugu caafiyee". Rasuulka SCW uusan yaabin Dammaan maxaa yeelay, dacaayadahaas iyo kuwo kale oo la mid ah ayaa Makka laga faafinayey, lagana dhaadhicinayey dadka soo galootiga ha. Dadka badankooduna wax ma hubsadaan mana baaraan ee wixii lagu yiraahdo ayey iska qaataan. Islaamkuna sidiisaba ma oggola in qofku wixii loo sheegaba iska rumeysto isagoo aan hubsan oo aan caddeysan.

Rasuulka SCW wuxuu bilowday hadalkiisii isagoo ku furturanaya iftitaaxa caamka ah oo ah: Ilaah ayaa mahad iska leh, waan mahadineyna waan kaalmo weydiisaneynaa, waana dambi dhaaf weydiisaneynaa. Waxaan Allaah ka magan gelaynnaa naftayada sharteeda

iyo acmaasheeda xun. Qofkii Allaah hanuun la doono cid baadiyeyn kartaa ma jirto; qofkuu baadiyeeyana wax hanuunin karaa ma jiro. Waxaan qirayaa in Allaah keliya mooyee uusan Ilaah kale jirin, keligiisna uu yahay, shariikna uusan lahayn. Waxaan kale oo aan qirayaa in uu Maxammed yahay addoonkiisii iyo Rasuulkiisii. Dammaan markuu maqlay kalimmadahaas cajiibka ah ee tawxiidku ka buuxo aad ayuu ula dhacay, wuxuuna ogaaday in xaqiiqadu aysan ahayn sidii lagu yiri, markaasuu yiri "iigu cel". Markuu Rasuulka SCW mar labaad ugu celiyeyna islaamka ayuu qaatay, wuxuuna yiri "hdal curraafi iyo saaxir waan maqlay weligeyna hadalkaan oo kale ma maqal.

SOO ISLAAMIDDII REER MADIINA

Dadkii uu Rasuulka SCW kula kulmay mawaasimtii xajka ee uu dacwada gaarsiinayey: waxaa ka mid ahaa lix nin oo reer Madiina ah oo u yimid xaj, lixdaas oo kala ahaa: Ascad binu Suraarah, Cawf binu Xaarith, Raaafic binu Maalik, Qudba binu Caamir, Cuqbah binu Caamir, iyo Jaabir binu Cabdullaahi binu Ri'ab. Siduu kula kulmayna waxay ahayd habeen Nebiga SCW iyo Abuubakar oo ku wareegaya dadka xajka u yimid oo dacwada gaarsiinaya siduu Nabigu xajwalba samyn jiray, ayuu yiri: Kuwamaad tihiin? waxay dheheen koox reer Khasraj ah ayaan nahay. Wuxuu yiri: waalidii Yahuudba? Waxay dheheen haa. Wuxuu yiri: maad fariisataan aan idinla hadlee? Waxay dheheen waa yahay. Markaas Rasuulku SCW u bandhigay islaamka, wayna qaateen; waxayna ku laabteen Madiina, wuxuuna waqtigaasi ahaa sannadkii 11aad laga soo bilaabo soo diriddii Rasuulka SCW.

Sidaa la ogsoon yahay magaalada Madiina waxaa wada degganaa laba qabiil oo carab ah iyo saddex qabiil oo yahuud ah. Yahuuddu waxay rumeysneyd diintii Nabi Muuse oo waxay ahaayeen Ehlu-Kitaab; carabtuna waxay ahaayeen mushrikiin asnaamta caabuda oo aan diin heysan, marar badanna wixii mas'alo diin ah oo ay qabaan waxay weydiin jireen yahuudda. Yahuuddu waxay carabta ugu faani jirtey in uu imaan doono Nabi diintoodu sheegtay oo aakhiru-semaanka imaan doono oo ay rumeyn doonaan iyagu (yahuuddu) lana dagaallami doono iyaga (Carabta). Sidaa daraaddeed lixdaa nin markay Rasuulka SCW arkeenba hore ayey ka islaameen, waxayna xaqiiqsadeen inuu yahay Nabigii ay yahuuddu sheegi jirtay. Ka dibna waxay ku laabteen Madiina iyagoo Ducaad ah, waxayna ku faafiyeen Madiina dacwadii islaamka

BEYCATUL CAQABADDII 1aad

Markii ay Madiina ku laabteen lixdii nin ee reer Madiina oo Islaamka qaatay waxay ay diinta Islaamka gaarisiiyeen dadkoodii reer Madiina. Dabadeedna waxay Makka ku soo laabteen xajkii dambe oo ahaa sannadkii 12aad ee soo dirriddii Rasuulka SCW iyagoo ah 12 nin (lixdii hore shan ka mid ah iyo toddoba cusub oo kala ah: Mucaad binu Xaarith, Dakwaan binu Cabdul Qays, Cubaada binu Saamit, Yasiid binu Thaclabah, Cabbaas binu Cubaada, Abuu Haytham binu Tiihaan iyo Cuwaym binu Saacida; dhammaantoodna waxay ahaayeen reer Khasraj labada dambe maahane. Waxayna Rasuulka SCW kula shireen waqti habeennimo ah, si qarsoodi ah, meesha la yiraahdo Caqaba oo ku taalla Muna. Maxaa yeelay qureysh ma arki karin Nabiga SCW oo la shiraya dad Makka dibaddeeda ka yimid waayo waxay ka baqayeen in dadkaasi rumeeyaan oo uu aado ka dibna uu Makka ku soo duulo sidii dhacday markii dambeba.

Rasuulka SCW wuxuu ka qaaday 12kii nin ee reer Madiina beyco (ballan adag), wuxuuna ku yiri "igula mubaayacooda in aydan Allaah u shariik yeelayn, wax xadayn, sineysaneyn, carruurtiina dileyn, been abuurashana samaynayn, wanaaggana igu caasineyn", iyaguna waa aqbaleen. Wuxuu Rasuulka SCW ku yiri: "haddii aad gudataan janno ayaad leedihiin, haddiise aad khiyaantaan waa la idin ka abaal marin, waxayna idiin tahay kafaaro, haddii la idiin asturo ilaa qiyaamaha amarkiinu xagga Alle ayuu ahaaday, haduu doono wuu idiin cadaabin, hadduu doonana wuu idiin dhaafin". Iyaguna

waa yeeleen oo sidaas ayay Rasuulka SCW kula mubaayacoodeen. Waxayna beycadaani waafaqsan tahay oo ay isku kalmado yihiin beycadii uu Nabiga SCW heshiiskii xudeybiya la galay dumarka taasoo ay tilmaantay suuratul-mumtaxina.

Ka dib markii beycadaas iyo ballaantaas la kala qaatay waxay Rasuulka SCW ka codsadeen inuu ku daro nin daaci ah oo inta islaamtayna islaamka bara, inta kalena dacwada islaamka gaarsiiya. Rasuulka SCW wuxuu markay bexeen ka daba diray Muscab ibnu Cumayr oo aan hore u soo tilmaannay. Muscab madiina ayuu tagay wuxuuna ku degay guri uu lahaa Ascad ibnu Suraara oo raggii ka mid aha. K a dibna isaga iyo Ascad ayaa ka hawl galay Madiina oo dacwada wada faafin jirey, marba xaafad ayeyna tegi jireen. Maalin ayey waxay yimaadeen oo ay dacwada ka faafinayeen xaafad ay degganaayeen laba reer oo la kala oran jirey: Bani Cabdil-asham iyo Banii Dufur (oo reer Aws ahaa), geed bayna hoos fariisteen iyagoo dacwadoodii gudanaya, markaasaa dadkii xaafadda degganaa ku soo urureen iyagoo dhegaysanaya.

Ka dib iyagoo dadkii wacdinaya ayaa waxaa arkay laba oday oo labadaan reer odeyaal u kala ahaa, markii dambana islaamka magac weyn ku yeeshay. Labadaas nin oo la kala oran jirey Sacad binu Mucaad iyo Useyd binu Xudeyr aad bey u caroodeen markay arkeen labada nin oo dadkoodii shirinaya. Sacad ayaa markaa Useyd ku yiri "Ascad wax kale guryahayaga waxaa uga samayn maayo ee qaraabada aan nahay ayuu og yahay ee orod Useydow u tag oo nimankaas shaqo ka qabo". Useyd ayaa markaas ku soo dhaqaaqay isagoo caraysan oo warankiisii wata. Ascad ayaa la hadlay Muscab oo ku yiri "ninkaas soo socdaa waa odaygii ciddayada ee adigay ku jirtaa sidaad ula hadli lahayd'.

Useyd markuu meeshii yimid ayuu isagoo caraysan wuxuu yiri 'maxaad waxa aannaan raaliga ka ahayn uga faafinaysaan guryahayaga, ma waxaad rabtaan inaad ku ciyaartaan dadkayaga wax ma garatada ah caqligooda, haddii aydan meesha ka tegin wax kale ayaad arkeysaan". Muscab binu Cumeyr, oo ahaa nin aad u maskax badan, Rasuulka SCW uu u soo doortay arrintaa, si tartiib ah ayuu ula hadlay Useyd oo wuxu ku yiri "ma la arkaa inaad fariisato oo aad i dhegaysato oo haddii ay ku anfacaanna aad qaadatid haddii kalena aan kaaa tagno', Useyd oo ahaa nin odey ah oo akhyaar ah wuxuu ku jawaabay "waayahay waan ku dhegaysanayaa". Muscab dacwadii ayuu gaarsiiyey oo Ilaahay aayaatkiisii ayuu ku dul akhriyey. Useyd intii qur'aanka lagu dul akhrinayey ayuu wejigiisu is beddelay, markii aayaatkii la dhammeeyeyna wuxuu yiri "sidee buu diintaan u soo glaa qofkii doonaya?", Muscab wuxuu ugu jawaabay "waad soo qubeysanaysaa ka dibna tawxiidkaad qireysaa", Useydna sidaas ayuu yeelay, markuu islaamayna wuxuu yiri "nin odey ah ayaa ila socday oo hadduu islaamo qabiilkiisa oo dhammi ay islaamayaan waana idiin soo dirayaaye la hadla". Useyd markuu ku laabtay Sacad ayaa Sacad yiri "ka warran meeshii", Useyd wuxuu yiri 'wax dhib ah kuma arag waana la hadlay, laakiin ninka la yiraahdo Ascad oo aad ilma habreedka ahaydeen waxaa u dhaaranayey jilibkaagii". Sacad markuu intaa maqlayba wuxuu soo aaday meeshii, markuu yimidna wuxuu ogaaday in meesha wax dhib ahi ka jirin ee isaga loo soo dirayey, markaasuu ku yiri Ascad "waxaad arrintan ug awaddo xaafadahayaga waa qaraabada aan nahay darteed sow maaha". Muscab ayaa markaa la hadlay oo ku yiri hadlalkii uu Useyr u yiri oo kale, Sacadna wuxuu ku jwaabay sidi Usery u jawaabay oo kale. Markuu dhegaystay qur'aankiina wuu islaamay.

Sacad galabkii ayuu shiryey qabiilkiisii Aws oo dhan wuxuuna ku yiri "maxaad igu taqaaniin", waxay yiraahdeen "waxaan kugu naqaanna wanaag iyo inaad tahay kan noogu fiican" markaasuu yiri "haddii aydaan islaamin salaantiinnu xaaraam bay iga tahay", halkaas ayey markaas dhammaantood ku wada silaameen rag iyo dumarba hal nin oo isna dagalkii Uxud islaamay mooyee.

Muscab ibnu Cumeyr Alle ha ka raali noqdee wuxuu halkaa ku noqday macallinkii reer Madiina, dacwadii ay halkaas ka wadeen isaga iyo Ascadna waxay gaartay heer aad u sarreeya ilaa ay reer Madiina badankood islaameen. Dabadeedna xajii dambe ee

sannadkii 13aad ee soo diritaanka Rasuulka SCW wax yar ka hor ayu muscab ku soo laabtay Makka isagoo Rasuulka SCW ugu bishaareynaya islaamka reer Madiina meeshuu marayo iyo guulaha ay dacwadu gaartay.

BAYCATUL CAQABADII 2aad

Isla sannadkii 13aad ee soo diritaankii Rasuulka SCW ayaa waxaa kale oo Madiina ka soo baxay oo xajka soo aaday 73 nin iyo 2 dumar ah oo muslimiin ah iyagoo la socda mushrikiin qabiilkooda ah. Dhowr iyo toddobaatankii qof ee muslimiinta ahaa waxay Rasuulka SCW samaysteen kulan, waxayna ku ballameen iney isugu yimaadaan meesha la yiraahdo Caqaba oo Muna ku taalla habeen ka mid ah waqtigii xajka.

Musimiintii reer Madiina way ka qariyeen shirkaas nimankii ay isla socdeen ee mushrikiinta ahaa hal nin maahane. Ninkaas oo la oran jirey Cabdullaahi ibnu Camar ibnu Xaraam wuxuu ahaa nin oday ah oo ay ku kalsoonaayeen una bandhigeen islaamka, markuu aqbalayna kulankii ayey u soo kaxaysteen.

Markii la gaaray habeenkii ay Rasuulka SCW la ballameen ayey habeen barkii si qarsoodi ah u baxeen waxayna Rasuulka kula kulmeen Caqaba. Rasuulka SCW waxaa la socday adeerkiis Cabbaas oo aan weli islaamin laakiin ka war hayey arrimaha Rasuulka SCW, garab taagnaana Rasuulka SCW intii uu Abii-dhaalib dhintay, waqtigaasna u socday inuu arrintaas ayido. Cabbaas wuxuu noqday ninkii ugu horreeyey ee shirkaas ka hadla wuxuuna yiri "reer Khasrajow waad ogtihiin Maxammed meeshuu naga joogo, 13 sananna annaga ayaa ka difaaceynay dadkii aan isku diinta ahayn ee aan isaga wada khilaafsanayn, isaguna hadda wax kale wuu diidey inuu idin soo haleelo mooyee, haddaad marka ballan qaaddaan inaad difaaceysaan oo aad ballantaas ka soo baxeysaan, axadkii khilaafana ka difaaceysaan waa idinka iyo waxa aad qaaddeen; laakiin haddii aad berri diidi doontaan oo aad garabkiisa ka bixi doontaan haddaba iska daay".

Ka dib waxaa hadlay Thaabit oo ka mid ahaa 73 kii nin wuxuu yiri "Rasuulkii Ilaahayow maxaan kugula mubaayacoonnaa?", Rasuulkuna SCW wuxuu yiri "waxaad igula mubaayacooneysaan is maqal iyo is addeecid waqtiga nabadda iyo waqtiga shiddadaba, iyo in aad maalkiinna bixisaan marka la barwaaqaysan yahay iyo marka la dhibateysan yahayba, waana in wanaagga la is faro, xumaantana la reebo, waana in Ilaahay dartiis aad u istaagtaan oo mid dagaallamaya dagaalkiis waxba idinka dhibin, iyo in aad ii gargaartaan haddaan idiin imaado, iina difaacdaan sidaad u difaacdaan carruurtiinna, naftiinna iyo maalkiinna, iddinkuna janno ayaad leedihiin (hadaad sidaa yeeshaan)".

Markii hadalkaasi dhammaaday waxaa Rasuulka SCW gacantiisa qabtay Baraa ibnu Macruur oo yiri "Ilaahii xaq kugu soo bixiyaan ku dhaarannaye, waan kaa difaacaynnaa waxa aan reerkayaga ka difaacno ee nala mubaayacood Rasuulkii Allow, annagana waa nala og yahay inaan nahay wiilashii dagaalka ku barbaaray oo hubka qaadi jirey". Waxaa isna raggii meesha ka hadlay ku jirey Abuu Haythama oo yiri "Rasuulkii Allow annaga iyo yahuudda xargo ayaa isug kaaya xiran oo heshiis baa naga dhexeeya, haddaad tiraahdo gooyana waan goyneynaa ee ma laga yaabaa in hadhow markaad guuleysato aad naga soo tagto?", Rasuulku SCW dhoollaha ayuu caddeeyey wuxuuna yiri "dhiigga ayaa naga dhexeeya iga mid baad tihiin, aniguna idinka mid baan ahay, waan la dagaallamayaa ciddii aad la dagaallantaan, waana soo dhoweynayaa ciddii aad soo dhoweysaan. Cabbaas ayaa mar kale hadlay oo yiri "ogaada ballanta aad maanta qaadaysaan inay tahay in aad la dagaallantaan caddaan iyo madowba, haddii hadhow markii xoolihiinna dagaalku dhammeyo, raggiinnana seeftu dhammeyso, aad ka bixi doontaan haddaba iska daaya, haddaad sidaa samaysaan waa idiin hooge," laakiin haddii aad u istaagtaan naf iyo maal waa idiin liibaan".

Intaa ka dib waxay yiraahdeen "Rasuulkii Allow haddii aanu arrintaan oofinno maxaan leenahay?", Rasuukuna SCW wuxuu yiri "janno ayaa leedihiin" markaasay dheheen "fidi gantaada" markuu fidiyeyna sidaas ayey kula wada mubaayacoodeeen. Beycadaasina waxay ahayd beycadii labaad oo loo yaqaan beycatu Caqabadii 2aad.

Markaa ka dib Rasuulku SCW wuxuu yiri "12 nin oo odeyaashiinna ah ii soo saara', waxaana loo soo saaray 12 nin oo kala ahaa:

1) Ascad ibnu Suraara
2) Sacad ibnu Rabbiica
3) Cabdullaahi ibnu Rawaaxa
4) Cabdullaahi ibnu Camar ibnu Xaraam
5) Baraa' ibnu Macruur ibnu Sakhar
6) Cubaada inu Saamit ibnu Qays
7) Sacad ibnu Cubaada ibnu Daliim
8) Mundir ibnu Camrin ibnu Khunays
9) Raafic ibnu Maalik ibnu Cajlaan
10) Useyd ibnu Xudeyr ibnu Simaak
11) Sacad ibnu khaythama ibnu Xaarith
12) Rufaaca ibnu Cabdimundir ibnu Subayr

Laba iyo tobankaas nin waxay sagaalka hore ahaayeen reer Khasraj, saddexda dambena reer Aws. Rasuulka SCW 12kaa nin aad buu ula dardaarmay wuxuuna xusuusiyey mas'uuliyadda ay qaadeen iyo inuu iyaga la soo xiriiri doono, nin walbana uu jilibkiisa mas'uul ka yahay. Shirkaas markuu dhammaaday oo lagu kala dareeray ayaa sheydaan ogaaday markaasuu dhawaaqay oo yiri "dadka meesha degganow, Maxammed iyo dad la jiraa waxay ku heshiiyeen inay dagaal idinku soo qaadaan", markii Rasuulka SCW maqlay hadalkaas wuxuu yiri "kani waa sheydaaankii Caqaba joogey, Ilaahay baan ku dhaarannayaaye cadowgii Allow waan kala tegaynaa". Ka dib wuxuu Rasuulku SCW raggii amray in la kala tago oo qof walba uu meeshiisii ku laabto. Cabbaas binu Cubaada ayaa markaa Rasuulka SCW ku yiri: 'haddaad doonto na amar aan qureysh aroortii weerar ku qaadnee" hase yeeshee Rasuulku SCW wuxuu yiri "iska taga weli dagaal la ima amrine".

Qureysh qeyladii sheydaanka ayey habeenkii maqashay, markaasay subixii u yimaadeen dadkii reer Madiina oo muslimiinta iyo gaalada isug jirey waxayna ku dheheen "waxaan maqalnay inaad heshiis la samaysateen saaxiibkayo oo aad doonaysaan inaad naga fakisaan, dagaalna nagu soo qaaddaan, annaguna dagalkiinna dooni mayno Khasraj iyo Awsow ee maxaa dhacay?". Waxaa markaa hadlay kuwii gaalada ahaa oo aan waxba ka war haynin oo yiri "arrintaa waxba kama jiraan". Cabdullaahi binu Ubey oo socotadaas reer Madiina madax u ahaa wuxuu yiri "qoomkeygu wax aanan ogeyn ma samayn karaan" hase yeeshee markii ay reer Madiina noqdeen ayey qureyshi ogaatey in qisadu dhacday markaasay ka daba direen ciidan laakiinse waxay soo qabteen nin keli ah oo ahaa Sacad binu Cubaada, isagiina waxaaa ka sii daayey oo magangelyo siiyey Xaarith ibnu Qeys iyo Mudhcim ibnu Caddiyi oo uu Sacad magangelin jirey safarkooda Madiina sii maraya (ee shaam ujeeda). Sidaas ayeyna ku dhammaatay beycadii Caqaba 2aad.

HIJRADII ASXAABTA EE MADIINA

Rasuulka SCW wuxuu 13 sano ka waday kacwadii islaamka Makka hase yeeshee reer Makka dacwadii way qaadan waayeen in yar maahane, dhib aad u tiro badan ayuu Nabigu SCW kala kulmay, isku day badanna wuu sameeyey oo ay ka mid ahaayeen inuu reer Daa'if tegey si ay diinta Alle ugu gargaaraan hase yeeshee iyagana dhib weyn ayuu kala soo kulmay, dabadeedna juhdi iyo dadaal ayuu saaray wafdiyadii Makka imaanayey si uu u helo dad xaqa qaata iyo meel dacwada sal u noqota, maxaa yeelay reer Makka loogama

rajo qabin in xoog lagu qabto mooyee wax kale, sidaa darteed waxaa Ilaahay islaamkii ku hanuuniyey oo diintiisa iyo Rasuulkiisa u doortay reer Madiina kuwaas oo Rasuulka SCW kula mubaayacooday in ay Ilaahay, Rasuulkiisa SCW iyo diintiisaba u gargaari doonaan. Haddaba markii Ilaahay nasrigaa uu u soo hooyey diintiisa, muslimiintiina ay heleen dhul sal u ah ayaa Rasuulku SCW amray asxaabtii inay u hijroodaan Madiina qof kastana siduu ku bixi karo uu ku baxo.

Hijradu runtii waa shey adag oo qof iimaanku qalbigiisa dagay maahee qof kale uusan ku dhiirraneyn, maxaa yeelay wuxuu qofku Ilaahay dartiis uga hijroonayaa dhulkiisii, dadkiisii, maalkiisii, xaaskiisii, iyo carruurtiisii.

Asxaabtii Rasuulka SCW iyagoo fulinayaa amarkaas Alle iyo Rasuulkiisu SCW ay amreen, diintoodana ay ku dhowrsanayaan, ayey bilaabeen hijro ay ka hijroonayaan Makka una hijroonayaan Madiina iyagoo ku baxaya si qarsoodi ah una bareeraya masaafadaas dheer ee kuleylka iy dhibka badan wax walba oo ku soo gaara Alle dartiisna ku sabraya.

Ma soo koobi karno asxaabtii Rasuulka SCW qof walba oo ka mid ihi siduu u hijrooday balse aan soo qaadanno qaar ka mid ah siday u hijroodeen.

Ummu Salama, oo markii dambe ka mid noqotay xaasaskii Rasuulka SCW, ayaa iyada, ninkeedii (abuu salama) iyo wiil yar oo ay dhashay oo ka baxaya Makka waxaa ka war helay reerkii ay ka dhalatay, markaasay ka daba tageen oo la soo hareen Ummu Salama iyo wiilkeedii kuna yiraahdeen Abuu Salama "adigu haddaad tegaysid tag laakiin noo soo reeb gabadhayada". Abuu Salama hore ayuu isaga sii socday maxaa yeelay waxba kama qaban karin. Reerkii markay Ummu Salama iyo wiilkeedii la soo hareen ayaa waxaa ka war helay oo u yimid reerkii kale ee Abuu Salama ka dhashay oo ku yiri "haddaad wiilkaygaii gabdhiinnii kala soo harteen, annagaa ilmahan yar dhalnaye na siiya" sidaas ayey kuwaasina wiilkii yaraa ku qaateen. Ummu Salama oo maxbuusad ku ahayd reerkoodii oo mushrikiin ah, wiilkeediina ay reer kale haystaan, ninkeediina uu hijroday waxay bilowday oohin iyo murugo ay ku jirtey muddo hal sano ah.

Sannad ka dib ayaa nin ehelkeeda ka mid ahi wuxuu yiri 'iska sii daaya qoftaan miskiinta ah ee dhibaateysan', sidaas ayeyna ku sii daayeen. Markii la sii daayey ayey reerkii kale u tagtay oo wiilkeedii ka qaadatay, ratigeediina rartay ka dibna Madiina u hijrootay. Goor ay dhexda sii marayso ayaa waxaa arkay nin la oran jiray Cismaan ibnu dalxa ibnu abii Dalxa, oo mushrik ahaa, markaasuu yiri "ma aha in ay qoftaan oo kale masaafadaan dheer marto", markaasuu u yimid oo ku yiri "anigaak ku kaxaynaya".

Ummu Salama waxay tiri iyadoo ka sheekaynaysa akhlaaq wanaaggii ninkaas "ratiga markuu ii raro ayuu intuu ka durko oraneyey "fuul", markaan fuulana wuu igu waadayey, markii meel la degana intuu meel har leh ratiga arumo oo qarqarsiiyo (jilib xiro) ayuu ka durkayey, markaan ka degana intuu rarka ka dejiyo oo ratiga seeteeyo ayuu geed kale seexanayey. Markaan Madiina tagnayna wuxuu yiri "magaaladaas ayaa ninkaagii joogaa ee orod u tag" isna halkii ayuu ka laabtay". Ummu Salama iyadoo hadalkeedii sii wadata waxay tiri "ninkaas nin aan muslim ahayn oo ka akhlaaq wanaasan ma arag".

Dadkii ugu horeeyay hijradii madiina waxaa iyana kamid ahaa Muscab binu Cumayr iyo Cabdullaahi ibnu umi Maktuum waxay qur'aanka barayeen dadkii muslimiinta ahaa (ee reer Madiina).

Sidoo kale Suheybu-ruumi markuu hijroonayey waxaa u yimid gaaladii qureysh waxayna ku yiraahdeen "adigoo faqiir ah oo xaqiir ah ayaad noo timid, maal ayaadna naga tabcatay ee haddaad dooneysid inaad tagto, maalkaaga ayaannu qaadanaynaa" Suheyb wuxu yiri "Haddaan malka idiinka tago ma iska kay deyneysaan?" "haa" ayey jawaabtoodii noqotay.

Markaas ayuu Suheyb maalkii oo dhan uga tegey Ilaahay dartiis.

Markii ay sidoo kale hijroonayeen Cumar binu Khadhaab, Cayaash ibnu abii Rabbiica iyo Hishaam ibnu Caas waxay ku ballameen iney saddexdoodu is raacaan. Hase yeeshee Hishaam ibnu Caas ayaa laga war helay waana la xiray, laakiin Cumar binu Khadaab iyo Cayaash ibnu abii Rabbiica way wada hijroodeen waxayna tageen Madiina.

Ka dib waxaa ka daba tegey Abii Jahal iyo Xaarith oo ay labadoodaba Cayaash isku hooyo ahaayeen, iyagoo doonaya iney Cayaash soo celiyaan. Waxay u degeen khidad ay rabaan inay ku soo kexeeyaan o waxay ku dhaheen markay Madiina ugu tageen "Cayaashow hooyadaa waxay ku dhaaratay ineysan timaha shanlaysan oo aysan qorraxda ka harsan ilaa ay ku aragto'. Cayaash markii arrintaa loo sheegay, naxariis ayaa qabatay wuxuuna go'aansaday inuu Makka ku laabto oo hooyadiis u tago. Cumar binu Khadhaab ayaa markaa la taliyey oo ku yiri "hooyadaa hadday injirtu dhibi lahayd way shanlaysan lahayd, hadday qorraxdu dhibi lahaydna way harsan lahayd, ee anigu waxaan kuu sheegayaa ujeeddada nimankani ay wataan waa inay diintaada kaa fitneeyaan ee ka joog" hase yeeshee Cayaash wuxuu ku adkaystay go'aankiisii ahaa inuu hooyadiis u tago. Cumar binu Khadhaab ayaa mar kale ku yiri "haddaad go'aankaagii kolley ku adkaysatay kaxayso hashaydan dheeraysa oo haddaad wax dareento, ama aad shakido, ku carar". Cayaas sidii ayuu nimankii ku raacay laakiinse markii dhex la sii marayo ayay arrintii sidi Cumar uga digayey noqotay Cayaashna laga caqli badiyey oo Abii Jahal ayaa ku yiri "Cayaashow ratigan aan saarnahay sidaa uma leylisna oo wuu i dhibay ee ii beddel aan hashaada xoogaa sii saarnaadee". Cayaash markuu arrinkaa yeelay o hashii fariisiyey ayaa la qabtay oo la xirxiray, waxaana la geeyey Makka isagoo xirxiran.

Abii Jahal iyo Xaarith markay Makka tageen ayey iyaga oo faanaya waxay dadkii reer Makka ku yiraahdeen "sidaas ayaan maangaabkayagii ku soo samaynaye, idinkuna sidoo kale maangaabyadiinna ku soo sameeya". Cayaash sidaa ayaa xabsi lagu geliyey isaga iyo saaxiibkiis hore loo reebay ee Hishaam binu Caas.

Ka dib markuu Rasuulka SCW Madiina u hijroodey ayuu ku yiri asxaabtii "yaa Hishaam iyo Cayaash arrintooda wax ka qabanaya?". Waxaa istaagay Waliid ibnu Waliid oo yiri "aniga ayaa waxa ka qabanaya". Waliid wuxuu si dhuumahso ah ku tegey Makka, wuxuuna ogaadey meeshe ay ku xiran yihiin oo ah guri aan saqaf lahayn. Habeenkii markii la seexday ayuu meeshii ugu dhacay oo xargihii ka furay, xabsigiina kasoo saaray, ka dibna wuxuu ku soo noqday Madiina isagoo wada Cayaash iyo Hishaam.

Siyaabahaas iyo siyaabo la mid ah ayey asxaabta Rasuulku uga hijroodeen Makka oo ugu kicitimeen Madiina. Waxayna raggii asxaabta ahaa Makka uga wada bexeen muddo ` laba bilood gudohood ah, marka laga reebo Abuubakar iyo Cali oo Rasuulku SCW la haray maahee.

HIJRADII RASUULKA SCW

Markuu Rasuulku SCW amray in loo hijroodo Madiina oo noqotay daartii islaamka loona hijrooday oo asxaabtii qof kasta siduu ku bixi lahaa ku baxay, loogana dhammaaday Makka laba bilood gudohood, laga soo bilaabo beycadii Caqaba 2aad oo ahayd bishii Dul-xija sannadkii 13aad ee soo diriddii Rasuulka SCW ilaa bishii Safar sannadkii 14aad ee soo diriddii Rasuulka SCW, ahaydna bishii 2aad ee sannadkii 1aad ee hijriga, uusanna Rasuulku SCW weli hijroon isaga, Abuubakar iyo Cali, ayaa odeyaashii qureysheed waxay ogaadeen in asxaabtii Rasuulka SCW ka wada bexeen Makka oo Madiina isku urursadeen, reer Madiinana ay soo dhoweeyeen oo ay raaceen Rasuulka SCW, isagana la filayo inuu u tago, haddii uu u tagana ay arrintu khatar ku sugan tahay, oo ay suurtowdo in dad badani raacaan oo uu xoogeysto ka dibna uu Makka ku soo duulo, waxay markaa qabteen shir ay ka soo qayb galeen odeyaashii qabiillada qureysh oo dhan, reer binu Cabdimanaaf oo

Rasuulku SCW ka dhashay maahane. Shirkaas, oo ajendahalagu falanqeynayey ahaa go'aankii kama dambaysta ahaa ee laga qaadam lahaa Rasuulka SCW, waxa la qabtay 26kii Safar sannadki 1aad ee hijriga (sannadkii 14aad ee soo diridda Rasuulka SCW).

Waxaa shirkaas lagu qabtay daartii la oran jirey Daaru-Nadwa (ooahayd gurigii baarlamaanka qureysh ku shiri jirey). Hoggaamiyayaashii Qureysheed ee halkaa isugu tegey waxaa ka mid ahaa: Abii Jahal ibnu Hishaam Jubey Ibnu Mudhcim, Ducayna ibnu Cadiyi, Xaarith Ibnu Caamir, Sheyba ibnu abii Rabbiica, Cutba ibnu abii Rabbiica, Abuu Sufyaan ibnu Xarbin, Ubay ibnu Khalaf, iyo Ummaya ibnu Khalaf, Nadar Ibnu Xaarith, Abul Bakhtari Binu Hishaam, Samca binu aswad, Xakiim Ibnu Xisaam, Nabiith Ibnu Xajaj, iyo walaalkiis Munabih Ibnu Xajaaj.

Markii shirkii waqtigiisii la gaaray oo uu bilaabmay ayaa waxaa soo galay sheydaan iska soo dhigay nin oday ah. Markaas ayay dheheen "waa kuma ninkaan odeyga ha?", markaasuu intuu hadlay yiri "waxaan ahay nin oday ah oo dhinaca Najdi ka yimid, waxaanna maqlay shirka iyo meesha aad ku ballaanteen, waxaan ahay nin ra'yi u saaxiib ah, marka waan idin dhegaysanayaa waxaa la arkaa inaan ra'yi idinku biiriyo". "waa yahay" ayaa loogu jawaabay.

Waxaa bilaabmay shirkii oo waxaa la yiri "waxaanu maanta isug nimid mushkilaaddaan khatarta ah ee uu wado Maxammed, welina dhexdeenna ayuu jooga, haddaba sidee baanu ka yeelnaa?". Waxaa hadlay nin la oran jirey Abuu Aswad wuxuuna yiri "aan musaafirinno oo ka fageyno waddankeenna, ka dibna aan isku duubnideenna iyo wada jirkeenna xojinno mar hadduu tafaraaruqiisu naga baxo". Odeygii lahaa Najdi ayaan ka imid (sheydaan) ayaa hadlay oo yiri "maya, Ilaah baan ku dhaartaye miyeydaan arag ninka faseexaddiisa, codkarnimadiisa iyo sida hadalkiisa loola dhacayo. Ma aamin baad ka noqoteen in qabiil ka mid ah qabiillada carbeed uu raaco oo uu hadhow idinku soo duulo, beledkiinnana qabsado. Ra'yi kale keena kaasi ra'yi maahane". Waxaa ku xigsaday oo hadlay Abii Bakhtari wuxuuna yiri: "waa inaanu xabsi ku ridnaa oo uu halkaas noogu jiraa ilaa uu ka dhinto. Sidii gabayahanadii isaga ka horreeyeyba ay u dhinteen buu u dhiman doonaaye". Odeygii (sheydaan) ayaa ka daba hadlay oo yiri "haddaad xabsi gelisaan sow nimankii uu ka dhashay ee reer Cabdimanaaf, oo awalba difaaci jirey, xanaaqi mayaan lana safan mayaan wiilkooda oo aad xirteen". Dabadeed waxaa hadlay mujrimkii ugu weynaa Abii Jahal oo yiri "anigu waxaan hayaa ra'yi cid soo jeedisey aysan idinku jirin". Markaasaa la yiri "muxuu yahay ra'yigaasi Abul-xakam?", wuxuu yiri "qabiil kasta oo ka mid ah qabiillada aan meesha ku fadhino waa inuu soo saaraa wiil dhallinyaro ah oo xoog leh geesina ah, ka dibna wiilashaasi hal mar ha ku kulmiyeen seefaha (maxamed) si aan dilkiisa hal qolo loogu raacan, ciddiisuna lama dagaallami karto intaas oo qabiil oo kala duwan, magtiisana waynu bixineynaa waana ka istareexaynaa'. Odeygii (shaydaan) ayaa hadlay oo yiri "ra'yiga saxa ihi waa kaas oo aan la dhacay waana in la fuliyaa". Ugu dambasyntii waxaa la isku raacay oo la go'aansaday ra'yigaas, waxaana fulintiisa lo xil saaray Abii Jahal binu Hishaam, Xakam ibnu Abil Caas, Cuqba ibnu abii Muceyd, Samca ibnu Aswad, Ubay ibnu Khalaf, Nadar ibnu Xaarith, Dhuceyma ibnu Cadiyi, Nabih ibnu Xajaja, Munabih ibnu Xajaaj, Ummaya ibnu Khalaf, iyo Abi Lahab, Raggaasi maalinkii oo dhan ayey khiddadii dejinayeen, hawshiina kala habaynayeen waxayna go'aan ku gaareen in caawo markuu Rasuulku SCW gurigiisa tago la hareereeyo, markii habeenka aakhirkiisa la gaarana la miro oo laga tahaluso. Hase yeehsee intay dabinkaas maleegayeen oo ay u qabeen inuu u fudud yahay, Ilaahayna tiisa ayuu watay wuxuuna qur'aankiisa ku yiri isagoo arrinta ka hadlaya:

((XUSUUSO (Rasuulkow) WAQTI KUWII GAALOOBEY AY KU DHAGARSANAYEEN INEY KU DILAAN AMA KU BIXIYAAN AMA KU HAYAAN (KU XIRAAN), WAYNA DHAGRAYEEN, ALLAAHNA WAA DHAGRAYEY, WUXUUNA ALLE AHAADAY INTA WAX DHAGARTA KAN UGU KHEYRKA BADAN)), (Suuratul-Anfaal 30).

Rasuulka SCW Rabbigiis ayaa u waxyoodey makrigoodii waxaana la amray inuu isla

habeenimadiiba baxo oo uu Madiina u hijroodo. Wuxuu Rasuulku SCW isla maalinkiiba u tegey Abuu Bakar Al-sidiiq waqti duhur ah. Markuu albaabka ku garaacay, ayuu Abuubakar loo sheegay oo la yiri "ww Rasuulkii". Abuubakar wuxuu yiri "Rasuulku waqtigan oo kale nooma imaan jirin ee maanta arrin weyn ayaa jira". Markaa Rasuulku SCW gurigii soo galay ayuu Abuubakar ku yiri "saar cidda kula joogta", markaasuu Rasuulku SCW yiri "waxaa la ii idmay inaan baxo". Abuubakar, oo ahaa nin kheyr jecel, ayaa yiri "Rasuulkii Allow waxaan jeclahay saaxiibtinnimadaada ee aan ku raaco" Rasuulkuna SCW wa ka aqbalay.

Rasuulku SCW wuxuu ku laabtay gurigiisii. Markii habeennimadii la gaarey ayey gurigii hareereeyeen raggii rabey iney Nabiga SCW dilaan hase yeeshee Rasuulku SCW markii la gaaray saacadii uu bixi lahaa ayuu Cali ku yiri: "seexo gogosheyda oo huwo maradii aan huwan jirey, waxba kuma yeeli doonaane". Rasuulku SCW ka dib wuxuu soo dhex maray safafkoodii markaasuu ciid madaxa uga wada shubay (raggii), Ilaahna wuu ka indho saabay. Markii Rasuulkku SCW baxay ayaa waxaa iyagii u yimid nin soo arkay Rasuukii SCW wuxuuna ku yiri maxaad meesha ka dhowreysaan?", markaasey yiraahdeen "Maxammed", wuxuu yiri "Maxammed aniguu hadda i daba maray". Gurigii ayey meel daloosha ka fiiriyeen oo yiraahdeen "waa kaa weli hurda". Habeenkii oo dhan ayey Cali dusha ka ilaashanayeen, markii la gaaray waqtigii ay qorshohooda fulin lahaayeen ayey arkeen in ninka meesha jiifaa uu yahay Cali binu Abii-dhaalib> Cali ayey markaa xirxireen oo bugabugeeyeen oo dheheen "sheeg Maxammed" hase yeeshee Cali wuxuu yiri "anigu arrinkaas waxba kalama socdo".

Rasuulku SCW markuu iyagii dhaafay wuxuu tegey gurigii Abuubakar oo ay halkaas iska sii raaceen waxay ka bexeen irriddii dambe. Uma aysan bixin dhinicii Madiina ee waxay u bexeen dhinicii Yaman illaa ay ka tageen buurta la yiraahdo Qaaru Tawr oo Makka u jirta 3 km, halkaas oo ay ka galeen god. Markii ay godka gelayeen ayaa Abuubakr yiri "aniga ayaa ku hormaraya" isagoo uga baqaya Rasuulka SCW inuu godka bahal ka qaniino. Waxay qorsheysteen iney godkaa ku jiraan 3 maalmood inta qureysh baadi doonkeedu uu ka dhammaanay. Waxaa kale oo heegan la geliyey qoyskii Abuubakar. Cabdullaahi binu Abuu bakar (wiilkii Abuubakar) waxaa loo xilsaaray inuu maalin oo dhan qureysh ku dhex jiro, habeenkiina uu godka ugu yimaaddo Rasuulka SCW iyo aabihiis oo uu u soo sheego wixii warar ah ee yaalla Makka iyo wixii go'aan ah ee odeyaashii qureysheed ay qaataan. Asmaa' bintu Abuubakar (gabadhii Abuubakar) waxay iyana u keeni jirtey raashinka habeenkii. Caamir ibnu Suheyr oo isna ahaa addoonkii Abuubakar, arigana u raaci jirey, waxaa lagu qeybshey inuu ariga ku raaco agagaarka godka si uu habeenkii iyo subaxdiiba u baabi' iyo raadka Cabdullaahi iyo Asmaa'. Sidoo kale Cabdullaahi ibnu abii Ureyq oo ay Abuubakar saaxiibbo ahaayeen, gaalna ahaa wuxuuu Abuubakar u hayey laba neef oo geel ah oo Abuubakar sii iibiyey uguna talo galay inay ku baxaan (isaga iyo Rasuulka SCW), waxayna ku ballameen saddex beri markey godka ku jiraan inuu u keeno, (labada neef) ninkaasna kalsooni ayaa lagu qabay.

Qureysh markay ogaatay in Nabiga SCW iyo Abuubakar ka fakadeen waxay isla markiiba tageen gurigii Abuubakar, waxaana albaabkii ka furay Asmaa' Abuubakr. Abii Jahal ayaa Asmaa' weydiiyey oo ku yiri "xaggee aabbahaa aadey" iyana waxay ugu jawaabtey "ma aqaan meel uu aadey", Dharbaaxo ayuu markaa dhabanka ku fujiyey. Ka dibna waxaa ciidan loo diray dhinicii Madiina, markii laga soo waayeyna waxaa waddooyinka Makka ka baxa iyo meel walba loo diray ciidamo ayey waxay yimaaddeen godkii ay Rasuulka SCW iyo Abuubakar ku jireen hase yeeshee ma aysan arag. Markay tageen ayaa Abuubakar wuxuu Rasuulka SCW ku yiri "Rasuulkii Allow haddii mid ka mid ahi uu lugihiisa fiirin lahaa wuu na arki lahaa". Rasuulka SCW oo Rabbigiis kalsooni dhab ah ku qabay wuxuu ugu jawaabay Abuubakar "waa maxay malahaagu labo Ilaahay saddexeeyo". Halkaas waxaad ka arkaysaa in Rasuulka SCW oo nimankii intaa raadinayey ay dushiisa taagan yihiin uusan haddana kala jeclayn oo uu Rabbigiis tala saartay, waana kaas tawakulka saxa ah, markuu asbaabtii oo dhan la yimid ayuu Rabbigiis talo saartay.

Markii ay dhammaatay muddadii saddexda beri ahayd oo ay ugu talo galeen inay godka ku jiraan ayaa Cabdullaahi binu Ureyq keenay labadii neef oo geela ahaa oo ay ku bixi lahaayeen. Abuubakar ayaa Rasuulka SCW siiyey labada neef kii wanaagsanaa, markaasaa Rasuulku yiri "qiimihiisa ayaan kuu celinayaa oo aan ku qaadanayaa", Abuubakarna arrintaas wuu diiday, hase ahaatee Rasuulku SCW wa ku adkaystay go'aankiisa isagoo laga yaabo inuu rabay kheyrkaas iyo ajarkaas hijrada inuu ku maro wax uu leeyahay. Asmaa' bintu Abuubakar waxay iyaduna keentay jiscinkii waddada lagu mari lahaa hase yeeshee waxay soo illowday xariggii lagu rari lahaa alaabta markaasay boqonkeedii dhexda ugu xirnaa laba u kala jeexday oo midna siisay midna la hartay. Sidaa dardeed Asmaa' waxaa lagu naaneysi jirey laba boqonley.

Dabadeed Rasuulka SCW iyo Abuubakar way baxeen iyadoo uu la socdo Cabdullaahi ibnu Ureyq oo ahaa ninkii labada neef oo geela haa keenay, ahaana nin dhulyaqaan ah, safarkana hogaaminayey, wuxuuna ratiga la fangashanaa (lasaarnaa) Abuubakar. Wuxuu ka bixiyey meel aan la marin oo dhinacii koonfureed ah, ka dibna hoos iyo dhinaca bari oo badda ah ayey mareen. Abuubakar maaddaama uu ahaa nin aad loo yaqaan oo ummad badani garanaysey markii la weydiiyo oo lagu yiraahdo "waa kuma ninkan kula socda?" wuxuu ku jawaabayey "waddaduu igu hanuuninayaa" isagoo ula jeedda waddada xaqa ah ayuu igu hanuuninayaa.

Nimankii reer Makka markay mel walba ka raadiyeen Rasuulka SCW iyo Abuubakar oo ay 3 maalmood baadi goob iyo orod ku jireen oo ay ka quusteen ayey waxay bixiyeen ogeysiis ay u direen beled iyo baadiyaba oo ay ku leeyihiin "ninkii Maxammed ama saaxiibkii Abuubakar midkood nolol ama geeri ku keena wuxuu leeyahay boqol halaad". Reer baadiyihii oo ahaa dad aad u xoolo jecel waxaa galay hunguri iyagoo u hanqal taagaya geelaas tirada badan, nin walbana dhinaciisa ayuu u orday. Muddo saddex maalmood ah markay Rasuulka SCW iyo Abuubakar sii socdeen ayaa ninka la yiraahdo Sureyqa binu Maalik isagoo rag la fadhiya waxaa u yimid nin markaasaa ninkii la weydiiyey oo lagu yiri "ma aragtay nimankaas", maasuu ninkii ku jawaabay "wax ma arag laakiin meel halkaas ah waxaa iiga muuqanayey bidhaan dhowr qof oo wax saaran ah". Sureyqa markuu hadalkaas maqlay dhareerkii ayaa ka daatay isagoo rajaynaya in ay boqolkii halaad u soo gacan galeen, wuuna fahmay in ay raggaas la tilmaamayo yihiin Rasuulka SCW iyo Abuubakar. Sidaa darteed wuxuu sameeyey khiddaad uu ku rabo in raggaa meesha fadhiya aysan arrinta fahmin si aysan geela ula qaybsan, wuxuuna yiri "war aamus waxaad aragtay waa nimankii reer hebel oo geelu ka baxsaday oo halkaa marayaye'. Halkaas arrintii looga aamusay oo waxaa loo qaatay in Sureyqa arrintiisu dhab tahay.

Sureyqa markii muddo meeshii la fadhiyey oo arrintii la hilmaamay ayuu wuxuu yiri "intaan kacay oo guriga galay ayaan gabar la hadlay oo ku iri "faraskeyga gadaal iiga bixi oo buurtaa gadaasheeda ii gee", aniguna intaan labistay oo hubkeygii qaatay baan dhuumasho ahaan faraskii ugu tegey, dabadeedna waxaan ka daba tegey Rasuulka iyo Raggii la socday. Markaan u dhowahay ayaan qori tuurtay, markaasaa waxaa iii soo baxay kii aan nebcaa oo ah inaanan wanaag ka helayn (oo aan ku khasaarayo), aniguse kama yeelin arrintaa oo hore ayaan u sii socday. Markaan ku dhawaaday ayuu faraskii cagaha dhulka si fiican ula galay, qaacna ka baxay meeshii, markaasaa waxaa ii caddaatay in Maxammed aanan waxba gaarsiin karin uuna guuleysan doono sidaa darteed intaan qeyliyey ayaan ku iri 'ammaan ayaad iga helaysaan waana idin nabad gelinayaa ee Maxammedow ii qor warqad amaan ah si haddii aad berri wax qabsato oo aad guuleysato aan u heysto'. Rasuulku SCW wuxuu amray Caamir ibnu Fuhayr in uu waraaqadda u qoro. Suraaqa ayaa markaa hadlay oo ku yiri Rasuulka SCW "maxaad iiga baahan tihiin cunto iyo wax walba wan hayaaye', markaas ayaa lagu yiri "waxba kaagama baahnin ee wixii aad aragto naga jeedi" "waa yahay' ayuu isna ku jawaabay, dabadeedna markuu laabtay cidduu arko wuxuu ku oranayey "dhinacaa anigaa soo maray oo cidi adinkama jirto".

Rasuulku SCW iyo raggii la socday waxay gaareen Quba oo xoogaa ka baxsan Madiina.

Waqtigaasi wuxuu ahaa maalin Isniin ah 8dii Rabbiicul-awal sannadkii 1aad ee hijriga.

Dadkii muslimiinta ahaa ee Madiina joogey oo isugu jirey muhaajiriintii Makka ka timid iyo Ansaartii degganeyd Madiina markay maqleen in Rasuulu SCW ka soo baxay Makka ayey heegaan galeen oo maalin walba waxay tegi jireen duleedka Madiina iyagoo fiirinaya wax soo socda. Sidey sidaa u ahaayeen ayey maalinkii dambe iyagoo sidii u sugaya markay qorraxdii ku kululaatay meeshii ka tageen, markii ay tageen ayaa waxaa Rasuulka SCW arkay nin yahuudi ah markaasuu aad u dhawaaqay oo yiri "waxaad jecleydeen oo aad suggeyseen ayaa yimid". Muslimiintii ayaa soo firxaday iyagoo hubkoodii wata oo takbiirsanaya Rasuuulkana SCW soo dhoweynaya. Dabadeedna hareeraha ayey ka galeen. Rasuulka SCW wuxuu ku degey reer bini Camar bini Cawf Xaafadooda, gaar ahaan wuxuu ku sii degay ninka lay yiraahdo Kaltuum ibnu Hadiyi. Dad badan oo muslimiinta reer Madiina ka mid ahaa ma aysan kala garaneyn Rasuula SCW iyo Abuubakar hase yeeshee markii dambe ayey ogaadeen. Ka dib Rasuulku SCW waa fadhiistay, Abuubakar waa istaagey isagoo dadkii soo dhoweynaya. Intii Rasuulku SCW meesha joogey waxaa Makka ka yimid Cali binu Abii-dhaalib oo soo dhameeyey hawshii uu Rasuulu SCW u xilsaaray iyo ammaannadii uu uga soo tegey.

Rasuulku SCW wuxu Quba joogey dhowr maalmood, wuxuuna ka dhisay masaajidka la yiraahdo Masjidu Quba. Ka dibna wuxuu Rasuulku SCW ka tegey Quba maalin jimce ah oo uu Madiina aaday isagoo ay muslimiintii dhinacyada ka socdaan. Markaas. Maruu sii maro qabiil walba oo Ansaar ka mid ahna waxay lahaayeen "annaga nagu soo deg" laakiin Rasuulku SCW wuxuu lahaa 'hashaani way amran tahay meeshii ay fariisato ayaan ku degayaa". Waxay ugu dambayntii hashii fariisatay oo uu ku degay meesha masaajidkiisa uu ka dhisay oo ay degganaayeen reer bini Cabdinajaar oo Ansaar ka mid ahaa, Nabiga aabbihiisna reer abti u ahaa. Gaar ahaan wuxuu ku sii degay guriga ninka la yiraahdo Abaa Ayuub Al-ansaari.

Waxaa iyaguna woo hijrooday oo waqtigaas Madiina yimid xaaskii Rasuulka SCW Sawda bintu Samca iyo laba gabdhood oo uu dhalay oo kala ahaa Faadumo iyo Ummu Kaltuum, waxaa lake oo la socday Usaama binu Seyd iyo hooyadiis Ummu Ayman iyo qoyskii reer Abuubakar oo ay Caa'isha ku jirtey.

Caa'isha waxay tiri "markii aan Madiina imid ayaa waxaan ugu imid aabbahay iyo Bilaal oo qandhadii Madiina ku dhacday markaasaan Abuubakar ku iri 'aabbe sidee tahay' isagoo xoogaa qandhadu deysey oo leh "qof walba wuxuu ku dhex waabariisanayaa ehelkiisa isagoo ay geeridu uga dhowdahay kabihiisa suunkooda'. Bilaal ayaan isna ku iri "sidee tahay Bilaal" isagoo isna tirinaya beyt yar oo tilmaamaya u hiloobidda iyo jaceylka Makka. Rasuulka ayaan u tegey oo u sheegay hadalladoodii, markaasuu Rasuulku SCW yiri "Ilaahow Madiina na jecleysii sidaad Makka noo jecleysiisey ama si ka daran , Ilaahow Madiina caafimaadi oo barakee saaceeda iyo mudkeeda, kana rar xanuunka iyo qandhada oo u rar Juxfa". Ilaahay ducadaa Rasuulka SCW wuu ka aqbalay waxayna Madiina noqotay Meel ay aad u jecel yihiin, saxadeeduna fiican tahay.

Sidoo kale Rasuulku SCW isagoo asxaabtiisa ku sabir siinaya daltabyada Madiina waxa uu yiri: "Qofkii ummaddayda kamid ah oo ku sabra Cudurka iyo dhibka Madiino waxa aan maalinka qiyaamaha u noqonayaa shafiic iyo markhaati".

Sidoo kale Rasuulku SCW isagoo Madiina u ducaynaya waxa u yiri: "Allahayow noo barakee magaaladayadan, miraheeda, mudkeeda, ikyo saaceeda, barako ay lasocoto, Allahayow Ibraahiim waxa uu ahaa addoonkaagii , Nabigaagii iyo khaliiilkaagii, anna waxaan ahay addoonkaagii iyo nabigaagii, wuxuuna (ibraahiim) kuu basryo weydiiyey Makka, anna waxaan kuu baryayaa Madiina siduu Makka kuugu baryo weydiyey iyo si la mid ah.

Rasuulka SCW iyo asxaabtiisii waxay heleen dhul cusub oo ay diintoodii iyo dacwadoodii ka

faafin karaan, joogitaankiisana ay xor u yihiin. Magaalada Madiina waxay noqotay magaalo islaam, in kastoo dadkii deggenaa aysan wada ahayn muslimiin, waxayna ka koobnaayeen 3 qaybood oo kala ahaa:

1) Muslimiinta oo isugu jirey muhaajiriin Makka ka yimid iyo Ansaar oo Madiina degganayd oo laba qabiil ka koobnaa lana kala oran jirey Awas iyo Khasraj, hase yeeshee Rasuulku SCW uu u bixiyey Ansaar.

2) Mushirikiintii ka hartay Ansaar

3) Yahuud oo ka koobnayd saddex qabiil oo la kala oran jirey Banuu Qeynuqaac, banuu Nadiir iyo banuu Qureyda.

HIJRADII RASUULKA SCW

Markuu Rasuulku SCW amray in loo hijroodo Madiina oo noqotay daartii islaamka loona hijrooday oo asxaabtii qof kasta siduu ku bixi lahaa ku baxay, loogana dhammaaday Makka laba bilood gudohood, laga soo bilaabo beycadii Caqaba 2aad oo ahayd bishii Dul-xija sannadkii 13aad ee soo diriddii Rasuulka SCW ilaa bishii Safar sannadkii 14aad ee soo diriddii Rasuulka SCW, ahaydna bishii 2aad ee sannadkii 1aad ee hijriga, uusanna Rasuulku SCW weli hijroon isaga, Abuubakar iyo Cali, ayaa odeyaashii qureysheed waxay ogaadeen in asxaabtii Rasuulka SCW ka wada bexeen Makka oo Madiina isku ururSadeen, reer Madiinana ay soo dhoweeyeen oo ay raaceen Rasuulka SCW, isagana la filayo inuu u tago, haddii uu u tagana ay arrintu khatar ku sugan tahay, oo ay suurtowdo in dad badani raacaan oo uu xoogeysto ka dibna uu Makka ku soo duulo, waxay markaa qabteen shir ay ka soo qayb galeen odeyaashii qabiillada qureysh oo dhan, reer binu Cabdimanaaf oo Rasuulku SCW ka dhashay maahane. Shirkaas, oo ajendahalagu falanqeynayey ahaa go'aankii kama dambaysta ahaa ee laga qaadam lahaa Rasuulka SCW, waxa la qabtay 26kii Safar sannadki 1aad ee hijriga (sannadkii 14aad ee soo diridda Rasuulka SCW).

Waxaa shirkaas lagu qabtay daartii la oran jirey Daaru-Nadwa (ooahayd gurigii baarlamaanka qureysh ku shiri jirey). Hoggaamiyayaashii Qureysheed ee halkaa isugu tegey waxaa ka mid ahaa: Abii Jahal ibnu Hishaam Jubey Ibnu Mudhcim, Ducayna ibnu Cadiyi, Xaarith Ibnu Caamir, Sheyba ibnu abii Rabbiica, Cutba ibnu abii Rabbiica, Abuu Sufyaan ibnu Xarbin, Ubay ibnu Khalaf, iyo Ummaya ibnu Khalaf, Nadar Ibnu Xaarith, Abul Bakhtari Binu Hishaam, Samca binu aswad, Xakiim Ibnu Xisaam, Nabiith Ibnu Xajaj, iyo walaalkiis Munabih Ibnu Xajaaj.

Markii shirkii waqtigiisii la gaaray oo uu bilaabmay ayaa waxaa soo galay sheydaan iska soo dhigay nin oday ah. Markaas ayay dheheen "waa kuma ninkaan odeyga ha?", markaasuu intuu hadlay yiri "waxaan ahay nin oday ah oo dhinaca Najdi ka yimid, waxaanna maqlay shirka iyo meesha aad ku ballaanteen, waxaan ahay nin ra'yi u saaxiib ah, marka waan idin dhegaysanayaa waxaa la arkaa inaan ra'yi idinku biiriyo". "waa yahay" ayaa loogu jawaabay.

Waxaa bilaabmay shirkii oo waxaa la yiri "waxaanu maanta isug nimid mushkilaaddaan khatarta ah ee uu wado Maxammed, welina dhexdeenna ayuu jooga, haddaba sidee baanu ka yeelnaa?". Waxaa hadlay nin la oran jirey Abuu Aswad wuxuuna yiri "aan musaafirinno oo ka fageyno waddankeenna, ka dibna aan isku duubnideenna iyo wada jirkeenna xojinno mar hadduu tafaraaruqiisu naga baxo". Odeygii lahaa Najdi ayaan ka imid (sheydaan) ayaa hadlay oo yiri "maya, Ilaah baan ku dhaartaye miyeydaan arag ninka faseexaddiisa, codkarnimadiisa iyo sida hadalkiisa loola dhacayo. Ma aamin baad ka noqoteen in qabiil ka mid ah qabiillada carbeed uu raaco oo uu hadhow idinku soo duulo, beledkiinnana qabsado. Ra'yi kale keena kaasi ra'yi maahane". Waxaa ku xigsaday oo hadlay Abii Bakhtari wuxuuna yiri: "waa inaanu xabsi ku ridnaa oo uu halkaas noogu jiraa ilaa uu ka

dhinto. Sidii gabayahanadii isaga ka horreeyeyba ay u dhinteen buu u dhiman doonaaye". Odeygii (sheydaan) ayaa ka daba hadlay oo yiri "haddaad xabsi gelisaan sow nimankii uu ka dhashay ee reer Cabdimanaaf, oo awalba difaaci jirey, xanaaqi mayaan lana safan mayaan wiilkooda oo aad xirteen". Dabadeed waxaa hadlay mujrimkii ugu weynaa Abii Jahal oo yiri "anigu waxaan hayaa ra'yi cid soo jeedisey aysan idinku jirin". Markaasaa la yiri "muxuu yahay ra'yigaasi Abul-xakam?", wuxuu yiri "qabiil kasta oo ka mid ah qabiillada aan meesha ku fadhino waa inuu soo saaraa wiil dhallinyaro ah oo xoog leh geesina ah, ka dibna wiilashaasi hal mar ha ku kulmiyeen seefaha (maxamed) si aan dilkiisa hal qolo loogu raacan, ciddiisuna lama dagaallami karto intaas oo qabiil oo kala duwan, magtiisana waynu bixineynaa waana ka istareexaynaa'. Odeygii (shaydaan) ayaa hadlay oo yiri "ra'yiga saxa ihi waa kaas oo aan la dhacay waana in la fuliyaa". Ugu dambasyntii waxaa la isku raacay oo la go'aansaday ra'yigaas, waxaana fulintiisa lo xil saaray Abii Jahal binu Hishaam, Xakam ibnu Abil Caas, Cuqba ibnu abii Muceyd, Samca ibnu Aswad, Ubay ibnu Khalaf, Nadar ibnu Xaarith, Dhuceyma ibnu Cadiyi, Nabih ibnu Xajaja, Munabih ibnu Xajaaj, Ummaya ibnu Khalaf, iyo Abi Lahab, Raggaasi maalinkii oo dhan ayey khiddadii dejinayeen, hawshiina kala habaynayeen waxayna go'aan ku gaareen in caawo markuu Rasuulku SCW gurigiisa tago la hareereeyo, markii habeenka aakhirkiisa la gaarana la miro oo laga tahaluso. Hase yeehsee intay dabinkaas maleegayeen oo ay u qabeen inuu u fudud yahay, Ilaahayna tiisa ayuu watay wuxuuna qur'aankiisa ku yiri isagoo arrinta ka hadlaya:

((XUSUUSO (Rasuulkow) WAQTI KUWII GAALOOBEY AY KU DHAGARSANAYEEN INEY KU DILAAN AMA KU BIXIYAAN AMA KU HAYAAN (KU XIRAAN), WAYNA DHAGRAYEEN, ALLAAHNA WAA DHAGRAYEY, WUXUUNA ALLE AHAADAY INTA WAX DHAGARTA KAN UGU KHEYRKA BADAN)), (Suuratul-Anfaal 30).

Rasuulka SCW Rabbigiis ayaa u waxyoodey makrigoodii waxaana la amray inuu isla habeenimadiiba baxo oo uu Madiina u hijroodo. Wuxuu Rasuulku SCW isla maalinkiiba u tegey Abuu Bakar Al-sidiiq waqti duhur ah. Markuu albaabka ku garaacay, ayuu Abuubakar loo sheegay oo la yiri "ww Rasuulkii". Abuubakar wuxuu yiri "Rasuulku waqtigan oo kale nooma imaan jirin ee maanta arrin weyn ayaa jira". Markaa Rasuulku SCW gurigii soo galay ayuu Abuubakar ku yiri "saar cidda kula joogta", markaasuu Rasuulku SCW yiri "waxaa la ii idmay inaan baxo". Abuubakar, oo ahaa nin kheyr jecel, ayaa yiri "Rasuulkii Allow waxaan jeclahay saaxiibtinnimadaada ee aan ku raaco" Rasuulkuna SCW wa ka aqbalay.

Rasuulku SCW wuxuu ku laabtay gurigiisii. Markii habeennimadii la gaarey ayey gurigii hareereeyeen raggii rabey iney Nabiga SCW dilaan hase yeeshee Rasuulku SCW markii la gaaray saacadii uu bixi lahaa ayuu Cali ku yiri: "seexo gogosheyda oo huwo maradii aan huwan jirey, waxba kuma yeeli doonaane". Rasuulku SCW ka dib wuxuu soo dhex maray safafkoodii markaasuu ciid madaxa uga wada shubay (raggii), Ilaahna wuu ka indho saabay. Markii Rasuulkku SCW baxay ayaa waxaa iyagii u yimid nin soo arkay Rasuukii SCW wuxuuna ku yiri maxaad meesha ka dhowreysaan?", markaasey yiraahdeen "Maxammed", wuxuu yiri "Maxammed aniguu hadda i daba maray". Gurigii ayey meel daloosha ka fiiriyeen oo yiraahdeen "waa kaa weli hurda". Habeenkii oo dhan ayey Cali dusha ka ilaashanayeen, markii la gaaray waqtigii ay qorshohooda fulin lahaayeen ayey arkeen in ninka meesha jiifaa uu yahay Cali binu Abii-dhaalib> Cali ayey markaa xirxireen oo bugabugeeyeen oo dheheen "sheeg Maxammed" hase yeeshee Cali wuxuu yiri "anigu arrinkaas waxba kalama socdo".

Rasuulku SCW markuu iyagii dhaafay wuxuu tegey gurigii Abuubakar oo ay halkaas iska sii raaceen waxay ka bexeen irriddii dambe. Uma aysan bixin dhinicii Madiina ee waxay u bexeen dhinicii Yaman illaa ay ka tageen buurta la yiraahdo Qaaru Tawr oo Makka u jirta 3 km, halkaas oo ay ka galeen god. Markii ay godka gelayeen ayaa Abuubakr yiri "aniga ayaa ku hormaraya" isagoo uga baqaya Rasuulka SCW inuu godka bahal ka qaniino. Waxay qorsheysteen iney godkaa ku jiraan 3 maalmood inta qureysh baadi doonkeedu uu

ka dhammaanay. Waxaa kale oo heegan la geliyey qoyskii Abuubakar. Cabdullaahi binu Abuu bakar (wiilkii Abuubakar) waxaa loo xilsaaray inuu maalin oo dhan qureysh ku dhex jiro, habeenkiina uu godka ugu yimaaddo Rasuulka SCW iyo aabihiis oo uu u soo sheego wixii warar ah ee yaalla Makka iyo wixii go'aan ah ee odeyaashii qureysheed ay qaataan. Asmaa' bintu Abuubakar (gabadhii Abuubakar) waxay iyana u keeni jirtey raashinka habeenkii. Caamir ibnu Suheyr oo isna ahaa addoonkii Abuubakar, arigana u raaci jirey, waxaa lagu qeybshey inuu ariga ku raaco agagaarka godka si uu habeenkii iyo subaxdiiba u baabi' iyo raadka Cabdullaahi iyo Asmaa'. Sidoo kale Cabdullaahi ibnu abii Ureyq oo ay Abuubakar saaxiibbo ahaayeen, gaalna ahaa wuxuuu Abuubakar u hayey laba neef oo geel ah oo Abuubakar sii iibiyey uguna talo galay inay ku baxaan (isaga iyo Rasuulka SCW), waxayna ku ballameen saddex beri markey godka ku jiraan inuu u keeno, (labada neef) ninkaasna kalsooni ayaa lagu qabay.

Qureysh markay ogaatay in Nabiga SCW iyo Abuubakar ka fakadeen waxay isla markiiba tageen gurigii Abuubakar, waxaana albaabkii ka furay Asmaa' Abuubakr. Abii Jahal ayaa Asmaa' weydiiyey oo ku yiri "xaggee aabbahaa aadey" iyana waxay ugu jawaabtey "ma aqaan meel uu aadey", Dharbaaxo ayuu markaa dhabanka ku fujiyey. Ka dibna waxaa ciidan loo diray dhinicii Madiina, markii laga soo waayeyna waxaa waddooyinka Makka ka baxa iyo meel walba loo diray ciidamo ayey waxay yimaaddeen godkii ay Rasuulka SCW iyo Abuubakar ku jireen hase yeeshee ma aysan arag. Markay tageen ayaa Abuubakar wuxuu Rasuulka SCW ku yiri "Rasuulkii Allow haddii mid ka mid ahi uu lugihiisa fiirin lahaa wuu na arki lahaa". Rasuulka SCW oo Rabbigiis kalsooni dhab ah ku qabay wuxuu ugu jawaabay Abuubakar "waa maxay malahaagu labo Ilaahay saddexeeyo". Halkaas waxaad ka arkaysaa in Rasuulka SCW oo nimankii intaa raadinayey ay dushiisa taagan yihiin uusan haddana kala jeclayn oo uu Rabbigiis tala saartay, waana kaas tawakulka saxa ah, markuu asbaabtii oo dhan la yimid ayuu Rabbigiis talo saartay.

Markii ay dhammaatay muddadii saddexda beri ahayd oo ay ugu talo galeen inay godka ku jiraan ayaa Cabdullaahi binu Ureyq keenay labadii neef oo geela ahaa oo ay ku bixi lahaayeen. Abuubakar ayaa Rasuulka SCW siiyey labada neef kii wanaagsanaa, markaasaa Rasuulku yiri "qiimihiisa ayaan kuu celinayaa oo aan ku qaadanayaa", Abuubakarna arrintaas wuu diiday, hase ahaatee Rasuulku SCW wa ku adkaystay go'aankiisa isagoo laga yaabo inuu rabay kheyrkaas iyo ajarkaas hijrada inuu ku maro wax uu leeyahay. Asmaa' bintu Abuubakar waxay iyaduna keentay jiscinkii waddada lagu mari lahaa hase yeeshee waxay soo illowday xariggii lagu rari lahaa alaabta markaasay boqonkeedii dhexda ugu xirnaa laba u kala jeexday oo midna siisay midna la hartay. Sidaa dardeed Asmaa' waxaa lagu naaneysi jirey laba boqonley.

Dabadeed Rasuulka SCW iyo Abuubakar way baxeen iyadoo uu la socdo Cabdullaahi ibnu Ureyq oo ahaa ninkii labada neef oo geela haa keenay, ahaana nin dhulyaqaan ah, safarkana hogaaminayey, wuxuuna ratiga la fangashanaa (lasaarnaa) Abuubakar. Wuxuu ka bixiyey meel aan la marin oo dhinacii koonfureed ah, ka dibna hoos iyo dhinaca bari oo badda ah ayey mareen. Abuubakar maaddaama uu ahaa nin aad loo yaqaan oo ummad badani garanaysey markii la weydiiyo oo lagu yiraahdo "waa kuma ninkan kula socda?" wuxuu ku jawaabayey "waddaduu igu hanuuninayaa" isagoo ula jeedda waddada xaqa ah ayuu igu hanuuninayaa.

Nimankii reer Makka markay mel walba ka raadiyeen Rasuulka SCW iyo Abuubakar oo ay 3 maalmood baadi goob iyo orod ku jireen oo ay ka quusteen ayey waxay bixiyeen ogeysiis ay u direen beled iyo baadiyaba oo ay ku leeyihiin "ninkii Maxammed ama saaxiibkii Abuubakar midkood nolol ama geeri ku keena wuxuu leeyahay boqol halaad". Reer baadiyihii oo ahaa dad aad u xoolo jecel waxaa galay hunguri iyagoo u hanqal taagaya geelaas tirada badan, nin walbana dhinaciisa ayuu u orday. Muddo saddex maalmood ah markay Rasuulka SCW iyo Abuubakar sii socdeen ayaa ninka la yiraahdo Sureyqa binu Maalik isagoo rag la fadhiya waxaa u yimid nin markaasaa ninkii la weydiiyey oo lagu yiri "ma aragtay nimankaas", maasuu ninkii ku jawaabay "wax ma arag laakiin meel halkaas

ah waxaa iiga muuqanayey bidhaan dhowr qof oo wax saaran ah". Sureyqa markuu hadalkaas maqlay dhareerkii ayaa ka daatay isagoo rajaynaya in ay boqolkii halaad u soo gacan galeen, wuuna fahmay in ay raggaas la tilmaamayo yihiin Rasuulka SCW iyo Abuubakar. Sidaa darteed wuxuu sameeyey khiddaad uu ku rabo in raggaa meesha fadhiya aysan arrinta fahmin si aysan geela ula qaybsan, wuxuuna yiri "war aamus waxaad aragtay waa nimankii reer hebel oo geelu ka baxsaday oo halkaa marayaye'. Halkaas arrintii looga aamusay oo waxaa loo qaatay in Sureyqa arrintiisu dhab tahay.

Sureyqa markii muddo meeshii la fadhiyey oo arrintii la hilmaamay ayuu wuxuu yiri "intaan kacay oo guriga galay ayaan gabar la hadlay oo ku iri "faraskeyga gadaal iiga bixi oo buurtaa gadaasheeda ii gee", aniguna intaan labistay oo hubkeygii qaatay baan dhuumasho ahaan faraskii ugu tegey, dabadeedna waxaan ka daba tegey Rasuulka iyo Raggii la socday. Markaan u dhowahay ayaan qori tuurtay, markaasaa waxaa iii soo baxay kii aan nebcaa oo ah inaanan wanaag ka helayn (oo aan ku khasaarayo), aniguse kama yeelin arrintaa oo hore ayaan u sii socday. Markaan ku dhawaaday ayuu faraskii cagaha dhulka si fiican ula galay, qaacna ka baxay meeshii, markaasaa waxaa ii caddaatay in Maxammed aanan waxba gaarsiin karin uuna guuleysan doono sidaa darteed intaan qeyliyey ayaan ku iri 'ammaan ayaad iga helaysaan waana idin nabad gelinayaa ee Maxammedow ii qor warqad amaan ah si haddii aad berri wax qabsato oo aad guuleysato aan u heysto'. Rasuulku SCW wuxuu amray Caamir ibnu Fuhayr in uu waraaqadda u qoro. Suraaqa ayaa markaa hadlay oo ku yiri Rasuulka SCW "maxaad iiga baahan tihiin cunto iyo wax walba wan hayaaye', markaas ayaa lagu yiri "waxba kaagama baahnin ee wixii aad aragto naga jeedi" "waa yahay' ayuu isna ku jawaabay, dabadeedna markuu laabtay cidduu arko wuxuu ku oranayey "dhinacaa anigaa soo maray oo cidi adinkama jirto".

Rasuulku SCW iyo raggii la socday waxay gaareen Quba oo xoogaa ka baxsan Madiina. Waqtigaasi wuxuu ahaa maalin Isniin ah 8dii Rabbiicul-awal sannadkii 1aad ee hijriga.

Dadkii muslimiinta ahaa ee Madiina joogey oo isugu jirey muhaajiriintii Makka ka timid iyo Ansaartii degganeyd Madiina markay maqleen in Rasuulu SCW ka soo baxay Makka ayey heegaan galeen oo maalin walba waxay tegi jireen duleedka Madiina iyagoo fiirinaya wax soo socda. Sidey sidaa u ahaayeen ayey maalinkii dambe iyagoo sidii u sugaya markay qorraxdii ku kululaatay meeshii ka tageen, markii ay tageen ayaa waxaa Rasuulka SCW arkay nin yahuudi ah markaasuu aad u dhawaaqay oo yiri "waxaad jecleydeen oo aad suggeyseen ayaa yimid". Muslimiintii ayaa soo firxaday iyagoo hubkoodii wata oo takbiirsanaya Rasuuulkana SCW soo dhoweynaya. Dabadeedna hareeraha ayey ka galeen. Rasuulka SCW wuxuu ku degey reer bini Camar bini Cawf Xaafadooda, gaar ahaan wuxuu ku sii degay ninka lay yiraahdo Kaltuum ibnu Hadiyi. Dad badan oo muslimiinta reer Madiina ka mid ahaa ma aysan kala garaneyn Rasuula SCW iyo Abuubakar hase yeeshee markii dambe ayey ogaadeen. Ka dib Rasuulku SCW waa fadhiistay, Abuubakar waa istaagey isagoo dadkii soo dhoweynaya. Intii Rasuulku SCW meesha joogey waxaa Makka ka yimid Cali binu Abii-dhaalib oo soo dhameeyey hawshii uu Rasuulu SCW u xilsaaray iyo ammaannadii uu uga soo tegey.

Rasuulku SCW wuxu Quba joogey dhowr maalmood, wuxuuna ka dhisay masaajidka la yiraahdo Masjidu Quba. Ka dibna wuxuu Rasuulku SCW ka tegey Quba maalin jimce ah oo uu Madiina aaday isagoo ay muslimiintii dhinacyada ka socdaan. Markaas. Maruu sii maro qabiil walba oo Ansaar ka mid ahna waxay lahaayeen "annaga nagu soo deg" laakiin Rasuulku SCW wuxuu lahaa 'hashaani way amran tahay meeshii ay fariisato ayaan ku degayaa". Waxay ugu dambayntii hashii fariisatay oo uu ku degay meesha masaajidkiisa uu ka dhisay oo ay degganaayeen reer bini Cabdinajaar oo Ansaar ka mid ahaa, Nabiga aabbihiisna reer abti u ahaa. Gaar ahaan wuxuu ku sii degay guriga ninka la yiraahdo Abaa Ayuub Al-ansaari.

Waxaa iyaguna woo hijrooday oo waqtigaas Madiina yimid xaaskii Rasuulka SCW Sawda bintu Samca iyo laba gabdhood oo uu dhalay oo kala ahaa Faadumo iyo Ummu Kaltuum,

waxaa lake oo la socday Usaama binu Seyd iyo hooyadiis Ummu Ayman iyo qoyskii reer Abuubakar oo ay Caa'isha ku jirtey.

Caa'isha waxay tiri "markii aan Madiina imid ayaa waxaan ugu imid aabbahay iyo Bilaal oo qandhadii Madiina ku dhacday markaasaan Abuubakar ku iri 'aabbe sidee tahay' isagoo xoogaa qandhadu deysey oo leh "qof walba wuxuu ku dhex waabariisanayaa ehelkiisa isagoo ay geeridu uga dhowdahay kabihiisa suunkooda'. Bilaal ayaan isna ku iri "sidee tahay Bilaal" isagoo isna tirinaya beyt yar oo tilmaamaya u hiloobidda iyo jaceylka Makka. Rasuulka ayaan u tegey oo u sheegay hadalladoodii, markaasuu Rasuulku SCW yiri "Ilaahow Madiina na jecleysii sidaad Makka noo jecleysiisey ama si ka daran , Ilaahow Madiina caafimaadi oo barakee saaceeda iyo mudkeeda, kana rar xanuunka iyo qandhada oo u rar Juxfa". Ilaahay ducadaa Rasuulka SCW wuu ka aqbalay waxayna Madiina noqotay Meel ay aad u jecel yihiin, saxadeeduna fiican tahay.

Sidoo kale Rasuulku SCW isagoo asxaabtiisa ku sabir siinaya daltabyada Madiina waxa uu yiri: "Qofkii ummaddayda kamid ah oo ku sabra Cudurka iyo dhibka Madiino waxa aan maalinka qiyaamaha u noqonayaa shafiic iyo markhaati".

Sidoo kale Rasuulku SCW isagoo Madiina u ducaynaya waxa u yiri: "Allahayow noo barakee magaaladayadan, miraheeda, mudkeeda, ikyo saaceeda, barako ay lasocoto, Allahayow Ibraahiim waxa uu ahaa addoonkaagii , Nabigaagii iyo khaliiilkaagii, anna waxaan ahay addoonkaagii iyo nabigaagii, wuxuuna (ibraahiim) kuu basryo weydiiyey Makka, anna waxaan kuu baryayaa Madiina siduu Makka kuugu baryo weydiyey iyo si la mid ah.

Rasuulka SCW iyo asxaabtiisii waxay heleen dhul cusub oo ay diintoodii iyo dacwadoodii ka faafin karaan, joogitaankiisana ay xor u yihiin. Magaalada Madiina waxay noqotay magaalo islaam, in kastoo dadkii deggenaa aysan wada ahayn muslimiin, waxayna ka koobnaayeen 3 qaybood oo kala ahaa:

1) Muslimiinta oo isugu jirey muhaajiriin Makka ka yimid iyo Ansaar oo Madiina degganayd oo laba qabiil ka koobnaa lana kala oran jirey Awas iyo Khasraj, hase yeeshee Rasuulku SCW uu u bixiyey Ansaar.

2) Mushirikiintii ka hartay Ansaar

3) Yahuud oo ka koobnayd saddex qabiil oo la kala oran jirey Banuu Qeynuqaac, banuu Nadiir iyo banuu Qureyda.

WALAALEYNTII MUHAAJIRIIN IYO ANSAAR

Asalaamu Caleykum W.W.

Rasuulka SCW markuu madiina yimid waxa uu ka aasaasay dawlad islaam ah wuxuuna isku xiray dadkii muslimiinta ahaa ee madiina deganaa iyo kuwii kasoo hijrooday madiina dibadeeda, isaga oo isugu xiray si macnawi ah iyo si muuqataba. Waxa ay ahayd sida macnawiga ah waxa uu ku booriyey walaaltinimada, wanaaga, is jeclaysiga, is xaq dhawrka, is nabad gelinta iyo mucaamilada wanaagsan oo dhan. Wuxuuna ka reebay xumaan idilkeed. Sida muuqatana waxa ay ahayd muhaajiriin iyo ansaar ayuu labo labo u walaaleeyey si ay isugu xirmaan iskuna kaalmaystaan maxaa yeelay muhaajiriin waxa ay kasoo hijroodeen dhulkoodii, maalkoodii iyo ehelkoodii. Waxayna yimaadeen meel aysan waxba ka garanayn.

Waxayna ahayd sida uu Rasuulka SCW u walaaleyey sidatan:

- 1. Xamsa binu Cabdi Mudhalib iyo Sayd binu Xaarith wuu walaaleeyey.

- 2. Abuu Bakar Sidiiq iyo Khaarij binu Suhayrna wuu walaaleeyeey.
- 3. cumar binu Khadhaab iyo Citbaan binu Maalikna wuu walaaleeyey.
- 4. Abuu Cubayda ibnu Jaraax iyo Sacad binu Maalik wuu walaaleeyey.
- 5. Cabdirahman binu Cowf iyo Sacay binu Rabbiicna wuu walaaleeyey.
- 6. Subayr binu Cawaan iyo Salama ibnu Salaamana wuu walaaleeyey.
- 7. Cusmaan binu Cafaan iyo Aws binu Thaabitna wuu walaaleeyey.
- 8. Dhalxa binu Cubaydillaah iyo Kacab binu Maalikna wuu walaaleeyey.
- 9. Saciid binu Sayd ikyo Ubay binu Kacabna wuu walaaleeyey.
- 10. Muscab binu Cumayr iyo Abii Ayuubna wuu walaaleeyey.
- 11. Abuu Xudayfa binu Cutba iyo Cubaada binu Bishirna wuu walaaleeyey.
- 12. Cammaar binu Yaasir iyo Xudayfa binu Yamaamna wuu walaaleeyey.
- 13. Abuu daraq-Qafaari iyo Mundir binu Camarna wuu walaaleeyey.
- 14. Xaadhib ibnu abii Baltaca iyo Cuwayn binu Saacidana wuu walaaleeyey.
- 15. Salmaanu Faaris ikyo Abuu Dardaana wuu walaaleeyey.

Wuxuu yiri ibnu Isxaaq: "intaan ayaa nalooga magacaabay walaalayntii uu Rasuulku SCW walaaleeyey asxaabtiisa".

Sidaas ayaa Rasuulku SCW u walaaleeyey asxaabtiisii oo isugu xiray, iyaga oo ay ka dhaxayso walaaltinimada guud ee islaamka ayey haddana tani khaas usii kala ahayd oo ay wax wada wadaagayeen ilaa lawaajibiyey in ay is dhaxlaan ka dibna Alle waa joojiyey. Nimankii ansaar ahaa ee madiina deganaa aad ayey usoo dhoweeyeen walaalahoodii muhaajiriin ee usoo hijrooday, wuxuu Bukhaari saxiixiisa ku wariyey in ansar Nabiga SCW ku tiri: "noo qaybi annaga iyo walaalahayo timirta (beeraha)", wuxuu yiri: "may", markaasay dheheen (muhaajiriin): "naga qabta shaqada (beeraha) mirahana waanu idinla wadaagsanaynaa", Ansaarna waa ay yeeshay.

Sidoo kale nimankii ansaar ee lala walaaleeyey muhaajiriin aad ayey usoo dhoweeyeen waxayn diyaar u noqdeen in ay la kala bartaan maalkooda. Ninka layiraahdo Sacad binu Rabbiica oo lala walaaleeyey Cabdirahmaan binu Cowf waxa uu ku yiri Cabdirahmaan: "waxa aan ahay ninka ansaar ugu maal badan, waxaana ka dhigayaa maalkayga labo qaybood (oo waa kala baranaynaa), labo xaasna waan qabaa ee fiiri middii ku cajab galisa iina magacow waan kuu furayaa markay cidada dhamaysatana guurso", wuxuu yiri Cabdiraxmaan: "Allaha kuu barakeeyo xaaskaaga iyo maalkaaga ee i tusi suuqa", suuqii ayuu tusiyey, markaasuu Cabdiraxmaan inta xoogaa subag ah qaatay oo suuqii geeyey ayuu iibiyey dabadeedna waa guursaday.

Haddaba waxa ay arimahaan iyo kuwo kaleba na tusinayaan sida ay ansaar walaalohood muhaajiriin ugu qumeen, wax walbana ay diyaarka ugu ahaayeen. Allena subxaanahu watacaalaa aayado badan ayuuu ku ammaanay.

Sidoo kale Rasuulku SCW waxa uu u qoray asxaabtii heshiis iyo go aamo ay ku socdaan, wuxuuna kadhigay hal ummad, wuxuuna ahaa heshiiskaasi sidatan:

Bismillaahi raxmaani raxiim, tani waa waraaqdii Nabi Maxamed SCW uu u kala qoray muminiinta iyo musliminta reer qureysheed (muhaajiriin) iyo rer yathrib (ansaar).

1. Kuligood waa hal ummad oo dadka kale isaga sokeeya.

2. Muhaajiriinta reer qureysheed sidoodii weeye oo makta way isla bixinaayaan, maxbuuskoodana way soo furanayaan si macruuf ah iyo cadaalad muminiinta dhexdooda.

3. Reer banii Cawf sidoodii weeye oo magta way isla bixinayaan siday hore iskula bixin jireen, qolo walba (oo iyaga kamid ahna) way furanaysaa maxbuuskeeda si wanaagsan iyo cadaalad muminiinta dhexdooda.

4. Reer banii Xaarith sidoodii ayey ahaanayaan oo makta way isla bixinayaan siday awalba iskula bixin jireen, qolo walba (oo iyaga kamid ahna) way furanaysaa maxbuuskeeda si wanaagsan iyo cadaalad muminiinta dhexdooda.

5. Reer banii Saacida sidoodii ayey ahaanayaan oo makta way isla bixinaayaan siday awalba iskula bixin jireen, koox walbana way furanaysaa maxbuuskeeda si wanaagsan iyo cadaalad muminiinta dhexdooda.

6. Reer banii Jasham sidoodii ayey ahaanayaan oo makta way isla bixinayaan siday awalba iskula bixin jireen, koox walbana way furanaysaa maxbuuskeeda si wanaagsan iyo cadaalad muminiinta dhexdooda.

7. Reer banii Najaar sidoodii ayey ahaanayaan oo makta way isla bixinayaan siday awal iskula bixin jireen, koox kastana way furanaysaa maxbuuskeeda si wanaagsan iyo cadaalad muminiinta dhexdooda.

8. Reer banii Caamir binu Cawf sidoodii ayey ahaanayaan oo makta way isla bixinayaan say awalba iskula bixin jireen, koox kastana way furanaysaa maxbuuskeeda si wanaagsan iyo cadaalad muminiinta dhexdooda.

9. Reer banii Nabiit sidoodii ayey ahaannayaan oo makta way isla bixinayaan say awalba iskula bixin jireen, koox kastana way furanaysaa maxbuuskeeda si wanaagsan iyo cadaalad muminiinta dhexdooda.

10. Reer banii Aws sidoodii ayey ahaanayaan oo makta way isla bixinayaan say awalba iskula bixin jireen, koox kastana way furanaysaa maxbuuskeeda si wanaagsan iyo cadaalad muminiinta dhexdooda.

11. Muminiintu waa in ay si wanaagsan uga gudaan qofkii iyaga kamid ah oo qaamaysan oo lasoo furanayo ama diyo laga gudayo.

12. Mumin lama bah wadaagi karo mumin kale bah wadaagi ogolaanshihiisa maahane.

13. Muminiinta mutaqiinta ahi waxa ay isugu tagayaan ciddii iyaga ka mid ah oo xadgudubta ama dalabta dulmi wayn ama dambi ama colaytan ama fasaad muminiinta dhexdooda, dhammaan gacmahoodu qofkaas dushiisay ahaanayaan haba ahaado midkood inankiise.

14. Mumin uma dilo karo mumin kale gaal, uga mana hiillin karo gaal.

15. Heshiiska Alle (ee gaalada lagula jiro) waa hal mid, waxaana wax magan galin kara muminiinta kooda ug hooseeya.

16. Muminiinta qaarkood qaarka kale ayuu gargaare u yahay dadka (kale) kasokow.

17. Qofkii nasoo raaca oo yahuud ah waxa uu leeyahay gargaar iyo gacan qabasho, isaga oo aan ladulminayn lagana hiillinayn.

18. Nabad gelyada muminiintu waa hal mid, dagaalka jihaadka Allena (qof) mumin ihi nabad gelyo gaar ah lama samaysan karo (gaalo) in ay muslimiintu u dhan yihiin oo ay cadaalad tahay maahane.

19. Cid walba (oo muslimiinta kamdi ah) oo nala duullaan gasha qaarkood qaarka kale ayuu cirbinayaa (waa isku mid).

20. Muminiinta qaarka kale ayuu u hiiilinayaa wixii dhigooda ah oo jidka Alle kusoo gaara.

21. Muminiinta Alle ka baqaysa waxay ku sugan yihiin hanuun kan ugu wanaagsan iyo toosnaan.

22. Gaal ma bad baadin karo qureysh nafteeda iyo maalkeeda is kamana hortaagi karo mumin (usocda).

23. Qofkii mumin dila oo ay ku caddaato waa la dilayaa in uu waligii kii la dilay raali noqdo maahane.

24. Xalaal uma aha qof mumin ah oo sugay waxa waraaqadaan ku yaala, Alle iyo aakhirana rumeeyey in uu soo dhawaysto ama u gargaaro dambiile.

25. Qofkii soo dhawaysta ama u gargaara (daalim) waxaa dushiisa ahaatay Alle nacaladiisa iyo caradiisa maalinka qiyaamaha, la gamana yeelayo madax furasho iyo tawbad midna.

26. Wax walba oo aad isku khilaaftaan waxaa loo celinayaa Alle iyo (Rasuulkiisa) Maxamed SCW.

Intaas ayey ku dhammaadeen qodobadii heshiiska ee uu Rasuulku SCW u kala qoray asxaabta kulana balamay, waxayna qodobadaani sida aan ka aragnaba u qaybsanyihiin qayb ku khaas ahayd muslimiintii waqtigaas joogtay iyo qayb laga rabo qof kasta oo muslim ah waqti kasta ha joogee, waxayna tahay qaybta qof walba oo muslim ah laga rabo; labar 1 iyo laga bilaabo lambar 11 ilaa 26 marka laga reebo labar 22

HESHIISKII UU RASUULKU SCW LA GALAY YAHUUDDII MADIINA

Yahuudii madiina daganayd sidaan soo tilmaanayba waxa ay ka koobnayd sadex qabiilo oo lakala oran jiray Banuu Qaynuqaac, Banuu Nadiir, iyo Banuu Qurayda, sidoo kale waxaa jirtay yahuud kale oo daganayd dhulkaas xijaas sida khaybar iyo agagaarkeeda.

Yahuuddaas oo ka soo guurtay dhinaca Shaam timidna Madiina iyo agagaarkeeda waqti hore waxay barteen luuqaddii carabiga, waxayna qaateen dhaqankii carabta. Saddexdan qabiil ee yahuuddu waxay xulafo la kala ahaayeen labadii qabiil ee carabta ahaa ee Madiina deggenaa (aws iyo khasraj) sidii aan soo sheegnayba.

Yahuuddu carabta waxay u ahaan jireen culimo maxaa yeelay waxa ahaayeen ehlu-kitaab oo diintii Nabi Muuse ayey hasteen. Waxayna markii hore ugu faani jireen "Nabi ayaa aakhiru samanka imaan doona, waana rumeyn doonaa waana idinla dagaallami doonaa" hase yeeshee markii uu Rasuulkii kitaabkooda lagu sheegay yimid oo carab ka soo baxay way diideen, xiqdi iyo xaasidnimo darteed iyagoo oranaya: "anaga ayay rusushu naga soo bixi jirtey". Kitaabkoodii in badan oo ka mid ah way beddeleen siiba intii ka warramaysay Nabiga SCW iyo sifooyinkiisa, waxayna Rasuulka SCW la qaabbileen colaad iyo xumaan.

Markii gaaladii qureyshi weydiiso in Maxammed SCW uu Nabi yahay iyo in kale waxay dhihi jireen "maaha Nabi idinkaana ka toosan oo ka hanuunsan". Ilaahayna isagoo arrinkaas ka warramaya wuxuu yiri:

((MA ARAGTAY KUWA KITAABKA QAYBTA LAGA SIIYEY OO RUMAYNAYA SIXIR IYO SHAYDAAN, KUNA DHAHAYA KUWA GAALOOBAY KUWAAN (GAALADA AH) AYAA JID UGA HANUUN BADAN KUWA MU'MINIINTA AH, KUWAASI (YAHUUDA) WAA KUWUU ALLE NACLADAY, CIDII ALLE NACLADANA U HELI MAYSDI GAR GAARE)), (Suuratu-Nisaa 51-52).

Sidoo kale mararka qaarkood waxay Rasuula SCW u maleegi jireen shirqoollo ay rabaan iney ku dilaan, Arintaasna weligoodba caan ayey ku ahaayeen oo rususha Ilaahay qaarna way dili jireen qaarna way beenin jireen siduu Ilaahay ku leeyahay Aayadan:

((WAXAA ILMA BANII ISRAA'IIL KA QAADNAY BALAN, WAXAANA U DIRNAY RASUL, MAR WALBA OO RASUUL ULA YIMAADO WAXAYSAN NAFTOODU JECLAYN KOOXNA WAY BEENIYAAN KOOXNA WAY DILAAN)), (Suuratul-Maai'idah 70).

Haddaba yahuuddu iyagoo sidaas rususha Ilaahay la qabbili jirey haddana Nabigu SCW wuu uga sii xag jirey oo waxay u arkeen iney iyagu rusulnimada uga xaq leeyihiin maaddaama ay rusushu iyaga ka soo bixi jiren. Waxay kale oo ay isu arkayeen siday haddaba aaminsanyihiin iney carabta iyo dadka kaleba ka sarreeyaan oo yihiin dad Ilaahay doortay.

Yahuuda dadka kasoo islaamay way yaraayeen, waxayna noqdeen dadka kuwa ugu cadaawada badan muslimiinta siduu Alleba qur'aanka ugu sheegay, waana arrin ay caan ku ahaayeen ilaa markii ay Ilaahay nacaladiisu ku dhacday, waana soo marnay qisadii Baxiira uu ku yiri Abii-Dhaalib oo ahayd wiilkan ka ilaali Yahuud, maxaa yeelay haddii waxa aan anigu ka fahmay ay ka fahmaan way dilayaan.

Yahuuda qofkii ka islaama waxa ay la qaabili jireen cadaawad, haddii uu qofkaasi ahaa dadkooda kan ugu sharaf badnaa markii uu islaamo waxay ka dhig jireen kan ugu xun, waxaan bukhaari saxiixiisa ku wariyey in markii uu Rasuulku SCW madiina yimid uu nin ragooda kuwa ugu sharafta badan, uguna cilmiga badan kamid ahaa oo la oran jiray Cabdullaahi binu Salaama uu islaamay markii Rasuulku SCW madiina yimid wuxuu ku yiri: "waxa ay yahuud ogtahay in aan ahay sayidkoodii iyo caalimkoodii uuna i dhalay sayidkoodii iyo caalimkoodii marka u yeer oo wax iga waydii (sidaan dhexdooda ka ahay) intaysan ogaan in aan islaamay maxaa yeelay haddii ay ogaadaan in aan islaamay waxay iga sheegayaan wax aanan ahayn. Rasuulku SCW waa uu u cid diray markay u yimaadeena waxa uu ku yiri: "yahuuday Alle ka baqa, waxaan ku dhaartay Allihii isaga maahane uusan Alle kale jirin waad ogtihiin in aan Rasuulkii Alle oo xaqa ahay, aana la imid xaq ee islaama, waxay dheheen: "m ogin", wuxu yiri: "see Cabdullaahi binu Salaama dhexdiina ku yahay?", waxay dheheen: "wa sayidkaayagii nooguna cilmi badan, waxaana dhalay sayidkayagii ahaana caalimkayagii", wuxu yiri: "ka warama hadii uu islaamo", waxay dheheen: "xaashaa lillaah ma islaamayo (madhacayso)", wuxu yiri: "ka warama haduu islaamo"?, waxay dheheen: "xaashaa lillaah ma islaamayo", wuxuu yiri ina salaamow usoo bax markaasuu soo baxay oo ku yiri: "yahuudey Alle ka baqa Ilaah baan ku dhaartay, Allihii isaga maahane uusan Alle kale jirine waad ogtihiin in uu (Nabi Maxamed) yahay Rasuulkii Alle SCW oo uu xaq la yimid", waxay dheheen: "been baad sheegtay", markaasuu Rasuulku SCW (iyagii) iska bixiyey.

Rasuulku SCW markuu arkay yahuudda iyo cadaawaddooda iyo ineysan xaqa doonayn wuxuu sadexdii qabiil ee yahuudda ahaa la samaystay heshiis ah in la is nabad geliyo, cadowna aan la isugu kaalmayn, Madiinana la wada difaaco, waxayna qodobadii heshiiskaasi ahaayeen sidatan:

1. Yahuudu waxay baxsanaysaa qarashkeeda, (markii magaalada la wada difaacayo) muslimiintuna waxay baxsanayaan qarashkooda.

2. Yahuudu waxbay labixinayaan muminiinta inta ay muminiintu dagaalka ku jiraan.

3. Yahuuda reer banii Cawf waa ummad muminiinta la nool, yahuudu diintooday leeyihiin muslimiintuna diintooday leeyihiin, (yahuudu) waxay leeyihiin ma waalidooda iyo naftooda (waa xor) qofkii dambi gala oo dulmi sameeya maahane, qofkaasuna ma halaagayo waxaan naftiisa iyo reerkiisa ahayn.

4. Yahuuda reer banii Najaar waxay leedahay (xuquuqda) ay yahuuda reer banii Cawf leedahay oo kale.

5. Yahuuda reer banii xaarith waxay leedahay (xuquuqda) ay yahuuda reer banii Cowf leedahay oo kale.

6. Yahuuda reer banii saacida waxay leedahay (xaquuqda) ay yahuuda reer banii Cawf leedahay oo kale.

7. Yahuuda reer banii Jasham waxay leedahay (xuquuqda) ay yahuuda reer banii Cowf leedahay oo kale.

8. Yahuuda reer banii Aws waxay leedahay (xuquuqda) ay yahauuda reer cowf leedahay oo kale.

9. Yahuuda reer banii thaclaba waxa ay leedahay (xuquuqda) ay yahuuda reer Cowf leedahay oo kale, qofkii dulmi la yimaada oo dambi gala ma ahane, isaguna waxaan naftiisa iyo reerkiisa ahayn ma halaagayo.

10. Reer Jafna waxay kamid yihiin (yahuuda) reer thaclaba.

11. Reer banii shudhayba waxa ay leeyihiin (xuquuqda) ay yuhuuda reer banii Cawf leedahay oo kale, samafalkuna xumaantu is hortaagaa.

12. Xulufada reer banii Thaclaba iyagay ka mid yihiin.

13. Saaxiibada yahuud iyagay la mid yihiin (oo xuquuqdoodo kale ayey leeyihiin).

14. Qof iyaga (yahuuda) ka mid ah oo bixi karaa ma jiro, in uu Maxamed SCW u idmo ma ahane.

15. Qof loo qaban karo ma jiro dhaawac hore aargudashadiis, qofkii dhib sameeyana waxa uu halaagay naftiisa iyo reerkiisa, qofkii la dulmiyey maahane, Allena raali ayuu ka yahay kaas.

16. Cidda waraaqdaan kala qoratay way iska kaashanayaan cidii la dagaasha, waxaana ka dhexeeya waanin, waano iyo samafal xumaanta joojiya.

17. Qofna loo qaban mahayo xiliifkiisa (dambiga uu sameeyo), gargaarkana waxaa iska leh ciddii la dulmiyo.

18. Yahuudu waxay qarashka labixinayaan mumininta inta ay muminiintu dagaalka ku jiraan, (maxaa yeelay magaalda waa la wada daganaa mumiminiintaana difaaceysay).

19. Yathrib gudaheeda waa ka xaaraam (in ay ku xadgudubto) cidda waraaqdaan kala qoratay.

20. Midka la magan galiyo waxa uu la mid yahay qofka kale hadduusan dhib la imaan, dambina galin.

21. Madiina cid la guma magan galin karo in dadkeeda (Rasuulka SCW) looga idan qaato ma ahane.

22. Wixii cusub ee ku soo kordha dadka warqaddaan kala qortay ama khilaaf laga baqayo in uu wax fasahaadiyo waxaa loo celinayaa Allaah iyo Rasuulka Alle ee Maxamed SCW Allena waxa warqaddaan ku qoran iyo wanaagiisa raali buu ka yahay.

23. Lama magan galin karo qureysh iyo ciddii garabsiisa.

24. Dadka warqaddaan kala qortay way isugu tagayaan ciddii yathrib ku soo duusha.

25. Haddii (yahuud) loogu yeero heshiis ay (cid kale) la galayaan oo ay samaysanayaan, waa ay galayaan wayna samaysanayaan, iyaguna sidaas oo kale hadday (muminiinta) ugu yeeraan xaq ayey ugu leeyihiin muminiinta waxaan ka ahayn cid Ilaahay diintiisa la dagaalamaysa.

26. Qolo walba waxaa dusheeda ahaaday in ay (difaacdo) dhinaceeda.

27. Yahuuda reer Aws waa xor naftooda iyo ma-waalidooduba, sida ay xor u yihiin dadka saxiifaddaan (kala qortay), waxayna wanaag barax la' kula joogayaan dadka saxiifaddaan ehelkeeda ah, samafalkuna waa in uu xumaanta ka soko maraa, kii xumaan sameeyana isagay dushiisa ahaatay. Allena waxa uu rumaynayaa (karaali yahay) waxa waraaqdaan ku yaala iyo wanaagiisa.

28. Is ma hor taago waraaqdaan qof aan daalim ahayn ama aan dambiille ahayn.

29. Qofkii Madiina ka baxaya waa aamin kii joogayana waa aamin waxaan ka ahayn daalim ama dambiile. Allena waa magan galinayaa qofkii samafala oo dhawrsada Rasuulka Alle ee Maxamedna waa magan galiyaa.

Sidaas ayuu ahaa heshiiskii uu Rasuuku SCW la galay yahuudii Madiina daganayd isaga oo u caddeeyey wax walba, kana dalbay in nabad gelyo loogu wada noolaado Madiina oo aan la isku xadgudbin, lana wada difaacdo magaaladaas la wada dagan yahay, hase yeeshee yahuud oo ilaa waqtigaasba caan ku ahayd dhagar iyo ballan ka bax ma aysan ilaalin ballaantaas ay Alle iyo Rasuulkiisa SCW la galeen muddo yar ka dibna waxay ay bilaabeen ballan jebin, intii hore waxa ay dusha ka huwanaayeen heshiiskaas hoostana waxay ka wadeen xumaan, waana arrinta haddaba lagu yaqaano oo ay caalamka ka dhaadhicisay hase yeeshee islaamku u yaqaano munaafaqnimo, waxaase la yaab ah in dad badan oo muslimiin sheeganaya ay siyaasaddaas sahyuuniyadda ee laba wajiilanimada ah u haystaan tan kaliya ee saxda ah iyaga oo ka indho la siyaasadda wanaagsan ee islaamka, haddaba sadexdii qabiilo ee yahuudda ahaa mid walba mar ayuu ka baxay, waxaynuna kaga hadli doonaa siday ugu bexeen ballantaas iyo siduu Rasuulku SCW u galay qeybaha soo socda.

DHISITAANKII MASJIDKA RASUULKA SCW

Rasuulka SCW markuu ku degay reer binu Cabdinajaar, gaar ahaan Abaa Ayuub Al-ansaari , hawl uu bilaabo wuxuu ugu hormariyey dhistaankii masaajidka.

Waxaa masaajidka laga dhisay meel u dhow meeshuu Nabigu SCW ku degay oo bohol ahayd, qubuuro iyo geedo timir ihina ku yaalleen ayna lahaayeen laba wiil oo agoomo

ahaa oo la kala oran jirey Sahal iyo Suheyl.

Waxaana booska bixiyey Mucaad binu Cafraa' oo labadaa wiil mas'uul ka ahaa, oo Rasuulka SCW ku yiri, "Rasuulkii Ilaahow Sahal iyo Suheyl waa laba wiil oo agoon ii ah, anigaana raalli gelinaya ee masaajid ka dhiso", waxay kaloo kututbta qaarkood wariyaan in Rasuulku SCW uu labada wiil booska ka iibiyey.

Waxa uu markaa Rasuulku SCW amar ku bixiyey in qubuuraha la faago oo la caro geddiyo, (gaalo ayey ahaayeen) boholahana la duugo, geedahana la jaro.

Sidaa ayaa la sameeyey, ka dibna waxaa la guda galay dhisitaankii masaajidka. Habka loo dhisayna waxa u ahaa sidan: derbiyaalkiisa waxaa laga dhigay dhoobo iyo dhagax labin ah, saqafkiisana waxaa lagu daday timirta caleenteeda, tiirarkiisa dhexda ahna waxaa laga dhigay geed timireedka jiridiisa, qibladiisa waxaa loo jeediyey dhinaca woqooyi ee Baytu Maqdis hase yeeshee 18 bilood ka dib, markay soo degeen aayadaha Suuratu Baqara ku jira, ayaa qiblaadii dhinaca Makka loo wareejiyey, halkaas oo ay baaqi ku ahaan doonto ilaa qiyaamaha.

Masaajidka gudihiisu wuxuu ahaa ciid, wuxuuna lahaa saddex albaab, dhererka masaajidku, marka laga soo bilaabo dhinaca qiblada ilaa meesha u dambaysa, wuxuu isu jirey 100 dhudhum, ballaciisuna sido kale ayuu ahaa.

Rasuulka SCW wuu ka qayb qaatay dhismaha masaajidka, wuxuuna tirinayey gabay yar oo dhiirigelin ah oo macnihiisu yahay "Allahayow ceyshka aakhiro maahee ceysh kale ma jiro ee u dambi dhaaf muhaajiriin iyo ansaar".

Asxaabtuna iyagoo aad u shaqeynaya ayey waxay qaadayeen beyt kale oo macnihiisu yahay "haddaan fariisanno Nabiga SCW oo shaqaynaya waa hawl aan wanaagsanayn". Ka dib Rasuulka SCW markuu dhammeeyey dhismihii masaajidka wuxuu dhinacyada masaajidka ka dhisay qowladihiisii, dabadeedna wuu ka soo guuray gurigii Abaa Ayuub Al-nasaari.

Rasuulku SCW wuxu ugu hormariyey hawl uu qabto dhismaha masaajidka, ahmiyadda uu leeyahay iyo sida aan looga maarmin darteed. Wuxuuna yahay masaajidku markaska iyo xarunta muslimiinta, sidaa darteed maaddaama ay dowlad cusub oo islaam ahi ka dhalatay Madiina si ay u hesho Xarun ayaa dhismihiisa loogu hormariyey. Wuxuuna masaajidka Rasuulku SCW ahaa meesha salaadda lagu tukado, la isugu yimaado, lagu kala war qaato, diinta lagu barto, wax lagu kala xukumiyo (maxkamad), wufuudda lagu qaabilo, maxaabiista gaalada lagu xiro, dadka masaakiinta ah ay seexdaan mararka qaarkoodna dadka xanuunsan lagu daaweyn jirey.

HESHIISKII IBNU UBAY IYO QURAYSH

Nimankii qureysh ahaa waxay aad uga xumaadeen muslimiinta iyo dhulka ay heleen iyo iney ka hoos bexeen cadaadiskoodii, sidaa darteed waxay mar walba ku dadaalayeen sidii ay muslimiinta dhib ugu geysan lahaayeen. Waxayna sameeyeen handadaado badan oo ay muslimiinta ku leeyihiin "ha moodina haddaad naga fakateen oo aam Madiina tagteen inaad ku nabad gelaysaan".

Sidaa darteed waxay warqad u soo direen Cabdullaahi ibnu Ubay oo ay ku leeyihiin "waan ognahay inaad soo dhooweyseen Maxammed iyo dadkii la socday oo aad u ballan qaaddeen inaad u hiilineysaan, haddaba ama iska saara dadkaas ama duullaan ayaan idinku soo qaadaynaa oo iyaga iyo idinkaba waan idin dabar goynaynaa'. Cabdullaahi ibnu Ubay, oo aan weli muujisan islaamka, ayaa jawaab degdeg ah ku celiyey qureysh

wuxuuna u sheegay in uu Rasuulka SCW iyo asxaabtiisa la dagaallamayo, qureyshna la jiro.

Rasuulka SCW markuu arrintaa maqlay, khudbad ayuu u jeediyey muslimiintii, wuxuuna ku yiri "dhagarta iyo khiyaamada ay qureysh idinku waddo waxaa ka daran tan aad idinka dhexdiinna isku waddaan (Aws iyo Khasraj)".

Markaas ayaa muslimiintii ansaar ka hortageen arrintii Cabdullaahi ibnu Ubay, halkaas ayaana arrintiisii ku fashilantay, maxaa yeelay wuxuu rabay inuu qabiil ahaan u kiciyo Aws iy Khasraj oo Rasuulka SCW iyo muhaajiriinta ka horgeeyo. Sidoo kale qureysh waxay soo saareen go'aan ay xaramka uga joojinayaan dadkii reer Madiina.

Xaalka oo sidaas ah ayaa waxaa baxay Sacad binu Mucaad oo muslimiita ka tirsanaa, ahaana odeygii Aws, wuxuuna aaday Makka si uu u soo cumreysto. Markuu tegey Makka ayuu wuxuu ku degay Umaya ibnu Khalaf oo ay jaahiligii saaxiibo ahaan jireen, oo markuu Umaya Madiina tago wuxuu ku dagi jirey Sacad, sido kale markuu sacad Makka tago wuxuu ku dagi jirey Umaya.

Wuxuu Sacad Umaya ku yiri "waxaad ii eegtaa waqti ay kacbadu firaaqo tahay si aan u dawaafo". Markii ay kacbadii firaaqo noqotay ayey is raaceen oo kacbadii tageen. Goor ay dawaafayaan ayaa waxaa arkay Abii Jahal, markaasuu yiri "Umayow waa kuma ninkan kula socda", Umaya wuxuu yiri "waa Sacad binu Macaad". Markaas ayuu Abii Jahal ku yiri Sacad "Ilaah baan ku dhaartaye hadduusan Abuu Safwaan (Umaya) kula socon lahayn inaadan nabad ku laabateen maxaa yeelay intaad dadkayagii iishey (bidcoobey) u yeerateen oo dejiseen miyaad haddana dooneysaan inaad kacbada dhawaaftaan".

Sacad ayaa marka hadlay oo ku yiri 'haddaad kacbada ii diiddo wax ka daran ayaan anna kuu diidayaa oo ah safarkiinna Shaam oo dhaqaalihiinnu ku xiran yahay ayaan waddada ka goyn doonaa", Umaya ayaa markaas Sacad ku yiri "Sacadow codka kor ha ugu dhigin abal xakam waa sayidka dadka toggan jooga'e" markaasaa Sacad ku yiri "na dhaaf Umaya Ilaah ayaan ku dhaartaye waxaan maqlay Rasuulkii Alle oo sheegaya in ay ku dili doonaan (muslimiinta), Umaya waxa uu yiri: "ma makay (igu dili doonaan)?" Sacad ayaa yiri: "ma ogi", Umaya hadalkaas si daran ayuu uga argagaxay, markuu reerkiisii u laabtayna waxa uu xaaskiisii ku yiri: "ma waadan ogayn waxa u Sacad igu yiri? waxay tiri muxuu kugu yiri? waxa uu yiri Maxamed ayaa u sheegay in ay i dili doonaan, markaasaan ku iri Makka miyaa, wuxuu yiri ma ogi. Ka dib Umaya wuxuu yiri: "Ilaahbaan ku dhaartaye inaanan Makka meelna uga baxayn, hase yeeshee dagaalkii badar ayaa Abii Jahal soo khasbay isagoo ka-hanaya, waxay haweentisii ku tiri: 'ma hilmaantay wixii walaalkaagii reer yathrib kugu yiri, wuxuu yiri meel dhow ayaan uga soo harayaa, dabadeedna ciidankii ayuu raacay intii dhex la sii socdayna gaadiidkiisu diyaar ayuu u ahaa ilaa uu badar tagay oo uu dagaalkii ka qaby galay laguna dilay.

OGGOLAANSHIHII JIHAADKA

Markii muslimiinta 13 sano la soo dhibayey, nooc walba oo dhib ahna lagu sameeyey, iyagana aan Ilaahay weli u idmin iney dagaallamaan oo raddi ficil (gacan celin) sameeyaan, intaasna lagu boorrinayey iney ku sabraan dhibka iyo wax walba oo gaalada ka soo gaara, ayaa markii ay Madiina yimaaddeen, oo dad iyo degaanba ay heleen, waxaa loo idmay jihaadkii waxaana soo degey aayadahan:

((WAXA LOO IDMAY KUWII LALA DAGAALLAMAYEY (INAY DAGAALLAMAAN) MAXAA YEELAY WAA LA DULMIYEY, ALLENA GAR GAARKOODA WAA KARAA, WAA KUWII GURYAHOODA LOOGA BIXIYEY XAQ DARRO IYO IN AY YIRAAHDEEN RABBIGAAYO WAA ALLE, HADDAYSAN JIRINNA IN ALLE DADKA QAARKIIS QAARKA KALE KU DIFAACO

WAXAA LA DUMIN LAHAA SAWAAMICDA (MEELAHA YAHUUDU KU TUKATO), BIYACA (KANIISADDA), MEELAHA LAGU TUKADO, IYO MASAAJIDDA DHEXDEEDA LAGU XUSO MAGACA ALLE WAX BADAN, ALLE WAA U GAR GAARAYAA CIDDII U GAR GAARTA (DIINTIISA), ALLENA WAXA UU AHAADAY (ALLE) QOWI AH OO CASIIS AH)), (Suuratul-Xaj 39-40).

Aayadahaas wixii ka dambeeyey waxaa si is daba joog ah u bilaabmay isuna raacraacay aayadihii ka hadlayey jihaadka, oo muslimiinta amrayey kuna boorrinayey iney u dagaallamaan jidka Allaah iyo iney kalimadda Allaah noqoto midda koreysa oo caalamka ka talisa. Waxaana uu Ilaahay u ballan qaaday dadka mujaahidiinta ah iney leeyihiin labada wanaagsan midkood: Shahiidnimo ama Guul. Sidaa kale wuxuu Allaah sheegay in dadka ku dhinta jihaadka aysan dhiman balse ay Ilaahay agtiisa ku nool yihiin.

Jihaadka qur'aanka iyo sunnaduba aad ayey uga hadleen uguna boorriyeen muslimiinta, aayadaha iyo axaadiista ku soo arooreyna aad ayey u badan yihiin. Jihaaddku waa waajib marna wuxuu noqdaa fardul ceyn marna fardul kifaaya. Wuxuu fardul ceyn noqdaa oo qof walba oo muslim ah ku waajib noqdaa markii beled islaam ah lagu soo duulo ama ciddii uu imaamka muslimiintu amro in ay jihaad u baxdo. Fardul kifaayana wuxuu noqonayaa markii muslimiintu iska deggan yihiin oo iyagu duullaanka qaadayaan, haddiise wax u quma la waayo dhammaantood waajibkii waa saaran yahay waana dambiilayaal oo ciqaab bay ku muteysanayaan.

Sidoo kale nusuusta islaamku waxay noo sheetay in cisiga islaamku uu ku jiro jihaadka, markii laga tagana uu Ilaahay dulli badayo muslimiinta. Wuxuu Rasuulku SCW yiri isagoo arrintaa ka hadlaya: "qofkii dhinta isagoo aan duullaan gelin (jihaad) ama aan naftiisa ugu sheekayn jihaadka wuxuu dhintay dhimasho jaahili.

Allaahna sidoo kale isagoo mu'miniinta ku boorrinaya jihaadka wuxuu yiri:

((ALLAAH WUXUU DADKA MU'MINIINTA AH NAFTOODA IYO MAALKOODA UGA IIBSADAY INAY JANNO U AHOOTO, WAXAY KU DAGAALLAMAAYN JIDKA ALLAAH, WAY LAYNAYAAN WAANA LA LAYNAYAA, WAANA YABOOH XAQ AH OO KU SUGAN TOWREET, INJIIL IYO QUR'AANKA, YAA KA OOFIN BADAN ALLE BALLANKIISA, KU BISHAARAYSTA (MUJAAHIDIINTOW) BAYCIINII AAD ALLE LA GASHEEN, ARRINKAASINA WAXAA WEEYE LIIBAAN WAYN)), (Suuratul-Tawbah 111)

Haddana wuxuu Ilaahay qur'aankiisa ku yiri:

((KUWA MU'MINIITA AHOW MA IDIN TUSIYAA TIJAARO IDINKA KORINEYSA CADAAB DAR; WAXAAD RUMEYNEYSAAN ALLAAH IYO RASUULKIISA, WAXAADNA KU JIHAADAYSAAN JIDKA ALLAAH NAFTINNA IYO MAALKIINNABA, TAAS AYAANA IDIIN KHEYR BADAN HADDII AAD WAX GARANAYSAAN)), (Suuratu-Saff 10-11).

Rasuulka SCW wuxuu jihaadka uga hadlay axaadiis tiro badan kala duwan wuxuuna yiri: "Carraabo jidka Allaah (loo carraabo) waxay ka khayr badan tahay adduunka iyo waxa ku jira". Sidoo kale wuxuu Rasuulka SCW yiri "waxaa la ila soo saaray saacadda (qiyaamaha) horteeda seef ilaa Allaah keliya laga caabudo, resqigeygana waxaa la yeelay warankeyga harkiisa hoostiisa, dulli iyo xaqiraadna waxaa la dul yeelay qofkii amarkayga khilaafa, qofkii dad isu ekeysiiyana (ku deyda) iyaguu ka mid yahay". Sidoo kale xaddiis, uu Imaam Axmed weriyey qaybtiisa ugu dambaysa wuxuu Rasuulku SCW ku yiri "markaad jihaadka ka tagtaan Alle wuxuu idinku ridayaa dulli, idinkana qaadi maayo ilaa aad diintiinna u noqotaan".

Aayadaha iyo axaadiista ku soo arooray baabkan jihaadka way tiro badan yihiin sidaan soo sheegnayba, jihaadkuna waa waajib ka mid ah qaybaha islaamka ugu waaweyn, Rasuulku SCW uu ku tilmaamay inuu yahay islaamka baarkiisa, qofkii inkiraana waa gaal

murtad ah oo dhiiggiisu bannaan yahay. Waayahan dambena waxaa soo baxay kuwo murtadiin ah oo ka shakisan islaamka qaatayna fikradihii gaalada oo dhahaya "muxuu islaamku jihaadka u waajib yeelay?". Kuwa noocaas u fekeraaya ma mudna in loo jawaabo maxaa yeelay waa sufaho aan caqli lahayn oo murtadiin ah, waxayse mudan yihiin in iyaga la weydiiyo, "haddaysan muslimiintu jihaadin ma la nabad gelinayaa? adduunkase dad badan oo aan muslimiin ahayn baa ku noole ma dagaallamaan miyaa?". Su'alahaas jawaabtooda qofkii wax garad ihi waa garanayaa, jihaadkana waxaa nagu waajibiyey Allaah SW oo naga og waxa ay maslaxadda iyo wanaaggu noogu jiraan.

Jihaadka waajibnimadiisa waxaa ku jira xikmado iyo faa'iidooyin aad u tiro badan oo aanan wada koobi karin, islaamkuna wuxuu meel walba ku gaaray wuxuu ahaa jihaad. Jihaadku wuxuu muslimiinta ka saaray dulligii iyo dulmigii ay ku jireen saddex iyo toban sano ee Makka oo aan jihaadka la waajib yeelin, kuwaas oo ahaa in marar badan la isku dayey in Nabiga SCW la dilo, muslimiintana la dabar gooyo. Jihaadku wuxuu sababay in islaamku dunida ku faafo, adduunkuna wuxuu xasillooni iyo nabadgelyo ku noolaa markii ay muslimiintu hoggaaminayeen. Laakiin markii ay muslimiintii ka tageen jihaadkii, Allaah dulli ayuu baday ka dibna waa la qabsaday oo la gumeystay lana kala qayb qaybiyey. Adduunkiina wuxuu ilaa maanta ka bixi la'yahay xad gudub iyo dulmi lagu hayo dadka muslimiint ah, meel walbana lagu gawracayo, dhiiggooduna noqday wax aad raqiis u ah oo aan labo is weydiin, qofka gaalka ihina wuxuu noqday mid aad qaali u ah oo ummad dhan loo rogo.

Haddaba xaqiiqadu waxay tahay cisiga islaamku wuxuu ku jiraa Aljihaad Fii Sabiilillaah. Waaggii ay muslimiintu jihaadi jireen qof muslim ah gaal kuma xadgdubin jirin. Gabar marada laga xayday ayaa ciidamo dhan loo diri jirey. Sideedaba haddii uusan bani aadamku Ilaahay ka cabsanayn ama bini aadam kale ka baqayn dhulka wuu fasahaadiyaa. Allaahna isagoo arrintaa tilmaamaya wuxuu yiri:

((HADDAAN ALLAAH DADKA QAARKIIS QAARKA KALE KU REEBI LAHAYN DHULKU WAA FASAHAADI LAHAA, LAAKIIN ALLE WA FADLI U SAAXIIB (UGU DEEQAY)), (Suuratul-Baqara 251).

Jihaadku waqti walba waa uu soconayaa, wuxuuna ku egyahay ilaa qiyaamuhu ka dhaco. Rasuulkuna SCW isagoo tilmaamaya waqtiga uu jihaadku ku eg yahay waxaa uu yiri: "Jihaadku wuu soconayaa ilaa yawmul-qiyaame". Sidoo kale Alle SW isagoo tilmaamaya waxa uu qur'aankiisa ku yiri:

((LA DAGAALLAMA IYAGA (GAALADA) ILAA (ADDUUNKA) GAALNIMO LAGA WAAYO OO DIINTA DHAMMAANTEED ALLE U AHAATO, HADDAY REEBTOOMAAN (OO GAALNIMO IYO XUMAAN JOOJIYAAN) ALLE WUU ARKAA WAXAY CAMAL SAMAYNAYAAN)), (Suuratul-Anfaal 39).

Ugu dambayntii muslimiintu baabkan jihaadka ah waa ineysan fududeysan oo aysan hilmaamin, hurdadana ka kacaan, Ilaahay diintiisana u dhintaan, diyaargarow iyo isticdaadna sameeyaan, naf jeclaysigana iska daayaan kolley naftu markii loo qoray uun ban baxaysaa kana hor mari mayso kana dib dhici mayso.

BILAABITAANKII DUULLAAMADA (JIHAADKA)

Rasuulku SCW markuu dejiyey Madiina oo muslimintii ka dhigay dad isku duuban wax kastana diyaar u ah, yahuuddii Madiina degganaydna uu heshiis la samaystay, ayuu bilaabay inuu qabaa'ilkii agagaarka magaalada Madiina deganaa uu heshiisyo la samaysto. Heshiisyadaas oo ay ka mid ahaayeen ineysan qabaa'ilkaas magan galin karin qureysh maalkeeda iyo nafteeda, muslimiintana ku soo xad gudbi karin. Wuxuu kaloo Rasulku SCW direy duullaamo iyo ilaalo is daba joog ah si qureysh cunaqabateyn loogu sameeyo oo la soo qabto safarradeeda Shaam iyo Makka u kal socda.

1. Rasuulka SCW wuxuu direy bishii Ramadaan ee sannadkii 1aad ee hijriga ciidan uu hoggaaminayo Xamsa binu Cabdimudhalib oo gaaraya 30 nin oo muhajiriin ah, wuxuuna u direy badda xeebteeda si ay u soo qabtaan safar qureysh oo Shaam ka yimid, ayna wadeen 30 nin oo Abii Jahal madax u yahay. Xamsa iyo ciidankiisii markay gaareen meeshii loo diray oo ay safarkii haleeleen ayaa waxaa kala dhex galay oo ku kala hagoogtay nin la yiraahdo Majdi ibnu Camar oo odey u ahaa qabiil meeshaas degganaa oo labada qolaba heshiis la ahaa. Sidaas ayaa Xamsa iyo Ciidankiisii ku soo laabteen iyadoo uusan wax dagaal ihi dhicin.

2. Rasuulka SCW markii uu hal sano joogey ayuu bishii Safar ee sannadkii 2aad ee hijriga wuxuu la baxay ciidan dhan 70 nin oo muhaajiriin ah. Rasuulku SCW wuxuu u baxay safar ay qureyshi leedahay oo lagu sheegay meel u dhexaysa Madiina iyo Makka. Magaalada Madiina wuxuu Rasuulku SCW madax uga sii dhigay Sacad binu Macaad. Rasuulka SCW iyo ciidankuu hoggaaminayey waxay ka dib gaareen meesha la yiraahdo Waddaan ama abwaa, hase yeeshee wax dagaal ihi ma dhicin oo la isma arag. Halkaas wuxuu Rasuulku SCW heshiis kula soo saxiixday ninka layiraahdo Camar ibnu Makhshiye oo madax u ahaa qabiilkii la oran jirey banuu Damra. Heshiiskaa waxaa qodobbadiisii ka mid ahaa: in Rasuulku SCW aammin gelin doono reer banuu Damra naftooda iyo maalkooda, loona hiilin doono haddii lagu xad gudbo iney Ilaahay diintiisa la dagaallamaan maahee. Markaa ka dib Rasuulku SCW wuxuu u soo laabtay Madiina iyadoo duullaankaasi ahaa kii ugu horreeyey ee Rasuulku SCW duulo, wuxuuna Madiina ka maqnaa 15 beri.

3. Bishaas uu soo laabtay ee Rabbiicul Awal wuxuu Rasuulku SCW diray ciidan gaaraya 60 ilaa 80 nin, wuxuuna madax uga dhigay Cubeyda ibnu Xaarith. Cubeyda iyo ciidankiisii way baxeen ilaa ay gaareen meesha la yiraahdo Thaniyatu Murra halkaas oo ay kula kulmeen ciidan badan oo qureysh ah hase yeeshee dagaal ma dhicin laakiin fallaaro ayaa la is weydaarsaday. Fallaarahaas qaar ka mid ihi waxay ku dheceen Sacad binu Abii Waqaas oo muslimiinta ka mid ahaa, waana fallaartii u horreysey oo islaamka lagu soo gano, dabadeedna ciidankaasi waa soo laabtay.

4. Isla bishaa Rabbiicul Awal Rasuulka SCW iyo ciidan uu hoggaaminayo ayaa baxay, wuxuuna Madiina madax uga sii dhigay Saa'ib binu Cismaan binu Madcuum. Rasuulka SCW iyo Ciidankiisii waxay gaareen meesha la yiraahdo Buwaadh oo u dhow Yunbuc hase yeeshee waxba lama soo kulmin. Bishii Rabbiicul Awal aakhirkeed ayey Madiina ku soo laabteen.

5. Bishii Jamaadul Uulaa ee isla sannadkaas ayaa Rasuulka SCW iyo ciidan uu hoggaaminayo ka bexeen Madiina. Ciidankaasu waxay gaarayeen 150 ilaa 200 oo nin. Sababta uu Rasuulku SCW u baxay waxay ahayd isaga oo maqlay safar ay qureysh leedahay oo Makka ka baxay una sii socda Shaam. Magaalada Madiinana wuxuu madax uga si dhigay Abaa Salama ibnu Cabdil-Asad. Rasuuulka SCW iyo ciidankiisii waxay

gaareen meesha la yiraahdo Dil-cusheyra oo Yunbuc u dhow hase yeeshee la isma arag. Dabadeed Rasuulku SCW wuxuu halkaas heshiis kula soo saxiixday qabiilka la yiraahdo Mudlaj iyo xulafadooda reer banii Dumra. Ka dib wuxuu Madiina ku soo laabtay bisdhii Jamaadul Aakhir.

6. Isla markuu soo laabtayba Nabiga SCW wuxuu diray koox ciidan ah oo ka kooban 8 nin uuna madax u yahay Sacad binu Abii Waqaas. Sacad iyo kooxdiisii waxay gaareen meesha la yiraahdo Kharraar oo Xijaas ka mid ah, dabadeedna way soo laabteen iyagoo aan wax ciidan ah la soo kulmin. Isla bishii Jamaadul Aakhir ayaa Rasuulka SCW iyo ciidan uu hoggaaminayo ka bexeen Madiina, ka dib markii ay soo gaartay in safar qureysheed oo shaam u socda uu makka kasoo baxay, wuxuuna Rasuulka SCW iyo ciidankiisii u bexeen ilaa ay ka gaareen meesha la yiraahdo Safwaan oo ceelka Beder u dhoweyd, ka dibna wuu soo laabtay isagoo aan waxba helin.

7. Bishii ka dambeysey ee Rajab wuxuu Rasuulku SCW direy koox ciidan ah oo ka kooban 12 nin oo uu madax u yahay Cabdullaahi binu Jaxshi, wuxuuna u direy Makka iyo Dhaa'if dhexdooda, wuxuuna Cabdullaahi u qoray warqad, wuxuuna ku yiri "ha furin ilaa aad labo maalmood socoto". Cabdullaahi iyo kooxdiisii way bexeen dabadeedna markay labo maalmood dhex ku sii jireen ayuu furay warqaddii Rasuulka SCW, waxaana ku qornaa "haddaad warqaddeyda aragto soco ilaa aad ka gaartid meesha la yiraahdo Nakhla oo u dhexeysa Makka iyo Dhaa'if, halkaasna u gal saffarrada qureysheed ee ka imaanaya Dhaa'if, wararkoodana noo soo gudbi". Cabdullaahi markuu hadalladaa akhriyey ayuu yiri "waan maqlay waana adeecay", kooxdii la socoteyna wuxuu ku yiri "Rasuulku SCW wuxuu i amray inaan socdo ilaa aan ka gaaro Nakhla oo aan qureysh safarradeeda u galo, wararkanan uga keeno, wuxuuna Rasuulku SCW iga reebay inaan khasbo qof idinka mid ah ee qofkii shahaado doonayaa ha isoo raaco, qofkii nacayana ha iska laabto, anigu waxaan ku soconayaa amarka Rasuulka SCW".

Ragii dhamantood wey ku wada raalli noqdeen waxayna diyaar u noqdeen shahaado ay awalba jeclaayeen. Waxay laba iyo tobankoodu wateen lix rati oo lababa rati saarnayd, markii meel dhexe la maray oo ayaa la degay, markaas ayaa waxaa lumay ratigii ay saarnaayeen Sacad binu abii Waqaas iyo Cutba binu Qaswaan. Ratigi ayey baadi dooneen hase yeeshee markii muddo la sugayey labadoodii oo la waayey ayaa tobankii kale baxday oo waxaa meeshii soo maray safar ay qureyshi leedahay oo ay wadeen afar nin oo qureysh ah oo uu madax u ahaa Camar binu Xadrami. Waqtigaasna waxa uu ahaa maalinkii ugu dambeysey bisha Rajab oo ka mid ah bilaha xurmada leh oo aan la dagaallamin. Cabdullaahi iyo sagaalkii nin ee la socday arrintii ayey ka wada hadleen oo waxay dheheen "haddaan la dagaallanno maanta Bilihii xurmada lahaa ayaan dagallanay, haddaan ilaa caawa oo bisha kale dhalanayso deynana xaramka ayey naga gelaayaan". Waxay ka wada hadlaanba ugu dambaynti waxay go'aan ku gaareen iney safarka iyo raggaba qabtaan. Dabadeedna weerar ayey ku qaadeen waxayna dileen ninkii madaxda u ahaa Camar ibnu Xadrami, nin la oran jirey Nawfal binu Cabdullaahina waa fakaday, labadii kale oo la kala oran jirey Xakam ibnu keysaa iyo Cusmaan ibnu Cabdullaahi way qabteen, dabadeedna waxay ku laabteen Madiina iyagoo soo qafaashay labadaa nin iyo safarkii. Rasuulku SCW wuxu ku yiri "maxaad u dagaalanteen dagaal idinma amrine'.

Nimankii iyo safarkiiba Rasuulku SCW wuu u kadiyey. Qureysh iyo reer makkana waxay dheheen "Maxammed iyo asxaabtiisii waxay xalaashadeen bilihii xurmada lahaa, dhiig bay daadiyeen, maalna way qaateen, dadna way qafaasheen". Allaah ayaa markaas soo dejiyey aayaddaan:

((KU DILA MEESHAAD KA HESHAANBA, KANA SAARA MEESHAY IDINKA SAAREEN (MAKKA) FIDNADA (OO GAALNIM AH) AYAANA KA DARAN DILKA, HANA KULA DAGAALAMINA MASAAJIDKA XURMADA LEH AKTIISA ILAA AY IDINKULA DAGAALAMAAN DHEXDIISA, HADDAY IDIN KULA DAGAALAMAAN LAAYA SIDAAS WEEYE ABAALKA

GAALADUYE, HADDAY REEBTOOMAAN (OO GAALNIMADA IYO FIDNADA JOOJIYAAN) ALLE WAA DHAAFID BADANE NAXARIIS BADAN, LA DAGAALAMA (OO LA JIHAADA GAALO IDILKEED) ILAA GAALNIMO LA WAAYO, OO DIINTU U AHAATO ALLE, HADDAY REEBTOOMAAN LA LAMA COLAYTAMO CID AAN DAALIMIIN AHAY)), (Suuratul-Baqara 191-193).

Qureysh waxay u soo cid dirsatay labadoodii nin, Rasuulkuna SCW wuxuu yiri "idiin sii deyn maayo ilaa ay ka yimaaddaan labadaydii nin oo ratigu ka lumay oo ahaa Sacad binu abii Waqaas iyo Cutba binu Qawsaan". Markii ay yimaaddeen labadaa nin Rasuulku SCW wuu u sii daayey labadoodii nin. Labadii nin ee la sii daayey, Xakam wuu islaamay, Cusmaanse gaalnimo ayuu ku dhintay.

DAGAALKII BADAR [Qaybta 1aad]

Waxaan soo marnay inuu Rasuulku SCW muddo hal sano ku dhow uu ciidamo dirayey isagoo rabay inuu qureysh dhaqaaleheeda curyaamiyo oo ka gooyo jidka ganacsigoodu ku xiran yahay maddaama ay xoolihii muslimiinta dheceen, kana soo saareen guryahoodii, maalkoodii iyo ehelkoodii, ayna tahay qureyshi codowga ugu daran islaamka iyo muslimiinta intaasna soo dhibayey. Muslimiinta iyagoo ka jawaabaya falalkaas xun xun ee qureysh waxay ka joojiyeen safaradii u kala socday Shaam iyo Makka oo dhaqaalahoodu ku xirnaa. Qureyshi aad ayey arrintaa uga xumaatay, jidkiina ciriiri ayuu ku noqday ilaa ay ku kalliftay inay maraan badda xeebteeda oo halkaasna looga daba tegey. Waxaa kaloo qureysh ka sii xanaajiyey in Makka duleedkeeda safarradoodii laga ugaarsado.

Haddaba waxaan soo marnay in Rasuulka SCW iyo ciidan u hoggaaminayo ay bishii Jamaadul Uulaa ku bexeen safar ay qureysh ledahay oo Makka ka tegey Shaamna u sii jeeda, hase yeeshee Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu waa soo wayeen safarkaas, dabadeedna waxay dhowrayeen soo noqodkiisa dambe. Labo bilood ka dib markii la is yiri safarkaasi waa soo gaddoomay ayaa Rasuulku SCW wuxuu diray laba nin oo kala ahaa: Dalxa ibnu Cubeydillaah iyo Saciid ibnu Seyd wuxuuna ku yiri "socda oo baadi gooba soona ogaada meesha ay soo maraayaan iyo waqtiga ay ku soo aaddan yihiin". labadii nin way baxeen dabadeedna waxay gareen meesha la yiraahdo Xuura, halkaas markay ayaamo joogeen ayaa waxaa soo maray safarkii qureysh oo tijaaro iyo alaab fara badan wada, kana koobnaa kun rati oo ay wadeen 40 nin, uuna madax u ahaa abuu Sufyaan ibnu Xarbi. Si degdeg ah ayay markaa labadii nin u soo noqdeen khabarkii oo dhanna Rasuuka SCW ugu soo gudbiyeen.

Rasuulku SCW wuxuu Madiina ka soo baxay bishii Ramadaan sannadkii 2aad ee hijriga, wuxuuna Madiina madax uga dhigay Cabdullaahi ibnu Ummi Maktuum hase yeeshee markuu marayo Rawxaa' ayaa (rasuulku scw) direy abaa lubaaba oo ku yiri "Madiina madax ka noqo, Cabdullaahina salaadda ha tujiyo". Calanka guud ee muslimiinta wuxuu Rasuulku SCW u dhiibay Muscab ibnu Cumayr, wuxuuna Rasuulku SCW ciidanka u qeybiyey labo qaybood: Muhaajiriin iyo Ansaar. Qaybta Muhaajiriinta wuxuu calankooda u dhiibay Cali binu Abii-dhaalib, qaybta Ansaarna Sacad binu Mucaad. Habka duullaanka ciidanka wuxuu Rasuulku SCW u qeybiyey shan qaybood oo waagaas ciidanka loo qaybin jirey: Midig, bidix, horey, gadaal iyo dhexda. Dhinaca midig wuxuu madax uga dhigay Subeyr binu Cawaam, dhinaca bidixna Miqdaad ibnu-Aswad waana labadii nin oo labada faras ka watay ciidanka. Dhinaca gadaale wuxuu madax uga dhigay Qeys ibnu abii Sacsac.

Rasuulka SCW iyo ciidankiisii way dhaqaaqeen waxayna qaadeen waddadii Makka aadi jirtey hase yeeshee markay u dhow yihiiin ceelka Badar oo ay marayaan meesha la yiraahdo Rawxa' ayey dhinaca midig u leexdeen ka dibna way sii socdeen markay u dhow yihiin meesha la yiraahdo Safraa' ayaa Rasuulku SCW wuxuu ceelkii Badar u diray laba nin oo sahan ah oo la kala oran jirey Basbas ibnu Cumar Aljuhani iyo Cadiyi ibnu Saqbaa Aljuhani, si ay u soo ogaadaan safarkii qureysh iyo meesha uu marayo.

Dhinacii kale ninkii la oran jiray Abuu Sufyaan ibnu Xarbi, oo ahaa ninkii madaxda u ahaa safarkii qureyshee, oo aad u digtoon, ogna waddada uu hayo oo Badar sii martaa ineysan aamin ahayn wuxuu galay wareysi uu wareysanayo cid aala cidduu arko oo uu ku leeyahay "Madiina maxaad wax war aha ka haysaa?", markaasaa ugu dambeyntii waxaa loo sheegay in Nabi Maxammed SCW iyo asxaabtiisii ka soo baxeen Madiina iyagoo raadinaya safarkiisa. Abuu Sufyaan markuu arrintaas maqlay wuxuu ogaaday inuu halis ku jiro sidaa daraaddeed degdeg ayuu Makka ugu diray qaylo dhaamis, wuxuuna diray nin la oran Damdam ibnu Camar Alqafaari. Abuu Sufyaanna safarkii ayuu ka hormaray oo wuxu tegey ceelkii Badar wuxuuna ugu tegay ceelka nin la oran jirey Majdi ibnu Camar, wuxuuna weydiiyey inuu war ka hayo ciidankii Madiina. Majdi wuxuu yiri "cid aan garan waayo ma aanan arag aan ka ahayn laba nin oo neef geel ah watey oo neefkoodii halkaas arumiyey, ceelkana biyo ka dhaansaday dabadeedna iska tegey.

Abuu Sufyan wuxuu tegey meeshii neefka geela ah la arumiyey markaasuu saaladii neefka qaatey oo burburiyey, wuxuuna ka helay laf timireed markaasuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye waa daaqii Madiina", dabadeedna intuu si degdeg ah ugu laabtay safarkii ayuu ka leexiyey waddadii oo dhinaca badda mariyey. Ninkii uu u direy Makka oo Damdam la oran jirey isagoo ordaya oo qeylo dhaamis ah ayuu Makka galay, wuxuuna sameeyey calaamooyin lagu yaqaanno qofka dareenka wada oo qamiiskiisii ayuu jeexay, ratiguu fuushanaana sanka ayuu gooyey, reeryadii ratiga saarnaydna dhinaca kale ayuu u wareejiyey, qeylana afkuu ku shubtay isagoo leh "qureysheey dharbaaxo dharbaaxo, xoolihiinnii Abuu Sufyaan waday Maxammed baa asxaabtiisii ku soo bixiyey una malayn maayo inaad gaaraysaan ee gargaar gargaar".

Qureysh iyagoo awalba u ciil qabay Nabiga SCW iyo asxaabtiisa ayaa markii ay maqleen qeyladaas si degdeg ah u soo baxeen iyagoo faanaya oo leh "Maxammed iyo asxaabtiisu ma waxay u maleeyeen in safarkani yahay safarkii ibnu Xadrami oo kale, ma jirto arrintaasi, Ilaah baan ku dhaarranaye way ogaan doonaan si aan sidaas ahayn". Odeyaashii qureysh madaxda u ahaa Abuu Lahab oo keliya ayaa ka haray isaguna wuxuu u haray xanuun, beddelkiisiina wuxuu diray nin uu deyn ku lahaa oo uu u cafiyey, raggii reer makkana ninkaan bixin beddelkiisii ayuu dirayey. Waxaa Makka ka soo baxay ciidan gaaraya 1300 oo nin oo wata 100 faras iyo 600 oo canbuur bireed iyo awr aad u tiro badan. Ammaanduulaha guud ee ciidanka qureysh wuxuu ahaa Abii Jahal, xagga maamulka iyo raashinka waxaa u qaabbilsanaa 9 nin, maalinkii waxay qalan jireen 9 ama 10 geeel ah.

Ciidankaasi waxay soo baxeen iyagoo uu ka muuqdo kibir iyo is qaad qaad iyo is tus tus siduu Allaahba uu ug caddeeyey aayadan:

((HA NOQONNINA KUWII UGA SOO BAXAY GURYAHOODA KIBIR IYO DADKA IN LA IS TUSO, JIDKA ALLENA LA XIRO, ALLAAHNA WIXII AY CAMAL SAMAYNAYEEN WAA MID KOOBAYA)), (Suuratul-Anfaal 47).

Qureysh waxaa intaa u sii dheerayd caro iyo xiqdi ay u qabeen Nabiga SCW iyo asxaabtiisa iyaga oo rabay iney dabar gooyaan.

Waxay Qureyshi u soo dhaqaaqeen dhinaca Badar, markii ay dhaafeen togga la yiraahdo Casafaan oo ay marayaan Juxfa ayaa waxaa u timid waraaq uu soo direy Abuu Sufyaan oo uu ku leeyahay "waxaad u soo baxdeen inaad badbaadisaan safarkiina, Allaahna waa idiin badbaadiyey raggiinnii iyo maalkiinnii ee soo laabta". Hase yeeshee Abuu Jahal oo ahaa hoggaamiyihii ciidanka wuu diidey warkaas waraaqda ku qornaa wuxuuna yiri "Ilaah baan ku dhaartaye noqon mayn ilaa aan Badar tagno oo aan saddex beri joogno, geelana ku qalanno, cuntadanaku cunno, khamradana ku cabno, haweenkuna noogu heesaan, carabna ay maqasho socodkayaga iyo awooddayada si aan dib dambe naloogu haweysan". Abii Jahal markuu hadalladaas yiri ayaa waxaa hadlay Akhnas ibnu Sureyq oo madax u ahaa reer banuu Suhra, wuxuuna yiri "haddii uu safarkii nabad galay aan

laabanno", markii laga diideyna ciidankii qabiilkiisa oo 300 gaarayey ayuu la laabtay, markii qureysh jabtayna qabiilkiisu aad ayey uga dambayn jireen, wayna jeclaayeen go'aankiisa. Sidoo kale waxa damcay iney laabtaan laftii uu Rasuulku SCW ka dhashay oo awalba aan dagaal dooneyn ee lagu soo khasbay hase yeeshee Abii Jahal ayaa u diidey oo yiri "kooxdani nama cidlaynayso".

Dhinaca ciidankii muslimiinta waxaa loo soo gudbiyey in safarkii fakaday, ciidan aad u xoog badan oo Makka ka yimidna uu yimid isla markaasna aan laga fursan doonin in foodda la is daro, sidaa darteed koox ciidankii muslimiinta ka mid ahayd way dhibsatay xaaladdaas adag maxaa yeelay ciidanka muslimiintu hub sidaa ah ma wadan, dagaalna kuma soo talo gelin, Madiinana rag badan bay uga soo tageen, ujeeddada ay u soo baxeenna waxay ahayd iney soo qabtaan safarkaas qureysh. Kooxdaas siday u kahanaysayna Allaah ayaa qur'aanka ku sheegay oo wuxuu yiri:

((SIDUU RABBIGAA KAAGA BIXIYEY GURIGAAGA XAQNIMO, KOOX MU'MINIINTA KA MID AHI WAA KAHANAYEEN, XAQA AYEYNA KUGULA DOODAYAAN MARKUU CADDAADEY KA DIB, WAABA IYAGOO DHIMASHO LOO WADO OO FIIRINAYA)), (Suuratul-Anfaal 5-6).

Rasuulku SCW markii uu arkay xaaladdu meesha ay marayso iyo wadciga taagan wuxuu arrintii u bandhigay oo la tashaday asxaabtiisii si ay afkaartooda uga dhiibtaan arrintaas cusub. Abuubakar ayaa markaas istaagay oo si fiican u hadlay, ka dib Cumar binu Khadhaab ayaa hadlay oo bartii loo baahnaa taabtay. Miqdaad ibnu Camar ayaa isaguna hadlay oo yiri "Rasuulkii Allow ku soco waxa Rabbi ku tusay, annaguna waan kula jirnaaye. Ilaahay baan ku dhaartaye kugu dhihi mayno hadalkii ay reer banuu Israa'iil Muuse ku yiraahdeen oo kale, kaas oo ahaa "soco adiga iyo Rabbigaa oo dagaallama, annaguna halkan baan sii fadhiyeynaaye", laakiin waxa aan ku leennahay "soco adiga iyo Rabbigaa oo dagaaallama, annaguna la jirkiinna ayaannu dagaallmaynaaye. Allihii xaq kugu soo saaray baan ku dhaartaye haddii aad nala socotid ilaa aad ku gaartid Barkul-Qamaad, waan kula soconayna oo kula jiraynaa waxa ka sokeeya ilaa aad ka gaartid".

Rasuulku SCW wuu ku farxay hadalkaas wanaagsan ee ay soo jeediyeen saddexdaas nin ee Muhaajiriin kamid ahaa hase yeeshee wuxuu jeclaystay in uu Ansaarna go'aan kooda wax ka maqlo maxaa yeelay ciidanku Ansaar ayuu u badnaa isla markaasna heshiiskii ay Rasuulka SCW la soo galeen ee Baycatu-Caqabadii 2aad kuma jirin duullaan dibadeed ee wuxuu ahaa difaacid cid kasta oo soo weerarta Nabiga SCW iyo muslimiinta. Rasuulku SCW wuxuu yiri "dadyahow ii ishaara" oo uu ula jeeday hadla oo talo keena. Waxaa markaa fahmay hoggaamiyihii Ansaar calan koodana waday, Sacad binu Mucaad, wuxuu yiri "Rasuulkii Allow waxaa la arkaa in aad annaga (Ansaar) noo jeedid?", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "haa". Sacad ayaa yiri "waan ku rumaysan nahay waxaa aannu ka markhaati kacnay in uu xaq yahay waxa aad la timid, waxa aan ku siinnay ballantayadii in aan ku maqalno oo ku adeecno. Ku soco Rasuulkii Allow wixii aad doontid, Allihii xaq kugu soo saaray baan ku dhaartaye haddii aad badda nala aaddo oo aad dabbaalatid waan kula dabaalanaynaa, nin annaga naga mid ahina ka dib dhici maayo, mana kahanayo in aad nala kulansiisid cadowgayaga berri, waan ku sabirnaa dagaalka, waannuna ka run sheegnaa la kulanka, waxaana la arkaa in Allaah uu naga kaa tusiyo wax ay ishaadu ku qabowsato ee ku soco barakada Allaah".

Riwaayad kale waxa ay ahayd in uu Sacad yiri "waxaa la arkaa in aad ka baqdid in Ansaari u aragto in aadan xaq ugu lahayn gargaar guryahooda difaacidooda maahane, waxaanse leeyahay, aniga oo Ansaar u hadlaya "meeshii aad doontid noo hogaaami, ciddii aad doontid xariggeeda xiriiri oo heshiis la samayso, ciddii aad doontid xariggeeda goo, wixii aad doontid maalkayaga ka qaado, wixii aad doontid nasii, waxa aad naga qaadato ayaan ka jecel nahay waxa aad nooga tagtid, amarkayaguna amarkaaga ayuu raacayaa. Ilaah baan ku dhaartaye haddii aad socotid ilaa aad ka gaartid Qamdaan waan kula soconayanaa, Ilaah baan ku dhaartaye haddii aad badda noo bandhigtid oo aad gashid waan kula gelaynaa".

Rasuulku SCW markii uu hadalladaas iimaanku ka buuxo Sacad ka maqlay wuu ku farxay, waxa ayna ku dhalisay firfircooni, wuxuuna yiri "socda oo bishaaraysta, Allaah SW wuxuu ii ballan qaaday labo arrin midkood in aan ku guuleysanno (Safarka ama dagaalka). Ilaah baan ku dhaartaye waaba aniga oo hadda eegaya meelihii ragga (gaalada) meydkooda la dhig lahaa". Allaah wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((XUSUUSO MARKUU ALLE IDIIN YABOOHAY IN AY IDIIN SUGNAATAY (AAD KU GUULAYSANAYSAAN) LABADII KOOXOOD (CIIDANKII AMA SAFARKII) MIDDOOD, WAXAADSE JECLAYDEEN IN AY IDIIN AHAATO MIDDA DHIBTA YAR, ALLESE WAXA UU DOONAYAA IN UU XAQA KU SUGO KALIMADDIISA OO GOOYO CIRIBTA GALADA)), (Suuratul-Alfaan 7).

Rasuulku SCW ciidankii wuu ka raray meeshii uu deggenaa oo ahayd Dafraan, wuxuuna u kexeeyey Badar. Markii la marayo meel la yiraahdo Diyah oo Badar qarkeeda ah ayaa ciidanki degey. Rasuulka SCW iyo Abuubakar ayaa ka dib sahay u baxay, markii ay dhexda sii marayaan ayey la kulmeen odey dadkii baadiyahaas degganaa ka mid ah. Rasuulka SCW ayaa su'aal weydiiyey oo ku yiri "maxaad war ka haysaa dhinaca qureysh iyo dhinaca Maxammed SCW iyo asxaabtiisa?" hase yeeshee odeygii wuxuu yiri "idiin warami maayo ilaa aad isku kay sheegtaan", Rasuulku SCW wuxuu ku yiri "waan isku kaa sheegaynayaa haddii aad noo warrantid". Odeygii wuxuu markaas yiri "waxaa i soo gaartay in Maxammed iyo asxaabtiisii ay soo baxeen maalinkii noocaas ahaa, haddii uu qofka warkaas ii sheegay run sheegay, maanta halkaas ayey joogaan. Qureyshna waxaa iga soo gaartay in ay soo baxeen maalinkii noocaas ahaa, haddii uu run sheegay qofkii warkan ii soo sheegay, maanta iyaguna halkaas ayey deggan yihiin". Odeygu wuxuu labada ciidanba ku sheegay goobihii ay kala degeen, markii uu hadalkii dhammaystayna wuxuu weydiiyey arrinkii uu sugayey oo ahayd in ay isku sheegaan cidda ay yihiin. Rasuulku SCW wuu u sarbeebay oo wuxuu yiri "biyo ayaan ka nimid" oo uu ula jeeday biyo ayaa nalaga abuuray, ka dibna way iska dhaqaaqeen isaga iyo Abuubakr, odeygiina wuxuu lahaa "biyehee? ma biyihii Ciraaq?" oo wuxuu u qaatay dhul webi leh sida Ciraaq

DAGAALKII BADAR [Qaybta 2aad]

Casarkii markii la gaaray ayuu Rasuulka SCW koox sahan ah u diray ceelkii Badar, waxaana kooxdaas ka mid ahaa Cali binu Abii-dhaalib, Subeyr ibnu Cawaam iyo Sacad binu Abii Waqaas. Markii ay kooxdaasi tageen ceelkii Badar ayey heleen labo wiil oo ciidankii qureysh biyo u dhaaminaya. Labadii wiil ayey soo kexeeyeen, waxa ayna ula yimaaddeen Rasuulka SCW oo tukanaya. Intii uu Rasuulku SCW tukanayey ayaa labadii wiil su'aalo la weydiiyey oo la yiri "xaggee ka timaaddeen?", waxa ay yiraahdeen "qureysh ayaan biyo u dhaaminaynay". Muslimintii qaar ka mid ah, oo weli rajo ka qabay safarkii qureysh, ayaa labadii wiil garaacay. Wiilashii markii ay xanuun sadeen ayey been sheegeen oo dheheen safarkii (qureysh) baan ka nimid", ka dibna garaacii waa laga daayey.

Rasuulku SCW markii uu salaaddii ka baxay ayuu isaga oo canaanaya ku yiri muslimiintii "markii ay run idiin sheegeen waad disheen, markii ay been idiin sheegeenna waad deyseen. Ilaah baan ku dhaartaye run ayey sheegeen oo qureysh bay ka yimaadeen". Rasuulku SCW wuxuu markaas la hadlay labadii wiil oo ku yiri "ka warrama qureysh?", waxa ay yiraahdeen "duudkaan gadaashiisa ayey joogaan", Rasuulku SCW wuxuu ku yiri "meeqa ayey dhan yihiin?", waxay ay ku jawaabeen "caddadkoodu waa badan yahay", wuxuu Rasuulku SCW ku celiyey "intee buu dhan yahay caddadkoodu?", waxa ay yiraahdeen "ma garanayno caddadkooda". "Intee geel ah ayey qashaan maalintii " ayuu Rasulku SCW weydiiyey, waxa ay yiraahdeen "maalina 9, maalina 10". Markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "waxa ay u dhexeeyaan 900 ilaa 1000". Rasuulku SCW su'aal kale

ayuu weydiiyey oo wuxuu yiri "yaa ku jira odeyaashii qureysh?", waxa ay ku jawaabeen "waxaa ku jira Cutba binu Rabbiica, Sheyba binu Rabbiica, Abuu Bakhtari binu Hishaam, Xakiim binu Xisaam, Nawfal binu Khuwaylid, Xaarith binu Caamir, Dhuceyma binu Cadiyi, Nadar binu Xaarith, Samca binu-Aswad, Abuu Jahal binu Hishaam" iyo rag kale oo ay magacaabeen. Rasuulku SCW wuxuu markaas soo qaabilay asxaabtii oo ku yiri "tani waa Makka oo idiin soo tuurtay beerkeeda gobollodiisii".

Habeenkii markii la gaaray waxaa bilaabatay naxariistii Ilaahay oo waxaa yimid roob, kaas oo dhinicii gaalada aad ugu da'ay oo qooyey, dhulkiina faagay, kuna riday gaaladii caajis iyo in ay goobtii u soo hormari kari waayaan. Dhinicii muslimiintana wuxuu ugu da'ay si naraxiis ah oo wuxuu ka daahiray xumaatadii iyo wiswiskii sheydaanka, wuxuuna adkeeyey quluubtoodii, lugohoodiina dhulka ayuu ku sugay. Allena isaga oo arrintaas ka hadlaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((XUSUUSTA MARKUU (RABBI) IDINKU DABOOLAY HURDO, AAMIN AHAANSHO XAGGIISA KA AHAATAY, IDINKAGANA SOO DAJIYEY SAMADA BIYO SI UU IDINKUGU DAHIRO, OO UU IDINKAGA TAKSIIYO QURUNKA SHAYDAANKA, UGUNA ADKEEYO QULUUBTIINA OO U SUGO GOMADIHIINA)), (Suuratul-Anfaal 11).

Cishihii ka dib ayaa Rasuulku SCW ciidankii soo raray si uu ugu soo hormaro biyihii ceelasha Badar iyo meelihii istiraatijiga ahaa. Markii uu ceelashii afkooda soke marayo ayuu degay. Waxaa markaas istaagay nin la yiraahdo Xubaab binu Mundir oo ahaa nin khibrad u leh xeesha dagaalka, oo yiri "Rasuukii Allow, ma Allaah baa meeshaan ku dejiyey oo markaas nooma ahaanin in aan ka hor marno ama ka dib marno mise waa ra'yi iyo xeel dagaal?", Rasuulku SCW wuxuu yiri "waa ra'yi iyo xeel dagaal", markaas ayuu Xubaab yiri "Rasuulkii Allow, meeshaani meel la dego maahane ee socodsii ciidanka ilaa aan ka gaarno ceelasha ugu dambeeya ee dhinacooda (gaalada) xiga oo aan halkaas ka degno, ceelasha kalena xabaalno, darna aan ka dhisanno oo biyo ka buuxinno. Markii ayuu la dagaallamayno ayeynu biyaha ka cabbaynnaa, iyaguna harraad ha ku joogaan". Rasuulku SCW wuxuu yiri "xaqiiqdii waad ishaartay", ciidankiina wuu kexeeyey ilaa u ka gaaray ceelashii ugu xigay cadowga oo halkaas la degay. Isla habeenkiiba darkii baa la dhisay, ceelashii kalena waa la duugay.

Ka dib Sacad binu Mucaad ayaa fikrad soo jeediyey oo yiri "Nabigii Allow, maan kuu dhisno waab aad joogtid, rakuub kaagana agtaada ku xirno, dabadeedna aan cadowgayaga la kulanno. Haddii Ilaah na ciseeyo oo aan cadowgayaga ka guuleysanno, waa arrintii aan jeclayn, haddii ayse sida kale noqoto, rakuubkaaga ayaad fuuleysaa, waxaadna haleelaysaa raggii naga dambeeyey. Rasuulkii Allow waxaa haray rag aannan annagu jacalkaaga ka badsan, haddii ay malayn lahaayeen dagaalna, kaama ay hareen, iyaga ayaana ku difaacaya oo kuu gargaaraya, kulan jihaadaya".

Rasuulku SCW wuu yeelay fikradii Sacad, wuuna u duceeyey dabadeedna waabkii ayey muslimintu u dhiseen, waxayna ka dhiseen meel xoogaa korreysa oo dhinaca woqooyi bari ka xigta goobtii dagaalka waxaana waardiye qabtay koox Ansaar ah oo Sacad binu Mucaad madax u yahay. Rasuulku SCW habeenkii geed meesha ku yaalley hoostiisa ayuu salaad ku tukanayay ilaa uu waagu ka baryey. Ka dib wuxuu subixii ku dhex socday goobtii dagaalku ka dhici lahaa, wuxuuna sii sheegay qaar ka mid ah madaxdii qureysh meelaha ku nafbixi lahaayeen isagoo gacantiisa ku ishaaraya oo leh "halkaani waa goobta hebel la dhig doono berri haddii Alle idmo, halkaanna waa goobta hebel la dhigi doono berrii hadii Alle idmo". Muslimiintii waxay waabariisteen iyadoo ay dabooshay xasillooni, degganaan iyo aamin ahaansho. Habeenkaasi wuxuu ahaa habeen jimce ah oo bishaa Ramadaan 17 ahayd sannadkii 2aad ee hiriga.

Ciidankii qureysheed wuxuu habeenkaas ku waabariistey dhinicii kore ee Badar, Allena isagoo tilmaamaya wuxuu yiri:

((XUSUUSTA MARKAAD AHAYDEEN DHINICII U DHAWAA (BADAR), IYAGUNA AHAAYEEN DHINICII KA FOGAA (BADAR), SAFARKUNA IDINKA HOOSEEYEY, HADDII AAD BALLAMI LAHAYDEENA WAAD ISKU KHILAAFI LAHAYDEEN BALLANTA, LAAKIIN ALLAA XUKUMAY ARIN UU AHAA MID SAMEEYA, SI CIDDII HALAGSAMIN SI CAD U HALAAGSANTO, CIDDII NOOLAANA SI CAD U NOOLAATO, ALLENA WAXA UU AHAADAY ALLE MAQLA OO OG)), (Suuratul-Anfaal 42).

Ciidankii qureysheed markuu waabariistay ayuu soo guuray oo soo degay goobtii dagaalka, ka dibna koox ka mid ahayd ayaa soo aaday darkii muslimiinta si ay biyo uga cabaan, markaasaa Rasuulku SCW wuxuu asxaabta ku yiri "iska daaya", biyihii ayey ka cabbeen (nimankii) waxayna ku laabteen ciidankoodii. Kooxdaas biyaha cabtay goobtii dagaalka ayaa lagu wada diley illaa Xakiim ibnu Xisaam maahane, isaga lama dilin, ka dibna wuu islaamay, islaamkiisuna wuu wanaag sanaaday, markuu dhaarta ku xeel dheeraanayana wuxuu dhihi jirey Allihii maalinkii Badar iga nabad geliyaan ku dhaartay".

Labadii ciidanba dagaal ayey isu diyaariyeen iyadoo ciidan walbaba xeeladdiisa dagaal isticmaalayo. Ciidankii qureyshtu waxay direen nin ciidankoodii ka mid ah oo la oran jirey Cumeyr binu Wahab Al-jumaxi si uu u soo kormeero una soo qiyaaso ciidanka muslimiint caddadkooda iyo hubkooda. Cumeyr faraskiisii intuu ku dhacay oo ciidankii muslimiinta ku soo wareegay ayuu soo laabtay, markaasuu yiri "Waa 300 oo nin, ama wax yar bay ka badan yihiin ama wax yar yihiin, laakiin bal ii suga aan soo hubiyo in wax gurmad ahi gadaal u jiro", cabbaar markuu socday oo uu waxba soo waayey ayuu soo laabtay oo yiri "waxba ma soo arag, laakiin qureysheey waxaan soo arkay geel mayd xambaarsan, geeli Madiina u aroori jirey oo mayd xambaarsan, Ilaah baan ku dhaartaye iima muuqato in nin laga dilayo ilaa ay nin idinka dilaan, haddii ay wax gaarsiiyaan tiradiinna oo ay la tagaan (dilaad) caddadkooda in le'eg nolol kheyr leh ma arag".Xakiim ibnu Xisaam, oo ah ninka ka badbaadi doona raggii biyaha soo cabbay, marku hadalkaas maqlay wuxuu u tegey Cutba ibnu Rabbiica oo uu ku yiri "Abaa Waliidow qureysh duqeedii baad tahay, waana lagu maqlayaa ee ma rabtaa in khayrka maanta lagugu sheego waligaa?", Cutba wuxuu yiri "muxuu yahay kaasi Xakiimow?". Wuxuu yiri Xakiim "ciidanka celi, ninkii aad xulafada la ahayd oo la oran jirey Camar ibnu Xadrami arrintiisa dusha saaro". Cutba arrinkii wuu u riyaqay wuxuuna yuiri "xaliifkaygii buu ahaa, diyadiisii iyo maalkii laga qaatayba waa dusheyda ee Xakiimow u tag ibnu Xandaliyah (Abii Jahal) maxaa yeelay amarka ciidanka cid kale ma hayso". Ka dibna Cutba ciidankii buu u khudbeeyey oo yiri "qureysheey Ilaah baan ku dhaartaye inaad Maxammed iyo asxaabtiisa la kulantaan waxba idiin tari mayso, Ilaah baan ku dhaartay haddii aad la dagaallantaan ka suuli maysaan ninku in uu ninka kale wajigiisa fiirin waayo, maxaa yeelay ina adeerkiis buu dilay ama ina abtigiis ama qaraabadiis, haddaba laabta oo isu daaya Maxammed iyo carabtaas kale oo hadii ay ka adkaadaan waa sidii aad rabteen, hadduuu ka adkaado oo boqortooyo helana idinkoo aan wax dambi ah ka gelin ayuu idiin imaanayaa, idinkuuna idinka dhashay".

Xakiim wuxuu u tegay Abii Jahal oo canbuur bireedkiisii haysta oo ku yiri "Cutba ayaa ii soo kaa diray oo sidaas i soo yiri. Abii Jahal wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye sambabaduu ka bararay (Cutba) markuu arkay Maxammed iyo ciidankiisa ee ma jirto arrintaasi, Ilaah baan ku dhartaye ma laabanayo ilaa Ilaahay nakala xukmiyo annaga iyo Maxammed, Cutbana wuxuu arkay in Maxammed iyo asxaabtiisu yihiin rudmo hilib ah, waxaana ku jira ciidanka Maxammed wiilkiisii Xudeyfa ibnu Cutba oo uu idinkaga baqayo inaad ka dishaan". Cutba markuu hadalkii Abii Jahal maqlay wuxuu yiri "wuu ogaan doonaa kaayagii fulayoobay ani iyo isaga". Abii Jahal si degdeg ah ayuu u istaagay isagoo ka baqay in fikraddaan laabashada ah ay ciidanka ku dhex fiddo, wuxuuna u cid diray Caamir ibnu Xadrami, oo la dhashay ninkii la dili jirey ee Camar ibnu Xadrami, wuxuuna ku yiri "xiliifkaagii (Cutba) wuxuu doonayaa inuu ciidanka celiyo markaad aragtay aarkaagii aad aarsan lahayd ee orod oo qayli", markaasuu Caamir ku dhex orday ciidanii isagoo qaylinay aoo leh "waa Camaray".

Markii labadii ciidan fagaarihii isugu soo baxeen ayaa Rasuulku SCW Allaah baryey oo yiri "Allahayow tani waa qureysh oo kibirkeedii iyo faankeedii la soo qaabishay la dagaallankaaga iyo beeninta Rasuulkaaga, Allahayow saaka halaaji". Intaa ka dib Rasuulku SCW wuxuu isha mariyey gaaladii markaasuu wuxuu arkay Cutba oo rati guduudan saaran markaas ayuu asxaabtiisii ku yiri "haddii ragga nin kheyr leh uu ku jiro waa ninkaas ratiga guduudan saaran haddii ay adeecaana way hanuunayaan".

Ka dib Rasuusku SCW wuxuu gudo galay inuu safayo ciidankii muslimiinta isagoo gacanta ku wata gammuun. Waxaa markaa safkii ka soo baxay nin la oran jirey Sawaad ibnu Qays, markaasaa Rasuulku SCW gamuun caloosha uga muday oo ku yiri "Sawaas is toosi", Sawaad ayaa hadlay oo yiri "Rasuulkii Allow waad i xanuujisay ee ii qisaas", Rasuulku SCW intuu calooshiisii fayday ayuu yiri "ka aarso", Sawaad intuu Rasuulka SCW isku duubay ayuu caloosha ka dhunkaday. Rasuulka SCW ayaa waydiiyey "Sawaadow maxaa arrinkaa kugu xambaaray?" Sawaad wuxuu yiri "Rasuulkii Allow waxaan u jeedo ayaa yimid, sidaa darteed waxaan jeclaystay inuu ahaado waqtiga iigu kaa dambeeya jirkeyga oo jirkaaga taabta", markaas ayaa Rasuuku SCW kheyr ugu duceeyey. Ka dib markii uu Rasuulku SCW safiddii dhammeeyey ayuu ciidankiisii amray in aysan dagaalka bilaabin ilaa uu amar kama dambays ah bixiyo. Waxaa kale oo uu u sharraxay arrin ka mid ah bilowga dagaalka oo wuxuu yiri "haddii ay idin hareereeyaan gammuunadiinna ku gana, seefahana ha siibannina ilaa ay idin dul yimaaddaan", ka dib wuxuu aaday waabkii isaga iyo Abuubakar, Sacad ibnu Mucaad iyo koox uu watana waardiye ka qabteen.

Dhinaca mushrikiintana Abii Jahal oo hoggaamiye ahaa ayaa Ilaahay baryay oo yiri "Allahayow kaayagii qaraabada gooyey oo waxaannaan aqoon la yimid saaka halaaji, Allahayow kaayagii loogu kalgacayl badan yahay agtaada oo loogu raalli ahaansho badan yahay maanta u gargaar", arrintaas Ilaahay wuu ka aqbalay oo Abii Jahal wuxuu baryeyey ayuu helay, Allena isagoo arrintaa tilmaamaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((HADAAD KALA XUKUMID DALABTEEN (GAALO) WAXAA IDIIN YIMID GARGAARKII (ALLE UU U GALAY RASUULKIISA SCW), WAXAANA IDIIN KHAYR INAAD REEBTOONAATAAN, HADDIISE AAD KU NOQOTAAN (LA COLAYTANKA DIINTA ALLE) ANAGUNA WAANU KU NOQON (U GAR GAARIDDA RASUULKA SCW), WAXNA IDIIN TARI MAYSO KOOXDIINU (CIIDANKIINU) HABA BATEE, ALLENA WAXA UU LA JIRAA MU'MINIINTA)), (Suuratul-Anfaal 19).

Waxaa la yaab ah in Abii Jahal isagoo Ilaahay iyo Rasuulkiisii la dagaallamaya uu haddana hadalladaas ku duceysanayo oo uu weliba isu arko inuu isaga xaq ku taagan yahay. Taani waxay la mid tahay maahmaahda soomaaliyeed oo ah; Nin walba qumanihiisaa qoorta ugu jira. Sida badanna qofku haduu og yahay inuu baadil ku taagan yahay wuu ka haraa mid caniid ah (madax adag) oo hoogey maahane, laakiin haddii uu isu haysto in uu xaq ku taagan yahay waligiis kama haro, qolo walbana waxay leedahay; anagaa xaq ku taagan", hase yeeshee xaqu ma qarsoomo, mana qaybsamo, Ilaahay baana ummadda kala saari doona.

DAGAALKII BADAR [Qaybtii 3aad]

Intaa ka dib waxaa bilaabmay dagaalkii wuxuuna u bilowday sidan: Nin la oran jirey Aswad binu Cabdil-asad Al-makhsuumi, oo ka mid ahaa ciidanka gaalada, ahaana sidiisaba nin akhlaaq xun, ayaa ka soo dhex baxay ciidankii gaalada isagoo leh "Ilaahay waxaan kula ballamay in aan darkooda ka soo cabbo ama aan soo dumiyo ama ka soke la igu dilo". Markii uu soo baxay ayaa waxaa u soo baxay Xamsa binu Cabdimudhali oo seef ka hor geeyey waxayna seeftii kala goysey dhudhunka, dhabar dhabar ayuuna u soo dhacay markaasuu xammaartay isagoo doonaya inuu dhaartiisii fuliyo oo darka gaaro hase yeeshee Xamsa ayaa ka daba tegay oo seef kale ku dhuftay isagoo darkii ku

jira halkaas ayuuna ku naf waayey. Ninkaas ayaan aahaa ninkii ugu horreerey ee goobtaas Badar ku dhinta.

Waxaa markaas ciidankii qureysh ka soo banbaxay saddex nin oo isku hal qoys ah lana kala oran jirey Cutba ibnu Rabbiica, Walaalkiis Shayba ibnu Rabbiica iyo wiilkiisii Waliid ibnu Cutba. Nimankaas oo ahaa halyeeyadii qureysh waxay dalbadeen in saddex nin dhinaca kale soo banbaxaan. Waxaa markaa Rasuulku SCW u saaray saddex nin oo Ansaar ah oo kala ahaa Cawf binu Xaarith, walaalkiis Mucaad binu Xaarith iyo Cabdullaahi binu Rawaaxa. Nimankii qureysh waxay yiraahdeen iyagoo doonaya inay ogaadaan nimanka loo soo xulay "waa kuwama", markaasaa loogu jawaabay "waa koox ansaar ah", dabadeed waxay yiraahdeen "kuf wanaagsan baad tihiin danse idinkama lihin ee waxan doonaynaa ilma adeerradayo", weliba nin ciidanka gaalada ka mid aha ayaa intuu qayliyey yiri "Maxammadow noo soo saar rag noo qalma oo ciddayada ah". Markaas ayaa Rasuulku SCW wuxuu u soo saaray saddexdii nin ee ciidanka ugu xigey oo kala ahaa Xamsa binu Cabdimudhalib oo adeerkiis ahaa, Cali binu Abii-dhaalib oo ina adeerkiis ahaa iyo Cubeyda binu Xaarith oo ina adeerkiis ahaa. Markay saddexdaa nin soo banbexeen ayey haddana nimankii qureysh yiraahdeen "waa kuwama", markii ay isu sheegeen ayey yiraahdeen "waxaad tihiin kuf wanaagsan". Ka dib ninba nin ayuu ku hagaagay; sida uu Ibnu Isxaaq weriyey Cubeyda, oo saddexda muslimiinta aha u da'yaaraa, wuxuu u baxay Cutba, Xamsana wuxuu u baxay Sheyba, Calina wuxuu u baxay Waliid. Hase yeeshee Axmed binu Xanbal iyo Abii Daa'uud waxay weriyeen in Cubeyda u baxay Waliiid; Calina u baxay Shayba; Xamsana u baxay Cutba.

Isu banbaxaas ayaa bilaabmay, Xamsa iyo Cali si dhadhso ahba waxay uga takhaluseen labadii nin ee ku kala aaddanaa, hase yeeshee Cubeyda iyo ninkii ku beegnaa waxay is dhaafsadeen laba seefood oo laba nabar oo halis ayey isku dhufteen. Xamsa iyo Cali ayaa markaa u yimid oo ninkii kale is raaciyey, Cubeydana soo xambaaray hase ahatee dhaawacaas ayuu u dhintay Cubeyda afar ama shan beri dagaalka ka dib iyadoo ay muslimiintu jidka ku sii jiraan. Cali binu Abii-dhaalib wuxuu ku dhaaran jirey in ay arrinkaas ku soo degtay aayadan. (LABADAANI WAA DOODAYAAL KU DOODAY RABBIGOOD). (Suuratul-Xaj 19).

Nimankii mushrikiinta ahaa markay arkeen sida ay mubaarasadii (isu soo ban bixiddii) ku dhamaatay, jab iyo guul darro degdeg ahna ay u soo hoyatey, ayna waayeen saddex oo odeyaashoodii ahaa, kana mid ahaa fardooleydoodii, dagaalkana wax ka hoggaaminayey, ayey hal mar soo qaadeen weerar ballaaran iyagoo ay ka muuqato caro daran.

Muslimiintii markay arkeen nasriga iyo guusha degdegga ah ee Ilaaha u soo hooyey iyo dhinaca gaalada jabka ku dhacay iyo weliba weerarka ay hadda soo qaadeen ayey galeen difaac iyagoo fulinaya amarkii Rasuulka SCW ee ahaa "dagaal ha qaadina ilaa aan amar idin siiyo, markay idiin dhawaadaan fallaaraha ku gana, hana la bixina seefaha ilaa ay idin dul yimaadaan, taasoo ay xikmadda ku jirtaa tahay in xamaasaddoodu ay jabto weerarkana ay ku hoobtaan sidaad darteed ayaa waxaa ku dhacay gaaladii khasaare sun.

Rasuulku SCW wuxuu baryayey Rabbigiis, ducadiina wuu ku ilxaaxyey (ku cel celiyey) isagoo leh "Allahayow i sii wixii aad ii yaboohday, Allahayow waxaan kugu baryayaa ballaantii iyo yaboohii aad iga qaaday, Allahayow haddaad kooxdan (muslimiinta) maanta halaagtid dib dhulka lagugu caabudi maayo, Allahayow haddaad doonto lagu caabudu maayo maanta ka dib weligeed. Aad ayuu Rasuulku SCW ugu xeeldheeraaday (ducada) isagoo Rabbigiis gargaar weydiisanaya oo isu dulleynaya ilaa uu go'iisii kor ka dhacay. Abuubakar ayaa u soo qaaday go'ii oo Rasuulka SCW ku yiri "Rasuulkii Allow kugu filan, Rabbigaana waad ku ilxaaxisay". Sidaa oo kale ayaa looga baahan yahay qofka mu'minka ah ee mujaahidkaa markuu dadal nooc walba ah la yimaaddo inuu Ilaahay baryo oo uu gargaarkiisa weydiisto uguna tadarruco (isu bihin bihiyo), una arko

ciidan iyo awood wax walba oo uu isu keeno ineysan wax tarayn hadduusan Rabbi u gargaarin.

Intaa ka dib Allaah ayaa u waxyooday Rasuulkiisa SCW oo ku soo dejiyey aayaddan:

((XUSUUSTA MARKAAD GAG GAAR WAYDIISANAYSEEN RABBIGIIN OO IDINKU AJIIBAY WAXAAN IDINKU SIYAADIN KUN MALAA'IGTA KA MID AH OO IS RAAC RAACSAN, ALLENA (ARRINKAAS) WAX KALE UMA YEELIN ILAAA BISHAARO IYO IN AY QULUUBTIINU KU XASISHO MAAHANE, NASRIGUNA MEEL KALE MA AHAA, ALLE AGTIISA MA'AHAANE, ALLENA WAXA UU AHAADAY ALLE QAALIB AH OO XAKIIM AH)), (Suuratul-Anfaal 9-10).

Wuxuu Allaah sidoo kale u waxyooday malaa'igtii oo ku yiri aayaddan:

((MARKUU RABBIGAA U WAXYOODAY MALAA'IGTA (OO UU YIRI) ANAA IDINLA JIREE SUGA (XOOJIYA) KUWA MU'MINIITA AH, WAXAAN KU RIDAYAA KUWA GAALOOBAY QULUUBTOODA ARGAGAX EE KA GARAACA LUQUNTA KORKEEDA, KANA GARAACA XUBIN WALBA)), (Suuratul-Anfaal 12).

Rasuulku SCW wax yar ayuu markaas lulmooday ka dibna madaxa ayuu kor u qaaday oo samada eegay wuxuuna yiri "bishaareyso Abuubakarow waxaa kuu yimid nasrigii Ilaahay, kani waa Jibriil oo faraskiisii wata, wejiga faraskiisuna uu boor leeyahay". Riwaayad kale oo Bukhaari weriyey waxay ahayd "bishaarayso Abuubakarow waxaa kuu yimid narsigii Alle kani waa Jibriil oo ku dheggen faraskiisa madixiisa oo qalabkisii dagaalka wata". Rasuuku SCW wuxuu ka soo baxay waabkiisa isagoo qaba cambuur bireedkiisi, wuxuuna akhrinayay aayaddan:

((WAA LA JABIN JAMACA (CIIDANKA GAALADA) DABADAYNA JEEDIN)), (Suuratul - qamar 45).

Ka dib wuxuu qaatay cantoobo ciid ah oo ku seyriyey ciidanki gaalada. Ciiddii ayaa markaa Allaah gaarsiieyey kulligood oo ka gashay indhaha, sanka iyo afka. Allaahna wuxuu soo dejiyey aayaddan:

((MA IDINNAAN LAYN IYAG (GALADA) EE ALLAAH LAAYEY, MANA AADAN GANIN MARKAAD GANAYSAY EE ALLAA GANY (OO INDHAHA KAWADA GALIYEY), SI UU MU'MINIINTA UGU NIMCEEYO NIMCO WANAAGSAN, WUXUUNA ALLE YAHAY (ALLE) WAX MAQLA OO KU CILMI LEH)), (Suuratul-Anfaal 17).

Rasuulku SCW wuxuu markaa bixiyey amarkii kama dambaysta ahaa wuxuuna amray in ay weerar qaadaan wuxuuna ku booriyey dagaalka isagoo leh "Allihii Maxamed naftiisu gacantiisa ku jirtey baan ku dhaartaye, nin maanta ma dagaallamo oo lama dilo isagoo sabraya ajarna ursanaya soona jeeda oo aan daba jeedin illaa Ilaahay Janno ayuu gelinayaa". Wuxu kaloo yiri "u istaaga Janno ballaarkeedu le'eg yahay smawaatka iyo dhulka". Cummayr ibnu Xammaam ayaa markuu hadalkaa maqlay yiri "bakhin bakhin" (oo uu ula jeedo liibaan liibaan), Rasuulku SCW wuxuu ku yiri "maxaa kugu xambaaray hadalkan?", Cummayr ayaa yiri "Rasuulkii Allow wax kale iguma xambaarin illaa inaan damcayo inaan ehelkeeda (jannada) ka mid noqdo maahane". Rasuulku SCW wuxuu yiri "ehelkeeda ayaad ka mid tahay", Cummayr timir uu cunayey ayuu tuuray oo yiri "haddaan noolaado intaan timirtan ka cunayo waa nolol dheer" wuuna dagaallamay ilaa uu ka shahiiday. Sidoo kale Cawf binu Xaarith ayaa yiri "Rasuulkii Allow maxaa addoonku Rabbigiis ku farax geliyaa?". Rasuulku SCW wuxuu ugu jawaabay "Ilaahay waxaa farax geliya inuu arko addoonkiisa oo gacantiisa dhex geliya cadowga isagoon waxba wadan" (oo uu ula jeedo dagaalama isagoon wax uu isku difaaco (canbuur bireed) wadan). Markaas ayuu Cawf orday oo dagaallamay ilaa laga dilay.

Rasuulku SCW khiddadii uu isticmaalay, oo ahayd in gaalada la weeraro markay xamaasaddoodu jabto, waxay ahayd xeelad aad u cajiib badan oo ay mulimiintu aad ugu faa'iideysteen, gaaladiina ku ridday niyad jab iyo fashil iyo in safafkoodii kala jabaan.

Waxaa kale oo muslimiinta intaa u sii dheerayd dhiirrigelintii Rasuulka SCW iyo wacdarihii uu ka muujiyay goobaha dagaalka, iyo sidoo kale malaa'igtii Ilaahay oo dagaalka ku jirtey oo iyaduna gaalada ka goyneysey luqumaha dushooda iyo xubin walbaba. Riwaayd laga weriyey Cikrama binu Subaji wuxuu ku yiri 'maalinkaas waxaa la arkayey madax go'aya iyo gacan finiineysa oo aan la ogeyn cidda ku dhufatay".

Abuu Daa'uudal-maasini wuxuu yiri "waxaan ceyrsaday nin mushrikiintii ka mid ah si aan u dilo, markaasaa madaxiisii soo dhacay seeftaydii oo aan gaarin, markaasaan ogaaday in cid kale dishay". Sidoo kale in Ansaartii Rasuulka SCW ka mid ah ayaa soo qafaashay Nabiga SCW adeerkii Cabbaas binu Cabdimudhalib markaasuu u keenay Rasuulka SCW, markaasaa Cabbaas yiri "Ilaah baan ku dhaartaye inuusan kani i soo qafaalin ee waxaa i soo qafaalay nin ka mid ah kuwa ugu weji qurxoon dadka oo saaran faras, haddan aanan ku dhex arag ciidanka". Ninkii saxaabiga ahaa ayaa markaa yiri "anigaa soo qafaalay Rasuulkii Allow", markaasaa Rasuulku SCW yiri "aamus Ilaahay baa kugu xoojiyey malak wanaagsane". Arrimahaas oo dhan waxay ku tusayaan sida ay malaa'igtii Rabbi uga qayb qaadatay dagaalkaas, nasrigii Allaahna ugu dhaboobay goobtaas.

Cid walba oo u istaagta manhajka Alle iyo in ay kalimaddiisu kor noqoto Allaah waa u gargaarayaa, ciddii ka hor timaadda manhajkiisa oo diaacda jidka sheydaankana Allaah garabkooda ayuu ka baxayaa. Sidaa darteed nimankii qureysh ahaa garabkooda ayuu Allaah ka baxay, safafkoodiina way kala jajabeen, waxayna bilaaben carar iyo insixaab (dib u gurasho).

Ninkii la oran jirey sheydaan oo awal isku soo ekeysiiyey Suraaqa ibnu Maalik sidaan soo sheegnayba oo laga soo bilaabo ilaa Makka la soo socday, markuu arkay malaa'igtii Allaah oo soo degayso ayuu cararay. Xaarith ibnu Hishaam, oo ka mid ahaa odeyaashii qureysh, ayaa sheydaankii tafta ku dhegay isagoo u malaynaya Suraaqa ibnu Maalik, markaasaa sheydaankii xabadka ku dhuftay oo ku cararay. Ciidankii gaalada qaar ka mid ah ayaa markaa ku qayliyey oo yiri "xaggee u socotaa Suraaqo?", miyaadan dhihin waan idinla joogayaa oo idin faaruqi maayo?", markaasuu yiri "waxaan arkaa wax aydin arag , aniga Allaah ayaan ka baqayaa". Allaahna isagoo arrintaan tilmaamaya wuxuu yiri:

((MARKUU SHAYDAANKU U QURXIYAY CAMALKOODA OO KU YIRI WAX IDINKA QAALIB NOQON KARA OO AAD DAD AH MAJIRO ANNA WAAN IDIN LA JIRAA, MARKAY IS ARKEEN LABADII CIIDANNA GADAAL BUU U GURTAY, WUXUUNA YIRI "ANIGA BARIBAAN IDINKA AHAY WAXAANA ARKAA WAXAYDAAN ARAG, WAXAANA KA BAQAYAA ALLE, OO WUXUU ALLE AHAADAY MID CIQAABKIISU DARAN YAHAY)), (Suuratul-Anfaal 48).

Mujrimkii weynaa ee Abii Jahal markuu arkay waxa ciidankiisii ku dhacay iyo waxa uu Suraaqa ninkii uu u heystay sameeyay, ayuu ciidankiisii la hadlay oo ku yiri "yeysan idin niyad jebinin khiyaanada Suraaqa, maxaa yeelay Maxammad ayuu ballan la lahaa, yeysanna idin murug gelinnin dilitaanka Cutba, Shayba iyo Waliid maxaa yeelay way degdegeen, Laata iyo Cusaan ku dhaartaye noqon mayno ilaa aan Maxammad iyo dadkiisa xargo ku xirxirno, hama dilina ee soo qabqabta si aan u ogeysiino xumaatadadii ay sameeyeen". Hase yeeshee hantaatacaas Abii Jahal waxba ciidankii uma siyaadin maxaa yeelay xaqiiqdii ayey indhohooda ku arkeen, meeshoodii ayeyna baqdintii iyo cararkii ka sii wadeen, qoortana looga guray.

Cabdiraxmaan ibnu Cawf wuxuu yiri "maalinkii Badar anigoo safka ku jira ayaa dhinacayga midig fiiriyey mise waxaa jooga wiil da'yar, dhinacayga bidix ayaan haddana fiirshey isna waxaa joogey wiil da'yar oo kii hore le'eg , markaasaan is iri "waaba anigoo aan aammin ku ahayn booska ay iga joogaan. Ka dib labadii wiiil midkood ayaa isagoo

kii kale ka qarsanaya igu yiri "adeer Abii Jahal i tus" markaasaan ku iri "adeer maxaad ku samaynaysaa", wuxuu yiri "waxaaa la ii sheegay inuu caayi jirey Rasuulka Allaah SCW, Ilaahay ay nafsaddaydu gacantiisu ku jirtey baan ku dhaartaye haddaan arko inaanan is gefaynin ila midkayagii horreeyaa dhinto", markaasaan la yaabay. Kii kale ayaa isna i qanjaruuftay oo sidii oo kale igu yiri. Muddo yar ka dib waxaan arkay Abii Jahal oo ciidankii dhex boodaya, markaasaan labadii wiil ku iri "miyeydiinaan u jeedin, wa kaas saaxiibkiinnii aad i weydineyseen", markaas ayey hal mark isa sii daayeen oo seefihii ku boobeen ilaa ay dhulka dhigeen". Ka dib labdii wiil Rasuulka SCW ayey u yimaadeen, wuxuu ku yiri "kiinnee diley?", mid kasta wuxuu yiri "aniga ayaa diley", Rasuulku SCW wuxuu yiri "ma masaxdeen seefihiinna?", waxay dheheen "maya", markaas ayaa Rasuulu SCW seefahodii eegay oo ku yiri "labadiinnuba waa disheen". Dagaalku markii uu dhammadayna hubkii Abii Jahal wuxuu siiyey mid ka mid ah labadoodii oo la oran jirey ibnu Camar ibnu Jumuux maxaa yeelay kii kale oo la oran jirey Mucaad binu Cafraa' goobtii ayuu ku shahiidey.

DAGAALKII BADAR [Qaybtii 4aad]

Markii dagaalkii dhamaaday ayaa Rasuulu SCW yiri "yaa soo eegaya waxa Abii Jahal lagu sameeyey?" markaas ayaa asxaabta qaar ka mid ah baadi goob u galeen. Waxaa helay Cabdullaahi ibnu Mascuud isagii oo naf xumi ku jirto, Cabdullaahi qoorta intuu cag ka saaray, garkana qabtay ayuu madaxa ruxay kuna yiri "ma wuusan Alle ku hoojin cadowgii Allow?". Abii Jahal wuxuu yiri "maxaa i hoojiyey, ma nin tolkiis diley baan u horreeyey, yaase maanta guusha helay?", Cabdullaahi wuxuu yiri "Alle iyo Rasuulkiisa SCW ayaa helay". Markaasuu Abii Jahal yiri "ari raaciiyow waxaad maanta kortay meel sarreysa", Cabdullaahi wuxuu yiri "weligeedba islaamka ayaa sarrayn jirey". Ka dib Cabdullaahi intuu madaxii ka soo gooyey ayuu u keenay Rasuulka SCW oo yiri "Rasuulkii Allow, cadowgii Alle ee Abii Jahal madaxiisii waa kan". Rasuuku SCW markuu arkay wuxuu yiri "Allihii isaga maahane uusan Ilaah kale jirin baan ku dhaartaye ma isagii baa?! Allaah ayaa weyn, Allaah ayaa mahad leh, Allihii yaboohiisii ku run sheegay, addoonkiisii u gargaaray, axsaabtiina keligiis jebiyey". Ka dib wuxuu Rasuulku SCW yiri "kani (Abii Jahal) waa fircoonkii ummaddaan".

Wuxuu Nabigu SCW yiri "waxaan aqoonsaday in rag reer bini Haashim ka mid ah iyo kuwo kaleba la soo khasbay oo ay san dagaalkeenna dooneyn, haddaba qofkii la kulma qof reer banii Haashim ah yuusan dilin, qofkii la kulma Abaa Bakhtari binu Hisham yuusan dilin, qofkii la kulma Cabbaas binu Cabdimudhalibna yuusan dilin waa la soo khasbaye". Markaas ayaa Abuu xudeyfa binu Cutba, oo aabbihiis, walaalkiis iyo adeerkiis lagu dilay goobta, yiri "ma waxaan leyneynaa aabbayaashayo, walaalahayo iyo qaraabadayo, Cabbaasna waa iska deynaa? Ilaah baan ku dhaartaye haddii aan la kulmo seef baan ku dilayaa". Arrintii ayaa Rasuulka SCW loo sheegay, markaas ayaa Cumar binu Khadhaab yiri "ii daa Rasuulkii Allow aan seef qoorta uga gooyee, Ilaah baan ku dhaartaye waa munaafaqoobey". Abuu Xudeyfa wuxuu dhihi jirey "kama aammin ihi kalimadii aan iri maalinkii Badar, waana ka cabsi qabaa in la ii dhaafi doono ilaa in shahaado (shahiidnimo) la iig dhaafo maahane". Abuu Xudeyfa wuxuu aakhirkii ku shahiiday dagaalkii Yamaama.

Ninkii la oran jirey Abaa Bakhtari oo Rasuulku SCW yiri yaan la dilin, waxay ahayd sababta loo yiri, markii Makka la joogey ayuu Rasuulka SCW ka celin jirey dadka, Rasuulka SCW iyo islaamkana wax dhib ah uma geysan jirin, wuxuuna ka mdi ahaa raggii baabi'ieyey warqaaddii kacbada ku dhegsaneyd ee lagu cunaqabateeyey rer banii Haashi, hase ahaatee ninkaas waa la diley oo rag asxaabtii ka mid ah ayaa arkay isaga iyo nin kale oo saaxiibkiis ah, markaasay ku dheheen "adiga kula dagaallami mayno oo waa nalaka reebay dilitaankaaga", markaasuu yiri "saaxiikayna" waxay dheheen "ma deyneyno saaxiibkaa", markaasuu ku yiri "haddaba waa wada dhimanaynaa aniga iyo saaxiibkey", markaas ayey dagaallameen oo labadoodiiba halkaas lagu diley.

Sidoo kale Cabdirahmaan binu Cawf oo wata canbuur bireedyo uu soo qaniimeystey ayaa wuxuu soo maray Umaya ibnu Khalaf oo ahaa ninkii Bilaal addoonsan jirey, ciqaabka daranna mariyey (markii uu Bilaal islaamay) iyo wiil uu dhalay Umaya oo la oran jirey Cali oo meel taagan markii ay arkeen in aysan fakan karin, markaasaa Umaya la hadlay Cabdiraxmaan oo ay ahaan jireex saaxiibbo waqtigii jaahiliga ee Makka la joogey, wuxuuna ku yiri "canbuur bireedyadan aad wadato anigaa kaga faa'iido badan ee miyaadan xoolo dooneyn "oo uu ula jeeday in isaga iyo wiilkiisa uu qafaalo si aan loo dilin, dabadeedna ay hadhow xoolo tiro badan isku furtaan. Cabdirahmaan, intuu canbuur bireedyadii tuurey, ayuu kexeeyey Umaya iyo wiiliisi", goor uu sii wado ayuu Umayd ku yiri Cabdiraxmaan; "kumuu ahaa ninkii riishadda xabad ku watay? markaasuu Cabdiraxmaan yiri "wuxuu ahaa Xamsa ibnu Cabdimudhalib", Umaya wuxuu markaa yiri "kaas ayuu ahaa ninkii arrinta nagu sameeyey (na laayey)". Cabdiraxmaan wuxuu yiri "goon aan dhexda sii marinayo ayaa waxaa arkay Bilaal, markaasuu dhawaaqay oo yiri "waa madaxii kufriga Umaya ibnu Khalaf magangal kuuma sugnaan", markaasaan iri "waa u sugnaaday magangal", Bilaal ayaa markaa aad u dhawaaqay oo yiri "Ansaartii Allaay waa kufriga Umaya ibnu Khalaf magangal uma sugnaan". Ka dib way na hareereeyeen, aniguna waan isku daboolay, markaas ayey wiilkiisii seef lug uga gooyeen, Umaya ayaa markaa qaylo aanan weligey iyadoo kale maqal ku qeyliyey, markaas ayaan ku iri "badbaadi naftaada magangal kuuma sugnaanine, aniguna Ilaah baan ku dhaartaye wax kuuma tari karo". Ka dib seefihii ayaa lagu boobey ilaa laga takhalusay labadoodiiba". Cabdiraxmaan mid ka mid ah seefihii muslimiinta ayaa dhudhunka uga dhacday, ka dib Cabdiraxmaan wuxuu dhihi jirey "Alle ha u naxariisto Bilaal dhudhunkeygii ayuu dhaawacay, asiirkieygiina (qafalkeygiina) waa diley".

Cumar binu Khadhaab sidoo kale wuxuu maalinkaas diley abtigiis Caasin binu Hishaam, Abuubakarna wuxuu u dhawaaqay wiilkiisii Cabdiraxmaan oo dhinaca gaalada ka soo jeedey isagoo leh 'qurunyahow meeyey maalkeygii", markaasuu Cabdiraxmaan yiri "waxaa ka haray hub, faras carbisan iyo seef dileysa duq baadiyoobey".

Waxyaabihii mucjisaadka ahaa ee meeshaa ka dhacay waxaa ka mid ahaa; ninka la yiraahdo Cukaasha binu Muxsin ayaa waxaa jabtay seeftiisii, markaasuu Rasuulka SCW u yimid isagoo seef ka doonaya. Rasuulku SCW, wuxuu siiyey qori wuxuuna ku yiri "ku dagaal Cukaash". Markii uu Cukaasha qaatay ayey ruxantay oo noqotay seef dheer oo adag, birteeduna caddahay, dagaalkii ayuuna ku galay Cukaasha, waxaana seeftaa la dhihi jirey Cawn, wuuna heysan jirey oo wuxuu ku geli jirey jikhaadyada ilaa uu aakhirkii ku shahiidey dagaalkii uu Abuubakar ku qaaday dadkii riddoobey markuuu Rasuulku SCW geeriyoodey. Sidoo kale waxyaabihii uu iimaanku ka muuqday ee goobtii badar ka dhacay waxaa ka mid ahaa; markuu dagaalku dhammaaaday ayuu Muscab binu Cumeyr soo maray walaalkiis Abii Casiis binu Cumeyr oo nin muslim ihi soo qafaalay. Markaasuu ku yiri "si fiican u adkee hooyadiis xoolo ayey leedahay oo waxaa la arkaa in ay furato". Abuu Casiis aya markaas yiri "ma taas ayaad ii dardaarantay walaalkayow". Muscab wuxuu yiri "kan ayaa walaalkay ah" oo uu ula jeeday saxaabigii waday.

Arrimahaas oo ku tusinaya sida uu asxaabta Rasuulka SCW iimaanku qalbigooda u degey oo aysan wax yar oo naxariis ah ugu hayn dadkaas Ilaahay diintiisii iyo manhajkiisii la colleytamay haba ahaadeen aabbayaashood, addeeradood, walaalahood, abtiyaashood ama qaraabadoodii. Waxayna ku run shegeen aayaatkii Allaah sida kuwaan:

((KUWA MU'MINIINTA AHW HAKA YEELANINA AABAYAALKIIN IYO WALAALIHIIN WALIYO HADDAY GAALNIMO KA JECLAADAAN IIMAANKA, CIDII KA WALI DHIGATA (GAALO) OO IDINKA MIDA, KUWAASAA UN DAALIMIIN AH)), (Suuratu-Tawbah 23).

((MA HELAYSID DAD RUMEEYEY ALLE IYO MAALINKA AAKHIRO IN AY JECLAADAAAN CID KHILAAFTAY ALLE IYO RASUULKIISA, HABA AHAADAAN AABAYAALKOOD, CARUURTOODA, WALAALAHOOD, IYO QARAAABADOODA, KUWAAS (AAN JECLAANIN GAALADA) WAA KUWA QULUUBTOODA LAGU QORAY IIMAANKA, WUXUUNA (ALLE) KU

XOOJIYEY GAG GAAR XAGIISA KA AHAADAY, WUXUUNA GALINAYAA JANNOOYIN AY HOOSTEEDA SOCONAYAAN WABIYAAL, WAYNA KU WAARAYAAN DHEXDEEDA, ALLE WAA KA RAALI NOQDAY IYANA WAA KARAALI NOQDEEN, KUWAASI WAA XISBIGA ALLE, XISBIGA ALLE UN BAANA LIIBAANAY)), (Suuratul-Mujaadala 22).

Ugu dambayntii markii dagaalkii dhammaaday, jab iyo halaagna ku habsaday ciidankii kufriga ee difaacayey waddada baadhilka ah ee sheydaanka, ayna u qaybsameen wax dhintay, wax la qafaashay iyo wax cararay oo uu dhaawac ka buuxo, Allaahna uu guul iyo nasri u soo hooyey xisbigiisii u dagaallamayey in kalimadda Allaah kor noqoto, kalimadda sheydaankuna hooseyso, goobtiina ay iyagu furteen oo u hareen, ayaa Rasuulku SCW wuxuu amray in ceel ka mid ahaa ceelashii Badar lagu guro bakhtigii gaalada, markaas ayaa lagu guray iyadoo qof qof laagu ridayo.

Dadkii muslimiinta ahaa ee goobtaas ku shahiiday waxay dhammaayeen 14 nin; 6 Muhaajiriin ah iyo 8 Ansaar ah, gaaladana waxaa ka dhintay 70 nin oo u badnaa madaxdoodii iyo odeyaashoodii, waxaana laga qafaashay 70 nin oo kale. Rasuulku SCW raggii odeyaashooda ahaa ayuu magacyadoodii ugu yeeray oo ku yiri "ma idin farax gelineysaa in aad Ilaah iyo Rasuulkiisa adeecdaan? annagu waan helnay wuxuu Rabbigayo noo ballan qaaday isaga oo xaq ah ee ma hesheen wuxuu Rabbigiin idiin ballan qaaday isaga oo xaq ah?" Cumar binu Khadhaab ayaa Rasuulka SCW ku yiri "Rasuulkii Allow maxaad ula hadlaysaa jir aan naf lahayn?", wuxuu markaas Nabiga SCW yiri "Allihii nafsadda Maxammad gacantiisa ku jirtey baan ku dhaartaye ugama maqal badnidin waxa aan leeyahay, laakiin ma jawaabayaan".

DAGAALKII BADAR [Qaybtii 5aad]

Ciidankii gaaladu markii ay hasiimo ku dhacday oo uu jabay ayuu kala firxaday iyadoo uu nin walba wejiga saaray meeshii ka horreysey. Magaaladii Makkana waxa ay suggeysey natiijada dagaalka iyo warka cusub ee ka soo yeeri doona goobta dagaalka.

Ibnu Hishaam wuxuu yiri "ninkii ugu horreeyey ee Makka tagay wuxuu ahaa nin la oran jirey Xaysamaan binu Cabdullaahi Al-khusaaci, markaas ayaa lagu yiri "bal noo warran", wuxuu yiri "Cutba binu Rabbiica waa la dilay, Shayba binu Rabbiica waa la dilay, Abii Jahal binu Hishaam waa la dilay, Umaya ibnu Khalafna waa la dilay". Markuu raggii magaca lahaa oo dhan tiriyey ayaa waxaa hadlay Safwaan binu Umaya oo qolka dhexdiisa fadhiyey wuxuuna yiri "Ilaah baan ku dhaartaye kani waxba ma oga ee bal aniga i weydiiya (iga waraysta) xaalkeyga", markaas ayey dheheen "ka warran Safwaan binu Umaya?", wuxuu yiri "waa kaa halkaa fadhiya, Ilaah baan ku dhaartaye aabbihiis iyo walaalkiis ayaa arkayey markii la dilayey.

Dhinaca Madiina, oo iyaguna sugayey akhbaarta cusub iyo waxa soo yeeri doona, ayaa markuu Rasuulku SCW helay narsirii Allaah waxa uu dhinaca Madiina u diray labo nin oo asxaabtiisa ka mid ahaa oo kala ahaa; Seyd binu Xaarith iyo Cabdullaahi binu Rawaaxa. Wuxuuna u kala diray labada dhinac ee magaalada Madiina. Dhinaca sare wuxuu u diray Cabdullaahi, dhinaca hoosena Seyd.

Yahuuddii iyo munaafiqiintii joogey Madiina waxay intaa dagaalka lagu maqnaa fidinayeen dacaayado been ah ilaa ay markii dambe faafiyeen in Nabiga SCW la dilay. Nin munaafiqiinta ka mid ahaa ayaa wuxuu arkay Seyd binu Xaarith oo soo socda oo fuushan hashii Rasuulka SCW, markaas ayuu yiri "Maxammad waa la dilay waa tan hashiisii aannu ku naqaanay, kanina waa Seyd oo aan ogeyn waxa uu ku hadlayo argagax dartiis, firxadkii baana yimid." Wax yar ka dibse markii ay labadoodii (Seyd iyo Cabdullaahi) galeen magaaladii ayaa dadkii muslimiinta ahaa isku soo hareereeyey iyagoo dhagaysanaya warka cusub ee ka soo yeeray goobtii dagaalka. Markii ay dhegaysteen guusha iyo nasriga uu Ilaah muslimiinta u soo hooyey waxaa la ruxantay

tahliil iyo takbiir, Usaama binu Seyd wuxuu yiri "Waxa uu warku noo yimid annaga oo markaa ciidda ku rognay gabadhii Rasuulka SCW Ruqiya binu Maxammad SCW, oo uu qabay Cusmaan ibnu Cafaan. Xanuunkaas gabadha awgeed ayuu Rasuulku SCW Cusmaan uga soo reebay ciidanka, qaybtiisii dagaalka badarna waa uu u dhigay.

Rasuulku SCW waxa uu sii degganaa goobtii Badar saddex maalmood, laga soo bilaabo markii uu dagaalku dhammaaday. Intii meeshii la joogay muslimiinta qayb ka mid ahi waxa ay ceyrsadeen gaaladii, qayb kalena waxa ay ururinayeen qaniimadii meesha laga helay, qayb saddexaadna Rasuulka SCW ayey waardiyeynaysay. Khilaaf yar ayey markaas asxaabtu isku khilaafeen xoolihii qaniimada ahaa ee gaalada laga furtay. Markaas ayaa Rasuulu SCW amray in xoolihii oo dhan la soo ururiyo oo isaga loo keeno. Waxaa markaas soo dagtay aayaddan:

((WAXAY KU WAYDIINAYAAN (XUKUNKA) QANIIMADA, WAXAAD DHAHDAA QANIIMADA WAXAA ISKA LEH ALLE IYO RASUULKA SCW, EE KA BAQA ALLE OO WANAAJIYA DHEXDIINA, WAXAADNA ADEECDAAN ALLE IYO RASUULKA SCW HADDII AAD TIHIIN MU'MINIIN)), (Suuratul-Anfaal).

Ka dib Rasuulka SCW iyo ciidankiisii Madiina ayey aadeen iyagoo wata 70 nin oo qafal ah. Maxaabistaas waxaa waday Cabdullaahi ibnu Kacab. Rasuulku SCW wuxuu markaas degay meel dhexe oo uu ciidankiiiugu qaybiyey xoolihii gaalada laga soo furtay, ka dib markuu ka saaray khumuskii.

Intaa ka dib Rasuulku SCW jidka ayuu sii qaaday, markuu marayo meesha la yiraahdo Safraa ayuu amray in la dilo Nadar binu Xaarith oo ahaa ninkii waday calanka gaalada, kana mid ahaa kuwii ugu waaweynaa dambiilayaasha qureysh, islaamkana aad u necbaa. Waxaa ninkaas qoorta u dheereeyey Cali binu Abii-dhaalib. Waddadii ayay ku sii socdeen Rasuulka SCW iyo ciidankiisii marki ay marayaan meesha la yiraahdo Cirqu Dubaya ayuu Rasuulku SCW amray in la dilo Cuqba ibnu abii Muceydh oo ka mid ahaa 70kii nin ee maxabiista ahaa. Ninkaas oo dhibaatooyinkiisa qaar ka mid ah aynu kitaabkan bilowgiisa kaga soo hadalnay wuxuu ahaa ninkii mandheerta saaray Rasuulka SCW markuu kacbada ku tukanayey, sidoo kale wuxuu ahaa ninkii marada ku ceejiyey Rasuulka SCW oo ku sigey inuu dilo. Haddaba ninkaa oo ka mid ahaa dadkii aadka u dhibay Rasuula SCW iyo diinta islaamka markii uu Rasuulku SCW amray in la dilo ayuu yiri "yaa maatada u jooga Maxammadow?" Rasuulkuna SCW wuxuu ugu jawaabay "naar". Waxaa ninkaa isagana dilay Caasim binu Thaabit Al-ansaari, waxaa kale oo la dhahaa waxaa dilay Cali binu Abii-dhaalib. Rasuulku SCW qof kale kama dilin dadkii maxaabiista ahaa, laakiin labadaan si degdeg ah ayuu u amray dilkooda shartooda oo badnayd awgeed.

Rasuulku SCW markuu marayo meesha la yirahdo Rawxaa ayaa waxa ka hor tegay qaar ka mid ahaa muslimiintii Madiina ku haray, iyagoo u tahniyadeynaya oo soo dhowaynaya Rasuulka SCW iyo ciidanka, waxaa markaas hadlay Salama ibnu Salaama oo ka mid aha ciidanka oo yiri "maxaad noogu tahniyadeyneysaaan Ilaah baan ku dhaartaye waxaan la kulannay habro fadhfadhiya sidii geelii", markaas ayaa Rasuulku SCW dhoolla caddeeyey oo ku yiri "walaalkay wiilkiisiiyow kuwaasi waa madaxyoweyn". Waxaa isna Rasuulka SCW la hadlay Useyd ibnu Xudeyr (oo ka mid ahaa dadkii madiina ku haray) wuxuu yiri "Rasuulkii Allow Ilaah ayaa mahad iska leh, Allihii ishaada qaboojiyey, Ilaah baan ku dhaartaye rasuulkii Allow ma ahayn dib uga dhiciddeyda Badar in aan malaynayey in aad cadow la kulmaysaan, laakiin waxa aan malaynayeey safarkii (in aad lakulmaysaan), haddii aan malayn lahaa cadowgana ma hareen", Rasuulku SCW wuxuu yiri "run baad sheegtay".

Rasuulka SCW wuxuu intaas ka dib soo galay magaalada Madiina isaga oo soo guuleystey oo Ilaahay soo ciseeyey. Maxaabiistiina waxaa Madiina la keenay maalinkii ku xigey, wuxuuna u kala dhiibay asxaabtiisa, wuxuuna u dardaarmay in la wanaajiyo.

Asxaabtu aad ayey u wanaajiyeen maxaabiistaas oo waxay siinayeen cuntooyinkooda kuwii ugu wanaagsanaa. Rasuulku SCW waxa uu kala tashaday asxaabtiisa sidii uu u geli lahaa maxaabiista. Waxaa hadlay oo fikrad soo jeediyey Abuubakar oo yiri "Rasuulkii Allow, wuxu waa walaalaheen, ilma adeerradeen iyo qaraabadeen, waxa aan anigu u arkaa in aad maal ka qaadatid si wixii aan ka qaadano aan gaalada ugu xoogeysana, iyagana waxaa la arkaa in Ilaahay soo hanuuniyo oo ay garab inoo noqdaan".

Wuxuu markaa Rasuulku SCW yiri "maxaa aragtaa ina Khadhaabow", Cumar wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye ma arko ra'yiga Abuubakar ee waxaan arkaa in aad aniga ii dhiibtid hebel qoorta aan ka gooyee, Calina aad u dhiibtid walaalkiis Caqiil binu Abii-dhaalib qoorta ha ka gooyee, Xamsana aad u dhiibtid walaalkiis Cabbas qoorta ha ka gooyee si Ilaahay u ogaado in aannaan wax jacayl ah qalbiga ugu heyn mushrikiinta, kuwanuna waa madaxdoodii iyo hoggaamiyayaashoodii". Rasuulku SCW wuxuu markaa qaatay ra'yigii Abuubakar, wuxuuna ku xukumay in ay xoolo isku furtaan.

Cumar wuxuu yiri "maalinkii dambe ayaan u imid Rasuulka SCW iyo Abuubakar oo ooyaya, markaas ayaa ku iri "Rasuulkii Allow ii sheeg waxa kaa oohiyey adiga iyo saaxiibkaa? haddii aan oohin iska helo waan ooyayaa, haddii kalena waan iska raadinayaa arrintiinna darteed". Markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "arrintii ay ii soo bandhigeen saaxiibbadaa, oo ahayd in xoolo laga qaato (maxaabiista), sababteed waxa uu cadaabkeedu iga soo dhowaaday geedkan". Allaahna isagoo arrintaa tilmaamaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((UMA HABOONA NABI IN AY U AHAATO KUWA LA QAFAASHAY (MAXAABIIS) ILAA UU KAGA JILCIYO (GAALADA) DHULKA, (OO AY TABAR DHIGAAN) WAXAAD DOONAYSAA MUUQA ADUUNYADA (XOOLO), ALLENA WAXA UU DOONAYAA AAKHIRO (IN AAD GAALO BAABI'ISAAN), ALLE WUXUU AHAADAY (ALLE) QAALIB AH OO XAKIIM AH)), (Suuratu-Anfaal 67).

Allaah SW wuxuu aayaddaan ku canaantay Rasuulka SCW oo qafaashay gaaladii kana aqbalay in ay is furtaan, nimankan oo aan weliba ahayn askar keliya ee ahaa hoggaamiyayaashii ugu khatarsanaa gaalada. Sidaa darteed Allaah wuxuu ku ayiday fikradii Cumar ee ahayd in madaxa laga guro maxaa yeelay Allaah diintiisii ayey la dagaallameen, xoog baan lagu soo qabtay, in la dilona waxaa ku jirey xikmado badan oo Allaah keliya uu koobi karo, waxaana ka mid ah:

1. In aysan mar kale cadowga u soo dagaallamin, Ilaahay diintiisana uga hor imaan sida dhacday in markii la sii daayey ay qaar badan oo ka mid ahi ka soo qayb galeen duuullaamadii dambe ee islaamka lagu soo qaadday.

2. In la tuso in Rasuulka SCW iyo muslimiintu aysan wax naxariis ah u hayn ciddii Ilaahay diintiisa ka hor timaadda.

3. In kuwo badan oo ku dhiirran lahaa dagaalka muslimiinta ay ku quus qaatan oo aysan ku soo degdegin duullaan dambe.

Waxaa lagu xukumay maxabiistii xoolo qiimohoodu u dhexeeyo kun Dirham ilaa Afar kun oo Dirham, qofkii aan waxba haysanna waxaa la amray in uu qoraalka baro toban wiil oo muslimiinta reer Madiina ka mid ah, maxaa yeelay reer Madiina sidaa wax uma qori jirin oo reer Makka ayaa uga horeeyey. Rasuulku SCW wuxuu iska cafiyey oo uusan waxba ka qaadin dhawr nin oo qaarkood u dan sheegtay ayna ka mid ahaayeen; Mudhlab binu Xandal, Seyfi ibnu Abii Rufaaca iyo Abuu Ciisa Al-jumuxi. Abuu Ciise, oo nabiga SCW aad ugu dan sheegtay, kana ballan qaaday in uusan duullaan dambe soo raaci doonin, wuxuuu soo racay duullaankii ku xigey ee Uxud markaas ayaa mar labaad la qabtay oo qoorta loo dheereeyey. Sidoo kale waxaa ka mid ahaa maxaabiista la cafiyey Abil-Caas oo qabay gabdhii Rasuulka SCW ee Seynab oo wakhtigaas Makka joogtay. Si ay

ninkeeda u furato waxay Makka ka soo dhiibtay qoor xirkeedii, oo ay arooskeedii hooyadeed Khadiija siisay. Rasuulku SCW markii loo keenay qoor xirkaas wuxuu asxaabtii ka codsaday in ay u sii daayaan Abil-Caas, iyaguna way ka yeeleen, dabadeedna wuxuu Rasuulku SCW Abil-Caas u shardiyey in uu Seynab soo diro, isaguna waa aqbalay oo markuu Makka tegey ayuu soo diray, ka dibna wuxuu Rasuulku SCW u direy Seyd binu Xaarith iyo labo nin oo Ansaar ah in ay Seynab dhex ka soo wadaan. Waxaa kale oo ka mid ahaa maxaabiista nin la oran jirey Suheyl binu Camar oo u hadli jirey gaalada. Cumar binu Khadhaab ayaa markaas Rasuulka SCW ku yiri "Rasuulkii Allow Suheyl foolasha ka siib, carrabkana jeex si uusan mar kale mowqif dambe ugaga soo hadlin", hase yeeshee Rasuulku SCW wuu ka diiday Cumar fikraddaa uu soo jeediyey maxaa yeelay waa tamthii (dhalan rogid iyo jir xumayn) Islaamkuna ma ogala.

Intaa aan maxabiistii la sii deyn ayaa waxaa Makka aaday nin mulimiinta ka mid ah oo la oran jirey Sacad binu Nucmaan si uu u soo cumraysto. Markii uu Makka tegay ayaa Abuu Sufyaan xabbisay, dadka maxaabiista ahna waxaa ku jirey wiil uu dhalay Abuu Sufyaan oo la oran jirey Camar. Dabadeedna waxaa loo sii daayey wiilkiisii isna wuxuu sii daayey Sacad.

Maxaabiista oo isugu jirey dad la cafiyey iyo dad xoolo isku furtay, sidaa ayaa loo sii daayey. Arrintoodiina waxa ay noqotay siduu Abuubakar soo jeediyey Rasuulkuna SCW ku raacay oo xoolona waa laga helay, badankoodiina aakhirkii waa islaameen. Dagalkii Badarna sidaa ayuu ku dhammaday, waxaana ku soo degtay oo si fiican u qaadaadhgtay suuradda la yiraahdo Anfaal. Dagaalkaas, oo ahaa dagaal qureysh dulleeyey, una keenay khasaare iyo hoog, ummada badan oo awal musliminta u soo miciyo lisanayeyna candhuuftii ayey dib u leqeen ka dib markii ay arkeen waxa ku dhacay qureysh oo ahayd libaaxii carbeed. Waxaana islaamkii qaatay baqdin ay u baqayaan maalkooda iyo naftooda kooxdii awal ka hadhay labadii qabiil ee Ansaar. Waxaana kooxdaas madax u ahaa Cabdullaahi ibnu Ubay ibnu Saloo, oo ahaa ninkii ay reer Madiina rabeen in ay madax ka dhigtaan intii aysan islaamin ka hor. Dadki muslimiinta ahaa Ilaahay wuxuu siiyey ciso iyo guul, wuxuuna ka saaray cabsidii iyo tabar yaridii haysey.

DUULLAANKII BANII SULAYM

Markuu dhammaaday dagaalkii Badar, oo ahaa dagaalkii ugu horreeyey oo ay isaga hor yimaadeen xaqa iyo baadilka. Allaahna uu nasrigiisa siiyey dadkii muslimiinta ahaa, carab oo dhanna ay ogaatay xoogga iyo awoodda muslimiinta iyo in ay yihiin awood khatar ku ah iyaga, haddii aan laga hor teginna ay mandiqada oo dhan qabsanayaan, ayaa waxaa bilaabmay naceyb iyo cadaawad loo hayo muslimiinta. Qabiil walba oo ka mid ahaa mushrikiinta carabta iyo yahuudda wuxuu ku fekerayey sidii uu uga hortegilahaa islaamka.

Waxaa hormood u ahaa cadowtinimadaas reer Makka, oo iyagoo awalba u ciil qabay Nabiga SCW iyo asaxaabiisa, haddana dharbaaxo xumi ku soo dhacday Badar, halkaas oo ay ku waayeen madaxdoodii iyo raggoodii khatarta ahaa. Dadkii Makka ku noolaa waxaa quluubtooda buuxiyey nacayb iyo colaad ay u hayaan islaamka iyo muslimiinta. Sidoo kale saddexdii qabiilo ee yahuudda ahaa oo degganaa Madiina waxa ay la guuxayeen nacaybka islaamka, qabiil ka mid ihi nacaybkaas islaamka wuuba muujistay. Waxaa degganaa baadiyaha iyo magaalooyinkii ku hareereysnaa madiina.

Rasuulka SCW iyo asxaabtiisa waxa uu go'aankoodu ahaa in ay u beerdhigaan cid walba oo islaamka soo milicsata, waxa ayna ka hor tegi jireen cid walba oo duullaan soo abaabusha damacdana in ay muslimiinta dhib u geysato. Rasuulkuna SCW markuu maqlo qolo soo hub ururSanaysa duullaan ayuu qaadi jirey oo meesheeda ayuu ugu tegi jirey. Sidaa darteed Rasuulku SCW markuu ka soo laabtay Badar oo uu joogey 9 cisho ayaa wardoonkii Madiina wuxuu u soo gudbiyey in qabiilka la yiraahdo banii Suleym oo

ka mid ahaa reer Qadafaan uu u diyaarinayo ciidankiisii sidii uu duullaan ugu soo qaadi lahaa Madiina. Rasuulku SCW markuu maqlay arrinkaas wuxuu kaxaystay ciidan dhan 200 oo nin oo gaadiidkoodii iyo hubkoodii wata, Madiinana wuxuu madax uga dhigay Cabdullaahi ibnu ummi Maktuum.

Rasuulka SCW iyo ciidankiisii waxay gaareen meesha la yiraahdo Kudru oo ay reer banii Suleym degganaayeen. Reer banuu Suleym markii ay maqleen Rasuulka SCW iyo ciidankiisi ayey kala carareen, waxayna toggii ay deganaayeen uga tageen 500 oo geel ah. Rasuulka SCW iyo ciidankiisiii waxay goobtii degganaayeen saddex beri, ka dibna way soo laabteen iyagoo geelii soo kexeystay. Rasuulku SCW wuxuu geelii ka bixiyey khumuskii, afartii boqol ee soo hartayna wuxuu u qaybiyey ciidankiisii oo 200 nin ka koobnaa, sidaas darteed nin walba waxaa ku soo hagaagay 2 neef oo geel ah. Waxaa kale oo Rasuulku SCW soo qafaashay wiil la oran jirey Yasaar, wuuna xoreeyey, ka dibna Rasuulku SCW Madiina ayuu ku soo laabtay.

SHIRQOOLKII RASUULKA SCW LALA DAMCAY

Markii uu jab ku soo dhacay mushrikiintii qureysh (dagaalkii Badar), waxaa Makka buuxiyey colaaddii Rasuulka SCW maxaa yeelay odeyaashoodii ayuu (dagaalkaas ku) laayey, Haddaba maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa guri wada fariistay Safwaan binu Umaya, oo aabihiis iyo walaalkiis Badar lagu dilay, iyo Cumayr binu Wahab Al-jumuxi, oo ka mid ahaa dadkii aad u dhibi jirey Rasuulka SCW iyo asxaabta, wiilkiisii Wahab binu Cumayrna lagu qafaashay Badar.

Waxay labadaa nin ka sheekeysteen dadkii Badar lagu laayey ceelka lagu gurey, markaas ayaa Safwaan yiri "Ilaah baan ku dhaartaye nolosha iyaga ka dambaysaa nolol maaha", Cumayr ayaa markaas yiri "run baad sheegtay, Ilaah baan ku dhaartaye haddii aysan jirin deyn la igu leeyahay oo cid iga gudeysaa aysan jirin iyo ciyaal aan rafaad uga baqayo gadaashay, rukuubkayga ayaan fuuli lahaa ilaa aan Maxammed u tago oo dilo, arrin aan ku cudurdaartana waan haystaa oo wiilkaygii ayey qafaasheen". Safwaan ayaa markaa jeclaystay fikraddaas wuxuuna yiri "deyntaadu waa dusheyda oo anigaa kaa gudaya, ciyaalkaaguna ciyaalkayga ayey la noolaanayaan, inta ay nool yihiinna wanaag ayaan u samaynayaa". Cumayr wuxuu yiri "qari go'aankeenna", Safwaanna wuxuu yiri "waa yahay".

Cumar seeftiisii intuu qaatay oo rakuubkiisi fuulay dhaqaaqay ilaa uu Madiina ka tegey. Ka dib isagoo hashiisii masaajidka agtiisa ku aruminaya ayaa waxaa arkay Cumar binu Khadhaab oo koox muslimiinta ka mid ah la sheekaysanayey, markaasuu yiri "eygaan Cumayr oo cadowga Ilaahay ah wax aan shar ahayn lama imaan", ka dibna wuxuu cumar u tegey Nabiga SCW oo ku yiri "Nabigii Allow, kani waa cadowgii Ilaahay ee Cumayr oo seeftiisii jeeniqaarsan". Markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "ii soo daaya". Cumar ayaa u tegey isaga oo seeftiina dharka u saaray, rag muslimiinta ka mid ahna ku yiri "iila geeya Rasuulka SCW oo agtiisa fariisiya, kana digtoonaada aammin ma ahane". Markii la soo geliyey oo uu Rasuulku SCW arkay Cumar oo wada ayuu yiri "soo daa Cumarow, war Cumery soo dhowow", markaasuu Cumeyr soo dhawaaday wuxuuna yiri "subax wanaagsan", Rasuulku SCW wuxuu ugu jawaabay "Ilaahay wuxuu nagu karaameeyey salaan ka kheyr badan salaantaada Cumayrow, waana salaant Ehlu-jannaha", Ka dib Rasuulku SCW wuxuu yiri "maxaad u timid Cumayr?", wuxuu yiri "waxaan u imid in aad ii soo deysaan wiilkayga aad soo qafaalateen". Rasuulku SCW wuxuu yiri "maxay tahay seeftan aad qoorta ku wadato?", Cumayr wuxuu yiri "Allaah ha hoojiyo seefo, ma wax bay noo tareen". Rasuulku SCW wuxuu yiri "runta ii sheeg maxaad u timid?", wuxuu yiri "arrintaas ma ahane wax kale uma imaan". Markaas ayaa Rasuulku SCW wuxuu yiri "adiga iyo Safwaan baa qol fariistay, waxa aadna ka sheekaysateen dadkii godka lagu guray ee qureysheed, waxaad markaa tiri "haddaan

deyn la igu lahay, ciyaalna ii joogin, waan bixi lahaa ila aan Maxammed soo dilo", Safwaan ayaa markaa dusha saartay deyntaadii iyo ciyaalkaagii si aad aniga ii disho, Allaahna waa kala fogeeyey aniga iyo arrinkaas". Cumayr wuxuu yiri "waxa aan qirayaa in aad tahay Rasuulkii Allaah, waxaannuna ahayn Rasuulkii Allow kuwo kugu beeniya in khabar samada kaaga yimaado, waxyina kugu soo dego, arrintaanna cid kale nalama ogeyn aniga iyo Safwaan, Ilaah baan ku dhaartaye waxa aan ogaadey Allaah ma ahne cid kale in aysan warkaan kuu keenin, Alle ayaa mahad leh Allihii islaamka igu hanuuniyey, socodkaanna ii soo waday", dabadeedna tawxiidkii ayuu qiray. Markaas ayaa Rasuulku SCW ku yiri asxaabtii "fahamsiiya walaalkiin diintiisa qur'aankana u akhriya, maxbuuskiisana u sii daaya".

Ninkii Safwaan ahaa, oo Cumayr ay ballanta isku ogaayeen, wuxuu reer Makka ku dhihi jiray intuu Cumayr maqnaa "ku bishaaraysta dhacdo imaan doonta dhowaan oo idin hilmaansiin doonta dhacdadii Badar". Wuxuuna dadka socotada ah ee Madiina ka yimaada weydiin jirey Cumayr iyo xaaladdiisa ilaa markii dambe loo soo sheegay in Cumayr islaamay. Safwaan wuxuu markaas ku dhaartay in uusan Cumayr dib dambe ula hadlin, waxna tarin. Ka dib wuxuu Cumayr Makka ku soo laabtay, isagoo soo islaamay, wiilkiisiina loo soo daayey, wuxuuna Makka ka bilaabay dacwo uu dadka islaamka ugu yeerayo, dad badan ayaana gacantiisa ku islaamay.

BALLAN KA BIXII YAHUUDDII REER BANII QAYNUQAAC

Sida aan soo marnayba Rasuulku SCW markii uu Madiina u soo hijrooday wuxuu heshiis la saxiixday saddexdii qabiilo ee yahuudda ahaa ee la kala oran jirey: Banii Qaynuqaac, Banii Nadiir iyo Banii qureyda. Heshiiskaa waxaa ka mid ahaa in Madiina nabad loogu wada noolaado oo aan la isku xadgudbin. Sidaa darteed Rasuulka SCW iyo asxaabtiisa oo caan ku ahaa in aysan ballanta ka bixin, haddiise looga baxo ka ficilo qaata, waxa ay siduu ahaa u ilaaliyeen heshiiska, laakiin yahuudda oo weligeedba lagu yaqaannay ballan darro, khiyaamo iyo dhagar, kama aysan suulin sifadoodaas, waxayna intaas muslimiinta u maleegayeen shirqoo iyo dhagar, iyagoo weliba dacaayado ka fidinaya muslimiinta, tashwiishna ku furayey. Waxaana dhagartoodii ka mid ahaa: nin la oran jirey Shaas binu Qays, oo ahaa odey yahuudi ah, ayaa soo maray koox ansaar ah oo meel wada fadhida, markaas ayuu ka carooday wanaagga iyo jacaylka uu islaamku dhexdooda dhigay labadii qabiil (Aws iyo Khasraj) oo muddo dheer cadaawad iyo dagaal ka dhexayn jirey, markaas (ayuu) yiri "jamac baa ku kulmay magaaladaan, Ilaah baan ku dhaartaye la joog nooma ahaanin haddii ay arrin ku kulmaan", wuxuu markaas la hadlay wiil yar oo yahuudi ahaa oo la socday kuna yiri "u tag nimankaas oo la fariiso, waxaadna xusuusisaa maalintii Bucaath iyo wixii ka horreeyey, una tiri gabayadii ay isu tirin jireen". Wiilkii meeshii ayuu tegey sidii ayuuna sameeyey. Markaas ayaa raggii meesha joogey sheydaan simbiririxeyey, waxaana qaadday ficiladii qabiilka ilaa ay arrintii ka hadleen oo ka doodeen, isuguna faanee, ayna isu istaageen laba nin oo labada qabiil kala ahaa oo midkood kii kale ku yiri "haddii aad doontaan iyadii (Bucaath) ayaan soo celineynaa". Dabadeedna labadii kooxoodba way caroodeen, waxayna dheheen "ballan aanu samaysanno". Ka dibna waala isku hub doontay.

Arrintii ayaa gaadhay Rasuulka SCW, markaas ayuu si degdeg ah u soo baxay isaga oo ay la socdaan koox asxaabtiisa ka mid ah, markuu u yimid raggii isku hub doontay ayuu ku yiri "muslimiiney Allaah, (Allaah), war ma habarwacashadii jaahiligaad (ku dhaqaaqdeen) aniga oo idin dhex jooga, ka dib markuu Allaah idin hanuuniyey oo idin sharfay, idinkana gooyey arrintii jaahiliga, oo idinka koriyey gaalnimo, quluubtiinnana isku soo dumay". Markaas ayey raggii ogaadeen in uu sheydaan simbiririxiyey oo ay arrintaanu ahayd makrigii (dhagartii) cadowgooda. Ka dibna way ooyeen, waana is

mucaanaqeeyeen (marxabeeyeen). Dabadeedna Rasuulka SCW ayey soo raaceen iyagoo Ilaahay ka badbaadiyey fitnadii sheydaankii Shaas binu Qays, oo ka mid ahayd khiddadihii ay yahuuddu muslimiinta la rabeen.

Yahuudda oo mar walba isku dayeysey in ay qas iyo fitno ka dhex riddo muslimiinta waxay kaloo samayn jireen in qaarkood islaamka qaataan subixii, galabkiina ka baxaan iyagoo ujeeddadoodu tahay in ay muslimiinta ku beeraan shaki, islaamkana laga baxo. Arrintaasna Allaah isagoo tilmaamaya wuxuu yiri:

((WAXAY DHEHEEN KOOX EHELU KITAABKA KA MID AH "RUMEEYA KII LAGU SOO DAJIYEY KUWA (XAQA) RUMEEYEY (QURAANKA) MAALINKA GALINKIISA HORE KUNA KUFRIYA AAKHIRKIISA, WAXAY MUDDAN YIHIIN (HADAAD SAAS SAMAYSAAN) INAY KA NOQDAAN (ISLAAMKEE) (AMA GAALOOBAAN)". (Suuratu Aali-Cimraan 72).

Sidoo kale waxa ay samayn jireen in ay maciishadda ku ciriirshaan qofka islaamka qaata, oo haddii ay deyn ku leeyihiin way ku dhibi jireen, haddii uu deyn uga baahdana way u diidi jireen, haddii uu deyn ku leeyahayna way u diidi jireen, waxayna ku dhihi jireen "waxaa deyntaada guditaankeedu na saarnaa intii aad diintaadii ku jirtey, haddii aad mar iilatay waxba naguma lihid".

Arrimahaas iyo kuwo la mid ah ayey yahuuddu samayn jireen intii Badar ka horreysey iyagoo ku hoos gabbanaya heshiiskii Rasuulka SCW, Rasuulka SCW iyo asxaabtiisuna intaas oo dhan waa ay sabraayeen waxa ayna ku dadaalayeen hanuuninta yahuudda iyo in ay xaqa qaadato, waxaa kale oo ay ilaalinayeen heshiiskii ay la galeen yahuudda oo ahaa in Madiina nabad loogu wada noolaado. Yahuuddu markii ay arkeen nasriga iyo guusha Ilaahay uu muslimiinta siiyey dagaalkii Badar waxa ay bilaabeen xiqdi iyo xaasdnimo ay ka xun yihiin guusha muslimiinta. Waxaana saddexdii qabiil ee yahuudda ahaa ugu sii dhib badnaa reer bani Qaynuqaac, oo ahaa nimankii ugu horreeyey ee ballanta buriyey. Reer banuu Qaynuqaac waxay ay degganaayeen gudaha Madiina, waxayna ku dheereeyeen sancada iyo birta oo waxay samayn jireen hubka iyo qalabka dagaalka isla mar ahaantaasna iyaga ayaa saddexdaas qabiil ee yahuudda ah ugu geesisanaa. Ciidankooda dagaalku wuxuu gaarayey ilaa 700 oo nin.

Rasuulku SCW, markii uu arkay xadgudubka iyo qooqa ay yahuuddu waddo siiba reer banuu Qaynuqaac, ayuu yahuuddii oo dhan ku kulmiyey suuqii reer banuu Qaynuqaac oo ku yiri "yahuudeey islaama inta uusan idinku dhicin waxa ku dhacay qureysh", markaas ayey dheheen "Maxammedow yeysan naftaadu kugu kedinin diliddii aad dishay odeyaashii qureysheed oo ahaa duqow aan dagaalka aqoonin, haddaad annaga nala dagaashana waxa aad ogaanaysaa in aan rag nahay, annaga oo kalena aadan hore ula kulmin". Allaah isagoo arrintaa tilmaamaya wuxuu yiri:

((WAXAAD KU TIRAAHDAA (NABIYAW) KUWA GAALOOBAY WAA LA IDINKA QAALIB NOQON, WAXAANA LA IDIN KU KULMIN JAHANNAMO, IYADAANA GOGOL U BAAS LAHAATAY)), (Suuratu Aali-Cimraan 12).

Ka dib Rasuulku SCW wuu qariyey caradiisii, wayna u sabreen isaga iyo asxaabtiisuba, laakiin arrintaasi waxa ay reer banuu Qaynuqaac u siyaadisay dulmi, qooq iyo in ay qasaan magaaladii Madiina.

Ibnu Hishaam wuxuu ka weriyey Abii cawn in haweeney carab ah ay la soo gashay badeeco suuqi reer banii Qaynuqaac, waxayna ag fariisatay nin wax u sancaynayey. Yahuuddii waxay isku dayeen in ay haweentaa wejiga ka feydaan, iyaduna way diiddey, markaas ayaa mid ka mid ahaa (Yahuuda) maradeeda dacalkeeda ku xiray dhabarkeeda iyada oo aan ogeyn. Markii ay istaagtay ayey cawradeedii feydantay, qosol ayey iyagiina la daateen, haweentii waa ay qaylisay. Waxaa arrintii ka xanaaqay nin muslim ah

wuxuuna dilay yahuudigii ficilkan sameeyey, yahuuddiina waxay dileen ninkii muslimka ahaa, ka dib muslimiintii way isu habarwacdeen.

Rasuulku SCW wuxuu la soo baxay ciidankiisii, Madiinana wuxuu madax uga dhigay Abaa Lubaaba binu Cabdi-mundir, calanka guud ee muslimiintana wuxuu u dhiibey Xamsa ibnu Cabdimudhalib.

Maalin Sabti ah oo bisha Shawaal ay kala bar ahayd, sannadkii 2aad ee hijriga, ayuu Rasuulku SCW ciidankiisii kexeeyey ilaa uu ka gaaray degaankii reer banuu Qaynuqaac.

Markii ay reer banuu Qaynuqaac arkeen Rasuulka SCW iyo ciidankiisa, waxay galeen dhufeysyadoodii. Rasuulka SCW iyo ciidankiisiina way isku hareereeyeen. Markii 15 beri lagu hareeraysnaa oo la dul degganaa, noloshiina ciriiri ku noqotay, quluubtoodiina uu Ilaahay argagax ku ridey, ayey is dhiibeen.

Ka dib isagoo Rasuulku SCW doonaya in uu reerkaas abaalkooda marsiiyo, ayaa waxaa istaagay Cabdullaahi ibnu Ubay ibnu Salool, oo munaafaqii aan ka soo hadalnay ahaa, wuxuuna Rasuulka SCW ku ilxaaxiyey in uu nimankaas iska daayo, wuxuuna yiri "Maxammed hagaaji gargaarayaasheda" waayo qabiilkiisa Khasraj iyo binu Qaynuqaac ayaa xulufo ahaa jirey islaamka ka hor. Rasuulku SCW wuu ka jeedsaday hase yeeshee Cabdullaahi arrintii wuu ku soo celceliyey, wuxuuna gacanta geliyey canbuur bireedka Rasuula SCW jeebkiisa. Rasuulku SCW intuu aad u carooday oo wejigiisii madoobaaday ayuu yiri "i sii daa, war hooggaagee i sii daa" hase ahaatee munaafaqaasi waa diidey oo arrintiisii buu ku adkaystay isagoo oranaya "ma jirto Ilaah baan ku dhaartaye ku sii dayn maayo ilaa aad wanaajisid xulafadeyda, Afar boqol oo seefle iyo Sadex boqol oo canbuur biredle ah oo weligood iga difaaci jiray guduud iyo madow (carab iyo cajam), miyaad maanta hal mar layneysaa. Ilaah baan ku dhaartaye waxa aan ka baqayaa halaag". Ka dib Rasuulku SCW wuu u sii daayey laakiin wuxuu amray in ay Madiina ka guuraan. Markaas waxa ay u guureen dhinaca Shaam in kasta oo qaar kamid ahaa ay khaybar u guureen, maalkoodiina waxa la wareegay muslimiinta. Qaniimadii waxaa madax looga dhigay Maxammed binu Maslama.

DUULLAANKII SUWEYQ

Markii laga takhallusay Abii Jahal oo ahaa hoggaamiyihii qureysheed iyo in badan oo madaxdii qureysh ah ayaa waxaa qureysh madax u noqday Abuu Sufyaan binu Xarbi. Abuu Sufyaan wuxuu bilaabay tallaabooyin uu ku rabo in uu ku aar guto, wuxuu markaa ku fekeray in uu Madiina tago oo dhib u soo geysto muslimiinta si ay dhoolatus ugu noqoto oo loo arko in uu awood leeyahay, sidaa darteed wuxuu ku nadray in uusan janaabo ka qubeysan ilaa uu ku duulo Nabi Maxammed SCW. Wuxuu markaa soo kexeystay ciidan rakuubley ah oo caddadkoodu yahay Labo boqol oo nin. Wuxuuna isla habeennimadii galay Madiina isaga oo is qarinaya, wuxuuna u tegey Kacab binu Asad, oo ahaa odeygii yahuudii reer banuu Qureyda, albaabka ayuuna ku garaacay laakiin Kacab baqdin uu ka baqayo Nabiga SCW dareed waa uu diidey in uu albaabkii ka furo.

Abuu Sufyaan, markii albaabka laga furi waayey ayuu wuxuu u tegey Salaam ibnu Mashkam, oo ahaa duqii reer banuu Nadiir, keydkoodana hayey. Albaabka ayuu markaa ku garaacay oo ka idan dalbay, wuuna ka furay oo wuu soo dhoweeyey, wuuna u warramay. Ka dibna abuu Sufyaan waa baxay, wuxuuna isla habeennimadiiba ku noqday ciidankiisii, dabadeedna wuxuu direy koox ciidanka ka mid aha si ay wax u soo kharbudaan isla habeennimadaba, maxaa yeelay dhuumaleysi maahane, dagaal caddaan ah uma uusan imaan.

Kooxdii uu direy waxay tageen beer beerihii muslimiinta ka mid ah, markaas ayey dhirtii jareen, beertiina gubeen, labo nin oo muslimiin ah oo beertooda joogeyna way soo dileen, ka dibna si degdeg ah ayey Abuu Sufyaan iyo ciidankiisii Makka ugu noqdeen.

Rasuulku SCW markuu arrintii maqlay ciidan ayuu ka soo daba qaatay, Madiinana wuxu uga soo tagey Abaa Lubaaba ibnu Cabdi-mundir. Dabadeed markii uu marayo Qarqaratu Kadar, oo uu gaari waayey, ayuu dib u soo laabtay. Waqtigaasna wuxuu ahaa bishii Dulqacda, sannadkii 2aad ee hijriga.

DILITAANKII KACAB BINU ASHRAF

Kacab binu Ashraf wuxuu ka mid ahaa dadkii yahuudda ugu dhibka badnaa uguna cadaawadda badnaa islaamka iyo muslimiintaba, wuuna muujistay dhibaatadiisa. Wuxuu ka mid ahaa qabiilka la yiraahdo Dhii oo ka tirsanaa reer banuu Nuhbaan, hooyadiisna waxay ahayd reer banuu Nadiir, wuxuuna ku dhex koray yahuud oo wuu yahuudoobay. Nin maalqabeen ah ayuu ahaa, quruxdana carab oo dhan ayuu caan ka ahaa. Wuxuu degganaa dhinaca koonfur bari ee Madiina oo ka dambaysay meeshii ay yahuuddii reer banuu Nadiir degganaayeen.

Ninkaas oo ahaa nin aad u shar badan markii uu maqlay guushii muslimiinta ee Badar iyo dilitaankii odeyaashii qureysheed ayuu wuxuu yiri, "taasi ma xaq baa?", kuwaasi waxa ay ahaayeen carab kuwii ugu shaaraf badnaa iyo dadka boqorradoodii, Ilaah baan ku dhaartaye haddii uu Maxammed kuwaas laayey dhulka gudihiisa (Dhimasho) ayaa ka kheyr badan, wuxuuna ammaanay cadowgoodii. Rakuubkiisii (awkiisii) ayuu markaas fuulay ilaa uu ka tegay Makka iyo qureysh. Wuxuu ku degay Mudhalib binu abii Waddaac Al-sahami. Ka dib wuxuu guda galay isaga oo ooyaya in uu gabay ku ammaano raggii mushrikiinta looga laayey Badar, wuxuuna ku booriyey dadka in Nabiga SCW lala dagaallamo oo lala colleytamo.

Abuu Sufyaan iyo raggii mushrikiinta ahaa waxa ay ku yiraahdeen "ma diintayada ayaa Alle xagiisa loogu jacayl badan yahay mise diinta Maxammed?, labadayada qolose yaa hanuunsan oo Alle u dhaw?", wuxuu yiri "idinka ayaa ka hanuunsan", Allaah SW isagoo arrintaa ka hadlaya wuxuu yiri:

((MA ARAGTAY KUWA KITAABKA QAYBTA LAGA SIYEY OO RUMAYNAYA SIXIR IYO SHAYDAAN, KUNA DHAHAYA KUWA GAALOOBAY "KUWAAN (GAALADA AH) AYAA WADDO UGA HANUUN BADAN KUWA MU'MINIINTA AH, KUWAASI (YAHUUDDA) WAA KUWUU ALLE NACLADAY, CIDDII ALLE NACLADANA U HELI MAYSID GAR GAARE)). (Suuratu-Nisaa' 51-52).

Kacab intaas ka dib Madiina ayuu ku soo laabtay, wuxuuna tiriyey gabayo uu ku af-lagaadaynayo gabdhihii muslimaatka ahaa isla markaasna uu islaamaka ku dhibayo. Rasuulku SCW, markuu arkay ninkaas iyo sharta uu wada iyo heerka uu gaaray oo ah inuu gabdhihii muslimaatka ahaa af-lagaadeynayo, islaamkana caayayo, ayuu wuxuu asxaabtiisa ku yiri "yaan Kacab binu Ashraf u diraa, Ilaah iyo Rasuulkiisa ayuu dhibaye?". Waxaa markaas istaagay Maxammed binu Maslama oo yiri "aniga, Rasuulkii Ilaahayow ma jeceshahay in aan dilo?", Rasuulku SCW wuxuu yiri "haa". Maxammed binu Maslama ayaa Nabiga SCW ku yiri ii idan haddaba in aan waxaan rabo kaa sheego", Rasuulkuna SCW wuxuu yiri "dheh wixii aad doontid".

Maxammed binu Maslama waxaa markaa raacay dhowr nin oo kala ahaa: Cubaada binu bishir, Xaarith binu Aws, Abuu Cabsa binu Xabir iyo Abuu Naa'ila (sulkaan binu salaam) oo ay Kacab binu Ashraf naas wada nuugeen. Maxammed binu Maslama ayaa markaa Kacab u tegey oo ku yiri "ninkani (Nabi SCW) wuxuu na weydiiyey sadaqo", Kacab ayaa yiri "Ilaah baan ku dhaartaye waan filayey". Maxammed binu Maslama wuxuu yiri

"hadda waan raacnay, mana ka harayno ilaa aan aragno meesha ay arrintiisu ku dambayso, waxaan marka kaa dooneynaa in aad na amaahisid jawaan ama labo jawaan (oo raashin ah)", Kacab baa yiri "rahan (carbuun) ayaan idinka rabaa", Maxammed ayaa yiri "maxaad doonaysaa?", Kacab ayaa ku warceliyey "dumarkiina rahan iiga dhiga". Maxammed ayaa markaa Kacab su'aaley "sidee baan dumarkayaga kuugu rahannaa adigoo carab ugu qurux badan?", wuxuu Kacab yiri "haddaba wiilashiina ii rahma", Maxammed ayaa yiri "ma wiilashayada ayaannu kuu rahannaa si hadhow loo caayo oo loo yiraahdo "waa kii jawaanka ama labada jawaan loo rahnay" taasi ceeb bay nagu tahay, laalkiin waxaan kuu rahmaynaa oo kuu dhiibeynaa hubkayaga". Abuu Naa'ilna sidoo kale ayuu sameeyey.

Kacab ayaa markaa kor u hadlay isagoo raba in arrinkaa la maqlo, waxaa markaa lagu yiri "war hooggaagee ina Ashrafow dan baan kuu sheeganay ee noo qari", Kacabna, arrinkaa waa aqbalay, Abuu Naa'ila ayaa markaa hadlay oo yiri "ninkaani (Rasuulka SCW) dhib buu noogu yimid oo carab haddaanu nahay caado ayaannu lahayn, hal dhufeys baannu ku wada jirney. Waddooyinkii buu naga gooyey ilaa ay ciyaalkayagii ka caqdaan oo naftayadii ka dhibaatooto oo annaga iyo ciyaalkayagii dhibaato aan ku sugnaano". Ka dib wuxuu yiri abuu Naa'il "asxaab aan isku fikrad nahay ayaa ila socotay, waxaan doonayaa in aan kuu keeno oo aad wax ka iibisid, wanaajisana".

Ninkii la oran jirey Kacab binu Ashraf wuu yeelay arrimahaas oo dhan. Waxaa la ballamay habeeennimadii bisha Rabbiicul Awal ahayd 14, sanadkii 3aad ee hijriga. Kooxdii hawshan fulineysey waxa ay isla habeenkiiba u tageen Rasuulku SCW wuuna la soo dardaarmay, wuxuuna ku yiri "ku socda magaca Allaah, Allahayow u kaalmee". Ka dib Rasuulku SCW wuxuu ku laabtay gurigiisii oo salaad ayuu galay. Kooxdii waxay tageen aaggii uu degganaa Kacab waxaana u dhawaqay Abaa Naa'ila. Kacab wuu istaagay si uu u baxo, haweentiisii oo uu mar dhow soo guursaday, ayaa ku tiri "xaggee saacaddan u baxaysaa? dhawaaqa aan maqlay waa mid dhiig ka da'ayee". Wuxuu yiri Kacab "waa walaalkay Maxammed binu Maslama iyo midkaan naska wada nuugnay, Abuu Naa'ila, ninka ragga ahna haddii loogu yeero arrin waa yeelaa". Markaa ayuu soo baxay isagoo barafuun isku soo shubay oo madaxiisu soo carfayo. Abuu Naa'ila wuxuu saaxiibbadiis ku yiri "markuu yimaado madaxa ayaan qabanayaaye, markii aad aragtaan in aan si fiican u qabtay sefaha ku booba". Kacab markuu yimid oo mudoo lala sheekeysanayey, ayuu Abuu Naa'ila ku yiri "ka warran ina Ashrafow haddii aannu aadno derbiga duqdii hebla ahayd si aan isaga sheekaysanno habeenka inta nooga hartay", isna wuxuu yiri "haddii aad doontaan waxba kama qabo".

Markii la baxay oo dhex la sii marayo ayuu Abuu Naa'ila yiri "caawa oo kale ma arag cid ka catar udgoon Kacab", markuu hadalkaa maqlay ayuu faan galay oo yiri "dumarka carbeed catarkoodii baa agtayda ah", Abuu Naa'ila wuxuu yiri "ma ii oggolanaysaa in aan ursado madaxaaga?" Kacab wuxuu yiri "haa", markaas ayuu Abuu Naa'ila gacanta madaxa ka geliyey oo ursaday, saaxiibbadiisna ursiiyey. Xoogaa ayaa la socday. Abuu Naa'ila ayaa markaa yiri "ma ku celiyaa?", "haa" ayuu Kacab yiri, sidii oo kale ayuu yeelay. Ka dib markii xoogaa la sii socday oo Kacab is kala dhigtay ayuu Abuu Naa'ila yiri sidii oo kale, markuu Kacab u oggolaadayna, madaxa intuu gacanta ka geliyey ayuu si fiican uga faro buuxsaday, oo yiri "waan hayaa cadowgii Ilaahay", markaas ayey seefaha ku boobeen hase yeeshee seefihiii waxba waa ka tari waayeen (wey dili waayeen), markaas ayaa Maxammed binu Maslama mindi ka geliyey caloosha ilaa uu ka diley.

Cadawgii Ilaahay ee Kacab, isagoo qaylo aad u daran ku qaylinaya, taas oo ka argagixisay wixii gaararkiisa joogey, ayaa naftii ka baxday oo laga takhalusay.

Ka dib kooxdii way soo laabteen iyagoo seefohoodii qaar ka mid ahi ay dhaawac gaarsiiyeen Xaarith binu Aws, wayna ka soo tageen iyagoo u hasta in ay dhan yihiin hase yeeshee markii ay dhex marayeen ayey ogaadeen in uu Xaarith ka maqan yahay.

Meeshii ayey markaa fariisteen oo mudo ku sugeen, markii uu u yimidna way soo xambaareen.

Markii ay Rasuulka SCW u soo dhow yihiin ayey takbiirsadeen, Rasuulkuna SCW markii uu maqlay takbiirtooda ayuu fahmay in ay soo dileen cadowgii Ilaahay, markaas ayuu isna takbiirsaday. Markii ay u yimaaddeenna wuxuu yiri "wejiyaal baa liibaanay", markaa ayey dheheen "wejigaaguna wuu liibaanay Rasuulkii Allow", ka dibna madaxii Kacab oo ay soo gooyeen ayey Rasuulka SCW hortiisa ku soo tuureen, Rasuulku SCW Allaah ayuu mahadiyey dilitaanka ninkaas la dilay, Xaarithna meeshii nabarka ayuu uga tufay, waan u buskootay.

Yahuuddu markii ay ogaatay waxa ku dhacay Kacab ibnu Ashraf iyo sida khatarta ah oo looga takhallusay, ayaa Ilaahay quluubtooda ku riday baqdin iyo argagax, waxayna ogaadeen in Nabi Maxammed SCW uu awood u isticmaalayo abaalkoodana marinayo ciddii wanaag iyo nabad diidda. Sidaa darteed yahuudi wa ku cibro qaadatay arrinkaan iyo kiii ka horreeyey ee reer banii Qaynuqaac ku dhacay, waxayna joojisay kibbirkii iyo faankii, magaalada Madiinana waxay ku soo laabatay xasiloonideedii, Rasuulka SCW iyo asxaabtiisiina waa ka kala fududaatay dhibaatadii gudaha ka haysatay ka dib markuu labadaan ficil ku dhaqaaqay.

DUULLAANKII DII AMAR

Wardoonkii Madiina ayaa wuxuu soo gudbiyey in qabiilooyinka la kala yiraahdo banii Thaclaba iyo Muxaarib ay isu ursadeen sidii ay Madiina duullaan ugu soo qaadi lahaayeen. Rasuulku SCW markii uu arrintaa ka war helay wuxuu diyaariyey ciidan dhan Afar boqol iyo kontan nin, waxayna taariikhdu ahayd bishii Muxarram, sannadkii 3aad ee hijriga. Rasuulku SCW magaalada Madiina wuxuu madax uga dhigay Cusmaan ibnu Cafaan, dabadeedna ciidankii ayuu la baxay.

Dhex markii la sii marayo ayaa waxaa la qabtay nin u dhashay qabiilkii lagu socday ee reer banii Thaclaba, ninkaas, waxa uu ugu yeeray islaamka, isna waa aqbalay oo waa islaamay. Dabadeedna wuxuu horkacay ciidankii si uu u tuso fariisimaha uu cadowga daggan yahay.

Qabiilooyinkii markii ay maqleen soo bixitaanka Rasuulka SCW ayey ka carareen meeshii ay joogeen oo hawdka galeen.

Rasuulku SCW wuxuu tegey meeshii ay isku ursanayeen, wuxuuna degganaa halkaas bishii Safar oo dhan, si reer baadiyaha jihadaas deggan oo dhan u ogaadaan awoodda muslimiinta. Ka dibna Rasuulka SCW iyo ciidankiisii waxa ay ku soo laabteen Madiina.

<><><>

DUULLAANKII BAXRAAN

Bishii Rabbiicul Aakhir, sannadkii 3aad ee hijriga ayaa Rasuulka SCW iyo Saddex boqol oo nin oo uu hogaaminayo u bexeen meesha la yiraahdo Baxraan, oo Xijaas ka mid ah. Wuxuuna u baxay qureysh, meeshii ayuu tegey wuxuuna joogey intii ka dhimanayd bishii Rabbiicul Aakhir iyo bishii ku xigtey ee Jamaadul Uulaa, ka dibna Madiina ayuu ku soo laabtay isaga oo aan wax dagaal ah soo gelin.

ILAALADII SEYD BINU XAARITH

Markii la gaaray waqtigii jiilaalka ee qureysh Shaam u safri jirtey ayey qureyshtu isu diyaariyeen safar, markaas ayey ka wada tashadeen waddadii ay safarkooda marin lahaayeen, maxaa yeelay cunaqabatayn ayaa saaran oo waddo kasta oo ay isku dayaan muslimiinta ayaa ugaarsanaya. Waxaa markaa hadlay Safwaan binu Umaya, oo ay u doorteen in uu safarka kexeeyo, wuxuu yiri "ma garanayo wax aanu ku samayno

Maxammed iyo asxaabtiisa, dadka xeebta degganna way la heshiiyeen oo badankoodu isaga ayey la jiraan, mana garanayno meel aan marno, haddii aan guryahayaga iska joognana waxa aan cuneynaa lafahayagii oo waxba noo hari mahayaan, noloshayada Makkana waxa ay ku dhisan tahay ganacsiga jiilaalka ee Shaam iyo kan xagaaga ee Yaman". Arrimahaas markii uu Safwaan ka warramay ayaa laga wada hadlay mawduucii, waxaana fikrad keenay Aswad binu Cabdimudhalib oo ku yiri Safwaan: "iska daa waddada xeebta, waxaadna qaaddaa waddada Ciraaq", waddadaas Ciraaqna waxa ay ahayd waddo dheer oo sii marta Najdi ilaa Shaam laga gaaro, Madiinana waxaa laga marayaa dhinaca bari ee qorrax ka soo bax oo aad uga fog Madiina, qureyshna ma aqoon waddadaas, mana marin markaas ka hor. Sidoo kale wuxuu Aswad u tilmaamay safwaan in uu kexeysto ninka la yiraahdo Furaat binu Xayaan, oo u dhashay qabiilka la yiraahdo Banii Bakar, si uu safarka waddada u mariyo.

Safwaan iyo safarkiisii waa ay bexeen isagoo wata koox rag ah, waxayna qaateen waddadiii cusbeyd, iyagoo ku baxay si qarsoodi ah. Hase yeeshee sirtoodii waa la helay, sida lagu helayna waxa ay ahayd: nin la yiraahdo Sulayd binu Nucmaan, oo muslim ahaa, iyo nin gaalada ka mid ahaa oo la oran jirey Naciim binu Mascuud Al-ashjaci, ayaa meel khamro ku wada cabbey (waana intaan khamrada laxarimin). Markii ay sakhraameen ayaa Naciim si tifafiran uga warramay khiddada safarkka iyo meesha uu mari doono, markaas ayaa Suleyd si degdeg ah khabarkii Rasuulka SCW ugu soo gudbiyey. Rasuulku SCW markii loo keenay wuxuu direy ciidan gaaraya Boqol nin oo rakuubley ah, wuxuuna madax uga dhigay Seyd binu Xaarith.

Ciidankii waxay jidka ku sii jiraan waxa ay si kedis ah ku qabteen safarkii. Raggii waday oo uu Safwaan madaxda u ahaana way carareen, muslimiina waxay soo qafaasheen safarkii iyo ninkii la oran jirey Furaat binu Xayaan, oo ahaa ninkii dhul yaqaanka ahaa oo safarka hor socday. Riwaaayadaha qaarkood waxay ku daraan in Furaat iyo laba nin oo kale la qabtay. Ka dib waxa ay ciidankii u tageen Rasuulka SCW iyagoo safarkii wata. Alaabta safarkaa saarnayd waxaa lagu qiyaasay 100,000 oo Diinaar. Rasuulku SCW markii uu ka saaray khumuskii ayuu xoolihii u qeybiyey raggii duullaankaas galay. Ninkii ahaa Furaat ee la soo qabtayna waa uu islaamay.

Nimankii qureysh ahaa waxaa u hoydey murugo iyo calool xumo, waxaana ku caddaatay talo, maxaa yeelay waddada sidaa loogu galay waa waddadii keliya ee ay naf bidayeen. Sidaa darteed waxa ay duruufu kala dooransiisey in aysan safar dambe gelin, oo ay cunaqabatayntaa ku jiraan in ay Rasuulka SCW heshiis la samaystaan iyo in ay dagaallamaan, oo iyaga iyo Nabi Maxammed SCW fooda is daraan. Waxayna doorteen midda u dambeysa oo dagaalka ah, waxay xoojiyeen tabaabulshihii ay ku jiree, waxayn qadeen olole ballaaran sidii ay Rasuulka SCW ula dagaallami lahaayeen.

Ka dib markii uu dhacay dagaalkii Badar, oo ay qureysh u soo hoyatay guul darro iyo jab, lana laayey odeyaashoodii, ayey waxa ay galeen tabaabushe ay u tabaabusheysanayaan sidii ay Nabiga SCW iyo asxaabtiisa uga aarsan lahaayeen. Sidaa darteed waxa ay is amreen in aan loo ooyin dadkii Badar lagu laayey, laguna degdegin furashada dadkii lagu qafaashay Badar. Dadkii ugu xamaasad iyo shaqo badnaa in muslimiinta lala dagaallamo waxaa ka mid ahaa Abuu Sufyaan binu Xarbi, Cikrama binu Abii Jaha, Safwaan binu Umaya, Cabdullaahi ibnu abii Rabbiica. Waxay raggaani soo jeediyeen fikrad ay leeyihiin maalkii saarnaa safarkii Abuu Sufyaan waday oo ka koobnaa 1000 ka rati sababtana u ahaa dagaalkii Badar dadkii iska lahaa waa in aan la hadalnaa. Markii ay dadkii u yimaadeen waxa ay ku dheheen "qureysheey Maxammed waa idin dabar gooyey, akhyaartiinniina wuu laayey, marka maalkan noogu kaalmeeya sidii aan kula dagaallami lahayn, waxaa la arkaa in aan ka aar gudannee". Maalkaas oo qiimihiisa lagu qiyasay 50,000 oo Diinaar dadkii iska lahaa way oggolaadeen, wayna u riyaaqeen fikraddaas, maxaa yeelay waxaa quluubtoodii buuxiyey ciil iyo caro ay u hayaan Nabi Maxammed SCW. Sidoo waxay hoggaamiyayaashaas qureysh bilaabeen in ay ka ururiyaan dhaqaale cid kasta oo jecel in ay ka qayb qaadato dagaalka lala gelayo

muslimiinta, oo u dhashay qabiillada Kinaana, iyo Tuhaama. Allaah SW isagoo ficilkooda tilmaamaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((KUWA GAALOOBAY WAXAY BIXINAYAAN MAALKOODA SI AY (DADKA) UGA JEEDIYAAN JIDKA ALLE, WAY BIXIN DOONAAN (MAALKA) KA DIB WAXAY KU NOQON DOONTAA SHALLAYTO WAANA LAGA QAALIB NOQON DOONAA, KUWA GAALOOBAY WAXAA LOO KULMIN XAGGA JAHANNAMO)), (Suuratul-Anfaal 36).

Hoggaamiyayaashaa qureysheed waxa ay aad xoogga u saareen ururintii maalka iyo dhiirri gelinta dadkii qureysheed iyo qabiilladi kale ee xulufada la ahaa iyagoo adeegsanaya raggoodii gabayaaga ahaa sida ninkii la oran jirey Abaa Cisa, oo ku jirey dadkii la qafaashay dagaalkii Badar, ka dibna Rasuuku SCW iska cafiyey markuu u dan sheegtay, kulana ballamay in uusan dib dambe islamka uga hor imaanayn, laakiin ballaantii wuu ka baxay. Sababta uu Abaa Cisa ballanta uga baxay waxa ay ahayd waxaa kadiyey Safwaan binu Umaya oo ku yiri "waxaan kaa ballan qaaday, haddii aad dagaalka nabad uga soo labato, in aan qani kaa dhigo, haddii aad ku dhimatana aan gabdhahaaga kafaalo qaado". Sidaa awgeed ninkii Abaa Cisa ahaa gabaygiisii ayuu qabiillada kala dhex istaagay isaga oo ku boorrinaya la dagaallanka Nabiga SCW iyo asxaabtisa. Sidoo kale waxaa ka mid ahaa Musaafe binu Cabdimunaaf Al-jumxi.

Dadkii reer Makka waxay ku jireen diyaargarowgaas iyo hub ursi laga soo bilaabo bishii Ramadaan oo dagaalkii Badar dhacay iilaa laga gaaray Bishii Shawaal ee sannadkii xigay oo dagaalka Uxud dhacay. Waxaa isna cadaawaddii Qureys sii siyaadiyey oo ka caraysiiyey khasaarihii ka soo gaaray safarkii Safwaan, taas oo ku noqotay murugo kale. Ka dib markii la gaaray bishii Shawaal ee sannadkii 3aad ee hijriga oo hal sano laga joogo dagaalkii Badar ayaa waxaa u dhammaaday diyaargarowgoodii dagaalka. Sida darteed waxaa Makka ka soo baxay ciidan gaaraya 3,000 oo nin oo isugu jirey qureysh iyo xulafadooda, waxayna soo kexeysteen 15 dumar ah oo ay ugu talo galeen in ay ciidanka guubaabiyaan oo dhiirri geliyaan si aan ciidanku u baqan oo uu aad ugu dagaallamo.

Hoggamiyaha guud ee ciidanku wuxuu ahaa Abuu Sufyaan binu Xarbi, ciidanka fardooleydana waxaa madax u ahaa Khaalid ibnu Waliid, waxaana kaaliye u ahaa Cikrama ibnu Abii Jahal. Calanka ciidanka waxaa waday waday jilibka reer banii Cabdi-daar, gaadiidkii ay wateen wuxuu ahaa 3,000 oo rati iyo 200 oo faras, dhinaca gaashaanka iyo qalabka difaaca waxa ay wateen 700 oo canbuur bireed. Waxay ka soo ambabexeen Makka oo soo aadeen dhinicii Madiina iyagoo duullaan ah.

Dhinicii muslimiinta Cabbaas binu Cabdimudhalib, oo joogey Makka, had iyo jeerna akhbaarta cadawga u soo gudbin jirey Rasuulka SCW ayaa warqad degdeg ah oo uu ku qoran yahay dhammaan warkooda oo dhan u soo direy. Ninkii warqadda loo soo dhiibey aad ayuu u dheereeyey, wuxuuna ku gooyey masaafada u dhexeysa Makka iyo Madiina oo ah 500 KM, saddex maalmod. Wuxuuna u tegey Rasuulka SCW oo joooga Masaajidka Quba, oo warqaddii ugu geeyey. Waxaa warqaddii Rasuulka SCW u akhriyey Ubay ibnu Kacab, markii uu dhammeeyeyna wuxuu Rasuulku SCW amray in uu qariyo waxa ku yaalla warqadda. Ka dibna Rasuulku SCW si degdeg ah ayuu tegey Madiina, wuxuuna la tashaday odeyaashii Muhaajiriin iyo Ansaar. Magaaladii Madiinana waxaa laga qabtay waardiye, maxaa yeelay cadowgii jidka ayuu ku soo jiray, halisna waxay u tahay in ay kedis ku soo galaan, Rasuulkana SCW si gaar ah ayaa waardiye looga qabtay. Waxaana waardiyaha ka hayey qar ka mid ah odeyaashii Ansaar oo kala ahaa Sacad binu Mucaad, Sacad binu Cubaada iyo Useyd binu Xudeyr. Ciidankii muslimiintuna wuxuu bilaabay war doon iyo in uu maalin walba la socdo meesha uu cadowgii soo marayo.

Ciidanka gaalada wuxuu ka soo baxay Makka, dabadeed markuu marayo meesha la yiraahdo Abwaa, oo Rasuulka SCW hooyadiis qabrigeedu ku yaalley, ayaa islaanta la oran jirey Hinda binu Cutba oo Abii Sufyaan qabay, aabbeheed, walaalkeed iyo

adeerkeedna lagu diley Badar, waxa ay soo jeedisey in la faago qabriga Rasuulka SCW hooyadiis hase yeeshee madaxdii ciidanku waa diideen fikradaas, waxayna ka baqeen cirib xummada dambe oo ay reebayso. Ka dib socodkoodii ayey sii socdeen, markii ay marayaan togga la yiraahdo Caqiiqo ayay u leexdeed dhinaca midig, dabadeedna way sii socdeen ilaa ay ka degeen meel u dhow buurta Uxud oo la yiraahdo Cayneyn. Maalinkaas wuxuu ahaa maalin Jimca ah, 6dii bishii Shawaal, sannadkii 3aad ee hijriga.

Muslimiintu hadba sidii ay ula socdeen wararka cadowga iyo hadba meesha uu soo marayo ayaa ugu dambayntii loo soo gudbiyey in uu soo degey buurta Uxud gadaasheeda, markaas ayaa Rasuulku SCW wuxuu qabtay kulan guud oo uu la tashanayo asxaabtiisa, wuxuuna u sheegay riyo uu arkay oo wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye waxaan arkay kheyr oo ah; waxaan arkay lo' la gowracayo, seefteyda oo dhinac ka jabtay iyo aniga oo gacantayda geliyey canbuur bireed adag. Waxaana ku fasirayay lo'da, qayb asxaabtayda ka mid ah oo la layan doono, seeftayda dhinaca ka jabtayna waxa aan ku fasiray nin Ehlu-beytkayga ka mid ah oo la dili doono, canbuur bireedkana waxa aan ku fasiray Madiina".

Dabadeed waxa uu Rasuulku SCW asxaabta u soo bandhigay ra'yigii uu arkayey oo ahaa in aan Madiina laga bixin oo difaac la galo si cadawga haddii uu magaalada soo weeraro si xun loogu hoojiyo. Waxaa markaa Rasuulka SCW ra'yigiisaa ku raacay qaar ka mid ahaa odeyaashii asxaabta oo u arkay in uu ra'yigaani sax yahay. Sidoo kale waxaa ku raacay munaafiqii weynaa Cabdullaahi binu Ubay oo aan saxnimo ugu raacin ee ugu raacay baqdin uu cadowga ka baqayo iyo in uu ka fogaado dagaal.

Waxaa ra'yigii Rasuulka SCW mid ka duwan qaatay koox ka mid ah asxaabta oo aan ka qayb gelin dagaalkii Badar, aadna ugu xamasadaysnaa in dagaal kale cadowga lala galo iyo in badan oo dagaalkii Badar ka qayb gashay laakiin diiddanaa in cadawga magaalada lagu sugo, waxayna Rasuulka SCW u soo jeediyeen in la baxo oo cadowga meeshiisa loogu tago, aad ayeyna Rasuulka SCW ugu celceliyeen ra'yigaadaas ilaa mid ka mid ihi yiri "maalinkaan war rajaynaynay, Allaah baanuna u baryaynay, waana noo yimid oo waa soo dhowaaday ee u bax cadowgayaga yaysan noo arkin in aan ka baqnaye". Sidoo kale raggii aadka ugu adadkaa ra'yigan waxaa ka mid ahaa Nabiga SCW adeerkiis Xamsa binu Cabdimudhalib.

Rasuulku SCW, markii uu arkay in asxaabta badankeedu doonayaan in cadowga goobta loogu tago, ayuu ka noqday ra'yigiisii hore wuxuuna qaatay ra'yigan dambe, isaguuna go'aamiyey. Ka dib Rasuulku SCW wuxuu asxaabtii tujiyey salaaddii jimcaha wuuna waaniyey, wuxuuna amray in ad-adkaan iyo dadaal lala yimaado, wuxuuna u sheegey in ay nasri helayaan haddii ay sabraan, ka dibna salaaddii casar ayuu tujiyey, dabadeedna wuxuu galay gurigiisa isaga oo ay la socdaan Abuubakar iyo Cumar, hubkiisii ayuu qaatay, laba canbuur bireedna wuu gashaday, wuuna soo baxay. Ciidankiina diyaar bay wada ahaayeen oo isaga ayey sugeyeen. Sacad binu Mucaad iyo Useyd binu Xudeyr ayaa asxaabtii ku yiri "Rasuulka SCW waad ku khasabteen bixitaanka ee isaga talada u daaya", Markaas ayey ka qoomameeyeen arrintaa ay Rasuulka SCW ku kallifeen, markuu Rasuuulku SCW u yimidna waxa ay ku dheheen "Rasuulkii Allow nooma habboona in aannu ku khilaafno ee samee wixii aad doontid , haddii aad jeceshahay in aad Madiina ku negaatana samee". Rasuulku SCW wuxuu markaas yiri "uma habboona Nabi haddii uu canbuur bireedkiisa lebisto in uu iska bixiyo ilaa Ilaahay ka kala xukmiyo isaga iyo cadowgiisa".

Wuxuu Rasuulku SCW ciidankiisii u qaybiyey saddex qaybood oo kala ahaa Ansaar oo uu labo u sii kala qaybiyey iyo Muhaajiriin oo hal qayb ah. Qaybta Muhaajiriinta wuxuu calankoodii u dhiibey Muscab ibnu Cumeyr, kaas oo ahaa calanka guud ee ciidanka, qaybta Awsna wuxuu calankoodii u dhiibey Useyd ibnu Xudeyr, qayba Khasrajna wuxuu calankoodii u dhiibey Xubaab ibnu Mundir. Caddadka ciidanku wuxuu ahaa 1,000 nin, waxayna wateen 100 canbuur bireed, fardahaa ayaa wateen riwaayadaha ku soo arooray

way is kala duwan yihiin: qaar waxay leyihiin 50 faras, qaarna waxay leeyihiin Rasuulka SCW iyo Abuu Burda keliya ayaa ka watay, qaar kalena waxay leeyihiin maba wadan. Allaah ayaa garanaya sida ay xaqiiqdu tahay. Rasuulku SCW wuxuu Madiina madax uga dhigay Cabdullaahi ibnu Ummi Maktuum. Waxaa markaa Rasuulku SCW ciidankii ogeysiiyey in la dhaqaaqo, waxaana loo dhaqaaqay dhinicii woqooyi.

Rasuulka SCW waxaa hor socday labo Sacad, markii ay dhaafeen meesha la yiraahdo Thaniyatul Wadaac ayaa wuxuu arkay Rasuulku SCW ciidan meel xoogaa u jirta ka muuqda Markaas ayuu asxaabtii weydiiyey oo ku yiri "maxay yihiin?", waxaa la yiri "waa yahuuddii ay reer Khasraj xulufoda ahaayeen", wuxuu yiri 'ma islaameen?" waxaa la yiri "maya", markaas ayuu diidey Rasuuku SCW in uu gaal gaal kale u kaalmaysto.

Wuxuu Rasuulku SCW ciidankii ka reebay wiilal yar yar oo aan weli qaangaarin oo ay ka mdi ahaayeen: Cabdullaahi ibnu Cumar, Usaama binu Seyd, Useyd, binu Daahir, Seyd binu Thaabit, Seyd binu Arqam, Caraawa binu Aws, Camar binu Xasam, Abii Saciid Al-Khudri, Seyd binu Xaarith Al-ansaari iyo Sumura ibnu Jundub, wuxuuna dagaalka u oggolaaday Raafic ibnu Khadiija iyo Sumura ibnu Jundub, sababta uu labadaan uga soo reebay dhallinyaradii kalena waxa ay ahayd; Rafiic wuxuu ahaa wiil ganitaanka ku dheereeya oo shiish badan, markaas ayaa Rasuulku SCW u oggolaaday, markaas ayaa Sumura ibnu Jundub yiri "aniga ayaa ka xoog badan oo legda", markaas ayaa Rasuulku SCW amray in ay hortiisa ku legdemaan, markaas ayaa Raafic la legday oo Sumara ayaa xoog batay, sidaas ayuu isna ugu oggolaaday.

Ka dib salaaddii maqrib ayaa ugu soo gashay dhexda, wayna tukadeen, ka dibna cishihii bay tukadeen, dabadeedna way degeen oo habeenkii halkaas ayey beryeen.

Waardiyaha ciidanka habeenkaas waxaa loo xilsaaray 50 nin oo uu madax u yahay Maxammed ibnu Maslama, oo ahaa ninkii madaxda u ahaa kooxdii Kacab binu Ashraf dishay, reer Dakwaan binu Cabdiqaysna waxay gaar ahaan ugu istaageen ilaaalinta Rasuulka SCW. Fajarkii ka hor ayaa la kacay, wax yar ayaana hore loo sii socday ilaa laga gaarey meel cadowgii u muuqata oo la isku jeedo, halkaas oo salaadii subax lagu tukaday. Muddo yar ka dibna munaafiqii weynaa Cabdullaahi ibnu Ubay ayaa wuxuu la laabtay Sadex boqol oo nin oo ahaa ciidan Rasuulku SCW watay saddex meelood meel ahaan, wuxuuna yiri munaafiqasi "ma garanayno waxa aanu naftayada u dilayno" isaga oo ku andacoonaya in ra'yigiisii Rasuulku SCW khilaafay oo uu wiilal yar yar ra'yigood qaatay, laakiin ujeeddadiisu waxay ahayd in uu kala jebiyo ciidanka muslimiinta kuna rido niyad jab iyo is khilaaf, in badanna ay Rasuulka SCW iyo intii ku hadha, dabadeedna ay Madiina sideedii hore ku laabato, isna loo soo celiyo madaxtinnimadiisii, maxaa yeelay wuxuu rumeysnaa in madaxtinnimadiisii uu Rasuulku SCW ka qaatay, wuxuuna intaa xaqa uga soo hor jeeday oo Alle iyo Rasuulkisa SCW ula dhinactameyey in uu madaxnimo helo sida ay maantaba in badan oo muslimiin sheeganayaa uga horyimaaddaan xaqa si ay madaxtinimo ama dan gaar ah u gaaaraan. Munaafaqaani waxa uu sigey inuu hir galiyo wixii uu ku haminayey, maxaa yeelay isla markiiba waxaa damcay in ay laabtaan labo reer oo muslimiinta ka mid ahaa, kuwaas oo kala ahaa jilibka banuu Xaarith oo Aws ka mid ahaa iyo banuu Salama oo Khasraj ka mid ahaa hase yeeshee Allaah ayaa amarkoodii tawalliyey oo xaqii ku sugay, kana badbaadiyey simbirixashadaas sheydaanka. Allaahna isagoo arrintaa tilmaamaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((WAXA IDINKU DHACAY MAALINKA AY LABADA CIIDAN KULMEEEN WAA ALLE IDANKIIS IYO IN OGAADO MU'MINIINTA, (SIDA KALE) IN LA OGAADO KUWA MUNAAFAQOOBAY, EE LOO YIRI "KAALAYA OO KU DAGAALAMA JIDKA ALLE AMA DIFAACA" WAXAYNA DHEHEEN HADDAAN OGNAHAY DAGAAL WAAN IDIN RAACI LAHAYN, IYAGU GAALNIMDAY MAALINKAAS UGA DHAWAAYEEN IIMAANKA, WAXAY AFKOODA KA DHAHAYAAN WAXAAN QULUUBTOODA KU JIRIN, ALLENA WAA OG YAHAY WAXAY QARINAYAAN, WAA KUWA KU YIRI WALAALAHOOD HADDAY NA ADEECI LAHAAYEEN

LAMA DILEEN, WAXAAD DHAHDAA NAFTIINA DHIMASHO KA REEBA HADDAAR RUN SHEEGAYSAAN)), (Suuratu Aali Cimraan 166-168).

Ka dib Rasuulka SCW iyo ciidankii muslimiinta oo ah 700 oo nin waxay u dhaqaaqeen dhinicii cadowga, cadowguna wuxuu ka sokeeyey buurta Uxud, wuxuu markaa Rasuulku SCW yiri "ninkee ayaa naga dhex bixinaya oo na geynaya dushooda buurta xigta?". Abuu Khaythama ayaa yiri "Aniga, Rasuulkii Allow", wuxuuna abuu Khaythama ciidankii mariyey waddo gaaban oo buurta Uxud gasha, waxayna sii dhex mareen beer uu lahaa nin la oran jirey Murabac binu Qaydi oo munaafaq ahaa, indhahana aan wax qumman ka arkin, hase yeeshee markii uu dareemay ciidankii muslimiinta ayuu ciid ku seyriyey, wuxuuna ku yiri Rasuulka SCW "xalaal kuuma aha in aad soo gashid beertayda haddii aad Rasuul tahay". Rag asxaabta ka mid ah ayaa markaa damcay in ay dilaan hase yeeshee Rasuulku SCW wuxuu yiri "ha dilina qalbiga iyo indhahaba waa ka indho la'yahay". Ka dib waxay muslimiintii degeen meel istaraatiiji ah, oo buurta Uxud degaandeggeed ah, waxayna dhabark u duween buurtii, Madiinana way soo qaabbileen. Ciidankii gaaladuna waa ka hooseeyey oo wuxuu xigsaday dhinicii Madiina oo u dhaxaysey ciidankii muslimiinta iyo Madiina. Ka dib Rasuulka SCW ciidankiisii ayuu dagaalka u diyaariyey wuxuuna soo soocay 50 nin oo gummaad ah (gana yaal ah) oo ku dheereysey shiishka iyo wax ganidda, wuxuuna u direy kooxdaas dhinaca bidix oo koonfur bari ka xigtay ciidankii muslimiinta una jirtey 150 Mitir, meeshaas oo ahayd meel buurta Uxud karin gaabo ku lahayd. Ciidankaas 50ka nin ah wuxuu Rasuulku SCW madax uga dhigay Cabdullaahi binu Jubeyr binu Nucmaan, wuxuuna 50kaa nin ugu talo galay in ay dhabar jabinta ciidanka fardooleyda ah aee gaalada oo Khaalid binu Waliid wato ka ilaaliyaan. Wuxuuna Rasuulku SCW la dardaarmay ninkii madaxda u ahaa 50kii nin oo uu ku yiri "naga joojiya fardaha yeysan gadaal nooga imaanine, haddaan guuleysanno iyo haddii nalaga guuleystaba meshiina jooga, yaan dhiniciinna nalaka soo gelin". Kontonkii nina wuxuu ku yiri "dhabarka naga ilaaliya, haddii aad aragtaan in nala laynayo ha noo gargaarinina, haddii aad aragtaan in aan qaniimeysanaynana ha nala wadaagsannina, haddii aad aragtaan in ay shimbiruhu na kala dafayaan booskiinaas ha ka soo dhaqaaqina ilaa aan idin soo cid diro, haddii aad aragtaan in aan jebinney oo aan ceyrsanaynana ha soo bixina ilaa aan idiin soo cid diro".

Rasuulku SCW wuxuu hadalkaas cad iyo dardaarankaas siiyey nimankii gumaadda ahaa si aan fardooleyda gaaladu dhabar jebin ugu samayn, meeshaas oo ahayd meesha kali ah ee laga dhabar jebin karayey, maxaa yeelay gadaal iyo dhinaca midigba buurta ayaa ka xigtay, hortoodana cadowga ayaa ka xigey. Dabadeed wuxuu Rasuulku SCW qaybiyey ciidankiisii, dhinaca midig wuxuu madax uga dhigay Mundir ibnu Camar, dhinaca bidixna Subeyr ibnu Cawaam oo uu kaaliye u yahay Miqdaad ibnul-aswad, safafka hore ee ciidanka wuxuu u doortay rag khatar ah. Khidaddaas heerka sare ah ayuu Rasuulku SCW u dejiyey ciidankiisii subaxaas wuxuu ahaa subax Sabii ah, 7dii bishii Shawaal, sannadkii 3aad ee hijriga.

Wuxuu Rasuulku SCW ciidankiisii ka reebay in ay dagaal bilaabaan ilaa uu ka amro, wuxuuna ku booriyey dagal iyo in ay ku sabraan markay la kulmaan cadowga, aad ayuuna u xamaasa geliyey, ka dibna wuxuu kor u qaaday seef oo yiri "yaa seeftaan xaqeeda ku qaaday?". Rag ayaa markaa istaagay ay ka mid ahaayee Cali binu Abii-dhaalib, Subeyr ibnu Cawaam, Cumar binu Khadhaab iyo abuu Dujaana, wuxuu markaa Abuu Dujaana yiri "muxuu yahay xaqeedu Rasuulkii Allow?", wuxuu yiri Rasuulku SCW "waa in aad ku garaacdo wejiyada cadowga", wuxu yiri Abuu Dujaan "aniga ayaa ku qaadaya xaqeeda Rasuulkii Allow", markaas ayuu siiyey Abuu Dujaana.

Abuu Dujaana wuxuu ahaa nin geesi ah oo is qaad qaada marka dagaalka lagu jiro, wuxuu lahaa maro guduudan oo hadduu madaxa ku xiro dadku ay ogaan jireen in uu dagaallamayo dagaal wacdaro leh. Markii uu seeftii qaaday ayuu madaxa ku xirtay maradii guduudnayd waana is qaad qaaday, wuxuu Rasuulku SCW markaa yiri "waa socod Ilaahay ka caroodo markaan oo kale (jihaadka) ma ahane"

Ciidankii gaalada waxaa sidii aan soo sheegnayba hoggaamiye guud u ahaa Abuu Sufyaan Ibnu Xarbi, dhinaca midig wuxuu madax uga dhigay Khaalid ibnu Waliid, dhinaca bidixna Cikrama ibnu Abii-Jahal, ciidankii lugtana wuxuu madax uga dhigay Safwaan binu Umaya, ciidankii gammuunleydana Cabdullaahi binu abii Rabbiica. Calanka waxaa u waday jilibka reer Cabdidaar oo qureysh calanka u wadi jirey, firna u lahaa, cidna kulama doodi jirin hase yeeshee Abuu Sufyaan ayaa markan canaantay si ay calanka ugu faro adeygaan oo wuxuu yiri "reer banii Cabdidaaro, calankayaga ayaad waddeen maalinkii Badar, waadna aragteen wixii nagu dhacay, dadkana waxaa lagu jebiyaa calankooda, haddii uu calankaasi dhaco waa dhacayaan, marka ama calankaas nooga qayba ama noo daaya annaga ayaa idinka kaafineynee". Reer banii Cabdidaar inta ay xanaaqeen oo ficiloodeen ayey dheheen "ma calankayaga ayaannu kuu dhiibnaa?", waad ogan doontaa berri marka aannu la kulanno waxa aannu samayno".

Abuu Sufyaan si uu muslimiinta safkooda u kala dhantaalo, wuxuu waraaq u diray Ansaar, warqadda wuxuu ku lahaa "isu kaaya daaya annaga iyo ilma adeerradayo, waan idinka tekeynaaye, dagaalkiinnana ma dooneyno", hase yeeshee Ansaartii Rasuulka SCW oo ahaa rag uu quluubtooda iiman buuxiyey, si adaga ayey u gu soo jawaabeen, wax uu kahdayna waa maqashiiyeen. Sidoo kale nin la oran jirey waagii hore Abuu Caamiri-Raahib, hase ahaatee uu Rasuulku SCW u bixiyey Abuu Caamir Al-fasiq, oo jaahiligii madax u ahaan jirey Aws, laakiin markuu islaamku yimid oo Aws islaameen, diidey islaamkii lana colleytamay Rasuulka SCW, Madiinana ka cararay oo qureysh u tegey, isla markaana abaabulka dagaalka qayb weyn ka soo qaatay, haddana la socday, qureyshna ugu sheekeeyey "haddii ay qabiilkaygii i arkaan way i soo raacayaan". Ayaa markii Uxud la isugu yimid wuxuu u dhawaaqay tolkiis oo yiri "reer Abuu Caamir baan ahay", markaas ayey ku dheheen "Alle wanaag il kuuma saaro faasiqiiyow", markaas ayuu yiri "Allaa i lehe tolkay belo ayaa ku dhacday gadaashay".

Halkaas ayuu ku hoogay ninkaas Abuu Caamir Al-Faasiq, waxa ugu badan oo uu ninkaasi Ilaahay diintiisa iyo Rasuulka SCW ula colleytamay waxa ay ahayd isaga oo u arkayey in islaamku xukunkiisii ka qaaday, sideedana qofku hadduu soo maro xukun jaahili ah way adag tahay in uu xaqa u hoggaansamo illaa qof Ilaahay u naraxiistay ma ahane.

Shan iyo tobankii dumarka ahaa ee la socday ciidanka gaalada iyaguna kaalintooda ayey dagaalka ka qaadanayeen, waxaana dumarkaas hormood u ahaa Hinda bintu Cutba, oo ahayd abuu Sufyaan xaaskiisii. Waxay haweenkaasi dhex marayeen safafka ciidankooda iyagoo heeso iyo buraanburro ay ku guubaabinayaan ciidankooda tirinaya. Waxayna lahaayeen iyagoo la hadlayay nimankii calanka waday ee reer banii Cabdidaar "ilaaliyaashii beledkow xubin walba garaaca". Sidoo kale ciidankana waxay ku lahaayeen "haddaad qaabbishaan (dagaalantaan) waan idin marxabaynaynaa, gogoshana waan idiin goglaynaa, haddii aad jeesataan waa idin ka tegeynaa, ka tegid aan jacayl ka dambayn".

Labadii ciidan way isku soo dhawaadeen, dagaalkii ayaana bilowday. Habka uu dagaalku ku bilowday waxa ahayd: Waxaa soo baxay ninkii waday calanka gaalada ee reer banii Cabdidaar, magiciisana la oran jirey Dalxa binu abii Dalxa, ninkaas wuxuu ka mid ahaa raggii ugu geesisanaa fardooleydii qureysheed, muslimiintuna waxay ninkaa ku magacaabeen beerkii kooxda (ciidanka). Ciidankoodii ayuu markaa ka soo dhex baxay ninkaasi isagoo calankoodii wada, wuxuuna dalbay mubaaraso (banbixid), hase yeeshee wax yar ayaa laga hakaday, maxaa yeelay wuxuu ahaa dagaalyahan geesinnimo ku caan baxay. Waxaa markaa ninkaa u soo baxay Subeyr ibnu Cawaam, oo Nabiga SCW eeddadiis ay dhashay. Labadii nin foodda ayey is geliyeen, dabadeedna Subeyr seef ayuu ninkaa uga tuuray rakuubkii uu saarnaa, ciidda ayuuna afka gashaday isaga oo dhaawac ah, Subeyr ayaa ka daba tegey oo si fiican qoorta ugu dheereeyey. Rasuulku SCW markuu arkay sida dhakhsaha ah ee Subeyr ninkaas uga takhalushay ayuu takbiirsaday, Subeyrna wuu ammaanay, wuxuuna yiri "Nabi kasta wuxuu lahaa xawaari (ilaaliye heegan u ah), xawaariyahaygu waa Subeyr".

Dagaalkii ayaa bilaabmay, wuxuuna intii hore oo dhan dagaalku ku wareegayey calankii gaalada oo ay iska daba qaadayeen ilma banii Cabdidaar. Waxaa markii Dhalxa la diley calankoodii qaaday walaalkiis Cusmaan binu Abii Dhalxa, waxaa ninkaasna si degdeg ah u dilay Xamsa binu Cabdimudhalib. Ka dib waxaa calankoodii qaaday walaalkood Abuu Sacad binu abii Dhalxa hase yeeshee waxaa isna gammuun ku diley Sacad ibnu abii Waqaas, waxaa kale oo la yiraahday Cali binu abii Dhaalib ayaa u soo baxay oo dilay. Saddexdaas walaalaha ah markii ay dhinteen waxaa calankoodii qaaday wiil uu dhalay kii ugu horreeyey oo la oran jirey Musaafac binu Dhalxa binu abii Dhalxa, waxaa isna diley Caasim binu Thaabit. Waxaa markaa calankii qaaday kan la diley walaalkiis, Kulaab binu Dhalxa binu abii Dhalxa, waxaa isna ka takhallusay Subeyr ibnu Cawaam. Waxaa ku xigsaday oo calankii qaaday walaalkood Jalaas binu Dhalxa binu abii Dhalxa, waxaa isna qoorta u dheereeyey Dhalxa ibnu Cubeydillaah, waxaa kaloo la dhahaa waxaa dilay Caasim binu Thaabit.

Markii ay is raaceen lixdaas nin ee reer banii Cabdidaar oo ahaa saddex walaalo ah iyo midkood saddex uu dhalay, dhammaantoodna ay ku wada dhinteen calankii gaalada, ayaa waxaa calankoodii qaaday nin kale oo reer banii Cabdidaar ah oo la oraj jirey Ardha binu Shuruxbiil, waxaa kaasna diley Cali Abii-dhaalib, waxaa kaloo la yiraahdaa waxaa dilay Xamsa binu Cabdi Mudhalib. Ka dib waxaa calankii u qaaday Shureex binu Qaarid, oo isla reer banii Cabdidaar ah, waxaase insa dilay diley Qasmaan. Calankii waxaa markan u qaaday abuu Seyd Camar binu Cabdimanaaf, waxaa isna diley Qasmaan ayaa diley. Waxaa halkaa ku dhintay 10 nin oo reer banii Cabdidaar ah oo dhammaantood calanka isaga dambeeyey, nin dambe oo reer Cabdidaar ahina kuma harin ciidankii qureysh. Markan waxaa calankii qaaday wiil xabashi ah oo reer Cabdidaar addoon u ahaa, lana oran jirey Sawaab. Wiilkaas oo aad geesinnimo u muujiyey, una dagaallamay ilaa labadiisa gacmood la gooyey, ka dibna qoorta iyo xabadka ku qabsaday calankii si aan calanku dhulka ugu dhicin, isna waa laga takhlusay isagoo leh "Ilaahow ma cudurdaaray", taas oo uu ula jeedo intii karaankiis ah in uu dadaalay. Wiilkaas markii la dilay, ka dib calankii gaalada dhulka ayuu ku dhacay, qof dambena kor uma uusan qaadin. Inta calankaas lagu dagaallamayey dagaalku dhinacyada kalena waa uu ka socday, muslimiintuna waxay muujiyeen wacdaro ilaa safafki gaaladu kala jajabeen, waxaanu muslimiinta shicaar (halku dheg) u ahayd oo ay ku dhawaaqayeen kalimadda ah AMIT, (dhimo), oo calaamad u ahayd dagaalkaas Uxud.

Ninkii ahaa Abuu Dujaana oo watay seeftii uu Rasuulku SCW siiyey, maradii caseyd ayuu madaxa ku xirtay, ka dibna wuxuu dhexjiirey ciidamadii gaalada ninkii ka horyimaaddana wuu dilayey. Subeyr binu Cawaam ayaa wuxuu yiri "Rasuulka SCW ayaan seefta weydiistay intuusan Abuu Dujaana siin ka hor, markaas ayuu ii diidey, ka dibna Abuu Dujaana yuu siiyey. Markaasaan nafsaddayda iska iri "aniga oo eeddadiis i dhashay, oo weydiistey seefta, ayuu ii diidey oo Abuu Dujaana siiyey, Ilaah baan ku dhaartaye waan fiirin wuxuu sameeyo (Abuu Dujaana)", markaas ayaan daba kacay. Wuxuu la soo baxay maradii guduudnayd, madaxa ayuuna ku xirtay, Ansaar ayaa markaa tiri "Abuu Dujaana waxa uu la soo baxay maradii dhimashada", ka dibna wuu baxay oo ciidankii ayuu dhex qaaday. Wuxuu yiri Subeyr oo hadalkiisii wata Abuu Dujaana nin lama uusan kulmayn illaa wuu dilayey. Gaaladana waxaa ku jirey nin aan dhaawac nooga tegin ilaa uu dilo maahane. Ka dib ninkaa iyo Abuu Dujaana ayaa isku dhowaaday, markaas ayaan Alle ka baryey in ay iska hor yimaadaan. Allaahna waa iska hor keenay oo labo seefood ayaa la is dhaafsaday, Abuu Dujaana ayaa markaa intuu seeftii gaalka gaashaanka isaga dhigay, seef kale u daba mariyey oo halkaas ku dilay. Safafkii gaalada ayuu sii dhex jiirey ilaa uu gdaal ka tegey oo uu la kulmay naagtii hormuudka u ahayd hawennkii gaalada, Hinda, isaga oo aan garanayn. Seefta ayuu dusha ka saaray haddana waa ka daayey. Waxaan markaa iri "Alle iyo Rasuulkiisa SCW ayaa wax og". Wuxuu yiri Abuu Dujaana "waxaan arkay qof dafka aad u guudbaabinaya, markaas ayaa u tegey. Markii aan seeftii kor ugu baacshey ayaan arkay in ay haween tahay, markaas ayaan ka sharfay seefta Rasuulka SCW in aan haween ku dilo".

Sidoo kale raggii iyaguna maalintaas wacdaraha muujiyey waxaa ka mid ahaa Xamsa binu Cabdimudhilib, oo aad gaalada u hoojiyey, kuna shahiiday dagaalkaas. Waxaa uu yiri Waxshi binu Xarbi, oo ahaa ninkii Xamsa diley, isagooka sheekeynaya siduu Xamsa u diley "waxaan addoon u ahaa Jubeyr binu Mudhcim, oo adeerkiis Dhuceyma lagu diley Badar. Haddaba markii ay qureysh dagaalka Uxud soo aadeysey ayaa waxa uu igu yiri "haddaad adeerkay u diho Maxammed adeerkiis Xamsa, xor baad tahay". Ciidankii baan markaas soo raacay, waxaana ahaa nin xabashi ah oo shiishka aad u yaqaanna. Markii dagaalkii Uxud bilowday oo ciidammadii kulmeen waxaan anigu fiirsanayey Xamsa ilaa aan markii dambe ciidanka dhexdiisa ka arkay isagoo oo aad mooddo awr, Ilaah baan ku dhaartaye waan ka baqay in aan aado, sidaa darteed waxa aan isku qariyey geed si uu iigu soo dhowaado. Waxaa iiga hormaray Subaac binu Cabdulcuse, Xamsa ayaa arkay oo ku yiri "kaalay ina buuryagoyseedow" (ninkaas hooyadiis ayaa ciyaalka gudi jirtey). Xamsa hal mar ayuu ku dhuftay seefta Subaac, madixiisii ayaa markaa kala daatay. Ka dib waxa aan diyaarsaday leebkaygii, markii aan si fiican u hubsadayna waan sii daayey, wuxuu markaa uga dhacay gumaarka, wuxuuna ka baxay (leebkii) labada lugood dhexdooda. Dhinacayga ayuu markaa u soo dhaqaaqay hase yeeshee waa miyir doorsoomay waana dhacay. Anigu kalama soo bixin leebkaygii gadaal isaga laabtay oo meel ayaan iska fariistay, cid kalena dan kama aanan lahayn, isagana waaxaan u dilay si la ii xoreeyo. Markaan Makka tegeyna waa la i xoreeyey". Ugu dambayntii gadaal ayuu Waxshi ka islaamay, wuxuuna ka qayb qaatay jihaadyo badan, wuxuuna diley ninkii nabinnimada sheegtey ee Rasuulku SCW u bixiyey Musaylamatul-kadaab.

Sidoo kale dadkii maalinka aadka u dagaallamay waxaa ka mid ahaa Xandhala ilaa uu ka sigay oo ka dili gaaray hoggaamiyihii ciidanka gaalada Abuu Sufyaan, oo markii uu seeftii kor ugu qaaday oo damcay in uu ku dhufto, ayaa waxaa isagii seef ka gaarsiiyey nin ciidankii gaalada ka mid ahaa oo la oran jirey Shaddaad binu Aswad, halkaas ayuuna Xandhala ku shahiidey, waxaana dhaqay malaa'ig oo waxaa loo bixiyey Qasiilul-Malaa'ika

Ciidankii muslimiinta ee 50ka nin ahaa, oo uu Rasuulku SCW u xilsaaray in ay dhabar jebinta ka ilaaliyaan waxaa saddex jeer weerar ku soo qaaday ciidankii fardooleyda gaalada ee Khaalid madaxda u ahaa, uuna la socdo Abii Caamir Al-faasiq, hase yeeshee saddexdii jeerba si xun ayaa loo waabiyey. Sidoo kale ciidan weynihi gaalada oo gaarayey Saddex kun dabada ayuu jeediyey, calankooodiina sidii loo diley 10kii nin ee reer banii Cabdidaar iyo addoonkoodii Sawaab, dhulka ayuu yaallaa, qof dambe oo kor u qaada ama u dhowaadana waa la w aayey, goobtiina waxa qabsaday ciidankii yaraa ee 700 ahaa ee mulimiinta. Waxaana yimid Ilaahay nasrigiisii iyo gargaarkiisii uu u yaboohay ciddii diintiisa u gargaarta. Ciidankii gaaladuna baqo iyo carar ayuu dhabarka jeediyey, haweenkii la socdeyna cararkii ay cararayeen maryihii ayey xayteen ilaa ay dhudhummadoodii ka muuqdeen, oo raggii asxaabta ahaa ay la yaabeen. Halkaas waxaad ka garanaysaa sida ay haweenkii waqtigaa joogey, gaalaba ha ahaadeene, u xishoon jireen laakiin maanta iska daa kuwa aan diinta lahayn ee xayawaanka ka hoos maraye, in badan oo islaamnimo sheeganaysa ayaa xishoodkii geed ku soo wartay iyaga oo arrintaas mooday ilbaxnimo una haysta in gabadhii xishoota oo dhawrsata aysan ilbaxad ahayn.

Xaaladdu markii ay halkaas marayso oo ciidankii muslimiintu uu goobtii la wareegay, qaniimadii iyo xoolihii gaaladana ay ururinayaan, ayaa 50kii nin oo gumaadda ahaa, oo Rasuulku SCW sidii la ogaa ula dardaarmay, kuna adkeeyey in aysan meeshooda ka soo dhaqaaqin haddii ay muslimiinta guul helaan iyo haddii kaleba, ayaa markii ay arkeen in ciidankii muslimiintu guuleystey oo qaniimadii gaalada ururinayo waxaa qaarkood ka xoog badiyey adduunyo jaceyl, markaas ayey ku dheheen qaarkii kale "war qaniimada, qaniimada, raggeennii baa guuleystey ee maxaad sugeysaan?". Waxaa markaa la hadlay ninkii 50ka nin madaxda u ahaa Cabdullaahi binu Jubeyr, oo xusuusiyey dardaarankii Rasuulka SCW, kuna yiri "war ma hilmaanteen wuxuu Rasuulku SCW idin yiri?". Hase ahaatee, laab meeli u caddahay meeli ka madow'e, arrinkaaas waxba dheg uma aysan jalaq siin, waxaana yaacay 40 nin, goobtiina waxaa ku haray 10 nin oo uu ku jiro

Cabdullaahi binu Jubeyr, oo iyagu amarkii Rasuulka SCW sidii uu ahaa u fuliyey. Waxaa markaa weerar ku soo qaaday Khaalid binu Waliid oo watey ciidankii fardooleyda gaalada, markaa ka horna ay saddex jeer oo hore waabiyeen. Wuxuu Khaalid laayay 10kii nin, markaas ayaa ciidankii gaalada oo awal jabay wuxuu ogaaday in xaaladdii is beddeshay, dib buuna u soo laabtay, calankoodii oo muddaba ciidda iska yaallayna waxaa qaadday haween la oran jirey Camra bintu Calqama, oo ka mid ahayd 15kii haween ee la socday ciidanka gaalada. Ciidankoodii oo dhan wuxuu ku soo ururay meeshii calankoodu ka muuqday, muslimiintiina hore iyo gadaal ayey ka hareereeyeen.

Ciidankii muslimiintu markii ay arrintaasi ku dhacday ayey wareereen oo meel looga yimid garan waayeen. Waxayna u qaybsameen wax buurtii fuula, wax carara oo magaaladii afka saara iyo wax ciidankii gaalada dhex gala oo kala garan waayey gaaladii iyo muslimiintii ilaa ay iyaga laftoodii is laayeen. Ninkii la oran jirey Xudeyfa binu Yamaam, ayaa arkay aabbihiis Yamaam oo muslimiinta ka mid ahaa oo muslimiin kale dileyso, markaasuu qayliyey oo yiri "addoomadii Ilaahayow waa aabbahay, aabbahay", hase yeeshee cidi ma aysan maqal, wayna ku sii wadeen ilaa ay ka dileen, markaas ayuu Xudeyfa yiri "Allaah ha idiin danbi dhaafo".

Waxay muslimiintii jahwareerkaas ku jiraanba, waxay arrintii sii kharaaratey markii ay maqleen qaylo oranaysa "Maxammed waa la diley", markaas ayaa niyad jab ku dhacay ilaa ay raggii qaarkood dagaalkii joojiyeen, ragna dhabarka sii duween. Allaahna isagoo ka hadlaya ragaas cararay ee dhabarka jeediyey waxa uu qur'aankiisa ku yiri:

((KUWA IDINKA MID AH EE JEESTAY MAALINKII LABADA CIIDAN KULMEEN, WAXAA SIMBIRIXIYEY SHAYDAAN WAXAY KASBADEEN QAARKIISA SABABTEED, ALLESE WAA UU ISKA CAFIYEY, WUXUUNA AHADAY ALLE MID DHAAFA OO DULBADAN)), (Suuratu Aali-Cimraa 155).

Laakiin dad isku mid ma ahane, rag baa wacdaro muujiyey sida Anas binu Nadar oo soo maray rag meel iska jooga, markaas ayuu ku yiri "maxaad sugeysaan?", waxay dheheen "Rasuulkii SCW waa la diley", wuxuu yiri "maxaad nolol ku falaysaan gadaashiis? war soo baxa oo ku dhinta wuxuu Rasuulku SCW ku dhintay", wuuna sii dhaafay isagoo leh "Allahayow waxaan kaaga cudurdaaranayaa waxa ay sameeyeen kuwaan (muslimiinta), waxa aana kaaga beri noqonayaa waxa ay sameeyeen kuwaas (gaalada)". Wuxuu la kulmay Sacad binu Mucaad, markaas ayaa Sacad yiri "xaggee u socotaa?", wuxuu Anas yiri "jannada carafteedii ayaan Uxud sokedeeda ka helayaa", wuxuu Anas ciidankii gaalada ayuu ku dhex dhacay, aad ayuuna u dagaallamay ilaa uu aakhirkii ka shahiidey. Markii uu dagaalku dhammaadayna cid garata ayaa la waayey ilaa ay markii dambe walaashiis ku aqoonsatay farihiisii, waxaana jirkiisa ku yaalley dhowr iyo siddeetan nabar oo isugu jira waran, seef iyo fallaar. Waxaana sida la wariyo sababtiisa ku soo degtay aayadan:

((MU'MINIINTA WAXAA KA MID AH RAG KU RUN SHEEGAY WAXAY ALLE KULA BALLAMEEN, WAXAA KA MID AH MID GUTAY BALLANTII (SIDA ANAS), WAXAA KA MID AH MID SUGAYA MANA AYSAN BADALIN (GO'AANKODII)), (Suuratul-Axsaab 23).

Sidoo kale Thaabit binu Daxdaax wuxuu u dhawaaqay ansaar oo ku yiri "Ansaareey haddii Maxammed SCW la diley Allaah ayaa nool oo aan dhiman ee u dagaallama diintiinna Allena waa idiin gargaarayaaye". Koox Ansaar ah ayaa markaa isagii raacday oo la dagaal gashay ilaa isagii iyo iyagiiba la laayey. Sidoo kale nin Muhaajiriinta ka mid ahaa ayaa soo maray nin Ansaar ah oo dhiiggiisa ku dhexgalgalanaya oo naf yari ku jirto, markaas ayaa kii muhaajirka ahaa ku yiri "hebelow Maxammed SCW la diley waa gaarsiiyey (xaqii) ee u dagaallama diintiinna". Allena SW isagoo tilmaamaya dhaawaca muslimiinta soo gaaray iyo in uusan kaligood gaar ku ahayn, uuna doonayo rag shuhado ah oo jidkiisa ku dhinta, waxa uu qur'aankiisa ku yiri:

((HA DACIIFININA HANA MURUGOONINA IDINKAA SAREEYA HADAAD MU'MINIIN TIHIIN, HADDII DHAAWAC IDIN TAABTAY NIMANKABA (GAALADA QUREYSH) WAXAA TAABTAY DHAAWAC LA MID AH, WAANA SAAS MAALMUHU OO WAXAAN KU WAREEJINNAA DADKA DHEXDIISA, WAXAANA (AALLE SIDAA U YEELAY IN) UU OGAADO (MUUJIYO) KUWA MU'MINIINTA AH, IDINKANA YEESHO (QAARKIIN) SHUHADO, ALLENA MA JECLA DAALIMIINTA, IYO IN UU ALLE IMTIXAAMO KUWA MU'MINIINTA AH GAALADANA TIRTIRO)), (Suuratu Aali-Cimraan 139-141).

Sidoo kale Alle SW isagoo xusuusinaya mu'miniinta in Nabi Maxammed SCW yahay Rasuul ka mid ah Rusushii uuna dhimanayo sidii Rusushii ka horayseyba ay u dhinteen haddii uu dhintana aan loo baahnayn in la gaaloobo waxa uu qur'aankiisa ku yiri:

((NABI) MAXAMMED SCW MA AHAN WAXAAN RASUUL AHAY, WAXA TEGAY (DHINTAY) HORTIINA RASUULO, (HADDABA) HADDII UU DHINTO AMA LA DILO MA WAXAAD U GADOOMAYSAAN CIRIBTIINII (GAALNIMO), QOFKII U GODOOMA CIRIBTIISA (GAALOOBA) WAXBA KA DHIBI MAHAYO ALLE, WUUNA ABAAL MARINAYAA KUWA KU SHUKRIYA)), (Suuratu Aali-Cimraa 144).

Dhinicii Rasuulka SCW waxaa ku haray 9 nin (7 Ansaar ah iyo 2 Muhaajiriin ah), waxaana isku hareereeyey fardooleydii ciidankii gaalada. Rasuulku SCW dagaalyahannimadiisii iyo geesinnimadiisii ayuu muujiyey, wuxuuna sameeyey, isagoo sidaa loo hareereeyey oo cadowgii gaaladu ku soo ururay, ayuu u dhawaaqay muslimiintii, isaga oo og in gaaladu hadalkiisa maqlayso inta aysan muslimiintu maqlin, wuxuuna yiri "addoomadii Allow kaalaya Rasuulkii Alle ayaan ahaye". Allena isagoo arintaa tilmaamaya waxa uu qur'aankiisa ku yiri:

((MARKAAD KORAYSEEN (CARAREYSEEN) OO AYDAAN MILICSANAYN QOFNA, RASUULKUNA SCW IDINKAGA YEERAYEY GADAASHIINA WAXAA IDINKU DHACAY MURUG AY LA JIRTO MURUG SI AYDAAN UGA TIIRAAN YOON WIXII ADINKA TEGAY IYO WIXII IDIN ASIIBAY, ALLENA WAA GUN OGYAHAY WAXAAD CAMAL SAMAYNAYSAAN)), (Suuratu Aali-Cimaraa).

Gaaladii ayaa markaa maqashay oo si fiican ugu soo ururtay. Rasuulka SCW waxaa aad u difaacay 9kii nin, waxayna Rasuulka SCW u noqdeen gaashaan, oo leeb iyo waran kasta oo lagu soo tuuro iyaga ayaa isu dhigayey, kii gacan ula yimaada Rasuulkana SCW wey ka difaacayeen. Ciidankii gaaladu si kasta inta ay yeeleen ayey u tegi kari waayeen Rasuulka SCW. Sagaalkii nin sidi ninba mar u shahiidayey waxaa ugu dambayntii ku soo haray labadii nin oo Muhaajiriinta ahaa, Dalxa binu Cubeydillaah iyo Sacad binu abii Waqaas. Waqtigaasna wuxuu ka mid ahaa waqtiyadii ugu dhibka badnaa noloshii Rasuulka SCW, waxayna ahayd fursaddii ugu dhoweyd gaalada in ay Rasuulka SCW dilaan, waxayna u geysteen dhaawacyo dardaran. Waxaa Rasuulka SCW dhagxaan ku soo tuuray nin ciidankii gaalada ka mid ahaa oo la oran jirey Cutba binu abii Waqaas, oo la dhashay Sacad binu abii Waqaaska Rasuulka SCW difaacayey. Dhagaxaantii qar ka mid ah ayaa ku dhacay Rasuulka SCW oo ka jebiyey foolka hoose ee midig bishinta hoosena ka jeexay.

Sidoo kale nin kale oo gaalada ka mid ahaa, lana oran jirey Cabdullaahi binu Shihaab Suhri, wuxuu isna Rasuulka SCW ka dhaawacay wejiga. Wiil reer Faaris ahaa oo la oran jirey Cabdullaahi ibnu Qum'a ayaa isna sidoo kale Rasuulka SCW seef daran qoorta uga dhuftay hase yeeshee Ilaahay oo ka badbaadiyey iyo Rasuulka SCW oo labo canbuur bireed iyo koofi bir ah qabay seeftaasi gudaha uma gudbin inkastoo Rasuulku SCW muddo bil ka badan uu ka sheegan jirey dhaawacaas. Sidoo kale ninkaasi wuxuu Rasuulka SCW ku dhuftay seef tii hore mid ka daran oo koofiyad bireeddii dhaaftay ilaa ay birihii Rasuulka SCW ka galeen madaxa, wuxuuna yiri markuu seeftaa Rasuulka SCW ku dhuftay "qaado in Qum'a ayaa ahe". Rasuulku SCW wuxuu ku yiri isago dhiigga sika tiray a "Alla ku hooji", dabadeedna waxaa ninkaas ku dhacay habaarkii Nabiga SCW oo si

xun ayuu u dhintay. Rasuulku SCW sidoo kale wuxuu yiri "sidee u liibaanayaan dad dilaacshay wejigii nabigooda oo jebiyey foolashiisii isagoo xaga Alle ugu yeeraya?". Alle aya markaa aayadan soo dajiyey.

((WAXBA AMARKA KUMA LIHID (NABIYOW SCW, ALLENA) AMA WAA KA TAWBAD AQBALIN AMA WUU CADAABIN IYAGA (GAALADA) MAXAA YEELAY IYAGU WAA DAALIMIIN)), (Suuratu Aali-Cimraan 128).

Muddo ka dibna wuxuu Rasuulku SCW yiri "Rabbiyow qowmkayga u dhaaf waxba ma ogee".

Gaaladii qureysheed waxay aad ugu dadaaleen maalinkaas in ay Rasuulka SCW dilaan, wax ay la hareen oo dagaal ahana ma jirin, si kastana way u dagaallameen, hub kasta oo ay heli kareenna way ku tuureen Rasuulka SCW sida seef, waran, fallaar, dhagax, iwm, laakiin Alle dile ayaa dhinta, waxaa Alle Rasuulkiisa SCW ku ilaaliyey 9kii nin oo toddobo ku shaahiiddey. Labadii nin ee soo hartay, Daxa iyo Sacad, oo ahaa niman aad dagaalka iyo shiishkaba ugu dheereeya waxa ay u beerdhigeen ciidan tiro badan oo doonayey in ay Nabiga SCW dilaan. Waxay labadaa nin isu dhegayeen ama ka celinayeen nabar kasta oo Rasuulka SCW ku socda ilaa ay Dalxa gacantiisii ka qallashay siduu nabar walba ugu dhigayey. Waxaa Dalxa ku dhacay dhowr iyo soddon nabar. Sidoo kale Tarmadi waxa uu wariyay in Rasuulku SCW isagoo Dalxa ka warramaya uu yiri "qofkii eegaya shahiid dhulka korkiisa ku socda, ha eego Dalxa binu Cubeydillaah". Abuubakarna markuu xusuusto maalinkaa Uxud wuxuu oran jirey "maalinkaas oo dhan waxaa iska lahaa Dalxa". Rasuulku SCW isagoo guubaabinaya Sacad wuxuu yiri "Sacadow gan, aabbahay iyo hooyaday ha lagugu furtee".

Allaah wuxuu soo dejiyey nasrigiisii, waxayna Bukhaari iyo Muslim weriyeen in Sacad yiri "Waxa aan arkay maalinkii Uxud labo nin (malag) oo difaacaya Rasuulkii Alle SCW, waxayna qabeen dhar cad cad, waxayna ahaayeen dagaalyahanno aanan hore iyo gadaal midna u arag". Riwaayad kale waxay sheegtay in ay ahaayeen Jibriil iyo Makaa'iil. Waxaa sidoo kale nasrigii Allaah kamid ahaa in Alle uu ku dajiyay Rasuulka iyo asxaabta daganaansho iyo xasilooni, kana saaray quluubtooda baqdintii ilaa ay mararka qaarkood ka lulmoonayeen, wuxuuna Bukhaari ka wariyay abuu Dalxa Al-Ansaari in uu yiri "waxaan kamid ahaa kuwii ay lulmadu qabatay maalinkii Uxud ilaa ay marar seeftaydii gacantayda ka dhacday". Allena isagoo arrinkaas tilmaamaya waxa uu qur'aankiisa ku yiri:

((WUXUU MARKAA IDINKU SOO DAJIYEY MURUGTIINII KA DIB AAMIN AHAANSHO LULMO DABOOSHAY KOOX IDINKA MID AH, KOOXNA WAXAA WALAACISAY NAFTOODA, WAXAYNA ALLE U MALEEYEEN WAX AAN XAQ AHAYN OO AH MALE JAAHILIYADEED, WAXAYNA LEEYIHIIN AMARKA MIYAAN WAX KU LEENAHAY? WAXAAD DHAHDAA AMARKA DHAMMAANTIIS ALLAA ISKA LEH, WAXAYNA NAFTOODA KU QARINAYAAN WAXAYNA KUU MUUJINAYN, WAXAY LEEYIHIIN HADDAAN AMARKA WAX KU LAHAAN LAHAYN NALA KUMA DILEEN HALKAN, WAXAAD TIRAAHDAA HADDAAD TIHIIN GURYIHIINA DHEXDOODA WAY U SOO BIXI LAHAAYEEN KUWII LOO QORAY DILKA MEESHII LAGU DILI LAHAA, (WUXUUNA ALLE SIDAAS U SAMEEYEY) SI UU U IMTIXAAMO WAXA LAABTIINA DHEXDOODA KU JIRA IYO IN UU KALA SHAANDHEEYO WAXA QULUUBTIINA KU JIRA, ALLENA WAA OG YAHAY WAXA LAABTIINA KU SUGAN)), (Suuratu Aali-Cimraan 154).

Muddo yar ka dib asxaabtii qaar ka mid ah waxay arkeen Rasuulka SCW, markaas ayay hal mar ku soo firxadeen. Qofkii u horreeyey oo u yimaada wuxuu ahaa Abuubakar sidiiq. Ibnu Xibbaan wuxuu saxiixiisa ku weriyey in Caa'isha tiri "Abuubakar wuxuu yiri "maalinkii Uxud markii ay dadkii (muslimiintii) oo dhan yaaceen, qofkii ugu horreeyey oo Nabiga SCW u soo laabtay ayaan ahaa, markaas ayaan arkay nin hortiisa ka dagaallamaya oo difaacaya, markaas ayaa iri "aabbahay iyo hooyaday ha lagugu furtee

noqo (ahow) Dalxa", waxaa markaa iga daba yimid Abuu Cubeyda Ibnu-Jarraax, markii aan Nabiga SCW u tagnayna waaba Dalxa oo Nabiga SCW hortiisa ku dhacay, markaas ayaa Nabiga SCW yiri "qaada walaalkiin way u waajibtaye (janno)". Waxaa damcay in aan Nabiga SCW ka siibo birihii madaxa ka galay, Abuu Cubeyda ayaa markaa yiri "Ilaah baan kugu dhaarshaye maad ii deysid Abuubakar", markaas ayaan u daayey. Ilkihiisii ayuuu intuu ku qabtay soo dhiraandhiriryey si aysan Nabiga SCW u xanuujin. Markuu banaanka birihii u soo bixiyeyna foolkiisii ayaa soo raacay. Waxaan damcay markaa in aan tii (birtii) kale ka soo bixiyo Nabiga SCW, markaas ayuu yiri "Ilaah baan kugu dhaarshaye Abuubakar maad ii deysid". Ka dib sidii oo kale ayuu u dhiraandhiriyey, markuu soo saarayna foolkiisii kale ayaa soo raacay. Dabadeed waxaan u tagnay Dalxa si aan u daweyno isagoo ay ku taallo dhowr iyo toban seefood".

Intaa ka dib asxaabtii ayaa meeshii ku soo ururtay, gaaladiina waa ka soo ururtay, aad ayeyna msulimiintii ciriiri u geliyeen ilaa uu Rasuulku SCW ku dhacay bohol uu Abuu Caamir Al-faasiq qoday, oo uu lowga ka murgacday, waana laga soo bixiyey Rasuulka SCW bohoshii. Sidoo kale Rasuulka SCW fallaaruhu dhinac walba ayey uga imaanayeen, Allaahna dhinac ayuu ka marinayey, waana ka indho saabay in badan oo gaalada ka mid ahayd sida Cabdullaahi ibnu Shibaab oo oranyey "i tusiya Maxammed SCW, badbaado uma sugnaane" isaga oo agtiisa maraya oo hadba dhinac u dhaafaya. Ninka la yiraahdo Safwaan binu Umaya sidoo kale wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye ma aan arag (Nabiga SCW), waxaanna ku dhaaranayaa in uu mamnuuc naga yahay, annaga oo afar nin ah ayaannu ku soo ballannay in aan dilno, mana aannaan gaarin".

Dagaalkii mar labaad ayuu si daran uga dhacay meeshii Rasuulku SCW joogey, gaaladana wuxuu hadafkoodu ahaa in ay dilaan Rasuulka SCW, iyagoo dadaal dheeraad ah ku bixinaya dilitaankiisa. Hase ahaatee asxaabtii Rasuulka SCW agtiisa ku soo ururtay oo ahaa askar Ilaahay, oo ninkiiba koox u dhigmo, ayaa faro kulul tusay gaaladii, Rasuulkana SCW aad u difaacay, dadaal iyo ragannimana muujiyey.

Ninka la yiraahdo Abuu Dalxa Al-Ansaari wuxuu taagnaa Rasuulka SCW hortiisa, wuxuuna ka ilaalinayey Rasuulka SCW oo uu isu dhigayey fallaaraha gaalada, wuxuuna ahaa nin ganaa ah, maalinkaasna waxaa ka jabay labo qaanso. Sidoo kale Abuu Dujaana wuxuu isna taagnaa Rasuulka SCW hortiisa, dhabarkuuna u dhigayey fallaaraha gaalada, waxaana la yiri leebabka oo dhabarkiisa ku dhacaya ayuusan is dhaqaajineynin. Sacad binu Abii Waqaas sidoo kale wuxuu ku dadaalayey in uu dilo walaalkiis Cutba binu Abii Waqaas, oo ahaa ninkii Rasuulka SCW ka jebiyey foolka. Waxaa hase yeeshee Cutba ceyrsaday oo diley Xaadhib ibnu abii Baltaca, oo ka furtay faraskii iyo seeftiiba. Sahal binu Xunef wuxuu isaguna sidoo kale Rasuulka SCW la galay Beycatul-Mawt.

Sidoo kale Cabdirahmaan ibnu Cawf waxaa ku dhacay maalinkaas labaatan nabar ama in ka badan. Maalik binu Sinaan, oo ahaa Abii Saciidul-khudri aabbihiis, ayaa isna maaalinkaa wacdaro muujiyey. Wuxuu soo nuugay dhiiggii fariistay wejigii Rasuulka SCW ee nabarku ku dhacay, Rasuulkuna SCW wuxuu yiri "iska tuf" hase yeeshee wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye weligey tufi maayo". Ka dib dagaalkii buu hore u sii galay, Rasuulkuna SCW wuxuu yiri "qofkii doonaya in uu fiirsho nin ehlu-Janna ah ha fiirsho ninkaas". Dabadeed Maalik goobtii ayuu ku shahiiday. Sidoo kale Qataada ibnu Mucmaan isha ayaa nabar uga dhacay markaasuu Rasuulka SCW u yimid Rasuulkuna gacanta ayuu ka mariyay, wayna u raysatay.

Waxaa iyaguna dagaalka qayb wayn ka qaatay qaar ka mid ahaa gabdhihii muslimaatka oo gadaal ka yimid, sida gabadhii la oran jirey Ummu Cammaara (Nusayba bintu Kacab) oo u banbaxday ninkii Rasuulka SCW seefaha ku dhuftay, Ibnu Qum'a, waxayna ku garaacday dhowr seefood laakiin dhaawac weyn ma gaarin maxaa yeelay labo canbuur bireed ayuu iska dul qabay, isaguna hal seef ayuu qoorta uga dhuftay, ka dibna Ummu Cammaara way si dagaallantay waxaana korkeeda ku dhacay labo iyo toban nabar.

Ninkii ahaa Muscab ibnu Cumeyr wuxuu waday calankii muslimiinta, wuxuuna maalinkaas dagaallamay dagaal aad u xeel dheer, ilaa bilowgii dagaalkana calanka muslimiintu gacata ayuu ugu jirey, wuxuuna ka mid ahaa raggii ugu horreeyey ee Rasuulka SCW ku soo laabtay, ka dibna qayb weyn ka qaatay difaaciddii Rasuulka SCW. Ugu dambeyntii waxaa Muscab laga gooyey gacantii midig ee uu calanka ku waday, markaas ayuu gacantii bidix ku qabsaday oo sii dagaallamay ilaa gacantii bidixna laga gooyey. Ka dib wuxuu calankii ku qabsaday xabadka iyo qoorta ilaa uu aakhirkii halkaas ku shahiiday oo waxaa dilay Ibnu Qam'a. Markii uu diley ayuu wuxuu u maleeyey Rasuulkii SCW, markaas ayuu gaaladii ku dhex dhacay oo qeyliyey yirina "Maxammed waan diley", warkaa beenta ah ayaa ku dhex faafay gaaladii iyo muslimiintii kale ee aan Rasuulka SCW la joogin. Gaaladii markii ay hadalkaas maqleen way farxeen iyaga oo u malaynaya in ay Nabigii SCW dileen oo ay u jeeddadoodii gaareen. Markii Muscab la diley wuxuu Rasuulku SCW calankii muslimiinta u dhiibey Cali binu Abii-dhaalib. Cali aad ayuu u dagaallamay isaga iyo asxaabtii kale ee Rasuulka SCW agtiisa joogtey ilaa ay markii dambe Rasuulka SCW iyo asxaabtiisii jid banneysteen.

Kacab binu Maalik oo asxaabta ka mid ahaa, uuna gaaray warkii beenta ahaa, ayaa Rasuulkii SCW arkay, markaas ayuu aad u dhawaaqay oo yiri "muslimiineey bishaareysta, waa kan Rasuulkii Allee SCW". Rasuulka SCW ayaa markaa u tilmaamay in uu aamuso si aan gaaladu u ogaan meesha uu Rasuulku SCW joogo, hase yeeshee qayladii waxay gaartay gaaladii iyo muslimiintiiba, markaas ayaa in badan oo muslimiin ahi ku soo ururtay meeshii, gaaladiina waxa ay kordhiyeen weerarkoodii. Ninka la yiraahdo Cusmaan binu Cabdullaahi, oo ka mid ahaa fardooleyda gaalada, ayaa Rasuulka SCW ku soo baxay isaga oo leh "badbaado kuuma sugnaan", Rasuulkuna SCW waa la dagaallamay laakiin waxaa kaga hormaray oo ninkaa diley Xaarith binu Sumah. Waxaa isna soo orday ninka la yiraahdo Cabdullaahi binu Jaabir, oo isna fardooleydii gaalada ka mid ahaa, wuxuuna seef qoorta uga dhaawacay Xaarith. Muslimiintii ayaa markaa qaaday Xaarith oo dhaawac ah, ka dibna Abuu Dujaana ayaa si degdeg ah seef qoorta ugaga gooyey Cabdullaahi binu Jaabir.

Rasuulka SCW iyo asxaabtiisi waxay xoog ku jireen gaaladii waxayna fuuleen buurtii, waxaa markaa ka daba tegey Rasuulka SCW nin ciidanki gaalada ka mid ahaa oo la oran jirey Ubay ibnu khalaf, oo ka mid ahaa dadkii Rasuulka SCD ku dhibi jirey Makka, kuna yiri maalin "Maxammed SCW faras baan u naaxiyaa in aan kugu dilo", Rasuulkuna SCW wuxuu ugu jawaabay" anigaa ku dili doona haddii Alle idmo". Markuu Rasuulka SCW ka daba tegey ayuu yiri "meeyey Maxammed SCW magangal kuuma sugnaan". Rag asxaabta ka mid ah ayaa markaas yiri "Rasuulkii Allow nin aan u saarno", hase yeeshee Rasuulku SCW wuxuu yiri "iska dhaafa", isagaana leeb ku dhuftay. Ka dib Ubay ciidankii gaalada ayuuu ku laabtay isagoo dhaawac ah, markaas ayuu qureysh ku yiri "Maxammed baa i diley", waxay ku dheheen "waad fuleyowday", maxaa yeelay nabar weyni kuma oollin. Markaas ayuu yiri "markaan Makka joogney ayuu Maxammed i yiri "anigaa ayaa ku dili doona" wuuna i diley". Dabadeedna Ubay wuxuu dhintay markii uu laabtay ciidankii gaaladu isagoo aan Makka gaarin, waana ninkii keli ahaa ee Rasuulku SCW gacatiisa ku diley.

Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu markii ay buurtii fuuleen, waxaa iyaguna buurtii dhinac ka soo fuulay ciidan qureysheed oo ay hoggaaminayaan Abuu Sufwaan iyo Khaalid, markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "Allahayow kuwaas awlo uma ahaanin in ay naga kor maraan". Waxaa markaa la dagaallamay nimankaas Cumar binu Khadhaab iyo koox la jirta ilaa ay buurtii ka dejiyeen. Kaas ayuuna ahaa dagalkii u dambeeyey ee goobtii Uxud ka dhacay.

Ciidankii gaaladu waxa uu intaa ka dib bilaabay in uu isku ururSanayo meeshiii uu degganaa dagaalka ka hor, dumarkii la socday iyo raggii qaar ka mid ahaana waxay ku mashquuleen in ay dhalan rog ku sameeyaan oo ay dooriyaan raggii shuhadada ahaa ee lagu laayey goobta. Waxayna jarayeen sanka, dhegaha iyo xubno kaleba. Qaar

shuhadadii ka mid ahna waxa ay kala baxeen beerka. Hindu binu Cutba waxay beerka kala baxday Xamsa, markaas qoorxir uga dhigatay ghego iyo sanan ay ka soo jaratay qaar ka mid ah raggii shuhadada ahaa.

Dhinicii gabdhihii muslimaatka ahaa sidii aan soo sheegnayba qaar ka mid ahaa ayaa qayb libaax ka qaatay dagaalka waxayna badankoodii yimaaddeen markuu dagaalku dhammaaday. Qaarkood waxay biyaha soo waraabinayeen ayna daweynayeen dadkii dhawaca ahaa, sida Caa'isha, Umu Sulaym iyo Umu Sulaydh, qaarkoodna way dagaallamayeen sida gabadhii la oran jirey Ummu Ayman oo iyadoo Madiina joogta aragtay rag asxaabtii ka mid ah oo magaalada baqo ku soo galay, markaas ayey mid ka mid ah ku tiri "waad soo baqday, war i sii seeftaada", ka dibna waxay timid goobtii dagaalka, waxayna wax ka waraabinaysay dadkii dhaawaca ahaa. Dhammaadkii dagaalka waxaa Ummu Ayman leeb ku soo tuuray nin la oran jirey Xibbaan binu Curqa, markaas ayey dhacday (iyada oo dhaawaca ah), maradiina ka feydantay. Qosol ayuu markaas cadowgaas Alle la dhacay, Rasuulka SCW ayaa markaa Sacad binu Abii Waqaas leeb u dhiibay oo ku yiri "ku gan". Sacad ayaa leebki ku ganay oo dhuunta bartankeeda kala helay, markaas ayuu xabdka u dhacay cawradiina ka feydantay. Markaas ayaa Rasuulku SCW ku qoslay ilaa ay miciyihiisii ka muuqdeen, wuxuuna yiri "Sacad ayaa u gargaaray, Allaahna wuu aqbalay ducadiisii". Waxaa halkaan iyo meelo kaleba laga qaatay in gabdhaha muslimaatka ahi ka qayb qaadan karaan jihaadka haddii balad islaam lagu soo duulo oo xaaladu ay khatar gaadho, wuxuuna jihaadku ku noqonayaa waajib sida raga, sidoo kale gabadha muslimada ahi way is difaacaysaa haddii nafteeda loogu yimaado.

Ka dib waxaa Rasuulka SCW dhiiggii ka dhaqay gabadhiisii Faadumo, waxaana biyaha ugu shushubayey Cali, Faadumo markii ay aragtay in biyuhu aysan dhiigga joojineyn ayey soo qaadatay caw yar, oo inta ay gubtay meeshii saartay ilaa uu dhiiggii joogsaday. Maxammed binu Maslamana wuxuu Rasuulka SCW u keenay biyo macaan si uu u cabbo. Ka dib Rasuulku SCW wuxuu asxaabtii tujiyey salaaddii duhur isaga oo fadhiya

Markii ay ciidanka gaaladu is ursadeen oo ay noqonayeen ayaa hoggaamiyahoodi Abuu Sufyaan fuulay buur oo dhawaaqay isaga oo leh "Maaxammed ma idinku jiraa", looma jawaabin, markaas ayuu yiri "ina abii Quxaafa (Abuubakar) ma idinku jiraa?" looma jawaabin, markaas ayuu yiri "Cumar binu Khadhaab ma idinku jiraa?", looma jawaabin. Qof kale ma uusan magacaabin maxaa yeelay wuxuu ogaa booska ay saddexdaasi ka joogeen islaamka iyo haddii ay dhintaan in islaamku halis ku jiro, wuxuu intaas ka dib yiri "kuwaas waa la idinka kaafiyey". Waxaa markaas is hayn waayey Cumar binu Khadhaab oo yiri "cadowgii Allow kuwaas aad soo sheegtay way nool yihiin, Allena wuxuu u dib dhigay wax ku caro geliya", markaas ayuu yiri "dadkiinnii la dhalan rogey ma aanan amrin, kamase xumaan". Ka dib wuxu yiri "hubulow kor noqo", Rasuulka SCW ayaa asxaabtii ku yiri "miyeydaan u jawaabeyn?", markaas ayey dheheen "maxaa dhahnaa?" wuxuu yiri dhaha "Allaah baa sarreeya oo weyn", markaas ayuu Abuu sufyaan yiri "Cusaan leenahay idinkuse Cuse ma lihidin". Rasuulka SCW ayaa asxaabtii la hadlay oo ku yiri "miyeydaan u jawaabeyn?" waxay dheheen "maxaan dhahnaa?", wuxuu yiri dhaha "Gargaare ayaanu leennahay idinkuse gargaare ma lihidin". Wuxuu markaas Abuu Sufyaan yiri "maanta maalintii Badar ayey u dhigantaa, dagaalkuna waa wadaameysi", Cumar ayaa u jawaabay oo yiri "ma sinnin, dadkayagii la diley jannada ayey ku jiraan, dadkiinniina naar". Wuxuu markaa Abuu Sufyaan yiri "Kaalay Cumarow". Rasuulka ayaa Cumar ku yiri "u tag oo fiiri xaalkisa", Cumar ayaa u tegey Abuu Sufyaan, markaas ayuu Cumar ku yiri "Ilaah baan kugu dhaarshaye Cumarow ma dilnay Maxammed?", Cumar wuxuu yiri "maya, haddana wuu ku maqlayaa", wuxuu yiri Abuu Sufyaan "adiga ayaan kaaga rumeyn badnahay ibnu Qum'a". Abuu Sufyaan iyo ciidankiiisii way baxeen iyagoo oranaya "ballanteennu waa Badar sannadka soo socda", markaas ayuu Rasuulku SCW nin asxaabtiisa ka mid ah ku yiri "ku dhe waa yehay waa inoo balllan".

Rasuulku SCW wuxuu markaa ciidankii gaalada ka daba direy Cali binu Abii-dhalib oo ku yiri "daba kac oo fiiri waxa ay samaynayaan iyo waxa ay doonayaan, haddii ay fardaha hogaamiyaan, geelana fuulaan Makka ayey u socdaan, haddii ayse fardaha fuulaan, geelana kexeeyaan Madiina ayey u socdaan, Ilaaha ay naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye, haddii ay aadaan Madiina waar raacaynaa oo la dagaallamaynaa". Cali wuu baxay oo daba kacay, wuxuuna arkay fardihiii oo ay hoggaamiyeen iyo geelii oo ay fuuleen, dhinicii Makkana ay aadeen.

Dadkii muslimiinta ahaa waxa ay intaa ka dib fiirfiirin u galeen shuhadadii goobta lagu laayey iyo kuwii dhaawaca ahaa. Seyd binu Thaabit wuxuu yiri "Rasuulka SCW ayaa ii direy maalinkii Uxud in aan raadiyo Sacad binu Rabbiic, wuxuuna igu yiri "haddii aad aragto igu salaan, waxaadna ku tiraahdaa Rasuulkii Alle wuxuu ku leeyahay sidee tahay". Markaas ayaan dhex qaaday dadkii la laayey, ka dibna waxaan u tegey isagii oo naftii ugu dambeysey ku jirto, ayna ku yaallaan 70 nabar oo isugu jira waran, seef iyo gammuun, markaas ayaan ku iri "Rasuulkii Alle wuu ku salaamayaa wuxuuna ku leeyahay iiga soo warran sida aad tahay". Sacad wuxuu yiri "ma Rasuulkii Alle ayaa i salaamaya, ku dheh Rasuulkii Allow waxaan helayaa jannada carafteedii, qowmkeygii Ansaarna ku dheh cudurdaar kuma lihidin Ilaahay agtiisa haddii Rasuulka Alle wax la gaarsiiyo idinka oo il qoyani idinku jirto", ka dibna naftii ayaa deysey Sacad.

Raggii asxaabta ahaa oo ku dhex wareegayey meydkii iyo dhaawicii meesha yaalley, waxa ay arkeen nin la oran jirey Camar binu Thaabit oo loo yaqaanay Usayram oo naf yar ku jirto, markaa ka horna ay islamka u bandhigi jireen oo diidey. Markaas ayey isku dheheen "Useyramkan maxaa keenay, maxaa yeelay waxa aannu ka soo tagnay isaga oo xumaan u arka arrinkan (islaamka)?". Ka dib way u tageen oo weydiiyeen, waxayna dheheen "maxaa ku keenay, ma ficiliaa mise waa jacayl islaam", wuxuu yiri "jacayl islaam ayaa i keenay, Alle iyo Rasuulkiisa ayaan rumeeyey, ka dibna Rasuulka SCW la jirkiisa ayaan dagaallamay ilaa waxa aad aragtaan igu dheceen", wax yar ka dibna waa dhintay. Rasuulka SCW markii loo sheegay wuxuu yiri "waa Ehlu-Janno". Abuu Hureyra isaga oo ninkaa arrinkiisa ka hadlaya wuxuu yiri "hal salaad Alle uma tukan".

Qofku markuu islaamo isaga oo aan shey cibaado ah samayn haddii uu jihaad galo oo ku dhinto waa Ehlu-Janno, laakiin haddii uu islaam iska sheegto oo uusan tukan jihaadba ha ku dhintee wax ka soo qaad ma leh maxaa yeelay wuxuu jihaadkiisu ansaxayaa qofkii Ilaahay ku xiran oo muslim ah una dagaallama in ay kalimadda Alle kor noqoto, haddiise ay niyadiisa wax kale ku jiraan sida xukun, ficilo, wadanimo, is tus tus, maal raadis iyo dan adduunyo, waxba laga aqbali maayo. Mana ahan jihaadka kaliya ee waa acmaasha islaamka oo dhan.

Sidoo kale dadkii asxaabta ahaa oo ku dhex wareegayey meydkii iyo dhaawacii meesha yaalley waxa ay soo mareen ninkii ahaa Qasmaan, oo aadka u dagaallamay, dileyna 7 ilaa 8 nin oo ciidankii gaalada ahaa, oo meel yaalla oo dhaawac culus ah. Markaas ayey u bishaareeyeen waxayna u qaadeen magaaladii Madiina. Wuxuu yiri Qasmaan "Ilaah baan ku dhaartaye wax kale uma dagaallamin ee sharafta reer tolkey ayaan u dirirayey, haddiise aanay arritaasu jirin ma dagaallameen", ka dib markii uu xanuunkii ka batay wuu is diley. Rasuulka SCW markii loo sheegay arrinkaa wuxuu yiri "Ehlu-Naarka ayuu ka mid yahay". Arrinkaas, oo ah abaalmarinta qof walba oo u dagaallama wax aan ahayn kalimadda Alle in ay kor noqoto, haba ku jiro ciidankii muslimiinta oo u dagaallamayey kor ahaanshaha kalimadda Alle wuxuu u qaaday niyaddiisii xumeyd oo ahayd u dagaallanka xamiyada (qabiilka), arrinkaas oo ah arrin ay dad badan oo muslimiin sheeganayaa ay ku jiraan, ciribtiisu waa sidaas Allena wuxuu u ballan qaaday cid walba oo ku dhimata naar.

Sidoo kale waxaa jirey nin yahuudi ahaa oo ka mid ahaa dadkii la laayey, waxana la yiri markii uu dagaalku dhacay ayuu yahuuddii uu ka dhashay ku yiri "yahuudey Ilaah baan ku dhaartaye xaq bay dushiinna ku tahay in aad Maxammed u gargaartaan", markaas

ayey dheheen "maanta waa Sabti", markaas ayuu ku yiri "Sabti beela", wuxuuna qaatay seeftiisii oo is diyaariyey, wuxuuna iyagii ku yiri "haddii aan dhinto malkayga Maxammed ayaa iska leh wuxuu doono ha ku sameeyo", horeyna dagaalkii ayuu u galay ilaa uu ka shahiidey. Ninkaas oo magaciisa la oran jirey Mukheyriiq waxaa Rasuulku SCW yiri isagoo ka hadlaya "Mukheyriqq waa yahuud kii ugu kheyr roonaa".

Rasuulku SCW wuxuu eegay dadkii shuhadada ahaa markaas ayuu yiri "kuwaan aniga ayaa markhaati ka ah, qof Ilaahay dartiis loo dhaawacayna ma jiro ilaa Ilaahay wuxuu qiyaamaha soo bixinayaa nabarkii oo dhiigaya, oo midabkiisu yahay midab dhiig riixdiisuna tahay Miskiga". Ka dib Rasuulku SCW wuxuu maqlay qaar asxaabtii ka mid ah oo Madiina u qaaday raggii shuhadada ahaa qaarkood, markaas ayuu Rasuulku SCW amray in la soo celiyo oo lagu duugo meeshii ay ku dhinteen, isla markaana aan ladhiqin, laguna duugo dharkooda. Ka dib markii laga bixiyo wixii bir ama harag ahaa ee ay xirnaayeen, waxana loo xabaalay labo labo iyo saddex saddex, maxaa yeelay ragga ayaa badnaa. Markii laba nin qabri la wada gelinayana wuxuu lahaa "kee baa qur'aanka badiya", markii loo sheegana midka qur'aanka badiya ayuu ku hormarinayey iilka. Wuxuuna isla xabaalay Cabdullaahi binu Camar binu Xaraam iyo Camar binu Jumuux oo ay ka dhexayn jirtey saasxiibtinnimo iyo jaceyl. Sidoo kale waxaa la isla xabaalay Xamsa binu Cabdimudhalib iyo Cabdullaahi binu Jaxshi oo uu abti u ahaa.

Markii shuhadadii la xabaalayey waxaa la waayey meydii Xandhala, markaas ayaa la raadiyey. Waxaa la soo helay isagii oo biyo ka da'ayaan. Rasuulka SCW markii arrintii loo sheegayna wuxuu yiri "malaa'ig baa dhaqdaye bal xaaskiisa weydiiya". Markii xaaska arrinkiisa la weydiiyeyna waxa ay sheegtay in uu janaabo qabay sidaa darteed waxaa xandhala lagu magacaabay kii ay malaa'igtu dhaqday. Xandhala waxaa dhalay ninkii uu Rasuulku SCW u bixiyey Abuu Caamir Al-faasiq oo dhinaca gaalada ka soo jeeday.

Rasuulku SCW markuu arkay adeerkiis Xamsa iyo sida loo dhalan rogay aad ayuu uga murugooday ugana xumaaday, ka dibna waxaa timid Rasuulka SCW eeddadiis Safiya oo dhashay Subeyr ibnu Cawaam, markaas ayuu Rasuulku SCW amray wiilkeedii Subeyr in uu ka celiyaa oo aysan arag meydka Xamsa. Safiya ayaa tiri "sababtee la iiga celinayaa, way i soo gaartay in walaalkay la dhalan rogaye, Ilaahay dartiis haddii aanan ku raalli noqonse maxaa kale oo aan ku raali noqon, waan sabri oo ajar gurubsan haddii Alle idmo", ka dib inta ay u tagtay oo fiirisay ayey u duceysey, dambi dhaafna Alle u weydiisey, waxayna tiri "INNAA LILLAAH WA INNAA ILEYHI RAAJICUUN".

Sidoo kale waxaa kamid ahaa dadkii goobta ku shahiiday Cabdullaahi ibnu camar ibnu xaraam (jabar aabihii) , wuxuu yiri Cabdullaahi "dagaalka Uxud ka hor ayaan riyo ku arkay Mubshir binu Cabdi Mundir oo i oranaya waad noo imaanaysaa markaasan ku iri oo xaggee joogtaa? wuxuu yiri "janada dhexdeeda ayaan saan doono ugu soconaa", waxaan ku iri "oo sawtii maalinkii badar lagu dilay" wuxuu yiri "haa, ka dib ayaase la i nooleeyey". Arrinkaas ayuu Cabdullaahi Rasuulka SCW u sheegay, Rasuulkuna SCW waxa uu ku yiri "taasi waa shahaado abaa jaabirow".

Waxaa isna kamid ahaa dadkii goobta ku shahiiday Khaythama (abuu Sacad) oo wiilkiisii Sacad ku shahiiday dagaalkii badar, waxa uu yiri khaythama "waxaa igafay dagaalkii badar, Ilaah ayaanna ku dhaartaye waan ku dadaalayey (inaan ka qayb galo dagaalkaas) laakiin waxaan qori tuuranay wiilkaygii markaasaa qorigiisii soo baxay (oo isagii dagaalkii aaday) waxaana lagu irsaaqay shahaado, xalayto ayaan markaa riyo ku arkay isagoo suurad tan ugu wanaagsan ah oo dhex jooga mirihii janada iyo wabiyadeedii, wuxuuna i yiri "nasoo haleel aan janada dhexdeeda ku rafiiqnee, waxaan helay wixii Rabbigay ii yaboohay isagoo xaq ah", Haddaba Rasuulkii Allow SCW waxaan waabariistay anigoo doonaya rafiiqnimadiisa janada dhexdeeda, da daydiina waa waynaatay, lafahaygiina waa gaboobeen, waxaana jeclahay Rabbigay la kulankiisa, ee Alle ii bari Rasuulkii Allow SCW in uu shahaado igu irsaaqo Sacadna (wiilkiisii) aan

janada kula rafiiqo. "Alle ayuu markaa Rasuulku SCW u baryey, wuxuuna ku shahiiday dagaalkan Uxud.

Waxaa sidoo kale ka mid ahaa raggii goobta ku shahiiday Cabdullaahi ibnu Jaxash oo ay Nabiga SCW eeddadiis dhashay ahaana ninkii watay ilaaladii uu Rasuulku SCW u diri jiray Nakhla (Makka iyo Dhaa'if dhexdooda) waxa uu yiri Cabdullaahi intuusan dagaalku dhicin "Allahayow waxaan kuugu dhaaranayaa in aan barri cadowga la kulmo oo ay i dilaan ka dibna ay calooshayda soo bixiyaan, ayna jaraan sankayga iyo dhagtayda, dabadeed aad (qiyaamaha) i waydiiso sababta ay arrintaasi ku dhacday, anna aan kugu iraahdo daraadaa.

Waxaa isna mid ahaa asxaabtii goobta ku shahiiday Camar ibnu Jamuux oo ahaa nin lug la, wuxuuna lahaa Afar inan oo dhalinyaro ah oo Rasuulka SCW la jihaad gasha, markii Uxud la soo aadayey ayuu damcay in uu Rasuulka SCW soo raaco markaasay wiilashiisii ku dheheen "maad iska joogtid anagaa kaa kaafinay (jihaadka), Allena waxa uu ku siiyay rukhso oo jihaad kaama uu rabo". Rasuulka SCW ayuu u yimid oo ku yiri "Rasuulkii Allow SCW wiilashaydaani waxa ay ii diidayaan in aan ku raaco, Ilaah baan ku dhaartaye waxaan rajaynayaa in aan ku shahiido (dagaalka) oo lug la'aantaydaan aan janada dhexdeeda ku dhutiyo". Wuxuu Rasuulku SCW ku yiri "adiga Alle jihaadka waa kaa daayey", wiilashiisiina waxa uu ku yiri "maad iska daysaan, waxaa la arkaa in Alle shahaado ku irsaaqee". Rasuulka SCW ayuu soo raacay (oo dagaalkii uxud ayuu ka wayb galay) wuuna shahiiday.

Waxaa isna ka mid ahaa raggii goobta ku shahiiday Muscab binu Cumeyr oo ahaa macallinkii reer Madiina, wuxuuna waday calankii muslimiinta Badar iyo Uxudba, islaamkana waxyaalo badan ayuu u soo qabtay. Muscab, oo ahaa islaamka ka hor nin dhallinyaro ah oo qurxoon aadna u xarrago badnaa, kana dhashay reer xoolo leh, Makkana caan ka ahaa oo dharka hadba nooc qaadan jirey ayaa markii uu Uxud ku shahiidey waxaa deeqi waayey kafantiisii maxaa yeelay wuxuu qabay hal go', markii lagu soo daboolo waxaa bannaanaanayey lugaha, markii lugaha lagu soo daboolna waxaa bannaanaanayey madaxa. Rasuulku SCW aad ayuu markaa uga murugooday wuxuuna yiri "madaxa ku soo daboola (kafanta), lugahan geedka Idkhirka la yiraahdo saara".

Ragii Muscab aqoon jirey markii ay soo xusuustaan aad ayey uga tiiraanyoon jireen noloshii uu ku sugnaan jirey Muscab iyo dhimashadiisii, Cabdirahmaan binu Cawf ayaa waqtigii khulafaa'ul-Raashidiinka waxaa galab loo keenay afur markaasuu yiri "waxaa la dilay (dagaalkii Uxud) Muscab binu Cumeyr waana iga khayr badnaa, waxaa lagu kafnay go'iisi (markaasuu deeqi waayey) markii lugaha laga saaro madaxa ayaa banaanaanayey, markii madaxa laga saarana lugaha ayaa banaanaanayey, (sidoo kale) waxaa la dilay Xamsa wuuna iga khayr badnaa, dabadeed aduunyada ayaa naloo fidiyey waxaana ka baqayaa in xasanaadkayagii naloo soo hor mariyey", markaasuu ooyey oo cuntadii iskaga tegey.

Sidaas ayeyna ahaayeen asxaabtya Rasuulka SCW oo adduunyo iyo dhal dhalaalkeeda waxay ka doorteen Alle iyo nolosha dabte ah ee aakhiro, raggii muhaajiriinta ahaa waxa ay maalin cad ka dhaqaaqeen xoolohoodii, xaasaskoodii, carruurtoodii iyo qaraabadoodii, waxayna Madiina tageen iyagoo aan waxba haysan, ka dibna waxay u istaageen Ilaahay diintiisa iyagoo mararka qaarkood gaajo darteed dhagaxa ay caloosha ku xiran jireen.

Adduunyaduna haddii ay Ilaahay agtiisa qiimo ku leedahay Rasuulka SCW iyo asxaabtiisa ayuu u doori lahaa. Rasuulkuna SCW wuxuu yiri isaga oo adduunyada ka hadlaya "haddii ay adduunyadu Ilaahay agtiisa garab kaneeco u dhiganto, gaalka kabbo biyo ah kama uusan waraabiyeen". Sidoo kale wuxuu Rasuulku SCW Ilaahay ka baryey in risqiga reer Maxammed noqdo quutul-yawm.

Asxaabta Rasuulkuna SCW waxa ay adduunyada furteen iyagoo qeydad iyo go'yaal qaba, waxa ayna ka run sheegeen islaamnimadoodii, waxayna waqtigoodii ku lumiyeen una dhinteen Alle dartiis.

Rasuulku SCW dagaalkii ka dib waa uu istaagay isaga oo Rabbigiis mahadinaya oo ammaanaya, asxaabtuna gadaashiisa ayey safteen, wuxuuna yiri "Allahayow adiga ayaa mahad kulligeed iska leh, Allahayow kii aad disho cid baajin kartaa ma jirto, kii aad baajisana cid dili karta ma jirto, kii aad baadiyeysana cid hanuuninn kartaa ma jirto, kii aad hanuunisana cid baadiyeyn kartaa ma jirto, wixii aad diiddana cid bixin kartaa ma jirto, wixii aad bixisanah cid diidi kartaa ma jirt, midkii aad fogeysid cid dhoweyn kartaa ma jirto, kii aad dhoweysana cid dheereyn kartaa ma jirto, Allahayow dushayada ku fidi barakaadkaaga, naxariistaada, fadligaaga iyo risqigaaga, Allahayow waxaan ku weydiisanayaa nimco daa'im ah oo aan la teedi karin, dhammaanayn, Allahayow waxaan ku weydiisanayaa kaalmo maalinka dhibka iyo nabadgelyo maalinka cabsida. Allahayow waxaan kaa magan gelayaa waxa aad na siisey shartooda iyo waxa aad naga celisay shartooda, Allahayow noo jeclow iimaanka, kuna qurxi quluubtayada, noona nac gaalnimo, fisqi iyo caasinnimo, nagan yeel kuwa hanuunsan, Allahayow nagu oofso muslinimnimo, naguna noolee muslimnimo, nana haleeshii kuwii wanwanaagsanaa oo aan hoogin lana fitneyn, Allahayow laa gaalada, kuwa Rasuulkaaga beeniyey, jidkaagana jeedinaya (leexinaya), korkoodana yeel rijsigaaga iyo cadaabkaaga, Allahayow kufriga laa kuwa kitaabka la siiyey".

Ka dib Rasuulku SCW markuu dhammeeyey duugitaankii shuhadada iyo ducadaanba waxa ay u gaddoomeen isaga iyo ciiidankisa dhinicii Madiina, markii ay laabteenna waxaa ka hor yimid gabdhihii mu'minaatka ahaa. Waxa ay la kulmeeen gabadha la yiraahdo Xamna bintu Jaxshi, markaas ayaa loo sheegay in uu shahiidey walaalkeed, cabdullaahi binu Jaxshi, waxay tiri "INNAA LILLAAHI WA INNAA ILEYHI RAAJICUUN" dambi dhaafna waa u weydiisey. Markaas ayaa haddana loo sheegay abtigeed Xamsa waxay tiri "INNAA LILLAAH WA INNAA ILEYHI RAAJICUUN" dambi dhaafna waa u weydiisey. Markaas ayaa sidoo kale loo sheegay in uu shahiidey ninkeedii Muscab binu Cumeyr, markaas ayey qaylisay oo jeedsatay, wuxuu markaas Rasuulku SCW yiri "ninku haweenta meel buu kaga yaal". Ka dib waxa ay soo mareen haweenay reer banii Diinaar ah oo ay shahideen ninkeedii, aabbeheed iyo walaalkeed. Markii loo sheegay dhimashadooda, ayey tiri "Ka warama Rasuulkii Alle SCW?", markaas ayey dheheen kheyr buu ku sugan yahay Ummu hebeleey,, Alle mahaddii buu ku sugan yahay iyo sida aad jeceshahay", markaas ayey tiri "ii dhoweeya aan arkee", markii ay aragtay ayey tiri "dhibaato kasta gadaashaa way yar tahay".

Ka dibna waxay soo mareen Sacad binu Mucaad hooyadiis, Sacadna faraska Rasuulka SCW ayuu hoggaanka u hayey, markaas ayuu Sacad yiri "Rasuulkii Allow SCW waa hooyaday", markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "soo dhaweeya", markii la soo dhoweeyeyna wuu la istaagay, waxaana loo sheegay wiilkeedii Camar binu Mucaad in uu shahiiday, markaas ayey tiri "Mar haddii aan ku arkay adiga (Nabiga SCW) oo nabad qaba waan yaraystay dhibtii".

Wuxuu Rasuulku SCW intaa ka dib u yeeray dadkii shuhadada ahaa ehelkoodii wuxuuna yiri "dadkii la laayey waxa ay dhammaantood rafiiq ku yihiin Jannada, wayna u shafeeco qaadayaan ehelkooda oo dhan". Sacad hooyadisna wuxuu ku yiri "bishaarayso una bishaaree (dadka)", markaas ayey tiri "waan raalli noqonnay Rasuulkii Allow SCW", waxa kale oo ay tiri "Rasuulkii Allow SCW u bari dadkii ka haray (shuhadadii)", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "Allahayow quluubtooda ka tagsii murugta kana ajar sii dhibaatadood, wanaajina kuwa haray haraagooda".

Dadkii muslimiinta ahaa ee ku shahaday dagaalkii Uxud waxa ay ahaayeen 70 nin, waxayna kala ahaayeen hal nin oo yahuudii kasoo islaamay, 4 muhaajiriin ah iyo 65 ansaar ah (41 Khasraj ah iyo 24 Aws ah). Dhinaca gaalada dadka laga laayey khilaaf

ayaa ku jira. Ibnu Isxaaq wuxuu sheegay in ay 22 ahaayeen laakiin Mubar Kafuuri, wuxuu kitaabkiisa Raxiiqul-Makhtuumka ku leeyahay markii la sameeyey baaritaan daqiiq ah oo la fiirshay dhammaan tafaasiishii goobta iyo arrimihii la xiriirey dadkii gaalada laga laayey marxaladihii kala duwanaa ee dagaalka, waxaa laga faa'iideysanayaa in ay ka dhimatay 37 nin ee ma aha 22 nin. Calaa kulli xaal Ilaah baa ku cilmi leh intuu caddodkoodu ahaa.

Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu waxa ay ku soo laabteem Madiina galabtii Sabtida isla maalinkuu dagaalku dhacay oo ahayd 7dii bishii Shawaal, sannadkii 3aad ee hijriga, waxa ayna habeenkii Axadda baryeen Madiina iyaga oo aad u ilaalinaya magaalada, gaar ahaan Rasuulka SCW.

Rasuulku SCW wuxuu ka yaabay in gaaladu ku fekeraan oo ay dhahaan "waxba ma aannu soo faa'iideysan oo goobtii intaanu ku guuleysannay baannu iska soo tagnay annaga oo aan nimankii dabar goyn oo Maxammed iyo raggi odeyaasha ahaaba joogaan ee aan laabanno". Wuxuu markaa Rasuulku SCW isug yeeray cidankiisi markii la gaaray subaxii Axadda, 8dii Shawaal, wuxuuna amray ciidanka in cadowgii laga daba tago si haddii ay Madiina dib ugu soo laabtaan loola dagaallamo, wuxuuna yiri "qof aan shalay dagaalkii Uxud nala gelin nama raacayo". Markaas ayuu munaafaqii weynaa, Cabdullahi ibnu Ubey yiri "aan ku raaco" hase yeeshee Rasuulku SCW wuu u diidey. Waxaa keliya oo Rasuulku SCW u oggolaaday in uu raaco Jaabbir ibnu Cabdullaahi, oo aabbihis Uxud lagu diley, oo Rasuulka SCW ku yiri "Rasuulkii Allow waan jeclaa in aan goob kasta kula jiro, laakiin aabbahay ayaa iiga tegey gabdhihiisii".

Asxaabtii Rasuulka SCW iyagoo ay ka muuqato daal iyo diif, badankoodna dhaawac yihiin, ayey si dhakhso ah ugu hoggaansameen amarkii Rasuulka SCW. Dabadeedna cadowgi ayaa la daba galay, markii ay muddo socdeen oo ay marayaan meel Madiina u jirta 8 mayl oo la yiraahdo Xamraa-ul-Asad ayey degeen, waxaa markaa soo maray nin la oran jirey Macbad ibnu abii Macbad oo reer Khusaaci ahaa oo islaamay. Wuxuu ninkaasu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye Maxammedow way na dhibtay waxa adiga iyo asxaabtaada idin soo gaaray waxa aannu jecel nahay in Ilaahay kaa caafiyo". Rasuulku SCW wuxuu markaa amaray in uu ka daba tago Abuu Sufyaan oo dhagro.

Ciidamadii qureysheed ee Abuu Sufyaan watay waxa ay arrintoodii noqotay sidii uu Rasuulku SCW filayey oo markii ay 36 mayl ka socdeen Madiina ayey qaarkood qaarka kale u dheheen "waxba ma aydin samayn maxaa yeelay inta aad jebiseen (muslimiintii) ayaad ka soo tagteen iyaga oo ay u hareen madax mar kale dagaal idiin ururineysa, war laabta ilaa aan soo cirib tirno". Arrinkaas waxaa khilaafay Safwaan ibnu Umaya oo yiri "ha samaynina sidaa maxaa yeelay waxa aan ka baqayaa in auu idiin soo kulmiyo dadkii awal ka haray, war laabta idinka ayaa guusha lehe, haddii aad laabataan anigu mas'uul kama ihi haddii la idinka guuleysto', hase ahaatee fikraddaa Safwaan ciidanka badankiisu way diideen waxayna go'aansadeen in ay Madiina ku laabtaan, laakiin intii uusan Abuu Sufyaan ciidankii dhaqaajin ayaa waxaa soo maray Macbad ibnu abii Macbad Al-khusaaci. Markaas ayaa Abuu Sufyaan ku yiri "war Macbad maxaad haysaa?", wuxuu yiri "Maxammed wuxuu la soo baxay asxaabtiisa isaga oo idin raadinaya oo wata ciidan tiradiisa aanan hore u arag, wuxuu soo ursursaday dadkii ka haray maalinkii Uxud iyagoo ka qoomameysan fursaddii ay dayaceen". Abuu Sufyaan markii uu hadalkaas maqlay ayuu baqay wuxuuna yiri "war hooge maxaad sheegaysaa?", wuxu Macbad yiri "Ilaah baan ku dhaartaye ma arko in aad guuraysaan ilaa aad aragtaan fardaha fooddooda ama uu idinkaga soo baxo ciidanka horraantiisu duudkaan gadaashiisa". Abuu Sufyaan wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye waxa aannu isku raacnay in aan ku laabanno oo aan soo dabargoyno", Macbad ayaa yiri "waan kula talinayaaye sidaa ha sameynin".

Abuu Sufyaan iyo ciidankiisii waxaa ku dhacay cabsi iyo argagax waxa ayna ka baqeen in Nabi Maxammed SCW ka daba yimaaddo oo intuu warjeefo uu guusha ka qaato, sidaa darteed iyaga oo baqo ah ayey si degdeg ah ugu kaceen Makka. Waxaa markaa ka hor

yimid niman rakuubley ah oo reer Cabdiqays ah oo u socda Madiina, markaas ayaa Abuu Sufyaan u sameeyey dacaayad uu rabo in uu Nabi Maxammed SCW iyo ciidankiisa ku celiyo, kuna rido cabsi iyo baqdin si aysan uga daba imaan. Nimankii ayuu ku yiri "ma iga gaarsiinaysaan Maxammed farriin, markaas aad Makka timaaddaan ayaan awrtiinna idinkaga buuxinayaa sabiib", waxay dheheen "waayahay", markaa ayuu yiri waxaad iga gaarsiisaan Maxammed in aannu isku raacnay in aannu soo laabano si isaga iyo asxaabtiisa aannu u dabar goyno. Nimankii way soo ambabexeen, markii ay soo gaareen Rasuulka SCW iyo asxaabtiiisii oo joogay Xamraa-ul-Asad ayey u sheegeen farriintii Abuu Sufyaan oo ay ku dheheen "waa la idiin soo kulmaye ka carara meesha", hase yeeshee arrintaasi waxa ay u siyaadisay muslimiintii iiman, waxa ayna dheheen "Alle ayaa nagu filan, isaga ayaa talo saarasho u nimco lahaaday". Allaahna isaga oo arrintaas tilmaamaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((WAA KUWA AJIIBAY ALLE IYO RASUULKIISA KA DIB MARKUU ASIIBAY DHAAWAC, KUWA WANAAGA SAMEEYEY EE KA MID AH (MUSLIMIINTA) OO DHAWRSADAY WAXA AY LEEYIHIIN AJAR WAYN, WAA KUWA DADKU KU YIRI "DADKII AYAA IDIIN SOO KULMAY EE KA BAQA OO AY ARRINTAASI U SIYAADISAY IIMAAN, WAXAYNA DHEHEEN ALLAA NAGU FILAN ISAGAANA U NIMCO LAHAADAY WAKIILNIMO, WAXAY LA NOQDEEN NIMCO ALLE IYO FADLI (IYAGOO) AYSAN TAABAN XUMAAN OOLA NOQDAY RAALI AHAANSHAHA ALLE, ALLENA WAXA UU U SAAXIIB YAHAY FADLI WAYN, KAAS (IDIN LEH WAA LA IDIIN SOO KULMAY) HANA KA BIQININA EE ANIGA IGA CABSADA HADAAD MU'MINIIN TIHIIN)), (Suuratu Aali-Cimraan 172-175).

Rasuulku SCW wuxuu meeshii Xamraa-ul-Asad degganaa saddex beri, dabadeedna maalinkii Arbacada oo bisha Shawaal ahayd 11 ayey meeshaa ka soo tageen. Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu markii ay soo laabteen ayaa Rasuulku SCW qabtay ninkii la oran jirey Abaa Cisa Al-jumaxi oo ahaa ninkii aan soo sheegnay oo ka mid ahaa dadkii Badar lagu qafaashay, Rasuulkuna SCW iska cafiyey markuu u dan sheegtay, ballanna ka qaaday in uusan islaamka ka hor imaanayn laakiin ballantii ka baxay, kana soo qayb glay dagaalkii Uxud. Markii ninkaas la qabtay oo Rasuulka SCW loo keenay ayuu yiri "Maxamedow i sii daa oo i galladayso, ballan baan kaa qaadayaa in aanan ku laaban wixii aan sameeyey oo kale", hase yeeshee Rasuulku SCW wuxuu yiri "dib dambe Makka ugu mushaaxi maysid oo oran maysid Maxammed baan laba jeer soo khiyaameeyey, lagamana qaniino mu'minka god laba jeer". Wuxuu markaa Rasuulku SCW amray Subeyr binu Cawaam ama Caaskim binu Thaabit in uu qoorta u dheereeyo, sidaas ayaana ninkaas qoorta loogu dheereeyey.

Sidoo kale markii uu dhammaaday dagaalkii Uxud ayaa waxaa Madiina yimid nin jaajuus u ah reer Makka oo la oran jirey Mucaawiya binu abii Muqiira binu Caas. Ninkaasi wuxuu ku soo degey oo magangalay Cusmaan binu Cafaan, oo ay ilma adeer ahaayeen. Cusmaan Rasuulka SCW ayuu magangal u weydiiyey, Rasuulkuna SCW wuxuu magangal siiyey saddex maalmood, wuxuuna u sheegay in uu dilayo hadduu saddex maalmood ka dib Madiina ku arko. Markii Rasuulka SCW iyo ciidankiisii ay qureysh ka daba tageen, oo ay saddex malmood Xamraa-ul-Asad degganaayeen, maalinkii xigayna ay jidka ku sii jireen, ayuu ninkii muddadii la siiyey ka badsaday oo afar maalmood Madiina joogey si uu sir badan u ururiyo. Markii ciidankii muslimiintu soo laabteen ayuu cararay, markaas ayaa Rasuulku SCW ka daba diray Seyd binu Xaarith iyo Cammaar binu Yaasir wuxuun amray in ay soo dilaan, markaas ayey ka daba tageen oo soo dileen.

Dagaalkan Uxud waxa ay in badan oo culimada islaamka kamid ihi ka hadlaan in natiijada dagaalku ay jab ku ahayd muslimiinta iyo in kale. Waxaa aan shaki lahayn in awoodda ciidameed ee dagaalku ay doorkii labad u wareegtay dhinaca gaalada, goobtii dagaalkana ay saydareeyeen, dhimashaduna u badnayd dhinaca muslimiinta, koox muslimiinta ka mid ahina ay baqdeen, laakiin waxaa haddanaj irey arrimo badan oo gaalada u diidey nasri iyo guul. Arrimahaas oo kala ah:

- 1. Ciidankii gaalada awood uma helin in uu qabsado fariisinkii ama goobtii muslimiinta.
- 2. In badan oo ciidanka muslimiinta ka mid ihi uma cararin Madiina.
- 3. Ciidankii muslimiintu waxa ay ugu dambayntii ku soo urureen goobtii dagaalka.
- 4. Qof ciidanka msulimiinta ka mid ah gaaladu ma aysan qafaalan.
- 5. Qaniimo lagama furan ciidankii muslimiinta.
- 6. Caadadii waagaas waxa ay ahayd in ciddii guuleysata ay saddex maalmood goobta jooogto hase yeeshee ciidankii gaaladu isla markiiba way carareen oo goobtii dagaalka waxaa u haray ciidankii muslimiita.
- 7. Ciidankii muslimiinta ayaa maalinkii oo dhan meesha joogey o meydkoodii aastay.
- 8. Ciidankii gaaladu kuma dhiiran in uu aado Madiino oo wax yeelleeyo dadkii musliminta ahaa.
- 9. Markii ay ciidankii muslimiintu ka daba tageen gaalada oo gaareen Xamraa-ul-Asad, ciidankii gaaladu ma soo laaban ee waxay fidiyeen dacaayad, wayna sii baqdeen.
- 10. Ciidankii muslimiintu waxa ay Xamraa-ul-Asad degganaayeen saddex maalmood oo dadkii carradas deganaa oo dhan ogadeen.

Haddaba arrimahaas oo dhan waxa ay ina tusinayaan oo laga qaadanayaa in ciidankii gaaladu aysan guuleysan ee arrintu ahayd in muslimiintu dhimasho badnaayeen hase ahaatee ay qaybo badan ku guuleysteen. Labada qolona khasaare uu soo gaaray. Allaahna isaga oo tilmaamaya in labada qoloba uu khasaare soo gaaray wuxu qur'aankiisa ku yiri:

((HADDUU IDIN TAABTAY DHAAWAC WAXAA XAQIIQDII NIMANKANA TAABTAY DHIB LA MID AH)), (Suuratu Aali-Cimraa 140).

Dagaalka Uxud waxaa si aad ah uga hadashay una qaadaa dhigtay Suuratu Aali-Cimraan oo Allaah uga hadlay in ku dhow 60 aayadood marka laga bilaabo aayadda 121 ilaa lagu dhawaado dhamaadka suuradda. Sidoo kale dagaalkaas wuxuu Ilaah ka muujiyey calaamooyin wuxuuna ku kala saaray mu'miniintii iimaankoodu dhabta ahaa iyo munaafaqiintii iimaankooodu beenta ahaa. Allaahna wuxuu yiri:

((MA AHAANIN ALLE MID UGA TAGAYA MU'MINIINTA WAXAAD KU SUGASN TIHIIN ILAA UU KALA SOOCO KAN XUN IYO KAN WANAAGSAN, ALLENA MA AHAN KII IDIN TUSINAYA WAXA MAQAN, HASE YEESHEE WUXUU ALLE RUSUSHIISA U DOORTAA CIDDUU DOONO, MARKA RUMEEYA ALLE IYO RASUULKIISA, HADDII AAD RUMAYSAAN (ALLE IYO RASUULKIISA SCW) OO AAD BAQDAAN WAXAAD LEEDIHIN AJAR WAYN)), (Suuratu Aali-Cimraan 179).

Culimada islaamku aad ayey uga hadlaan xikmadaha iyo faa'iidooyinka ku sugnaa dagaalkaas iyo sida Rabbi uu u kala saaray mu'miniintii iyo munaafaqiintii. Ibnu Qaymi Al-jawsi wuxuu uga hadlayaa kitaabkiisa Saadul-Macaadka isaga oo waliba aad u sharaxaya xikmadahaas, cadeeyeyna faa'iidooyinka ku jira iyo waxa laga qaatay, sidoo kale Ibnu Xajar Al-casqalaani wuxuu uga hadlay kitaabkiisa Fatxul Baariga, Mubaar kafaarina Raxiiqa ayuu ku soo sardinayaa hadalkaas Ibnu Xajar, wuxuuna yiri Ibnu Xajar "waxa ay culimada islaamku dheheen qisada Uxud iyo waxa ku dhacay muslimiinta oo ah faa'iidoyin iyo xikmo Rabbaani ah iyo arrimo waaweyn, waxaa ka mid ah; musliminta oo ogaatay cirib xummada ya leedahay mcaasida iyo amarka Rasuulka SCW oo la khilaafo, maxa yelay raggii gumaadda ahaa (50kii nin) markii ay ta'wiiliyeen amarkii Rasuulka SCW oo ay khilaafeen ayaa msulimiinta jabkii ku yimid". Allaahna isaga oo arrintaa tilmaamaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((XAQIIQDII ALLE WUU IDIINKU RUN SHEEGAY YABOOHIISII MARKAAD KU DILAYSEEN IDANKIISA ILAA AAD FASHILANTEEN OO AAD AMARKA KU DOODEEN AADNA

CAASIDEEN (AMARKA RASUULKA SCW) KA DIB MARKII AAD ARAGTEEN WAXAAD JECESHIHIIN, WAXAA IDINKA MID AH QOF ADUUNYO DOONAYA, WAXAANA IDINKA MID AH QOF AAKHIRO DOONAYA, MARKAASUU IDINKA JEEDIYEY XAGGOODA SI U IDIIN IMTIXAAMO KA DIBNA WUU IDINKA CAFIYEY, ALLENA WUU KU FADLI LEEYAHAY MU'MINIINTA)), (Suuratu Aali-Cimraan 152).

Waxaa haddaba maanta jira in dad badan oo muslimiin ah ay khilaafayaan amarkii Alle iyo kii Rasuulkaba SCW, waxay naftooda iyo sheydaan u qurxiyaanna ay sameynayaan isla markaasna ay doonayaan in Alle u gargaaro. Allaahna wuxuu qur'aankiisa ku sheegay aayado badan oo ka hadlaya raacitaanka Allaah iyo Rasuulka SCW, wuxuuna ka digey in Rasuulka SCW la khilaafo sida ay aayaddani caddeyneysaba:

((HAKA DIKTOONAADAAN KUWA KHILAAFAYA (RASUULKA SCW) AMARKIISA IN AY ASIIBO FIDNO (MUSIIBO) AMA UU U YIMAADO CDAAB DARAN)), (Suuratu-Nuur 63).

Sidoo kale wuxuu Ibnu Xajar Fatxul Baariga ku yiri "Xikmadaha kale ee laga qaadanayo dagaalkaas waxa ka mid ah in weligeedba caadada Rususha iyo dadka raacaba ay ahayd in marka hore la imtixaamo, cirib dambeedkana ay iyagu lahaadaan. Sidoo kale waxa ay xikmad kale tahay in haddii mar kasta ay muslimiintu guuleystaan ay dhici karto in dadka qaarkood is cajabiyaan oo ay hilmaamaan nasriga Alle iyagoo u heysta in ay iyagu guusha keensadeen".

Xikmadda ugu dambaysa waxa ay tahay in haddii muslimiintu ay mar walba guuleystaan ay ku dhex dhuuman kari lahaayeen dad badan oo aan ka mid ahayn, mana ay kala soocmeen kuwa iimaankooda ka run sheegaya iyo kuwa aan ka run sheegayn, waana sida Cabdullaahi binu Ubay iyo kooxdiisii ay ku soo galeen islaamka ka dib markii ay maqleen in muslimiintii ay ku guuleysteen Badar oo jebiyeen nimankii xoogga badnaa ee qureysh, waxa ayna muslimiinta dhexdooda ku qarsanayeen gaalnimo iyagoo muujisanaya islaam, laakin wuxuu Ilaahay bannaanka sirtoodii soo dhigay dagaalkii Uxud markii ay dhibtu timid, waxayna muslimiintii ogaadeen in ay gudahooda cadow ku leeyihiin, ka dibna way ka digtoonaadeen oo u diyaar garoobeen, sideedana dadku marka hore ee nabadda way isku dhex jiraan oo qof walba islaamnimo ayuu muujisanayaa, laakiin markii fitno iyo imtixam yimaaddaan ayaa la kala baxayaa, lana kala ogaanayaa ciddii uu iimaanku dhab ka ahaa iyo ciddii uusan dhab ka ahayn. Allaahna isagoo arrintaa ka hadlaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((DADKU MA WAXA U MALEEYEEYEY IN LOOGA TAGAYO WAAN RUMAYNAY IYAGOON LA IMTIXAAMIN, XAQIIQDII WAAN IMTIXAANAY KUWII KA HOREEYEY, ALLENA WAA UU KALA MUUJIYEY KUWII RUNTA SHEEGAY IYO KUWII BEENTA SHEEGAY)), (Suurtul-Cankabuut 1-2).

DUULLAAMADII CIIDAMEED EE KU XIGEY UXUD

Markii dadkii muslimiinta ahaa dhaawac ku soo gaaray Uxud ayaa waxaa yaraaday cabsidii iyo baqdintii laga biqi jirey muslimiinta, waxaana bilaabmay guux iyo cadaawad loo muujinayo dadkii muslimiinta ahaa. Guuxaas wuxuu ka imaanayey gudaha muslimiinta, sida munaafiqiinta, iyo dibedda sida yuhuuddii Madiina wax ka degganayd iyo qabiilladii reer baadiyaha ee hareeraha Madiina ku noolaa.

Qolooyinkaas oo dhammi markii ay arkeen in muslimiinta dhaawaca soo gaaray ayey doobbida listeen, qaarkoodna waxa ay ku hammiyeen in ay muslimiinta duullaan ku soo qaadaan sida reer banuu Asad oo labo bilood ka dib (Uxud) isu diyaariyey in ay duullaan Madiina ku soo qaadaan. Sidoo kale qabiilooyinka kala ah Cadal iyo Qaara waxay afar bilood ka dib sameeyeen shirqool ay ku dileen 10 nin oo asxaabtii Rasuulka SCW ah. Qabiillada banuu Caamir iyo banuu Suleym ayaa iyaguna sidoo kale waxa ay si

khiyaamo ah u dileen 70 nin oo asxaabtii Rasuulka SCW ah. Sidoo kale qabiiloyinkii reer Qadafaan waxa ay ku hammiyeen in ay Madiina soo weeraraan.

Haddaba arrimahaas iyo kuwo kaleba waxaa sameyey qabiilooyinkii reer baadiyaha ahaa oo degganaa Xijaas ilaa Najdi iyagoo doonayey in a islaamka iyo muslimiinta cirib tiraan maxaa yeelay waxa ay u arkayeen in muslimiintu yihiin khatar ku soo socata Khaliijiul-carab.

Waxaa iyaguna sidoo kale cadaawad daran muujiyey, har iyo habeenna ku fekerayey sidii ay Rasuulka SCW iyo asxaabtiisa dhib u gaarsiin lahaayeen yahuuddii reer banii Qaynuqaac oo Rasuulku SCW ka raray Madiina iyo yahuuddii kale oo Madiina ku hartay (banuu Nadiir iyo banuu Qureyda), siiba banuu Nadiir oo maleegay shirqol ay rabeen in ay ku dilaan Nabiga SCW.

Markii arrimahaas oo dhan gudaha iyo dibeddaba ah ay soo food saareen muslimiintii ayaa Rasuulku SCW la qaabbilay xikmadiisii iyo kaartadiisii dagaalka ee wanaagsanayd, wuxuuna muslimiintii ka saaray ciriirigii iyo dhibtii, Acdaadii Ilaahayna xumaatadoodii iyo makrigoodii ayuu ku celiyey, wuxuuna soo celiyey cisigii iyo heybaddii muslimiinta.

Tallaabooyinkii uu qaaday Rasuulku SCW waxaa ugu horreeyey duullaankii Xamraa-ul-Asad oo uu uga daba tegey ciidankii qureysheed ee Uxud ka laabtay, halkaas oo uu deggenaa saddex maalmood. Waxaa ayna dhammaan acdaadii Ilaah ogaadeen awoodda iyo geesinnimada muslimiinta iyo sida aysan marnaba u jixinjixeyn. Haddaba waxa aynu mid mid u xoo qaadanaynaa arrimihii iyo dhacdooyinkii dhacay intii u dhexeysey dagaalkii horeeyeen inkastoo qaarkood la isku khilaafo siday ukala horreeyeyn haddaana waxaan qaadanaynaa sida loo badan yahay.

1) ILLAALADII ABUU SALAMA

Markii uu dhammaaday dagaalkii Uxud oo la joogey labo bilood iyo bar, ayaa wardoonkii Madiina wuxuu soo gudbiyey in labada nin oo la kala oran jirey Dhalxa iyo Abuu Salama oo ilma Khuweylid ahaa ay ciddoodii iyo wixii kale oo raacayba ugu yeereen la dagaallanka Rasuulka SCW. Rasuulku SCW markii uu arrinkaa maqlay ayuu sidii caadadiisa ahaydba wuxuu diray ciidan gaaraya 150 nin, wuxuuna madax uga dhigey Abuu Salama. Waqtigaas wuxuu ahaa kowdii bishii Muxarram, sannadkii 4aad ee higriga.

Abuu Salama iyo ciidankiisii markii ay tageen guryihii reer banuu Asad, oo ahaa qabiilkii duullaanka soo waday, ayaa qabiilkii Ilaahay wuxuu ku ridey rucbi iyo baqdin meeshiina way ka carareen. Muslimiintii waxa ay meeshaas ka soo kaxeysteen geel iyo ari ay qabiilkaasu lahaayeen, waxayna soo laabteen iyaga oo aan dagaal gelin soona qaniimeystey. Abuu Salama oo ciidanka watay, markuu Madiina ku soo laabtay, ayaa waxaa ku soo kacay nabar ku dhacay dagaalkii Uxud, muddo yar ka dibna waa uu shahiiday.

2) DILITAANKII KHAALID BINU SUFYAAN AL-HUDALI

Sidoo kale isla bishii Muxarram 5teedii ayaa waxaa Rasuulka SCW loo soo gudbiyey in ninkii la oran jirey Khaalid binu Sufyaan Al-hudali uu ciidan u ururinayo la dagaallanka muslimiinta, markaas ayaa Rasuulku SCW wuxuu direy Cabdullaahi binu Uneys si uu ninkaas uga soo takhalluso. Cabdullaahi wuxuu Madiina ka maqnaa 18 habeen, wuxuuna Madiina ku soo laabtay iyada oo ay 7 habeen ka dhiman tahay Muxarram isagoo soo diley Khaalid binu Sufyaan oo madaxiisii wada, wuxuuna madaxii dhigay Rasuulka SCW hortiisa. Rasuulku SCW arrinkaa wuu ku farxay, wuxuuna Cabdullaahi siiyey ul uu yiri "tani waa inoocalaamad aniga iyo adiga maalinka qiyaamaha".

Cabdullaahi ushii wuu hastay jirey ugu dambayntiina markii uu dhimanayey wuxuu dardaarmay in usha kafantiisa lala geliyo.

MURUGADII RAJIIC

Bishii Safar, isla sannadkii 4aad ee hijriga, ayaa waxaa Rasuulka SCW u yimid wafdi ka socda labadii qabiil ee la kala oran jirey Cadal iy Qaara, waxayna Rasuulka SCW u sheegeen in ay soo islaameen, ka dibna waxay codsadeen in uu ku daro rag diinta bara oo qur'aanka u akhriya. Waxaa markaa Rasuulku SCW ku daray 10 nin oo asxaabtiisa ka mid ahaa, wuxuuna madax uga dhigay Caasim binu Thaabit. Markii ay is raaceen oo ay sii marayaan meesha la yiraahdo Rajiic, oo uu degganaa qabiilka reer Hudeyl, ayaa waxaa maqlay qabiil Hudeyl ka mida ahaa oo la oran jirey banuu Xayaan, markaas ayey 10kii nin oo asxaabta ahaa ka daba direen 100 nin. Dabadeedna way hareereeyeen, waxa ayna ku dheheen "ballan baan idinka qaadaynaa haddii aad is dhiibtaan in aannaan cid idinka dilin", laakiin Caasim oo 10kaa madax u ahaa wuu diidey arrinkaas, wuuna dagaallamay isaga iyo raggiisii ilaa ay ka dhinteen 7 nin oo uu Caasim ku jiray. Mar labaad ayey 3dii nin oo soo hartay ku yiraahdeen "haddii aad is dhiibtaan waxa aannu idiin ballanqaadaynaa in aannaan hal nin idinka dilin". Markii ay 3dii nin is-soo dhiibeen ayey ula soo baxeen xargo ay rabeen in ay ku xiraan, markaas ayaa nin 3dii ka mid ihi yiri "tani waa ballan jebintii ugu horreysey", wuuna dagaallamay ilaa ay ka dileen. Labdii nin oo soo hartay, oo kala ahaa Khubeyb iyo Seyb binu Dathina, ayey qafaasheen, waxa ayna u geeyeen oo ka iibsadeen reer Makka.

Labadan nin waxay ka mid ahaayeen asxaabtii dagaalkii Badar ka qayb gashay oo wax ka laayey madaxdii qureysh. Seyb binu Dathina waxaa gatay Safwaan binu Umaya oo uu aabihiis diley, Khubeybna wax xireen ka dibna waxay ay ku xikumeen dil. Waxay khubeyb ka soo bixiyeen xaramka iyaga oo u wada meesha la yiraahdo Tanciim oo ay rabeen in ay ku dilaan. Wuxuuna ku yiri "i daaya aan labo rakcadood tukadee", way u oggolaadeen, markii uu labadii rakco tudadayna wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye haddii aydaan dhahayn wuu argagaxay waan badsan lahaa (salaadda)", sidaa darteed Khubeyb waa ninkii ugu horreeyey ee jideeyey in uu qofku labo rakcadood tukado marka la dilayo. Ka dibna Allaah ayuu baryey oo wuxuu yiri "Allahayow tiradooda koob una laa si kala taksan, axadna ha ka reebin". Abuu Sufyaan ayaa markaa ku yiri "Ma ku farax gelineysaa in uu Maxammed nala joogo oo aan qoorta u dheereyno, adiguna aad reerkaagii la joogtid?". Khubeyb wuxuu ku jawaabay "maya, Ilaah baan ku dhaartaye ima farax gelineysto in aan reerkaygii la joogo, Nabi Maxammedna SCW booskaan aan joogo uu joogo oo qodax dhibeysaa ay muddo". Ka dib waxay Khubeyb dilkiisa u saareen Cuqba binu Xaarith, oo aabihiis uu Khubeyb Badar ku dilay.

Khubeyb intii uu xirnaa waxaa la arkay isaga oo cunaya Canab aan markaa Makka oollin. Sidoo kale isaga oo xiran ayaa reerkii uu u xirnaa wiil kamid ah u keenay mindi, markaas ayaa reerkii ka naxeen arrintaas hase yeeshee Khubeyb waxba ma yeelin wiilkaas.

Qureyshtu waxay cid u dirsadeen meeshii lagu laayey 8dii nin ee kale si qaby ka mid ah jirkii Caasim, hoggaamiyihii 10ka xaabi loogu keeno maxaa yeelay Caasim wuxuu maalinkii Badar diley rag badan oo odeyaashii qureysh ka tirsanaa. Allaah, oo had iyo jeer ah gargaaraha mu'miniinta, wuxuu meydkii Caasim u soo diray oo isku hareeraysay shinni aad u tiro badan. Markii ay ku dhici kari waayeen ayey ka tageen oo dheheen galabta aan u soo laabanno hase yeeshee intii ay maqnaayeen ayaa Alle u soo diray daruur roob ah oo daad ayaa qaaday meydkiisii, meel uu geeyeyna lama oga. Markii ay gaaladii galabtii u soo laabteena waxay yimaadeen meeshii oo aan waxba oollin sidaa awgeed shayna jirkiisii kama aysan helin. Caasim intii uu noolaa wuxuu Ilaahay kula ballamay in aan mushrik taaban jirkiisa isna uusan taaban.

Cumar binu Khadhaab, oo arrintaas ka hadlaya, wuxuu yiri "Allaah addoonkiisa mu'minka ah wuu xifdiyaa markii uu dhinto sida uu markaa noolyahayba u xifdiyo".

MURUGADII BI'RU MACUUN

Isla bishii Safar ee ay dhacday murugadii Rajiic, ayaa waxaa dhacday murugo kale oo ka daran, lana yiraahdo Bi'ru Macuun. Sababtuna waxa ay ahayd in nin la oran jiray Abuu Baraa' (Caamir binu Maalik) uu Rasuulka SCW Madiina ugu yimid. Rasuulku SCW wuxuu yiri "Rasuulkii Allow haddii aad asxaabtaada u dirtid reer Najdi si ay diintaada ugu yeeraan waxaan rajaynayaa in ay yeeli lahaayeen". Markaas ayaa Rasuulku SCW ku yiri "asxaabtayda waan uga baqayaa reer Najdi", Abaa Baraa' ayaa yiri "aniga ayaa badbaadinaya". Waxa uu markaa Rasuulku SCW ku daray 70 nin oo ka mid ahaa raggii ugu wanaagsanaa qur'aanka, uguna badiyey asxaabta, wuxuuna madax uga dhigay Mundir binu Camar oo lagu naaneysi jirey (kii isu xoreeyey dhimashada). Raggani waxa ay ahaayeen kuwo aad u qiimo badan, habeenkii oo dhan waxa ay u soo jeedi jireen qur'aan akhris iyo salaatu-leyl, maalintiina inta ay soo xamaalaan ayey cunto u soo gadi jireen dadkii asxaabta ahaa oo aan waxba haysan.

Abuu Mundir iyo asxaabtii uu hoggaaminayey waxa ay Madiina ka baxeen iyaga oo ducaad ah oo Ilaahay iyo Rasuulkiisu SCW ay u doorteen dacwadaas islaamka. Raggaas oo uu la socdo ninkii ahaa Abuu Baraa' waxaqy degeen meesha la yiraahdo Bi'ru Macuuna, oo u dhexeysey labadii qabiil ee reer banuu Caamir (qabiilkii Abuu Baraa') iyo reer banuu Suleym. Ka dib waxa ay direen Xaraam binu Malxaan, oo ahaa Ummu Suleym walaalkeed, waxayna u dhiibeen waraaq uu Rasuulku SCW u soo direy cadowgii Alle ee Caamir binu Dhufeyl oo ka mid ahaa odeyaashii reer banii Caamir. Cadowgaas Alle markii ay warqaddii Rasuulku SCW u tagtay ma uusan fiirin ee wuxuu amray in la dilo ninkii waday, Xaraam binu Malxaan. Waran ayey ku dhufteen, hase yeeshee markii uu arkay nabarkii iyo dhiiggii ayuu yiri "Allaahu Akbar, waan liibaanay kacbada Rabbigeeda ayaan kudhaartaye". Ka dib Cadowgii Alle ee Caamir ahaa wuxuu reer banuu Caamir ka dalbay in ay soo laayaan inta ka hadhay raggii Abuu Mundir la socday hase yeeshee reer banuu Caamir wey diideen amarkaas iyagoo tixgelinaya magangelyadii Abaa Baraa'. Wuxuu markaa Caamir u qeylo dhaansaday reer banuu Suleym, waxaana amarkiisii yeelay oo soo raacay qabiilooyin ka mid ah banii Suleym oo kala ahaa Rucul, Dakwaan, Lixaan iyo Cisiya.

Waxay qabiilooyinkaasi ku duuleen oo hareereeyeen asxaabtii Rasuulka SCW. Asxaabtu way dagaallameen ilaa laga diley 67 nin. Saddexda nin oo soo hartay waxay kala ahaayeen: Kacab binu Seyd binu Najaar oo labo meyd ku kala dhex jirey, ayna meyd ahaan uga tageen hase yeeshee noolaa. Wuxuuna ku dhintay dagalkii Axsaab iyo Caamir binu Umaya iyo Mundir binu Cuqba oo iyagu ka maqnaa goobta. Markii ay meeshii u soo dhowaayeen ayey arkeen haadda ku degtey meeshii ay ragga ku ogaayeen, markii ay goobtii soo gaareenna Mundir wuu dagaallamay ilaa laga diley, Carna way qafaashen. Cadowgii Alle ee Caamir markii uu ogaaday in uu Camar ka dhashay reer banii Mundir ayuu foodda intuu ka gooyey ku yiri "waxaan kuu xoreeyey qoor ay hooyaday xoreyn lahayd" ka dibna wuu sii daayey.

Camar markii la soo daayey wuxuu soo aaday Madiina, markuu jidka dhexe sii marayo ayuu geed hoos degay, ka dibna waxaa u yimid oo geedkii la degay labo nin oo reer banii Kulaba ah. Muslimiinta iyo reer banii Kulaaba waxaa ka dhexeeyey heshiis. Camar wuxuu u maleeyey in qabiilka labadaas nin uu ka mid ahaa qabiilladii asxabta wax ka laayey. Camar, oo aan heshiiska Rasuulka SCW iyo reer banuu Kilaaba ogeyn, ayaa labadii nin markii ay seexdeen diley. Ka dib Camar wuxuu u tegey Rasuulkii SCW isaga oo wada warkii murugada lahaa iyo ki labadii nin ee uu soo dileyba. Rasuulku SCW wuxuu markaas yiri "waxa aad dishay labo nin oo aan magtooda bixinayo", dabadeedna wuxuu Rasuulku SCW guda galay in uu magtii ka soo ururinayo muslimiinta.

Rasuulka SCW iyo asxaabtiisa waxaa aad u xanuujisay una murugo gelisay dhacdadan Bi'ru Macaana isku mar ayuu Rasuulka SCW u yimid. Murugadani waxay ka weyned tii Uxud maxaa yeelay Uxud dagaal ayaa lagu talo galay, kuwaanse waxay ahaayeen khiyaamooyin iyo makri ay cadowyada Ilaahay u sameeyeen asxaabtii Rasuulka SCW.

Wuxuu Rasuulku SCW muddo bil ah habaarayey qabiilladii ku kacay falkaas foosha xun. Bukhaari wuxuu ka weriyey Anas binu Maalik in uu yiri "Rasuulku SCW wuxuu soddon subax ku habaarayey kuwii asxaabtiisa Bi'ru Macuuna ku laayey Salaadda Fajar dhexdeeda. Wuxuu habaarayey Rucul, Dakwaan, Lixaan iyo Cisiya isaga oo leh "Cisiya Ilaah iyo Rasuulkiisa ayey caasiday". Ilaahay wuxuu Rasuulkiisa SCW ku soo dejiyey qur'aan aan akhrinnay haddana la nasakhay. Qur'aankaas wuxuu micnihiisu ahaa (Allahayow gaarsii dadkayagii in aan la kulannay Rabbigayo oo uu naga raalli noqday annaguna aan ka ralli noqonnay), markaas ayaa Rasuulku SCW iska daayey Qanuuddii uu salaadda subax oran jirey". Sidaa darteed markii ay muslimiinta ku timaaddo musiibo waa shey wanaagsan in mar mar la qanuudo, laakiin wax daliil ah islaamka kama haysato in salaadda subax lagu gaaryeelo ama caado looga dhigo salaadda subax. Arrinkaas ah in salaadda subax la qanuudo ma aysan samayn Rasuulka SCW iyo asxaabtiisa iyo dadkii wanwanaagsanaa (Salafu Saalix) ee waddadii Rasuulka SCW qaaday.

DUULLAANKII YAHUUDDII REER BANUU NADIIR

Sida aan soo marnayba yahuuddii Madiina deggenayd waxa ay islaamka iyo muslimiinta u hayeen cadaawad iyo xumaan, wax ay ula hareeenna ma jirin, in aysan dagaal caddaan ah ugu soo bixin mslulimiinta maahane, taasna waxaa u diidey markii ay arkeen wixii ku dhacay yahuuddii reer bani Qaynuqaac oo Madiina laga raray iyo dilitaankii cadowgii Alle Kacab binu Ashraf. Arrimahaasina waxay sababeen in yahuuddu qalaanqalkii iyo rabshadihii xoogaa joojiso, hase yeeshee markii dagaalkii Uxud dhacay, oo muslimintii xoogaa dhaawac soo gaaray ayey ku noqdeen sidoodii hore, waxayna muujisteen xumaan iyo cadaawad iyaga oo hoos kala xiriiraya qureyshtii Makka iyo munaafaqiintii muslimiinta ku dhex jirtey.

Rasuulku SCW intaas oo dhan yahuudda wuu u sabrayey maxaa yeelay heshiiskiii ay lahaayeen ayuu ilaalinayey, dagaallana way ku furnaayeen, dhaawacna wuxuu soo gaaray ciidankii muslimiinta oo dhowr bilood gudohood ayaa waxaa shahiidey 150 asxaabtii Rasuulka SCW ka mid ah. Yahuudna arrintani waxa ay u siyaadisey qooq iyo xadgudub ilaa ay go'aansadeen in ay Rasuulka SCW dilaan, sababtuna waxa ay ahayd: Rasuulka SCW ayaa kaxeystay koox asxaabtiisa ka mid ah oo u tegey reer banii Nadiir, wuxuuna kala hadlay in ay la bixiyaan magtii labadii nin ee Camar binu Umaya diley, maxaa yeelay heshiiskii u dhexeeyey ayaa sidaas farayey. Markaas ayey dheheen "waan kuu yeelaynaa Abal-Qaasim halkaan noo fariiso inta aannu dantaada kaaga fulineyno". Rasuulku SCW wuxuu fariistay meeshii ay u tilmaameen oo ahayd derbi guryahooda ka mid ah dhiniciis, isaga oo sugayo in ay u fuliyaan ballantaas.

Yahuuddii sheydaan ayaa xumaan u qurxiyey, waxayna qaateen shir ay uga hadlayaan sidii ay ku dili lahaayeen Rasuulka SCW waxayna ugu dambayntii isku raaceen in ay dilaan Rasuulka SCW maaddaama uu maanta u soo gacan galay. Haddaba yahuudda oo lagu yaqaanno in aysan si toos ah wax u dilin ee shirqool iyo dhuumasho wax ku dilaan waxa ay isku raaceen in derbiga gadaashisa inta la istaago dhagax weyn madaxa looga tuuro Nabiga SCW, markii uu dhintana ay dhaheen "dhagax ayaa ku soo dhacay oo annagu ma aannaan dilin". Waxaa markaa hadlay koodii ugu caqliga badnaa oo la oran jirey Salaam binu Mashkam oo yiri "arrintaas ha sameynina, Ilaah baan ku dhaartaye waa loo khabrayaa (Rusuulka SCW) waxa aad damacdeen, ballantii naga dhexeysana way bureysaa", hase yeeshee fikraddaas dheg jalaq uma aysan siin, waxayna dhehee "yaa hawshan fulinaya?", waxaa markaa yiri "aniga" koodii ugu shar badnaa oo la oran jirey Camar binu Jaxash. Rasuulka SCW waxaa u yimid Malaku Jibriil oo u sheegay waxa ay go'aansadeen, markaas ayuu iska tegey oo aaday dhinicii Masaajidka. Rasuulku SCW wuxuu markaa yahuuddii reer banii Nadiir u soo direy Maxammed binu Maslama wuxuuna ku soo yiri "ku dheh ka guura Madiina ila degganaan maysaane, waxaanna idiin qabtay 10 beri, ka dibna qofka aan ku arko oo idinka ah qoorta ayaan u dheereynayaa". Yahuuddii amarkii Rasuulka SCW wey diideen, wayna iska sii deggenaayeen magaalada. Munaafaqii weynaa ee Cabdullaahi binu Ubayna wuu sii dhiirrigeliyey oo hoosta ayuu

kala xiriirey wuxuuna ku yiri "jooga oo ha bixina, guryihiinnana yaan la idinka saarin, aniguna waxaan hastaa 2000 nin oo dhufeyskiina idinla gelaysa idinlana dhimanaysa". Allaahna SW haddalkaas munaafaqa isaga oo tilmaamaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((MA OGTAHAY IN KUWII MUNAAFIQIINTA AHAA KU LEEYIHIIN WALAALAHOODII GAALOOBAY (YAHUUDA) OO EHELU KITAABKA KA MID AHAA HADDII LA IDIN BIXIYO WAA IDIINLA BAXAYNAA, QOFNA IDIIN ADEECI MAYNO WELIGEED, HADDII LA IDINLA DAGAALAMANA WAAN IDIN GAR GAARAYNAA. ALLASE WAA OG YAHAY IN AY (MUNAAFIQIINTU), HADDII LALA DAGAALAMANA UMA AY GAR GAARAYAAN, HADDII AY ISKU DAYAAN IN AY U GAR GAARAANA DABADAY JEEDIN KA DIBNA LOOMA GAR GAARO)), (Suuratul-Xashir 11-12).

Yahuuddii markii ay hadalladaas munaafiqiinta maqleen ayey ku kadsoomeen, wuxuuna ninkii madaxda u ahaa oo la oran jirey Xuyey binu Akhdhab farriin u soo direy Rasuulka SCW uu ku leeyahay "ka bixi mayno guryahayga ee waxaad doonto samee". Rasuulka SCW markii uu warkaasi soo gaaray ayuu takbiirsaday, asxaabtiisiina way takbiirsadeen, ciidankiisiina wuu soo kexeeyey, calankii muslimiintana wuxuu u dhiibey Cali binu Abii-dhaalib. Madiinana wuxuu uga so tegey Cabdullaahi ibnu Ummi Maktuum. Yahuuddii markii ay Rasuulka SCW iyo ciidammadiisii arkeen ayey dhufeysyadoodii galeen. Rasuulkuna SCW waa dul degey oo hareereeyey, wuxuuna amray in beerahooda la gooyo oo la gubo si aysan ugu dhuuman una biilanin. Allaahna isaga oo arrintaa tilmaamaya wuxuu yiri:

((WIXII AAD GOYSAAN OO GEED AH (OO CADAWGU LEEYAHAY) AMA AAD KA TAKTAAN IYADOO KU TAAGAN SALKEEDA WAA IDANKA ALLE IYO IN UU HOOJIYO FAASIQIINTA)), (Suuratul-Xashir 5).

Munaafaqiintii muslimiinta ku dhex jirtey oo awal ballan qaaday in ay yahuud dhufeyska la geli doonaan una gargaari doonaan, far ma aysan dhaqaajin. Sidoo kale yahuuddii reer banii Qureyda oo Madiina wax ka degganayd iyo qabiilooyinkii reer qadafaan oo ay xulafada ahaayeen midna uma soo dhaqaaqin oo uma soo gurman. Rasuulku SCW wuxuu ku hareereysnaa 6 beri waxaa kaloo la dhahaa 15 maalmood. Waxaana Ilaahay yahuud quluubtoodii ku ridey rucbi iyo argagax, wayna is dhiibeen, hubkiina way dhegeen, waxayna u soo cid direen Rasuulka SCW iyaga oo leh "Madiina waan kaaga guureynaa". Rasuulkuna SCW wuu ka aqbalay laakiin wuxuu yiri "waxaad la bixi kartaan naftiina iyo ratigu wuxuu idiin qaado oo aan hubku ku jirin". Ka dib sidii ayey yeeleen oo hubkii ayey dhigeen, guryihiina wixii ay sii kharaabin kareen way sii kharaabiyeen. Allaahna isaga oo arrintaa ka hadlaya wuxuu yiri:

((ALLE WAA KAN KA BIXIYAY KUWII GAALOOBAY EE EHELU KITAABKA KA MIDKA AHAA GURYAHOODII KULMINTII HORABA, MA IDINNAAN MALAYNAYN IN AY BAXAYAAN, IYANA WAXAY MALEEYEEN IN DHUFAYSYADOODA ALLE KA CELINAYAN, ALLASE WAXA UU UGA YIMID MEE3L AYSAN FILAYN, WAXA UUNA QULUUBTOODA KU TUURAY ARGAGAX, WAXAY GURYAHOODII KU KHARAABIYEEN GACMAHOODA IYO GACMAHA MU'MINIINTA, KU CIBRO QAATA DADKA ARAGTIDA LAHOW (WAXA KU DHACAY DADKII ILAAHAY DIINTIISA LA COLAYTAMAY), HADDUU ALLE KU XUKUMIN IN AY BAXAAN WAXA UU CADAABI LAHAA ADDUUNKA, AAKHIRANA WAXA AY LEEYIHIIN CADAAB DARAN, MAXAA YEELAY WAXA AY LA DHINAC TAMEEN ALLE IYO RASUULKIISA SCW, QOFKII ALLE LA DHINAC TAMANA, ALLE CIQAABTIISU WAA DARAN YAHAY)), (Suuratyl-Xashar 2-4).

Waxa ay rarteen 600 oo rati, in badan oo iyaga ka mid ahaa oo ay ku jireen odeyaashoodii waxa ay u guureen Khaybar, qaarkii kalena waxa ay u guureen dhinaca Shaam. Waxaa dadkaas ka islaamay laba nin oo keliya, waxayna kala ahaayeen Yamin binu Camar iyo Abuu Sacad binu Wahab. Labadaa nin xoolohoodii waa loo celiyey.

Waxaa Rasuulku SCW la wareegay guryahoodii, dhulkoodi, beerahoodii, maalkoodii iyo hubkoodii. Qaniimadaas laga helay reer banii Nadiir waxay khaas ku ahayd Rasuulka SCW in uu sidii uu doono yeelo, khumusna lagama bixin, ciidankiina looma qaybin, maxaa yeelay dagaal laguma soo qabsan. Allaahna wuxuu arrintaa ku magacaabay "Fey" (Feygu waa xolaha cadawga laga furto iyada oo aan dagaal dhicin). Rasuulku SCW wuxuu qaniimadaas u qaybiyey Muhaajiriin keliya, Ansaarna wuxuu ka siiyey labo nin oo keliya, labaad oo ceyr ahaa, kalana ahaa Abuu Dujaana iyo Sahal binu Xuneyf. Waxaa kale oo Rasuulku SCW ka nafaqeeyey xaasaskiisa oo sannad biilkood ugu dhigay, xoolaha intoodii kalena wuxuu Rasuulku SCW geliyey hub iyo wixii loogu diyaar garoobi lahaa jihaadka jidka Allaah.

Duullaankaas reer banii Nadiir wuxuu dhacay bishii Rabbiicul Awal, sannadkii 4aad ee hijriga, waxaana Ilaahay duullaankaas ugu warramay Suuratul-Xashar, wuxuuna Allaah suuraddaas ku sifeeyey yahuuddii reer banii Nadiir iyo munaafiqiintii muslimiinta ku dhex jirteyba, wuxuuna Cabdullaahi ibnu Cabbas dhihi jirey suuraddaan "Suuradu-Nadiir". Waxaa kale oo Allaah uu suuraddaas ku caddeeyey axkaamta Feyga iyo cidda la siinayo, wuxuuna ku ammaanay Muhaajiriin iyo Ansaar, wuxuuna caddeeyey in ay bannaan tahay in la gooyo oo la gubo dhulka cadowga Alle, haddii maslaxad dagaal ay keento, oo aysan arrintaasi ahayn israaf iyo xadgudub. Aakhirka Suuradda wxuu Allaah ugu dardaarmay in ay xojiyaan Taqwada Allaah una diyaar garoobaan Aakhiro.

DULLAANKII NAJDI

Ka dib markii Alle u gargaaray Rasuulkiisii SCW uuna hoojiyey acdaa'dii Ilaah ee reer banii Nadiir ayaa wardoonkii soo gudbiyeen in qabiilooyin reer baadiye ah oo ka mid ahaa reer Qadafaan, lana kala oran jirey Banii Xaarith iyo banii Thaclaba ay isku ururssanayaan si ay Madiina ugu soo duullaan. Markaas ayaa Rasuulka SCW ciidankii kaxaystay uguna teteg meeshii ay degganaayeen hase yeeshee acdaa'dii Ilaahay markii ay maqleen ciidammadii Alle ayey buuraha iyo kaymaha kala galeen, waxaana Alle ku riday baqdin iyo argagax, ka dibna ciidankii musimiiintu waxa uu ku soo laabtay Madiina isaga oo aan wax dagaal ah la soo kulmin, wuxuna dhacay duullaankani bishii Rabbiicul-Aakhir ama bishii Jamaadul-Uulaa midkood.

DUULLAANKII BADARTII LABAAD

Markii Rasuulku SCW uu ka soo laabtay qabiilooyinkii reer baadiyaha ahaa wuxuu galay tabaabushe iyo is diyaarin uu isku diyaarinayo ballantii ay qureysh wada galeen maalinkii Uxud oo ahayd in sannadka dambe Badar la isugu yimaaddo. Markii la marayo bishii Shacbaan, sannadkii 4aad ee hijriga ayaa Rasuulka SCW oo hoggaaminaya ciidan gaaraya 1500 nin ka soo baxay Madiina, wuxuuna Madiina madax uga soo dhigay Cali binu Abii-dhaalib, waxa ayna wateen 10 faras. Wuxuu Rasuulku SCW tegey ceelkii Badar, halkaas oo uu degey kuna sugayey gaaladii qureysheed.

Dhinicii reer Makka, Abuu Sufyaan oo ahaa hoggaamiyahooda wuxuu Makka kala soo baxay ciidan gaaraya 20000 oo nin, waxa ayna wateen 50 faras. Abuu Sufyaan iyo ciidankiisii markii ay marayaan meesha la yiraahdo Marri Dhahraan ayaa isaga oo ilaa markii uu Makka ka soo baxay caga jiidayey, waxaa Ilaahay ku diray baqdin iyo argagax, isaga oo ka baqaya in Badartani noqoto Badartii hore oo kale, sidaa darteed wuxuu go'aansaday in uu laabto, ciidankiisiina wuxuu ku yiri "qureyshey idiinma wanaagsada (dagaal) sannad barwaaqo ah mahane, sannadkanina waa sannad abaareed, marka anigu waa laabanayaaye ha la laabto". Ciidankii qureysh oo awalba caga jiida ahaa, aadna u niyad xumaa waxa ay halhaleel u qaateen go'aankii Abuu Sufyaan waxa ayna ku laabteen Makka.

Ciidankii muslimiintu waxa ay Badar degganaayeen 8 maalmood, dabadeedna markii ay ogaadeen in ay qureyshi baqday oo ay Makka ku noqotay ayay ganagsi galeen oo alaabtii ay wateen gadeen kana faa'iideen suuqii, waxay u baahnaayeenna ka gateen, maxaa yeelay Badar waxa ay ahaan jirtey meel lagu kulmo oo badeecada lagu kala beddesho. Ka dibna waxa ya ciidankii muslimiintu ku laabteen Madiina iyaga oo Cisi iyo guul wata, lana ogaaday awooddooda iyo in qureysh ka baqday.

DUULLAANKII DUUMATUL-JUNDUL

Markuu Rasuulku SCW ka soo laabtay Badartii labaad, waxaa la arkay awooddii muslimiinta, mandiqaddiina waxa ay noqotay amni iyo nabadgelyo, cid walbana candhuuftay dib u liqday. Hase yeeshee markii lix bilood laga joogo Badartii labaad ayaa waxaa Rasuulka SCW loo soo gudbiyey in qabiilooyin degganaa meesha la yiraahdo Duumatul-Jnudul oo dhinaca Shaam xigta, loogana socod Madiina 15 beri, ay jid gooyayaal (burcad) noqdeen oo ciddii jidkaa martaba dhacaan isla markaasna ay isu diyaarinayaan sidii ay duullaan Madiina ugu soo qaadi lahaayeen. Wuxuu markaas Rasuulku SCW la baxay ciidan gaaraya 10000 nin, wuxuuna Madiina madax uga dhigay Subaac binu Curfada, waqtigaas oo ahaa 25kii bishii Rabbiicul-Awa, sannadkii 5ad ee hijiriga. Intii uu jidka ku sii jirey, Rasuulku SCW wuxuu qabtay nin reer banii Cudra ah oo la oran jirey Madkuur, wuxuu kaxaystay si uu waddada u tusiyo.

Rasuulka SCW iyo ciidankiisu waxa ay soconayeen habeenkii, maalinkiina way degayeen si ay acdaa'daa Ilaahay u qabtaan iyaga oo khabardaar ah. Hase yeeshee markii ay muslimiintu u soo dhow yihiin ayey maqleen oo kala yaaceen. Rasuuulku SCW meeshii ayuu gaaray oo maalmo degganaa, wuxuu dhinacyada u kala diray ciidamo laakiinse waxba lama soo helin, ka dibna Rasuulku SCW Madiina ayuu ku soo laabtay.

Rasuulka SCW iyo ciidankiisii markii la arkay in ay Shaam ku duuleen oo cid kasta o rabsho laga dareemo meesheeda loogu tegayo ayaa qabiil walba edeb yeeshay oo aamusay, in uu hoos ka guuxo maahee, mandiqaddiina waxay noqotay nabadgelyo iyo amaan, waxaana fududaaday mashaakilkii muslimiinta ka heysta gudaha iyo dibedda, munaafiqiintii muslimiinta ku dhex jirteyna way aamuseen. Sidoo kale qabiiilkii yahuudda ahaa ee haray wuxuu ku dadaalay ilaalintii ballantii ka dhexeysay iyaga iyo muslimiinta. Reer baadiyihii awal Madiina ku soo qamaamayeyna waxa ay qaateen dersi oo waa degeen. Sidoo kale nimankii qureysh ee awal kibirka iyo isla weynidu ku jirteyna waxa ay joojiyeen duullaamadii, muslimiintiina waxa ay heleen fursad ay ku fidiyaan dacwadoodii islaamka, degaankiina iyaga ayaa hogaanka u qabtay.

DUULLAANKII AXSAAB

Markii Ilaahay muslimiintii cisi siiyey oo ay ku xoogeysteen mandiqaddii Jasiiratu-Carab, carabtii iyo yahuuddii ag degganaydna ay qolo gaar u haweysata muslimiinta yaraatay oo cid walba ka baqday, nimankii ugu xoogga iyo dhibka badnaa ee qureyshna ay salka dhulka ku dhufteen, ayaa yahuuddii laga raray Madiina waxay sameeyeey khiddo ay rabaan in ay qabiilooyinka oo dhammi (yahuud iyo carab) ugu kulmaan muslimiinta oo dabar gooyaan.

Khiddadaas waxa ay ahayd: 20 nin oo ahaa odeyaashii yahuuddiii reer binuu Nadiir ayaa Khaybar ka tegey oo Makka aaday, waxayna qureysh ku boorriyeen la dagaallanka Rasuulka SCW iyo muslimiinta ikyo sidii ay isaga kaashan lahaayeen. Qureysh oo sumcadeedii iyo magaceedii hoos u dhacay markii ay baqeen ballantii Badartii labaad oo dhexda ka laabteen, kana cabsadeen oo ku dhici waayeen in ay keligood Nabiga SCW la dagaallamaan waxa ay u arkeen in fursaddani tahay fursad dahab ah oo aan la heli karin, waxayna isla markiiiba qaateen fikraddaas ay yahuuddu u so jeedisay.

Labaatankii nin waxay sidii oo kale ugu tageen oo ugu boorriyeen la dagaallanka Rasuulka SCW qabiilooyinkii reer Qadafaan. Ka dibna waxay u tageen qabaa'ilkii kale ee reer baadiyaha ahaa, dhammaantoodna gacmo furan ayey ku soo dhoweeyeen, wayna u riyaaeen fikraddaas maxaa yeelay waxaa dhammaantood buuxiyey ciil iyo caro ay u qabeen Nabiga SCW iyo axaabtiisa. Yahuuddu way ku najaxda siyaasaddii iyo khiddadii ay wadatay, waxayna isku soo ururisay acdaa'dii Alle ee dhulkaas degganayd si ay Nabiga Alle SCW ula dagaallamaan, nuurkii Allena u damiyaan.

Waxaa intaa dabadeed soo baxay oo Madiina duullaan ku soo qaaday ciidamo aad u tiro badan oo ka kooban qabiilooyin kala duwan, waxayna dul degeen Madiina. Dhinaca koonfurta waxaa Madiina uga yimid qureysh iyo xulafadoodii, waxayna ciidammadoodu gaarayeen 4,000 oo nin, waxaana hoggaaaminayey Abuu Sufyaan, dhexdana waxaa kaga soo darsamay reer banuu Suelym. Dhinaca bari waxaa Madiina kaga yimid qabaa'ilkii reer Qadaafaan oo kala ahaa: banuu Fasaara oo uu hoggaaminayey Cuyeyna binu Xusin, banuu Murra oo uu hoggaamineyey Xaarith binu Cawf, banuu Ashjac oo uu hoggaaminayey Mascar binu Rukheyla iyo banuu Asad. Qabiilooyinkaas reer Qadafaan waxay ciidammadoodu ahaayeen 6,000 oo nin. Dadkii muslimiinta ahaa ee waqtigas Madiina deggenaa, haddii ragooda, dumarkooda iyo carruurtooda la isku daro, ma aysan gaareyn tiradaas.

Rasuulku SCW markii la soo gaarsiiyey duullaanka qabiilooyinkaas iyo ciidammada ay wateen oo isku soo bahaystay sidii ay u dabar goyn lahaayeen islaamka iyo muslimiinta, ayuu muslimiinta ahaa isugu yeeray shir guud oo loo dhan yahay, lagagana wada hadlayo sidii looga hortegi lahaa acdaa'daas Alle. Muddo markii arrinkii laga wada hadlayey ayaa nin asxaabta ka mid ahaa oo la oran jirey Salmaanul-Faarisi, oo ahaa reer Faaris, wuxuu yiri "Rasuulkii Allow annagu markii aanu Faaris joogney haddii nala hareereeyo godad ayaan qodan jirney". Rasuulku SCW wuu ku farxay ra'yigaas iyo khiddadaas uu Salmaan keenay taas oo ahayd khiddaad cajiib ah oo aysan caRabbi horey u aqoon, wuxuuna markaa Rasuulku SCW bilaabay fulinteedii, Tobanki ninba wuxuu amray in ay qodaan god dherekiisu yahay 40 dhudhun, baliciisuna yahay 9 dhudhun, dhammaan godkii laqodayeyna waxaa uu dherekiisu ahaa 500 oo dhudhun.

Ciidankii muslimiintu si firforcooni iyo hawlkarnimo ka muuqato ayuu u hawl galay, Rasuulkuna SCW amar intuu bixiyey is kama fariisane hawshii ayuu dhiniciisa ka qabtay isaga oo muslimiinta dhiirrigelinaya una duceynaya oo leh "Allahayow nolosha Aaskhiro ma ahane nolol kale ma jirto, una Dambi dhaaf Muhaajiriin iyo Ansaar", asxaabtuna iyagoo hawshii qabanaya waxay lahaayeen "waxa aan nahay kuwii Maxammed SCW kula baayactamay Jihaad inta aannu nool nahay". Saxabigii Baraa' ibnu Caasim isaga oo ka hadlayay Rasuulka SCW shaqadiisa wuxuu yiri "waxa aan arkay Rasuulkii Alle oo ciidda ka rogaya godkii ilaa aan ka arkay calooshiisa haraggeedii oo boor qariyey, wuuna timo badnaa, waxa aan maqlay isaga oo akhrinaya tix uu tiriyey Cabdullaahi binu Rawaaxa isaga oo ciidda rogaya, wuxuuna lahaa "Allahayow adiga haddii aadan ahayn ma hunuunneen, ma sadaqaysanneen, mana tukanneen, nagu soo deji deggenaaan, gommodahayagana sug haddii aan la kulanno (cadowga), hore ayey noogu qooqeen haddii ay fitno (gaalnimo) nala dooneenna waan diidneay".

Waxaa Rasuulka SCW iyo asxaabtiisa intii ay godadkaas qodayeen oo ay hawshaas ku jireen la soo gudboonaatay gaajo aad u daran ilaa ay ka gaareen in ay calooshooda dhagaxyo ku xirtaan. Saxaabiga la yiraahdo Abuu Dhalxa isaga oo arrinkaa ka hadlaya wuxuu yiri "Rasuulka SCW ayaan u sheegannay gaajada na haysey, waxaannuna feydnay caloolahayagii oo hal hal dhagax ku xiran yahay, markaas ayuu Rasuulku SCW calooshiisii feydey mise labo dhagax baa ku xiran". Waxyaalihii goobtaa ka dhacay, oo aan la soo koobi karin, haddii aan wax ka soo qaadanno dhinicii mucjisaadka iyo calaamooyinkii Nabinnimada. Waxa uu yiri Jaabir ibnu Cabdullaahi "waxaan arkay Rasuulka SCW oo gaajo darani ka muuqato, markaas ayaan guriga tegey oo neef (ari ah) qalay, saac qamadi ahna xaaskaygii ayaan u geeyey oo ku iri "u muufee Rasuulka

Alle scw iyo dhowr nin oo soo raacda". Markii muufadii la dubey, hilibkiina bislaaday ayuu Jaabir Rasuulka SCW hoos ula hadlay, markaas ayaa Rasuulku SCW u dhawaaqay wax Alle wixii godadka ku jirey oo dhan, markaas ayey ka cuneen xeeradii hilibku jirey iyo xoogaagii muufada ahaa ilaa ay dhamaaantood ka wada dhergeen raashinkii oo weli sidiisi ah".

Sidoo kale gabar la dhalatay Nucmaan binu Bashiir iyada oo timir yar u wadda aabbeheed iyo abtigeed ayey Rasuulka SCW soo martay, markaas ayuu intuu timirtii ka qaaday u yeeray ciidankiii oo dhan, markaas ayey cuneen ilaa ay ka wada dhergeen timirtii oo intii ka badan.

Waxyaalihii kale ee meeshaa ka dhacay oo muujinayey mucjisaadka Rasuulka SCW waxaa ka mid ahaa in Baraa' ibnu Caasim uu yiri "maalinkii Khandaq godadkii qaarkood waxaa naga hor yimid dhagax aan loodin weyney, markaas ayaannu Rasuulka SCW u sheegnay, markii uu yimid ayuu "Bismillaah" intuu yiri hal mar ku dhuftay dhagaxii, dhagaxii ayaa qayb ka jabtay, wuxuu markaas yiri "Allaahu Akbar waxaa la i siiyey furayaashii Shaam, Ilaah baan ku dhaartaye waaba aniga oo hadda eegaya sarahoodii gudguduudnaa", markaas ayuu mar kale ku dhuftay dhagaxii, qayb kale ayaa jabtay wuxuuna yiri "Allaahu Akbar waxaa la i siiyey furayaashii Faaris, Ilaah baan ku dhaartaye waaba aniga oo hadda u jeeda sarahoodii cadcaddaa". Mar saddexaad ayuu ku dhuftay dhagaxii intuu "Bismillaahi" yiri, waxaa markaas jabtay qaybtii dhagaxa ugu dambaysay, markaas ayuu yiri "Allaahu Akbar waxaa la i siiyey furayaashii Yaman, Ilaah baan ku dhaartaye waaba aniga oo meeshan uga jeeda albaabadii Sanca".

Nimankii munaafaqiinta ahaa, ee afka islaamka ka sheeganayey, markii ay maqleen hadalladaas Rasuulka SCW ayey dheheen "godad baannu qodanaynaa oo baqdin darteed madaxa ayaannu kor u qaadi la'nahay, isna wuxuu noogu sheekeynayaa in aanu furan doonno dowladihii waweynaa ee Ruum iyo Faaris".

Hadii aan wax ka soo qaadanno khiddadii muslimiinta, Madiina waxaa ku wareegsanaa buuro iyo beero dhinaca woqooyi maahane, sidaa darteed wuxuu Rasuulku SCW amray in dhufeysyada laga qodo dhinacaas woqooyi, maxaa yeelay wuxuu ahaa dhinaca ugu daran ee Madiina looga imaan karayey. Ciidankii msulimiintu waxa ay dhufeystka qodi jireen maalinkii, habeenkiina guryahooda ayey u hoyan jireen ilaa uu dhufeyskii ka dhammaaday, ciidammadii gaaladuna ka yimaaddeen.

Ciidammadii gaalada, oo sidii aan soo sheegnayba ahaa ciidammo aad u xoog badan , iskuna soo bahaystay in ay muslimiinta cirib tiraan, markii ay dadkii muslimiinta ahaa arkeen waxa ay dheheen hadalka ay aayaddani tilmaantay:
((MARKAY MU'MINIINTU ARKEEN ASXAABTII WAXAY DHEHEEN KANI WAA KII ALLE IYO RASUULKIISU NOO YABOOHEEN, ALLE IYO RASUULKIISUNA WAA RUN SHEEGEEN, UMANA SIYAADIN WAXAAN IIMAAN IKYO HOGAANSAMID AHAYN)), (Suuratul-Axsaab 22).

Laakiin kuwii munaafaqiinta ahaa markii ay arkeen ciidammada aadka u tirada badan ayaa waxaa ku dhacay cabsi iyo argagax, Allahna isaga oo ficilladoodii tilmaamaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:
((MARKAY YIRAAHDEEN MUNAAFIQIINTII IYO KUWII QULUUBTA KA JIRANAA ALLE IYO RASUULKIISU SCW WAXAN DHAGAR AHAYN NOOMA YABOOHIN)), (Suuratul-Axsaab 12).

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu diyaariyey ciidammadiisii, wuxuuna la soo baxay ciiidan gaaraya 3,000 oo nin, waxayna tageen dhufeyskoodii, Shicaarka ciidanku wuxuu maalinkaas ahaa (XAAMIIM LAA YUNSARUUN). Magaalada Madiina wuxuu Rasuulku SCW u xilsaaray Cabdullaahi ibnu ummi Maktuum.

Ciidankii qureysh oo ahaa 4,000 oo qof wuxuu degey meesha la yiraahdo Majmuucul-Asyal oo ah dhinaca woqooyi ee Madiina, qabiilooyinkii reer Qadafaan oo gaarayey 6,000 waxay degeen dhinaca bari ee buurta Uxud. Ciidammadaasi markii ay arkeen khiddadii muslimiinta iyo dhufeyska ay qoteen ayey la cajabeen waxayna dheheen "tani waa khiddad aysan carab hore u aqoonin", waxayna ku wareegaaleysteen dhufeyska hareerihiisii iyaga oo raadinaya meel uu ka gaaban yahay oo ay ka geli karaan. Ciidankii muslimiintu wuxuu la socday dhaqdhaqaaqooda, wuxuuna ku ganayey fallaaro. Ciidankii farooleyda qureyshtu wuxuu aad isugu hawlay meel uu godku karin gaabo ka leeyahay, wax ay ku wareegaanba waxay markii dambe koox ka mid ihi heshay meel yar oo ciriiri ah. Kooxdaas waxaa ku jirey Camar binu Cabdi-wuddi, Cikrama binu Abii-Jahal iyo Daraar binu Khadhaab. Waxaa markaa ka hor tegey kox muslimiin ah oo uu ku jirey Cali binu Abii-dhaalib, markii meeshii la isugu tegeyna Camar binu Cabdi-wuddi, oo ka mid ahaa geesiyadii qureysh, ayaa dalbaday mubaaraso (wax u soo baxa). Cali binu Abii-dhaalib ayaa markaas u soo baxay, intii aan foodda la is darin ayaa Cali la hadlay oo ku yiri "Camaro waxa aad (hadda ka hor) Alle ballan uga qaadday in haddii nin qureysh ihi kuugu yeero labo arrimood midkood aad ka qaadanayso, marka waxa aan kuugu yeerayaa Alle iyo Rasuulka SCW iyo islaamka". Camar wuxuu yiri "waxaas dan kama lihi", markaas ayaa Cali ku yiri "waxa aan marka kuugu yeerayaa in aad soo degtid", Camar wuxuu yiri "sabab, walaalkey wiilkiisiiyow, Ilaah baan ku dhaartaye ma jecli in aan ku dilo". Cali ayaa markaa ku yiri "laakiin Ilaah baan ku dhaartaye aniga ayaa jecel in aan ku dilo". Markaas ayuu Camar xanaaqay oo faraskiisii boqno gooyey, wejigana seeeg uga dhuftay (si aysan baqdin u gelin). Ka dib foodda ayaa la daray, muddo yar ka dibna Cali waa ka takhallusay ninkaas. Kooxdii la socotey markii ay arkeen waxa ku dhacay saaxiibkood Camar iyo sida dhakhsaha leh oo loo diley ayey baqdeen oo cagaha wax ka dayeen ilaa uu ninkoodii khatarta ahaa ee Cikrama binu Abii-Jahal ka cararay warankiisii.

Ciidammadii gaaladu waxay soo qaadeen weerarro is dabajoog ah oo aad u daran hase yeeshee si fiican ayaa loo caabbiyey, iyadoo waxa lagu dagaallamayey ahaayeen fallaaro iyo warmo, maxaa yeelay seefo laguma dagaallami karin oo labada ciidan god baa u dhexeeyey. Weerarradaasi waxa ay sababeen in maalmaha qaarkood muslimiintii tukan kari waayaan, markarka qaarkoodna madaxa kor u qaadi waayaan. Saxiixeynku waxa ayka wariyeen Jaabir binu Cabdullaahi in Cumar binu Khadhaab yimid isaga oo caayaya gaaladii querysheed wuxuu yiri "Rasuulkii Allow ma karin in aan tukado (casar) ilaa ay qorraxdii ka dhacday", markaas ayaa Nabiga SCW yiri "aniguba ma tukan Ilaah baan ku dhaartaye", markaas ayey isu raaceen meel la yiraahdo Budxaa oo ku weyso qaateen, casarkiina ku tukadeen markii qorraxdii dhacday, dabadeedna maqribkii ayey tukadeen. Rasuulkuna SCW wuu habaaray gaaladaas, salaaddii ay ka tagsiiyeen darteed. Bukhaari wuxuu ka weriyey Cali binu Abii-dhaalib in uu Rasuulku SCW yir i"Ilaah ha ka buuxiyo (gaalada) guryahooda iyo qubuurohooda naar sida ay nooga mashquuliyeen Salaatu-Wusdhaa (Salaadda Cassar) ilaa ay qorraxdu ka dhacday. Sidoo kale Axmed binu Xanbal iyo Shaafici waxay weriyeen in gaaladu maalintaa muslimiinta ka mashquuliyeen salaadihi duhur, casar, maqrib, iyo cishe, ka dbna hal mar ayaa la wada tukaday.

Waqtigaas dadka muslimiinta ah ay salaaduhu ka tegayeen wuxuu ahaa intii aan la jideyn Salaatul-Khawfka. Ka dib waxaa la jideeyey Salaatul-Khawfka oo uma bannaana in ay salaad ka tagto qofka muslimka ah jihaad kasta oo uu ku jiro iyo xaalad kasta oo la soo derista illaa labo arrimood maahane: Hilmaan iyo hurdo, iyagana markii uu qofku xusuusto ama tooso ayuu salaaddisii tukanayaa. Halkaas waxaa laga garanayaa weynida salaadda iyo meesha ay islaamka ka joogto oo ah in aan marnaba la oggoleyn in qof muslim ah uu salaadda dayaco. Salaadduna waa xiriirka ka dhexeeyea qofka iyo Rabbigiis, waan waxa kala sooca islaamka iyo gaalnimada sida ay nusuustu caddeysey.

Haddaba waxaa la yaab ah in salaaddii sidaas ahayd, oo xitaa ninkii jihaadka ku jirey oo Ilaahay diintiisa u dagaallamayey in uu tukado la amray, ayaa maanta dad badan oo muslimiin sheeganayaa fududeysteen oo markiii ay doonaanna tukanayaan markii ay

doonaana iska dhaafayaan. Allaahna isaga oo dadka noocaas ah ka hadlaya wuxuu qur'aankiiisa ku yiri:
((WAXAA HALAAG U SUGNAADAY KUWA TUKANAYE EE HADDANA HILMAANSAN SALAADDOODA, DADKANA IS TUSA, UNA DIIDA (DARISKA) ALAABTA (ADEEGA AH)), (Suuratul-Maacuun 4-7).

Sidoo kale Allaah isaga oo ka hadlaya markii dadkaas la geliyo naarta Saqaro ah wuxuu yiri:
((MARKII LAGU YIRAAHOD MAXA IDIN GALIYEY NAARTA SAQARA AH, WAXAY DHAHAAN KAMA AANAAN MID AHAYN KUWA TUKADA)), (Suuratul-Muddathir 42-43)

Haddii aan Axaadiista Rasuulka SCW oo salaadda ka hadashay wax ka soo qaadanno, wuxuu Rasuulku SCW yiri "annaga (muslimiinta) iyo iyaga (gaalada) salaadda ayaa noo dhexeysa, qofkii ka tagana waa gaaloobey". Sidoo kale wuxuu Xadiis kale ku yiri "waxaa la i amray in aan dadka la dagaallamo ilaa ay Allaah ka qiraan oo salaadda ka tukadaan, sakadana ka bixiyaan. Haddii ay sidaas sameeyaan way iga ilaaliyeen dhiigooda iyo maalkooda xaqa islaamka maahane". Sidoo kale Rasuulku SCW wuxuu yiri "qofka waxa ugu horreeya ee qiyaamaha laga xisaabinayo waxaa weeye salaadda. Haddii ay salaaddiisu wanaagsanaato, camlkiisa kalena waa wanaagsanaanayaa". Asxaabtii Rasuulka SCW iyagoo salaadda ka hadlaya waxa ay dheheen "waqtigii Rasuulku SCW camal laga tago gaalnimo kuma aannan tirin jirin illaa salaadda maahane". Haddaba nusuusta ku soo aruurtay ama ka hadashay mawduuca salaada iyo waxay cullimadu ka yiraahdeen haddii aan dhex galno in aan ka hadalno aad ayey u dheeraanaysa, mowduuceennuna ma ahayn in aan salaadda ka hadalno eearrinta ayaa nal dhex gashay sidaa darteed intaas ayaannu ku ekeyneynaa, qofkii u baahan mawduucan salaadda ah ha akhristo kutubada ay culimadu ka qoreen salaadda.

Haddii aan dib ugu laabanno dagaalkii Axsaab, si daran ayaa la isku dhaafsaday fallaaraha iyo warmaha iyo wixii la tuuri karo oo dhan maxaa yeelay sidii aan soo sheegnayba seefo laguma dagaallami karin oo godkii ayaa u dhexeeya labada ciidan. Falaarahaa la is dhaafsanayey waxaa musimiinta uga dhintay 6 nin, gaaladan 10 nin in kastoo hal ama labo ka mid ah (kuwa gaalada) seef lagu diley.

Haddaba goor ay arrintu sidaas tahay oo dagaal darani socda, ciidankii muslimiintuna u beer dhigeen 10,000 kun oo isa soo bahaysatay, iyadoo ay weliba gajadu u sii dheer tahay, ayaa waxaa ku soo kordhay arrin kale oo aysan fileyn. Arrinkaas oo ahaa in qabiilkii yahuudda ahaa ee reer banuu Qureyda oo Madiina wax ka degganaa uu ballantii ka baxay, dagaalna ku dhawaaqay, sababtuna waxa ay ahayd ninkii la oran jirey Xuyey binu Akhdhab ee madaxda u ahaa yahuuddii reer banuu Nadiir ee Madiina laga saaray, kuna jirey labaatankii nin ee ciidammadaan isu keentay, ayaa wuxuu u tegey odeygiii reer banuu Qureyda oo la oran jirey Kacab binu Asad. Kacab markii uu gartay Xuyey ayuu albaabka ka xirtay maxaa yeelay wuu ogaa in uu san kheyr u wadin hase yeeshee Xuyey kama tegin oo wuu ku celcelikyey ilaa uu markii dambe albaabkii ka furay oo uu lahadlay.

Xuyey markii albaabkii laga furey oo uu soo galay ayuu yiri "Kacabow waxaan kuu wadaa samanka sharaftiisii, qureysh baan kuu keenay oo madaxdeedii iyo hoggaamiyayaasheedii wadata ilaa aan soo dejiyey Majmacu-Asyal, sidoo kale waxaan kuu wadaa Qadafaan oo wadata madaxdeedii iyo hoggaamiyayaasheedii ilaa aan soo dejiyey Uxud dhiniciisa. Waxayna iga ballan qaadeen oo ay iga gunteeen in aysan noqoneyn ilaa ay jirrid gooyaan Maxammed iyo cidda raacsan". Kacab wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye waxaad iila timid samanka hoogiisii, war hooge Xuyey iiga tag aniga iyo waxa aan ku sugnahay (heshiiska). Aniga Maxammed kama arag wax aan run iyo (ballan) oofin ka ahayn", hase yeeshee Xuyey kama uusan suulin in uu ku celcelinayo ilaa uu weliba markii dambe ka qaaday ballan o ku yiri "haddii qureysh iyo Qadafaan laabtaan iyaga oo aan Maxammed waxba yelin waaan kuula gelayaa dhufeyska ilaa ay

igu dhacaan wixii kugu dhaca". Sidaa ayuu Kacab binu Asad ballankiii uga baxay, uuna ugu dhawaaqay dagaal uu muslimiinta uga soo horjeedo, isaga iyo qabiilkiisa waxay xulafo la noqdeen gaaladii kale.

Warkaasi markii uu soo gaaray Rasuulka SCW ayuu Rasuulku SCW si uu arrinkaas u hubsado wuxuu u direy dhowr nin oo asxaabtiisa ka mid ahaa Raggaasi waxay kala ahaayeen: Sacad binu Mucaad, Sacad binu Caubaada, Cabdullaahi binu Rawaaxa iyo Khawaat binu Jubeyr wuxuuna Rasuulku SCW ku yiri "baxa oo soo fiirsha warka naga soo gaaray raggaas, ma sax baa mise ma aha. Haddii ay sax tahay dadka dhexdiisa ha iigu sheegginnina ee ii baaqa, haddii ay oofiyeenna (ballantii) kor ugu sheega dadka". Nimankii markii ay u tageen yahuuddii reer banuu Qureyda waxa ay kala soo kulmeen arrinkii xumaa oo weliba yahuuddii way soo caydey, waxayna muujisatay cadaawad waxayna tiri "annaga iyo Maxammed wax ballan ihi nagama dhexeyso".

Raggii way soo noqdeen, markii ay Rasuulka SCW u yimaaddeenna sidii ay isla ogaayeen ayey ugu baaqeen. Ugu dambayntii muslimiintii markii ay ogaadeen warkii reer banuu Qureyda arrintii dhib ayey ku noqotay maxaa yeelay iyaga iyo reer banuu Qureyda wax u dhexeeya ma jirin oo magaalada ayey wada degganaayeen, weliba waxay yahuuddu degganaayeen geeska ciidankii muslimiintu Madiina ka joogey maahane geeskiisa kale, wax dumarkii iyo carruurtii ka difaacayeyna ma jirin, ciidanka muslimiintuna meeshan kama tegi karin, umana qaybsami karin labada dhinac. Allaahna isagoo arrintaas tilmaamaya dhibteeda iyo wadciga ay muslimiintu ku jireen wuxuu yiri: ((XUSUUSTA MARKAY IDIN KAGA YIMAADEEN KOR IYO HOOS OO AY INDHIHII IISHEEN QULUUBTUNA GAARTAY DHUUNTA OO AAD ALLE U MALAYSEEN MALOOYIN (SIDII IN UUSAN IDIIN GAR GAARAY) HALKAASAA LAGU IMTIXAAMAY MU'MINIINTA, GILGILID DARANA LAGU GILGILAY)), (Suuratul-Axsaab 10-11).

Munaafaqiintii iyo wixii aan Ilaahay ku kalsooneyn ee iimaankoodu daciifka aha waxaa ku dhacay baqdin iyo argagax, waxayna qaarkood yiraahdeen "Maxammed wuxuu noo yabohay in aan ka cuni doonno keydadka Kisraa iyo Qeysar, axadkayana maanta kuma aamin aha naftiisa in uu aado bannaanka". Sidoo kale argagaxoodii waxaa ka mid ahaa in ay meeshii joogi kari waayeen oo cudurdaarro been ah keenteen si ay goobta uga baxsadaan, waxaana ka mid ahaa hadalladoodii "guryahayagii way af bannaan yihiin oo waxay xigaan dhinaca cadowga oo waannu u baqaynaa ee na idan (in aad baxno)". Sidoo kale waxa ay yiraahdeen "Alle iyo Rasuulkiisu waxa ay noo sheegayeen kedo uun bay ahad iyo in aan halaagsanno". waxayna jeclaysteen in ay Madiina ka cararaan oo baadiyahaas dadka ka wareystaan dagaalka. Allaahna isaga oo ficilladoodii tilmaamaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((XUS MARKAY MUNAAFIQIINTU LAHAAYEEN IYO KUWA QALBIGA KA JIRRAN ALLE IYO RASUULKIISU SCW WAX AAN KADO AHAYN NOOMA YABOOHIN, MARKAY LAHAYD KOOX IYAGA (MUNAAFIQIINTA) KAMID AH REER YATHRIBOW MEEL AAD KU NAGAATAAN IDIINMA AHAANIN EE NOQDA (OO GOOBTA DAGAALKA KA SOO KACA), KOOX IYAGA KAMID AHNA WAXAY IDAN WAYDIISANAYSAY NABIGA IYAGOO LEH GURYAHAYAGII WAA DAYACAN YIHIIN, MANA DAYACNAYN EE WAXAAN CARAR AHAYN MA AYSAN DOONAYN, HADDII LOOGA SOO GALO (MADIINA) DHINACYADEEDA OO GAALNIMO LA WAYDIISTO (OO LA YIRAAHDO GAALOOBA) WAY LA IMAAN LAHAAYEEN, KUMANA NAGAADEEN MADIINA WAX YAR MA AHANE, XAQIIQDIINA ALLAY HORAY ULA BALLAMEEN IN AYSAN DABADA JEEDIN, BALLANKA ALLENA WAXA UU AHAADAY MID LA IS WAYDIIYO, WAXAAD DHAHDAA IDINMA ANFACAYO CARAR HADDII AAD KA CARARTAAN DHIMASHO AMA DIL, HADDABA LA IDINKU RAAXAYN MAHAYO (ADDUUNKA) WAX YAR MA AHANE, WAXAAD DHAHDAA YAA IDINKA ILAALIN ALLE HADDUU XUMAAN IDINLA DOONO AMA NAXARIIS, MA HELAYAAN ALLE SOKADII WALI IYO GARGAARE, XAQIIQDII ALLE WAA OG YAHAY KUWA REEBAYAALKA AH (CIIDANKA TASHWISHKA KU FURAYA) OO IDINKA MIDKA AH, IYO KUWA KU LEH WALAALAHOOD (MUNAAFIQIINTA AH) NOO IMAADA, DAGALKANA MA YIMAADAAN WAX YAR MOOYEE,

WAA IDINKU BAKHAYL BADAN YIHIIN (MUNAAFIQIINTU), MARKAY CABSIDU TIMAADANA WAXAAD ARKAYSAA IYAGOO KU FIIRINAYA OO INDHAHOODU WAREEGAYAAN SIDII KII LA MIYIR DABOOLAY EE DHIMANAYEY, MARKII CABSIDU TAKTANA WAXAY IDINKU DIIRANAYAAN CARRABO AF BADAN, KHAYRKANA WAA IDIINKA BAKHAYLAYAAN, KUWAASI (XAQA) MA AYSAN RUMAYN ALLENA WAA HOOBIYEY CAMALKOODII, ARRINTAASINA ALLE WAA U FUDUDAHAY, WAXAY U MALAYNAYAAN INAYSAN AXSAABTU TAGAYN, MARKII AY AXSAABTU (COLKU) YIMAADAANA WAXA AY JECEL YIHIIN IN AY BAADIYAHA JIRAAN OO AY WARKIINA WARSADAAN, HADDAY IDINLA JOOGAANA MA AY DAGAALAMEEN WAX YAR MA AHANE)), (Suuratul-Axsaab 12-20).

Dhinicii muslimiinta oo ayagu ahaa rah Ilaahay ku kalsoon, diintiisana u istaagay, mar walbana Ilaahay ka rajaynayey khayr iyo guul iyo in labada wanaagsan (shahiidnimo iyo guul) midkood siiyo, waxa ay arrintaani u xiyaadisay iimaan iyo geesinnimo.

Rasuulku SCW markii uu arkay muslimiinta iyo xaalada adag oo ay marayaan, haddii ay ahaan lahayd ciidammada aadka u badan ee har iyo habeen dul taagan ama yahuuddii reer Madiina oo dagaal caddeysatay, heeganna ah oo qaqti kasta laga baqayo in ay dhabar jebin muslimiinta ku sameeyaan ama xasuuqdo dumarka iyo carruurta iyo haddii ay ahaan lahayd munaafiqiintii oo intaa tashwiish ku ridaya ciidanka muslimiinta iyo dhibka gaajada oo ay weliba dagaal ugu taagan yihiin maalin walba, ayuu wuxuu sameeyey in uu ciidankii dhiirrigeliyo, uuna u sheego in aan Ilaahay hoojineyn, nasriga iyo guushana ay iyaga lahaan doonaa, wuxuuna yiri "Allaahu Akbar, muslimiineey ku bishaaraysta fatxiga Alle iyo nasrigiisa", ka dibna wuxuu Rasuulku SCW bilaabay in uu khiddaad u dejiyo duruuftaas adag oo ay muslimiintu marayaan, wuxuuna Madiina u direy ciidan dumarka iyo carruurta ka ilaaliya yahuudda.

Sidoo kale wuxuu sameeyey khiddad uu doonayey in uu dagaalka uga saaro reer Qadafaan oo 6,000 gaarayey si uu yahuud iyo qureysh abaalkooda u marsiiyo. Khiddadaas oo ahayd in uu la heshiiyo Cuyeyna binu Xusin iyo Xaarith binu Cawf oo reer Qadafaan madax u ahaa si ay dagaalka uga baxaan, isaguna u siiyo timirta Madiina ka soo go'day sannadkaas saddex meelood meel ahaan, wuxuuna arrinkaas kala tashaday Sacad binu Mucaad iyo Sacad binu Cubaada, waxayna dheheen "Rasuulkii Allow, haddii Ilaahay uu arrintaa ku amrayo waan maqalnay, waanuna yeelnay. Hadiise ay tahay shey aad annaga (muslimiinta) noogu daneyneysid ma dooneyno maxaa yeelay waxa aannu ahaan jirney annaga (Ansaar) iyo reerkaas (Qadafaan) kuwo Ilaahay u wada shariik yeela oo caabuda Asnaam, kumana aysan cunin mirahayaga wax aan amaah iyo iiib ka ahayn, haddaba ma hadda oo Alle nagu karaameeyey islaamka oo uu nagu hanuuniyey, adigana nagu kaa ciseeyey miyaan siineynaa xoolahayaga?, Ilaah baan ku dhaarannaye wax aan seef ahayn ma siineyno". Rasuulku SCW wuu yeelay ra'yigoodii, wuxuuna yiri "waxay ahayd arrin aan idiin samaynayey markii aan arkay in carab oo dhan hal qaanso idin noqotay".

Ka dib waxay xaaladdu sidaa ahaataba markii ay tagtay muddo ku dhow bil ayaa waxaa timid arrin uu Alle ku hoojiyey axsaabtii isa soo baheysatey, muslimiintana uu uga kaafiyey dagaalkii. Arrinkaas wuxuu ahaa: Waxaa Rasuulka SCW u yimid nin reer Qadafaan ah oo la oran jirey Nuceym binu Mascuud oo ka mid ahaa ciidankii Qadafaan. Wuxuu ninkaasi Rasuulka SCW ku yiri "Rasuulkii Allow waan soo islaamay, reerkayguna ma oga islaamnimadayda ee marka i amar wixii aad doontid". Rasuulku SCW wuxuu yiri "hal nin keliya ayaad tahaye ee bal nooga dhagar wixii aad doontid, dagaalku waa dhagare".

Nuceym wuu baxay wuxuuna u tegey yahuuddii reer bannu Qureyda oo ay saaxiibbo ahaayeen, wuxuuna ku yiri "waad garanaysaan jacelka aan idiin hayo gaar ahaan waxa aniga iyo idinka ka dhexeeyey", waxay yiraahdeen "waa runtaa". Nuceym ayaa markaas yiri "qureysh lama mid tihidin, magaaladani waa magaaladiinnii, waxaana ku sugan

maalkiinnii, dumarkiinnii iyo carruurtiinni, mana awooddaan in aad ka guurtaan. Qureysh iyo Qadafaan waxa ay u yimaadeen dagaalka Maxammed iyo asxaabtiisa, idinkuna waad u kaalmeyseen; dhulkoodii, maalkoodii iyo dumarkoodiina nabad bay ugu sugan yihiin, haddii ay guuleystaan waa u fursad haddii kalena waxay aadayaan dhulkoodii, wayna iskaga kiin tegeyaan idinka iyo Maxammed, wuuna idinka aar gudan doonaa", waxay dheheen "maxaa samaynaa, Nuceymow?", wuxuu yiri "dagaalka ha la gelina ilaa ay Rahan idiin keenaan", waxay dheheen "Xaqiiqdii taladii waad ishaartay".

Nuceym wuxuu haddana aaday qureysh wuxuuna ku yiri "qureysheey waad i tagaanniin jaceylka aan idiin hayo iyo sida aan idiinla taliyo", waxay dheheen "haa", wuxuu markaas yiri "yahuuddu waxay ka qoomameysey wixii ay samaysay oo ahaa ballantii ay Maxammed iyo asxaabtiisa kula jireen oo ay buriyeen, waxayna Maxammed u fareen in ay Rahan ragga qureysh ugu akhyaarsan ah u keeni doonaan. Marka haddii ay rahan idin weydiiyaan ha siinina". Ugu dambayntii wuxuu Nuceym u tegey reerkiisii Qadafaan oo ku yiri intii uu qureysh ku yiri oo kale.

Xaaladdu markii ay halkaas marayso ayaa habeen Sabti ah bishii Shawaa, sannadkii 5aad ee hijriga, waxay qureysh iyo Qadafaan u cid diren yahuuddii reer banuu Qureyda, waxayna ku dheheen "annagu dhulkaygii ma joogno, xoolihii aan wadanayna way nooga baab'een ee soo dhaqaaqa aan Maxammed la dagaalannee oo dabar goynnee". Yahuuddii waxa ay ku soo jawaabeen "horta maalin Sabti ah annagu ma dagaalanno o waad og tihiin wixii ku dhacay kuwii naga horreeyey markii ay gefka la yimaadeen. Haddana iyadoo ay taasi jirto idinla dagaal geli mayno ilaa aad Rahan noo soo dirtaan".

Qureysh iyo Qadafaan markii ay maqleen jawaabtaas yahuudda ayey yiraahdeen "Ilaah baan ku dhaaranaye Nuceym run buu noo sheegay". Ka dibna yahuuddii waxay ku dheheen "annagu Ilaah baan ku dhaarannaye in aannaan qof idiin soo direyn ee soo baxa dagaalka nala gala" hase yeeshee yahuuddii reer banuu Qureyda markii ay aragtay in Qureysh iyo Qadafaan rahantii diideen ayey isku yiraahdeen "Ilaah baan ku dharannaye run buu idiin sheegay Nuceym", sidaas ayaa markaa labadii qolo u kala shakiday, Ilaahayna dhexdooda ugu riday kala tag iyo caro.

Dadkii muslimiinta ahaa Allaah ayey baryayeen mar walba, waxaana ducooyinkoodii ka mid ahaa "Allahayow cawradayada astur aamminna ka yeel ilaaliyayaashayada". Sidoo kale Rasuulku SCW wuxuu baryayey Rabbigiis, waxaana ducooyinkisii ka mid ahaa "Allaha kitaabka soo dejiyey xisaabtiisuna degdegga badantahayow jebi axsaabta, Allow jebi oo nooga gargaar". Allaah wuu ka aqbalay Rasuulka SCW iyo muslimiinta baryadoodii, wuxuuna keenay nasrigiisii iyo gargaarkiisii, wuxuuna gaaladii oo uu awalba isku diray oo kala jabtay u keenay dabayl aad u daran, dabayshaas oo dharyihii ka daadisay, dhistiina ka dumisay, una diidday xasillooni, quluubtoodana wuxuu ku riday cabsi iyo argagax. Allaahna isaga oo arrintaa tilmaamaya wuxuu yiri: ((DADKA MU'MINIINTA AHOW XUSUUSTA NIMCADUU ALLE IDIIN GALAY MARKAY CIIDAMMADU IDIIN YIMAADEEN OO AAN KU DIRNAY DABAYL IYO CIIDAMO AYDAAN ARKAYN, ALLENA WAXAAD CAMAL SAMAYNAYSAAN WUU ARKAA)), (Suuratu-Axsaab 9).

Rasuulku SCW habeenkii dabaysha iyo qabowga darani dhacayey direy Xudeyfa binu Yamaam, wuxuuna ku yiri "soo fiiri oo warkooda noo keen, waxna ha samaynin". Xudeyfa markii uu u tegey wuxuu arkay dabasha Alle ku salliday iyo xaalada ay ku jiraan iyo in aysan u ekeyn dad meesha sii deggenaan kara, wax ayar ka dibna hoggaamiyahoodii Abuu Sufyaan ayaa ciidankii isugu yeeray, Xudeyfana ciidankii ayuu dhex galay. Abuu Sufyaan oo ahaa nin ku dheereeyey arrimaha militariga iyo hawlaha dagaalka ayaa markii uu ciidankii isugu yeeray wuxuu ku yiri "nin walbow ninka kugu xiga iska hubso oo gacanta qabo", markaas ayuu Xuudeyfa kala hormaray ninkii ku xigey oo ganta qabtay kuna yiri "kumaad tahay?", markaas ayuu isku sheegay. Ka dibna Abuu Sufyaan wuu hadlay oo wuxuu ciidankii u sheegay in aysan meesha deggenaan karin oo ay ku rafaadeen, hadday noqoto dabaysha iyo qabowga iyo hadday noqoto muddada

dheer ay meesha joogeen. Dabadeedna wuxuu yiri "ha la guuro anigu waan guurayaaye".

Xudeyfa wuxuu ku soo laabtay Rasuulka SCW oo tukanaya, markaas ayuu Rasuulku SCW maro weyn oo uu ku tukanayey dhinac ka huwiyey maxaa yeelay qabow daran ayaa dhacayey, ka dibna markii uu Rasuulku SCW salaaddii dhammaystay ayuu khabarkoodi u sheegay iyo in ay guureen. Ka dib waxay Rasuulkii SCW iyo muslimiintii waaberiisteen iyaga oo uu Alle u gargaaray oo uu ku xoojiyey ciidammadiisa, ciidammadii isa soo bahaystayna keligiis (Allaah) ayaa jebiyey oo ku celiyey caradoodii iyaga oo aan wax faa'iido ah gaarin. Allaahna isaga oo tilmaamaya faa'iido darrada ku dhacday gaalada iy sida uu muslimiinta uga kaafiyey dagalka wuxuu yiri:
((ALLE WAXA UU KU CELIYEY KUWII GAALOOBAY CARADOODII IYAGOON WAX KHAYR AH GAARIN, ALLENA WUU KA KAAFIYEY MU'MINIINTII DAGAALKA, ALLENA WAXA UU AHAADAY MID AWOOD LEH O QAALIB AH)), (Suuratul-Axsaab 25).

Duullaankan Axsaab oo dhacay bishii Shawaal, sannadkii 5aad ee hijriga, waxaa la is dul fadhiyey muddo gaareysa hal bil. Culimada qaarkood waxa ay yiraahdeen duullaankan Axsaab ma ahayn mid muslimiinta khasaare ugu sugnaa ee wuxuu aha mid ay faa'iido ugu jirtay. Faa'iidooyinkaas waxaa ka mid ah: isaga oo ahaa duullaankii ugu xoogga badnaa ee Rasuulka SCW iyo asxaabtiisa lagu soo qaado, haddana Allaah muslimiinti wax kuma yeelin, gaaladiina iyaga oo bil dhan joogey oo aan waxba u hirgelin balse khasaare ayey la noqdeen. Sidoo kale gaaladii waxay ogaatay in haddii carab iyo yahuud isugu tagto muslimiinta aysan waxba ka qaadi karin maxaa yeelay iyaga oo intaas oo ciidan ah watay yahuuddii Madiina deggenaydna raacday, ayey waxba geysay kari waayeen, ciidan intaas ka badanna ma aysan ururin karin.

Sidoo darteed duullaankani wuxuu ahaa kii ugu dambeeyey ee Madiina lagu soo qaado, Rasuulkuna SCW wuxuu yiri isaga oo arrinkaa ishaaraya "hadda (ka dib) annaga ayaa ku duuleyna, naguma soo duuli doonaan".
Ninkii la oran jirey Sacad binu Mucaad, oo ahaa odeygii Ansaar, gaar ahaanna reer Aws, kana mid ahaa raggii uu Rasuulku SCW aadka ula tashan jirey aanna soo marnay mowqifyadiisii iyo sidii Alle diintiisa ugu ciseeyey ayaa fallaarihii la is dhaafsanayey ka dhaawaceen lawga, waxaana dhaawacay nin qureysh ka mid ahaa oo la oran jirey Xibbaan binu Curqa. Markaas ayuu Sacad Ilaahay baryey oo yiri "Allahayow waad og tahay in uusan jirin axad iga jecel in aan dartaa ula jihaado dad beeniyey Rasuulkaagii oo saaray, Allahayow waxaan malaynayaa in aad joojisey dagaalkii (axsaab ee ka dhex socday) annaga iyo iyaga (qureysh), haddii uuu haddaba baaqi yahay dagaal qureysh lala geli doono i baaqi yeel ilaa aan daraadda ula jihaado, haddii aad dhammaysayna i burqi dhiigga oo ka yeel dhimashadayda (isaga oo jecel in uu shahiido)". Sidoo kale Sacad wuxu Alle ka baryey in uusan dhiman ilaa uu ka arko waxa reer banuu Qureyda lagu sameeyo iyo ciribtooda. Ka dib Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu waxay ku laabteen Madiina, waxaana duullaankan Axsaab ka hadashay Suuratul-Axsaab.

DUULLAANKII REER BANII QUREYDA

Isla maalinkii Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu ka soo laabteen Axsaab oo ay guryahoodii yimaadeen ayaa Malaku Jabriil u yimid Rasuulka SCW oo ku qubeysanaya gurigiisii Ummu Salama. Jibriil ayaa markaas ku yiri "hubkiinnii miyaad dhigteen, malaa'igtu weli hubkoodii ma dhigine?", waxaanna hadda u soo laabtay raadin aan raadinayo ee u soo baxa adiga iyo wixii kula socda reer banuu Qureyda, aniguna waan kaa sii hormarayaa oo waxaan quluubtooda ku ridayaa argagax, waxaanna gilgilayaa dhufeyskooda". Wuxuu markaa Rasuulku SCW amar ku bixiyey in si degdeg ah loogu baxo reer banii Qureyda, wuxuu yiri "qofkii Alle iyo malaalinka aakhiro rumeeyey yuusan casarka ku tukan meel aan reer banii Qureyda ahayn, calankii muslimiintana wuxuu u dhiibay Cali binuu Abii-dhaalib oo faray in uu sii hormaro, Madiinana wuxuu u xilsaaray Cabdullaahi ibnu ummi Maktuum.

Ciidankii muslimiinta oo (hal bil) dhufeys ku jirey ayna ka muuqato daal, gaajo iyo rafaad, markaasna guryahoodii yimid oo aan weli nasan, ayaa markii ay maqleen dhawaqii jihaadka iyo amarkii Rasuulka SCW hal mar yaacay, iyaga oo aan u aabba yeelin dhib kasta oo ay ku jireen, dantoodii khaaska ahaydna ka doortay dantii guud ee islaamka. Taasina waxay ku tusineysaa sida iimaanku qluubtooda u buuxiyey, har iyo habeenna ay heegan ugu ahaayeen uguna taagnaayeen diita Rabbi iyo u jihaadka kalimaddiisa in ay kor noqoto.

Asxaabtii markii ay bexeen oo ay dhex sii marayaan, iyaga oo aan weli reer banuu Qureyda gaarin ayaa salaaddii Casar u soo gashay, markaas ayaa qaarkood dheheen "aan tukano", qaarkii kalena yiri "tukan mayno ilaa aan gaarno reer banii Qureyda maxaa yeelay Rasuulku SCW wuxuu na amray in aannaan ku tukan meel ka sokeysa reer banuu Qureyda guryohooda". Markaas ayey kuwii hore dheheen "Rasuulku SCW ulama jeedin arrinka sidaas ee wuxuu ula jeeday in aan degdeg ku baxno". Sidaas ayey markaa isku khilaafeen oo qolona dhexda ugu tukatay, qoladii kalena tukadeen markii ay gaareen meeshii reer banuu Qureyda. Rasuulkuna SCW markii loo sheegay labadii qolo midna wax ma dhihin oo wuxuu u sugay in ay labaduba sax yihiin maxaa yeelay mid walbaba wuxuu fuliyey sidii uu amarkii Rasuulka SCW ka fahmay.

Culimada fuqahadu waxay ka hadlaan Labada qolo kii sii saxsanaa, qolo waxay tiri "waxaa sii saxsanaa kuwii salaadda dib dhigay maxaa yeelay amarkii Rasuulka SCW ayuu siduu u ahaa u fuliyeen ta ta'wiilkiina way iska daayeen", qoloda kalena waxay tiri "kuwii dariiqa ku tukaday ayaa sii saxsanaa maxaa yeelay salaaddii ayey wakhtigeedii ku tukadeen amarkii Rasuulka SCW ee bixitaanka ahaana way fuliyeen sidii uu Rasuulku SCW ula jeeday ayeyna u fahmeen, kuwaanaana faqiihsanaa, labadii ajarna way wada kulan sadeen". Calaa kuli xaal labada qoloba waa sax siduu Rusuulku SCW u sugay. Arrintaani waxay ka mid tahay meelaha laga qaato khilaafka furuuciga ah ee culimadu isku khilaafaan in uusan dhib lahayn haddii aan nas cad la khilaafayn, Rasuulkuna SCW wuxuu xadiis ku yiri "haddii ninka xaakimka ihi dadaalo oo uu asiibo labo ajar ayuu leeyahay, haddii uu gefana hal ajar".

Ciidankii ugu horreeyey ee gaara degaankii reer banuu Qureyda waxaa ka mid ahaa Cali Abii-dhaalib, oo waday calankii muslimiinta, Rasuulkuna SCW hore usii direy. Markii uu Cali meeshii tegey ayuu maqlay cay daran oo ay yahuuddu caayayaan Rasuulka SCW, markaas ayuu u adkeysan waayey oo meeshii ka soo noqday, wuxuuna ka hor yimid Rasuulka SCW oo la socda ciidankii dambe, markaas ayuu ku yiri "Rasuulku Allow ha tegin meeshaas way caytamayaane". Rasuulku SCW wuxuu yiri "iska daa haddii aan u tago ma caytami doonaane", markii uu u tegey oo ay arkeen ayey caydii joojiyeen oo baryootameen. Rasuulku SCW ciidankii uu watay wuxuu ahaa 3,000, waxayna wateen 30 faras. Wuxuu Rasuulku SCW hareereeyey yahuuddii, iyagiina waxay galeen dhufeysyadoodii. Muddo markii ay ku jireen oo ay rafaadeen ayaa ninkii madaxda u ahaa oo la oran jirey Kacab binu Asay wuxuu u soo jeediyey dadkiisii saddex fikradood:

Arrinta koowaad wuxuu yiri "Islaama oo gala diinta Maxammed, dhiiggiina, maalkiinna, carruurtiinna iyo dumarkiinnuba aammin bay noqonayaane, Ilaah baan ku dhaartaye way idiin caddahay in uu yahay nabi la soo direy, waana kii aad ka helayseen (ku yaalay) kitaabkiinna dhexdiisa". Waxay dheheen "Tawreet ka tegi mayn".

Wuxuu markaas yiri "haddii aad taas diiddeen laaya carruurtiinna iyo dumarkiinna, ka dibna idinka oo seefihiinna keliya wata dagaalka gala ilaa aad kan idiinku dambeeyaa uu dhinto, haddii la idinka guuleysto dumar iyo carruur aad u baqaysaan oo la idinka helayo ma jiraan, haddii aad guuleysataanna dumar iyo carruur waayi meysaan". Waxay dheheen "ma dumarkayaga iyo carruurtayada ayaan gacantayada ku dilnaa, ma jirto taasi".

Wuxuu ugu dambayntii ku yiri "haddii aad taasna diiddeen berri waa Sabti, Maxammed iyo asxaabtiisuna way is dhiganayaan oo waxay og yihiin in aannaan Sabtida dagaallamin, marka aan weerar ku qaadno", waxay dheheen "ma Sabti baannu dagaallanaa?, yeeli mayno".

Kacab binu Asad markii uu saddexdaa talo keenay oo ay ku diideen ayuu isaga oo careysan wuxuu ku yiri "nin idinka mid ihi ma baryin habeen samanka ka mid ah isaga oo go'aan leh, laga soo bilaabo markii ay hooyadiis dhashay".

Muddo markii ay yahuuddii meeshii ku jireen oo ay ku rafaadeen, kana bixi waayeen ayey Rasuulka SCW u soo fareen in uu u soo diro Abaa Lubaaba si ay ula tashadaan maxaa yeelay Abaa Lubaaba xiliif ayuu la ahaa, wuxuuna degganaa aaggooda. Rasuulka SCW wuu ka yeelay oo wuu u diray Abaa Lubaaba. Markii uu Abaa Lubaaba u tegey ayaa raggii u istaageen, dumarkii iyo carruurtiina ku soo yaaceen iyaga oo ku hor ooyaya, waxayna dheheen Abaa Lubaaba "ma aragtaa in aan isu dhiibno xukunka Maxammed?", wuxuu yiri "haah", waxay dheheen muxuu nagu samaynayaa, wuxuu gacantiisa ku ishaaray dhuuntiisa oo u sheegay in la gowracayo, markaas ayuu xasuustay in uu Alle iyo Rasuulkiisii khayaanay oo bixiyey sirtii muslimiinta. Orad ayuu markaa is xaabiyey oo Rasuulkii SCW iyo muslimiintii kuma uusan leexane wuxuu toos u tegey masaajidkii Rasuulka SCW, wuxuuna isku xirey tiir ka mid ahaa tiirarka masaajidka, wuxuuna ku dhaartay in uusan iska fureynin ilaa uu Rasuulku SCW gacantiisa uga furo, sidoo kale wuxuu ku dhaartay dhulkii reer banuu Qureyda oo dambigaasu uga dhacay in uusan dib dambe u tegin.

Markii Rasuulka SCW loo sheegay arrinkii Abaa Lubaaba wuxuu yiri "haddii uu ii imaan lahaa waan u dembi dhaaf weydiin lahaa, laakiin haddii uu isagu sidaa isku sameeyey ka furi maayo ilaa Ilaahay uu ka toobad aqbalo". Arrinkaan iyo kuwo la mid ah waxaa laga qaadanayaa sida asxaabtii Rasuulka SCW haddii uu gef ka dhaco uu dhulku ugu ciriiriyoon jirey, Rusuulka SCW wuxuu xadiis ku caddeeyey in haddii qofka mu'minka ah gef ka dhaco uu buur ku soo dhacaysa kala weyn yahay, laakiin haddii uu munaafaqa dambi ka dhaco uu diqsi hortiisa maray kala fudud yahay.

Nimankii reer banuu Qureyda wuxuu Ilaahay ku riday cabsi iyo argagax, Allaahna garabkooda ayuu ka baxay, ciddii Allaah garabkooda ka baxana wax u gargaari kara ma jiraan. Reer banuu Qureyda iyaga oo awooday in ay muddo dheer dhufeyska ku jiraan ama ay dagaallamaan oo ciidan iyo hubba heystey, ayaa Alle ku riday cabsi iyo badin waxayna isu dhiibeen xukunka Alle iyo Rasuulkiisa SCW.

Rasuulku SCW markii ay is dhiibeen wuxuu amray in raggooda la xirxiro, dumarkoda iyo carruurtoodana laga fogeeyo goobta. Raggii iyaga oo xirxiran ayaa guri lagu xareeeyey, waxaa markaa Rasuulka SCW u yimid rag asxaabta ka mid ah oo u dhashay reer Aws, oo ay reer banuu Qureyda xulufo ahaan jireen (islaamka ka hor) waxayna Rasuulka SCW ku dheheen "Rasuulkii Allow yahuuddii hore ee reer Qaynuqaac waa tii aad iska deysey markii ay walaalahaya Khasraj oo ay xulufo ahaan jireen kaala hadleen, annagana (Aws) kuwan baa xulufadayada ahaan jirey ee wanaaji", wuxuu Rasuulku SCW yiri "ma ku raalli noqoneysaan in uu xukumo nin idinka mid ah (Aws)?", waxay dheheen "waa ku raalli noqoneynaa", wuxuu yiri "waa Sacad binu Mucaad", waxay dheheen "raalli baanu ku nahay".

Wuxuu markaa Rasuulku SCW u cid diray Sacad binu Mucaad, dameer ayaa markaas la soo saaray Sacad. Markii la keenay ayaa rag reer Aws ihi dhinacyada ka galeen iyaga oo leh "Sacadow wanaaji xulufadaadii, Rasuulku SCW wuxuu kaaga xaakim yeelay in aad wanaajiso", hase yeeshee Sacad uma jawaabin laakiin markii ay hadalkii ka badiyeen ayuu ku yiri "Alle dartiis uga biqi maayo nin dagaallamaya dagaalkiis". Ka dib markii Sacad soo gaaray meeshii uu Rasuulku SCW joogey ayaa Rasuulku SCW yiri "u istaaga sayidkiinna", dabadeed markii dameerkii laga soo dejiyey ayaa lagu yiri "Sacad kuwani

waxa ay sugayaan xukunkaaga", markaas ayuu yiri "xukunkeygu ma ku fulayaa?", waxa la yiri "haa", wuxuu yiri "muslimiintuna ma fulinayaan?", waxay dheheen "haa", markaas ayuu haddana tilmaamay Rasuulka SCW in uu fulinayo, Rasuulkuna SCW "haa" ayuu yiri. Sacad ayaa markaa xukumay, wuxuuna ku xukumay in raggooda la laayo, maatadooda iyo maalkoodana lala wareego. Markaas ayaa Rasuulku SCW ku yiri "Waxaad ku xukuntay xukunkii uu Alle ku xukumay".

Sacad binu Mucaad wuxuu acdaa'daa Alle ku xukumay xukunkaas aadka u wanaagsan oo caddaaladda badan, kaas oo waafaqay kii Alle, waxaana acdaa'daa la mariyey abaalkoodii maxaa yeelay waxa ay xiqdi iyo xaasidnimo darteed u beeniyeen Rasuulkii Alle SCW iyaga oo og, kitaabkoodana loogu sheegay, waxayna la dhinactameen Alle iyo Rasuulkiisa SCW, waxayna ka bexeen ballantii Alle iyo Rasuulkiisa SCW ay la galeen weliba markii ugu xumeyd iyaga oo caddeystay dagaal oo rabay in Ilaahay nuurkiisa ay damiyaan. Waxay intaas islaamka iyo muslimiinta u maleegayeen makri, waxayna muslimiinta u diyaarsadeen hub gaaray 1,500 oo seefood, 2,000 oo waran, 300 oo canbuur bireed iyo 500 oo gaashaan. Hubkaas iyo xoolohooddii oo dhanba wuxuu Alle ku wareejiyey Rasuulkiisa SCW.

Markii la xukumay ka dib wuxuu Rasuulku SCW amray in raggooda lagu xereeyo daar lahayd haween reer banii Najaar ah, suuqii Madiina agtiisa waxaa looga qoday godad, ka dibna inta la soo bixiyo oo goddadka la dul geeyo ayaa qoorta loo dheereynayey. Markii shaqadii iyo dilkii lagu bilaabay ayey odeygoodii Kacab binu Asad ku dheheen "xaggee na loo wadaa?", markaas ayuu ku yiri "weli wax ma fahmaysaan miyaa, miyeydaan u jeedn qofkii lala baxo in uusan soo laabanayn, Ilaah baan ku dhaartaye waa dilniin".

Waxaa raggaas reer banuu Qureyda ee la leynayey ku jirey sheydaankii reer banuu Nadiir oo ahaa ninkii ka dambeeyey soona abaabulay duullaankii Axsaab, lana oran jirey Xuyey binu Akhdhab, wuxuuna ninkaasi dhalay gabar Rasuulka SCW xaaskiisa ka mid ahayd oo la oran jirey Safiya bintu Xuyey oo uu guursaday sannadkii 7aad ee hijriga. Wuxuuna ninkaas Xuyey dhufeyska kula jirey reer banuu Qureyda maxaa yeelay waa tuu awal ballanta ku qaaday in uu Kacab dhufeyska la geli doono haddii ay Qureysh iyo Qadafaan laabtaan iyaga oo aan Rasuulka SCW waxba gaarsiin. Sidaa darteed isaga oo fulinaya ballantaas ayuu dhufeyska la galay. Markii la soo bixiyey isaga oo qaba jaakad uu meel walba ka jeex jeexay si aan muslimiintu ugu intifaacin, gamihiisa iyo qoortiisuna isku xiray yihiin, ayuu Rasuulka SCW la hadlay oo ku yiri "Alle ayaan ku dhaartaye naftayda kuma dagaalayo la colleytankaaga, laakiin qofkii Alle guusha siiyo ayaa guuleysanaya", wuxuu misna la hadlay dadkii oo ku yiri "dadow dhib ma leh amarka Alle, waana qoraal iyo qaddar iyo imtixaan uu Alle u qoray reer banii Israa'iil". Ka dib quu fadhiistay oo qoorta ayaa loo dheereeyey, sidaas ayaana loo wada laayey raggii reer banuu Qureyda, waxayna tiradoodu u dhexeysay 600 ilaa 700 oo nin oo ahaa raggii qaangaaray, wuxuuna Rasuulku SCW amray in la dilo wiilkii ay timaha hoose u soo bexeen, kii aysan u soo bixinna la iska daayo. Waxaana raggii aysan u soo bixin oo la iska daayey ka mid ahaa Cadiyatul Quradi oo ka dib soo islaamay. Dumarkii reer banuu Qureyda waxaa laga diley hal naag, iyadana waxaa loo qisaasay nin muslimiinta ka mid ahaa oo ay dhagax ku soo duurtay ka dibna dhintay. Ninkaas waxaa la oran jirey Khilaad binu Suweyd.

Waxaa reer banuu Qureyda ka islaamay intii aysan is dhiibin koox, kuwaas oo loo daayey maalkoodii iyo carruurtoodii. Sidoo kale waxaa habeenkii ka baxay nin la oran jirey Camar oo ahaa nin aan ka qayb gelin dhagartii iyo ballan jebintii yahuudda, markaas ayaa waxaa arkay Maxammed binu Maslama oo Rasuulku SCW madax uga dhigay ciidankii ilaalinayey markaas ayuu iska daayey meel uu ninkaasi aadeyna lama yaqaan.

Rasuulku SCW intaa ka dib maalkoodii ayuu asxaabtii u qaybiyey markii uu ka bixiyey Khumuskii, wuxuuna u kala siiyey sidan: ninkii faras watey saddex saami ayuu siiyey, kii aan wadanna hal saami ayuu siiyey. Arrinkaasna xikmadda ku jirta waxay ahayd

dhiirrigelin lagu dhiirrigelinayo in ay fardo gataan si ay ugu xoogeystaan jihaadka maxaa yeelay waxa ay farduhu waagaasi joogeen booska ay maanta diyaaraduhu u joogaan ciidammada. Rasuulku SCW wuxuu maatadoodii u dhiibay koox uu madax u yahay Sacad binu Seyd Al-ansaari si uu u geeyo dhulka Najdi oo uu ugu soo beddelo fardo iyo hub.

Duullaanka reer banuu Qureyda waxaa muslimiinta uga dhintay oo ay yahuuddu dileen ninkii ay haweeneydu ka dishay. Waxa kale oo muslimiinta intii ay ku hareereysnaayeen banuu Qureyda ka dhintay nin la oran jirey abuu Sinaan binu Muxsin.

Markii arrintii reer banuu Qureyda ay dhammaatay oo Madiina lagu laabtay ayaa Sacad binu Mucaad dhaawicii ku soo kacay, Rasuulkuna SCW Khaymad ayuu masaajidka dhexdiisa uga dhisay si uu had iyo jeer u soo booqdo, ka dibna dhiiggii ayaa burqaday ilaa uu ka dhintay. Sacad Alle wuxuu u aqbalay ducadiisii uu ka baryey markii nabarku ku dhacay. Sacad oo ahaa nin islaamka boos weyn u joogay waxa ay saxiixaynku ka weriyey Jaabir ibnu Cabdullaahi in Rasuulku SCW yiri "Carshigii Raxmaanka ayaa u ruxmay geerida Sacad binu Mucaad". Sidoo kale Tarmadi wuxuu weriyey in Anas binu Maalik yiri "markii la qaaday janaasadii Sacad binu Mucaad ayey munaafiqiintii dheheen "maxaa fududeeyey janaasadiisa?" markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "malaa'igta ayaa xambaarsanayd".

Ninkii ahaa Abaa Lubaaba wuxuu tiirkii masaajidka ku xirnaa lix habeen, xaaskisa ayaana cuntada u keneysey, una fureysay salaadaha iyo bannaankaba. Markii Rasuulku SCW soo laabtay ayaa waqtiga suxuurta Ilaahay tawbaddiisii ku soo dejiyey Rasuulka SCW oo jooga guriga xaaskiisa Ummu Salama, markaas ayey Ummu Salama qowladdeedii horteedii inta ay istaagtay tiri "Abaa Lubaabow bishaareyso Ilaah waa kaa tawbad aqbalaye". Asxaabtii masaajidka joogtay ayaa ku yaacay si ay xariga uga furaan hase yeeshee wuu diidey in cid aan Rasuulka SCW ahayn furto". Markii uu Rasuulku SCW salaaddi subax yimid ayuu ka furay.

Duullaankan reer banuu Qureyda wuxuu dhacay bishii Dulqacda, sannadkii 5aad ee hijriga, waxaana la dul deggenaa oo lagu hareereysnaa 25 habeen. Allaahna isaga oo si kooban uga hadlaya qisadan reer banuu Qureyda wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((KUWII U KAALMEEYEY (GAALADA) EE EHELU KITAABKA AHAA, WUXUU KASOO DAJIYEY (KASOO SAARAY) DHUFEYSYADOODII, WUXUUNA QULUUBTOODA KU RIDAY ARGAGAX, QAARNA WAAD DISHEEN QAARNA WAAD QAFAALATEEN, WUXUUNA IDIN DHAXALSIIYEY DHULKOODII, GURYAHOODII, MAALKOODII IYO DHUL AYDAAN TAGIN, ALLENA WAXA UU AHAADAY SHAY WALBA KII AWOODA)), (Suuratul-Axsaab 26-27).

DILITAANKII ABUU RAAFIC

Markii arrinkii reer banuu Qureyda dhammaaday ayaa niman asxaabta ka mid ahaa oo reer Khasraj ahaa Rasuulka SCW u soo jeediyeen in ay soo dilaan nin la oren jirey Salaam binu Abil-xaqiiq, kunyadiisana la oran jirey Abuu Raafic, oo ka mid ahaa mujrimiintii ugu waaweynaa yahuudda, degganaana Khaybar, qayb weynna ka qaatay abaabulkii duullaankii Axsaab, maal badanna ku bixiyey, islaamkana aad u dhibay.

Iyadoo hore loo diley mujrimkii kale ee Kacab binu Ashraf, asxaabtii disheyna ay wada ahaayeen reer Aws ayaa markii ninkaas dhibtiisa la arkay rag asxaabta ka mid ah oo reer Khasraj ihi waxay Rasuulka ka dalbadeen in ay soo dilaan kan, iyaga oo raba in ay khayrka kula tartamaan walaalohood Aws, Rasuulkuna SCW wuu u idmay in ay soo dilaan, wuxuuna ka reebay in ay dumar iyo carruur dilaan. Waxaa markaas baxday shan nin oo reer Khasraj ah oo uu madax u yahay Cabdullaahi binu Cuteyk. Markii ay tageen Khaybar oo ay u dhowaadeen qalcaddii uu degganaa Abuu Raafic oo aad u albaabbo badnayd, waardiye adagna laga hayey, ayey sugeen ilaa ay qorraxdu ka dhacdo. Markii

ay qorraxdii dhacday dadkii shaqaalaha ahaana ay soo carraabayeen, ayuu Cabdullaahi binu Cuteyk raggiisii ku yiri "meeshan sii jooga, albaabbada ayaan aadayaaye, waxaana la arkaa in aan galo". Cabdullaahi meeshii ayuu tegey oo u dhowaaday, ka dibna wuxuu iska dhigay nin dadka meesha ka mid ah oo albaabkii buu galay, dabadeedna albaabkii waa la xiray furayaashiina meel ayaa la saaray.

Cabdullaahi wuxuu yiri "furayaashii ayaan qaatay ka dibna albaabbadii baan furey, Abuu Raaficna qowlad kore ayuu joogey, agtiisana waa la joogey. Markii ay ka tageen (dadkii) ayaan u koray, albaab kasta oo aan furana markii aan galo ayaan sii xirayey ilaa aan ugu dambayntii ugu tegey qol mugdi ah isaga oo la jiifa reerkiisa, mana ogayn qolka dhinac uu ka jiifo, markaas ayaan iri "Abuu Raafic", wuxu yiri "waa kuma?", markaas ayaa inta aan dhinicii codku ka yeeray aaday seef ku dhuftay, waxbase kama tarin, markaas ayuu qayliyey. Inta aan guriga ka baxay ayaan mar kale ku soo laabtay oo ku iri "muxuu ahaa dhawaaqu Abuu Raafic?", markaas ayuu yiri "war hooyadda ha hoogtee nin guriga ku dhex jira ayaa seef igu dhuftay". Markaas ayaan ku dhaqaaqay oo seef ku dhuftay, markii aan arkay in uusan weli dhimanna seeftii ayaan caloosha ka geliyey ilaa ay ka baxday dhabarkiisa, markaas ayaan ogaaday in aan diley. Ka dibna waan soo baxay oo albaabbadii ayaan mid mid u furay ilaa aan ka wada baxay laakiin meel ayaan ka dhacay oo dhudhunka ayaa i jabay, markaasaan cimaamaddaydii iskaga xiray, waxaanna fariistay albaabkii agtiisa aniga oo niyada ka leh "caawa bixi maayo ilaa aan ka hubsado in aan diley". Markii qayladii isku yeertay ayaan raggaygii u tegey oo ku iri "soo baxa cadawgii Alle waan dilaye". Dabadeedna Nabiga SCW ayaannu u tagnay oo arrintii u sheegnay, markaas ayuu i yiri "fidi lugtaada", markii aan fidiyey wuu iga masaxay, waxayna noqotay sidii iyada oo aan xanuunsanba.

ILAALADII MAXAMMED BINU MASLAMA

Markii Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu ka soo laabteen duullaammadii Axsaab iyo banuu Qureyda, ciidankii ugu horreeyey ee Rasuulku SCW diro wuxuu ahaa ilaalo uu hoggaaminayey Maxammed binu Maslama oo ka koobnayd 30 nin, waxayna ilaaladaasi u baxday dhinaca Najdi oo uu deggenaa qabiil la yiraahdo banii Bakar, waxaana meeshaas Madiina looga socon jirey 7 habeen. Waqtigaas taariikhdu waxay ahayd 10kii Muxarram, sannadkii 6aad ee hijriga.

Ciidanki markii ay meesha tageen ayey qabiilkii ka carareen meeshii, muslimiintiina waxa ay soo kaxeysteen xoolohoodii qaar ka mid ah, waxayna soo qafaasheen nin la oran jirey Thumaama binu Uthal oo odey u ahaa reer banuu Xaniif. Waxayna Madiina ku soo laabteen 28kii ama 29kii Muxarram iyagoo wata Thumaama binu Uthal Al-xanafi. Waxaa ninkaas lagu xiray tiir ka mid ah tiirarka masaajidka, Nabiga SCW ayaa u yimid oo ku yiri "maxaa haysaa Thumaama?", wuxuu yiri "kheyr ayaa agtayda ah Maxammed, haddiii aad i disho nin dhiig leh ayaad didhey, haddii aad i deysana nin wax mahadiya ayaad deysey, haddii aad maal dooneysidna i weydiiso wixii aad doontid ayaan ku siinayaa". Rasuulku SCW wuu ka tegey, wuxuuna ku soo laabtay mar kale oo ku yiri sidii oo kale, Thumaamana sidii oo kale ayuu ugu jawaabay. Mar saddexaad ayuu Rasuulku SCW ku soo laabtay oo sidii oo kale ku yiri, Thumaamana sidii oo kale ayuu ugu jawaaabay. Ka dibna Rasuulku SCW wuxuu yiri "sii daaya", waana la sii daayey.

Markii la sii daayey ayuu intuu baxay oo geed timireed masaajidka u dhowaa tegey ayuuu soo qubeystay, ka dibna ku soo laabtay Rasuulka SCW oo islaamay, wuxuuna Rasuulka SCW ku yiri "Ilaah baan ku dhaartaye ma jirin dhulka dushiisa weji aan ka necbaa wejigaaga, haddana wuxuu noqday wejigaagu kaan ugu jeclahay wejiyaasha, Ilaah baan ku dhaartaye ma jirin dhulka dushiisa diin aan ka necbaa diintaada, haddana waxa ay noqotay midda aan ugu jeclahay diimo oo dhan. Fardahaaga ayaa i soo qabtay aniga oo cimro u socda". Markaas ayaa Rasuulku SCW u bishaareeyey wuxuuna amray in uu cimradiisii guto. Ka dib Thumaama wuxuu aaday Makka markii uu Qureysh u tegey ayey ku dheheen "Thumaamow waad iilatay", markaas ayuu yiri "Ilaah baan ku

dhaartaye maya ma iilan ee waan islaamay Maxammed maciisa (la jirkiisa), Ilaah baan ku dhaartaye Yamaama idinkaga imaan meyso xabbad raashin ah ilaa Rasuulkii Alle SCW idiin idmo".

Dabadeed markii uu magaaladiisii ku laabtay ayuu ka joojiyey Makka raashinkii, markaas ayey Qureysh dhibaatootay oo waxa ay Rasuulka SCW u soo direen warqad ay ku leeyihiin "riximnimada ayaa wax kugu weydiisaneynaaye Thumaama warqad u qor oo ha noo soo daayo raashinka na loo soo rarayo". Rasuulku SCW wuu ka yeelay oo Thumaama ayuu kala hadlay.

DUULLAANKII BANUU LIXYAAN

Banuu Lixyaan waxa ay ahaayeen qabiilkii khiyaameeyey Rasuulka SCW markii uu tobankii nin ku daray, ka dibna ay ku dileen meeshii la oran jirey Rajiic. Wuxuuna Rasuulku SCW ugu duuli waayey markii ay arrintaasu dhacday muslimiinta oo xaalad adag ku jirey oo ay ku furnaayeen duruufo adag sida cadowgi Qureysh iyo reer baadiyihii Madiina agagaarkeeda degganaa oo Madiina ku soo qamaamayey iyo yahuuddii Madiina wax ka deggageyd, sidaa darteed Rasuulku SCW maslaxo uma arag in uu markaas ku duulo. Laakiin markii uu duullaankii Axsaab dhammaaday oo yahuuddii iyo in badan oo carabtii reer baadiyaha ka mid ahaa uu iska meeleeyey, qureyshna ay weerarradii joojisey oo difaac gashay, ayaa Rasuulku SCW munaasib u arkay in uu ku duulo banii Lixyaan oo degganayd Makka duleedkeeda si uu uga jiseeyo khiyaanadii ay sameeyeen iyo muslimiintii ay laayeen.

Wuxuu markaa Rasuulku SCW baxay bishii Rabbiicul-Awal ama Jamaadul-Awal, sannadkii 6aad ee hijriga isaga oo wata 200 oo asxaabtiisa ka mid ahayd, Madiina wuxuu uga tegey Cabdullaahi ibnu Ummi Maktuum, wuxuuna muujiyey in uu dhinaca Shaam ku duulayo si aysan munaafiqiintu u warramin oo u bixin sirta muslimiinta. Rasuulku SCW wuxuu markaa tegey meeshii lagu laayey asxaabtiisii oo u dhoweyd meesha ay degganaayen reer banuu Lixyaan. Markii ay reer banuu lixyaan maqleen ayey ka carareen degaankoodii, Rasuulkuna SCW wuxuu meeshaa joogey 2 maalmood, dhinacyadana wuxuu u kala direy ilaalooyin hase yeeshee waxba ma aysan soo helin. Ka dibna Rasuulku SCW wuxuu ku soo laabtay Madiina, wuxuuna maqnaa 14 habeen.

Waxaa is weydiin leh inta aynaan munaasibadaan ka gudbin Rasuulka SCW qabiil kasta oo uu ku duulo way kala cararaan isaguna dhulkooda ayuu maalmo degganaanayey, marka sidee qabiil dhan oo degganaa u sal kacayaan?. Arrintaa jawaabteedu waxaa weeye Rasuulku SCW markii uu ku duulo qabiil oo ay maqlaan in aysan ka hor tegi karin, raggooda hubka wataa way kala carari jireen. Sidaa darteed haddii ay raggii dagaallamayey carareen ma aysan keeni siyaasadda xakiimka ah ee Rasuulka SCW iyo ciddii raacdaba in maatada la laayo oo la bililiqeysto ama nin dhulkiisii ka qaxay la daba kaco sida ay maanta ku dhisan tahay siyaasadda caalamku. Sidoo kale Rasuulka SCW iyo muslimiintu ma dili jirin ragga aan hubka wadan oo aan dagaallamayn.

ISRAACRAACII ILAALOOYINKA

Waxaa israacraacay duullaamadii iyo ilaalooyinkii uu Rasuulku SCW u kala dirayey jihooyinka, waxayna ahaayeen sidatan:

1. Wuxuu Rasuulku SCW direy bishii Rabbiicul-Awal ama Rabbiicul-Aakhir, sannadkii 6aad ee hijriga koox ilaalo ah oo ka koobnayd 40 nin oo uu hoggaaminayey Cukaasha binu Muxsin, waxayna aadeen meesha la yiraahdo Qamri oo reer banii Asad degganaayeen. Cukaasha iyo raggiisii markii ay gaareen meeshii loo direy ayey qabiilkii kala carareen, muslimiintiina waxa ay soo kaxeysteen 200 oo halaad oo dadkaasi lahaayeen, waxayna ku soo laabteen Madiina.

2. Sidoo kale isla bishii Rabbiicul-Awal ama Rabbiicul-Aakhir, , sannadkii 6aad ee hijriga, wuxuu Rasuulku SCW u direy meesha la yiraahdo Dil-qasa oo ay degganaayeen reer banii Thaclaba koox ilaalo ah oo ka koobnayd 10 nin uuna madax u ahaa Maxammed binu Maslama. Maxammed binu Maslama iyo kooxdiisi way bexeen, markii ay meeshii gaareen ayaa iyaga oo hurda waxaa u yimid qabiilkii ay u socdeen oo 100 nin gaaraya ayaa iyaga ayey wada dileen kooxdii muslimiinta ahayd ilaa Maxammed binu Maslama oo dhaawac ahaan uga fakaday maahane.

3. Markii la laayey asxaabtii Rasuulka SCW ee uu hoggaaminayey Maxammed binu Maslama ayaa Rasuulka SCW isla meeshii Dil-qasa ee reer banii Thaclaba u diray ciidan kale oo gaaraya 40 nin, uuna madax u yahay Abuu Cubeyda ibnu Jarraax, waqtigaas oo ahaa bishii Rabbiicul-Aakhir, sannadkii 6aad ee hijriga. Abuu Cubeyda iyo ciidankiisii markii ay gaareen meeshii goor subax ah ayaa reer banii Thaclaba ka baqday meeshii. Waxay markaa muslimiintu soo kaxeysteen xoolo ay lahaayeen, ninna way soo qafaasheen, wuuna islaamay ninkaasi.

4. Sidoo kale isla bishii Rabbiicul-Aakhir, sannadkii 6aad ee hijriga wuxuu Rasuulku SCW diray ciidan uu hoggaaminayo Seyd binu Xaarith, wuxuuna u direy meesha la yiraahdo Jumuum oo ay deggenaayeen reer banuu Suleym oo ahaa nimankii Bi'ru Macuuna ku laayey 70kii oo asxaabta Rasuulka SCW aha. Seyd iyo ciidankiisii markii ay meeshii gaareen ayey waxay qabteen haweeney oo kaxaysteen si ay u tusto meesha ay joogaan reer banuu Suleym, markii ay tageen meeshii ayey dadna ka soo qafaasheen xoolona ka soo kaxeysteen.

5. Sidoo kale bishii Jamaadul-Awal isla sannadkii 6aad ee hijriga wuxuu Rasuulku SCW direy ciidan gaaraya 170 nin oo uu madax uga dhigay Seyd binu Xaarith, wuxuuna ciidankaas u direy meel la yiraahdo Ciis. Seyd iyo ciidankiisii way bexeen, waxayna meeshii ka soo qafaasheen safar qureysheed oo uu waday Abul-Caas, oo ahaa ninkii qabay gabadhii Rasuulka SCW ee Seynab. Markii safarkii iyo Abul-Caas la keenay Madiina ayaa markii salaadda subax la tukanayey Seynab ay gadaal ka hadashay oo tiri "dadow aniga ayaa magan geliyey Abul-Caas", markaas ayaa Rasuulku SCW asxaabtiisa ku yiri "waad maqasheen waxa ay tiri, marka waxaan idiinka codsanayaa maalkiisiina haddii aad u celin kartaan in aad u celisaad", markaas ayey asxaabti u wada celiyeen maalkiisii, waana la iska sii daayey isaga iyo maalkiisiiba.

Abul-Caas wuxuu ku laabtay Makka, wuxuuna xoolihii u celiyey dadki lahaa, ka dibna wuu islaamay oo Madiina ayuu u soo hijrooday. Markii uu Madiina yimidna Rasuulku SCW wuxuu ku celiyey Seynab, nikaaxoodii hore ayuuna isugu celiyey oo nikaax kale ma samayn. Waxa ayna kala maqnaayeen saddex sano iyo bar, mana ka furmin intii uu Abul-Caas gaalnimada ku jirey oo waxay ahayd intii aan muslimiinta iyo gaalada la kala xarriimin. Laakiin intii muslimiinta iyo gaalada la kala xarrimay wixii ka dambeeyey haddii labo qof oo is qaba midkood islaamo, midna gaalnimadii ku haro way kala furmaayaan, waana kala xaaraan in ay is qabaan labo qof oo midi muslim yahay midna gaal, ismana guursan karaan ilaa waxa keliya oo laga soo reebay in ragga muslimiinta ahi guursadaan dumarka Ehlu-kitaabka ah (yahuud iyo nasaara) ee dhowrsan, in kastoo ay ka kheyr badan tahay in ninka muslimka ihi guursado gabar dhowrsan oo muslim ah. Gabadha muslimadda ah iyada xaaraam ayey ka tahay in ay guursato nin gaal ah loomana oggola, nikaaxooduna ma ansaxayo.

6. Sidoo kale wuxuu Rasuulku SCW direy bishii Jamaadul-Aakhir, isla sannadkii 6aad ee hijriga ilaalo uu hoggaaminayo Seyd binu Xaarith oo ka koobnayd 15 nin, wuxuuna u direy meel la oran jirey Dharifi, oo ay daganaayeen reer Banii Thaclaba. Hase yeeshee reer Banii Thaclaba waxa ay u maleeyeen in Rasuulku SCW ku soo baxay markaas ayey carareen. Seyd iyo kooxdiisii waxa ay ku soo laabteen Madiina, waxa ayna maqnaayeen afar habeen.

7. Sidoo kale wuxuu Rasuulku SCW bishii Rajab isla sannadkii 6aad ee hijriga direy ilaalo ka koobnayd 12 nin oo uu madax u ahaa Seyd binu Xaarith, wuxuuna u direy meesha la yiraahdo Waadil-Quraa si ay u soo ogaadaan dhaqdhaqaaqa cadowga, hase yeeshee markii ay meeshii tageen ayaa waxaa weerar ku soo qaaday dadkii meeshaa degganaa, waxa ayna dileen sagaal nin, saddex uu Seyd ku jirana way ka baxsadeen.

8. Wuxuu sidoo kale Rasuulku SCW direy ciidan gaaraya 300 oo nin oo uu u direy in ay ka hortagaan safar qureysheed, wuxuuna ciidankaas madax uga dhigay Abuu Cubeyda ibnu Jaraax, waxaana ciidankani intii uu maqnaa qabatay gaajo aad u daran, waxa ayna qasheen saddex neef oo geel ah oo ka mid ahaa gaadiidkii ay wateen, Abuu Cubeyda oo ahaa amiirkii ciidanka ayaa markaa ka joojiyey arrintaan ah in ay qashaan gaadiidkooda. Dabadeed baddii ayaa u soo tuurtay Cambar (nibiri) iska weynaaday oo ay cunayeen bil barkeed, ka dibna waxa ay ku soo laabteen Madiina iyaga oo hilibkiisii wax ka mid ah wata. Markii ay Rasuulka SCW u sheegeen wuxuu ku yiri "waa risqi Ilaahay idiin soo saaray ee wax ma ka haysaan hilibkiisii", markaas ayey u keeneen.

Waxa aan in badan siirada ku arkaynaa in Rasuulku SCW uu marar badan dirayey cidamo ilaalooyin ah oo cadadkoodu yar yahay, arintaas oo xikmaddo ku jirta uu Alle garanayo, waxaa hadana ugu muhiimsanaa sadex qodob oo kala ah sidan:

1) Ciidanka wayn oo aan had iyo jeer bixi karin, una baahnaa dhaqaale badan iyo tabaabushe, maxaa yeelay qof walba waa garan karaa dhaqaalaha uu u baahan yahay ciidan gaaraya 2,000, oo maqnaanaya bil iyo ka badan, maalinkiina qalanaya 20 geel ah.

2) Ciidamadaas la dirayey waxa ay u badnaayeen ilaalooyin cadadkoodu intuu doono uu noqon karo, ilaalana waa la yaqaannaa maata oo waxaa weeyey ciidan loo direy arrin, oo aan ahayn dagaal musalax ah, inkasta oo aan arkayno in ilaalooyinka qaarkood ay ahaayeen ciidan xoog badan oo duullaan qaaday.

3. Waxa ay ahaayeen ciidamadaas ducaad dadka ugu yeeraya diinta Alle, waxayna muhiimaddooda ahayd in ay dadka gaarsiiyaan dacwada islaamka, iyaga oo adeegsanaya habkii wanaagsanaa ee Rasuulku SCW u baray, sidaa daraadeed haddii loo diido in ay xaqii dadka gaarsiiyaan, oo lagula dagaalamo diinta Alle, waxa ay raggii ducaada ahaa oo jilicsanaa isku badali jireen kumaandoos manexeyaal ah, oo hoojiya cadawga Alle.

DUULLAANKII BANII MUSDHALIQ

Waxa uu dhacay duullaankan banii Musdhaliq bishii Shacbaan sannadkii 6aad ee hijriga. Sababtiisuna waxay ay ahayd: Waxaa Rasuulka SCW soo gaadhay in odeygii reer banuu Musdhaliq oo la oran jirey Xaarith binu abii Daraar uu qoladiisii iyo wixii kale oo raacay u diyaarinayo sidii uu Rasuulka SCW ugu soo duuli lahaa. Wuxuu Rasuulku SCW si uu arrintaa u xaqiiqsado wuxuu direy Bureyda binu Xuseyb Al-aslami. Bureyda ayaa markaa u tegey oo la hadlay ninkii madaxda u ahaa, ka dibna ku soo noqday Rasuulka SCW oo warka dhabnimadiisa u soo sheegay. Rasuulku SCW markii uu arrintii xaqiiqsaday ayuu asxaabtiisiii la soo baxay, wuxuuna Madiina madax uga soo dhigay Seyd binu Xaarith ama Abaa Dar Al-qafaari ama Thumayla binu Cabdullaahi Laythi.

Ninkii la oran jirey Xaarith binu Diraar ee madaxda u ahaa reer banii Musdhaliq wuxuu dirsaday nin jaajuus ah si uu war uga keeno ciidanka muslimiinta hase yeeshee ciidankii muslimiinta ayaa ninkaa qabtay oo diley. Xaarith iyo ciidankiisii markii ay maqleen in Rasuulka SCW iyo Ciidankiisii soo baxeeen, ninkoodii wardoonka ahaana la diley ayaa Ilaahey cabsi ku ridey oo ka baqdeen meeshii. Muslimiintiina meeshii ayey tageen waxayna soo qafaasheen dumarkoodii, caruurtoodii iyo maalkoodii. Ka dibna wuxuu

Rasuulku SCW qaniimadii iyo dadkii la soo qafaashay u qaybiyey asxaabtiisii. Dadkaas la soo qafaashay waxaa ka mid ahayd gabar uu dhalay ninkii madaxda u ahaa qabiilkaas oo la oran jirey Juweyriya bintu Xaarith, waxaana qayb ahaan u helay Thaabit binu Qays, markaas ayuu kitaabeeyey, Rasuulka SCW aya markaas xoolihii ka bixiyey oo guursaday. Markii ay asxaabtii arrinkaa wada arkeen ayey wada xoreeyeen dumarkii ay qayb ahaanta u heleen oo dheheen "waa xididkii Rasuulka SCW".

Duullaankan Banii Musadhaliq markii laga soo laabtay waxaa dhacay laba arrimood oo ay sameeyeen nimankii munaafiqiinta ahaa oo iyagu had iyo jeer muslimiinta dhexdooda ku rida khalkhal iyo tashwiish, dacaayado been ahna fidiya. Nimankaas oo sidii aan soo sheegnayba uu hormuud u ahaa Cabdullaahi binu Ubay oo isagu xiqdi iyo xaasidnimo u hayey islaamka iyo muslimiinta, weliba gaar ahaan cadaawad gaar ah u hayey Rasuulka SCW maxaa yeelay sidii aan usoo sheegnayba isaga oo loosharraxayo madaxnimo ayaa islaamku yimid Madiina, markaas ayey dadkiisi islaamka qaateen, madaxnimadiisiina iska joojiyeen, sidaa darteed wuxuu u arkayey in islaamku ka qaaday madaxnimadiisii, wuxuuna bilaabay xiqdi iyo xumaan, laga soo bilaabo markii Rasuulka SCW iyo muhaajirintu ay Madiina yimaadeen. Waxaana dhacday in Rasuulku SCW markii uu Madiina yimid oo uu muddo yar joogey uu soo baxay isaga oo raba in uu soo booqdo Sacad binu Cubaada oo jirran, markaas ayuu isaga oo dameer saaran soo maray meel ay fadhiyeen rag uu ku jiro Cabdullaahi ibnu Ubay, markaas ayuu qur'aan ku dul akhriyey, dacwadana ugu yeeray. Cabdullaahi ibnu Ubay intuu sanka qabsaday ayuu Rasuulka SCW ku yiri "ha na booraynin, gurigaagana joog oo meelaha aan fariisanayno ha noogu imaan".

Cabdullaahi binu Ubay iyo raggiisu waxa ay gaalnimadoodii ku jiraan waxay islaameen markii ay arkeen in ay muslimiintu Badar ku guuleysteen hase yeeshee xumaatadoodii iyo cadaawaddoodii ayey hoos ka wadeen, waxa aanna soo marnay in uu munaafaqaani ku hagoogtay yahuuddii reer banii Qaynuqaac. Sidoo kale dagaalki Uxudna wuxuu la laabtay 300 oo nin oo muslimiinta garabkooda ayuu ka baxay. Sidoo kale munaafaqan iyo munaafaqiinta kaleba waxa ay muujisan jireen wanaag iyo kheyr, qalbigoodana waxaa buuxiyey nifaaq iyo gaalnimo. Waxaana ka mid ahaa waxyaabihii uu dadka u muujin jirey marka Rasuulku SCW Jimcaha u istaago ayuu asxaabta ku dhihi jirey "kani waa Rasuulkii Alle idinku karaameeyey idinkuna ciseeyey ee u gargaara, xoojiya, maqla oo adeeca" hase yeeshee markii dagaalkii Uxud dhacay, oo sidii la ogaa uu sameeyey, ayuu Jimcihii ka dambeeyey istaagay isaga oo raba in uu hadalkiisii oo kale jeediyo, markaas ayaa asxaabtii dharkii ka jiideen oo dheheen "nafa fariiso cadowgi Allow, ehel uma tihid (arinkane) wixii aad samaysay baad samaysaye", markaas ayuu iska baxay isaga oo dadka luquntooda ka tallaabsanaya, markaas ayaa waxaa ka hor yimid nin asxaabta ka mid ah wuxuuna ku yir "war hooggaaga ee laabo Rasuulku SCW ha kuu dembi dhaaf weydiiyee", markaas ayuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye ma doonayo in uu ii dembi dhaaf weydiiyo".

Sidoo kale waxa aan soo marnay in markii yahuuddii reer banuu Nadiir ay ballantii ka baxday oo Rasuulku SCW go'aansaday in uu ku duulo, uu munafaqaani hoos kala xiriiray oo ku yiri "ha bixina". Sidoo kale Dagaalkii Axsaab waxa ay munaafaqaas iyo raggiisu muslimiinta ku dhex fureen tashwiish iyo dacaayado. Sidoo kale gaaladi qureysheed intaa hoos ayey kala xiriiri jireen.

Haddaba nimankaas munaafaqiinta ah dusha ka sheeganayey islaam, hoostana uu uga buuxay nifaaq iyo gaalnimo, had iyo jeer dacaayada ku dhex fidinayey dadkii muslimiinta ahaa sida dacaayaddii ay fidiyeen markii uu Seyd furay Seynaba bintu Jaxshi oo Rasuulku SCW eeddadiis dhashay, dabadeedna uu Rasuulku SCW guursaday ayna dheheen "Maxammed wuxuu guursaday gabadhii uu furay wiilkii mowlihiisa ahaa" arrintaas oo carabta dhexdeeda waqtigii jaahiliga ceeb ka ahaan jirtey, maxaa yeelay ninku wiilka mowlihiisa ah wuxuu ka soo qaadi jirey wiilkiisii oo kale sidaa darteed

islaamku caadadaas xun wuu baabi'iyey sidii uu caadooyinkii xumaa oo kaleba u baabi'iyey, waxaan aarrintaan lagu bilaabay Rasuulka SCW laftiisa, wuxuuna Alle yiri:

((XUSUUSO MARKAAD KU LAHAYD KII ALLE U NIMCEEYEY ADNA AAD U NIMCAYSAY (SAYD) HAYSO XAASKAAGA ALLENA KA BAQ, WAXAADNA NAFTAADA KU QARINAYSAY SHAY ALLE MUUJIN DOONO, WAXAADNA KA BAQAYSAY DADKA, ALLAASE U XAQ LEH IN LAGA BAQO, (HADDABA) MARKII SAYD DANTIISA KA GUTAY (OO UU FURAYNA) AAN KUU GUURINAY SI AYSAN MU'MINIINTU DHIB UGALA KULMIN HAWEENTA (WIILASHA) AY ISUGU YEERAY MARKII AY KA DHAMAYSTAAN XAAJADOODA, ALLE AMRKIISUNA WAXA UU AHAADAY MID LA FULIYO)), (Suuratul-Axsaab 37).

Sidoo kale Seynab waxa ay ahayd haweentii shanaad ee Rasuulku SCW markaas ayey dheheen "qur'aanku afar haween ah ayuu banneeyey ee maxay tahay haweenta 5aad". Haddaba nimankaas oo mar walba dacaayad hoosaad ku waday Rasuulka SCW iyo mu'miniinta waxaa ficilladooda had iyo jeer muujinayey Allaah oo wax walba ka war haya, wuxuuna Alle yiri isaga oo Rasuulkiisa SCW la hadlaya:

((MUNAAFAQIINTU WAXA AY KA DIGTOON YIHIIN IN AY KU SOO DEGTO SUURAD KA WARAMAYSA WAXA QULUUBTOODA KU JIRA, WAXAAD TIRAAHDAA ISKA JEES JEESA ALLE WAA SOO BIXIN WAXA AAD KA DIGTOONTIHIINE, HADDII AAD WAYDIISO WAXA AY DHAHAYAAN (XOOGAA) BAAN TIIMBANAYNAY OO CIYAARAYNAY, DHEH MA ALLE, AAYAADKIISA IYO RASUULKIISAAD KU JEES JEESAYSAAN HA CUDURDAARANINA WAAD GAALAWDEEN IIMAANKIINII KA DIBE, HADDAAN CAFINNO KOOX IDINKA MID AH WAXAA CADAABAYNAA KOOX MAXAA YEELAY WAXA AY AHAAYEEN MUJIRIMIIN)), (Suuratu-Tawbah 64-66).

Haddaba ragga arrimahaas samaynaya oo Rasuulkii Alle SCW iyo mu'miniinta xumaatada kula dhex wareegaya waxa ay Cumar binu Khadhaab iyo rag la mid ihi soo jeediyeen in la laayo hase yeeshee wuxuu Rasuulku SCW ku yiri Cumar "ma waxaad dooneysaa in ay dadku ku sheekaystaan Maxammed asxaabtiisa ayuu laayaa?" maxaa yeelay dadka dibedda ahi waxa ay u haysteen in munaafiqiintaasi asxaabta ka mid yihiin.

Haddaba haddii aan usoo laabano labadii dhacdo oo ay sameeyeen munaafiqiintu duullaankan reer banii Musdhaliq waxa ay ahaayeen:

1. Markii la aday duullaankii ayey raaceen cidankii iyaga oo aan u siyaadineyn ciidanka wax aan ka ahaydn culeys iyo fitno sidii uu Allaahba ku sheegay aayaaddan:

((HADDAY BAXAAN DHEXDIINA (OO AY IDIN RAACAAN) IDIIN SIYAADIN MA HAYAAN WAXAAN KA AHAYN XUMAAN IYO (SHAR) WAXAYNA U DAGDAGI LAHAAYEEN FITNAYNTA DHEXDIINNA IYAGOO IDINKA DOONAYA FITNO, WAXAANA IDINKA MID AH (MUSLIMIINTIINNA) KUWA MAQLAYA (OO QAADANAYA WARKA MUNAAFAQIINTA)), (Suuratu-Tawbah 47).

Haddaba markii la soo laabtay ayaa meel la degey, markaas ayaa meel biyo laga dhaansanayey waxaa ku dagaallamay labo wiil, mid Cumar binu Khadhaab adeege u ahaa lana oran jirey Jahjaahul-qafaari iyo mid Ansaari ah oo la oran jirey Sinnaan binu Wabar Al-juhani, markaas ayaa Sinnaan yiri "yaa Ansaar ahey", Jahjaahna yiri "yaa Muhaajiriin aheey". Arrintii ayaa waxaa maqlay munaafaqii Cabdullaahi binu Ubay oo la fadhiya koox raggiisii ah oo uu ku jirey Seyd binu arqam oo wiil yara, markaa ayuu munaafaqaasi carooday oo yiri "ma sidaas ayey sameeyeen (muhaajiriin)?. Magaaladayadii ayey ku faafeen oo ku bateen Ilaah baan ku dhaartaye annaga iyo iyagu waxaan isku nahay sidii hore loo yiri oo ahayd "naaxi eygaaga ha ku cunee". Ilaah baan ku dhaartaye haddii aan Madiina ku noqonno kan casiiska ihi (isagaa iska wada) waxa uu ka saari doonaa Madiina kan dulliga ah (oo uu ula jeedo Rasuulka SCW)", markaas ayuu lahadlay kuwii la fadhiyey oo ku yiri "tani waa wixii aad naftiinna ku samayseen,

magaaladiinnii baad u oggolaateen, maalkiinniina waad la qaybsateen. Ilaah baan ku dhaartaye haddii aad waxa gacantiina ku jira ka haysan lahaydeen meel kale ayey idiin dhaafi lahaayeen".

Seyd binu Arqam ayaa markaas arrintii adeerkiis u sheegay, adeerkiisna wuxuu u sheegay Rasuulka SCW oo uu la joogo Cumar binu Khadhaab, Camar ayaa markaas yiri "Rasuulkii Allow amar Cubaada binu Bishir ha dilee (munaafaqaas)", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "Cumar ma waxa aad doonaysaa in uu dadku ku sheekeysto Maxammed asxaabtiisa ayuu laayaa?" (maxaa yeelay dadka dibadu waxa ay u qabaan in uu asxaabta ka mid yahay) ka dib wuxuu Rasuulku SCW amray in la guuro waqtigaas oo aad u kululaa oo uusan Rasuulku SCW guuri jirin, markaas ayaa Useyd binu Xudeyr oo nin odeya ahaa u yimid Rasuulka SCW oo ku yiri "Rasuulkii Allow waxaad guurtay waqti xun", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "miyeysan ku soo gaarin waxa uu saaxiibkiin yiri?", Useyd wuxuu yiri "muxuu yiri?", markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "wuxuu sheegtay in haddii uu Madiina ku laabto kan casiiska ihi ka saari doono Madiina kan dulliga ah", markaas ayuu Useyd yiri "Rasuulkii Allow adiga ayaa haddii aad doontid Madiina ka saaraya. Ilaah baan ku dhaartaye isaga ayaa dulli ah adiguna casiis baad tahay", ka dib wuxuu yiri Useyd "Rasuulkii Allow isaga tartiibi, Ilaah baan ku dhaartaye Allaah ayaa noo kaa keenay isaga oo reerkiisu madaxtinimo u diyaarinayaan sidaa darteed wuxuu u arkaa in aad boqortooyadiisii kala wareegtay". Rasuulku SCW geeddigii ayuu ku jirey ilaa laga gaaray maalinkii dambe duhurkii oo uu degey, markaas ayey asxaabtii geedaha ku kala yaaceen oo daateen, Rasuulkuna SCW wuxuu arrinkaan u sameeyey si aan warka munaafiqa loogu sheekeysan oo looga mashquulo, asxaabta dhexdeedana aysan fitno ugu noqon.

Cabdullaahi binu Ubay markii uu arkay in talo faro ka baxday ayuu inkiray hadalkii oo sidii munaafaqiinta lagu yaqaaney dhaar been ah maray isaga oo leh "Ilaah baan ku dhaartaye ma dhihin", markaas ayaa asxaabtii qaar ka mid ahi Rasuulka SCW ku dheheen "Rasuulkii Allow waxaa la arkaa in wiilka yari is moodsiiyey oo uusan weelayn oraahdii ninka" hase ahaatee Allaah SW oo wax kasta la socday ayaa u rumeeyey seyd hadalkii uu ka sheegay munaafaqaas, wuxuuna ku soo dajiyey Suuratul-Munaafiquun oo ay ku jiraan aayadahaan:

((MUNAAFAQIINTU WAA KUWA LEH HAQUDININA KUWA RASUULKA SCW LA JOOGA ILAA AY KA KALA TAGAAN, ALLAA ISKA LEH KHASNADAHA SAMAWAADKA IYO DHULKA LAAKIIN MUNAAFAQIINTU MA FAHMAYAAN, WAA KUWA LEH HADDII AAN MADIINA KU NOQONNO WAA IN KAN CASIISKA IHI KA BIXIYOAA (MADIINA) KAN DALIILKA AH, WAXAA CISA ISKA LEH ALLE, RASUULKIISA IYO MU'MINIITA LAAKIIN MUNAAFAQIINTU MA OGA)), (Suuratul-Munaafaqiin 7-8).

Waxa ay saxiixaynku wariyeen in markii ay suuradaan soo dagtay uu Rasuulku SCW u cid direy Seyd markii uu u yimidna uu ku dul akhriyey suuradan Munaafiquun, kuna yiri "Alle wuu kuu rumeeyey (hadalkaagii) Seydow.

Sheekadii waxaa maqlay wiil uu dhalay munaafaqaas oo la oran jirey Cabdullaahi binu Cabdullaahi binu Ubay oo ahaa nin saxaabi ah oo wanaagsan. Markaas ayaa markii Madiina la soo gelayey Cabdullaahi seeftiisii galka kala baxay oo aabbihiis hor istaagay kuna yiri "Ilaah baan ku dhaartaye in aadan meeshaan dhaafayn ilaa Rasuulkii Alle kuu idmo, isaga ayaana casiis ah adiguna dulli baad tahay". Rasuulku SCW markii uu meeshii soo maray ayuu u idmay, ka dib Cabdullaahi Rasuulka SCW ayuu u tegey oo ku yiri "Rasuulkii Allow waxa aan maqlay in aad rabtid in aad dishid aabbahay. Ilaah baan ku dhaartaye reerkayagu waa og yihiin in nin aabbihiis iiga baarrisani uusan jirin, marka haddii uu qof dilo waxaa laga yaabaa in aan wax u qaado qofkaas ee haddii aad doontid in aad disho aniga i amar, Ilaah baan ku dhaartaye madaxiisa ayaan kuu keenayaa".

SHEEKADII BEEN ABUURASHADA

Qisadan waxa ay sababteedu ahayd: Rasuulku SCW markii uu duullaan ama meel kaleba aadayo wuxuu kaxeysan jirey xaasaskiisa mid ka mid ah, wuuna u qori tuuri jirey. Sidaa darteed markii uu aadayey duullaankii Banii Musdhaliq ayaa waxaa qori tuurkii ku soo baxay Caa'isha oo raacday.

Markii laga soo laabtay duullaankii ayaa meel la degay, markaas ayey Caa'isha goor habeen bar ah aaddey bannaanka si ay xaajadeeda u soo gudato, caadana waxaa u ahaan jirtey dumarkii waqtigaa, weliba kuwii mu'minaatka ahaa ee aadka u xishoodka badnaa in haddii ay bannaanka aadayaan ay fogaadaan oo sharqarta ka dhex baxaan, ilaa haddana meelaha uu xishoodku ku dambeeyo waa laga helayaa.

Markii ay Caa'isha soo laabatay ayaa waxaa ka lumay kuul ay wadatay oo ay gabar ka soo caariyeysatay, markaas ayey raadkeedii dib ugu laabatay iyada oo baadi goobeysa hase yeeshee waa meel Ilaahay arrin ka watee intii ay Caa'isha maqnayd ayaa Rasuulkii SCW amray in la guuro, lagamana war hayn in ay Caa'isha maqan tahay maxaa yeelay marka la guurayo waxay dhex geli jirtey bahal la yiraahdo Hawdaj oo loogu talo galay. Hawdajkaas ayaa markaas dhowr nin geesaha qaban jirtey oo ratiga saari jirtey, sidaa darteed nimankii hawdajka qaadayey waxay u maleeyeen in Caa'isha ku dhex jirto mana aysan dareemin fudeydkiisa maxaa yeelay Caa'isha waxa ay ahayd gabar yar oo aan hilib lahayn, sidoo kale guuritaanka ciidanku waqti dheer ma qaadan maxaa yeelay waxa ay ahaayeen rag ciidan ah oo aan alaab badan wadan oo nin walba hubkiisa iyo daabbadiisa ayuu soo qabsanayey.

Caa'isha markii ay soo laabatay iyada oo kuushii soo heshay ayaa waxa ay timid goobtii oo lagu kala guuray oo wax sii sharqamayana usan jirin, markaas ayey meesheedii iska fariisatay iyada oo is leh "haddii lagu tebo waa lagu soo raadinayaa" hase yeeshee sidii ay u fadhiday ayey indheheedii ka qaalib noqdeen oo ay gama'day. Waagii markii uu baryey ayaa waxaa arkay qofka meesha jiifa saxaabi la oran jirey Safwaan binu Mucdhil oo ahaa nin hurdo weyn, marar badanna ciidanka ka dib dhici jirey. Safwaan markii uu meesha yimid ayuu Caa'isha gartay maxaa yeelay intii aan xijaabka la is amrin ka hor ayuu yiqiinney, markaas ayuu yiri "Innaa Lilaahi wa inaa ileehi raajicuun, waa xaaskii Rasuulkii Alle". Caa'isha ayaa markaas hadalkiisa ku toostay. Safwaan intuu neefkiisii geela ahaa u arumiyey (fariisiyey) ayuu ka durkay, markii ay fuusheyna wuu ku waday. Goor harsimadii ah ay ayuu ciidankii oo meel degey ka daba tegey.

Munaafaqii Cabdullaahi binu Ubay markii Madiina la tegey ayuu wuxuu sameeyey been abuurasho uu ku been abuuranayo Caa'isha iyo Safwaan, dacayad ayuuna suuqa geliyey, aad ayeyna u dhex dabbaasheen dacaayaddaas isaga iyo munaafaqiintii kaleba, waxaa kale oo ku simbiriraxday dad wanaagsanaa oo asxaabta ka mid ahaa sida Misdhax, Xasaan binu Thaabit iyo Xamna bintu Jaxshi.

Caa'isha markii ay Madiina ku soo laabatay ayey xanuunsatay, mana aysan maqal dacaayaddan been abuuradka ah ee suuqa ku jirta. Maalin dambe ayey bannaanka aadeen iyada iyo Misdhax hooyadiis. Goor ay meel dhexe marayaan ayey turaanturrootay duqdii, markaas ayey tiri "Misdhaxow hoog". Caa'isha ayaa markaas ka celisay oo tiri "ma nin Badar ka qayb galay ayaad sidaas leedahay?", markaas ayey duqdii tiri "miyaadan maqlin waxa uu suuqa wax ka geliyey?", Caa'isha waxa ay ku jawaabtay "maya". Duqdii ayaa markaas u sheegtay qisadii suuqa ku jirtey ee lagu been abuurtay. Caa'isha oo ahayd gabar cafiifad ah oo dhawrsan, waxaasna beri ka ahayd, markii ay maqashay warkaas foosha xun ee suuqa galay ayaa xunuunkii hayey xanuun kale ugu darsamay, waxayna gashay oohin is daba joog ah. Waxaa kale oo Caa'isha intaas uga sii darnayd in ay aragtay Rasuulka SCW oo aan u hayn naxariistii uu u hayn jirey, siiba markii ay xanuunsato, markii uu guriga soo galana wuxu ku gaabsanayey

"sidee tahay?". Caa'isha waxa ay markaas uga idan qaadatay Rasuulka SCW in ay aaddo guriga waalidkeed, Rasuulkuna SCW waa u idmay.

Rasuulka SCW markii Madiina lagu soo laabtay wax qur'aan ama waxyi ah oo arrintaa ka hadlaya laguma soo dejin, wixii arrintaa ka jireyna ma ogeyn maxaa yeelay Rasuulku SCW qeybka (waxa maqan) kama war hayn, wax Rabbi uu u waxyoodo maahane. Rasuulku SCW wuxuu markaa arrintii kala tashaday Cali Abii-dhaalib iyo Usaama binu Seyd oo markaa dhowr iyo toban jir ahaa. Cali wuxuu Rasuulka SCW ku yiri "dumarka aan iyada ahayn waa badan yihiin, hase yeeshee Usaama wuxuu yiri "Rasuulkii Allow xaaskaaga wax aan wanaag ahayn kuma ogi ee hayso". Sidoo kale wuxuu Rasuulku SCW arrinka Caa'isha ka wareystay gabar jaariyad guriga ka ahayd, waxayna gabadhaasi tiri "wax xumaan ah ama ceeb ah kuma ogi in ay tahay gabar yar oo cajiinka ka seexata maahane". Rasuulku SCW waxaa kale oo uu arrintaa wax ka weydiiyey xaaskiisii Seynaba bintu Juxshi oo walaasheed dacaayadda wax ka wadday, waxay Seynaba tiri "wax aan wanaag ahayn kuma ogi Caa'isha".

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu Caa'isha ugu tegey gurigoodii iyada oo ay la joogaan aabbeheed iyo hooyadeed markaas ayuu ku yiri "Caa'isha arrintaas ayaa iga kaa soo gaartay, haddii aad beri ka tahay Alle waa ku bari yeeli doonaa, haddii aad dembigaas ku dhacdayna Alle dembi dhaaf ka dalab oo u toobad keen maxaa yeelay addoonku haddii uu dembigiisa qirto Allena u toobad keeno Alle waa ka toobad aqbalaa. Caa'isha waalidkeed ayey marba mid la hadashay iyada oo ku leh "u jawaab Rasuulka" hase ahaatee mid walba wuxuu yiri "maxaan Rasuulka SCW ugu jawaabaa?". Waxay markaas Caa'isha tiri "Ilaah baan ku dhaartaye waan ogahay in aad sheekada maqasheen ilaa naftinnu ku qanacday oo aad rumeyseen. Hadii aan marka idin dhaho beri baan ka ahay iima rumeyneysaan, haddii aan idiin qirtana waad ii rumeyneysaan . Haddaba Alle ayaan ku dhaartaye idiin dhihi maayo wax kale, sidii Yuusuf aabbihiis yiri oo kale maahane", waxayna akhriday aayadda micnaheedu yahay:

((SABIR WANAAGSAN, ALLAANA KA KAALMAYSTAY WAXAAD SIFAYNEYSAAN)), (Suuratu-Yuusuf 18).

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu ka istaagay memberkii masaajidka isaga oo ka dacwoonaya Cabdullaahi binu Ubay, markaas ayaa Useyd binu Xudeyr, oo odeygii reer Aws ahaa, yiri "Rasuulkii Allow haddii uu annaga yahay waan kaa kaafineynaa oo waan dileynaa, haddii uu walaalahayo Khasraj yahayna amar ha dilaane", markaas ayaa Sacad binu Cubaada oo odeygii reer Khasraj ahaa xoogaa xammiya ihi qaadday oo yiri "waxa aad ogaatay in uu annga (Khasraj) yahay", Rasuulka SCW ayaa markaa kala dajiyey. Ka dib Rasuulku SCW wuxuu tegey gurigii reer Abuubakar, waxaa markaas ku soo degey waxyi isaga oo la fadhiya, markaas ayuu yiri "Caa'isha Ilaah waa ku beri yeelay", markaas ayaa Caa'isha hooyadeed ku tiri Caa'isha "u istaag Rasuulka" hase yeeshee Caa'isha way diiddey oo waxay tiri "Ilaah baan ku dhaartaye u istaagi maayo, mana mahadinayo cid aan Alle ahayn?".

Allaah SW wuxuu ku beri yeelay Caa'isha oo uu sababteeda ku soo dejiyey toban aayadood oo Suuratu-nuur ku jira oo uu uga hadlayo been abuurashadan iyo cidda bilowday, waxaana lagama maarmaan ah in aan soo qaadanno oo macneyno aayaddahan maxa yeelay arrimahan oo kale maanta aad ayey ugu badan yihiin dadka muslimiinta ah, in badanna waxaa la arkayaa in dadka munaafiqiinta ah, ee Cabdullaahi binu Ubay oo kale ah, oo maan jooga oo aan akhlaaqda lahayn ay gabdhaha asturan oo dhawrsan xuman iyo sino ku ganaan, Allaahna dadka noocaas ah wuxuu ku ridey nacalad iyo in naxariista Alle laga fogeeyo oo ay cadaab daran leeyihiin, adduunkana wuxuu ku ciqaabay in aan markhaatigooda laga aqbalin, siddeetan jeedalna lagu dhufto, ayna yihiin faasiqiin daacadda Alle ka baxay. Wuxuu Allaah aayadahaas ku yiri:

((KUWA LA YIMID BEEN ABUURASHADA (CAA'ISHA) WAA KOOX IDINKA MID AH, HANA UMALAYNINA IN AY SHAR IDIIN TAHAY EE WAXAY IDIIN TAHAY KHAYR, QOF WALBA OO IYAGA KAMID AHNA WAXA UU LEEYAHAY WUXUU KASBADAY OO DAMBI AH, KAN ARRINTA WEYNANKEEDA TAWALIYEY (IBNU UBEY) OO IYAGA KA MID AHNA WAXA UU LEEYAHAY CADAAB WAYN, MAXAAD MARKAAD MAQASHEEN MU'MINIINTA IYO MU'MINAATKU UGU MALAYN WAAYEEN NAFTOODA KHAYR OO AYSAN U DHIHIN KAASI WAA BEEN ABUURASHO CAD, MAXAYSE ULA IMAAN WAAYEEN (MUNAAFAQIINTU) AFAR MARKHAATI AH, HADDAYSAN LA IMAAN MARKHAATI KUWAASI ILAAHAY AGTIISA IYAGAA BEENAALAYAAL AH, HADDAYSAN JIRIN FADLIGA ALLE IDIIN TAABAN LAHAA WIXII AAD DHEX DABAALATEEN SABABTIIS CADAAB WAYN, MARKAAD CARRABKIINA KULA KULMAYSEEN (KU KALA QAADAYSEEN) OO AAD AFKIINA KU LAHAYDEEN WAX AYDAN OGAYN, UNA MALAYNAYSEEN WAX FUDUD ISAGOO ALLE AKTIISA KU WAYN, MARKAAD MAQASHEEN MAAD DHAHDAAN NOOMA HABOONA IN AAN KU HADALNO WAXAAN, ALLAA XUMAAN KA NASAHANE WAXAANI (QADAFKU) WAA BEEN ABUURASHO WAYN, ALLE WAXA UU IDIN KA WAANINAYAA INAAD U NOQOTAAN ISAGOO KALE WALIGEED HADDII AAD MU'MINIIN TIHIIN, ALLENA WAA IDIIN CADDEEYEY AAYADKII, ALLENA WAA (ALLE WAX WALBA) OG OO XAKIIM AH (FAL SUUBAN), KUWA JECEL INAY KU FAAFTO XUMAANTA MU'MINIINTA DHEXDOODA WAXAY LEEYIHIIN CADAAB DARAN ADDUUN IYO AAKHIRO, ALLENA WAA OG YAHAY IDINKUSE MA OGIDIN, HADDAYSAN JIRIN FADLIGA ALLE IDIIN GALAY IYO NAXARIISTIISA IYO IN ALLE YAHAY TURID BADANE NAXARIISTA (WUU IDIN KA ABAAL MARIN LAHAA INTIINII KA WAY QAADATAY FALKAA XUN)). (Suuratu-Nuur 11-20).

Ka dib waxaa xadkii qadafka laga oofiyey oo 80 jeedal lagu dhuftay saddex qof oo asxaabtii ka mid ahaa oo dacaayaddaas dhex dabbaashay, waxa ayna kala ahaayeen: Misdhax, Xasaan binu Thaabit iyo Xamna bintu Jaxshi.

Ninkii munaafaqa ahaa ee arrinta oo dhan been abuuratay lama jeedalin, sababtana waxa ay culimadu dhaheen: Xadka laga oofiyo qofka dembiga ayuu ka fududeeyaa, isagana (Cabdullaahi binu Ubay) Alle ayaa isaga oo adduunka jooga u yaboohay cadaab, iska deyntiisana xikmado badan oo Alle iyo Rasuulkiisu garanayaan ayaa ku yirey.

DIRITAANKII CIIDAMEED EE KU XIGEY BANII MUSDHALIQ

1. Wuxuu Rasuulku SCW direy bishii Shacbaan, sannadkii 6aad ee hijriga ciidan uu hoggaaminayey Cabdiraxman binu Cawf, wuxuuna u direy qabiilka la yiraahdo banii Kilaab, wuxuu Rasuulku SCW u dardaarmay Cabdiraxman arrimo ku saabsan dagaalka, wuxuuna ku yiri "haddii ay ku adeecaan (islaamaan) guurso gabadha uu dhalay ninkooda madaxda ah". Cabdiraxman iyo ciidankiisii waxay ka ambabaxeen Madiina, markii ay gaareen meeshiii ay qabiilkaasi degganaayeen way degeen, waxayna islaamka ugu yeerayeen saddex maalmood, markaas ayey islaameen. Ka dib Cabdiraxman wuxuu guursaday gabadh uu dhalay ninkii odeyga u ahaa oo la oran jirey Tamaadar bintu Asfaq.

2. Sidoo kale wuxuu Rasuulku SCW direy isla bishii Shacbaan ee sannadkii 6aad ee hijriga ciidan uu hoggooaaminayo Cali binu Abii-dhaalib, wuxuuna u direy qabiilkii la oran jirey banii Sacad banii Bakar oo ciidammo ururinayey yahuuddii Khaybar degganayd. Wuxuuna dhammaa ciddankaas 200 oo nin, waxayna socon jireen habeenkii maalinkiina way degi jireen. Markii ay dhex marayaan ayey qabteen nin qabiilku ay Khaybar iyo yahuud u dirsadeen, markii ninkii la wareystayna wuxuu u sheegay in Khaybar loo diray si uu yahuudda Khaybar ugu bandhigo in ciidan loo soo diro iyaguna ay timirta Khaybar wax ka bixiyaan. Ninkii ayey markaas kaxeysteen si uu u tusiyo meesha ay cadowgu ku shirayeen. Qabiilkii reer banii Sacad markii ay ciidankii muslimiinta maqleen way kala yaaceen. Ciidankii muslimiintu waxa ay meeshii ka soo

kaxeysteen 500 oo geel ah iyo 2,000 oo ari ah, dabadeedna waxa ay ku soo laabteen Madiina.

3. Waxaa iyana sidoo kale dhacay bishii Shawaal isla sannadkii 6aad ee hijriga in kooox rag ah oo u dhashay qabiilooyinka la kala yiraahdo Cukal iyo Cureyna ay soo islaameen oo Madiina yimaadeen. Maalmo markii ay Madiina joogeen ayey jirradeen, markaas ayuu Rusuulku SCW wuxuu u direy geel sadaqo ahaa oo magaalada duleedkeeda loogu hayey, wuxuuna amray in ay isku darsadaan caanaha iyo kaadida geela oo ay cabbaan. Markii ay sidii yeeleen oo caafimaadeen ayey ninkii geela ilaalinayey dileen, geeliina dheceen. Warkii ayaa Rasuulka SCW soo gaaray, markaas ayaa Rasuulku SCW ka daba direy ciidan ka kooban 20 nin oo uu madax u ahaa Kuras binu Jaabir. Kuras iyo ciidankiisii way ka daba tageen, muddo dabadeedna iyaga oo wada ayey keenee. Wuxuu markaa Rasuulku SCW amray in nimankaas lugaha iyo gacmaha la jaro, indhahana maddane dabeysan looga soo saaro. Dabadeedna waxaa lagu tuuray kulaaleyda Madiina iyaga oo ku dhawaaqaya "biyo" ilaa ay ka naf baxeen, taas oo ahayd abaal marintoodii maxaa yeelay way riddoobeen, ninkii muslimka ahaa ee Rasuulka SCW geela u hayeyna way dileen, geeliina way dheceen. Waxay isku darsadeen gaalnimo, dil iyo tuuganimo. Allaahna waxa uu qur'aankiisa ku yiri isaga oo tilmaamaya arrinkooda iyo kuwa la midka ah sida qaadhicu dariiqiinta wadada istaaga oo dadka dila xoolahana dhaca sidan:

((ABAAL MARINTA KUWA LA DAGAALAMA ALLE IYO RASUULKIISA OO DHULKA FASAAD KULA SOCDA WAA IN LA DILO AMA LA SALBIYO AMA GACMAHA IYO LUGAHA IS DHAAF LOO GOOYO AMA DHULKA LAGA MUSAAFIRIYO, TAASINA WAXAA WEEYE IN AY LEEYIHIIN ADDUUNKA DULLE, AAKHIRANA CADAAB WAYN)), (Suuurtul-Maa'ida 33).

HESHIISKII XUDEYBIYA

Heshiiskan wuxuu dhacay bishii Dul-Qacdi sannadkii 6aad ee hijriga. Sababtiisuna waxay ahayd markii ay najaxday dacwadii islaamka, Rasuulkuna SCW uu kala xalliyey acdaa'dii Ilaahay ee islaamka ku soo qamaameysey haddii ay noqon lahaayeen yahuudii Madiina degganayd iyo cawaantii carbeed ee baadiyaha ku nooleyd, dadkii muslimiintuna ay awood yeesheen ayey muslimiintii u baahdeen in ay masjidka xumada leh tagaan oo soo cumreystaan. Masaajidkaas waxaa laga hor joogey oo loo diidayey in ay ku soo cibaadeystaan lix sano. Rasuulku SCW wuxuu manaam ku arkay isaga iyo asxaabtiisa oo galay masjidkii xurmada lahaa, furihii kacbadana qaaday oo ay dhawaafayaan, ayna cimreysanayaan, qaarkoodna madaxa xiirteen, qaarkoodna gaasadeen. Rasuulku SCW wuxuu arrintaa u sheegay asxaabtii, markaas ayey farxeen, waxa ayna u maaleeyeen in ay isla sannadkaas gelayaan. Wuxuu Rasuulku SCW markaas asxaabta u sheegay in uu baxayo oo cimro aadayo, wuxuuna kaxeystay ciidan gaaraya 1400 oo nin, Madiinana wuxuu ugu tegey Cabdullaahi ibnu umi Maktuum ama Numayla Laythi, xaasaskiisiina wuxuu kaxeystay Ummu Salama, waxayna isaga iyo ciidankiisii Madiina ka bexeen maalin Isniin ah, bishiii Dul-Qacda, sannadkii 6aad ee hijriga, ujeeddadooduna waxa ay ahayd in ay soo cumreystaan, hubkoodana way qaateen maxaa yeelay qureysh la iskuma aamino karin.

Rasuulku SCW markii uu marayo meesha la yiraahdo Dul-xuleyfa, oo dadka dhinaca Madiina ka yimaaddaa xajka ku xirtaan, ayuu hadyigiisii qoor xiray, cumrana xirtay, qureyshna wuxuu u direy nin si uu u ogeysiiyo in uusan dagaal u socon. Ninkii ayaa markaa soo laabtay, wuxuuna Rasuulka SCW u soo sheegay in ay isu diyaarinayaan dagaal oo ay doonayaan in ay xaramka u diidaan Rasuulka SCW. Wuxuu markaa Rasuulku SCW la tashaday asxaabtiisii. Abuubakar ayaa markaa hadlay oo yiri "Alle iyo

Rasuulkiisa ayaa u aqoon badan, waxa aan annagu u nimid in aan cumraysanno oo keli ah ee uma aannan imaan in aan cid la dagaallanno hase yeeshee ciddii annaga iyo xaramka na kala dhex gasha waan la dagaallamaynaa".

Qureysh markii ay maqashay in Rasuulkii SCW soo baxay ayey qabteen fadhi ay uga hadlayeen tallaabadii ay qaadi lahaayeen, waxa ayna ugu dambayntii go'aansadeen in muslimiinta loo diido xaramka, dabadeedna way is diyaariyeen, waddadii Makka soo gelaysay ee Rasuulku SCW soo hayeyna waxa ay dhigeen ciidan fardooley ah oo uu madax u ahaa Khaalid binu Waliid, tiradooduna ahayd 200 oo nin. Khaalid iyo ciidankiisii waxa ay fadhiisteen meesha layiraahdo kuraacul-qamiim oo waddadii ku taala, dabadeedna waxa ay arkeen ciidankii muslimiinta oo salaad duhur tukanaya oo rukuucsan. Markaas ayuu Khaalid yiri "markii ay ku jireen (salaada) haddii aan ku duuli lahayn waan baabi'in lahayn", markaas ayaa loo sheegay in salaad ay taas ka jecel yihiin u soo socoto, (taasoo ah salaada casar). Wuxuu markaa Khaalid go'aansaday in markii ay muslimiintu galaan salaadda Casar uu weerar ku qaado hase yeeshee Allaah SW oo wax walba la socda ayaa soo dejiyey aayadaha ka hadlaya sida loo tukado Salaatul-khawfka, wuxuuna yiri:

((MARKAAD (NABIYAW SCW) KU DHEX JIRTO (MUSLIMIINTA) OO SALAADDA AAD OOGTO HAKULA ISTAAKTO (KULA TUKATO) KOOX KAMID AH HANA QAATEEN HUBKOODA, MARKAY SUJUUDAAN (TUKADAAN) HA AHAADAAN GADAAL (OO HA SOO BADELAAN KOOXDII CADAWGA WAARDIYEYNAYSAY) HANA TIMAADO KOOXDII KALE EE AAN TUKAN OO HAKULA TUKATO HANA QAATAAN DIKTOONIDOODA IYO HUBKOODA, WAXAY JECELYIHIIN KUWA GAALOOBAY IN AAD HILMAANTAAN HUBKIINA IYO ALAABTIINA OO AY IDIN SOO WEERARAAN HAL MAR, KORKIINANA DAMBI MA AHAANIN HADDUU IDINKU SUGAN YAHAY DHIB ROOB DARTII AMA AAD TIHIIN KUWA XANUUNSAN INAAD HUBKIINA DHIGATAAN, QAATANA DIGTOONIDIINA ALLENA WAXA UU GAALADA U DARBAY CADAAB ILHAAMEEYA (DULLEEYA)), (Suuratu-Nisaa' 102).

Aayadahani waxa ay tilmaameen xaaladdii ay Rasuulka SCW iyo asxaabtu markaas ku sugnaayeen oo ahayd in cadowgu ka xigey dhinaca qiblada, laakiiin haddii cadowgu xigo dhinac kale oo aan qiblada ahayn, sidii loo tukan lahaa waxaa sheegay axaadiista Rasuulka SCW oo waxaa weeye: labo qaybood ayey isu qaybinayaan, qayb cadowga ilaalisa iyo qayb salaadda gasha, markii ay hal rakco imaamka la tukadaan ayey rakcadda labaad dhammaystiranayaan oo kuwii kale soo beddelayaan, imaamkuna rackadda labaad ayuu ku sugayaa qolada dambe, markiii uu rakcaddaa tujiyana wuxuu ku sugayaa Attaxiyaatka, markii ay rakcadda 2aad dhammeystaana isku mar ayey salaadda ka baxayaan iyaga iyo imaamku. Haddiise dagaalku socdo oo ay ciidammadu is dhex galaan, nin walba sidii uu awooodo ayuu u tukanayaa.

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu dhinaca midig uga leexday waddadii uu hayey oo Makka gelaysay ilaa uu ka garay meesha la yiraahdo Xudeybiya.

Khaalid markii uu arkay in ciidankii muslimiintu ka leexdeen waddadii ayuu nin qaylo dhaamis ah u direy Makka. Rasuulku SCW markii uu marayo meesha la yiraahdo Thaniyatu-Miraar ayey hashiisii fariisatay, markaas ayaa asxaabtu dheheen "hashii baa fariisatay", markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "waxaa xabbisay wixii xabisay maroodigi (Xaabbisu-Fiil)". Ka dib wuxuu yiri Rasuulku SCW "Allihii naftaydu gacantiisa ku jirtey baan ku dhaartaye haddii ay i weydiistaan arrin ay ku weyneynayaan xurumaadka Alle waan siinayaa", ka dib hashii way sii socotay ilaa ay tagtay Xudeybiya oo ay degeen. Dabadeed waxaa Rasuulka SCW u yimid nin la oran jirey Baddiil bin Warqaa, wuxuuna ku yiri "waxa aan ka imid Kacab binu Lu'lu' (qureysh) oo kuu diyaarisay ciidan si ay kuula dagaallamaan kaagana celiyaan (kacbada)", markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "annagu uma aannaan imaan in aan la dagaallanno qof ee waxa aannu u nimid in aan cimraysanno, qureyshna waxa dhibay oo hoojiyey dagaal, haddii ay doonaan aniga iyo dadka ayey isku kaaya deyn lahaayeen, haddii ay doonaanna waxa ay geli lahaayeen

wixii ay dadku galeen (islaamka), haddii ay diidaan wax aan dagaal ahayn Allihii naftaydu gacantiisa ku jirtey baan ku dhaartaye arrinkayga ayaan kula dagaallamayaa ilaa aan kala waran jiidno (quusano)". Badiil wuxuu yiri "waan gaarsiinayaa waxa aad tiri", markaas ayuu baxay oo qureysh ku laabtay oo ku yiri "ninkaas baan idinkaga imid (Rasuulka SCW), waxa aanna maqlay isaga oo leh hadal, haddii aad doontaanna waan idiin dheegi", markaas ayaa kuwii maangabka ahaa ee qureyshtu dheheen "ma doonayno in aad wax nooga sheegto" hase ahaatee kuwoodii wax garadka ahaa ayaa yiri "keen wixii aad maqashay", markii uu u sheegay hadalkii uu Rasuulka SCW ka soo maqlay aye Rasuulka SCW u direen nin la oran jirey Makras binu Xafsin.

Rasuulku SCW markii uu arkay ninkaas oo soo socda ayuu yiri "ninkaani waa ballan laawe", markii uu yimidna wuxuu Rasuulku SCW ku yiri ninkaas intii uu Baddiil ku yiri oo kale, ka dibna ninkii wuu laabtay oo qureysh ayuu u sheegay hadalkii, markaas ayaa nin la oran jirey Xuleys binu Calqama yiri "bal aniga ii daaya aan u tagee", markaaas ayey dheheen "u tag", markii uu Rasuulku SCW arkay ninkaas oo soo socda ayuu asxaabtiisii ku yiri "ninkaani waa hebel, wuxuuna ka mid yahay ragga hadyiga weyneeya ee u soo saara hadyiga", markuu ninkii arkay hadyigii iyo raggaan xaramka u socda ee aan wax dagaal ah u jeedin ayuu yiri "ma habbona in kuwaan loo diido Beytka", wuxuna ku laabtay qureysh oo ku yiri "waxa aan soo arkay hadyi la soo qoor xiray, mana arko in loo diido", hase ahaatee queysh way ka hor yimaaddeen fikraddiisii. Waxaana markaa hadlay nin la oran jirey Curwa binu Mascuud oo yiri "kani (Rasuulka SCW) wuxuu idiin soo bandhigay khiddo wanaagsan ee aqbala, anigana ii daaya aan u tagee". Markaas ayey "u tag", markii uu yimid ayuu Rasuulka SCW la fariistay oo la hadlay, Rasuulkuna SCW wuxuu u sheegay hadalkii uu kuwii hore u sheegay, markaas ayuu Curwa yiri "bal ka warran Maxammedow haddii aad tolkaa dabar goysid, ma maqashay Nin carab ka mid ah oo tolkiis baabi'iyey adiga hortaa, haddii ayse tan kale dhacdo (lagaa guuleysto) waxaan arkaa wejiyaal loo abuuray (asxaabta) in ay kaa cararaan oo kaa tagaan". Markaas ayaa Abuubakar Sidiiq u jawaabay oo ku yiri "ku dheg buuryada Laata, ma annaga ayaa ka cararayna (Rasuulka SCW)?", wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye haddii uusan jiri lahayn abaal aad ii gashay waan kuu jawaabi lahaa". Ka dib Curwa wuxuu sii watay hadalkiisii uu Rasuulka SCW la hadlayey, mar kasta oo uu Rasuulka lahadlayana wuxuu qabanayey Rasuulka SCW garkiisa, Rasuulka SCW dudhiisana waxaa taagnaa Muqiira binu Shucba oo uu Curwa adeer u ahaa oo duub xiran, seefna gacanta ku haysta, wuxuuna Muqiira samaynayey mar kasta oo Curwa laaco garka Rasuulka SCW seefta ayuu gacanta uga dhufanayey wuxuuna ka lahaa "ka daa gacanta garka Rasuulka SCW", markii dame ayuu Curwa inta madaxa kor u qaaday yiri "waa kuma kani?", waxaa la yiri "waa Muqiira binu Shucba", markaas ayuu Curwa yiri "nacaskiiyow miyaanan ahayn kii diyadaadii weli gudayey", taas oo ula jeedo niman uu Muqiira diley intii uusan islaamin ka hor oo uu magtoodii gudey. Ka dib Curwa wuxuu ku laabtay qureysh wuxuuna ku yiri "Ilaah baan ku dhaartaye waxa aan wafdi ahaan ugu tegey Qaysar iyo Kisraa iyo Najaashi. Ilaah baan ku dhaartaye ma arag boqor ay dadkiisu u weyneynayaan sida ay asxaabta Maxammed u weyneynayaan Maxammed. Ilaah baan ku dhaartaye ma uusan tufeyn candhuuf ilaa nin ayaa gacanta u dhiganayey oo wejiga iyo jirka marsanayey, haddii uu amrana way u kala tartamayeen amarkiisa, haddii uu weyseystana waxa ay ku siganayen in ay isku dagaallamaan weysadiisa, haddii uu hadlana hoos ayey codkooda u dhigayeen, fiirmadana kuma dhammaynayn weyneyn ay weyneynayaan darteed. Haddaba waxa uu idiin soo bandhigay ninkaasi (Rasuulka SCW) yeela".

Odeyaashiina way u riyaaqeen, laakiin qaar ka mid ah dhallinyaradii queysheed ayaa markii ay arkeen in odeyaashii heshiis doonayaan waxa ay sameeyeen arrin ay ku doonayaan in ay heshiiska ku joojiyaan oo dagaal ku ridaan. Arrintaasina waxa ay ahayd in ay habeenkaas baxaan oo tagaan meesha uu ciidanka muslimiintu degganaa oo ay dagaal huriyaan. Waxaana habeenkii soo baxay 30 nin oo doonayey in ay arrinkaas fuliyaan hase yeeshee Maxammed binu Maslama oo ahaa madaxa ciidanka ilaalada muslimiinta ayaa nimankii dhammaantood gacanta ku dhigay oo Rasuulka SCW

u keenay. Rasuulku SCW wuu iska sii daayey nimankii maxaa yeelay dagaal uma uusan imaan, wuxuuna doonayey cumro. Allaahna SW isaga oo tilmaamaya sida uu u kala badbaadiyey dagaalka labada qolo waqtigaas wuxuu yiri:

((ALLE WAA KII GACMAHOODA IDINKA REEBAY KUWIINANA KAREEBAY MAKKA GUDAHEEDA KA DIB MARKUU IDIN MAKANSIIYEY KORKOODA (AAD QABATEEN), ALLENA WAXA AAD CAMAL FALAYSAAN WAA ARKAA)), (Suuratul-Fatxi 24).

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu go'aansaday in uu nin u diro qureysh si uu u xoojiyo go'aankiisii oo qureysh u tusiyo ujeeddada uu safarkaan ka lahaa, wuxuu markaas Rasuulku SCW u yeeray Cumar binu Khadhaab si uu Makka ugu diro. Markaas ayaa Cumar yiri "Rasuulkii Allow Makka iima joogo qof reer banii Kacab ah (xigtada Cumar) oo ii ficiloonaya haddii la i dhibo ee dir Cusmaan binu Cafaan isaga ayaa xigtadiisu joogtaaye, wixii aad doontana gaarsiinaya". Wuxuu markaa Rasuulku SCW qureysh u direy Cusmaan binu Cafaan wuxuunana ku yiri "u sheeg in aannaan dagaal u socon oo aan cumro u nimid, islaamkana ugu yeer". Sidoo kale wuxuu Rasuulku SCW Cusmaan amray in uu u tago ragga iyo dumarka muslimiinta ah ee Makka jooga oo uu ugu bishaareeyo fatxi una sheego in Alle uu Makka diintiisa ku daahirin doono oo uusan qofna iimaankiisa ku dhex qarsan doonin.

Cusmaan wuu soo baxay wuxuuna soo maray ciidankii qureysh oo jooga meel la yiraahdo Baldax, markaas ayey dheheen "xaggee ayaad u socotaa?", wuxuu yiri "Rasuulki Alle ayaa ii soo direy arrinkaas", waxa ay dheheen waa wanaagsanyahay hadalkaagu ee fuli dantaada. Waxaa raacay nin la oran jirey Abbaan binu Saciid binu Caas si uu u ilaaliyo ilaa uu Makka ugu tago odeyaashii qureysheed oo uu farriinta ka gaarsiiyo. Ka dib markii Cusmaan u tegey odeyaashii qureysheed oo arrintii lala soo direy uu u gudbiyey ayey waxa ay u soo bandhigeen in uu kacbada dhawaafo hase yeeshee Cusmaan wuu diidey oo wuxuu yiri "dhawaafi maayi ilaa uu Rasuulkii Alle ka dhawaafo". Ka dib Cusmaan way celiyeen sababta ay u celiyeena waxaa la arkaa in ay arrimahaa kala niqaashayeen, Ilaah baase ku cilmi leh.

Markii maqnaanshihii Cusmaan dheeraaday ayaa muslimiintii waxaa gaaray in Cusmaan la diley, markaas ayuu Rasuulku SCW asxaabtii ku yiri "tegi mayno ilaa aan nimanka foodda is darno", wuxuuna asxaabtiisii ka wada qaaday Beyco, taas oo ahayd in aysan cararin oo ay dagaallamaan weliba qaar ka mid ihi waxa ay kula mubaayacoodeen dhimasho.

Rasuulku SCW markii uu asxaabtii oo dhan ka qaaday beycadii ayuu gacanta is qabtay oo yiri "tanina (beycadani) waa Cusmaan". Markii beycadii dhammaatay ayuu Cusmaan yimid oo isna Rasuulka SCW la mubaayacooday. Waxaa la yiraahdaa ciidankii Rasuulka SCW la socday waxaa beycadaas ka maqnaa nin munaafaq ahaa oo dhuuntay, ninkaas waxaa la oran jirey Jadu binu Qays. Beycadaas waxaa lagu qaadayey geed hoostiis, waxaana loo yaqaannaa Beycatu-Ridwaan maxaa yeelay Allaah wuu ka wada raalli noqday dadkii beycadaas galay, wuxuuna arrintaas isaga oo tilmaamaya qur'aankiisa ku yiri:

((ALLE WAA KA RAALI NOQDAY MU'MINIINTA MARKAY KUGULA MUBAAYACOONAYEEN GEEDKA HOOSTIISA, WUXUUNA OGAADAY WAXA QULUUBTOODA KU SUGAN MARKAASUU KU SOO DAJIYEY XASILOONI, WUXUUNA KU ABAAL MARIYEY FATXI DHAW (KHAYBAR)), (Suuratul-Fatxi 18).

Rasuulku SCW waa uu u bishaareeyey dadkii baycadaas ka qayb galay oo wuxuu yiri "idinkaa ugu khayr badan waxa dhulka dushiisa ahaaday", sidoo kale waxa uu yiri "dadka geedkaan hoostiisa igula mubaayacooday qof kamid ihi naar gali uu mahayo

haddii Alle idmo".

Cumar binu Khadhaab ayaa markii uu khilaafada islaamka hayey arkay geedki Beycatu-Ridwaan ka dhacday oo la barakaysanayo oo dadka juhalada ihi markii ay agmarayaan ay ka fadilayaan geedaha kale oo hoos fariisanayaan, markaas ayuu amray in la gooyo.

Qureysh waxa ay si degdeg ah u soo dirtay nin la oran jirey Sahal binu Camar si uu heshiis ula soo saxiixdo Rasuulka SCW, waxa ayna ku soo dheheen "sannadkan ha naga laabto maxaa yeelay CaRabbi ku sheekaysan mayso in uu xoog ku galay xaramkii". Rasuulku SCW markii uu arkay Sahal binu Camar oo soo socda ayu asxaabtii ku yiri "arrinkiinnii Alle waa idiin dududeeyey mar haddii ay ninkaan soo direen heshiis bay doonayaan". Sahal markii uu yimid in badan ayey Rasuulka SCW iyo isagu wada hadlayeen, ugu dambayntiina waxaa la isku waafaqay heshiis. Qodobbada heshiisku waxa ay ahaayeen sidan:

1. In Rasuulka SCW iyo ciidankiisu sannadkan laabtaan oo aysan Makka iyo xaramka gelin, sannadka soo socda haddii la gaarana ay yimaadaan oo ay saddex beri xaramka joogaan, hubna aysan la soo gelin ilaa hubka socotada maahane, seefuhuna ay galka ku jiraan, wax dib ahna aysan samayn.

2. Dagaal in la joojiyo 10 sano, oo amni la isa siiyo

3. In ciddii doonta heshiis Rasuulka SCW la geli karto, ciddii doontaana qureysh la geli karto heshiis. Qabiilkii labada dhinac midkood raacana in loo aqoonsado in uu qoladaas ka mid yahay, colaaddii lagu qaado qabiilkii dhinac raacana ay la mid tahay colaad lagu qaaday dhinicii kale.

4. Ninkii qureysh ka soo baxsada oo soo islaama in loo celiyo qureysh, ninkii islaamka ka riddooba oo qureysh u baxsadana aan la soo celin.

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu u yeeray Cali binu Abii-dhaalib si uu u qoro heshiiska. Cali heshiiskii ayuu qorayey, Rasuulkuna SCW wuu u yeerinayey, wuxuuna yiri Rasuulku SCW "qor Bislmillaahi Raxmaani Raxiim", markaas ayaa Suheyr yiri "Ilaah baan ku dhaarannaye ma garannayno Raxmaan wuxuu yahay ee qor Bismikallaahumma", markaas ayuu Rasuulku SCW amray Cali in uu sidaas u qoro, ka dibna wuxuu u yeeriyey "Tani waa arrimihii uu kula heshiiyey Rasuulkii Alle ee Maxammed", markaas ayuu Suheyr yiri "haddii aan og nahay in aad Rasuulkii Alle tahay xaramka kuuma diidneen kulamana dagaallanneen ee qor Maxammed binu Cabdullaahi", markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "waxa aan ahay Rasuulkii Alle haddaad doontaan i beeniyee ", ka dibna Cali ayuu amray in uu ereyga Rasuulullaah tiro oo qoro Maxammed binu Cabdullaahi hase yeeshee Cali waa diidey in uu Rasuulullaah tiro. Rasuulka SCW ayaa markaas yiri "i tusi", markii la tusiyeyna isaga ayaa tirey. Sidaas ayaa warqaddii loogu qoray qodobbadii heshiiska.

Waxaa intii warqadda la qorayey Makka ka yimid wiil uu dhalay Suheylka Rasuulka SCW heshiiska la saxiixayey oo la oran jirey Abuu Jandal binu Suheyl oo ka mid ahaa muslimiintii dadkoodu Makka ku cadaadinayeen. Abuu Jandal wuxuu jiidanayey xarkihii uu ku xirxirnaa. Suheyl ayaa markaas yiri "tani ayaa ugu horreysa waxa aan kugula heshiiyey in aad i celiso", markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "weli ma aynaan dhammayn warqaddii", markaas ayuu Suheyl yiri "Ilaah baan ku dhaartaye in aanan marka waxba kugula heshiineyn weligeed", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "aniga ii daa marka", wuxu yiri "kuu deyn maayo". Ka dib Suheyl Abuu Jandal ayuu kexeystay isaga oo ku jiidaya xarkihii uu ku xirnaa. Abuu Jandalow sabir oo ajar gurubso, Alle wuxuu yeelayaa faraj adiga iyo dadka kale ee mestadcafiinta ah, annaguna waxa aan nimanka la galnay heshiis oo waxaan siiney iyaguna na siiyeen ballantii Alle, mana jebineyno". Cumar binu

Khadhaab ayaa markaa garab socday Abuu Jandal isaga ooo ku leh "iska sabir Abuu Jandalow iyaguna waa mushrikiin oo qofkood dhiiggiisu waa dhiig Ey", wuxuuna Cumar u raariciyey seeftiisii, wuxuuna yiri "waxa aan rabay in uu seefta igala baxo oo aabbihiis ku dhufto hase yeeshee ninku aabbihiis wuu u turay".

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu asxaabtii amray in ay hadyigooda gowracaan hase yeeshee qofna ma ajiibin maxaa yeelay waxa ay ka careysnaayeen heshiiskan gaalada lala galay. Markii uu saddex jeer ku celiyey oo qofna ajiibi waayey ayuu istaagay oo u galay xaaskiisii Ummu Salama arrintiina u sheegay, markaas ayey tiri "Rasuulkii Allow bax oo qofna ha la hadlin ilaa aad neefkaaga gowracdo, timo jarahaagana u yeerato oo uu kuu xiiro". Markaas ayuu Rasuulkii SCW baxay oo isaga oo aan qofna la hadlin neefkiisii gowracday, timo xiirana u yeertay. Asxaabtii markii ay arkeen ficilka Rasuulka SCW ayey kaceen oo hadyigoodii gowraceen, timihiina qaarba qaarka kale u xiiray, waxayna maalinkaas hadyi ahaan u gawraceen Todobo geel ah iyo Todoba lo ah, Rasuulkuna SCW waxa uu gawracay riti uu lahaa Abii Jahal oo dagaalkii Badar lagu furtay.

Waxaa Rasuulka SCW ka dib u yimid dumar mu'minaat ah oo ka soo cararay Makka, markaas ayey dadkii xigtadooda ahaa ka daba yimaadeen, hase yeeshee Rasuulku SCW wuu u diidey maxaa yeelay heshiisku rag keliya ayuu ahaa oo dumarka in la celiyo kuma jirin. Allaahna isaga oo arrintaa xoojinaya wuxuu soo dejiyey aayaddan:

((KUWA MU'MINIITA AHOW HADAY IDIIN YIMAADAAN GABDHO MU'MINAAT AH OO SOO HIJRODAY IMTIXAAMA (IN AY DHAB KA TAHAY IYO IN KALE) ALLENA WAA OG YAHAY IIMAANKOODA, HADII AAD OGAATAAN IN AY MU'MINAAT YIHIIN HA U CELININA (GAALADA) MEHERKOODII (AY HAWEENKAN KA BIXIYEEN) DAMBINA KORKIINA MA AHAANIN IN AAD GUURSATAAN (HAWEENKAAS) HADII AAD MEHERKOODA SIISAAN, HANA HAYSANINA KUWA GAALADA AH NIKAAX ISKUMA KIIN QABTEE, WAYDIISTA (GAALADA) WAXAAD (MEHER) U BIXISEEN IYANA HA IDIN WAYDIISTAAN WAXAY (MEHER) U BIXIYEEN, WAANA KAAS XUKUNKII ALLE KU XUKUMAY DHEXDIINA, ALLENA WAXA UU AHADAY (ALLE) CALIIM AH (WAX WALBA OG) OO XAKIIM AH (FAL SUUBAN)), (Suuratul-Mumtaxina 10).

Rasuulku SCW wuxuu markaa guda galay in uu imtixaanayo (dumarka), tii ka soo baxdana in uu shuruudihii kula mubaayacoonayo, mana gacan qaadayn ee afka ayuu kula mubaayacoonayey. Sida ay Caa'isha sheegtay Rasuulka SCW gacantiisu ma taaban naag ajnabi ka ah gacanteed. Markii ay aayadahaasi soo degeen ka dib oo muslimiintii iyo gaaladii la kala xarrimay ayey asxaabtii wada fureen haweenkii gaalada ahaa ee ay qabeen. Cumar binu Khadhaab wuxuu furay labo haween ah oo gaalo ahaa oo Makka joogey, ka dibna waxaa kala guursaday Mucaawiye binu Abii Sufyaan iyo Safwaan binu Umaya oo gaalo ahaa waqtigaas.

Ciidankii muslimiintu aad ayuu uga xumaaday heshiiskii qureysh, waxayna u arkeen in dhinacooda lagu dulmiyey, waxayna ku soo laabteen murug iyo caga jiid maxaa yeelay waxa ay u haysteen oo riyadii Rasuulka SCW u fasirteen in isla sannadkaas la gelayo Makka. Sidoo kale waxa ay u arkayeen in qureyshi ay Rasuulka SCW ku dirqisay wixii ay rabtey oo iyadoo uu Rasuulku SCW xaq ku taagan yahay, Allaahna ballan qaaday in uu diintiisa kor yeelo la ilhaameystay diintoodii. Raggii arrimahaa aadka uga xumaa waxaa ka mid ahaa Cumar binu Khadhaab, Nabiga SCW ayuuna u yimid isaga oo leh "Rasuulkii Allow miyaanaan xaq ku taagnayn iyaguna Baadhil ku taagnayn?" Rasuulku SCW "haa" ayuu yiri, wuxuu Cumar yiri "sow dadkeennii la laayey janno kuma jiraan, kuwoodii la laayeyna naar kuma jiraan?", Rasuulku SCW "haah" ayuu yiri, Cumar wuxuu yiri "haddaba maxaynu diinteenna dulliga u siineynaa?, aan laabanno ilaa Ilaahay na kala xukmiyo". Markaas ayaa Rasuulu SCW ku yiri Cumar f'ina Khadhaabow anigu Rasuulkii Alle ayaan ahay mana caasinayo, isaga ayaana ii gargaaraya ina dayici maayo weligey", Cumar wuxuu yiri "miyaadan noo sheegin in aan Beytka tegi doonno

oo dhawaafi doonno?", Rasuulku SCW wuxuu yiri "haah waan kuu sheegay, waxa aan kuu sheegay in aan tegi doonno", Cumar wuxuu yiri "may" isaga oo u heysta in ay sannadkaas ahayd, markaas ayuu Rasuulku SCW ku yiri Cumar "waad tegi doontaa waadna dhawaafi doontaa".

Ka dib wuxuu Cumar u tegey Abuubakar oo intii oo kale ku yiri, Abuubakarna sidii Rasuulku SCW ugu jawaabay oo kale ayuu ugu jawaabay, weliba wuxu u raacsiiyey "heyso adeecitaankiisa ilaa aad ka dhimatid, Ilaah baan ku dhaartaye xaq ayuu ku taaqan yahay". Ka dib intii jidka lagu sii jirey waxaa soo degtay Suuratu-Fatxi, markaas ayuu Rasuulku SCW u yeeray Cumar oo ku dul akhriyey, markaas ayuu Cumar yiri "Rasuulkii Allow ma kan ayaa fatxi ah?", markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "haa", ka dib Cumar wuu iska degey, wuxuuna ka qoomameeyey hadal ku celintii Rasuulka SCW, wuxuuna sameeyey camal wanaagsan oo badan oo isugu jirey sadaqo, soon iyo salaad cabsi uu ka cabsanayo ficilkii maalintaa ka dhacay darteed.

Hashiiska Xudeybiya, in kasta oo muuqaalkiisa guud la moodo in waxyaabo lid ku ah muslimiinta ay ku jireen, asxaabtuna aysan jeclaysan waxyaabaha qaarkood, haddana waxa ay xaqiiqdu ahayd in u uahaa nasri weyn oo muslimiinta u soo hoyday iyo Faxi sida uu Allaahba sheegay. Waxaana arrimaha uu nasriga ku ahaa ka mid ah:

1. Qureysh oo aqoonsatay awoodda iyo jiritaanka muslimiinta ee ay awal dafiri jirtey, isla markaana joojisey inku taxalujintii ay isku taxallujin jirtey sidii ay islaamka u dabar goyn lahayd ama dadkii kale ee Jasiiratul-carab degganaa ugu diri lahayd.

2. Qureysh oo faraha ka qaadday ciddii islaamka gelaysa oo nafteeda isku koobtay taas oo ahayd fashil iyo jab ku dhacay qureysh maxaa yeelay waxa ay awal sheegan jirtey in ay carab ku hoggaamiso diin, xaramkii Allena deggan tahay, diinteeduna tahay midda keliya ee saxda ah, islaamkuna yahay bidco aan la aqoon.

3. Qureysh waxa ay ahayd caqabo ummado badan ka hor taagnayd in ay islaamka qaataan markiise ay faraha ka qaadday oo ay la heshiisay aad ayaa islaamka loo soo galay, waxaana loo arkay in ay diintaani xaq tahay oo faafeyso, wax walbana ka sare mari doonto.

4. Qureysh waxa ay oggolaatay in la fidiyo dacwadii islaamka oo ay 13 sano Makka ku hor taagnayd, taas oo ahayd hadafkii ugu weynaa ee ay muslimiintu raadinayeen weligood. In dacwada islaamka dadku xor u noqdaan. Xornimadaas waxa ay dacwadii islaamka u keentay guul weyn taas oo laga garan karo ciidanki msulimiinta ee 3,000 ahaan jirey oo labo sano ka dib markii Rasuulku SCW Makka furanayey 10,000 noqday.

5. Qabiillo iyo dad badan oo awal islaamka u soo geli waayey qureysh sababteed ayaa fursad u helay in ay islaamka soo galaan.

6. Qureysh waxa ay u oggolaatay muslimiinta xaramkii ay 6da sano ka hor taagnayd, taas oo ku tusineysa awood darrida iyo dacfiga ku dhacay, maxaa yeelay way awoodi weyday in ay muslimiinta u sii diiddo xaramka sannadkaas maahane oo isna ay ku andacooday in dadku ay ku sheekeysanayaan Maxammed ayaa xoog xaramka ku galay.

7. Qodobkii ugu darnaa heshiiska ee msulimiintu dhibka u arkayeen oo ahaa ninkii islaamka ka riddooba in aan la soo celin, kii qureysh ka soo islaamana la celiyo waxa ay ahayd xikmadda ku jirtaa qof islaamaka arkay oo iimaanka macaankiisa dhadhamiyey, kana mid noqday asxaabtii Rasuulka SCW, in uu riddoobo oo galnimo doorto way adkayd, Qofkii se taas sameeye kheyr ma leh, faa'iidana kuma jirto in mujtamaca nadiifka ah ee muslimka lagu soo celiyo oo in uu ka dhex baxo ayaa ka kheyr badan in uu ku dhex jiro. Rasuulkuna SCW isaga oo arrinkaas tilmaamaya wuxuu yiri "qofkii

naga aada (qureysh) Alle ha fogeeyo".

Dhinaca kale qofkii reer Makka ka soo islaama oo loo celiyo lama dileyn, haddii ay u badatana qaraabadiisa ayaa ciqaabeysey, waxa ayna ahayd arrin imtixaan ah oo Allaah ku kala saarayey, qofkii islaamku dhab ka ahaa wax kasta oo la mariyo waxba kama dhibeyn, qofkiise uusan dhab ka ahayn ama ujeeddo kale u socday markii loo caga jugleeyo ayuu horay u boodayaa oo gaaloobayaa.

Midda kale dhulka Allaah waa waasic oo Madiina iyo Rasuulka SCW maahane meeshii uu doono ayuu aadi karaa sida dhulka xabashida oo ay muslimiin kale jireen muddaba, xornimana lagu siiyey diintooda. Rasuulkuna SCW isagoo oo tilmaamaya arrinkaas wuxuu yiri "qofkii nooga yimaada (soo islaama) Alle wuxuu u yeeli doonaa faraj". Allaahna wuu u yeelay faraj oo markii Rasuulku SCW ku soo laabtay Madiina oo uu muddo yar joogey ayaa waxaa Madiina yimid oo Makka ka soo cararay in ka mid muslimiintii Makka lagu ciqaabi jirey magiciisana la oran jirey Abuu Bashiir.

Markaas ayey qureysh ka soo daba dirtay Abuu Bashiir labo nin, markii ay labadii nin Madiina yimaadeen ayey Rasuulka SCW ku dheheen "noo dhiib ninkaan waa tii ballan naga dhexaysaye", markaas ayuu Rasuulku SCW u dhiibay, markii ay la sii marayaan meesha la yiraahdo Dil-xuleyf ayey degeen oo la soo baxeen timir ay wateen si ay u cunaan, markaas ayaa Abuu Bashiir labadiii nin midkood ku yiri "Ilaah baan ku dhaartaye hebelow waxa aan seeftaan u arkaa in ay wanaagsan tahay", markaas ayuu soo saaray oo yiri "haa Ilaah baan ku dhaartaye way wanaagsan tahay, waana jarribay oo jarribay". Abuu Bashiir wuxuu yiri "i tusi bal aan eegee", markii uu u dhiibay ayuu ku dhuftay o qoorta u dheereeyey, kii kale ayaa markaa cararay ilaa uu Madiina ka gaaray oo u galay Rasuulka SCW iyo asxaabtii oo masaajidka jooga. Rasuulku SCW markii uu arkay ninkaas baqaha ah oo fiigsan wuxuu yiri "war kani wuxuu soo arkay wax ka aragagixiyey". Ninkii markii uu Rasuulka SCW u soo galay ayuu ku yiri "saaxiibkayna wuu diley aniguan wan ka soo baxsaday".

Ninkii Abuu Bashiir ahaa muddo ka dib ayuu yimid isaga oo seeftiisii wata, wuxuuna Rasuulka SCW ku yiri "Nabigii Allow Ilaah ayaan ku dhaartaye waad oofisay ballantaadii, waadna ii celisay, ka dibna Alle ayaa iga soo koriyey", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "hooyadii ha hoogtee waa kii dagaal hurin lahaa haddii uu cid heli lahaa". Abuu Bashiir markii uu hadalkaas Rasuulka SCW maqlay ayuu fahmay in usan Rasuulku SCW warkiisii yeelin oo uu ballantii ilaalinayo, haddii ay mar kale yimaaddaana (qureysh) uu u dhiibayo, markaas ayuu iska tegey ilaa uu ka gaaray badda ageeda.

Waxaa isna Makka ka soo baxsaday Abuu Jandal binu Suheyl, Madiinana ma tegin ee wuxuu u tegey Abaa Bashiir. Ka dibna waddadaa ayaa furantay oo ninkii Makka ka soo islaamaba wuxuu u tegi jirey Abuu Bashiir ilaa ay koox ka noqdeen, waxayna fariisteen jidkii ay qureysh Shaam u sii mari jirtey markaas ayey wixii safar ah oo qureysh leedahay oo Makka u socda ama ka yimaada qaban jireen oo raggana layn jireen, xoolahoodana dhici jireen ilaa ay reer Makka ciriiri galeen oo waddadii mari kari waayeen, markaas ayey Rasuulka SCW farriin u soo direen ay leeyihiin "nimankaas nooga yeero ciddii ku soo aaddana waa aamin".

Markaas ayuu Rasuulku SCW u cid diray Abuu Bashiir iyo raggiisii oo Madiina yimaadeen, halkaas ayuuuna ku burburay qodobkii ahaa ninkii reer Makka ka soo islaama ha la soo celiyo oo Alle ayaa farajkaas u furay, qofkii dambe oo soo islaamana si toosa ayuu Rasuulka SCW iyo Madiina ugu tegi jirey, waxaana ka mid ahaa dadkii bilowgii sannadkii 7aad ee hijriga sida tooska ah Madiina u yimid oo soo islaamay Camar binu Caas, Khaalid binu Waliid iyo Cusmaan binu Dhalxa. Saddexdaas nin oo ka mid ahaa halyeeyadii qureysh markii ay yimaadeen wuxuu Rasuulku SCW yiri "Makka waxa ay idiin soo tuurtay beerkeeda gaballadiisii".

WARAAQIHII UU NEBI MUXAMED (SCW) U DIRAY BOQORRADA

QORITAANKII WARAAQIHII LOO DIRAYEY BOQORRADA

Markii uu Rasuulku SCW ka soo laabtay Xudeybiya oo uu heshiis la soo saxiixday codawgii islaamka ugu darnaa ee qureysh, oo ka mid ahaa saddexdii qolo oo ugu fitnada iyo cadaawada badnaa mandiqaddaas, duullaankii Axsaabna isku soo bahaystay, ayuu Rasuulku SCW wuxuu bilaabay in uu dacwadii islaamka u bandhigayo, waraaqana u kala dirayo boqorradii iyo madaxdii caalamka, gaar ahaan kuwoodii ugu waaweynaa, isaga oo jihaadkana dhiniciisa ka wada maxaa yeelay dacwada iyo jihaadku ma kala maarmaan, mana dhici karto in la yiraahdo dacwo ayaa la wadayaa, jihaadna looma baahna, waxayna taasi la mid tahay dowlad ciidan la'aan ah ama ciidan hub la'aan ah. Sidoo kale ma dhici karto jihaad ayaa la wadayaa oo dacwo looma baahna, wuxuu Allaah SW ugu talo galay in ay dacwada iyo jihaadku is dhinac socdaan oo caalamka oo dhan la wada gaarsiiyo diinta islaamka, ciddii ka hor timaadda oo isku deyda in ay joojisa dacwada islaamka ama dadka u diidda in la gaarsiiyo diintaas, in lala jihaado oo la edbiyo ilaa ay ka oggolaato. Jihaadku waqti ma leh ilaa saacadda qiyaame laga gaaro.

Haddaba haddii aan dib u jalleecno mawduuceenii, Rasuulku SCW markii uu soo laabtay isaga oo dacwadii iyo jihaadkiii sidii u wada, ayuu wuxuu bilaabay nooc cusub oo dacwada ka mid ah oo ahayd waraaqo uu u kala direy boqorradii iyo madaxdii caalamka, islaamkana ugu yeerayo. Markii uu Rasuulku SCW waraaqahaas bilaabayey ayaa waxaa lagu yiri "boqorradu ma aqbalaan warqad aan tiimbareysnayn", markaas ayuu wuxuu samaystay farraanti qalin ah oo lagu naqshadeeyey MUXAMMADU RasuulU-LAAH, wuxuuna ahaa saddex layn: Muxammed oo sadar ah, Rasuul oo sadar ah iyo Allaah oo sadar ah.

Waqtigii uu Rasuulku SCW waraaqahaas bilaabay waxa ay ahayd bishii Muxarram, sannadkii 7aad ee hijriga. Haddii aynu mid mid u soo qaadanno waraaqahaas iyo jawaabohoodii waxa ay ahaayeen sidan:

WARQADDII LOO DIREY BOQORKII XABASHIDA EE NAJAASHI

Najaashi waxaa magaciisa la oran jirey Axsama binu Abjar, wuxuuna xukumayey dowladdii xabashida, qisadiisana waynu soo marnay sidii uu muslimiinta u soo dhoweeyey iyo caddaaladdiisii, wuxuuna haystay diinta Masiixiga. Warqaddii uu Rasuulku SCW u qorey waxa ay ahayd sidatan:

Ka socota Maxammed, Rasuulkii Alle
Ku socota Najaashi, Madawweynaha Xabashida
Nabadgelyo qofkii hanuunka raaca dushiisa ha ahaato.

Intaas ka dib, anigu waxa aan kugu mahadinayaa Alle, Allihii isaga maahane uusan Alle kale jirin oo ah boqorka Muqaddaska ah, ahna nabadgeliyaha mu'minka iyo ilhaamiyaha. Waxa aan qirayaa in Ciise ibnu ruuxdii Alle iyo kalimaddiisii uu ku riday Maryamatu-batuula, Maryamana ay ku qaadday Ciise ruuxdiisii iyo afuufiddiisii siduu Aadanba ugu abuuray gacantiisa. Aniga waxa aan kuugu yeerayaa Alle keligii oo aan shariik lahayn iyo xiriirinta daacadiisa iyo in aad i raacdid oo rumeysid wixii ii yimid, aniguna Rasuulkii Alle ayaan ahay. Waxa aan kuugu yeerayaa adiga iyo askartaadaba Alle Case-wajalle, waan ku gaarsiiyey (diintii), waana kuu naxteexeeyey. Yeel waanadayda,

nabadgelyana qofkii hanuunka raaca korkiisa ha ahaato.

Laakiin Beyhaqi wuxuu Ibnu Isxaaq ka weriyey in warqaddii Rasuulku SCW u qoray Najaashi ay ahayd sidan:

Tani waa warqaddii ka socotay Nabi Maxammed,
Ku socotay Najaashi Asxam, madaxweynihii Xabashida
Nabadgelyo qofkii hanuunka raaca dushiisa ah ahaato.

Alle iyo Rasuulkiisa rumee, waxa aan qirayaa Alle maahane Alle kale in uusan jirin, keligiisna yahay, shariikna aanu lahayn, aannuna samaysan xaas iyo ilmo; Maxammedna waxaa weeye addoonkiisii iyo Rasuulkiisii. Waxa aan kuugu yeerayaa dacwada islaamka, aniguna Rasuulkiisii baan ahay. Islaam aad nabad geshide. Markaas ayuu aayaddan qur'aanka ahna u raaciyey:

((WAXAAD DHAHDAA KITAABKA EHELKIISIIYAW: U KAALAY KALIMAD AAN U SIMANNAHAY ANNAGA IYO IDINKU OO AH: IN AANNAAN ALLE MOOYEE CID KALE CAABUDIN, OO AANNAAN CIDNA UGU SHARIIK YEELIN, KANA YEELAN QAARKEEN QAARKA KALE RABBIYAAL ALLE KA SOKEEYA, HADDII AY JEESTAAN DHAHA KA MARKHAATI NOQDA ANNAGU IN AAN MUSLIMIIN NAHAY)), (Suuratu Aali-Cimraan 64).

Ka dib wuxuu Rasuulku yiri "haddii aad diido (islaamka) waxaa dushaada ahaday dembiga masiixiyiinta shacabkaaga.

Intaas ayey ku dhammaatay warqaddii uu Rasuulku SCW u qoray Najaashi, waxayna culimada islaamku isku khilaafsanyihiin Labada waraaqood midda uu Rasuulku SCW najaashi u diray, inkastoo ay culimada qaarkood qabaan in labada waraaqoodba uu u diray Najaashi waqtiyo kala duwan, waxayna isku khilaafsan yihiin midda ay ahayd tii uu qoray heshiiskii Xudeybiya ka dib.

Sidoo kale waxay culimadu isku khilaafsanyihiin Najaashiga uu Rasuulku SCW waraaqada u qoray midka uu ahaa: in uu yahay kii islaamay oo la oran jirey Asxab oo Rasuulku SCW ku tukaday janaasada markii geeridisa loo soo sheegay, iyo in uu yahay kii kadambeeyey, waxayna riwaayad saxiixul muslim weriyey sheegaysaa in kan Rasuulku SCW waraaqda u diray yahay kii dambe oo uusan ahayn kii islaamay, inkastoo aysan sheegayn wixii ku yaalay waraaqdaas. Sidoo kale ibnu Qayim waxa uu Saadul-macaadka ku ayidayaa riwaayadda saxiixul Muslim, wuxuu yiri "waa kala Labo Najaashiga islaamay iyo kan uu Rasuulku waraaqda u diray (Xudaybiya ka dib)", wuxuu ibnu Qayim qorayaa Labada waraaqood midda hore, wuxuuna sidoo kale ayidayaa in Najaashiha islaamay uu Rasuulku SCW waraaqda u diray hijradii Labaad oo uu Jacfar ugu sii dhiibay, waxaa iyana arrintaan ayidaya in badan oo culimada islaamka kamid ah, qaar kalena waa ay kasoo horjeedaan oo waxay ayidayaan in Najaashaha uu Rasuulku SCW waraaqda u diray yahay kii islaamay, inkastoo qaar kale oo culimada kamid ihi ay is waafajinayaan Labada arrimood, waxayna dheheen: "Labada Nashaasheba Rasuulku SCW waraaqo ayuu u diray oo midna waa islaamay midna lama oga inuu islaamay iyo in kale". Allaahu aclam.

Rasuulku SCW markii uu dhammeeyey warqaddii wuxuu u sii dhiibay Camar binu Umaya si uu u gaarsiiyo Najaashi. Najaashi markii ay u tagtay warqaddii Rasuulka SCW aad ayuu u ixtiraamay, wuuna ajiibay dacwadii islaamka, wuxuuna ku islaamay gacanta Jacfar binu

Abii-dhaalib oo weli dhulkiisa jirey isaga iyo muslimiintii kaleba. Wuxuu Najaashi u soo diray Rasuulka SCW warqad jawaab ah oo ahayd sidatan:

Ku socota Maxammed Rasuulkii Alle
Ka socota Najaashi Asxam

Nabadgelyo xagga Alle ka timid dushaada ha ahaato Nabiga Allow iyo naxariistiisii iyo barakaatkiisii, Allihii isaga maahane uusan Alle kale jirin.

Intaas ka dib, way i soo gaartay warqaddaadii Rasuulkii Allow iyo waxa aad ka sheegtay arrinta Ciise. Rabbiga samada iyo dhulka ayaan ku dhaartaye Ciise kama siyaadin waxa aad sheegtay, isagu waa sidii aad u sheegtay, waana aqoonsannay wixii aad noo soo dirtay, waana soo dhoweynay ina adeerkaa iyo asxaabtaadii. Waxa aan qirayaa in aad tahay Rasuulkii Alle, runlow ah oo la rumeeyo, waana kula mubaayacooday, ina adeerkaana waan la mubaayacooday, gacantiisa ayaan ku islaamay, waxa aan u hoggaansamay Allaha caalamka Rabbigiisa ah.

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu Najaashi ka dalbay in uu soo diro Jacfar iyo dadkii kale ee muslimiinta ahaa oo waddankiisa joogey, Najaashina wuu yeelay oo wuxuu soo saaray labo doonyood, waxayna Nabiga SCW ugu yimaadeen Khaybar. Najaashi wuxuu dhintay bishii Rajab, sannadkii 9aad ee hijriga, wuxuuna Rasuulku SCW markii loo sheegay ku tukaday jinaaso. Ka dibna wuxuu Rasuulku SCW warqad u qoray boqorkii Najaashi Asxam ka dambeeyey hase yeeshee lama oga in uu islaamay iyo in kale.

WARQADDII LOO QORAY BOQORKII MASAR

Rasuulku SCW wuxuu warqad u diray boqorkii haystay Masar iyo Aleksandariya, waxa ayna warqaddaasi ahayd sidan:

BISMILLAAHI RAXMAANI RAXIIM
Ka socota Maxammed, Addoonkii Alle iyo Rasuulkiisii
Ku socota Maquuqas, Madaxii Qibdhiyiinta
Nabadgelyo qofkii hanuunka raaca korkiisa ha ahaato.

Intaas ka dib, waxa aan kuugu yeerayaa dacwada islaamka, islaam aad nabad gashide, islaam Alle wuxuu ku siinayaa ajarkaaga labo jeer, haddii aad jeesatana waxaa dushaada ah dembiga reer Qibdhi. Rasuulku SCW wuxuu u qoray aayaddan oo aannu soo tilmaanay macnaheeda: Waa aayada ku jirta (suuratu Aali-Cimraan 64).

Warqaddan wuxuu Rasuulku SCW u sii dhiibay Xaadhib ibnu abii Baltaca. Xaadhib markii uu warqaddii u geeyey wuxuu boqorkii Masar ku yiri "waxaa kaa horreeyey nin sheegtay in uu Rabbigii sare yahay (fircoon), Allaahna wuxuu ku qabtay tii horreysey iyo tii dambeyseyba, wuuna ka aar gutay, kuna cibro qaado qeyrkaa ee qeyrkaa yuusan kugu cibro qaadan. Boqorkii ayaa hadlay oo yiri "waxa aan haysannaa diin, ugana tegi mayno (diintayada) cid ka kheyr badan ma ahne wax kale". Xaadhib ayaa markaa ku yiri "waxa aan kuugu yeeraynaa diinta islaamka oo Alle ku kaafiyey wixii ka soo haray, Nabigaanna uu dadka ugu yeerayo, kuwa ugu dhib badnaana waxa ay ahaayeen qureysh, kuwa ugu cadowsanaana waxa ay ahaayeen yahuud, kuwa ugu dhowaana waxa ay ahaayeen masiixiyiin, waxa ayna la mid tahay bishaaradii Muuse ku bishaareeyey Ciise, tii uu Ciise Maxammed ku bishaareeyey. Yeeritaanka aan qur'aanka kuugu yeerayno wuxuu la mid yahay yeeritaankii dadka Tawreet loogu yeeray Injiil, Nabi kastana dadkii soo gaara waa ummaddiisa, wuuna haleelaa haddii ay adeecaan. Adiguna waxa aad ka mid tahay dadka soo

gaaray nabiga mana kaa reebayno diintii Masiix laakiin iyada ayaan ku amrayaa". Boqorkii ayaa yiri "waan eegay Nabigaan arrinkiisa, waxa aan ogaaday in uusan xumaan amrin, wanaaggana reebin, sixir iyo baadilna kuma arag, curraafi beenlow ahna maaha, waxa aan ka arkay calaamaddii nabinnimada waana fiirin doonaa". Ka dib wuxuu u yeertay qoraagiisii Carabbiga u qori jirey, wuxuuna Rasuulka SCW u soo qoray warqaddan:

BISMILLAAHI RAXMAAN RAXIIM
Ku socota Maxammed binu Cabdullaahi
Ka socota Maquuqas, madaxweynihii reer Qibdhi
Nabadgelyo dushaada ha ahaato.

Intaas ka dib, waan akhriyey warqaddaadii, waan fahmay wixii aad ku soo sheegtay iyo waxa aad u yeerayso. Waan ogaa in uu nabi dhimman yahay, waxaanse u malaynayey in uu Shaam ka soo bixi doono. Waan karaameeyey adeegahaagii, waxa aan kuu soo diray labo gabdhood oo darajo weyn ku leh reer Qibdhi dhexdooda, waxa aan kuu soo hadiyeeyey baqal aad fuusho [rakuub].

Nabadgelyo dushaada ha ahaato.

Intaas ayuu ku gaabsaday ninkaasi, mana islaamin. Labadii gabdhood waxa ay kala ahaayeen Maariyatul-Qibdhiya, oo Rasuulku SCW milkiyey, una dhashay Ibraahiim iyo gabadha kale oo ahayd Siiriin, oo uu Nabiga SCW siiyey gabyaagiisii Xasaan binu Thaabit, baqashana waxaa la oran jirey dul-dul oo waxay gaartay ilaa waqtigii mucaawiye.

WARQADDII LOO QORAY BOQORKII FAARIS

Sidii kuwii hore oo kale, wuxuu Rasuulku SCW warqad u qoray Kisraa, boqorkii Faaris. Warqaddaasi waxa ay ahayd sidan:

BISMILLAAHI RAXMAANI RAXIIM
Ka socota Rasuulkii Alle, Maxammed
Ku socota Kisraa, Madaxweynihii Faaris
Nabadgelyo qofkii hanuunka raaca dushiisa ha ahaato.

Rumee Alle Rasuulkiisa, qirna Allaah mooyee in uusan Ilaah kale jirin, yahayna keligiis, shariikna uusan lahayn. Maxammedna uu yahay addoonkiisii iyo Rasuulkiisii. Waxa uu kuugu yeerayaa dacwada islaamka, aniguna waxa aan ahay Rasuulkii Alle ee dadka oo dhan loo soo diray si uu ugu digo ciddii nool, gaaladana uu ugu dul oogo xujada. Islaam aad nabad gashide haddii aad diidde waxaa dushaada ahaaday dembiga Majuusiyiinta.

Rasuulku SCW wuxuu waraaqdan u dhiibay Cabdullaahi binu Xudeyfa. Cabdullaahi wuxuu waraaqdii u gudbiyey ninkii boqorkaas wakiilka uga ahaa Baxreyn, kaas oo isna u sii gudbiyey boqorkii Faaris ee Kisraa. Kisraa wuxuu markaa xukumi jirey Faaris oo waqtigaa ka mid ahayd labadii dowladood ee dunida ugu xoogga badnaa. (iyada iyo Ruum), carabtuna labadaa dowladood ayey taabac u kala ahaayeen.

Kisraa markii uu warqaddii Rasuulka SCW akhriyey ayuu xanaaqay warqaddiina jeexjeexay isaga oo ka san taagaya xaqa, wuxuuna Rasuulku SCW u arkay nin raciyaddiisa ka mid ah, wuxuuna yiri "addoon xaqiir ah oo raciyaddeyda ka mid ah ayaa magiciisa ku qoray magacayga hortiisa". Halkaas waxa aan ka garanaynaa takaburka iyo isla weynida

daalimkaas ku jirtey heerka ay gaarsiisnayd iyo sida uu addoonnimada Rabbi uga kibray.

Rasuulku SCW markii loo sheegay in warqaddiisii uu googooyey si xunna u dhaqmay wuxuu yiri "Alle ha googooyo boqortooyadiisa". sidii ayeyna noqotay oo muddo yar ka dib Ilaahay wuu kala googooyey boqortooyadiisii.

Ninkaas sheydaanka ihi markii uu jeexay warqaddii Rasuulka SCW oo uu hadalladaas yiri ayuu haddana waraaq u diray ninkii wakiilka uga ahaa Yaman, warqaddaas oo uu ku leeyahay "ninka Xijaas jooga (nabiga SCW u dir labo nin oo xoog badan oo ha ii keenaan", kaasina sidaa ayuu yeelay oo labo nin ayuu Rasuulka SCW u soo direy, warqadna wuu soo raaciyey uu Rasuulka SCW ku amrayo in uu nimankaas soo raaco.

Labadii nin markii ay yimaadeen Madiina oo Rasuulka SCW u tageen ayaa midkoood hadlay oo yiri "boqorkii boqorrada ee Kisraa ayaa warqad u soo diray boqorkii Yaman uu ku amrayo in uu diro cid kuu geysa, aniga ayaana la ii soo kaa diray si aad ii raacdid". Rasuulku SCW markii uu hadalkoodii dhegaystay ayuu wuxuu amray in ay berri ku soo noqdaan.

Waqtigaasna waxaa boqorkii Kisraa ku kacay jabhad daakhili ah oo uu hoggaaminayo wiilkiisa, Sharwiish binu Kisraa. Dabadeedna habeen Talaado ah, 10kii Jamadul-Uulaa, sannadkii 7aad ee hijriga ayaa Sharwiish aabbihii Kisraa diley oo xukunkii la wareegay. Rasuulka SCW arrinkaas waxyi ayaa lagu ogeysiiyey, markii ay labadii nin maalinkii dambe ku soo laabteenna wuxuu u sheegay in boqorkii ay ka socdeen ee Kisraa wiilkiisii dilay, xukunkiina kala wareegay. Markaas ayey labadii nin dheheen "maxaan ku dhahnaa (boqorkii na soo diray)?", Rasuulku SCW wuxuu yiri "waxa aad ku dhahdaan "diinteyda iyo awooddeydu waxa ay gaari doontaa inta uu Kisraa gaaray. Haddii aad islaamto waxa aan ku siinayaa wixii gacantaada ka hooseeya (aad xukuntid), boqortooyada ciddaadana carruurtaada ayaa iska leh".

Ka dib labadii nin way noqdeen, waxa ayna arrinkii u sheegeen boqorki Faariska ahaa ee Yaman wakiilka uga ahaa Kisraa oo la oran jirey Baddaan, arrinkiina aan weli ka war helin. Muddo ka dibna wuxuu ogaaday arrinkii, wuxuuna warqad ka helay Sharwiish binu Kisraa, taas oo ugu sheegayo in uu aabbihii diley, xukunkiina la wareegay. Waxaa kale oo uu yiri "ninkii aabbahay arrinkiisa warqadda kuugu soo qoray (nabiga SCW) waxba ha ku samaynin ilaa amarkaygu kaaga yimaado". Ka dibna way islaameen Baddaan iyo ciddii Yaman la joogtay ee Faarisiyiinta ahayd markii ay xaqii arkeen.

WARQADDII LOO QORAY BOQORKII RUUM EE HIRAQLE

Rasuulku SCW boqorradii uu waraqaha u diray waxaa ka mid ahaa boqorkii Ruum xukumayey oo la oran jirey Hiraqle. Ruumna waxa ay waqtigaas ahayd dowladdii adduunka ugu xoogga badnayd. Warqaddii uu Rasuulku SCW u diray ninkaas waxa ay ahayd sidan:

BISMILLAAHI RAXMANI RAXIIM
Ka socota Maxammed, Adoonkii Alle iyo Rasuulkiisii
Ku socota Hiraqle, Madaxweynihii Ruum
Nabadgelyo ciddii hanuunka raacday dusheeda ha ahaato.

Islaam aad nabad gashidhe islaam Alle wuxuu ku siinayaa ajarkaaga laba jeer, haddiise aad diidid waxa dushaada ahaaday dembiga raciyadaada.

Wuxuu Rasuulku SCW warqaddaan u sii dhiibay Dixya binu Khaliif si u ugu geeyo ninka Basra wakiilka uga ahaa Hiraqle oo isaguna uu gaarsiiyo boqorkiisii Hiraqle. Dixya wuu baxay sidii ayuu warqadii ugu gudbiyey.

Hiraqle warqaddii Rasuulka SCW ayaa u tagtay isaga oo markaa yimid meesha la yiraahdo Iiliyaa' (Baytul Maqdis) kana yimid Ximsa, Waxaana meeshaa joogey safar Qureysh oo Abuu Sufyaan madax u ahaa oo tijaaro u yimid. Waqtigaasna waxa ay ahayd muddadii ay heshiiska lahaayeen Rasuulka SCW iyo qureysh.

Hiraqle markii ay warqaddii Rasuulku SCW u timid ayuu u cid diray nimankii qureysh ee safarka watay, markaas ayaa loo keenay isaga oo ay dhinacyada ka fadhiyaan madaxdii Ruum. Wuxuu markaa Hiraqle u yeertay tarjumaankiisii, wuxuuna Abuu Sufyaan iyo raggiisii ku yiri "kiinnee ugu dhow nasab ahaan ninkaas Nabinnimada sheeganaya?", Abuu Sufyaan ayaa yiri "aniga ayaa ugu dhaw". Markaas ayuu Hiraqle yiri "ii soo dhoweeya isaga, ragga la socdana dhankiisa fariisiya", wuxuu markaa Hiraqle tarjumaankiisii ku yiri (ku dheh nimanka) "ninkaas (Abuu Sufyaan) waxa aan wax ka wey diinayaa ninkaas (nabiga) haddii uu been ii sheego ku beeniya". Sidaa darteed Abuu Sufyaan su'aalihii la weydiiyey oo dhan run ayuu uga jawaabay isaga oo ka baqayey in markii ay Makka ku laabtaan la yiraahdo ninkii odeyga ahaa been ayuu sheegay. Wuxuu yiri Abuu Sufyaan "Ilaah baan ku dhaartaye haddii aanan ka xishooneyn in la iga guuriyo been waan ka been sheegi lahaa (nabiga)", taas oo ku tusineysa sida dadkii hore, gaalaba ha ahaadeene ay uga xishoon jireen beenta, sharaftoodana u ilaashan jireen.

Ka dib wuxuu yiri Abuu Sufyaan "su'aashii u horreysey ee uu iga waydiiyey (nabiga) wuxuu yiri "sidee ku yahay nasabkiisu dhexdiina?", waxa aan iri "dhexdayada waa nin nasab wanaagsan". Wuxuu yiri "isaga (nabiga SCW) ka hor qof ma idinku yiri hadalkaan oo kale?", waxa aan iri "maya". Wuxuu yiri "aabbayaashiis mid ka mid ihi boqortooyo malahaa?", waxaan iri "maya". Wuxuu yiri "ma dadkii sharafta lahaa baa raacay mise dadka ducafadii (masaakiintii)?", waxa aan iri "ducafadii". Wuxuu yiri "ma bataan (dadka raacay) mise waa yaraadaan?", waxa aan iri "way bataan". Wuxuu yiri "ma ka laabtaan qof ka mid ihi diintiisa caro uu u carooday markuu galay ka dib?", waxa aan iri "may". Wuxuu yiri "intii uusan dhihin wuxuu (hadda) yiri ka hor ma ku tuhmi jirteen been?", waxa aan iri "may". Wuxuu yiri "ballanta ma jebiyaa?". waxa an iri "may, waxaanna ku dhex jirnaa (muddadii heshiiska) mana ogin wax uu samayn doono". wuxuu yiri 'ma la dagaasheen?", waxa aan iri "haa". Wuxuu yiri "sidee ahaa dagaalka aad la gasheen?", waxa aan iri "dagaalkayagu waa wadaamaysi, marna isaga ayaa naga guuleystay marna annaga ayaa ka guuleysannay". Wuxuu yiri "muxuu idin amrayaa?", waxa aan iri "wuxuu leeyahay Alle keliya caabuda oo cidna ha ugu shariik yeelina, iskana taga waxa ay aabbayaashiin dhihi jireen. Wuxuu na amrayaa salaad, sadaqo, dhowrsanaan iyo xiriirin".

Wuxuu markaa Hiraqle ku yiri tarjumaankiisii "ku dheh (Abuu Sufyaan", waxa aan ku weydiiyey nasabkiisa (nabiga SCW), waxa aad sheegtay in uu yahay nin nasab wanaagsan, sidaas oo kale ayaa rususha looga soo bixin jirey qowmkooda nasabkiisa (kuwa ugu nasab fiican). Waxa aan ku weydiiyey in axad idinka mid ihi hortiis yiri hadalkaan, waxa aad sheegtay in aysan jirin, waxa aan haddaba leeyahay haddii axad ka horreeyey yiri hadalkan waxaan is dhihi lahaa waa nin ku deyanaya hadal la yiri hortiis. Waxa aan ku weydiiyey in ay boqornimo u ahaatay aabbayaashiis wax ka mid ah, waxa aad dheegtay in aysan jirin, waxa aan leeyahay haddii aabbayaashiis wax ka mid ah boqornimo u ahaatay waxa aan oran lahaa waa nin doonaya boqornimadii aabayaashiis. Waxa aan ku wey diiyey in aad been ku tuhmi jirteen intii uusan dhihi wax uu yiri, waxa aad sheegtay in aysan jirin, waxa aan

aqoonsaday in uusan ahayn mid ka taga beenta dadka oo Rabbi ku been abuurta. waxa aan ku weydiiyey in dadkii sharafta lahaa raaceen ama ducafadii, waxa aad ii sheegtay in ay ducafadii raaceen, iyaga (ducafada) ayeyna ahaayeen kuwii rususha raaci jirey. Waxa aan ku weydiiyey in ay siyaadaan ama ay nusqaamaan, waxa aad sheegtay in ay siyaadaan, sidaas oo kale weeyey arrinta iimaanku ilaa uu ka taam noqdo. Waxa aan ku weydiiyey qof ma ka noqday in aysan jirin, sidaas oo kale weeyey iimaanku markii uu macaankiisu quluubta dheeho. Waxa aan ku weydiiyey ballanta ma jebiyaa, waxa aad sheegtay in uusan jebin, sidaas oo kale rusushu ballanta ma jebiyaan. Waxa aan ku weydiiday waxa uu idin amro, waxa aad sheegtay in u idin amrayo in aad Ilaah keliya caabudaan oo aydinaan cid kale ugu shariik yeelin, idinkana reebayo cibaadada asnaamta, idina amrayo salaad, sadaqo iyo dhowrsanaan. Haddaba haddii ay waxa aad leedahay xaq yihiin waxa uu hanan doonaa meesha an labadaydan gommodood ku hayo, waana ogaa in uu soo baxayo mase malaynayn in uu idinka ka soo baxayo. Haddii aan ogahay in aan gaari karana waan aadi lahaa, haddii aan agtiisa joogi lahaana lugaha ayan u dhiqi lahaa.

Ka dib wuxuu Hiraqle dalbaday warqaddii Rasuulka SCW, markaas ayuu akhriyey. Markii warqaddii dhammeeyey ayaa wasiirradiisii la fadhiyey waxa ay ka baqeen in uu boqorku islaamo markaas ayey la hadleen oo buuqeen ilaa uu buuqi iyo hugunkii batay. Abuu Sufyaan wuxuu yiri "waxaa la amray in nala bixiyo. Markii nala bixiyey ayaan ku iri raggaygii "Xaqiiqdii amarkii in abii Kabshe (nabiga SCW) waa weynaaday, waxaa ka baqaya boqorkii reer banii Asfar". Ka dib abuu Sufyaan wuxuu yiri "kama aanan suulin arrinka nabiga in uu soo daahiri doono ilaa aan islaamka ka soo galay.

In kastoo uu Hiraqle yaqiinsaday dacwadii islaamka iyo xaqnimadii Nabiga SCW haddana ma uusan qaadan islaamka oo wuxuu ka doortay kufri iyo gaalnimo.

Ninkii warqadda Hiraqle Rasuulku SCW u soo dhiibay oo la oran jirey Dixya binu Khaliif markii uu warqadda u geeyey ninkii Basra xukumayey wuxuu soo siiyey maal iyo marasho. Markii uu Dixya soo marayo meel dhexe ayaa waxaa la kulmay niman reer Judaam ah oo wuxu watay ka dhacay. Markii uu Dixya Madiina yimid ayuu isagoo oo aan gurigiisii ku leexan wuxuu u tegey Rasuulka SCW oo u sheegay arrintii, wuxuu markaa Rasuulku SCW u direy ciidan gaaraya 500 oo nin, wuxuuna madax uga dhigay Seyd binu Xaarith si ay u soo edbiyaan qabiilkaas waddo goyska noqday.

Seyd iyo ciidankii uu hoggaaminayey meeshii ayey tageen, waxayna qabiilkii ka dhigeen wax ay dileen iyo wax carara, xoolo badan oo gaarayey 1,000 geel ah iyo 500 oo ari ahna way ka soo kaxaysteen. Waxa ka dib Rasuulka SCW u yimid nin la oran jirey Seyd binu Rifaaca oo ka mid ahaa odeyaashii qabiilkaas iyaga oo soo islaamay isaga iyo rag kale oo qabiilkaas ah. Waxayna Rasuulka SCW ka codsadeen in qaniimadii loo celiyo, Rasuulkuna SCW wuu ka aqbalay wuxuuna amray in loo celiyo.

WARQADDII LOO QORAY BOQORKII BAXREYN

Sidii uu Rasuulku SCW madaxdii horeba waraaqaha ugu diray ayuu wuxuu waraaq u direy ninkii la oran jirey Mundir binu Saawi oo xukumayey Baxreyn. Warqaddaas oo uu ugu yeerayey islaamka, wuxuu ugu sii dhiibay Calaa ibnu Xadrami.

Mundir markii ay warqaddii Rasuulku SCW u tagtay, Alle kheyr ayuu waafajiyey, wuuna islaamay. Wuxuuna Rasuulka SCW u soo direy warqad uu ku leeyahay sidan:

Intaas ka bacdi, Rasuulkii Allow waxa aan ku akhriyey warqaddaadii reer Baxreyn, waxa ayna noqdeen wax islaamkii jeclaaday oo la dhacay iyo wax nacay. Dhulkeygana waxaa ku nool Majuus iyo Yahuud, marka ii soo sheeg amarkaaga.

Markaas ayuu Rasuulku SCW u qoray warqaddan:

BISMILLAAHI RAXMAANI RAXIIM
Ka socota Maxammed Rasuulkii Alle
Ku socota Mundir Binu Saawi

ASALAAMU CALEYKUM

Allaah baan kugu mahadinayaa, Allihii isaga maahee uusan mid kale jirin, waxa aan qirayaa Maxammedna in uu yahay addoonkiisii iyo Rasuulkiisii.

Intaas ka dib, waxa aan ku xusuusinayaa Allaah Casa Wajalla, qofkii la waaniyana waxaa la waaniyey naftiisa, qofkii adeeca farriin wadayaashayda oo raaca amarkooda aniga ayuu i adeecay. Qofkii iyaga waaniya, aniga ayuu i waaniyey. Adeegayaashayduna wanaag ayey kaa sheegeen, aniguna waxa aan ku siiyey qowmkaaga (xukunkiisa), muslimiintana u daa cidda ay u islaameen (Allaah), kuwa dembiyada galayna waan cafiyey ee ka yeel adiguna, inta aad wanaagsan tahayna kaa casili mayno shaqadaada. Dadka deggan ee yahuudda iyo majuusta ahna jisyo (canshuur) kaqaad.

WARQADDII LOO DIREY BOQORKII YAMAAMA XUKUMAYEY

Sidoo kale Rasuulku SCW wuxuu waraaq u diray ninkii Yamaama xukumayey oo la oran jirey Huuddo binu Cali. Waxa ayna warqaddaasi ahayd sidan:

BISMILLAAHI RAXMAANI RAXIIM
Ka socota Maxammed, Rasuulkii Alle
Ku socota Huudda Binu Cali
Nabadgelyo qofkii hanuunka raaca dushiisa ha ahaato.

Waxa aad ogaataa diintaydu in ay kor mari doonto islaam aad nabad gashide, waxa aanna kuu deynayaa inta aad xukuntid.

Ka dib wuxuu Rasuulku SCW warqaddaas ugu sii dhiibey Suleydh binu Camar. Markii uu Suleydh warqaddii u geeyey, ayuu Huudda si fiican u qaabilay, warqaddiina akhristay, wuxuuna Rasuulka SCW u soo qoray warqad uu ku leeyahay "wax ka wanaag badan oo ka quruxsan majiro waxa aad dadka ugu yeeraysid, carabna way taqaannaa darajadeyda ee isii xukunka qaarkiis aan ku raacee". Ninkii Suleydh ahaa ee warqadda u keenayna waxa uu soo siiyey abaalgud, jawaabtiina wuu u soo dhiibay.

Suleydh wuxuu markaa ku soo laabtay Madiina, wuxuuna Rasuulka SCW u sheegay warkii oo dhan. Rasuulku SCW markii uu warqaddii Huudda akhriyey ayuu yiri "haddii uu i weydiisan laha gobol dhulka ka mid ah ma yeeleen". Hadalkan Rasuulka SCW waxa aan ka faa'iideysanaynaa in diinta islaamku aysan ahayn mid loo soo galo dano adduunyo ee ay tahay qanaaco uu qofku ku qanco si uu naftiisa uga badbaadiyo cadaabka Rabbi, qofkana in uu xaqa qaato oo uu Rabbigiis ka baqo isaga ayey dani ugu jirtaa. Ninkii Huudda ahaa, maaddaama aan xukunkii wax laga siin wuxuu ku baaqi noqday kufrigii iyo gaalnimadii ilaa uu ka dhintay, waxaana ninkaas xaqa ka hor istagay xukun jaceyl sida kuwo badan oo kaleba uu uga hor istaagay, waxaana sideedaba yar in qof xukun sare haya ama soo hayn

jirey uu xaqa u hoggaansamo, qof uu Ilaahay u naxariisto ma ahane.

Rasuulku SCW markii uu Makka furtay oo uu ku soo laabtay Madiina ayaa Malaku Jibriil u soo sheegay in uu dhintay Huudda. Wuxuu Rasuulku SCW markaa ku yiri asxaabta "waxaa Yamaama ka soo bixi doona beenale, waxaana la dili doonaa gadaashay", markaas ayaa nin asxaabta ka mid ihi weydiyey oo yiri "yaa dili doona?", wuxuu Rasuulku SCW ku yiri "adiga iyo raggaaga". Ninkaas uu Rasuulku SCW sheegay ee beenalaha ah waa Museylamatul-Kadaab oo ahaa ninkii Nabinnimada sheegtay, waxaana la dilay markii uu Abuubakar khilaafada islaamka hayey, waxaana diley Waxshi oo ahaa ninkii Xamsa dagaalkii Uxud ku dilay, ka dibna soo islaamay.

WARQADDII UU RASUULKU SCW U DIREY NINKII XUKUMEY DIMISHIQ

Sidoo kale waxa uu Rasuulku SCW waraaq u direy ninkii la oran jirey Xaarith binu Shumar oo ahaa ninkii xukumayey Dimishiq, waxa ayna warqaddu ahayd sidan:

BISMILLAAHI RAXMAANI RAXIIM
Ka socota Maxammed, Rasuulkii Alle
Ku socota Xaarith binu Abii Shamir
Nabadgelyo qofkii hanuunka raaca dushiisa ha ahaato

Aniga waxa aan kuugu yeerayaa in aad Alle keliya rumeyso oo aadan u shariik yeelin, xukunkaaguna wuu kuu baaqi noqonayaa.

Wuxuu Rasuulku SCW warqaddan u sii dhiibay Shujaaca binu Wahab. Markii ay warqaddii gaartay ayuu Xaarith yiri "yaa xukunkayga iga qaadi kara, aniga isaga ka qaadi".

WARQADDII UU RASUULKU SCW U DIRAY BOQORKII CUMMAAM

Wuxuu Rasuulku SCW warqad u diray boqorkii Cummaan oo la oran jirey Jiifar iyo walaalkiis Cabdi oo labaduba ahaa ilma Jubnaadi. Waxa ayna warqaddu ahayd sidatan:

BISMILLAAHI RAXMAANI RAXIIM
Ka socota Maxammed, Rasuulkii Alle
Ku socota Jiifar & Cabdi, ilma Junadi
Nabadgelyo qofkii hanuunka raaca dushiisa ha ahaato.

Intaas ka dib, waxa aan idinku yeerayaa dacwada islaamka. Islaam aad nabad gashiine. Anigu Rasuulkii Alle ayaan ahay oo dadka oo dhan loo soo diray si aan ugu digo qofkii nool, galadana qowlkii Rabbi ugu dhaboobo. Haddii aad qirtaan islaamka waan idiinka weli dhigayaa (xukunkiinna), haddiise aad diiddaan in aad islaamka qirtaan boqortooyadiinnu way suuleysaa, farduhuna waxa ay aaggiinna ka kicinayaan (boorka), nabinnimadayduna waxa ay ka sarmarti doontaa boqortooyadiina.

Wuxuu Rasuulku SCW warqaddaas u sii dhiibay Camar binu Caas. Wuxuu yiri Camar binu Caas "markii aan tegey Cummaan waxa aan warqaddii u geeyey Cabdi, maxaa yeelay Cabdi ayaa ka dulqaad badnaa, kana dabeecad wanaagsanaa Jiifar. Waxa aan ku iri Cabdi "waxa aan ahay adeegihii Rasuulkii Alle SCW uu u soo diray adiga iyo walaalkaa", markaas ayuu yiri "walaalkay ayaa iiga horreeya xagga da'da iyo xukunkaba ee isaga ayaan kuu geynayaa ilaa uu ka akhriyo warqadda". Waxaa kale oo uu igu yiri "maxaa dadka ugu yeeraysaa?". Waxaan ku iri 'waxa aan ugu yeerayaa Allaah keligiis oo aan shariik lahayn iyo in aad ka dhex baxdo waxa la caabudo sokadiisa, aadna qirto in uu yahay Maxammed addoonkii Alle

iyo Rasuulkiisii". Wuxuu yiri "Camarow waxa aad tahay wiilkii sayidkii reerkaaga sidee sameeyey aabbahaa waxaa noogu sugan ku deyashee?". Waxa aan iri "wuxuu dhintay isaga oo aan rumeyn Maxammed SCW, waxa aanna jeclaan lahaa in uu islaamo oo rumeeyo (Rasuulka SCW). Anigu waxa aan ku sugnaa fikraddiisii ilaa Ilaahay islaamka igu soo hanuuniyey. Wuxuu yiri "goorma ayaad raacday (Rasuulka SCW)?", waxa aan ku iri "waqti dhow", wuxuu i su'aalay "xaggee ku islaamtay?", waxa aan ku iri "Najaashi agtiisa" oo waxa aan u sheegay in uu Najaashi islaamay. Wuxuu yiri "sidee (Najaashi) ku sameeyey boqortooyadii dadkiisa?", waxa aan ku iri "way ka yeeleen oo way raaceen". Wuxuu yiri "culimadii iyo suufiyadii ma raaceen", waxa aan iri "haa", wuxuu yiri "ka fiirso Cumar waxa aad leedahay maxaa yeelay ma jirto arrin qofku sameeyo oo beenta ka xun", waxa aan iri "been ma sheegin, xalaalna kuma aha diintayada". Markaas ayuu yiri "ma arko in uu Hiraqle og yahay islaamnimada Najaashi", waxa aan iri "wuu og yahay", wuxuu yiri "sidee ku ogaatay arrinkaas?", waxa aan iri "Najaashi ayaa u diri jirey Hiraqle wax soo saarka (beerihiisa kasoo go'a qaar kamid ah, markii uu islaamay oo uu rumeeyey Maxammed ayuu yiri "May, Ilaah baan ku dhaartaye haddiii u i weydiisto (Hiraqle) hal Dirham ma siinayo".

Hadalkaan markii uu gaaray Hiraqle ayaa lagu yiri "ma iska deyneysaa addoonkaagii oo aan ku soo direyn wax soo saarkii, kana diin dhigtay diin kale oo cusub", markaas ayuu Hiraqle yiri "nin jeclaaday diin oo u dooray naftiisii maxaan ku sameeyaa?. Ilaah baan ku dhaartaye haddii aanan boqortooyada u baqaynin waxa aan samayn lahaa waxa uu sameeyey". Cabdi ayaa yiri "Camar ka fiirso waxa aad leedahay", waxa aan ku iri "Ilaah baan ku dhaartaye run baan kuu sheegay". Wuxuu ka dib Cabdi yiri "ii sheeg wuxuu idin amro (Rasuulku SCW) iyo wuxuu idinka reebo", waxa aan iri "wuxuu na amraa Alle in aan adeecno, waxa aanu naga reebaa in aan Alle caasino. Wuxuu na amraa samafal iyo qaraabo xiriirin, wuxuu naga reebaa dulmiga, cadaawada, sinada, khamriga iyo in la caabudo dhagaxa, sanamka iyo saliibka". Wuxuu yiri "wanaag badanaa waxa uu dadka ugu yeerayo (Rasuulku SCW), haddii uu walaalkay igu raaci lahaa waan aadi lahayn ilaa aan ka rumeyno Maxammed laakiin walaalkay way ku weyn tahay in uu boqortooyadiisa ka tago oo uu aado". Waxa aan iri "haddii uu islaamo, Rasuulku SCW wuu u deynayaa xukunka dadkiisa, sakana wuu ka qaadayaa kuwooda maalqabenka ah, wuxuuna ku celinayaa kuwooda faqiiriinta ah", wuxuu yiri "tani waa dabeecad wanaagsan, maxayse tahay sakadu?", markaas ayaan u sheegay (sakada) geela, markaas ayuu yiri "Camarow tan (hasha) geedkana daaqeysa biyahana isaga arooreysa miyaa laga qaadayaa (sako)?", markaas ayaan iri "haa", wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye ma arko dadkayaga kala fogaantooda iyo tiro badnaantooda in ay tan yeelayaan".

Ka dib wuxuu yiri Camar maalmo ayaan ku negaaday albaabkiisii, isaguna wuxuu la xiriirayey walaalkiis oo uu u sheegayey warkaygii. Maalintii dambe ayuu ii yeeray, markii aan u tegey ayaa waxaa igu dhegay askartiisii, markaas ayuu yiri "iska soo daaya", markii ay i soo daayeen ayaan damcay in aan la fariisto hase yeeshee askartii ayaa ii diiddey. Isagii ayaan fiirshay, markaas ayuu yiri "ka hadal dantaada", markaas ayaan u dhiibay warqadii oo xiran, intuu warqaddii furay oo akhristay ayuu markii uu dhammeeyey walaalkiis u dhiibay si uu u akhristo. Ka dib wuxuu yiri "ka warran qureysh maxay samaysay?", markaas ayaan iri "way raacday (Rasuulka), nin diin jaceyl ku raacay iyo nin seef lagu diriqiyeyba", wuxuu yiri "yaa la jira", waxa aan iri "dadku way qaateen islaamka, qeyrkisna way ka doorteen, waxa ayna ku ogaadeen caqligooda oo uu la jiro hanuunka Ilaahay in ay baadi ku sugnaayeen, mana ogi cid ka hartay oo aan adiga ka ahayn ee adiguna haddii aadan maanta islaamin oo aadan raacin fardaha ayaa lagugu weerari, barwaaqadaasna waa la furan ee islaam aad nabad gashide, xukunka dadkaagana waa laguu dhiibayaa, yeysanna ku soo gelin fardo iyo rag", wuxuu yiri "iga tag maanta oo berri igu soo laabo". Walaalkiis ayaan markaas ku laabtay, wuxuuna igu yiri "Camarow waxa aan rajaynayaa in uu islaamayo

haddii aan boqortooyadiisu la tegin".

Maalintii dambe ayaan ku noqday markaas ayuu ii diidey in uu ii idmo. Walaalkiis ayaan u tegey oo u sheegay in aanan helin, wuu ii geeyey, wuxuu markaa igu yiri "waxa aan ka fekerayey wixii aad iigu yeeraysay (islaamka), carabna aniga ayaa ugu taag daran, haddii wixii aan xukumayey aan nin mulkisiiyo isaga oo aysan fardihiisu halkan soo gaari karin, haddii ay so gaaraanse aan la dagaallamayo dagaal uusan la dagaallamin cid la kulantay", markaa ayaan ku iri "berri ayaan baxayaa", marki uu intaa yaqiinsaday ayuu walaalkiis la gaar noqday oo ku yiri "maxaan ka yeelnaa arrintan uu la soo baxay, qof kasta oo uu cid u direyba waa raacey?". Markii uu waa beriistay ayuu cid ii soo diray, waxayna halkaa ku qaateen islaamka isaga iyo walaalkiis.

Intaa waxaa ku dhammaaday waxyaabihii ay culimada siiradu ka qoreen waraaqihii uu Rasuulku SCW u kala diray boqorradii iyo madaxdii caalamka markii uu ka soo laabtay heshiiskii Xudeybiya.

DUULLAANKII DII-QIRAD

Haddii aan dib u jaleecno dhinicii jihaadka, Rasuulku SCW markii uu ka soo noqday heshiiskii Xudeybiya duullaankii ugu horreeyey ee uu qaado wuxuu ahaa kii la oran jirey Dii-Qirad.

Sababta duullaankaasina waxa uu ahaa saxaabigii la oran jirey Salamata ibnu Akwac ayaa waxa uu yiri: "waxaan katagay Madiina aniga oo u socda dhinaca qaada, markii aan gaaray karinka qaaba ayaan waxaa ila kulmay wiil adeege u ahaa Cabdiraxmaan binu Cawf waxa aana ku iri "waran", waxa uu yiri "waa la dhacay geeliii dhalay ee Rasuulka SCW (geelii Sakada oo magaalada dibadeeda lagu hayey), waxa aan iri "yaa dhacay" wuxuu yiri "Qadafaan iyo Fasaara", markaasaan sadex jeer dhawaaqay, dhawaaq aan maqashiiyey wixii Madiina joogay aniga oo leh yaa sabaaxa (waa waray), waxaan kaddaba tagay (nimankii) iyagoo geelii kaxaystay, waxaana ku ganay gamuuno aniga oo leh ina Akwac ayaan ahay, maanta waa maalin kuwii xumaa la hoojiyey ilaa aan kasoo dhiciyey (geelii), iyagoon waxba ka maalin, ka dib geelii ayaan soo kaxeeyey waxaana iga hor yimid Rasuulkii SCW iyo ciidankii Muslimiinta.

DAGAALKII KHAYBAR

Khaybar waxa ay ahayd magaalo wayn oo aad u dhufaysyo badan, waxa ayna Madiina u jirtey 60 ila 80 mayl oo dhinaca woqooyi ah. Waxa ay ahayd xaruntii yahuudii dhulkaas degganayd. Sababta duullaankani waxa ay ahayd: Waxa aan soo ogaannay in yahuuddu had iyo jeer ka mid ahayd cadowyadii ugu waaweynaa ee islaamka, kana dambeeyey duullaankii Axsaab, intaasna makri u maleegayey islaamka iyo muslimiinta. Sidaa darteeed ayaa heshiiskii Xudaybiya ka dib Rasuulku SCW wuxuu u soo jeestay cadowyadii kale ee islaamka ugu darnaa maaddaama uu qureysh meel isaga soo xiray, wuxuuna ugu hormariyey yahuuddii Khaybar.

Rasuulku SCW wuxuu duullaankan qaaday bishii Muxarram, sannadkii 7aad ee hijriga, waxayna culimada mufasiriintu sheegaan in Khaybar ahayd yabooh uu Ilaah ballanqaaday markii uu qur'aankiisa ku yiri:

((ALLE WAXA UU IDIIN YABOOHAY QANIIMOOYIN TIRA BADAN OO AAD QAADDANNAYSAAN, TANNA WAA IDIIN SOO DEDDEJIYEY, DADKA GACMAHOODIINA WAA IDINKA QABTAY SI AY CALAAMAD UGU AHAATO MU'MINIITA, UUNA IDINKU HANUUNIYO JIDKA TOOSAN)), (Suuratul-Fatxi 20).

Waxayna ahayd midda la soo dedejiyey heshiiskii Xudeybiya, qanimooyinkii tirada badnaanna Khaybar baa ka mid ahayd.

Markii ay munaafaqiintii iyo kuwii iimaankoodu daciifka ahaa ka hareen Rasuulka SCW Xudeybiya, ayaa Alle Rasuulkiisa SCW amray in aysan u raacin duuullaanka Khaybar, wuxuuna Alle qur'aankiisa ku yiri:

((WAXAY DHIHI DOONAAN KUWII HARAY (MUNAAFIQIINTII) MARKAAD QANIIMA U BAXDAAN SI AAD USOO QAADATAAN "NA DAAYA AAN IDIN RAACNEE", WAXAY DOONAYAAN INAY BADALAAN HADALKA ALLE, WAXAAD TIRAAHDAA NA RAACI MAYSAAN ALLAANA SAAS HORAY U YIRI, WAXAY KU DHIHI DOONAAN WAAD NAXASDAYSAA, WAXBASE MA FAHMAYAAN ILLAA WAX YAR MOOYEE)), (Suuratul-Fatxi 15).

Sidaa darteed ayaa Rasuulku SCW markii uu u baxayey Khaybar wuxuu ogeysiiyey in aysan raacaynin, waxaana raacay oo keliya 1400kii nin ee Xudeybiya u raacay. Madiina wuxuu Rasuulku SCW madax uga sii dhigay Subaac binu Curfada.

Munaafaqiinta, oo had iyo jeer gaalada daba dhilif u ahaa, ahaana cadow aad u xun oo ku dhex jira muslimiinta, ugana eg muuqaalka iyo magaca muslimiinta hase yeeshee qalbiga iyo niyadda ka jecel kana raacsan gaalada, ayaa markii ay ogaadeen in uu Rasuulku SCW ku duulayo Khaybar waxa ay hoosta kala xiriireen yahuuddii Khaybar, waxa ayna ku dheheen "Maxammed idinka ayuu idin soo aaday oo idiin soo socdaa ee qaata degtooni, hana ka biqina idinka ayaa caddad iyo hubba ka badane. Maxammed ciidankiisu waa wax yar, hubna ma wataan in yar maahee".

Yahuuddii markii ay warkaas maqleen waxa ay u cid dirsadeen reer Qadafaan oo ay xulafo ahaan jiren si ay dagaalka ula galaan, miraha Khaybarna nus u qaataan haddii laga qaalib noqdo muslimiinta. Reer Qadafaan warkaa way yeeleen, wayna soo bexeen si ay yahuudda ula dagaal galaan hase yeeshee intii ay jidka ku sii jireen ayey dhinicii reerahooda ka maqleen qaylo, markaas ayey u maleeyeen in muslimiintii u daba martay cidahoodii iyo maalkoodii. Dib ayey markaas u laabteen oo waxay waardiye ka qabteen dadkoodii, wayna isaga dhex baxeen Rasuulka SCW iyo yahuud.

Rasuulku SCW Madiina ayuu ka soo baxay isaga oo dhinaca Khaybar soo aaday. Markii uu meel dhexe marayo ayuu u yeeray labo nin oo ciidankaas hor socday, wuxuuna ka dalbay in ay tusiyaan jidka ugu wanaagsan ee Khaybar ka soo gelinaya dhinaca woqooyi ee ay Shaam ka xigto. Midkood ayaa markaas yiri "aniga ayaa ku tusinaya Rasuulkii Allow". Markii uu muddo ciidankii waday oo la marayo meel ay dhowr waddo ku kulmaan ayuu yiri "Rasuulkii Allow waddooyinkaan oo dhan way na geynayaan", markaas ayuu Rasuulku SCW amray in uu waddooyinka magacyadooda kala sheeg sheego, markii uu mid magacaababa Rasuulku SCW wuu diidayey ilaa ay ka hartay hal xabbo. Cumar ayaa markaas ninkii ku yiri "sheeg", markii uu sheegayna Rasuulku SCW wuu yeelay oo waddadaas ayuu qaatay.

Habeenkii ugu dambaysay socodkooda waxa ay Rasuulka SCW iyo ciidankiisii degeen Khaybar agteeda. Rasuulku SCW haddii uu qolo duullaan ku yahay oo uu ku soo beegmo habeen ma weerari jirin ilaa uu ka waaberiisto sidaa darteed markii uu waagu baryey oo ay salaaddii subax tukadeen ayaa isaga iyo ciidankisii galeen magaaladii Khaybar.

Yahuuddii markii ay arkeen ciidankii Rasuulka SCW iyaga oo aan ka war hayn oo shaqooyinkoodii u kallahaya ayey dheheen "waa Maxammed, Ilaah baan ku dhaarannaye waa Maxammed iyo Khumus (ciidankiisii shan geeslaha ahaa). Markaas ayey ku carareen magaaladii iyo dhufeysyadoodii, wuxuu markaa Rasuulku SCW yiri "Allaahu Akbar,

Khaybar waa kharaabtay. Allaahu Akbar Khaybar waa kharaabtay. Annagu haddii aannu degno dad goobtood waxaa xumaaday dad loo digay subaxdood".

Ka dib Rasuulku SCW meel ayuu ciidankiisii dejiyey, waxaana markaas u yimid Xubaab ibnu Mundir oo ku yiri "Rasuulkii Allow meeshani waxa ay aad ugu dhowdahay dhufeskii Nadha, dagaalyahannadii Khaybar dhammaantoodna way ku jiraan, waxa ayna ku wareegaysanayaan agagaarkeeda, mana ogin arrimahooda, fallaarohooduna way na soo gaarayaan, kuweennuna ma gaarayaan, in ay na miraana kama aammin nihin. Sidoo kale meeshani waa timir dhexdeed iyo meel aan habboonayn ee haddii aad n amri lahayd meel aan waxaan u dhan lahayn oo aan xarun ka yeelanno (way fiicnaan lahayd". Wuxuu markaas Rasuulku SCW yiri "taladu waa sida aad tilmaantay" ka dib ciidankii ayuu raray oo meel kale dejiyey.

Wuxuu Rasuulku SCW baryayey Rabbigiis isaga oo oranaya "Allihii toddobada samo iyo waxa ay hareereeyeen Rabbigood ahaayow, shayaadiinta iyo waxa ay baadiyeeyaan Rabbigood ahaayow waxa aan ku weydiisanaynaa magaaladan kheyrkeeda iyo dadkeeda kheyrkooda, waxa aanna kaa magan gelayaa magaaladan sharteeda iyo waxa ku jira shartooda". Waxaana calanka muslimiinta waday Abuubakar Sidiiq hase yeeshee markii dagaalki labo maalmood kasocday dhufayskii Naacim oo la furan waayey muslimiintiina ay dhibi soo gaartay ayuu Rasuulku SCW yiri "waxa aan calankan berri siin doonaa nin Alle iyo Rasuulkiisa jecel, Alle iyo Rasuulkiisuna jecel yihiin". Subaxdii markii la gaaray ayaa nin walba oo asxabta ka mid ihi jeclaystay in uu noqdo ninkaas Alle iyo Rasuulkiisu SCW jecel yihiin, nin walbana wuu u hanqal taagay. Wuxuu markaas Rasuulku SCW yiri "aaway Cali binu Abii-dhaalib?", waxa ay asxaabtii dheheen "Rasuulkii Allow indhaha ayaa laga hayaa". Rasuulku SCW Cali ayuu u cid diray, markii uu u yimidna indhihii ayuuu uga tufay, waana u duceeyey. Calina markiiba indhihii way u caafimaadeen Rasuulkuna SCW wuxuu u dhiibay calankii, markaas ayuu Cali yiri "Rasuulkii Allow, miyaan la dagaallamaa ilaa ay annaga (muslimiinta) oo kale ka noqdaan?", Rasuulku SCW wuxuu yiri "tartiibso ilaa aad ka degtid aaggooda, ka dib ugu yeer islaamka una sheeg waxa dushooda ku waajibka ah oo xaqa Alle ah. Ilaah baan ku dhaartaye in Ilaahay dartaa ku hanuuniyo qof kaliya ayaa kaaga kheyr badan geela kiisa gudguduudan".

Ka dib waxaa la gudo galay dagaalkii Khaybar. Magaalada Khaybar waxa ay ahayd mid aad u qalcado iyo dhufeysyo badan, waxa ayna u qaybsanayd labo qaybood: Qayb waxaa ku yaallay shan qalcadood oo waaweyn iyo kuwo yar yar, qaybta kalena waxaa ku yaalley saddex qalcadood oo waaweyn oo keliya. Qalcadaha qaybta hore ku yaalley waxaa la kala oran jirey: Naacim, Sacab binu Mucaad, Qalcatu-Dubeyr, Ubey iyo Nasaar. Saddexda hore waxaa la isku oran jirey Nadha oo waa kuwii ugu waaweynaa. Labada dambe waxa ay ku yaalleen meel la oran jirey Shifi waana qaybta ugu xoogga badnayd oo uu ka dhacay dagaalku. Saddexda qalcadood ee dhinaca kale waxaa la kala oran jirey: Qamuus, Wadhiix iyo Sulaalam.

Dagaalki ayaa markaas bilowday, dhufeyskii ugu horreeyey ee ay muslimiintu weerareen wuxuu ahaa Naacim oo ahaa kii uu joogey nin hormoodayaashii yahuud ka mid ahaa oo la oran jirey Marxab. Cali binu Abii-dhaalib iyo ciidankiisii markii ay dhufeyskan tageen ayaa Cali yahuuddii ugu yeeray islaamka hase yeeshee way diideen, dagaal ayeyna doorteen. Waxaa mubaaraso u soo baxay madaxoodii Marxab oo leh "Khaybar waxa ay ogaatay in aan ahay Marxab oo jeeniqaarsan hub, geesi la jarribay", waxaa markaa u soo banbaxay Caamir oo leh "Khaybar waxa ay ogaatay in aan ahay Caamir oo jeeniqaarsan hub, geesi booraysan". Waxa ay markaas is dhaafsadeen laba seefood, seefii Marxab waxa ay ku dhacday gaashaanka, tii Caamirna way gaabnayd, wuxuuna damcay in uu dhudhunka uga dhufto hase yeeshee isaga ayey ku soo laabatay oo lawga uga dhacday, wuuna u dhintay. Asxaabtii qaar kamid ah ayaa yiri Caamir camalkiisii waa buray, markaasa Rasuulku SCW wuxuu yiri "been bay sheegeen wixii sidaas yiri, Caamir wuxuu leeyahay labo ajar oo waa mujaahid dadaalay".

Ka dib waxa uu Marxab dalbaday in loo soo baxo, waxaa u soo baxay Cali binu Abii-dhaalib, si degdeg ah ayuu markaas Cali madaxa ugu dheereeyey cadowgii Alle ee Marxab. Dabadeed Cali dhufeyskii ayuu u sii dhowaaday, waxaana madaxa dhufeyska kala soo baxay nin yahuudi ah oo ku yiri "kuma ayaa tahay?", Markaas ayuu Cali ugu jawaabay "Cali binu Abii-dhaalib baan ahay", ninkii wuxuu markaa yiri "waad ka sare marteen wixii Muuse lagu soo dejiyey (diintii Tawreed).

Ka dib waxaa mubaaraso u soo baxay Marxab walaalkiis oo la oran jirey Yaasir, dhinaca muslimiintana waxaa ka soo baxay Subeyr ibnu Cawaam. Subeyr hooyadii oo Rasuulka SCW eeddadiis ahayd, ayaa Rasuulka SCW ku tiri "Rasuulkii Allow miyuu dilayaa wiilkeyga?" Rasuulku SCW wuxuu yiri "maya, ee isaga (subeyr) ayaa dilaya". Sidaa ayaa ninkaas yahuudiga ahna Subeyr u diley.

Dagaalkii ayaa si fiican u bilowday, dhufeyskan Naacimna waxaa ka dhacay dagaal aad u daran oo maalmo socdey ilaa ay markiii dambe yahuuddii u adkaysan weyday weerarradii muslimiinta oo isaga soo baxday dhufeyskii, waxa ayna isku ururs adeen dhufeyskii Sacab binu Mucaad oo ahaa dhufeyskii labaad dhinaca awoodda iyo xoogga. Waxa ay muslimiintu ku qaadeen weeraro halis ah, waxaana hoggaaminayey Xubaab binu Mundir. Waxaa dhufeyska iyo yahuudda la dul fadhiyey saddex maalmood, maalinki 3aad ayaa Rasuulku SCW Ilaahay u baryey ka dib markii ay muslimiinta ka dhammaatay sahaydii oo ay haleeshay gaajo aad u daran ilaa ay ka qasheen dameerihii ay wateen. Markaas ayaa Rasuulka SCW loo sheegay hilibkii dameeraha oo dabka saaran, wuxuu Rasuulku SCW amray in hilibka la daadiyo, dheryahana la jejebiyo. Sidoo kale waxaa u yimid Rasuulka SCW rag asxaabta ka mid ah oo yiri "wax ma haysanno", ka dib Rasulku SCW Ilaah ayuu baryey oo wuxuu yiri "Ilaahayow xaaladdooda waad og tahay, awoodna ma haystaan, anigana gacantayda kuma jiraan wax aan siiyo (asxaabta) ee u fur dhufeyska ugu weyn uguna cunto badan ha ku deeqtoomaane". Subixii dambe ayuu Ilaahay muslimiinta u furay dhufeyskii ugu weynaa ee Sacab binu Mucaad, waxa ayna ka heleen raashin fara badan iyo hub halis ah oo uu ka mid ahaa Manjaniiq oo ahaa hubkii waqtigaas u casrisanaa.

Markii ay muslimiintu labadaas dhufeys furteen ayaa yahuuddii Nadha joogtey oo dhan isku ururs atay dhufeyska Qalcatu-Subeyr oo ku yaalley qalcad dusheed, farduhuna aysan kori karin, raggana dhib ku ahaa. Markaas ayuu Rasuulku SCW amray in la hareereeyo, markii saddex beri lagu hareereysnaa ayaa waxaa Rasuulka SCW u yimid nin yahuud ah oo yiri "Abal-qaasimow haddii aad bil ku hareereysanato waxba yeeli mayso maxaa yeelay waxa ay haystaan cabitaan iyo ilo dhulka hoostiisa ah, habeenkiina inta ay baxaan oo biyohooda soo cabbaan ayey qalcaddooda ku soo noqdaan oo difaac galaan. Haddii aad ka goysid biyaha waa kuu soo baxayaan". Sidaa ayuu markaa yeelay Rasuulku SCW oo biyihii ayuu ka jaray, markaas ayey soo baxeen oo u dagaallameen ilaa uu markii dambe nasrigii Alle yimid oo muslimiintii goobtii furteen.

Yahuuddu waxa ay ka dib isku ururs atay dhufeyskii 4aad ee la oran jirey Qalcaddii Ubay, muslimiintiina way ka daba tageen oo way hareereeyeen; waxaana goobtaas ka dhacay dagaal aad u daran. Labo nin oo halyeeyadii yahuudda ka mid ahaa ayaa mubaaraso u soo baxay hase ahaatee labadaba waxaa dilay raggii dhinaca muslimiiinta uga soo baxay, weliba kan dambe waxaa diley geesigii caanka ahaa ee Abuu Dujaana. Abuu Dujaana iyo ciidankii muslimiintu waxa ay u dheceen qalcadda gudeheeda ayey yahuuddii iskaga soo baxday qalcaddii oo u carartay dhufeyskii ugu dambeeyey qaybta hore oo la oran jirey Nasaar. Waxa ay yahuuddu ku ururs atay haweenkii iyo carruurtii iyaga oo iska dhaadhicinaya in aysan muslimiintu furan karin dhufeyskaas istaraatiijiyaddiisa iyo difaaciisa oo adkaa darteed. Waxaana uu dhufeyskaas ku yaalley buur dusheed. Ciidankii Alle, oo wax kasta u beer dhigayey, ayaa hareereeyey yahuuddii, yahuuddana waxa ay u ahayd kama dambays maxaa yeelay

dumarkoodii, carruurtoodii iyo maalkoodii ayaa ku jirey dhufeyskaa, waana dhufeyskii ugu dambeeyey dhinacaas magaalada.

Yahuuddu waxa ay soo ganayeen Naabaal iyo dhagaxaan. Markii ciidankii muslimiinta ku adkaatay furashadii dhufeyskan ayuu Rasuulku SCW amray in la tuuro Manjaniiq. Muddo markii la tuurayey Manjaniiq ayaa lagu burburiyey qaybo ka mid ahaa deriyadii qalcadda oo ay muslimiintii galeen gudihii qalcadda, waxaana halkaa ka dhacay dagaal daran ilaa markii dambe yahuuddii ay jabtay oo ka carartay maatadii iyo maalkii.

Dhufeysyadii kale ee isla dhinacaan magaalada kaga yaalley wax dagal ihi kama dhicin oo markii kuwii waaweynaa laga qabsaday, ayey iskaga baxeen oo isku ursursadeen dhufeysyadii ku yaalley dhinaca kale ee magaalada. Ciidankii muslimiintu markii uu furtay Nadha iyo Shiqi ayuu uga daba tegey yahuudda dhinicii kale oo hareereeyey. Dagaal adag ayaa ka dib dhacay ilaa ay muslimiiintu ka furteen dhufeyskii Qamuus. Dhufeysyadii kale markii uu Rasuulku SCW ku hareereysnaa afar beri, yahuuddiina ay soo bixi weydey ayuu Rasuulku SCW damcay in uu Manjaniiq ku garaaco hase yeeshee yahuuddii ayaa weydiisatay heshiis oo ninkii la oran jiray Kinaana binu Abil-Xaqiiq oo kamid ahaa madaxdii yahuudii reer banii Nadiir ayaa Rasuulka SCW farriin u soo diray oo yiri "ma soo degaa aan kula hadlee?", Rasuulkuna SCW wuu u oggolaaday. Markii uu soo degay ayaa waxaa lagu heshiiyey in dadka dagaallamayey ee dhufeyska ku jirey iyo maatada la iska daayo, Khaybarna ay ka guuraan, maalka Khaybarna ay muslimiintu leeyihiin. Rasuulku SCW wuxuu yiri "Alle iyo Rasuulkiisu beri bay idinka yihiin haddii aad wax qarisaan". Markii heshiiskii lakala qortayna way is dhiibeen oo sidaas ayey ku dhamaatay furashadii Khaybar.

Wuxuu Rasuulku SCW u yimid ninkii la oran jirey Kinaan oo ahaa khasnad hayihii yahuudda reer Banii Nadiir. Ninkaas oo hayey maal aad u tiro badan, markii uu Rasuulku SCW weydiiyey maalkana wuu inkiray, nin yahuudda ka mid ah ayaa yiri "waxa aan arkay Kinaana oo tegeya meeshaas maalin kasta", markaas ayuu Rasuulku SCW ku yiri Kinaana "ka warran haddii aan kaa helno maal sow kuma dilno". markaas ayuu yiri "haa", ka dib wuxuu Rasuulku SCW amray in la faago meeshii, markii la faagayna waxaa laga soo bixiyey keydkoodii qaarkiis, markaas ayaa la weydiiyey qaarkii kale hase yeeshee ma sheegin. Rasuulku SCW wuxuu amray Subyer in uu kexeeyo Kinaana oo soo buga bugeeyo, markii uu Subyer garaacay oo xanuujiyey ayuu Kinaana sheegay maalkii oo dhan. Ka dib wuxuu Rasuulku SCW amray Maxammed binu Maslama in uu dilo ninkaas maxaa yeelay labo ballan ayuu ku galay in la dilo: tan hore oo heshiiska ku jirtey in haddii ay wax qariyaan Alle iyo Rasuulkiisu SCW ay beri ka yihiin iyo tan dambe oo Rasuulku SCW ku yiri "haddii aan wax kaa helno sow kuma dilno" isaguna wuu yeelay. Saas ayaana abaalkeedu yahay ciddii islaamka diida oo dhagar iyo xumaan ka bixi wayda markii ay u gacan gasho ciidammada Alle.

Rasuulku SCW wuxuu ka dib damcay in sidi heshiisku ahaa uu yahuud Khaybar ka raro sidii uu awalba Madiina uga soo raray hase yeeshee waxa ay yiraahdeen "Maxammedow iska kaaya daa aan beeraha idiinka shaqayno, annaga ayaa idiinka aqoon badane", markaas ayuu Rasuulku SCW ka yeelay in ay iska degganaadaan Khaybar oo islaamka ku hoos noolaadaan, beerahana ay ka shaqeeyaan, wixii ka soo go'ana ay kala bar qaataan. Markii ay beeruhu soo go'aan ayuu Rasuulku SCW u diri jjirey yahuudda nin khibrad leh oo soo qiimeeya miraha beerta saaran, ka dibna intii lagu qiimeeyo oo soo go'da ayaa la kala baran jirey. Sidaa ayey yahuuddu Khaybar u degganayd ilaa waqtigii Cumar binu Khadhaab uu khilaafada islaamka hayey, ka dibna Cmar ayaa ka raray.

Wuxuu Rasuulku SCW beerihii Khaybar u qaybiyey 36 qaybood oo qay kasta ahayd 100 sahmi (saami), isku darkeeduna ahaa 3600 oo sahmi. Ka dib markii labo loo qaybiyo (1800 sahmi) wuxuu dhigay danta guud ee muslimiinta, 100na ciidanki ayuu qeybiyey oo 1400 oo nin wuxuu siiyey min hal sahmi, labadii boqol ee farasna wuxuu siiyey min labo sahmi sidaas darteed ninkii faras watay wuxuu helay saddex sahmi,

ninkii aan wadanna hal sahmi. Arrintaas wuxuu Rasulku SCW ku dhiirrigelinayey si ay ugu dadaalaan fardaha maaaddama ay farduhu waqtigaas joogeen halka ay miigtu maanta joogto.

Muslimiiintii waxa ay ka heleen Khaybar qaniimo aad u tiro badan oo Ilaahay ku hodmiyey, asxaabtiina waxa ay bexeen faqrigii aadka u darnaa, Caa'isha iyada oo Khaybar ka hadlaysa waxay tiri "haddaan timir ka dhargaynaa". Sidoo kale Cabduullaahi binu Cumar wuxuu yiri "ma aannaan dhargin ilaa aan Khaybar kafuranay". Waana qaniimadii uu Ilaahay u ballan qaaday. Qaniimada oo ah xoolo laga furto acdaa'da Alle markii ay diinta Alle ka horyimaadaan, waxa ay ka mid tahay risqiga ugu wanaagsan ee qofka muslimka ahi uu cuno. Allaahna wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((CUNA WAXAAD QANIIMAYSATEEN ISAGOO XALLAL WANAAGSAN AH, KANA BAQA ALLE, WUXUU ALLE AHAADAY DAMBI DHAAFE NAXARIISTA)), (Suuuratul-Anfaal 69).

Sidoo kale Rasuulku SCW wuxuu yiri "waxaa la ila soo bixiyey saacadda horteeda seef ilaa Ilaahay kaliya la caabudo, risqigaygana waxaa la yeelay hooska warankayga hoostiisa, dulli iyo xaqiraadna waxaa la yeelay ciddii amarkayga (islaamka) khilaafta, qofkii cid isku ekeysiiyana waa ka mid".

Rasuulka SCW intii uusan Khaybar ka tegin waxaa ugu yimid Jacfar binu Abii-dhaalib iyo dadkii muslimiinta ahaa ee dhulka xabashida jirey oo uu Najaashi soo direy markii uu helay warqaddii Rasuulka SCW. Dadkaan waxaa la socdey Abuu Muusa Al-Ashcari iyo dadkii ashcariyiinta ahaa ee Yaman ka soo islaamay oo gaarayey dhowr iyo konton nin qaniimadi ayaana wax laga siiyey. Waxaa kale oo intii uu Rasuulku SCW Khaybar joogey yimid oo soo islaamay oo Abuu Hureyra iyo dhowr nin oo reerihiisa ahaa, waxayna markii hore tageen Madiina oo Subaac binu Curfada oo ahaan ninkii uu Madiina Rasuulku SCW madaxda uga soo dhigay ayaa soo ambabixiyey oo sahay soo siiyey.

Markii uu Rasuulku SCW Khaybar ka fara xashay ayaa naag la oran jirey Seynaba binu Xaarith oo yahuudiyad ahayd uuna qabay nin la oran jirey Sulaam binu Mashkam waxa ay Rasuulku SCW u soo hadiyeysay hilib ri' ay soo soshay waxa ayna tiri "cadkee Rasuulku ugu jecel yahay?", markaas ayaa la yiri "dhudhunka", markaas ayey hilbihii oo dhan sumaysay, dhudhunkiina si gaar ah u sumaysay, ka dibna Rasuulka SCW u keentay. Rasuulku SCW markii uu hal mar goostay ayuu tufay oo yiri "waxaa la ii sheegay laftaani in ay sumaysan tahay", naagti ayaa loo yeeray, markaas ayey qiratay. Rasuulku SCW wuxuu yiri "maxaa kugu xambaaray arrintaan?", waxay tiri "waxaad aragtay ayaad dadkaygii ku samaysay marka waxa aan is iri haddii uu boqor yahayna waanu ka istareexin, haddii uu Nabi yahayna waa loo sheegi", markaas ayuu Rasuulku SCW iska dhaafay hase yeeshee nin asxaabtii ka mid aha oo la oran jirey Bashiir binu Buraa oo hilikii wax ka goostay ayaa u dhintay, markaas ayaa naagti loo qisaasay oo la dilay. Sidaas ayuu ku dhamaaday duullaankii Khaybar guushina Ilaahay ku siiyey Rasuulka SCW iyo muslimiinta, acdaa'dii Ilaahayna ay jab ula kulmeen.

Muslimiinta waxaa duullaankaas uga shahiiday 16 nin: 4 Qureysh ah, nin reer Ashjac ah, nin reer Aslam ah, nin reer Khaybar ah iyo 9 Ansaar ah. Dhinaca gaalada waxaa laga dilay 93 nin.

Rasuulku SCW markuu khaybar tagay ayuu yahuuddii reer Fadak u diray Muxaysa binu Mascuud si uu islaamka ugu yeero hase yeeshee way diideen, markiise Khaybar la furtay ayuu Ilaahay quluubtoodii aragagax geliyey markaas ayey heshiis ula soo degdegeen Rasuulka SCW ay kuleeyihiin "sidii aad reer Khaybar ula heshiisay oo kale annagana noola heshii, Rasuulkuna SCW wuu ka yeelay.

Rasuulku SCW markiii uu Khaybar ka tegey wuxuu aaday meel la oran jirey Waadil-Quraa oo ay degganaayeen yahuud iyo carab. Markii uu gaaray oo uu dul degey aye yyahuuddii soo tuureen gammuuno, waxayna ku dhaceen wiil la oran jirey Mudhcam oo Rasuulka SCW mawle u ahaa. Wiilkii wuu dhintay, markaas ayey dadkii dheheen "janno ayaa u ahaatay" hase yeeshee Rasuulku SCW wuxuu yiri "ma aha sidaas, Ilaahii nafsaddaydu gacantiisa ku jirtey baan ku dhaartaye shalmaddii (xoolihii) uu ka qaatay qaniimadii Khaybar intii aan la qaybin ayuu naar ku gelayaa". Dadkii markii ay hadalkaas maqleen ayaa qofkii wax hayey keenay.

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu asxaabtiisii u diyaariyey duullaankii reer Waadil-Quraa, wuuna safay, wuxuuna calankii u dhiibay Sacad binu Cubaada, raayana wuxuu u dhiibay Xubaab binu Mundir, raaya kalena Sahal binu Xuneyf, mid kalena Cubaada binu Bishir. Sidii hore oo kale ayuu Nabiga SCW islaamka ugu yeeray dadkaas, wayse diideen oo dagaal ayey ka doorteen.

Waxaa mubaaraso ay u soo saareen nin ka mid aha, waxaase u soo baxay oo diley Subeyr binu Cawaam. Mar labaad ayaa islaamka loogu yeeray haddana way diideen. Nin kale ayaa mubaaraso ugu soo baxay hase yeeshee isagana waxaa dilay Subyer binu Cawaam. Mar saddexaad ayaa islaamka loogu yeeray, iyaguna way diideen oo waxay mubaaro u soo saareen nin kale, waxaa markan u baxay oo dilay Cali binu Abii-dhaalib. Ka dib sidaa ayaa islaamka loogu yeerayey, iyaguna u diidayeen oo hadba nin mubaaraso ugu soo saarayeen ilaa laga diley 11 nin. Salaad ayaa soo gashay markaasuu Rasuulku SCW asxaabtii soo tujiyey, ka dibna goobtii ayey ku soo laabteen oo sidii oo kale islaamka ugu yeeray markii ay diideenna ula dagaallameen ilaa ay ka galabaysteen.

Subaxdii dambe ayaa Rasuulka SCW iyo ciidankiisii ku soo kallaheen, waana la qabtay, maalkoodii Ilaahay qaniimo ayuu muslimiinta uga dhigay. Ka dib Rasuulku SCW afar beri ayuu meeshaas joogay, muslimintana qaniimadii ayuu u qaybiyey, dhulkii iyo beerihina yahuud ayuu uga tegey oo uu kula heshiiyey sidii reer Khaybar oo kale.

Yahuuddii deggenayd meeshii la oran jirey Taymaa, markii ay maqashay in Rasuulku SCW qabsaday Khaybar iyo Waadil-Quraa, ayey is dhiibeen, waxayna Rasuulka SCW u soo bandhigeen in uu sidii hore oo kale uu heshiiyo. Rasuulku SCW wuu ka yeelay wuxuna u qoray warqaddan:

Tani waa waraaqadii Maxammed, Rasuulkii Alle uu u qoray reer banii Cadiye. Waxa ay leeyihiin dimo (ballan) dushoodana jisyo (canshuurta gaalada laga qaado) ayaa ahaatay, lama colaadiyo lamana bixiyo. Habeenku waa dheer yahay maalintuna waa adag tahay.

Ka dib Rasuulku SCW Madiina ayuu u so ambabaxay, dhex markuu marayana waxa uu guursaday oo uu dhsitay Safiya bintu Xuyey oo kamid ahayd dadkii Khaybar laga soo furtay uuna dhalay ninkii ahaa Xuyey binu Akhdhab ee madaxda u ahaa yahuudii reer banii Nadiir ee Madiina laga soo raray kana mid ahaa raggii Khaybar ka tegey ee soo abaabulay duullaanki Axsaab ka dibna reer banii qureyda dhufayska la galay oo halkaa lagu dilay.

Safiay waxa ay ahayd gabar yar waxaana guursaday marki ay Khaybar yimaadeen ka dib ninkii aan soo marnay ee ahaa Kinaana binu Rabbiic binu Abil Xuqayq markaas iyada oo aroos ku jirta waxa ay ku riyootay Dayaxa oo dhabteeda ku soo dhacay, waxay u sheegtay ninkeedii markaasuu intuu dharbaaxo daran ku dhuftay ku yiri "ma waxaad rajaynaysaa in Boqorka Yathrib ninkaaga noqdo", hase yeeshee muddo yar ka dib Rasuulka SCW ayaa Khaybar furtay waxayna Safiya kamid noqotay dadkii laga qabsaday yahuud.

Rasuulku SCW san soo sheegnayba markuu dhex marayo ayuu xoreeyey oo guursaday ka dib markii ay islaamtay, habeenkii uu Rasuulku SCW la aqal galay ayaa nin asxaabta kamid aha oo la oran jirey Abuu Ayuub Khaalid binu Sayd intuu seeftiisii qaatay ayuu Rasuulka SCW waardiye ka qabtay isagoo ka baqaya in ay Rasuulka SCW wax gaarsiiso, markii waagii baryey ayuu Rasuulku SCW arkay markaasuu ku yiri "maxaa kugu dhacay abii Ayuub", wuxuu yiri "Rasuulkii Allow waxaan kaaga baqay haweentan, maxaa yeelay waxaa la dilay aabeheed ninkeedii iyo tolkeed waana qof hadda gaalnimo kasoo gashay sidaa darteed waan kaaaga baqay". Rasuulku SCW waxa uu sameeyey waliimo oo waxaa la isku dardaray wixii ay asxaabtu hayeen sida hilib, muufo, timir iwm, wuxuuna Rasuulku SCW meeshii deganaa 3dex maalmood oo uu safiya u yeelay.

Ka dib Rasuulka SCW iyo asxaabtiisii waxa ay aadeen dhinicii Madiina, habeenkii oo dhan sidii loo socday markii meel dhexe la marayo ayaa goor dambe meel la seexday. Rasuulku SCW wuxuu Bilaal faray in uu soo jeedo oo salaadda subax u kiciyo maxaa yeelay ciidanku muddo ayey dagaal iyo safar ku jireen. Bilaal markii uu wax yar soo jeeday ayuu rartiisii isku tiiriyey, markaas ayey indhihiisii ka qaalib noqdeen (oo wuu gam'ay). Hurdadii ayaa dhammaantood la tagtay ilaa ay qorraxdii ka soo baxday, waxaa uguhor kacay Rasuulka SCW. Ka dib Rasuulku SCW iyo asxaabtu togii ayay xoogaa ka socdeen oo salaaddi fajar ku tukadeen.

Intaas ka dib wuxuu Rasuulku SCW ku soo laabtay Madiina, waxaa kale oo iyaguna Madiina ku soo laabtay ciidan uu madax u ahaa Abaan binu Sacid oo uu Rasuulku SCW markii uu Khaybar aadayey u diray dhinaca Najdi si uu u cabsi geliyo rer baadiyihi oo aysan Madiina u soo hawaysan inta uu Rasuulku SCW Khaybar ku maqan yahay.

DUULLAANKII DAATU-RIQAAC

Markii Rasuulku SCW ka soo jeestay laba garab (Qureysh iyo Yahuud) oo ka mid ahaa saddexdii gaashaanbuur oo Axsaab ku wada jirey ayuu u soo jeestay garabkii 3aad oo ahaa qabiilladii reer Qadafaan. Duullaankii lagu qaaday reer Qadafaan wuxuu ahaa mid ka duwan kuwii hore maxaa yeelay kuwani ma aysan lahayn magaalooyin iyo dhufeysyo ee waxa ay ahaayeen qabiilo kala firirsan oo reer baadiye ah.

Duullaankan, oo sida loo badan yahay, ahaa bishii Rabbiicul-Awal, sannadkii 7aad ee hijriga. Rasuulku SCW markii uu maqlay in ay in ururs anayaan qabiillo ka mid ah reer Qadafaan ayuu kaxaystay ciidan 400 ama 700 oo nin ka kooban. Madiinana wuxuu mas'uul uga sii dhigay Abuu Darr Al-qafaari ama Cusmaan binu Cafaan. Labo maalmood markii ay Rasuulka SCW iyo ciidankiisii ka sii socdeen, oo ay marayaan meel la yiraahdo Nakhab, ayey la kulmeen ciidan reer Qadafaan ah hase ahaatee wax dagaal ihi ma dhicin.

Waxyaabaha dhacay intii jidka lagu jirey waxaa ka mid ahaa in maalin kulayle ah ay Rasuulka SCW iyo ciidankiisii meel degeen, markaas ayey asxaabtii geed hoos fiican Rasuulku SCW uga tageen iyagiina dhirtii kale isu kala qaybiyeen. Rasuulka SCW geedkii ayuu markaas hoos seexday, seeftiisiina meel kore ayuu surtay. Goor uu Rasuulku SCW hurdo ayaa waxaa u yimid nin reer baadiye ah oo gaal ah, markaas ayuu inta seeftii qaatay ag istaagay Nabiga SCW. Rasuulka SCW ayaa indhaha kala qaaday oo arkay ninkan seeftiisii la soo baxay oo dul taagan, intii uusan hadlin ayaa gaalkii hadlay oo yiri "ma iga baqaysaa?", Rasuulku SCW "maya" ayuu ugu jawaabay, ninkii ayaa yiri "yaa iga kaa celinaya?", "Allaah" ayuu Rasuulku SCW yiri. Intaa markii la is yiri ayey seeftii ninkii ka dhacday, Rasuulku SCW ayaa seeftii qaatay oo ku yiri "yaa iga kaa celinayaa?", wuxuu ninkii yiri "noqo mid wax qaada kan ugu kheyr badan", Rasuulku SCW wuxuu ku yiri "ma qiraysaa in Allaah ma ahane uusan Ilaah kale jirin, aniguna aan ahay Rasuulkii Alle?", markaas ninkii yiri "waxa aan kaa ballan qaadayaa

in aanan kula dagallamin, cid kula dagaallamaysana aanan raacin".

Rasuulku SCW markaas ayuu asxaabtii u yeeray oo u sheegay qisadii iyada oo uu ninkii ag fadhiyo, ka dibna wuu iska cafiyey, ninkiina markii uu ciddiisii u tegey ayuu ku yiri "waxa aan idinkaga imid dad kii ugu kheyr badnaa agtisa (nabiga SCW).

Qisadan iyo kuwa la midka ah waxa aan ka arkaynaa sida uu Rasuulku SCW u ahaa mid cafis iyo naxariis badan, in badanna waxa aynu ku arkaynaa siirada in haddii Rasuulka SCW shakhsiyaddiisa lagu soo xad gudbo in uusan ka ficil qaadan jirin ee uu iska cafin jirey iyada oo la og yahay shakhsiyadda Rasuulka SCW oo lagu xad gudbo in ay la mid tahay islaamka oo lagu xad gudbay, haddana haddiii aysan ahayn dhib weyn wuu iska dhaafi jirey, hase yeeshee markii islaamka wax yar lagu xad gudbo wuu ka xanaaqi jirey oo ka ficiloon jirey sidaa ayaana laga doonayaa qofka muslimka ah ee waddadii Rasuulka SCW ku taagan in uu in badan wixii shakhsiyaddiisa la yeelo iska dhaafo, haddii aysan soo noqnoqon, laakiin haddii diinta Alle lagu xad gudbo in uu ka qiiroodo oo uu siduu wax uga qaban karo uga qabto. Sidoo kale waxa aan arkaynaa geesinimadii Rasuulka SCW iyo sida uusan bani aadamka uga baqayn, Rabbigiisna ugu kalsoonaa, Alle ayaana ka ilaashay sharta bani aadamka, wuxuuna Ibnu Hishaam sheegay in arrintan sababteeda ay aayadan ku soo dagtay.

((DADKA ALLE RUMEEYAYOW XUSUUSTA NIMCADII ALLE IDIIN GALAY MARKII AY DAD DAMCEEN INAY IDIIN FIDIYAAN GACMAHOODA (SI AY IDIIN WAX YEELAAN) OO UU IDINKA QABTAY GACMAHOODA, ALLE KA BAQA, HANA TALA SAARTAAN ALLE MU'MINIINTU)), (Suuuratul-Maa'ida 11).

Arrinimii kale ee dhacay duullaankan dhexdiisa waxaa ka mid ahaa in Rasuulku SCW uu habeen waardiye ka dhigay labada saxaabi ee la kala oran jirey Cammaar binu Yaasir iyo Cubaaba binu Bishiir, markaas ayaa iyaga oo is bedbeddalaya u Cammaar seexday, Cubaadana salaad galay. Waxaa u yimid nin gaaladii reer baadiyaha ahayd ka mid ah oo ehelkiisii wax la soo yeelay, ka dibna ku soo nadray in uu asxaabta Nabiga SCW dhiig ka soo daadiyo. Markii uu yimid ciidankii muslimiinta meeshii uu degganaa ayuu arkay ninka taagan (Cubaadda) oo gartay in ay yihiin asxaabtii Rasuulka SCW, fallaar ayuu ku soo ganay oo ku dhuftay hase ahaatee Cubaada isma dhaqaajin, mid labaad ayuu ku dhuftay, Cubaadana ma dhaqaaqin, mid saddexaad ayuu ku dhuftay oo cararay. Cubaada salaaddiisii kama bixin ilaa uu ka dhammaystay, markaas ayuu saaxiibkiis Cammaar kiciyey. Cammaar markii uu arkay Cubaada oo saddex fallaarood ku yaalliin, dhiigguna ka daadanayo ayuu ku yiri "Subxaanallaah, war maxaad ii kicin weydey?", markaas ayuu Cubaada yiri "suurad macaan ayaan akhrinayey oo wax aan nacayey in aan iska kala gooyo".

Ugu dambaynti duullaankan Daatu-Riqaac oo lagu qaaday qabiilladii reer Qadafaan wax weyn ayuu ka beddelay jawigi reer Qadafaan oo wixii duullaankan ka dambeeyey cagaha ayey dhulka dhigeen, waxa ayna bilaabeen islaamid iyo heshiis. Arrintaas waxaa caddaynaya in sannadkii duullaankaas ka dambeeyey 8aad ee qabiillo badan oo reer Qadafaan ihi ku jireen ciidankii muslimiinta iyaga oo soo islaamay.

ILAALOOYINKII DAATU-RIQAAC KADAMBEEYEY

Rasuulku SCW markii uu ka soo laabtay duullaanki Daatu-Riqaac ma uusan bixin ilaa laga gaaray bishii Shawaal ee isla sannadkii 7aad ee hijriga hase yeeshee wuxuu muddadaas iska daba diray dhowrkan sariyo (ilaalo).

1. Ilaaladii uu madaxda u ahaa Qaalib binu Cabdullaahi Layth oo uu u diray reer banii Mullaax bishii Safar ama Rabbiicul-Awal, sannadkii 7aad hijriga. Sababta loo direy ciidankanna waxa ay ahayd in ay reerkaasi dileen rag muslimiinta ka tirsanaa. Qaalib iyo kooxdiisii way bexeen, markii ay tageen degaankii qabiilkaas ayey ragna ka soo dileen,

xoolana ka soo kaxaysteen, kana soo laabteen. Qabiilkii ayaa isu habar wacday oo ciidan aad u tiro badan ka soo daba direy Qaalib iyo kooxdiisii hase yeeshee markii ay u soo dhowaadeen ayaa Ilaahay keenay roob xoog badan oo dadkiisii kala xiray labadii ciidan, sidaas ayaana lagu kala tegay.

2. Ilaaladii uu hoggaaminayey Cumar binu Khadhaab oo uu Rasuulku SCW bishii Shacbaan, sannadkii 7aad ee hijriga u direy Turba oo ay degganaayeen reer banii Hawaasin. Ciidankan oo ka koobnaa 30 nin habeenkii ayey socon jireen, maalintiina way is qarin jireen si aan looga war helin oo ay u kediyaan acdaa'da Ilaahay, hase ahaatee reer Hawaasin way ka war heleen ciidanka, wayna kala carareen. Cumar iyo kooxdiisii way raadiyeen hase ahaatee waxba ma soo helin, ka dibna Madiina ayey ku soo laabteen.

3. Ilaaladii uu madaxda u ahaa Bashiir binu Sacad Al-ansaari oo uu Rasuulku SCW isla bishii Shacbaan, sannadkii 7aad ee hiriga u direy reer banii Mura. Ciidankan oo ahaa 30 nin meeshii loo direy ayey tageen oo soo gabagabeeyeen, ka dibna soo noqdeen, hase yeeshee waa laga daba yimid oo dagaal daran ayaa dhex maray iyaga iyo qabiilkaas. Asxaabtii oo dhan goobtaas ayey ku wada shahiideen Bashir binu Sacad ma ahane, isaguna dhaawac ahaan ayuu nin yahuudi ah gurigiis ku tegey, markii uu raystayna Madiina ayuu ku soo laabtay.

4. Ilaaladii uu hoggaaminayey Qaalib binu Cabdullaahi Layth oo uu Rasuulku SCW bishii Ramadaan, sannadkii 7aad ee hijriga u direy reer banii Cabdi binu Thaclaba iyo reer banii Cawaal. Ciidankan oo 130 nin gaarayey waxa ay soo guteen hawshii loo direy dabadeedna way soo naqdeen.

5. Ilaaladii uu madaxda u ahaa Cabdullaahi binu Rawaaxa oo uu Rasuulka SCW bishii Shawaal, sannadkii 7aad ee hijriga u direy Khaybar (akteeda). Rasuulku SCW markii uu maqlay in nin la yiraahdo Bashiir binu Saraam uu ururinayo ciidan reer Qadafaan ah si ay muslimiinta ugu soo duullaan ayuu ciidankan oo 30 nin ka koobnaa u direy. Cabdullaahi iyo ciidankiisii waxa ay tageen meeshii, waxayna gacanta ku soo dhigeen 30 nin oo uu ku jiro ninkii madaxda u ahaa, ka dibna markii ay dhex marayaan ayey nimankii khiyaama sameeyeen oo isku dayeen dil markaasaa la laayey.

6. Ilaaladii uu hoggaaminayey Bashiir binu Sacad oo uu Rasuulku SCW isla bishii Shawaal, sannadkii 7aad ee hijriga u direy Qadafaan. Ciidankan oo 300 nin ahaa sababta loo diray waxa ay ahayd in qoladaas qaar ka tirsan ay abaabul sameeyeen si ay Madiina u miraan. Bashiir iyo Ciidankiisii habeen socod ayey ahaayeen, maalintiina way is qarin jireen si aan loo ogaan hase ahaatee qabiilkii wuu ka war helay wuuna baqday. Ciidankaas waxa uu ku soo laabtay Madiina isaga oo qaniimo badan iyo labo nin oo qafaal ah wata. Labada nin markii Rasuulka SCW loo keenay way islaameen.

7. Ilaaladii Qaalib binu Cabdullaahi laythi oo uu Rasuulku SCW diray bishii Ramadaan sannadkii 8aad ee hijriga uuna u diray reer banii Cawaal iyo reer banii Cabdi Thaclaba, waxaana ciidankaani dhamman 130 nin. Qaalib iyo ciidankiisii meeshii ayey tageen, waxayna weerareen cadawgii oo wixii la dagaalamay ayey dileen ka dibna xoolo ayey kasoo kaxaysteen waxayna ku soo laabteen Madiina. Ilaaladaan weeye midda uu Usaama binu Sayd dilay nin ka mid ah dadkii la dagaalamayey oo ashahaatay, Rasuulkuna SCW markii loo sheegay waxa uu Usaama ku yiri "mawaxaad dishay markuu Laa Ilaaha illa Laah yiri ka dib", wuxuu yiri Usaama "Rasuulkii Allow wuu iiga gabanayey" wuxuu yiri Rasuulku SCW "maqalbigiiisaad jeexday oo aad ka ogaatay in uu Run sheegayey iyo in uu Been sheegayey". Allaah SW isaga oo arintaa ka hadlaya waxa uu qur'aankiisa ku yiri:

((KUWA MU'MINIINTA AHOW MARKAAD U BAXDAAN JIDKA ALLE WAX CADDAYSTA (HUBSADA) OO HA DHIHININA QOF SALAAM IDIIN SOO GUDBIEY MU'MIN MATIHID

IDINKOO DOONAYA BIRBIRKA ADDUUNKA, ALLE AKTIISA AYEY AHAATAY QANIIMO BADANE, SAASOO KALE AYAAD AHAYDEEN (IDINKUBA) AWAL, ALLAANA IDIN GALADAYSTAY (OO IDIN SOO HANUUNIYEY) EE WAX CADAYSTAY (OO HUBSADA ARRINKA), ALLENA WAXA AAD CAMAL SAMAYNAYSAAN WAA GUN OGYAHAY)), (Suuratu-Nisaa' 94).

Sidoo Allahba aayadan ku sheegay qofkii gaalka ahaa ee kula dagaalamayey haddii uu dagaalkii joojiyo oo uu ashahaato, dhiigiisu waa xaraan lamana dili karo, maxaa yeelay awalba waxaa loola dagaalamayey in uu Addoon unoqdo Rabbigiis, haddii taas laga helana faraha ayaa laga qaadayaa, sidoo kale haddii uu gaalku ogolaado jisyo iyo heshiis isna waa la nabad gelinayaa mar hadduusan diinta Alle ka hor imaanayn oo uu ogol yahay in ay ummada gaarto, sidoo kale waxaa lala dagaallamayaa ciddii dida Rugni islaamka ka mid ah sida Salaadda, Sakada, Xukunka shareecada islaamka iwm haba sheegtaan islaam, waxaana dagaalkoodu ku eg yahay ilaa ay ka ogolaadaan oo ay ka laabtaan. Abuubakar Sidiiqna waxa uu la dagaalamay dadkii Sakada diiday marki Rasuulku SCW dhintay ilaa ay ka soo laabteen, mana aysan dafirin dadkaasi Sakada, ee waxay is moodsiiyeen in ay Rasuulka SCW ku khaas ahayd, hase yeeshee qofku hadduu toos u jaaxido oo uu yiraahdo iguma waajibin Salaada ma Sako iwm ah ama uu inkiro Xukunka shareecada islaamka, is kuma khilaafsana culimada islaamku in uu qofkaasi yahay murtad islaamka ka baxay.

8. Ilaaladii Xadrat Al-aslami oo uu Rasuulku SCW direy ka dib markii uu ka war helay in nin u dhashay qabiilkii Jasnam binu Mucaawiye uu wax abaabulayo. Abii Xadrad iyo ciidankiisii oo 13 nin ahaa waxay isticmaaleen khiddad cadawgiina waa jabay.

9. Sidoo kale Rasuulku SCW diray koox ilaalo ah oo uu madax u ahaa nin Ansaar ah (oo la oran jirey Cabdullaahi binu Xudaafa) wuxuuna Rasuulku SCW kooxdaan amray in ay ninkaas uu madaxda uga dhigay ay maqlaan, markii meel la marayo ayuu u carooday markaasuu ku yiri "ii keena qoryo", wey keeneen, wuxuu yiri "dab shida", way shideen, markaasuu ku yiri "saw idinma amrin Rasuulku SCW in aad i maqashaan oo i adeecdaan", waxay dheheen "haa", wuxu yiri "gala dabka", waxay dheheen "waxaan Rasuulka SCW ugu soo cararnayba waa naar ka carar", ka dib wuu iska caro baab'ay dabkiina waa la iska damiyey, dabadeed markii Rasuulka SCW loo yimid ayey arrintii u sheegeen markaas yiri "hadday gali lahaayeen dabka kama aysan bexeen (naarta), is adeecitaanku waa wixii wanaag ah.

CUMRADII LA SOO QALEEYEY

Waxa aan soo marnay in bishii Dul-Qacda, sannadkii 6aad ee hijriga ay Rasuulka SCW iyo asxaabtiisu aadeen Makka iyaga oo doonaya Cumro hase yeeshee ay qureysh u diidey in ay xaramka galaan, ka dibna halkaas uu ka dhacay heshiiskii Xudeybiya. Heshiiskaa waxaa ka mid ahaa in ay muslimiintu sannadkaas noqdaan oo ay soo cumraystaan sannadka kale iyada oo loo oggol yahay saddex beri oo kel ah. Haddaba Rasuulku SCW isla bishaa, sannadkii 7aad ee hijriga ayuu soo xirtey Cumro, asxaabtiisana amray in ay cumradii sannadkii hore ka baaqatay soo qaleeyaan. Rasuulku SCW waxaa kale oo uu amray in asxaabtii la socotay sannadkii hore aysan ka harin sidaa darteed waxaa raacay intii Xudeybiya la socotay intii ka dhimatay ama shahiiday maahane, waxaa kale oo raacay dad kale oo aan la socon Xudeybiya. Tirada dadka Nabiga SCW raacay waxa ay ahaayeen 2,000 oo nin marka laga reebo dumarka iyo caruurta, wuxuuna Rasuulku SCW Madiina madax uga sii dhigay Cabdiraxmaan ibnu Cawf. Rasuulku SCW wuxuu kexeeyey hadyi dhan 60 geel ah, waxaana u wadey Najaaba binu Jundub Al-aslami.

Cumrada wuxuu Rasuulku SCW ka xirtay meesha ay haddaba ka xirtaan dadka ka imaanaya Madiina iyo dhinaceeda oo la yiraahdo Dil-Xuleyfa. Rasuulka SCW iyo

asxaabtiisu way qaateen hubkoodii dagalka oo dhan maxaa yeelay cadowga Ilaahay la iskuma aammini karo oo waxaa laga yaabaa in ay makri iyo khiyaamo sameeyaan hase yeeshee waxaa hubkaas la dhigtay meel la yiraahdo Yajuj oo duleedka Makka ahayd, wuxuuna Rasuulku SCW hubkaas u reebay 200 oo nin oo uu madax u ga dhigay Aws binu Khawli. Rasuulka SCW oo ciidanka intiisii kale wata, hubkii socotadana sita, seefuhuna ay galkooda ugu jiraan ayaa u soo gudbay xaramka.

Rasuulku SCW wuxuu dawaafayey isaga oo hashiisii saaran, asxaabtuna iyaga oo seefohoodii gaashaaman ayey la dawaafayeen oo talbiibsanayeen. Sidii ballantu ahayd gaaladii qureyshtu way u faaruqiyeen Rasuulka SCW iyo asxaabtiisa xaramka iyaga oo fuulay buur ku taala dhinaca waqooyi ee kacbada si ay u daawadaan Rasuulka SCW iyo ciidankiisa. Waxa ay ku sheekaysanayeen "waxaa yimid Maxammed iyo asxaabtiisii oo ay qandhadii Yathrib (Madiina) ay tabar darnaysiisay". Rasuulku SCW markii uu maqlay warkoodaas ayuu asxaabtiisii amray in ay maradooda kore gacata midig hoos ka mariyaan oo bannaanka ula soo baxaan sida haddaba ay raggu yeelaan. Waxaa kale oo uu Rasuulku SCW amray asxaabta in ay saddexda dawaaf oo hore ay rucleeyaan, labada rukni ee dhinaca kale xigana la socdo si uu cadowga Ilaahay u arko xoogga iyo awoodda muslimiinta.

Gaaladii markii ay arkeen asxaabtii oo maradu u qaaran tahay oo rucleynaya ayey yiraahdeene "maxaa loo lahaa nimankaan qandho ayaa tabar darnaysay, wax kasta way ka xoog badan yihiin". Markii uu Rasuulku SCW dawaafkii dhammaystay wuxuu orday Safa iyo Marwa dhexdooda, ka dibna hadyigii ayuu ag istaagay oo yiri halkaan ku qala, meel walba oo Makka ka mid ahna waa lagu qali karaa". Meeshii ayuu Rasuulku SCW hadyigii ku gowracay, timihiina ku xiirtay, asxaabtiina sidaa oo kale ayey yeeleen.

Rasuulku SCW wuxuu u direy raggii hubka ilaalinayey ciidan soo baddala si ay u so cumraystaan, ka dibna way cumraysteen. Rasuulku SCW Markii uu Makka joogey saddex beri, ayey gaaladii maalinkii 4aad u yimaadeen Cali binu Abii-Dhaalib oo ku yiraahdeen "u sheeg saaxiibkaa (nabiga SWC) ha naga baxo, muddadii way u dhammaatayey", markaas ayey Rasuulka SCW iyo asxaabtiisii bexeen oo degeen meesha la yiraahdo Saraf. Rasuulku SCW markii uu Makka ka sii baxayey waxaa soo daba orday gabar yar oo uu dhalay adeerkiis Xamsa, waxa ayna tiri "adeer, adeer", markaas ayuu gabadhii u dhiibay Cali iyo Faadumo. Ka dib waxaa gabadhii ku dooday Cali binu Abii-Dhaalib, Jacfar binu Abii-Dhaalib iyo Seyd binu Xaarith oo uu mid walba doonayey in uu bagadha isagu koriyo. Rasuulku SCW wuxuu u xukumay Jacfar maxaa yeelay in kasta oo uu Cali ula siman yahay haddana Jacfar wuxuu qabay haryarteed, Rasuulkuna SCW wuxuu yiri "habaryartu waa booskii hooyada".

Cumradaas ka dib wuxuu Rasuulku SCW guursaday Maymuuna bintu Xaarith, oo intii uusan xaramka ka tegin ayuu u direy Jacfar binu Abii-Dhaalib si uu ula soo hadlo, ka dib way yeeshay oo waxay wilaayadeedii u dhiibatay Cabbaas binu Cabdimudhalib oo qabay walaasheed, Cabbaasna wuu u meheriyey Nabiga SCW. Markii ay muddadii cumradu dhammaatay ayuu Rasuulku SCW reebay Raafic si uu Maymuuna u soo kexeeyo. Raafic wuu soo kaxeeyey Maymuuna wuxuuna uga daba yimid Rasuulka SCW iyo asxaabtii kale meeshii ay degeen oo ahayd Saraf, ka dibna Madiina ayaa loo laabtay.

ILAALOOYINKII KA DAMBEEYEY CUMRATUL-QADAA

Rasuulku SCW cumrada ka dib intii aan la gaarin dagaalkii Mu'ta wuxuu direy dhorkan sariyo (ilaalo).

1. Ilaalo uu madax u ahaa Ibnu Abil-Cawja oo uu Rasuulku SCW bishii Dil-Xija, sannadkii 7aad ee hijriga u diray qabiilkii reer banuu Suleym si loogu yeero islaamka hase yeeshee markii arrinkaas loogu baaqay way diideen. Ka dib waa lala dagaallamay

oo la jebiyey, waxaana laga soo qafaashay labo nin, ciidankii muslimiinta oo uu ka soo dhawacmay hoggaamiyihiina waxa ay ku soo laabteen Madiina.

2. Ilaalo uu hoggaaminayey Qaalib binu Cabdullaahi oo uu Rasuulku SCW bishii Safar, sannadkii 8aad ee hijriga u direy qabiilkii laayey ilaaladii Bashiir binu Sacad. Ciidankan oo ka koobnaa 200 nin waxa ay tageen meeshii loo direy, si fiican ayeyna u soo edbiyeen qabiilkaas, qaniimana way soo heleen, ka dibna waxa ay ku soo noqdeen Madiina.

3. Ilaaladii Daati Adhlax oo ka koobnayd 15 nin, uuna madax u ahaa Kacab binu Cumeyr Al-ansaari oo uu Rasuulku bishii Rabbiicul-Awal, sannadkii 8aad ee hijriga u direy banii Qudaaca ka dib markii uu maqlay in ay u tabaabusheysanayaan sidii ay ugu soo duuli lahaayeen muslimiinta. Kacab iyo ciidankiisii waxa ay qabiilkaa ugu yeereen islaamka hase yeeshee way diideen oo weliba weerar ayey ku soo qaadeen muslimiintii. Dagaal ayaa halkaas ka dhacay, waxaana goobtaas ku shahiiday dhammaan ciidankii muslimiinta marka laga reebo labo nin oo meyd kala dhex gashay iyo nin kale.

4. Ilaaladii Daatu Cirqin oo uu Rasuulku SCW isla bishii Rabbiicul-Awal, sannadkii 8aad ee hijriga u direy banii Hawaasin. Rasuulku SCW markii uu maqlay in ay qabiilkaasi mar kale abaabul galeen ayuu u dire 25 nin oo uu madax uga dhigay Shujaaca binu Wahab, hase ahaatee wax dagaal ihi ma dhicin.

DAGAALKII MU'TA

Dagaalkan oo ahaa dagaal weyn wuxuu dhacay bishii Jamaadul-Awa, sannadkii 8aad ee hijriga. Mu'ta oo uu dagaalku ka dhacay waxa ay ahayd magaalo Shaam ku taal. Sababta dagaalkani waxa ay ahayd sidan: Rasuulka SCW ayaa warqad u diray boqorkii Basra, uguna sii dhiibay Xaarith binu Cumeyr. Waxaa Xaarith dilay nin la oran jirey Shuraxbiil binu Camar oo boqortooyadii Qaysar madax uga ahaa meesha la yiraahdo Balqaa oo Shaam ka tirsan, waxaana waqtigaas iyo maantaba aad u fool xun in la dilo wufuudda iyo musaafiriinta. Rasuulku SCW markii uu warkaa maqlay aad ayuu uga xumaaday, wuxuuna diray ciidan xoog leh oo gaarayey 3,000 oo nin, wuxuuna madax uga dhigay Seyd binu Xaarith, wuxuuna Rasuulku SCW yiri "haddii Seyd la dilo, Jacfar binu Abii-Dhaalib madax ha noqdo; haddii Jacfar la dilana Cabdullaahi ibnu Rawaaxa madax ha noqdo". Rasuulku SCW wuxuu ciidankaa siiyey calan cad oo uu u dhiibay Seyd, wuxuuna u dardaarmay in ay keenaan ninki dilay Xaarith binu Cumeyr, marka horese ay dadkaas islaamka ugu yeeraan o ohaddii ay diidaan ay iyaga oo Ilaahay u kaalmaysanaya la dagaallamaan. Rasuulku SCW waxaa kale oo uu ciidankaa ku yiri "ugu duula magaca Alle, jidka Alle, cid Alle ku kufriday, ha doorinina hana dilina carruur, haween iyo duqo, ha goynina dhirta hana duminnina dhista".

Ka dib wuxuu ciidankaasi isu diyaariyey ambabax, dadkii reer Madiinana waxa ay isugu yimaadeen goobtii uu ciidanku ka baxayey iyaga oo u duceynaya ciidanka oo ku leh "Allaha idin nabad yeelo, hana idin difaaco, soona noqda idinka oo soo qaniimaystay", markaas ayuu Cabdullaahi binu Rawaaxa tiriyey gabay. Ka dib ciidankii way baxeen, waxaana sii sagootiyey Rasuulku SCW ilaa ay ka gaareen meesha la yiraahdo Thaniyatul-Wadaac.

Markii uu ciidankii marayo meesha la yiraahdo Macaan oo Shaam ka tirsan ayey maqleen in boqorkii Ruum ee hiragle uu Bulqaa ku soo siyaadiyey boqol kun oo ciidan roomaana ah iyo boqol kun oo kale oo ah carabtii kiristaanka. Ciidankii muslimiintu waxa ay degeen meesha layiraahdo Macaan oo ay laba habeen joogeen iyaga oo ka tashanaya sidii ay yeeli lahaayeen oo ay uga hor tegi lahaayeen ciidankaas aadka u tirada badan. Wax ay wada tashadaanba waxaa go'aan lagu gaaray in Rasuulkii SCW waraaq loo qoro oo loo sheego tirada cadowga, ka dib Rasuulku SCW ama ciidan ha soo siyaadiyo ama amar

kale ha soo siiyo, hase yeeshee waxaa ra'yigan ka hor yimid Cabdullaahi binu Rawaaxa oo ciidankii geesinomo geliyey, wuxuuna yiri "dadyohow Ilaah baan ku dhaartaye waxa aad ka hanaysaan waa shahaadadii aad u soo baxdeen ee aad doonayseen. Dadka kulama dagaallanno tiro badnaan iyo awood, kulana dagaallami mayno illaa diinkan Allaah nagu karaameeyyey ma ahane, hana la baxo labadii wanaagsanayd midkood ayaan leenahay (guul ama shahaado). Ugu dambeyntii waxaa la qaatay ra'yigii Cabdullaahi oo ciidankii muslimiintu cadowgii ayey u sii dhowaadeen ilaa ay ka gaareen meel ka tirsan Bulqaa oo la yiraahdo Mashaarif, ayna joogeen ciidankii Hiraqle. Ka dib ciidanku waxa ay degeen Mu'ta, wuxuuna isu diyaariyey dagaal. Ciidanka qaybtiisa midig waxaa madax looga dhigay Qudhba binu Qataada, qaybta bidixna Cubaada binu Maalik.

Labadii ciidan waxay ku kulmeen Mu'ta iyada oo ay ciidanka muslimiinta tiradoodu ahayd 3,000, kuwa gaaladana 200,000. Arrinkan oo ah arrin ay cibro ku sugantahay, labo ciidan oo cadadkoodu intaa isku jiro, oo waliba kan cadadka yari duulaan yahay, meel fogna kasoo duulay. Mana ahan arrintaan oo kaliya ee waxaan mar walba ku arkaynaa siirada Rasuulka SCW in ay aad u kala badan yihiin cidanka muslimiinta iyo kan gaaladu. Haddaba waxaa la doonayaa inuu qof walba oo muslim ihi ka faa'iidaysto, kuna daydo akhyaartaas naftoodii u hurtay Alle dartiis, Rabbigiisna ku kalsoonaado kalsooni dhab ah, uusanna u arkin in cid kale wax ka qaadi karto mar haddii uu isagu Alle ku xiran yahay. Waxaana maanta jirta in dadkii musliminta ahaa markii ay Ilaahay diintiisii ka tageen Ilaahay ku riday rucbi oo ay gaaladii shan mayl ka cararayaan, arrintaas oo ay sababtay adduunyo jacayl iyo dhimasho ka carar, siduu Rasuulkuba SCW tilmaamay, waxaana xaqiiqo ah in ciddii iiman uu ka buuxo aysan waxba la ahayn xitaa haddii ay la dagallamaan dunida oo idil maxaa yeelay waxa ay u dagaallamayaan oo ay ku xiran yihiin Allihii addunka oo dhan abuuray isla markaasna maamulaya, ciddii uu la jiraan wax ka guulaysan karaa aysan jirin.

Hoggaamiyaha ciidanka muslimiinta, Seyd binu Xaarith, oo ahaa mawlihii Rasuulka SCW, Rasuulkuna aad u jeclaa, taariikhdii islaamka iyo jihaadkiina qayb libaax ka soo qaatay, wuxuu muujiyey geesinnimadii iyo dagaalyahannimadii lagu yaqaannay ilaa uu aakhirkii ka shahiiday. Ka dib waxaa calankii qaaday ciidankiina hoggaanka u qabtay sidii uu Rasulku SCW amrayba Jacfar binu Abii-Dhaalib. Jacfar wuxuu isaguna dagaallamay dagaal xeel dheer, markii ay arrintii aad u kululaatay ayuu Jacfar intuu faraskiisii boqno gooyey dagaalkii sii waday ilaa gacantisii midig la gooyey, wuxuu calankii ku qabsaday gacantii bidix ilaa iyadiina la gooyey, markaas ayuu garbihiisii isugu soo dumay (isugu keenay) ilaa uu ka shahiiday. Rasuulku SCW wuxuu sheegay in uu Ilaahay siiyey Jacfar labo garab oo jannada meeshii uu ka rabo ugu duulo, waxaana Jacfar la dhahaa labo Garable. Cabdullaahi ibnu Cumar wuxuu yiri "meydkii Jacfar baan dul istaagay, waxa aan ka tiriyey 50 nabar oo isug jirey seef iyo waran, haddii lagu daro fallaarahana waxa ay gaarayeen dhowr iyo sagaashan". Ka dib sidiii amarka Nabiga SCW ahaa waxaa ciidankii hoggaanka u qabtay Cabdullaahi ibnu Rawaaxa. Cabdullaahi sidi saaxiibbadiis o kale ayuu ciidankii ugu hor maray isaga oo faraskiisii saaran. Naftiisii ayuu xoogaa ka dareemay markaasuu u tiriyey tix yar oo ku leeyahay "Waxa aan nafyahay ku dhaaranayaa in aad u degto (dagaalka) ee yeel ama nac. Maxaan kuu arkaa (nafyahay) in aad jannada naceysid". Ka dib Cabdullaahi wuu dagaallamay ilaa uu ka shahiiday.

Markii ay shahiideen saddexdii nin ee Rasuulku SCW soo magacaabay, dagaalkiina uu weli si daran u socdo ayaa calankii waxaa qaaday Thaabit binu Arqam oo yiri "muslimiineey nin iska soo dhex doorta", markaas ayey dheheen "adiga ayaan ku dooranay", wuxuu yiri "aniga ma qabanayo (hoggaanka)", ka dib waxaa la doortay Khaalid binu Waliid. Khaalid waxa uu dagaalamay dagaal aad u xeel dheer ilaa Sagaal seefood gacantiisa ku jabeen. Khaalid oo aad u yaqaannay xeeladaha dagaalka waxa uu adeegsaday aqoontiisi ciidammeed, wuxuuna beddelay qaabki uu ciidanka muslimiintu u dagaal gelayey oo ciidankii midig joogey bidix ayuu geeyey, kii bidix joogeyna midgi, kuwii gadaal joogeyna hore. Roomaanki waxa ay u maleeyeen in ciidan xoojin ah uu ku soo biiray ciidankii muslimiinta, markaas ayaa Ilaahay ku riday baqo iyo niyad jab oo

gadaal bay u gurteen. Khaalid markii uu muddo dagaalkii waday kagana gacan sarreeyey ayuu si tartiib tartiib ah u soo bixiyey ciidankii muslimiinta. Roomaankii oo baqdini gashay ayaa ku laabtay magaaladoodii. Khaalid iyo ciidankiisii waxa ay soo aadeen Madiina.

Rasuulka SCW oo loo waxyooday intii aysan ciidanku Madiina gaarin ayaa asxaabtii ku yiri "waxaa calankii qaaday Seyd waana la diley, ka dib waxaa qaaday Jacfar isna waa la diley, ka dibna waxaa qaaday ibnu Rawaaxa isna waa la diley ilaa uu ka qabtay calankii seef seefaha Alle ka mid ah (Khaalid) ilaa uu Ilaahay u furay".

Sidoo kale Rasuulku SCW isaga oo ka waramaya raggaas shuhadada ahaa ee ku dhintay dagaalkaas waxa uu yiri "ma ay farax galinayso (iyaga) ama ima ay farax galinayso (aniga) in ay nala joogaan.

Dagaalkan Mu'ta waxaa muslimiinta ka shahiiday 12 nin, roomaankiise lama garanayo tirada ka dhimatay laakiin waxaa la qiyaasayaa in tiro badan ay ka dhimatay. In kasta oo aysan muslimiintu dagaalkan gaaladii ku jebin, dhulna ka qabsan haddana wuxuu muslimiinta u soo hooyey guul aad u ballaaran waxa uuna ka mid ahaa dhacdooyinkii Ilaahay diintiisa ku ciseeyey. Guulahaas waxaa ka mid ahaa in carab oo dhan uu ku dhacay wareer iyo baqdin, waxa ayna ka quusteen in ay muslimiinta la dagaallamaan maxaa yeelay muslimiintu waxa ay u beer dhigeen ciidankii roomaanka oo waqtigaa dunida ugu xoogga badnaa, cid isku taagtana aysan jirin. Waxaa kale oo yaab noqotay in 3,00 oo nin ku duushay, una babac dhigtay ciidan 200,000 ah isla markaasna ay soo noqdeen iyaga oo uusan khasaare weyni soo gaarin. Waxaa kale oo ay dad badani xaqiiqsadeen in ay muslimiintu yihiin dad xagga Rabbi looga gargaarayo oo aan la hoojineyn, cid ay ka baqayaanna aysan jirin, Nabiguna SCW uu yahay Rasuul xaq ah oo Ilaahay soo diray sidaa darteed carabtii islaamka diideysey waxa ay bilaabeen in ay islaamka soo galaan oo Allaah iyo Rasuulka SCW isu dhiibaan. Waxaa si degdeg ah u soo islaamay qabaa'ilkii banuu Suleym, Ashjac, Qadafaan, Dubayaan, Fasaara iyo kuwa kale. Sidoo kale wuxuu dagaalkani albaabbada u furay duullaamadii ay muslimiintu ku qaadayeen dhulalkii fogaa iyo qabsashadii magaalooyinki Ruum.

ILAALADII DAATU-SULAASIL

Dagaalkii Mu'ta markii laga soo laabtay ayaa waxaa la maqlay in reer Qudaaca oo Shaam degganaa u tabaabushaysanayo sidii uu Madiina ugu soo duuli lahaa, markaas ayuu Rasuulku SCW wuxuu bishii Jamadul-Aakhir, sannadkii 8aad ee hijriga u direy ciidan 300 oo nin ah, uuna madax uga dhigay Camar binu Caas.

Camar iyo ciidankiisii markii ay reerkaas u dhowaadeen ayey ka war heleen in ay ciidan aad u tiro badan hastaan, markaas ayey Rasuulku SCW u soo direen Raafic binu Mukeyth si uu Rasuulku SCW ugu soo diro ciidan siyaado ah. Rasuulku SCW wuxuu ku soo daray ciidan 200 oo nin ahaa, oo ay ku jireen Abuubakar iyo Cumar, wuxuuna madax uga soo dhigay Abuu Cubeyda ibnu Jarraax. Ciidankani markii uu ku biiray ciidankii hore ayaa waxa labadii ciidan hogaamiye u noqday, salaaddan tujinayey Cumar binu Caas.

Ciidankii markii ay gaareen dhulkii cadowga ayey jihadii ka luntay oo waxay gaareen meeshii ugu shisheysay dhulka cadowga halkaas oo ay kula kulmeen ciidan, ka dib dagaal ayey ku qaadeen hase yeeshee cadowgii waa baqday oo kala cararay. Camar wuxuu Rasuulka SCW u soo diray Cawf binu Maalik si uu ugu sheego in ay nabad qabaan oo ay guuleysteen, muddo ka dibna Madiina ayey ku soo laabteen.

DUULLAANKII FATXU MAKKA

Sida la ogsoon yahay Qureysh waxa ay ahayd caqabad weyn oo dadka ka hor taagan islaamka waxayna degganaayeen Makka oo uu ku yaallay xaramkii Alle, ahaydna dhumucdii ay carab oo dhan ku xirnayd.

Sababta duullaankan keentay waxa ay ahayd: sidii aan soo sheegnayba Rasuulka SCW iyo qureysh waxa ay Xudeybiya ku kala saxiixdeen heshiis muddadisu ahayd 10 sano. Heshiiskaa waxaa ku jirey in ciddii Rasulka SCW la heshiisa aysan qureysh wax dhib ah u geysan karin, ciddii qureysh heshiis la gashana uusan Rasuulku SCW wax dhib ah u geysan karin. Markii uu heshiiskii dhammaaday ayuu qabiilkii Khusaaca Rasuulka SCW raacay, banuu Bakarna Qureysh raacay. Labadaas qabiil, oo uu dagaal ka dhexayn jirey, ayaa markii la marayo bishii Shacbaan, sannadkii 8aad ee hijriga nin la oran jirey Nawfal binu Mucaawiya soo kaxaystay ciidan qabiilkiisii ah (banii Bakar) isaga oo doonaya in uu ka aar goosto reer Khusaaca, wuxuuna ku soo duulay habeennimo, rag badanna wu ka laayey, reer Khusaacana way la dagaallameen.

Qureysh ballankii ayey ka baxday oo waxa ay hub iyo ciidanba siisey banii Bakar, reer KHusaacana sidaa ayaa lagu jebiyey oo waxay ku carareen xaramka oo aan lagu dili jirin ciddii gasha hase yeeshee reer banii Bakar kama harin ee xaramkii ayey uga daba tageen. Rag reer banii Bakar ahaa ayaa la hadlay hoggaamiyahoodii Nawfal oo ku yiri "war xaramkii baynu galnay, Ilaahaaga Ilaahaaga", markaas ayuu si xun u hadlay oo yiri "Ilaah ma jiro ee maanta reer banii Bakarow aar goosta. Cimirgeyga ayaan ku dhaartaye xaramka wax waad ku xaddaane miyeydaan aar goosanayn?". Qureyshi way ku fiirsatay reer banii Bakar arrintaa foosha xun, weliba waa ku taageertay. Waxaa markaa soo aaday Madiina nin reer Khusaaca ahaa (qabiilkii xaramka ragooda lagu laayey) oo la oran jirey Camar binu Saalim, wuxuu u yimid Rasuulka SCW oo masaajidka asxaabtii dhex fadhiya, markaas ayuu tiriyey gabay guuubaabo ah oo uu ku tilmaamayo in xaramkii Alle lagu laayey iyagoo muslimiin ah qureyshna ay dagaalkii ka qayb qaadatay.

Reer Khusaaca waxa ay xulufo la ahaan jireen islaamka ka hor reer banuu Haashim oo ahaa jilibkii Rasuulka SCW, markii uu islaamku yimidna iyaga oo weli gaalo ah ayey Rasuulka SCW iyo muslimiinta caawin jireen. Markii ay Rasuulka SCW iyo qureysh dagaallamayeen waxa ay la jireen Rasuulka SCW, markii heshiiska la kala saxiixdayna waxa ay raaceen Rasuulka SCW, ka dibna way islaameen oo ikyaga oo islaam ah ayaa kacbadii lagu laayey. Qureysh oo Rasuulka SCW ay ballan ka dhexaysayna waxa ay ka qayb qaadatay dagaalkaas lagu hayey reer Khusaaca. Arrimahaas oo is ursaday dartood wuxuu Rasuulku SCW qaatay go'aan, wuxuuna yiri "waa laguu gargaaray Camar binu Saalimow". Haddana waxaa Rasuulka SCW u yimid kox reer Khusaaca ah oo uu madax u yahay Baddiil binu Warqaa, wuxuuna u sheegay Rasuulka SCW dhibka ku dhacay iyo sidii ay qureysh ugu kaalmaysay reer banii Barkra, ka dib Makka ayey u noqdeen.

Nimankii qureysh ahaa markii ay ballantii ka baxeen oo khiyaamadaas sameeyee ayey shir qabteen oo go'aansadeen in hoggaamiyahoodi Abuu Sufyaan ay Madiina u diraan si uu heshiiska u soo cusbooneysiiyo. Rasuulka SCW arrinkaas waa loo waxyooday oo wuxuu asxaabtiisa ku yiri "waaba idinka oo Abuu Sufyaan idiin yimid si uu muddadii heshiiskiinna u siyaadiyo".

Abuu Sufyaan wuu soo baxay oo Madiina ayuu soo aaday, markii uu dhexda sii marayo ayaa waxaa ka hor yimid nimankii reer Khusaaca ee Baddiil watay, Madiinana ka soo laabtay, markaas ayuu ku yiri "xaggee ayaad ka timid Baddilow?", markaas ayuu yiri "toggaan ayaan reer Khusaaca soo marsiinayey", markaas ayuu Abuu Sufyaan yiri "amaad Maxammed ka timid", markaas ayuuu yiri "may", dabadeedna waa la is

daba maray, wuxuu markaa Abuu Sufyaan yiri "haddii uu Madiina ka yimid timirta ayaan ku garanayaa", markaas ayuu tegey meel uu gaadiidkii Baddiil fariistay, markaasuu saaladdii (neefka) qaatay oo burburiyey, markaas ayuu ku arkay laf, wuxuu yiri Abuu Sufyaan "Ilaah baan ku dhaartaye Baddiil Maxammed ayuu ka yimid", ka dbna hore ayuu iskaga sii socday. Wuxuu u tegey Rasuulkii SCW oo la hadlay hase yeeshee Rasuulku SCW uma jawaabin. Wuxuu markaa u tegey Abuubakar Al-sidiiq oo ka codsaday in uu Rasuulka SCW kala hadlo hase yeeshee Abuubakar kama yeelin, wuxuu markaa u tegey Cumar binu Khadhaab si uu Rasuulka SCW ugala hadlo, markaas ayuu Cumer yiri "ma aniga ayaa Rasuulka SCW kaala hadla? Ilaah baan ku dhaartaye haddii aan ul maahane wax kale waayo waan kugula dagaallamayaa".

Ka dib wuxuu u tegey Cali Abii-Dhaalib oo ay la joogaan xaaskiisii Faadumo iyo wiilkiisii Xasan, markaas ayuu ku yiri "Caliyow adiga ayaa ragga iigu xiga, dan baan u imid ee ha i celin sidii aan u imid aniaga oo hoogay ee Maxammed igala hadal", markaas ayuu Cali yiri "hooggaaga ee Abuu Sufyaan Rasuulkii Alle wuxuu go'aansaday arrin aannaan awoodi karin in aan kala hadalno", markaas ayuu Abuu Sufyaan Faadumo binu Maxammed SCW (Rasuulka SCW gabadhiisa) jalleecay oo ku yiri "ma kuu ahaatay in aad wiilkaagan madax ka dhigtid oo uu dadka kala badbaadsho, uuna noqdo sayidkii carbeed inta wakhtiga ka hartay?", markaas ayey Faadum tiri "Ilaah baan ku dhaartaye wiilkaygu ma gaarin arrinkaas ah in u dad kal badbaadsho, axadna Rasuulka Alle wax kama badbaadin karo".

Abuu Sufyaan addunkii ayaa ku ciriiryoomay, xaalkiina waa ku murgay, markaas ayuu isaga oo quus ah ku yiri Cali "Abii-Xasanow waxa aan arkaa arrimihii in ay igu adkaadeen ee wax ii tilmaan", markaas ayuu Cali yiri "say wax kuugu tari karto garan maayo, laakiin intii aad istaagtid waxa aad tiraahdaa "dhinacayga dadka waan kala badbaadiyey", ka dibna dhulkaagii aad", markaas ayuu Abuu Sufyaan yiri "oo ma waxaad u malaynaysaa in taasi ay wax i tarayso?", wuxuu yiri Cali "may, Ilaah baan ku dhaartaye u malayn maayo laakiin wax aan iyada ahayn kuuma garanaayo", markaas ayuu Abuu Sufyaan masaajidkii tegey oo yiri "dadow anigu dadkii waan kala badbaadiyey", ka dibna ratigiisii ayuu fuulay oo iska tegey.

Markii uu Abuu Sufyaan qureysh ku laabtay ayey dheheen "maxaad waddaa?", markaas ayuu yiri "Maxammed baan u tegey oo la hadlay, Ilaah baan ku dhaartaye iima jawaabin, ka dib ina Abii Quxaafa (Abiibakar) ayaan u tegey kheyrse kama helin, ka dib Cumar binu Khadhaab ayaan u tegey, waxa aan arkay in uu ragga iigu cadowsan yahay, ka dib Cali ayaan u tegey, waxa aan arkay in uu ragga iigu jilicsan yahay, wuxuuna ii tilmaamay arrin aan sameeyey, Ilaah baanse ku dhaartaye ma ogi in ay wax ii tarayso iyo in kale", markaay ayey dheheen "muxuu kugu yri?", wuxu yiri "wuxuu i faray in aan dhaho "dadkii waan kala badbaadiyey", waanna sameeyey, waxa ay dheheen "Maxammed arrinkii ma yeelay?", wuxu yiri "may", waxa ay yiraahdeen "hooggaaga ee ninka wax siintiisu waa in ciyaar lagaa dhigto", markaas ayuu yiri "maya, Ilaah baan ku dhaartaye wax aan taas ka ahayn iima helin".

Rasuulku SCW wuxuu Caa'isha amray in ay sahaydii dagaalka u diyaariso, cidna weli arrintaas duullaanka ma uusan ogeysiin. Waxa markaa Caa'isha u soo galay aabbeheed Abuubakar wuxuuna ku yiri "gabadheydiiyey waa maxay is diyaarintaan?", markaas ayey tiri "Ilaah baan ku dhaartaye ma ogi", markaas ayuu Abuubakar yiri "Ilaah baan ku dhaartaye wakhtigan ma jiro duullaan reer banii Asfar ee xaggee Rasuulka Alle rabaa?", markaas ayey tiri "Ilaah baan ku dhaartaye ma garanayo". Saddexdii beri ee ugu horreysey asxaabtu arrinkan ma aysan ogeyn hase yeeshee maalinkii saddexaad ayaa waxaa yimid Camar binu Saalim Al-Khusaaci oo 40 ninwata, gabayo ayuuna tiriyey, markaas ayey asxaabtii ogaadeen in qureysh ballantii ka baxday, ka dibna markii Baddiil iyo Abuu Sufyaan ay Madiina isaga daba yimaadeen ayey asxaabtu arrinkii xaqiiqsatay.

Rasuulku SCW wuxuu ka dib amray in la is diyaariyo, wuxuuna muslimiintii u sheegay in Makka lagu duulayo, wuxuuna Rasuulku SCW jiho kale u diray ilaalo ka kooban 8 nin oo uu madax u ahaa Abii Qataada binu Rabbiici bilowgii bishii Ramadaan, sannadkii 8aad ee hijriga si ay cadawga Alle ugu maleeyaan in Rasuulku SCW dhinacaa ku duulayo. Ilaaladii markii ay meeshii loo direy gaareen ayey ka war heleen in Rasuulkii SCW Makka ku duulay, markaas ayey soo noqdeen oo ka daba tageen.

Intii uusan Rasuulku SCW bixin ayaa nin asxaabta ka mid ahaa oo la oran jirey Xaadhib ibnu abii Baltaca waraaq u qoray Qureysh taas oo uu ugu sheegayo duullaanka Rasuulka SCW, wuxuu warqaddii u sii dhiibay haweeney gaalo ahayd oo u socotay Makka, waxayna dhex gelisay madaxeeda. Rasuulka SCW ayaa arrinkaa loo waxyooday, markaas ayuu ka daba diray haweentii Cali Abii-Dhaalib iyo Miqdaad binu Aswad oo ku yiri "baxa ilaa aad ka gaartaan beerta Khaakh oo ay joogto haweney wadda waraaq u socota qureysh".

Cali iyo Miqdaad fardohoodii ayey qaateen, waxa ayna ka daba tageen haweentii oo joogta meeshii uu Rasuulku SCW u tilmaamay, markaas ayey haweentii ku dheheen "warqad ma waddaa?", waxay tiri "ma wado?", markaas ayey baareen reeryadeedii iyo alaabtii ay wadatay oo dhan, markii ay wax ka waayeen ayaa Cali haweentii ku yiri "Rasuulkii Alle been sheegi maayo, Ilaah baan ku dhaartaye waad soo bixinaysaa warqadda ama waan ku qaawineynaa". Haweentii markii ay aragtay in uusan Cali kaftamayn oo ay dhab ka tahay ayey tiri "sii jeesta", marki ay jeesteen ayey furtay madaxeedii oo warqaddii ka soo dhex saartay.

Ka dib warqaddii Rasuulka SCW ayaa loo geeyey, markii la fureyna waxaa ku qornaa in ay ka socota Xaadhib ibnu abii Baltaca kuna socota Qureysh, kana warramaysay duullaanka Rasuulka SCW. Rasuulku SCW wuxuu u yeeray Xaadhib oo ku yiri "maxay arrintani tahay Xaadhib?", markaas ayuu yiri "Rasuulkii Allow ha igu degdegin, Ilaah baan ku dhaartaye anigu waxa aan ahay mu'min Alle iyo Rasuulkiisa rumeeyey, mana riddoobin, mana beddelin (diinteyda) laakiin waxa aan ahaa nin qureysh ku dhex jira oo aan ka dhalan, waxaana ii dhex jooga xaas, ilmo iyo qaraabo, cid ilaalinaysana ma jirto, asxaabta (muhaajiriinta) aan la duullaan galayana waxa aya leeyihiin qaraabo u ilaalineysa (maatadooda). Waxa aan marka jeclaystay haddii la dagaallamo in aan agtooda (qureysh) ku yeesho gacan ilaalisa dadkayga". Cumar binu Khadhaab ayaa markaa yiri "Rasuulkii Allow ii daa aan unuunka u dheereeyee, maxaa yeelay Alle iyo Rasuulkiisa ayuu khiyaamay, waana munaafaqoobay", markaas ayuu Rasuulku SCW ku yiri Cumar "wuxuu ka qayb galay (Xaadhib) Badar ee maxaa ku ogeysiiyey Cumarow in Allaah daalacaday Ehlu-Badar oo ku yiri "wixii aad doontaan sameeya waan idiin dembi dhaafaye", markaas ayaa Cumar indhihiisii ilmeeyeen oo uu yiri "Allaah iyo Rasuulkiisa ayaa u ogaal badan", Allena isaga oo arrinkaas kahadlaya waxa uu qur'aankiisa ku yiri:

((KUWA MU'MINIINTA AHAW HAKA DHIGANINA CADAWGAY IYO CADAWGIIN AWLIYO (SAAXIIBO) IDINKOO U RIDAYA (U MUUJINAYA) JACAYL, WAXAY KU KUFRIYEEN WIXII IDIIN YIMID OO XAQA AHAA, WAXAY SAAREEN RASUULKA SCW IYO IDINKABA, ALLE OO AAD RUMEYSEEN OO AHAA RABBIGIIN DARTII, HADDII AAD U BAXDEEN JIHAADKA JIDKA ALLE IYO DALBIDDA RAALI AHAANSHAHAYGA, WAXAAD KU SIRAYSANAYSAA JACAYL, ANNA WAAN OGAHAY WAXAAD QARSANAYSAAN IYO WAXAAD MUUJISANAYSAAN, QOFKII IDINKA MID AH OO SAAS SAMEEYANA WAXA UU KA LUMAY WADDADII SAXDA AHAYD, HADDAY IDIN QABTAAN WAXA AY IDIIN NOQONAYAAN COL, WAXAYNA GACMAHA IYO CARRABKABA IDIINKU FIDINAYAAN XUMAAN, WAXAYNA JECEL YIHIIN INAAD GAALAWDAAN, IDINMA ANFACAYSO QARAABADIINA IYO CARRUURTIINU, MAALINKA QIYAAMAHANA WAA LA IDIN KALA SAARAYAA, ALLENA WAXAAD CAMAL FALAYSAAN WAA ARKAA)), (Suuratul-Mumtaxina 1-3).

Rasuulka SCW waxa uu ka soo baxay Madiina 10kii bishii Ramadaan, sannadkii

8aad ee hijriga isaga oo wata 10, 000 oo asxaabtiisa ah, wuxuuna Madiina madax uga soo dhigay Abaa Rahmul-Qafaari. Markii uu Rasuulku SCW Makka u soo dhowaaday oo uu marayo Juxfa agteeda ayaa waxaa u yimid adeerkiis Cabbaas binu Cabdimudhalib, ka dibna hore ayey u sii socdeen Rasuulka SCW iyo ciidankiisu, markii ay marayaan meesha la yiraahdo Abwaa' ayaa waxaa u yimid ina adeerkiis Abuu Sufyaan binu Xaarith binu Cabdimudhalib iyo ina eedadiis Cabdullaahi binu abii Umaya, markaas ayuu Rasuulkku SCW ka jeestay labadoodii maxaa yeelay markii Makka la joogay ayey aad u dhibi jireen Rasuulka SCW iyo islaamka, markaas ayey Rasuulka SCW xaaskiisii Ummu Salama ku tiri "ha ka dhigin ina adeerkaa iyo ina eeddahaa dadka kuwa ugu ayaan daran", Calina wuxuu la hadlay abuu Sufyaan oo ku yiri "dhinaca Rasuulku SCW u jeedo inta ad uga timaaddid ku dheh sidii ay Nabi Yuusuf ku dheheen walaalihiis oo kale;

"Waxay dheheen Allaan ku dhaaranaye Alle wuu naga kaa doortay, waxaanuna ahayn kuwa gafsan". (Suuratu-Yuusuf 91).

Maxaa yeelay Rasuulku kama raalli noqdo in laga hadal wanaagsanaado". Abuu Sufyaan intuu Rasuulka SCW u tegey ayuu sidii sameeyey, markaas ayuu Rasuulku SCW ugu jawaabay sidii Nabi Yuusuf walaalihiis ugu jawaabay oo ahayd:

"Wuxuu yiri canaani korkiina ma ahaanin, Allena ha idiin dambi dhaafo isagaa Naxariis badane". (Suuratu-Yuusuf 92).

Dabadeed Abuu Sufyaan wuxuu tiriyey gabay uu Rasuulka SCW ku ammaanayo.

Rasuulka SCW iyo asxaabtu way soommanaayeen oo waxaa lagu jirey bishii Ramadaan. Sidaa darteed markii ay marayaan meesha la yiraahdo Kudaydan oo Makka u jirta 86 km oo biyo lahayd ayaa Rasuulku SCW arkay asxaabtii oo diif ka muuqato, markaas ayuu afuray, iyagiina way afureen maxaa yeelay waxa ay ahaayeen musaafiriin jihaad ku jira.

Rasuulku SCW wuxuu habeenkii dambeeyey socodkiisa degey meeshii la oran jirey Marri Dahraan haddase loo yaqaan Waadi faadima. Wuxuu ciidankii amray in cid walba dab shidato, markaas ayaa waxaa la shiday 10,000 oo dab, wuxuu Rasuulku SCW habeenkaa waardiyaha ciidanka u dhiibay Cumar binu Khadhaab, Nabiga SCW adeerkiis Cabbaasna wuxuu qaatay baqashii caddayd ee Rasuulka SCW wuxuuna baxay isaga oo ah wardoon oo raadinaya qureysh xaalkeeda. Qureysh ma aysan maqal soo bixitaanka Rasuulka SCW iyo ciidankiisa, markaas ayaa waxaa habeenkaas bixitaanka wardoon ahaan u soo baxay hoggaamiyahoodii Abuu Sufyaan ibnu Xarbi iyo Xakiim binu Xisaam iyo Baddiil binu Warqaa. Wuxuu yiri Cabbaas binu Cabdhimudhalib "Ilaah baan ku dhaartaye aniga oo saaran (baqashii) ayaan maqlay Abuu Sufyaan iyo Baddiil oo hadalka isdhaafsanaya oo Abuu Sufyaan leeyahay "dabka iyo ciidammada caawa oo kale weligay ma arag", markaas ayaa Baddiil yiri "waa reer Khusaaca oo dagaal isu diyaarinaya", markaas ayuu Abuu Sufyaan yiri "Khusaaca waa ka yar tahay uma ahaan karto dabkaan iyo mucaskarkaan". Ka dib waxaan aqoonsaday codkiisa waxaanna ku iri "Abuu Xandala", markaas ayuu isna codkayga gartay oo yiri "ma Abaa Fadli baa?", waxaan iri "haa", muxuu yiri "aabahay iyo hooyaday ha lagugu furtee maxaad haysaa?", markaas ayaan iri "waa kan Rasuulkii Alle, qureyshna waa lagu waa beriisan", wuxuu yiri "war maxaa talo ah aabbahay iyo hooyaday ha lagugu furtee?", waxa aan iri "Ilaah baan ku dhaartaye haddii lagu arko qoorta ayaa lagaa goynayaa ee ila soo fuul baqasha ilaa aan Rasuulka Alle kaag geeyo oo aan kuu magan weydiiyo", markaas ayuu ila soo fuulay baqashii, labadii nin ee la socotayna way iska laabteen. Mar kasta oo aan dab ka mid ah dababkii muslimiinta dhaafayo waxa ay i lahaayeen "waa kuma kani?", markii ay arkaan baqashii Rasuulka SCW iyo aniga ayey dhahayeen "waa Rasuulkii Alle adeerkiis iyo baqashiisii" ilaa aan ka soo gaaray dabkii Cumar binu Khadhaab. Cumar wuxuu yiri "waa kuma?", wuuna soo istaagay, markii uu Abuu

Sufyaan oo dabbadda gadaal ka saaran ayuu yiri "waa Abuu Sufyaan, cadowgii Alle. Ilaah baa mahad leh oo soo gacan geliyey annaga oo aan heshiis iyo ballan lahaydn", ka dib Rasuulka SCW ayuu Cumar isku sii daayey aniguna baqashii baan eryay oo waan uga hor maray Rasuulka SCW.

Markii aan Rasuulka SCW u galay ayaa Cumarna soo galay oo yiri "Rasuulkii Allow kani waa Abuu Sufyaan ee ii daa aan qoorta ka gooye", markaas ayaan iri "Rasuulkii Allow aniga ayaa magan geliyey", ka dibna Rasuulka SCW ayaan ag fariistay oo madaxa qabtay waxaanna iri "Ilaah ayaan ku dhaartaye in uusan la hadlayn axad kale caawa". Markii uu Cumar badiyey arrintii ayaan ku iri "aamus Cumar Ilaah baan ku dhaartaye haddii uu ahaan lahaa raggii reer banii Cadiyi ibnu Kacab ma aadan tiraahdeen waxaan oo kale", wuxuu Cumar yiri "aamus Cabbaas Ilaah baan ku dhaartaye islaamiddaada ayaan ka jeclaa in uu islaamo Khadhab (aabihiis) wax kalena maaha ee waxa aan ogaa in islaamiddaada uu Rasuulka Alle ka jecel yahay tan Khadhaab". Rasuulku SCW wuxuu markaas igu yiri "la tag Cabbaas oo rartaada la aad, markii aad waa beriisatana ii keen", markaas ayaan la tegey, markii uu waagii beryayna Rasuulka SCW ayaan kula soo kallahay.

Markii Rasuulku SCW arkay ayuu ku yiri "war hooge Abuu Sufyaan ma waadan gaarin waqtigii aad ogaan lahayd Alle mooye Ilaah kale in uusan jirin?", wuxuu yiri "aabbahay iyo hooyaday ha lagugu furtee, yaa kaa dulqaad badan oo kaa karaamayn badan, kaana xiriirin badan. Hoddaan malaynayo Allaah in uu la jiro Ilaah kalena wax buu ii tari lahaa", wuxuu yiri Rasuulku SCW "hooggaaga ee Abuu Sufyaan ma waan la gaarin waqtigii aad ogaan lahayd in aan ahay Rasuulkii Alle?", wuxuu yiri "aabahay iyo hooyaday ha lagugu furtee, yaa kaa dulqaad badan oo kaa karaamayn badan, kaana xiriirin badan. Laakiin tan (Rasuulnimada) ilaa hadda naftaydu kuma qanacsana", markaas ayaa ku iri "war hoogaaga ee islaam oo qir in Alle maahane uusan Ilaah kale jirin, Maxammedna Rasuulkii Alle yahay intii aan unuunka laguu dheerayn", markaas ayuu islaamay oo Ilaahay isu dhiibay".

Wuxuu Rasuulku SCW intaa ka dib ku yiri Abuu Sufyaan "orad oo dadkaagii badbaadi, kuna dheh qofkii xaramka gala waa aammin, kii albaabkiisa xirtana waa aammin", markaas ayaa Cabbaas ku yiri Rasuulka SCW "Rasuulkii Allow Abuu Sufyaan waa nin magac jecel ee wax u yeel", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "qofkii daarta Abuu Sufyaan galana waa aammin".

Rasuulku SCW wuxuu ka dib amray ciidankii in la dhaqaaqo iyagoo ka baxaya Marri Dhahraan una socda Makka, subaxdaas waxa ay ahayd talaado, 17kii Ramadaan, sannadkii 8aad ee hijriga, waana subaxdii Makka la furtay.

Rasuulku SCW wuxuu Cabbaas amray in uu Abuu Sufyaan joojiyo ciidammada hortooda si uu u arko ciidamada Alle. Cabbaasna sidii ayuu yeelay, markaas ayaa ciidammadii soo mareen iyaga oo koox koox u socda. Abuu Sufyaan mar kasta oo uu ciidan soo maro wuxu lahaa "waa kuwama Cabbaasow?", markii Cabbaas u sheego oo yiraahdo "waa reer hebel" ayuu oranayey "maxaa aniga ikyo rer habelna isu kaaya keenay" ilaa ay markii ugu dambaysay soo mareen labadii garab ee cagaarnaa (Muhaajiriin iyo Ansaar) oo ahaa kumaandooskii ciidanka muslimiinta uuna dhex socday Rasuulkii Alle. Markaas ayuu Abuu Sufyaan yaabay oo yiri "Subxaana laah maxay yihiin kuwaanina Cabbaasow?", Cabbaas ayaa yiri "waa Muhaajiriiin iyo Ansaar oo uu Rasuulkii Alle dhex socdo", wuxuu yiri Abuu Sufyaan "ma jirto cid ka hor imaan karta kuwaan oo awood u leh, Ilaah baan ku dhaartaye Abaa Fadliyow wiilkii aad adeerka u ahayd (nabiga SCW) boqortooyadiisii way weynaatay maanta", Cabbaas ayaa yiri "Abuu Sufyaan arrinku waa nabinnimo", markaas ayuu yiri "waa run".

Sacad binu Cubaada oo waday calanka Ansaarta ayaa soo ag maray Abuu Sufyaan oo ku yiri "maanta waa maalin dagaal, waa maalinkii la xalaaleeyey

(waxyaalihii) xurmada lahaa, waa maalintii Alle dulleeyey qureysh", markaas ayuu Abuu Sufyaan Rasuulka SCW u tegey oo ku yiri "Rasuulki Allow ma waadan maqal waxa Sacad yiri?", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "oo muxuu yiri?". Abuu Sufyaan ayaa markaa warkii Sacad u sheegay, markaas ayaa Cusmaan binu Cafaan iyo Cabdiraxmaan binu Cawf la hadleen Rasuulka SCW oo ku dheheen "Rasuulkii Allow aammin kama nihin (Sacad) in qureysh dhib u geysto", markaas ayaa Rasuulku SCW waxa uu Abuu Sufyaan ku yiri "sidaas ma aha ee maanta waa maalin Kacbada la weyneeyey, waana maalin Ilaahay ciseeyey Qureysh".

Ka dib wuxuu Rasuulku SCW u cid diray Sacad oo ka qaaday calankii, wuxuuna u dhiibay wilkiisii Qays binu Sacad, waxa kale oo la dhahaa wuxuu u dhiibay Subayr, sidoo kale waxaa la dhahaa lagamaba qaadin Sacad. Rasuulku SCW wuxuu markaas ku yiri Abuu Sufyaan 'badbaadi dadkaaga", markaas ayuu Abuu Sufyaan baxay oo isaga oo degdegaya xaramkii galay, wuxuuna ku dhawaaqay cod dheer isaga oo leh "qureysheey kani waa Maxammed oo idiinla yimid wax aydaan awood u lahayn ee qofkii gala daarta Abuu Sufyaan waa aammin", markaas ayey xaaskiisii Hinda bintu Cutba istaagtay oo ku dhegtay shaaribkiisa iyada oo leh "dila axmaqa", markaas ayuu yiri "war hooggiinnee tani yeysan naftiinna kedinnin, wuxuu la yimid Rasuulku SCW wax aydaan awood u lahayn qofkii gala daarta Abuu Sufyaan waa aammin", markaas ayey dheheen "Alle ku dilye ma daartaada ayaa na deeqda?", markaas ayuu yiri "qofkii albaabkiisa xirta waa aammin, kii masjidka (xaramka) galana waa aammin", markaas ayey dadkii ku kala yaaceen guryahoodii iyo xaramka hase yeeshee koox ay madax u yihiin Cikrama ibnu Abii Jahal iyo Safwaan binu Umaya ayaa diidey, waxa ayna dheheen "waan dagaallamaynaa", kooxdaas nin ku jirey oo la oran jirey Xamaas binu Qays aya isaga oo hubkiisii ururSanaya waxaa arkay xaaskiisii oo ku tiri "yaad u ururSanaysaa waxan aan arko?", wuxuu yiri "Maxammed iyo asxaabtiisa", markaas ayey tiri "Ilaah baan ku dhaartaye Maxammed iyo asxaabtiisa cid ma hor istaagi karto", wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye waxa aan rajaynayaa in aan qaarkood khaaddim kaaga dhigo", wuxuuna tiriyey tix yar oo micneheedu yahay (cillad iguma sugnaa haddii ay maanta soo qaabbilaan Makka kani waa hubkeygii iyo aaladdaydii oo dhamays tiran).

Rasuulku SCW markii uu Makka soo gelayey aad ayuu Allaah ugu khuduucay, madaxiisana waa raariciyey, wuxuuna Alle ugu shukriyey nicmada uu ku karaameeyey iyo nasriga uu siiyey. Rasuulku SCW wuxuu amray Khaalid binu Waliid oo watay ciidanka dhinaca midig in uu Makka ka soo galo dhinaca hoose, wuxuuna ku yiri "haddii qof reer qureysh ah kaa hor yimaaddo xaaq oo tir tir, soona soco ilaa aad iigu timaado Safwa". Sidoo kale wuxuu amray Subeyr oo isna watay garabka bidix ee ciidanka in uu Makka ka soo galo dhinaca kore oo calankiisa ka muto Xujuum, halkaasna uu joogo ilaa uu Rasuulku SCW uuga yimaaaddo. Abuu Cubeyda oo isna madax u ahaa saadka, wuxu amray in uu tagga soo dhex maro.

Qayb walba oo ciidanka ka mid ahayd meeshii loo xilsaaray ayey martay. Khaalid iyo ciidankiisii qofkii ka hor yimaada oo gaala qureysh ka tirsan way qabanayeen ilaa ay markii dambe uga yimaadeen ciidankii ay Cikrama ikyo Safwan ururSadeen, wuxuu markaa ka dhigay wax uu dilo, wax uu qabto iyo wax ka cararay. Kuwii cararay waxaa ka mid ahaa Cikrama binu Abii Jahal, Safwaan binu Umaya iyo Xamaas binu Qays. Xamas oo ahaa ninkii hubka ururSanayey oo haweentiisa ku lahaa "khaaddim baan kuu keenayaa" wuxuu gurigiisii galay isaga oo ordaya, wuxuuna ku yiri xaaskiisii "albaabka ii xir", maraas ayey tiri "meeyey wixii aad sheegaysay (khaaddimkii)?", markaas ayuu tiriyey tix yar oo uu ku leeyahay (hadii aad joogi lahayd maalinka Khandama markii ay carareen Safwaan iyo Cikrama (waad yaabi lahayd), waxaa nalala soo qaabbilay seefo carbisan oo goynaya meel walba, shanqarna aan laga maqlayn". Khaalid iyo ciidankiisii sidii ayey Makka u soo dhex mareen ilaa ay Rasuulka SCW ugu yimaaddeen Safwa.

Subeyr iyo ciidankiisii meeshii uu Rasuulku SCW amray ee Xujuum ayey

calankoodii ka muteen, waxa ayna joogeen ilaa uu Rasuulku SCW uga yimid. Rasuulkuna SCW isaga oo ay dhinaca kasta ka socdaan Muhaajiriin iyo Ansaar ayuu galay xaramkii, markaas ayuu Xajarul-Aswadkii dhunkaday, Beytkana dawaafay, wuxuna ul yar oo uu watay ku mudmuday asnaamtii meesha taalley oo gaareysey 360 sanam isaga oo akhrinaya aayaddan micnaheedu yahay:

((WAXAA DHAHDAA XAQII AYAA YIMD BAADHILKIINA WAA TIR TIRMAY, WUXUUNA AHAADAY BAADHILKU MID TIR TIRMA)), (Suuratul-Israa 81).

Ka dib asnaamtii way hoobteen. Wuxuu Rasuulku SCW beytka dawaafay isaga o daabbadiisii saaran, markii uu dhammaystayna wuxuu u yeeray Cismaan binu abii Dhalxa oo ahaa ninkii Kacbada fureheeda hayey, wuxuuna ka qaatay furihii kacbada oo amray in loo furo, markii loo furayna wuu galay, markaas ayuu ku arkay asnaam taalla oo ay ka mid ahaayeen labo sanam oo qoryo hasta ayna dhihi jireen "waa suuraddii Nabi Ibraahiim ikyo Nabi Ismaaciil, qoryahaasna waa ku faalin jireen", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "Alle ha naclado Ciddii falkan samaysay, Ilaah baan ku dhaartaye weligood faal wax kuma samayn (Ibraahiim iyo Ismaaciil)". Ka dib Rasuulku SCW wuxuu xirtay albaabkii kacbada, waxaana kula jirey Usaama binu Seyd iyo Bilaal, wuxuuna u dhowaaday derbia albaabka xiga oo uu u jirsaday saddex dhudhun, ka dibna wuu tudakay. Kacbaduna waxa ay markaa lahayd lix tiir, saddex gadaal ayey ka jireen meeshii uu Rasuulku SCW ku tukanayey labana dhinaca bidix, halna midig. Ka dib albaabkii ayuu furay isaga oo takbiirsanaya oo Alle weyneynaya, qureyshna xaramka ayey ka buuxeen iyaga oo saf saf ah oo sugaya waxa lagu samayn doono. Rasuulku SCW markii uu soo baxay wuxuu istaagay albaabka agtiisa, qureyshna wax ay fadhiyeen hoostiisa, markaas ayuu Rasuulku SCW wuxuu jeediyey khudbaddan:

Allaah mooye Ilaah kale ma jiro, keligiis weeye, shariikna ma leh, wuuna ku

run sheegay ballantiisii, una gargaaray addoonkiisii, keligiis ayaana jebiyey axsaabta.

Hooy wax kasta oo aar gudasho ahaa ama maal aha ama dhiig, waxaa weeye labadaydan lugood hoostooda (waa la duugay) illaa fure hayayaasha xaramka iyo waraabiyayaasha xujeyda maahane (iyaga booskoodii way haynayaan oo laga qaadi maayo).

Hooy dilitaanka kama'da ihi wuxuu u eg yahay (la mid yahay) kaska, waxayna magtiisu tahay 100 geel ah oo ay ku jirto 40 rimman, Qureysheey Ilaah waa idinka baabi'iyey faankii jaahiliga iyo aabbayaashii la weyneyn jirey. Dadka oo dhammi Aadam bay ka yimaadeen, Aadamna ciid baa laga abuuray), wuxuu markaa aqriyey aayaddan micnaheedu yahay:

((DADOW WAXAAN IDIN KA ABUURNAY LAB IYO DHADIG WAXAANA IDINKA YEELNAY SHACABO IYO QABIILO SI AAD ISUGU AQOONSATAAN, WAXAANA ALLE AKTII IDINKUGU KARAAMO BADAN KAN IDINKUGU TAQWADA BADAN)), (Suuratul-Xujuraat 13).

Ka dibna waxa uu yiri: Qureysheey maxaad u malaynaysaan in aan idinku samayn doono? Waxa ay qureysh dheheen "kheyr, waxa aad tahay walaal wanaagsan oo uu dhalay walaal wanaagsan", markaas ayuu Rasuulku SCW ku yiri "waxa aan idinku oranayaa sidii uu Yuusuf walaalihiis ku yiri oo kale:

((CANAANI DUSHIINA MA AHAANIN MAANTA, ALLENA HA IDIIN DAMBI DHAAFO ISAGAA ARXAMU RAAXIMIN AHE)), (Suuratu-Yuusuf 92).

Waxaa kale oo uu Rasuulku SCW ku yiri "orda iska taga waxa aad tihiin kuwa la sii daayaye", ka dib Rasuulku SCW masaajidkii ayuu fariistay. Waxaa markaa istaagay Cabbaas binu Cabdimudhalib oo yiri "Rasuulkii Allow isugu kaaya dar maamulka iyo waraabinta", markaas ayuu Rasuulku SCW isaga oo aan u jawaabin wuxuu u yeeray Cusmaan binu Dhalxa, markii uu u yimidna wuxuu ku yiri "waa kan furahaagii Cusmaan, maanta waa maalin samo fal iyo oofin", ka dib salaaddii duhur ayaa soo gashay, markaas ayuu Rasuulku SCW amray Bilaal in uu kacbada fuulo oo addimo, markii uu Bilaal addimayey ayaa waxaa maqlay Abuu Sufyaan binu Xarbi, Cataab binu Seyd iyo Xaarith binu Hishaam (odayaashii qureysh) oo kacbada ag fadhiyey, markaas ayaa Cataab yiri "Ilaahay waa karaameeyey Useyd (aabbihiis) haddii uusan maqlin tan, wuxuuna maqli lahaa wax caro geliya", Xaarith ayaa markaa hadlay oo yiri "Ilaah ayaan ku dhaartaye haddii aan ogaan lahaa inuu xaq yahay waan raaci lahaa", markaas ayaa Abuu Sufyaanna hadlay oo yiri "Ilaah baan ku dhaartaye in aannan waxba oranayn, haddii aan hadlo waxaa iga warramaysa ciidda". Nabiga SCW ayaa markaas ku soo baxay wuxuuna ku yiri "waan ogaaday waxa aad tiraahdeen" wuuna u sheegay, markaas ayey Xaarith iyo Cataab dheheen "waxa aan qiraynaa in aad rasuulkii Alle tahay. Ilaah baan ku dhaartaye in uusan na arag qof aan niraahno wuu kuu warramay". Ka dib Rasuulku SCW wuxuu tegey gurigii ina adeertiis Ummu Haani bintu Abii-dhaalib, halkaas oo uu ku qubesytay kuna tukaday 8 rakcadood oo salaatu-Shukri ah oo uu Alle uga mahad celinayo nasriga iyo furashada. Rasuulka SCW intii uu halkaa joogay waxaa u timid Ummu Haani, waxayna Rasuulku SCW u sheegtay in labo nin oo ay magan gelisay uu walaalkeed Cali binu Abii-Dhaalib doonayo in uu dilo, makraas ayuu Rasuulku SCW yiri "waan magan gelinnay cidda aad magan gelisay Umma Haani".

Rasuulku SCW wuxuu dhiiggooda banneeyey oo uu amray in la dilo 9 qof oo ka mid ahaa mujrimiintii ugu dhibka badnaa qureysh, aadna u dhibay Nabiga SCW iyo islaamka. waxa ay 9kaas qof kala ahaayeen:

Cabdullaahi binu abii Sarrax oo islaamka ka soo riddoobay, Makkana u soo fakaday.

Cikrama binu Abii Jahal

Xaarith binu Nufeyl binu Wahab

Muqayas binu Sabaaba

Habaar binu Aswad

Cabdulcusa binu Khadhal iyo labo addoon oo uu lahaa oo heesi jirey, heesahoodana ku caayi jirey Nabiga SCW iyo Saara oo ahayd haweentii warqaddii Xaadhib laga helay.

Cabdullaahi binu Surraax waxaa keenay Cusmaan binu Cafan isaga oo Nabiga SCW u magan gelyo weydiinaya hase yeeshee Nabiga SCW xoogaa ayuu ka aammusay isaga oo raba in go'aankiisii hore la fuliyo oo ninkaas qoorta loo dheereeyo, ka dibna wuu iska cafiyey oo Cusmaan ayuu magangelyadii ka aqbalay.

Cikrama binu Abii Jahal wuxuu u fakaday Yaman, ka dibna xaaskiisii ayaa Nabiga SCW u timid oo u magangelyo weydiisay, Nabiga SCW wuu ka yeelay. Dabadeedna Cikrama wuu soo laabtay, wuuna islaamay oo islaamnimadiisi way wanaagsanaatay.

Ibnu Khadhal wuxuu ku dhegay tiirarka kacbada isaga oo u maleynaya in uu ku badbaadayo, markaas ayaa nin asxaabta ka mid ahi u soo sheegay Rasuulka

SCW, Rasuulkuna SCW wuxuu amray in la dilo, waana la dilay.

Xaarith binu Nufeyl oo isna ahaa nin aad Rasuulka SCW Makka ugu dhibi jirey waxaa isna diley Cali binu Abii-Dhaalib.

Hubaar binu Aswad, oo isna ahaa nin dhib badan, markii ay gabadhii Rasuulka SCW ee Seynab haajireyseyna ahaa ninkii ka daba tegey oo ku dhuftay dhagax kana soo riday ilmihii ay caloosha ku wadday, markii uu arkay in Makka la qabsaday ayuu cararay, ka dibna wuu islaamay, islaamnimadiisiina way wanaagsanaatay.

Labadii gabdhood ee heesaha cayda ah u tirin jirey Rasuulkana middood waa la diley, tii kalena waa la magangeliyey, wayna islaamtay. Saariya iyadana waa la magangeliyey wayna islaamtay.

Xaakim wuxuu weriyey in ay ka mid ahaayeen dadka dhiiggooda la banneeyey Kacab binu Suheyr, Waxshi binu Xarbi iyo Hindu bintu Cutba hase yeeshee saddexduba way soo islaamaeen, islaamnimadoodiina way wanaagsanaatay.

Ninkii la oran jirey Safwaan binu Umaya isagu kuma jirin dadkii dilka lagu xukumay hase yeeshee maaddaama uu ahaa nin ka mid ah hoggaamiyayaashii qureysheed wuxuu u baqay naftiisa wuuna cararay, markaas ayaa waxaa Rasuulka SCW u magangelyo weydiiyey Cumer ibnu Wahab Al-Jumuxi, Rasuulkuna SCW wuu ka yeelay, wuxuuna Cumeyr siiyey cimaamaddiisii uu Makka ku soo galay si ay calaamad ugu noqoto magangelintiisa. Cumeyr wuxuu ka daba tegey Safwaan oo doonaya in uu xeebta Jiddah ka raaco doon u socota Yaman, wuuna soo celiyey. Safwaan markii uu soo laabtay ayuu Rasuulka SCW ka codsaday in uu siiyo muddo labo bilood ah si uu islaamka uga fekero, Rasuulkuna SCW labadii uu cdsaday labo kale ayuu ugu daray oo wuxuu yiri "afar bilood ayaad ikhtiyaar leedahay", ka dib Safwaan wuu islaamay, haweentiisa ayaase ka hor islaamtay, Rasuulkuna SCW nikaaxoodii hore ayuu u daayey.

Ninkii ahaa waxshi oo xamsa dilay isna waxa uu u cararay Daa'if isaga oo ka baqaya in la dilo, markii ay reer Daa'if islaameena isaga oo raba in uu shaam u cararo ayaa lagu yiri rasuulku SCW ma dilo qofkii u taga isagoo tawbad keen ah oo soo islaamay, markaasuu Rasuulka SCW Madiina ugu tagay oo islaamay, islaamnimadiisiina way wanaagsanaatay.

Sidoo kale waxaa isna Daa'if u cararay ninkii ahaa abuu Caamir Al-faasiq, markii ay reer Daa'if islaameena waxa uu u cararay shaam, dabadeedna halkaas ayuu ku bakhtiyey.

Rasuulku SCW maalinkii uu Makka furtay maalinkii ku xigay ayuu dadkii oo dhan u khudbeeyey, wuxuuna ku yiri markii uu Ilaahay mahadiyey ka dib "Dadow Ilaahay wuxuu xarrimay Makka markii uu Samaawaatka iyo dhulka abuuray, qof iga horreeyey iyo mid iga dambeeyana looma xalaalaeyn, anigana waxaa la ii xalaaleeyey saacad maalin ka mid ah, haddana waxa ay ku laabatay xurmadeedii, xalaalna uma aha qof Alle iyo aakhiro rumeeyey in uu dhiig ku daadsho ama gooyo dhriteeda. Haddii uu qof daliishado dagaalka Rasuulka Alle waxa aad tiraahdaan "Alle ayaa Rasuulkiisa u idmay, adigase laguuma idmin", anigana waxaa la ii xalaaleeyey saacad maalin ka mid ah maantana waxa ay ku laabatay xurmadeedii sidii xurmadeedii shalay oo kale. Qofkii jooga ha gaarsiiyo kan maqan". Sidoo kale wuxuu Rasuulku SCW yiri "dhirteeda lama gooyo, ugaarteedana lama cayrsho, baadideedana lama qaado ilaa qof yaboohinaya ma ahane, daaqeedana lama guro", maraas ayuu Cabaas yiri "Rasuulkii Allow Idkharka ka reeb, maxaa yeelay (waa geed) aan ku samaysano guryahayaga, naxashkana waan ka

dhigannaa", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "Idkhar ma ahane".

Reer Khusaaca ayaa sidoo kale maalinkaas waxa ay dileen nin reer banii Leyth ah oo ay u dileen dakano hore oo laga qabay, markaas ayaa rasuulku SCW yiri "reer Khusaacow kor uga laaba gacmihiinna dilka, dil waa batay haddii uu waxtarayee, waxaadna disheen nin aan magtiisa bixinayo, qofkii la dilo halkan aan taagnahay wixii ka dambeeya ehelkiisii labo midkood ayey dooranayaan: in ay u dilaan iyo in ay mag qaataan. Markaas ayaa waxaa istaagay nin reer Yaman ah oo la oran jirey Abuu Shaah oo yiri "Rasuulkii Allow ii qor", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "u qora Abuuu Shaah.

Markii ay dhammaatay qabashadii Makka oo ay magaaladii isku dubba dhacday ayey Ansaartii waxa ay ka baqeen maaddaama Ilaahay Rasuulkiisii u furay Makka in uu Rasuulku SCW magaaladiisii uu ku dhashay dego, markaasa ayey Rasuulka SCW oo Safwa taagan oo Ilaahay ku baryaya is yiraahdeen "ma dhici kartaa Rasuulka in haddii uu Ilaahay u furay magaaladiisii iyo dhulkisii uuu dego?". Markii uu Rasuulku SCW ducadii soo dhammaystay ayuu u yimid oo ku yiri "Maxaad tiraahdeen", markaas ayey u sheegeen, wuxuu Rasuulku SCW ku yiri "Ilaah baan ka magan galnay (taas) noloshu waa noloshiina, dhimashaduna waa dhimashadiina" taas oo ula jeedo magaaladiinna (Madiina) ayaan ku noolaanayaa kuna dhimanayaa.

Dadkii reer Makka markii uu xaqii u caddaaday oo ay arkeen islaamka maahane in waddo kale oo guul lagu gaari karo jirin aye isa soo uruursadeen iyaga oo Rasuulka SCW la mubaayacoonaya, Rasuulkuna SCW wuxuu fariistay Safwa oo ay dadku ugu tagayeen, Cumarna hoostiisa ayuu taagnaa oo dadka ayuu u soo gudbinayey. Rasuulku SCW wuxuu Makka joogey 19 beri oo uu dadka hanuunka ugu yeerayey, islaamkana barayey, wuxuuna amray in la burburiyo asnaamtii xaramka taalley dhammaantood, magaalada Makka gudaheedana wuxuu u direy nin naadinaya oo leh "qofki Alle iyo maalinka aakhiro rumeeyey yuusan gurigiisa sanam uga tegin ilaa uu burburiyo ma ahane.

Intii uu Makka joogey wuxuu Rasuulku SCW ciidamo u kala diray asnaamtii waaweynaa ee la caabudi jirey, siiba kuwii uu qur'aanku sheegay ee Laata, Cusa iyo Manaat oo ugu caansanaa Khaliijul-Carab. Cusa oo ahaa sanamkii ugu weynaa ee qureysh oo dhan caabudi jirtey wuxuu rasuulku SCW u diray Khaalid binu Waliid oo wata 30 nin oo fardooley ah, wuxuuna amray in uu soo dumiyo, waxaana maamulka Cusa hayey reer banii Sheybaan. Khaalid intuu tegey oo soo dumiyey ayuu soo laabtay, markaas ayaa Rasuulku SCW ku yiri "wax ma soo aragtay?", wuxuu yiri "may", markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "ma aadan soo duminin ee laabo oo soo dumi", markaas ayuu laabtay oo si fiican u sumiyey, markii uu si fiican u dumiyey ayaa waxaa ka soo baxay naag qaawan oo madow, madaxeeduna firirsan yahay oo qaylinaysa, markaas ayuu dilay, ka dibna soo laabtay oo Rasuulka SCW u sheegay, makraas ayaa Rasuulku SCW yiri "taasi waa Cusa oo ka quusatay in dhulkiinna dib dambe loogu caabudo".

Sidoo kal esanamkii Hudan la oran jirey oo yaalley meeshii la oran jirey Barhaad oo saddex mayl u jirtey Makka wuxuu Rasuulku SCW u diray ciidan uu hoggaaminayo Camar binu Caas. Camar markii uu meeshii tegey ayaa ninkii maamulka meesha hayey yiri "maxaad dooneysey?", markaas ayuu Cumar yiri "Rasuulkii Alle ayaa i soo amray in aan dumiyo", ninkii ayaa yiri "ma awoodi kartid", Camar wuxuu yiri "sabab?", wuxuu yiri "waa laguu diidayaa", markaas ayaa Camar ku yiri "weli ma baadil baad ku tagan tahay?, hooggaagee ma wax bay maqlaan ama arkaan", ka dib Camar intuu sanamkii jejebiyey ayuu ciidankiisiina amray in ay burburiyaan gurigii uu yaallay bal in wax ka soo baxaan hase yeeshee waxba kama soo bixin, markaas ayaa Camar ninkii ku yiri "maxaad aragtay?", ninkii wuxuu yiri "waan islaamay" markii uu xaqii u caddaaday.

Sidoo kale sanamkii la oran jirey Manaat oo ay caabudi jireen Aws, Khasraj, Qasaan iyo dad kaleba wuxuu Rasuulku SCW u diray 20 nin oo fardooley ah oo uu madax u yahay Sacad binu Seyd Al-ashhari. Sascad markii uu meeshii tegey aya khaaddimkii meeshu ku yiri "maxaad dooneysey?", markaas ayuu yiri "Manaat baan duminayaa", wuxuu yiri "adiga ayey ku jirtaa". Markii uu Sacad ku dhaqaaqay sanamkii ayaa waxaa ka soo baxday naaq qaawan oo madow oo hoog u yeeranaysa, xabadkana iska garaacaysa, markaas ayaa khaaddimkii la hadlay oo yiri "Manaateey waa kuwo kugu caasiyey", Sacad ayaa markaas dilay, meeshiina burburiyey.

Khaalid binu Waliid markii uu ka soo laabtay sanambkii Cusa oo uu soo burburiyey, ayuu Rasuulku SCW u direy reer banuu Judeyma si uu islaamka ugu yeero, markaas ayu baxay Khaalid isaga oo wata 350 Muhaajiriin iyo Ansaar ah, markii uu u tegeyna wuxuu ugu yeeray islaamkii hase yeeshee ma aysan dhihin waa islaamnay ee waxa ah dheheen "waa iilannay", markaas ayuu Khaalid la dagaallamay oo laayey soona qafaashay, nin walba oo ciidankisii ka mid ahaana wuxuu u dhiibay maxbuus. Markii uu meel dhexe soo marayo ayuu ciidankii amray in nin walba uu dilo maxbuuskiisa hase yeeshee Cabdullaahi binu Cumar Khadhaab iyo rag kale oo ciidanka ka md ah ayaa diiday in ay laayaan maxaabistooda. Markii Rasuulku SCW loo yimid ayaa loo sheegay arrinkii, markaas ayuu Rasuulku SCW gacmoaha kor u taagay oo yiri "Allahayow adiga ayaan kaaga beri noqonayaa waxa uu sameeyey Khaalid", ka dibna Rasuulku SCW nimankii la laayey magtoodii ayuu bixiyey. Waxaa jirtey duullaankaas lagu maqnaa in Khaalid iyo Cabdiraxmaan binu Cawf uu xoogaa muran ihi dhex maray, markaas ayaa Rasuulku SCW ku yiri Khaalid "aamus Khaalid ii dhaaf asxaabtayda, Ilaah baan ku dhaartaye haddii uu qof baxo oo uu wax ku bixiyo jidka Alle ma gaareysid nin asxaabtayda ka mid ah kallahaaddiisa iyo carraabadiisa".

Furashadan Makka oo ahayd nasri aad u weyn wuxuu Ilaahay ku xoojiyey diintiisa, Rasuulkiisa SCW iyo askartiisa. Nasrigan oo uu Ilaahay ku dahiray Beytkiisa, kuna hoojiyey gaaladii, wuxuu ahaa mid ay muslimiintu wax badan sugayeen. Furashadani waxa ay aad wax uga beddeshay xaaladii Khaliijul-Carab oo hoggaankii waxaa u qabtay islaamka, carabna waxay soo galeen islaamka oo wax ay ogaayeen in xaramka cidda u hartaa ay xaq ku taagan tahay, waxayna weli xusuusnaayeen wixii ku dhacay Abraha, waxayna bilaabeen in ay koox koox iyo qabiil u soo galaan islaamka.

URURINTII SAKADA

Markii uu Rasuulku SCW ka soo laabtay duullaankii Fatxu-Makka iyo kuwii ku xigay ee

Xunayn iyo Dhaa'if wuxuu yimid Madiina. Muddo yar markii uu joogay ayuu bishii Muxarram, sannadkii 9aad ee hijriga diray rag asxaabtiisa ka mid ah si ay qabiilooyinkii muslimiinta uga soo ururiyaan Sakadii, wuxuuna u kala diray sidatan:

Cuyayna binu Muxsin wuxuu u diray reer banii Tamiiim, Yasiid binu Xuseyn wuxuu u diray reer Aslam iyo reer Qafaar, Cubaada binu Bishir wuxuu u diray rer Suleym iyo reer Musayna, Raafic binu Mukayth wuxuu u diray reer Juhayna, Camar binu Caas wuxuu u diray reer Banii Fasaara, Daxaak binu Sufyaan wuxuu u diray reer bani Kulaaba, Basiir binu Sufyaan wuxuu u diray reer banii Kacab, ibnu Lutbiya Al-asadi wuxuu u diray reer banii Dibyaan, Muhaajir binu abii Umaya wuxuu u diray reer Sanca, Siyaad binu Labiid wuxuu u diray reer Xadramawt, Cadiyi ibnu Xaatim wuxuu u diray reer Dii'i iyo reer banii Asad, Maalik binu Caasim wuxuu u diray reer banii Xandhala, Sibriqaan binu Badar iyo Qays binu Caasim wuxuu u diray reer banii Sacad oo ninba jiho ayuu u diray, Calaa ibnu Xadrami wuxuu u diray reer banii Baxrayn, Cali ibnu Abii-dhaalib wuxuu u diray reer Najraan si u kuwa muslimiinta ahna sakada uga soo qaado kuwa aan ahayn jisyo uga soo qaado. Raggaan Rasuulku SCW ma uusan wada dirin bishii Muxarram ee way kala dambeeyeen.

DHAQ DHAQAAQYADII CIIDAMEED EE KU XIGAY DAA'IF

Rasuulku SCW markii uu ku soo laabtay Madiina bishii Duq-Qacda, sannadkii 8aad ee hijriga ma uusan bixin ilaa laga gaaray bishii Rajab, sannadkii 9aad ee hijriga ee uu u baxay duullaankii Tabuuk. Hase yeeshee wuxuu Rasuulku SCW diray ilaalooyin ciidameed oo uu u kala diray jihooyinka sidoo kale wuxuu diray rag badan oo uu u kala diray qabiilooyinkii muslimiinta si ay sakada uga soo ururiyaan islaamkana u baraan. Haddaba haddii aan soo qaadanno duullaamadii waxa ay kala ahaayeen sidatan:

1. Ilaaladii Cuyayna binu Muxsin oo la diray bishii Muxarram, sannadkii 9aad ee hijriga, wuxuu Rasuulku SCW u diray reer banii Tamiim. Sababta uu Rasuulku SCW u dirayna waxa ay ahayd in gaaladii reer banii Tamiim ay diideen jisyaddii. Cuyayna wuxuu watay 50 nin oo fardooley ah oo aysan ku jirin Muhaajiriin iyo Ansaar. Cuyayna iyo ciidankiisii way baxeen iyaga oo habeenkiina soconaya, maalintiina degaya ilaa ay ugu dambayntii ka weerareen cadowgii, wuuna baqday oo kala cararay. Cuyayna wuxuu gacanta ku soo dhigay 11 nin, 21 haween ah iyo 30 carruur ah, wuxuuna keenay Madiina. Dabadeed waxaa ka daba yimid 10 nin oo madaxdii qabiilkaas ah oo Rasuulka SCW la hadlay, islaamayna, Rasuulkuna SCW wuxuu u celiyey maxaabiistoodii.

2. Ilaaladii Qudba binu Caamir oo ka koobnayd 20 nin waxa uu Rasuulku SCW diray bishii Safar isla sannadkii 9aad ee hijriga, waxa uuna u diray qabiil ka mid ahaa reer Khuthcam oo degganaa agagaarka meesha la yiraahdo Tubaala. Qudba iyo raggiisii way baxeen ilaa ay kala kulmeen cadowgii, waxaana dhex maray dagaal daran ilaa labada qolaba uu dhaaawacu ku batay, Qudbana ku shahiiday, ka dibna muslimiintii waxa ay ku soo laabteen Madiina iyaga oo qaniimo wata.

3. Ilaaladii Daxaak binu Sufyaan oo uu Rasuulku SCW diray bishii Rabbiicul-Awal, sannadkii 9aad ee hijriga, wuxuuna u diray reer banii Kulaaba, wuxuuna amray in islaamka loogu yeero, hase yeeshee islaamkii way diideen, wayna dagaallameen, dabadeedna jab baa ka raacay oo muslimiintii ayaa guulaystay.

Waxaa kale oo jirtay Ilaaladii Calqama binu Mujsis oo ka koobnayd 300 oo nin, Rasuulkuna SCW u diray xeebta Jidda bishii Rabbiicul-Aakhir, sannadkii 9aad ee hijriga.

DUULLAANKII TABUUK

Duullaankan wuxuu dhacay bishii Rajab, sannadkii 9aad ee hijriga, waxa ayna sababtiisu ahayd: Markii uu Rasuulku SCW ka soo laabtay duullammadii Fatxu-Makka iyo kuwii ka dambeeyey, ayna Khaliijul-Carab gacantiisa gashay, islaamkuna noqday awoodda keliya ee gobolkaas ka jirta, carabtii dhulkaas degganaydna ay islaameen, ayuu Rasuulku SCW isu diyaariyey dowladdii Roommaanka oo waqtigaas duni ugu xoog badnayd. Waxa aynu soo marnay in ninkii saxaabiga ahaa ee la oran jirey Xaarith binu Camar oo uu Rasuulku SCW warqadda ugu sii dhiibay boqorkii Basra uu dilay Shuraxbiil binu Camar. Arrintaas oo aad u fool xumayd, waxa ay ka caraysiisay Rasuulka SCW oo waatii uu u diray ciidankii uu watay Seyd binu xaarith oo ka dib uu dagaal daran ku dhex maray iyaga iyo roomaankii meeshii la oran jirey Mu'ta. Ka dib muslimiintii waxa ay u jeesteen duullaankii Fatxu-Makka iyo kuwii ku xigay, hase yeeshee ciidankii roomaanku waxa ay isu diyaarinayeen duullaanka muslimiinta in kasta oo iyaga laftooda ay arrimo kale ku furnaayeen oo qabiillo badan oo carbeed ay ka xoroobeen, qaar kalena islaamka soo galeen.

Rasuulku SCW markii uu ku soo laabtay Madiina waxaa si is daba joog ah loogu soo gudbinayey akhbaarta roomaanka iyo in ay rabaan in ay muslimiinta duullaan ku soo qaadaan. Sidaa darteed Rasuulka SCW oo lagu yaqaanay in haddii uu maqlo cid rabta in ay muslimiinta duullaan ku soo qaaddo uu meesheeda ugu tago, waxa uu bilaabay in uu u tabaabushaysto duullaanka roomaanka, wuxuuna u cid diray dhammaan qabiilladii muslimiinta ahaa ee beled iyo baadiyaba degganaa.

Rasuulku SCW wuxuu samayn jirey markii uu duullaan u socdo in uu jihada uu ku duulayo maahee jiho kale muujiyo si munaafiqiinta iyo kuwa iimaankoodu daciifka yahay aysan u bixin sirtiisa oo uusan cadowgu uga faa'iideysan, hase yeeshee Rasuulku SCW duullaankan roomaanka shaaca ayuu ka qaaday maxaa yeelay meesha ayaa fogeyd, cidda lagu duulayana waxa ay ahayd dowladdii waqtigaas dunida ugu xoogga badnayd sidaas ayuuna ogeysiiska u bixiyey si ay muslimiintu isu diyaariyaan oo ay saad iyo saanadba ugu talo galaan. Sidoo kale waqtiga duullaankani wuxuu ku beegmay waqti ay abaar darani dhacday oo qorrax kulayl jirtay dadkuna aad u dhibaataysnaayeen, markaasna qorraxdu ay aad u kululayd.

Asxabtii Rasuulka oo dhib kasta oo ku yimaadda uusan ka hakinayn kor ahaanshaha kalimadda Alle iyo jihaadka, waxa ay si deg deg ah u ajiibeen dhawaaqii jihaadka, waxa ayna si is daba joog ah ugu soo qulquleen Madiina iyaga oo ka imaanaya dhammaan dhulkii uu islaamku xukumayey. Wuxuu Rasuulku SCW muslimiinta aad ugu boorriyey in ay sadaqo la baxaan oo ay ururiyaan xoolo badan oo jihaadka lagu taageero, sidaa darteed asxaabta oo had iyo jeer kheyrka u kala tartami jirey waxa ay bilaabeeen in ay kheyrkan u kala dheereeyaan. Abuubakar wuxuu bixiyey maalkiisii oo dhan, markaas ayuu Rasuulku SCW ku yiri "maxaad reerkaagii uga soo tagtay?", wuxuu yiri "Alle iyo Rasuulka". Cumar binu Khadhaab wuxuu keenay maalkiisii barkiis. Cusmaan binu Cafaan wuxuu keenay 300 rati iyo rarkoodii, 1,000 Diinaar iyo 200 oo wiqiyadood wuu bixiyey, wuxuu markaas Rasuulku SCW yiri "maanta wixii ka dambeeya dhibi mayso Cusmaan wixii uu sameeyo". Cabdiraxmaan binu Cawf wuxuu keenay 200 oo wiqiyadood oo qalin ah, Cabbaas binu Cabdimudhalib wuxuu keenay maal badan. Sidaa ayeyna asxaabtii wax u bixinayeen oo kii maal badan haystay wuxuu keenay wax badan, kii maal yaraana wuxuu keenay wixii uu heli karay.

Munaafiqiintii oo iyagu kheyrka iyo sadaqada ka indho la'aa, wax ay bixiyaan iska daaye waxa ay durid iyo dacaayad ugu dhaqaaqeen asxaabtii sadaqada bixinaysay

oo kii maal badan keena waxa ay lahaayeen "is tus tus ayuu u bixinayaa", kii wax yar keenana waxa ay lahaayeen "Alle waa ka deeqtoon yahay kan wixiisa". Allaahna isaga oo ka hadlaya arrinka munaafiqiiinta iyo sida ay wax bixintodu ahayd wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((KUWII WEEYE (MUNAAFIQIINTU) KU CEEBAYNAYEY KUWA SADAQAYSANAYA EE MU'MINIINTA KA MID AH IYO KUWA AAN HELAYN TABARTOODA MOYEE WAX KALE, WAY KU JEESJEESAYAAN ALLAASE KU JEESIN (OO KA ABAAL MARIN XUMAANTOODA), WAXAYNA LEEYIHIIN CADAAB DARAN)), (Suuratu-Tawbah 79).

Gabdhihii muslimaatka ahaa waxa ay iyaguna sadaqaatkii ka qaateen qayb libaax, waxa ayna sadaqaysanayeen dhega-dhegahoodii, jijimahoodii, farraantiyadoodii iyo wixii ay uga qayb qaadan kareen jihaadka.

Ugu dambayntii waxa Rasuulka SCW soo gaartay in uu Hiraqle u diyaariyey duullaanka muslimiinta ciidan gaarayey 40,000 oo nin ayna raaci doonaan qabiilooyinkii carbeed ee uu xukumayey sida Lakham, Judaama iyo kuwo kale. Ciidankaas horraantiisii waxa ay soo gaartay meesha la yiraahdo Bulqaa'.

Rasuulku SCW wuxuu Madiina ka soo baxay bishii Rajab, sannadkii 9aad ee hijriga isaga oo wata 30,000 oo ciidan ah, waana ciidankii ugu badnaa ee uu Rasuulku SCW duullaan u kaxaysto. Duullaankani wuxuu ahaa kii ugu dambeeyey ee uu Rasuulku SCW u baxo. Wuxuu Rasuulku SCW Madiina madax uga dhigay Maxammed ibnu Maslama, xaasaskiisiina wuxuu Rasuulku SCW uga soo tegay Cali binu Abii-dhaalib.

Nimankii munaafiqiinta ahaa oo had iyo jeer markii ay nabadi jirto dadkooda ku dhex qarsoon, markii dhibku yimaadana bannaanka u soo baxa ayuu duullaankan tabuuk bannaanka u soo saaray oo intii uu Rasuulku SCW duullaanka isu diyaarinayey waxa ay Rasuulka SCW u soo qaddimayeen cudurdaarro been ah oo ay rabeen in ay duullaanka uga haraan, waxaana hadalladoodii ka mid ahaa in qaar ka mid ihi Rasuulka SCW u yimaadeen oo ku dheheen "haweenka reer Asfar (reer Ruum) iskama hayn karno ee ha na fitnaynin". Allaahna isaga oo tilmaamaya hadalkoodaas wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((WAXAA KAMID AH (MUNAAFIQIINTA) KUWA DHAHAYA I FASAX OO HA I FITNAYNIN, WAXAYSE KU DHECEEN FITNADII (OO GAALNIMO AH) JAHANAMANA WAA MID KOOBTAY GAALADA)), (Suuratu-Tawbah 49).

Sidoo kale waxaa hadalladoodii ka mid ahaa iyaga oo asxaabta tashwiish ku furaya in ay dhahaan "ma roomaanka ayaa lala dagaallami karaa? Maxammed ma wuxuu mooday carabtii oo kale?". Waxaa kale oo ay yiraahdeen iyaga oo ka hadlaya kulaylkii iyo masaafadii dheerayd "war kulaylka ha u bixinnina". Allaahna isaga oo hadalkoodaas tilmaamaya wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((WAXAY KU FARXEEN KUWII HARAY FADHIGOODII AY KA HAREEN RASUULKA SCW IYO IN AY NECEEN KU JIHAADIDA MAALKOODA IYO NAFTOODA JIDKA ALLE, WAXAYNA DHEHEEN HA KU BIXINA KULAYLKA, WAXAAD DHADAA NAARTA JAHANAMO AYAA KA KULAYL BADAN HADDAY WAX FAHMAYAAN)), (Suuratu-Tawbah 81).

Munaafiqiintii markii uu Rasuulku SCW baxay way hareen iyaga oo isugu jiray qayb cudurdaar been ah sheegatay iyo qayb aan cudurdaarba sheegan oo iska hartay. Allaah isaga oo ka hadlaya cudurdaarashadooda iyo raacitaankoodu in uusan faa'iido u lahayn Muslimiinta wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

((KAAMA IDAN WAYDIISTAAN KUWA ALLE IYO MAALINKA AAKHIRO RUMEEYEY IN AY

KU JIHAADAAN MAALKOODA IYO NAFTOODA, ALLENA WAA OGYAHAY MUTTAQIINTA, WAXAASE KU IDAN WAYDIISANAYA WAXA AAN ALLE IYO MAALINKA AAKHIRO RUMAYN OO AY QULUUBTOODU SHAKIDAY (XAQA) IYAGA OO KU NOQNOQONAYA SHAKIGOODA, HADDAY DAMCAAN IN AY BAXAAN WAXAY DIYAARSAN LAHAAYEEN QALAB, HASE YEESHEE ALLE AYAA IDIIN NACAY BIXITAANKOODA MARKAASUU DIB DHIGAY, WAXAANA LAGU YIRI LA FADHIYA KUWA HARAY (DUAMRKA CARUURTA IYO NAAFADA)), (Suuratu-Tawbah 44-46).

Waxa ay munaafiqiintu sidoo kale dacaayado ka faafinayeen asxaabtii jihaadka looga reebay cudurdaar dartiis sida Cali binu Abii-dhaalib oo Rasuulku SCW ehelkiisa uga soo tegey, waxa ayna lahaayeen "Cali wuu cuslaysiiyey Rasuulka SCW oo wuu iska reebay", hadalkoodii ayaa markaa Cali dhibsaday, markaas ayuu Cali hubkiisii intuu qaatay ka daba tegay Rasuulkii SCW oo dhex sii socda, wuxuuna ku yiri "Rasuulkii Allow, munaafiqiintii waxa ay sheegayaan in aan ku cuslaysiiyey oo aad iska kay fududaysay", markaas ayaa Rasuulku SCW yiri Cali "been bay sheegeen. Ilaah baan ku dhaartaye waxa aan kuu reebay in aad mas'uul iiga noqotid ehelkaygii iyo ehelkaaga", waxaa kale oo uu Rasuulku SCW ku yiri "miyaadan ku raalli noqonayn in aad ii joogtid booskii uu Haaruun u joogay Muuse illaa in uusan nabi iga dambayn maahane?". Ka dib Rasuulku SCW wuu celiyey si uu khaliif uga sii ahaado ehelka Rasuulka SCW.

Duullaankan Tabuuk waxaa kale oo ka haray, munaafaqiinta maahane, dad wanaagsan oo asxaabta ka mid ahaa, waxaana raggaas ka mid ahaa Abaa Khaythama. Abuu Khaythama markii uu Rasuulka SCW ka haray ayaa maalin kulayl darani jiro wuxuu tegey labadiisii guri, markaas ayuu arkay labadiisii xaas oo mid walba u gogoshay geed hoostiis, una diyaarisay raashin, markaas ayuu yiri "Rasuulkii Allena kulayl iyo safar ayuu ku jiraa, Abaa Khaythammana labadiisii xaas ayaa raashin iyo har u diyaariyey. Ilaah baan ku dhaartaye cuni maayo raashinkiinna, harkiinnana farisan maayo illaa aan Rasuulkii Alle uga tago ee ii diyaariya jescinkaygii", markii ay u diyaariyeenna rakuubkiisii ayuu qaatay oo Rasuulkii SCW ayuu ka daba tegey, jidkana waxa ay iska heleen nin kale oo asxaabta ka mid ahaa. Rasuulka SCW iyo asxaabtiisii oo meel degay ayaa waxa ay arkeen raggaas meesha fog ka soo socda, markaas ayey asxaabtii ku dheheen Rasuulka SCW "Rasuulkii Allow niman baa halkaa ka soo muuqda", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "ahow Abuu Khaythama", markii uu soo dhowaaday ayey asxaabtii dheheen "Rasuulkii Allow waaba isagii". Abuu Khaythama iyo saxaabigii markii ay Rasuulka SCW u yimaadeenna wuxuu yiri "Abuu Khaythama maxaa kugu dhacay?", markaas ayuu Abuu Khaythama qisadii u sheegay, Rasuulkuna SCW wuu u duceeyey.

Dadkii wanaagsanaa oo sidaa kale dib u dhacay waxaa ka mid ahaa Abii Dar Al-Qafaari, markaas ayaa isaga oo meel fog ka soo socda oo alaabtiisii tunka ku wata asxaabtu u sheegeen Rasuulka SCW qofka lugeynaya oo meesha fog ka soo muuqda, markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "ahow Abuu Dar", markii uu soo dhowaaday ayey dheheen "Rasuulkii Allow waaba Abuu Dar", markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "Allaha u naxariisto Abuu Dar waxa uu soconayaa keligiis, wuxuuna dhiman keligiis, waxaana la soo saarayaa keligiis". Sidii uu Rasuulku SCW sheegay ayuuna arrinkii noqday oo waqtigii Cusmaan binu Cafaan Khilaafada hayey ayaa Abuu Dar isaga oo meel cidla ah maraya ayna lasocdaan xaaskiisii iyo wiil khaadimkiisa ahaa waxaa qabatay geeridii, markaas ayuu ku yiri xaaskiisii "waxa aan maqlay Rasuulkii Alle oo koox aan ku jiro leh "waxa idinka mid ah nin meel cidla ah ku dhiman doona oo janaasadiisa ay dad muslimiiin ahi u imaan doonaan". Ilaah baan ku dhaartaye raggii kale waa wada dhinteen ilaa aniga maahane, nin walbana wuxuu ku dhintay magaalo iyo meel dad joogo, wuxuu u dardaarmay xaaskii iyo wiilkii in ay dhaqaan oo kafnaan ka dibna ay dhigaan wadada oo cida ugu horaysa oo soo marta ay ku dhahaan kani waa Abii Dar saaxiibkii Rasuulkii Alle SCW ee nooogu kaalmeeya duugitaankiisa, markii uu dhintay ayey sidii yeeleen oo dhigeen wadada. Ciddii u horaysay ee soo marta waxa ay ahayd koox uu Cabdullaahi binu Mascuud ku jiro oo reer Ciraaq ah una socota Cumro,

waxay kooxdii arkeen Janaasada wadada dhextaal oo geelay wateeni sigay in uu ku jogsado, waxaa markaa istaagay wiilkii oo yiri "kani waa Abii Dar saaxiibkii Rasuulka SCW ee noogu kaalmeeya duugitaankiisa". Cabdullaahi binu Mascuud ayaa ashahaatay oo isagoo ooyaya yiri "waa run sheegay Rasuulkii Alle SCW waxaad soconaysaa (Abaa Dar) kaligaa waxaad dhimatay kaligaa waxaana lagu soo bixinayaa kaligaaa, ka dibna waa duugeen.

Ka dib Rasuulka SCW iyo ciidankiisii waxa ay u kicitimeen dhinaca Shaam iyaga oo u socda Tabuuk oo ku taalla xudduuda Sucuudiga iyo Jordan. Ciidanka Rasuulku SCW watay tiro badnaantooda darteed kuma uusan filnayn gaadiidkii iyo sahaydii ay wateen sidaa darteed 18kii ninba waxaa ka dhexeeyey hal rati. Intii ciidankii muslimiiintu waddada Tabuuk sii hayeen waxa uu sii maray meel la yiraahdo Xajar oo ahayd dhulkiii uu Ilaahay ku halaagay reer Thamuud, markaas ayaa dadkii ka waraabsadeen ceelashii, markii ay carraabayeen ayaa Rasuulku SCW ku yiri "ha ka cabbinina biyaheeda, salaaddana ha ugu weyso qaadannina, waxna ha ka cunina", wuxuu Rasuulku SCW amray in ay ka cabbaan ceelkii ay u aroori jirtay hashii Nabi Saalix.

Cabdullaahi binu Cumar wuxuu yiri "markii uu Rasuulku SCW soo maray Xajar waxa uu yiri "ha gelinnina kuwii naftooda dulmiyey guryahooda (reer Thamuud) illaa idinka oo ooyaya maahane, yuusan idinku dhicin wixii iyaga ku dhacay". Ka dib Rasuulku SCW madaxiisa ayuu foorariyey, socodkiina wuu dedejiyey ilaa uu meeshii dhaafay.

Ciidankii muslimiinta intii uu jidka sii hayey waxaa qabtay harraad aad u daran illaa ay markii dambe Rasuulka SCW u sheegteen, markaas ayuu Rasuulku SCW Ilaahay u baryey, Allaahna wuxuu u soo diray daruur roob ah illaa ay ka cabbeen oo ay ka dhaansadeen. Sidoo kale intii dhexda la sii socday habeen ayaa Rasuulku SCW ku yiri asxaabta "caawa waxaa idiin imaanaysa dabayl daran ee yaan qof idinka mid ihi kicin, qofkii rati watana ha adkeeyo dabarkiisa". Dabayshii ayaa timid, markaas ayaa nin istaagay, dabayshii ayaa qaadday ninkii oo ku tuurtay buurta Dhii'i, halkaasna waxa aan ka garanaynaa amarka Rasuulka SCW oo la khilaafo dhibaatada uu leeyahay. Markii Rasuulka SCW loo sheegay in ninkaas dabayshii qaadday wuxuu yiri "miyaaanan idin dhigin qofna yuusan kicin?". Markii uu Rasuuku SCW Madiina ku laabtay ayaa reer Dhii'i u keeneen Rasuulka SCW ninkii.

Rasuulku SCW intii uu waddada ku sii jirey salaadda duhur iyo casar wuu jamcinayey, sidoo kale makhribka iyo cishahana wuu jamcinayey oo wuxuu samaynayey Jamcu-Taqdiin iyo Jamcu-Ta'khiir labadaba. Markii uu Rasuulku SCW u dhowaaday Tabuuk wuxuu ku yiri asxaabtii "berri haddii Alle idmo waxa aad tegi doontaan ishii Tabuuk, mana gaareysaan barqadii ka hor ee haddaba qofkii tagaa yuusan biyaheeda wax ka taaban, ilaa aan imaado". Markii uu Rasuulku SCW meeshii tegey ayuu arkay labo nin oo uga hor maray biyihii, markaas ayuu weydiiyey oo yiri "wax ma ka taabateen isha biyaheeda?", waxay dheheen "haa", wuxuu Rasuulku SCW ku yiri wixii Alle doonay. Ka dib wuxuu Rasuulku SCW ka darsaday wax yar ilaa xoogaa biyo ah uu ka helay, wuxuu ku mayray wejigiisa iyo gacmihiisa wuuna ku celiyey, markaas ayaa ishii biyo badan ka burqadeen oo dadkii ka cabbeen. Ciidankii muslimiintu wuxuu markaas degay Tabuuk oo uu ka dhigtay fariisin, dabadeedna waxa uu Rasuulku SCW u jeediyey ciidankii khudbo aad u xeel dheer isaga oo ku boorrinaya dagaalka lala geli doono cadowga Alle iyo in ay muslimiiintu leeyihiin guusha Adduun iyo Aakhiro.

Roomaankii markii ay maqleen soo bixitaanka Rasuulka SCW iyo awooddiisa ayaa Allaah ku riday rucbi iyo argagax, wayna awoodi kari waayeen in ay dagaal ugu soo baxaan muslimiinta oo goobta yimaadaan, sidaa darteed waxa ay kala aadeen

magaalooyinka xuduudkooda gudihiisa ku yaallay oo waxay galeen difaac.

Ciidankii muslimiinta wuxuu Alle u siyaadiyey Ciso iyo sharaf, meel walbana waxaa laga ogaaday guusha muslimiinta iyo baqdintii roomaanka oo waqtigaas dunida ugu xoogga badnaa. Rasuulka SCW iyo ciidankiisii waxa ay Tabuuk degganaayeen 20 beri, waxaana Rasuulka SCW u yimid intii uu meeshaa degganaa qaar ka mid ahaa madaxdii dhulkaas xukumi jirtey iyaga oo doonaya heshiis, iyo in ay jisyo bixiyaan. Waxaa Rasuulka SCW u yimid nin la oran jireyYuxayna binu Rawba oo xukumayey Ayla, wuxuuna Rasuulka SCW la saxiixday heshiis, wuxuuna ballan qaaday jisyo, Rasuulkuna SCW warqad ayuu u qoray taas oo ahayd sidan:

BISMILLAAHI RAXMAAN RAXIIM

Tani waa nabadgelyo ka ahaatay Nabi Maxammed, Rasuulkii Alle una ahaatay Yuxayna binu Rawba iyo reer Ayla doonyahooda iyo socotadooda bad iyo berri. Waxa ay ku jiraan nabadgelyadii Alle iyo Nabi Maxammed iyaga iyo ciddii la jirta oo reer Shaam iyo reer Baxar ah. Qofkii iyaga ka mid ah oo dhibaato soo cusboonaysiiya maalkoodu ka celin maayo naftooda, ciddii maal ka qaadata oo dadka ka mid ahna waa u xalaal. Xalaal ma aha in laga manciyo biyo ay aroorayaan iyo waddo ay marayaan bad iyo berriba.

Sidoo kale waxaa Rasuulka SCW u yimid reer Jarbaa iyo reer adkax waxa ay iyaguna ballan qaadeen in ay jisyo bixiyaan, Rasuulkuna SCW wuxuu u qoray warqad.

Rasuulku SCW intii uu meeshaa joogey wuxuu diray ciidan gaaraya 420 nin oo fardooley ah, madaxna uu u ahaa Khaalid binu Waliid. Wuxuu ciidankaas u diray ninkii la oran jirey Ukaydar binu Cabdi-Malik oo ahaa masiixi xukumayey Duumatul-Jundul. Rasuulku SCW wuxuu ku yiri Khaalid "waxa aad heli doontaa ninkaas oo lo' duureed ugaarsanaya". Khaalid wuu baxay ilaa uu u dhowaaday qalcaddii uu ninkaas degganaa, habeenkaas oo uu jiray dayax, ahaydna waqti kuleyl ah ayaa Ukaydar isaga oo haweentiisii la taagan, waxa ay arkeen lo' duureed ku xoqanaysa albaabkii dhistooda, markaas ayey haweentiisii ku tiri "weligaa arrintaan oo kale ma aragtay?", wuxuu yiri "maya, Ilaah baan ku dhaartaye", waxa ay tiri "tan yaa ka tagay?", wuxuu yiri "qofna", ka dib intuu soo degay ayuu amray in faraskiisii loo kooreeyo, markii loo yeelayna wuu soo baxay wuxuu bilaabay in uu ceyrsado isaga oo ay la jiraan koox ehelkiisa ah oo uu ka mid ahaa walaalkiis Xasaan. Ugaartii isaga oo ceyrsanaya ayaa waxaa soo qabtay ciidankii Khaalid watay, walaalkiisna way dileen. Wuxuu Ukaydar dusha ka gashanaa maro ka samaysnayd xariir dahab lagu qurxiyey, Khaalid ayaa markaa maradii ka qaaday oo Rasuulka SCW u sii diray. Anas bin Maalik wuxuu yiri "waxa aan arkay maradii markii Rasuulka SCW loo keenay iyada oo ay muslimiinti gacmohooda ku taataabanayaan oo ay la yaabban yihiin, markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "ma tan baad al yaabaysaan, Allihii nafsaddaydu gacantiisa ku jirtay ku dhaartaye fasaleetiyada Sacad binu Mucaad ee jannada dhexdeeda ayaa ka fiican tan". Ka dibna Khaalid ayaa u keenay Rasuulka SCW ninkii Ukaydar ahaa, Rasuulkuna SCW ninkaa wuu iska cafiyey, wuxuuna kula heshiiyey in uu jisyo bixiyo, ka dibna Ukaydar waxa uu u noqday ehelkiisii.

Rasuulku SCW wuu soo gaddoomay, intii uu jidka ku soo jirey ayaa 12 nin oo munaafaqiinta ka mdi ahaa damceen in ay dilaan Rasuulka SCW hase yeeshee waa loo waxyooday, waxaana Rasuulka SCW la socday Cammar binu Yaasir oo hoggaanka hasha u hayey iyo Xudayfa binu Yamaam oo hasha gadaal ka waday. Markii ay munaafaqiintii u soo dhowaadeen Rasuulka SCW oo uu shanqartoodii maqlay ayuu u diray Xudayfa si uu u kala cayriyo, markaas ayuu Xudeyfa seeftiisii la baxay oo daabbadahoodii ka hor tegey, markaas ayey kala carareen oo ciidankii dhex galeen. Rasuulku SCW wuxuu ka dib magacyadoodii iyo wixii ay damacsanaayeenba u sheegay

Xudeyfa.

Rasuuulku SCW markii uu Madiina u soo dhawaaday ayuu yiri "tani (Madiina) waa dhaaba, kani waa Uxud, waa buur na jecel annaguna aan jecel nahay". Ka dib Rasuulku SCW wuxuu galay magaaladii Madiina bishii Ramadaan, sannadkii 9aad ee hijriga, wuxuna Madiina ka maqnaa 50 beri. Sidii sunnada u ahayd Rasuulka SCW markii uu safar ka soo laabto, wuxuu ugu hor galay masaajidka oo uu ku tukaday labo rakcadood, ka dib dadkii ayuu u fariistay. Nimankii munaafaqiinta ahaa oo dhowr iyo siddeetan gaarayey ayaa Rasuulka SCW u yimid iyaga oo u cudurdaaranaya oo been ku dhaaranaya, Rasuulkuna SCW wuu u rumeeyey hadalkoodii oo daahirkoodii ayuu xukumay, laabtoodiina Ilaah ayuu u tala saartay, wuuna u dembi dhaaf weydiiyey hase yeeshee Alle uma dembi dhaafin kamana raalli noqon, wuxuuna qur'aankiisa ku yiri:

((U DAMBI DHAAF WAYDII AMA HA U DAMBI DHAAF WAYDIIN HADDII AAD U DAMBI DHAAF WAYDIISO TODOBAATAN JEER ALLE U DEMBI DHAAFI MAAYO, MAXAA YEELAY WAXA AY KU KUFRIYEEN ALLE IYO RASUULKIISA SCW, ALLENA MA HANUUNIYO DAD FAASIQIIN AH)), (Suuratu-Tawbah 80).

Intii uu Rasuulku SCW ku maqnaa duullaankii Tabuuk waxaa dhacday in qaar munaafaqiinta ka mid ah ay dhiseen masaajid si ay muslimiinta ugu kala geeyaan, dhufaysna uga dhigtaan. Rasuulka SCW ayey u yimaadeen oo ku yiraahdeen "Rasuulkii Allow waxaan dhisnay masaajid, waxaanna jecel nahay in aad noo timaaddid oo noogu tukatid", Rasuulkku SCW markii uu damcay in uu tago Ilaahay soo dejiyey aayadahan:

((KUWA WEEYE (MUNAAFAQIINTU) U YEESHAY MASAAJID DHIB IYO GAALNIMO IYO IN AY KALA JABIYAAN MU'MINIINTA, UUNA KU DHAKADO MID HORAY ULA DAGAALAMAY ALLE IYO RASUULKIISA, WAXAYNA KU DHAARANAYAAN INAANAN WAX AAN WANAAG AHAYN DOONAYN, ALLASE WAA OG YAHAY INAY BEEN SHEEGAYAAN, HA JOOGSAN DHEXDIISA WALIGAA, MASAAJID LAGU BILAABAY MAALINKII U HORAYSAY TAQWADA ALLE (MASAAJIDKII QUBA) AYAA U XAQ LEH IN AAD DHEX IS TAAGTO, WAXAANA JOOGA (MASJID QUBA) RAG JECEL IN AY IS DAAHIRIYAAN, ALLENA WAA JECEL YAHAY KUWA IS DAAHIRIYA, MA QOF KU BILAABAY DHISTA (MASAAJIDKIISA) TAQWADA ALLE IYO RAALI AHAAN SHIHIISA AYAA KHAYR BADAN MISE MID KU BILAABAY DHISMIHIISA GOD KULA DUMAYA JAHANNAMO QARKIIS, ALLENA MA HANUUNIYO QOOM DAALIMIIN AH, KANA SUULIMAAYO DHISMAHOODII AY DHSIEEN (SABABTII) IN QULUUBTOODA UU KU JIRO SHAKI ILAA AY KA GOOGO'DO QULUUBTOODU, ALLENA WAXA UU AHAADAY ALLE WAX WALBA OG OO XAKIIM AH)), (Suuratu-Tawbah 107-110).

Markaas ayuu Rasuulku SCW amray rag asxaabtiisa ah in ay baxaan oo soo dumiyaan, soona gubaan masaajidkaas.

Halkan waxaa aynu ka qaadanaynaa in shay kasta iyo camal walba oo wanaagsan mar haddii aan Alle dartiis loola jeedin ee dano adduunyo loo sameeyo uusan faa'ido yeelanayn; Allena qofka niyadiisa ayuu u qabanayaa. Rasuulkuna SCW wuxuu yiri "acmaashu waxa ay ahaatay niyada, qof walbana wuxuu leeyahay wixii uu niyoodo. Qofkii ay hijradiisii tahay Alle iyo Rasuulkiisa, hijradiisu waa Alle iyo Rasuulkiisa; qofkii ay hijradiisu tahay adduunyo uu soo helo ama haweenay uu soo guursado, hijradiisu waa waxa uu u hijrooday".

Mu'miniintii kale oo duullaankaas ka haray oo aan ka qayb gelin waxaa ka mid ahaa Kacab binu Maalik, Muraaro binu Rabbiica iyo Hilaal binu Umaya oo iyagu aan u harin shaki iyo nifaaq balse uu qaaday wahsi iyo naf jeclaysi. Kacab binu Maalik wuxuu yiri "weligay Rasuulka SCW kama harin duullaan uu duulayo marka laga reebo kii Tabuuk iyo Badar oo aan isaga cidna lagu canaanan. Waxa aan Rasuulka SCW kala

qayb galay beycaddii Caqaba 2aad oo aan islaamka isku ballansannay, Badarna kama aan jeclayn Caqaba in kasta oo ay dadku sheeg sheegaan Badar. Hase yeeshee ma jirin mar aan ka xoog badnaa, oo iiga fududayd duullaankii Tabuuk ee aan ka haray. Ilaah ban ku dhaartaye markaas aka hor ma kulmin labo neef (oo aan duullaan u diyaarsado) illaa duullaankaas Tabuuk maahane. Rasuulkuna SCW ma duuli jirin hase yeeshee wuxuu muujin jirey (jihada duullaanka) meel aan ahayn duullaankan Tabuuk maahane. Rasuulkii Allena wuxuu duulay iyada oo uu jiro kulayl daran, wuxuuna qaabbilay safar dheer iyo caddad badan, muslimiintana wuxuu u caddeeyey arrintaas si ay duullaanka isugu diyaariyaan, muslimiiinta Rasuulka SCW la socdayna way badnaayeen mana jirin diiwaan koobaya, waxaana yaraa nin doona in uu is qariy illaa wuu maleynayey in uu qarsoomi karo haddii aan waxyi xagga Alle ka imaan. Wuxuu duullay Rasuulkii Alle waqti ay mirihii soo go'een. Anigu waan is diyaariyey hase yeeshee ma aanan samayn, markii ciidankii baxay ayaan damcay in aan ka daba tago hase yeeshee ma aanan samayn. Markii uu Rasuulkii Alle baxay ayaan ku dhex socday dadkii (bal in aan helo dad kale oo wanaagsan oo haray), waxaase i muru geliyey in aanan arag illaa nin nifaaq ka buuxo iyo nin Ilaahay u cudurdaaray maahane".

Markii uu Rasuulku SCW soo noqday ayuu Kacab cudurdaar aan jirin urusaday si uu Rasuulka SCW ugu raalli geliyo hase yeeshee amrki uu Rasuulka SCW u soo dhowaaday ayuu arrinkaas iska daayey, wuxuuna go'aansaday in uu runta ku dadaalo iyada ayaa adduun iyo aakhiroba badbaadinaysee. Rasuulku SCW markii uu masaajidkii fariistay oo munaafaqiintii oo dhan ay cudurdaar been ah la yimaaddeen ayaa Kacab u soo galay Rasuulka SCW, markaas ayaa Rasuulku SCW dhoolla caddayn uu xanaaq ku jiro oo kale dhoolla caddeeyey, weydiiyeyna Kacab waxa ka reebay duullaanka. Kacab wuxuu yiri "Rasuulkii Allow SCW Ilaah baan ku dhaartaye haddii aan ag fariisan lahaa cid kale, cudurdaar ayaan u badin lahaa oo waxaa la i siiyey codkarnimo, hase ahaatee Ilaah baan ku dhaartaye waxa aan ogahay haddii aan maanta kuu sheego been ah oo aad iiga raalli noqotid in Ilaahay uu ii caroonayo. Haddiise aan kuu sheego sheeko run ah oo aad wax iigu qaadaysid, waxa aan rajaynayaa cirib dambeedka Alle. Ilaah baan ku dhaartayey wax cudurdaar ah m alihi, Ilaah baan ku dhaartaye maalin aan ka xoog badnaa ma jirin oo ay iiga fududeyd markii aan kaa haray (duullaankii Tabuuk). Rasulku SCW wuxuu yiri "kani waa run sheegay. Kac intii Allaah kaa xukminayo".

Rag ayaa ka daba kacay Kacab oo ku yiri "war maxaad u cudurdaaran weyday sidii kuwii kale u cudurdaarteen oo kale, waxaa dembigaaga kaafin lahayd dembi dhaaf weydiinta Rasuulka SCW?", markaas ayuu Kacab ku yiri "cid kale oo ila qabtaa arrinkan (cudurdaar la'aan) ma jirtaa?", waxa ay dheheen "haa, waxaa kula qaba labo nin oo sidaa oo kale yiri", markaas ayuu yiri "waa kuwama?", waxaa la yiri waa "Muraara binu Rabbiic iyo Hilaal binu Umaya", markaas ayuu Kacab farxay oo yiri "waxa ay ii sheegeen labo nin oo wanaagsan oo dagaalkii Badar xaadiray, ku deyashana iigu sugan tahay".

Rasuulku SCW wuxuu muslimiiintii ka reebay in ay saddexdaas nin la hadlin inta uu Alle arrinkooda ka xukuminayo. Kacab wuxuu yiri "dhulkii iyo dadkii ayaa isu kaaya beddelay oo dhulkiiba dhulkii aan naqaannay ma aha. Waxa aannu sidaas ahayn 50 habeen, labadii saaxiibna guryahooda ayey iska fariisteen iyaga oo ooyaya laakiinse anigu ragga waan u dhallinyaraa, waanna ugu adkeysi badnaa sidaa darteed waan baxayey oo salaadda ayaan muslimiinta la xaadirayey, suuqyadana waan marayey hase yeeshee qofna ilama hadlay. Rasuulka SCW waan u imaanaey oo salaamayey salaadda ka dib isaga oo booskiisa jooga, waxa aan is lahaa "salaantii ma kaaga jawaabay oo bishimaha ma dhaqaajiyey mise waa maya". Ka dib meel u dhow ayaan inta ku tukado fiirmada ku xadayey, markii aan salaadda u jeestana wuu i fiirinayey, markii aan dhiniciisa milicsadana wuu iga jeesanayey.

Markii ay muddadii (nala gooyey) ila dheeraatay ayaan (maalin) waxa aan tegay derbiga beertii Abii Qataada oo in adeerkay ahaa, dadkana aan ugu jeclaa,

markaas ayaan salaamay, Ilaah baan ku dhaartaye iima celin salaantii, markaas ayaan ku iri "Ilaah baan kugu dhaarshaye Abii Qataadow miyaadan ogeyn in aan Ilaahay iyo Rasuulkiisa jeclahay?', wuu iga aamusay, markaas ayaan ku celiyey oo dhaariyey, haddana wuu aamusay, mar saddexaad ayaan ku celiyey, markaas ayuu yiri "Ilaah iyo Rasuulkiisa ayaa u ogaal badan (in aad jeceshahay)", markaas ayey indhahaygii shubmeen (ooyey) oo aan iskaga tegey.

Goor aan suuqii Madiina si marayo ayaan arkay Nin reer Shaam ah oo ka mid ahaa kuwo cunto Madiina keensaday oo leh "yaa i tusinaya Kacab binu Maalik", markaas ayey dadkii ii soo tilmaameen illaa uu iiga yimid oo ii dhiibay waraaq ka socota boqorkii Qasaan. Waxaan akhriyey wixii ku qornaa oo aha "intaas ka dib waxaa i soo gaartay in saaxiibkaa (Rasuulk SCW) uu ku gooyey, Allena kuma yeelin daar dulli ah ee na soo haleel aan ku darajeynee", markii aan dhammeeyey ayaan iri "tanina imtixaanka ayey ka mid tahay", markaas ayaan gubay warqaddii.

Kacab oo sheekadiisi wata wuxuu yiri "Markii ay dhammatay 40 habeen oo 50kii habeen ka mdi aha ayaa waxaa ii yimid adeege uu Rasuulku SCW ii soo diray , wuxuuna igu yiri "Rasuulkii Alle wuxuu ku amrayaa in aad xaaskaaga ka dheeraatid", markaas ayaan iri "maxaan sameeyaa, miyaan furaa?", wuxuu yiri "maa ee ka fogow oo ha u dhowaan", saaxiibadayna waa loo cid diray oo sidaas oo kale ayaa loo sheegay. Waxaan markaas xaaskaygii ku iri "u tag reerkiina oo la joog inta Alle ka xukumayo arrinkaan", haweentii Hilaal ayaa markaas Rasuulka SCW u tagtay oo ku tiri "Rasuulkii Allow Hilaal binu Umaya waa odey dayacan oo aan khaadim lahayn ee ma kahanaysaa haddii aan u adeego?", markaas ayaa Rasuulku SCW yiri "maya, laakiinse yuusan kuu dhowaan", waxay tiri "Ilaah baan ku dhaartaye kama suulin in uu ooyayo (Hilal) laga soo bilaabo markii uu amarku ahaaday ilaa maalinkiisan (maanta).

Dad cidahayga ka mid aha ayaa igu yiri "haddii aad Rasuulka SCW uga idan qaadan lahayd xaaskaaga sida haweenka Hilaalba ay uga idan qaadatay khidmayntisa", markaas ayaan ku iri "uga idan qaadan maayo, maxaa i ogeysiiyey waxa uu i dhihi doono Rasuulka Alle markaan uga idan qaato aniga oo nin dhallinyaro ah". Markii aan 10 habeen sii joognay ayaa subaxdii 50aad guri guryahaygii ka mid ah ku tukaday salaaddii fajar aniga oo siduu Alle nagu sheegay u fadhiya oo naftaydii igu ciriirsantay, dhulkiina igu yaraaday waxa aan maqlay cod ka dhawaaqaya (buurta) oo codkiisii ugu sarreeyey ku leh "Kacab binu Maalikow bishaarayso", markaas ayaan sujud la dhacay, waxaana aqoonsaday in u faraj yimid, Rasuulkuna SCW wuxuu dadkii ogeysiiyey towbaddayadii markii uu salaaddii subax tukaday, markaas ayey dadkii baxeen iyaga oo noo bishaaraynaya, saaxiibadayna waxaa aaday kuwo u bishaaraynaya, anigana waxaa i soo aaday nin faras saaran. Nin kale oo reer Aslam ahna wuxuu u soo orday dhinacayga oo wuxuu fuulay buur, codkiisii ayaana ka soo dheereeyey faraskii. Markii uu ii yimid kii aan codkiisa maqlay ayaan u siibay maradaydii oo ku dhareeyey bishaaradiisa darteed, Ilaah baan ku dhaartaye maalinkaasna maryo kale haysan, waxaan soo caariyeystay labo maro oo ka dib soo aaday Rasuulka SCW. Dadkii ayaan markaas iila kulmay koox koox iyaga oo iigu bishaaraynaya towbada Alle ilaa an masaajidka ka galay oo arkay Rasuuulkii Alle oo ay dadku hareerihiisa fadhiyaan, markaas ayuu Dalxa binu Cubeydillaah istaagay oo ii tahniyadeeyey, Ilaah baan ku dhaartaye nin kale oo muhaajiriin ka mid ah ma istaagin". Kacab wuxuu ahaa mid aan Dalxa hilmaamin.

Kacab wuxuu yiri "markii aan Rasuulkii Alle salaamay, isaga oo farxaddu wejigiisa ka ifayso ayuu igu yiri "ku bishaarayso kheyr (kii ugu waynaa) maalin ku soo marta ilaa iyo markii ay hooyadaa ku dhashay", markaas ayaan iri "Rasuulkii Allow ma xaggaagaa mise xagga Rabbi?", wuxuu yiri "maya ee waa xagga Allaah", Rasuulka Allaahna wuxuu ahaa (mid) markii uu farxo wejigiisu uu iftiimi jirey ilaa uu ka noqdo gobal dayax ah oo kale. Markii aan Rasuulka SCW soo horfariistay ayaan ku iri "Rasuulkii Allow towbaddayda darteed ma uga siibtaa maalkayga sadaqo Alle iyo

Rasuulkiisa?", wuxuu yiri Rasuulku SCW "hayso maalkaaga qaarkis, sidaas ayaa kuu kheyr badane", markaas ayaan iri "waxa aan haysanayaa sahmigaygii Khaybar". Ka dib waxa aan iri "Rasuulkii Allow Ilaah kor ahaaye wuxuu igu badbaadiyey runtaydii, towbaddaydana waxaa ka mid ah in aan inta aan noolahay wax aan run ahayn sheegin. Ilaah baan ku dhaartaye ma ogi qof muslimiinta ka mid ah oo Alle ku imtixaamay run sheegid oo ka wanaagsan wixii uu Alle igu imtixaanay laga soo bilaabo markii aan arrinkaas Rasuulka SCW u sheegay. Ilaah baan ku dhaartaye uma qasdan been laga soo bilaabo markii aan arrinkaas Rassuulka SCW ku iri ila maanta, waxa aan rajaynayaana in Alle iga xifdiyo (beenta) inta ii dhiman Cimrigayga.

Aayadihii uu Allaah SW ku soo dejiyeyn towbada saddexdaas nin iyo asxaabtii kaleba waxa ay ahaayeen kuwan.

((ALLE WAXA UU KA TAWBAD AQBALAY NABIGA, MUHAAJIRIIN IYO ANSAARTII RAACDAY WAQTIGII CULAYSKA KA DIB MARKII AY U DHAWAATAY IN AY IILATO KOOX KA MID AH QULUUBTOOD, DABADEEDNA UU KA TAWBAD AQBALAY, WUXUUNA AHAADAY ALLE MID U TURA IYAGA OO U NAXARIISTA, (SIDOO KALE WAXAA UU ALLE KA TAWBAD AQBALAY) SADEXDII LA DIB DHIGAY ILAA UU KAGA CIRIIRYAWMAY DHULKII ISAGOO WAASIC AH, KUNA CIRIIRYAWMAY DHULKII, UNA MALEEYEEN (YAQIINSADEEN) INAYSAN JIRIN MEEL ALLE LAGA MAGAN GALO ISAGA MA AHANE, KA DIBNA UU KA TAWBAD AQBALAY OO AY TAWBAD KEENAAN, ALLENA WAXA UU AHAADAY TAWBAD AQBALE NAXARIISTA)), (Suuratu-Tawbah 117-118).

Kacab wuxuu yiri "Ilaah baan ku dhaartaye Alle hore iiguma nimcayn nimco nafsaddayda uga weyn runtii aan u sheegay Rasuulka ka dib markii uu islaamka Alle igu hanuuniyey". Allaahna kor ahaaye markii uuu waxyiga soo dejiyey wuxuu u yiri kuwii beenaalayaasha ahaa wixii uu qof u yiraahdo kii ugu shar badnaa, wuxuuna ku yiri qur'aankiisa:

((U DAMBI DHAF WAY DII AMA HA U DAMBI DHAAF WAYDIIN HADDII AAD U DAMBI DHAAF WAYDIISO TODOBAATAN JEER ALLE U DAMBI DHAAFI MAAYO, MAXAA YEELAY WAXA AY KU KUFRIYEEN ALLE IYO RASUULKIISA, ALLENA MA HANUUNIYO QOOM FAASIQIIN AH)), (Suuratu-Tawbah 80).

Intaas ayuu ku dhamaaday Duullaankii Tabuuk waxaana si wanaagsan uga warrantay Suuratu-Tawbah (Baraa'), wuxuuna ahaa saan soo sheegnayba duullaan uu Rasuulku SCW ka qayb galo kii ugu dambeeyey uguna ciidan badnaa.

Isla sannadkaa 9aad ee hijriga, waxaa iyaguna dhacay dhowr arrimood oo u baahan in wax laga tilmaamo, waxa ayna kala ahaayeen:

1. Ka soo noqodkii Rasuulka SCW ee duullaankii Tabuuk, waxaa dhacday qisadii Licaanka ee dhex martay Cuwaymir iyo xaaskiisii.

2. Waxaa la rajmiyey (dhagax lagu dilay) haweentii Qaamidiya oo ahayd mid ictiraaftay in ay faaxisho (sino) ku dhacdo, waxaana la rajmiyey markii ay muddadii naas nuujinta ilmaheedu u dhammaatay.

3. Waxaa geeriyooday Najaashe (boqorkii Xabashida), wuxuuna Rasuulku SCW ku tukaday janaaso (Salaatul-Qaa'ib).

4. Waxaa la oofsaday gabadhii uu Rasuulku SCW dhalay ee Ummu Kalthuum, Rasuulkuna SCW aad ayuu uga tiiraanyooday, wuxuuna Cusmaan binu Cafaan oo gabadha qabay ku yiri "haddii ay gabadh saddexaad ii joogi lahayd waan kuu guurin

lahaa".

5. Waxaa dhintay madaxii munaafiqiinta ee Cabdullaahi ibnu Ubay ibnu Salool, Rasuulkuna SCW waa u dembi dhaaf weydiyey oo wuxuu damcay in uu ku tukado, markaas ayaa Cumar binu Khadhaab ku dhegay oo ka joojiyey, ka dibna waxaa soo degay aayaddan qur'aanka ah oo ayideysa ficilkii Cumar.

((HA KU TUKANIN AXAD KA MID AH OO DHINTAY WALIGEED, HANA DUL IS TAAGIN QABRIGIISA, LI'ANNA WAXA AY KU KUFRIYEEN ALLE IYO RASUULKIISA, WAXAYNA DHINTEEEN IYAGA OO FAASIQIIN AH)), (Suuratu-Tawbah 8).

Daabacad: 2003-02-08 | bog cusub: June 26, 2

XAJKII ABUUBAKAR-SADDIIQ

Rasuulku SCW markii uu ka soo noqday duullaankii Tabuuk oo uu joogay labo bilood, laguna jiro bishii Dul-Qacda ayuu direy Abuubakar Al-siddiiq oo uu madax uga dhigay xajka si dadka muslimiinta ahi u soo gutaan camalkooda xajka.

Abuubakar iyo dadkii la socday markii ay bexeen ayaa waxaa soo degay bilowga Suuratu-Tawbax oo ka hadlaysa xirir u goynta gaalada, markaas ayuu Rasuulku SCW ka daba diray Cali binu Abuu-Dhaalib si uu u gaarsiiyo arrimaha ay suuraddu ka hadashay. Cali wuxuu Abuubakar iyo dadkii la socday ku gaaray meesha la yiraahdo Caraj, markaas ayaa Abuubakar ku yiri "ma madax baad tahay (lagaa soo dhigay) mise wax baa lagula soo diray", Cali wuxuu yiri "wax baa la ila soo diray", ka dibna way baxeen, Makka markii la gaarayna Abuubakar dadkii ayuu xajisiiyey.

Markii la gaaray maalinkii gowraca (Yawmu-Naxri) ayaa Cali binu Abii-Dhaalib istaagay meesha la yiraahdo Jamratul-Caqaba oo dadkii ogeysiiyey wixii la soo amray oo ahaa in gaalada oo dhan xiriirka loo jaro, lana siiyo muddo afar bilood ah, kuwii heshiis la lahaa muslimiinta iyo kuwii aan la lahaynba, waxaa keliya oo laga soo reebay kuwii aan heshiiskii muslimiinta waxba ka nusqaamin, cid kale oo muslimiinta cadow u ahna aan kaalmayn. Abuubakar wuxuu sidoo kale diray rag dadkii ku dhex naadiya in uusan sannadkaas wixii ka dambeeya mushrik soo xajin karin, qof qaawanna xaramka dawaafi karin. Xajkaas ayaana ugu dambeeeyey in mushrikiin gaalnimo muujisanaysay ay dawaafaan Beytka Alle, ka dib Abuubakar Madiina ayuu ku soo noqday.

Xajkii ku xigey ee sannadkii 10aad ee hijriga waxaa la oran jirey Xajatul-Wadaac waxaana soo xajiyey Rasuulka SCW iyo muslimiinta oo keliya sidaas ayaana waxaa ku baab'ay shirkigii iyo kufrigii Jasiiratul-Carab.

SANNADKII WUFUUDDA (CAAMUL WUFUUD)

Sidii aynu soo tilmaanay Fatxu-Makka waxa ay ahayd arrinka kala saartay xaqii iyo baadilkii, jirridahana u goysay shirkigii iyo diin la'aanti ka jirtay Khaliijul-Carab, waxaana suulay shakigii ay dad badani ka qabeen Nabiga SCW iyo diinta Alle oo waxaa loo soo kala tartamay markan diinta Alle, taasna waxaan ka garanaynaa in ciidankii muslimiin oo ahaa 10,000 duullaankii Makka uu gaaray 30,000 duullaankii Tabuuk, isla sannadkii ku xigey ee 10aadna waxa ay muslimiintu gaarayeen 100,000. Labadaas sano ee 9aad iyo 10aad waxaa islaamka soo galay dad ka badan intii islaamtay 21kii sano ee ka horreeyey, waxaana si is daba joog ah Madiina ugu soo qulqulayey wafdiyo ka kala imaanayey magaalooyinkii iyo baadiyihi Jasiiratul-Carab.

Wufaaddaas oo ay culimada siiradu gaarsiiyaan in ka badan 70, waxa aan soo qaadanaynaa intii ugu muhiimsanayd ama ay faa'idada taariikheed ku jirto, waxa ayna kala ahaayeen:

1. WAFDIGII REER CABDI QAYS

Reer Cabdi Qasy waxa ay lahaayeen labo wafdi. Wafdiga hore waxaa uu yimid sannadkii 5aad ee hijriga ama ka hor oo nin iyaga ka dhashay oo l oran jirey munqid binu Xiyaan ayaa ganacsi u soo aaday Madiina, markii uu yimid ayuu ka war helay islaamka, ka dibna wuu islaamay, Rasuulka SCW ayaa markaas warqad ugu sii dhiibay reerkiisii, iyagiina way islaameen, waxa ayna bishii xurmada lahayd soo dirsadeen wafdi ka kooban 13 ama 14 nin. Rasuulku SCW ayey wax ka waydiiyeen iimaanka iyo weelasha lagu cabo (waxa lagu sakhraamo). Waxaa hoggaamiye u ahaa Ashjac Casari oo ahaa ninkii uu Rasuulku SCW ku yiri "waxaad leedahay labo Khaslo (sifo) oo Alle jecel yahay: Dulqaad iyo Kaadsiiyo".

Wafdiga labaadna wuxuu yimid sannadkii 9aad ee hijriga, waxa ayna dhammaayeen 40 nin oo uu ku jirey Jaaruud binu Calaa oo ahaan jirey maxiixi ka dibna islaamay, islaamkiisiina wanaagsanaaday.

2. WAFDIGII REER DAWS

Wafdigani wuxuu yimid Madiina bilowgii sannadkii 7aad ee hijriga Rasulka SCW oo ku maqan Khaybar. Waxaa jirtey in nin la oran jirey Dufayl ibnu Camar Al-dawsi oo qabiilkan ka tirsan uu islaamay intii uu Rasuulku SCW Makka joogey, ka dibna wuxuu ku laabtay dadkiisii si uu islaamka ugu yeero hase yeeshee way diideen, markii uu ka quustay ayuu Rasuulka SCW u yimid oo ka codsaday in uu reer Daws u duceeyo, markaas ayaa Rasuulku SCW u duceeyey oo yiri "Allahayow haniini reer Daws", markii uu ku laabtay ayey islaameen. Wuxuu Dufayl markaas soo kaxaystay 70 ama 80 reer oo qabiilkiisa ka mid ahaa, waxayna yimaadeen Madiina Rasuulka SCW oo Khaybar ku maqan, ka dibna way ka daba tageen.

3. SOO ISLAAMIDDII FARWA BINU CAMAR AL-JUDAMI

Farwa binu Camar wuxuu ahaa hoggaamiye carbeed oo ka mid ahaa hoggaamiyayaashii roomaanka, wuxuuna qaabbilsanaa carabtii raacsanayd roomaanka, wuxuuna xukumayey meesha la oran jirey Macaan oo Shaam ka tirsanayd. Farwa markii uu arkay geesinnimada iyo adadkaanta muslimiinta iyo weliba wacdarihii ay ka muujiyeen dagaalkii Mu'ta ee sannadkii 8aad ee hijriga ayuu islaamka qaatay, wuxuuna Rasuulka SCW u soo diray nin si uu u ogeysiiyo islaamnimadiisa, baqal cadna wuu u soo hadiyeeyey Rasuulka SCW.

Markii ay roomaankii ogaadeen islaamnimada Farwa ayey qabteen oo xireen, ka dibna waxa ay kala doorransiiyeen dhimasho iyo in uu diintiisa ka noqdo, wuxuuse doortay dhimasho, markaas ayey ku salbiyeen meel la oran jirey Cafraa oo dhulka Falastiin ku taalla, halkaas ayeyna ku dileen.

4. WAFDIGII SADDAA

Wafdigani wuxuu yimid markii uu Rasuulku SCW ka soo gaddoomay Jacraana, sannadkii 8aad ee hijriga. Rasuulka SCW ayaa ciidan 400 gaarayey u direy meesha la oran jirey Sadaa oo Yaman ka mid ahayd, markii uu ciidankii baxay oo gaaray meel la yiraahdo Sadru-Qanaat ayaa waxaa ka war helay nin qabiilkaa u dhashay oo la oran jirey Siyaad binu Xaarith Al-sadaa'i, markaas ayuu Rasuulka SCW soo aaday, markii uu u yimidna wuxuu ku yiri "waxa aan u imid wafdi ahaan iyo in aan matalo cidda iga dambaysa

(tolkiis) ee soo celi ciidanka, aniga ayaa kaaga mas'uul ah tolkeyga", markaas ayuu Rasuulku SCW ciidankii ka soo celiyey Sadru-Qanaat, Siyaadna wuxuu u tegey qabiilkiisii oo jeclaysiiyey in ay u tagaan Rasuulka SCW, markaas ayey wafdi soo dirsadeen. Wafdigaas oo ka koobnaa 15 nin waxa ay Rasuulka SCW kula mubaayacoodeen islaamka, ka dibna waxa ay u laabteen reer koodii, waxa ayna ugu yeereen islaamka ilaa uu islaamkii ku faafay dhexdoodii.

5. IMAANSHIHII KACAB BINU SUHAYR

Kacab binu Suhayr wuxuu ahaa nin gabyaa ah oo ka mid ahaa raggii carab ugu caansanaa, wuxuuna gabaygiisa ugu hanjabi jirey Rasuulka SCW. Markii uu Rasuulku SCW ka soo gaddoomay duullaankii Daa'if, sannadkii 8aad ee hijriga ayaa Jubayr binu Suhayr oo Kacab walaalkiis ahaa u qoray waraaq uu ugu sheegayo in Rasuulku SCW markii uu Makka furtay uu laayey rag reer Makka ahaa ee reer qureysh (ee gabayga Rasuulka SCW ku dhibi jirey) ay jihooyinkii u kala carareen, marka wuxuu ku yiri "haddii aad naftaada wax dan ah ka leedahay Rasuulka SCW u imow maxaa yeelay Rasuulku ma dilo qof u yimid isaga oo toobad keen ah, haddiise aadan sidaas yeelaynin magangal meeshii aad ku badbaadaysid". Muddo ayey labadaas nin oo walaalaha ihi sidaas waraaqaha isu dhaafsanayeen ilaa uu Kacab dhulkii ku soo ciriirismay oo uu naftiisii u baqay, markaas ayuu Madiina yimid, wuxuuna ku soo degay nin muslimiinta ka mid ah. Ninkii ayuu salaaddii subax u soo raacay, markii salaaddii laga baxay ayuu ninkii u tilmaamay Rasuulkii Alle SCW, markaas ayuu Kacab Rasuulka SCW soo ag fariistay oo gacanta gacanta u saaray, kuna yiri "Rasuulkii Allow Kacab binu Suhayr ayaan yimid isaga oo ku soo magan galay oo toobad keenay, muslimna ah ee ma ka aqbali haddii aan kuu keeno", Rasuulka SCW oo aan Kacab aqoon u lahayn ayaa yiri "haa", markaas ayuu Kacab yiri "waa aniga Kacab binu Suhayr", markaas ayaa waxaa soo booday nin Ansaartii ka mid ah oo Rasuulka SCW ka idan dalbay si quurto ugu dheereeyo Kacab, waxaase uu Rasuulka SCW ku yiri "dhaaf, wuxuu yimid isaga oo toobad keenay oo ka qoomameeyey wixii uu sameeyey", markaas ayuu Kacab tiriyey gabay uu ku cudurdaaranayo, kuna ammaanayo Rasuulka SCW, ka dibna wuxuu tiriyey mid kale oo uu ku ammaanay Muhaajiriin keliya maxaa yeelay Ansaar waxaa ka mid ahaa ninkii dilkiisa u idan dalbayey hase yeeshee Kacab markii ay islaamnimadiisu wanaagsanaatay ayuu Ansaar u tiriyey ammaan ah.

6. WAFDIGII REER CUDRA

Wafdigan wuxuu yimid bishii Safar, sannadkii 9aad ee hijriga, wuxuuna ka koobnaa 12 nin, wayna islaameen, waxa ayna joogeen maalmo. Rasuulku SCW wuxuu ugu bishaareeyey in Shaam la furan doono, wuxuuna ka reebay wax su'aalidda curaafyada iyo gowracii ay u gowraci jireen Allaah cid aan ahayn, ka dibna way laabteen.

Sida aynu arkayno Rasuulka SCW markii ay qolo u timaado oo uu iimaanka ikyo islaamkau sheego wuxuu u raacsiinayey in uu ka reebo xumantii ay qolo kasta caanka ku ahayd ama ugu badnayd waana sida ku cad qur'aanka marka uu tilmaamayo qisooyinka Rususha. Taas micneheedu ma aha in xumaatooyinka kale aan la iska reebin ee waxa ay tahay in ay habboon tahay in qofka laga reebo xumaatada uu ku jiro intii laga reebi lahaa mid uusan kuba jirin.

7. WAFDIGII REER BALII

Waxa uu wafidgani Rasuulka SCW u yimid bishii Rabbiicul-Awal, sannadkii 9aad ee hijriga, ka dibna way islaameen, Madiinana waxa ay joogeen saddex beri. Ninkii madaxda u ahaa oo la oran jirey Abuu Dabiib wuxuu Rasuulka SCW weydiiyey in ajar laga helayo marti soorka, Rasuulkuna SCW wuxuu ku yiri "haa, wanaag kasta oo uu sameeyo qof faqiir ama hodan ihi waa sadaqo". Wuxuu haddana Abuu Dabiib su'aalay muddada marti soorka, Rasuulku SCW wuxuu yiri "waa saddex beri". Su'aal saddexaad

wuxuu Abuu Dibiib ka weydiiyey baadida ariga, markaas ayuu Rasuulku SCW yiri "waxaa iska leh adiga ama walaalkaa (kii ay ka luntay) ama dhurwaa", geela baadida ah ayuu haddana su'aalay, Rasuulkuna SCW wuxuu yiri "iska dhaaf ilaa qofkii lahaa uu ka helo".

8. WAFDIGII REER THAQIIF

Reer Thaqiif oo ahaa qabiilkii deganaa magaalada Daa'if waxa auu Wafdigoodu Rasuulka SCW u yimid bishii Ramadaan, sannadkii 9aad ee hijriga. Sidii aan soo sheegnay Rasuulku SCW waa tii uu hijrada ka hor Daa'if ugu tegey reer Thaqiif oo islaamka ugu yeeray hase yeeshee ay diideen oo Rasuulka SCW dhib soo marsiiyeen. Furashadii Makka ka dib Rasuulku SCW waa tii uu ku duullay Xunayn iyo Daa'if, markii uu ka soo laabtay bishii Dul-Qacada ee sannadkii 8aad ee hijriga ayaa isaga oo aan weli Madiina gaarin waxaa u yimid odeygii reer Thaqiif ee Curwa ibnu Mascuud, wuuna islaamay, ka dibna wuxuu ku laabtay tolkiis oo uu islaamka ugu yeeray, una malaynayey in ay raacayaan maxaa yeelay wuxuu ahaa nin ay jecel yihiin hase yeeshee meel walba fallaar ayey ug asoo tuureen ilaa ay ka dileen.

Muddo ka dib markii ay arkeen in aysan lahayn awood ay iskaga dhiciyaan qabiillooyinkii ku hareeraysaa oo islaamka raacay ayey isku raaceen in ay Rasuulka SCW u cid dirsadaan. Waxa ay u bandhigeen in uu Rasuulka SCW u aado nin la oran jirey Cabdiyaaliis binu Camar hase ahaatee wuu ka diiday isaga oo ka baqaya in markii uu soo noqdo ay u dilaan sidii Curwa oo kale, wuxuuna ku yiri "ma samaynayo arrinkaas ilaa aad rag igu dartaan", markaas ayey ku dareen 5 nin oo uu ku jirey Cusmaan binu Abil-Caas Al-thaqafi oo ahaa wiil dhalin yaro ah. Markii ay Rasuulka SCW u yimaadeen ayuu Rasuulku SCW khaymad (teendho) uga dhisay dhinaca masaajidka si ay u dhegaystaan qur'aanka oo u arkaan amrkii ay dadku tukanayaan. Rasuulku SCW wuxuu ugu yeeray islaamka, hase yeeshee ninkii madaxda u ahaa ayaa u qoray Rasuulka SCW arrin uu rabo in uu ku heshiisiiyo Rasuulka SCW iyo reer Thaqiif taas oo ah in loo idmo reer Thaqiif sinada iyo Khamriga iyo in loo daayo sanamkoodii Laata, asnamtoodana aysan gacantooda ku jejebin. Rasuulku SCW arrimahaas oo idil wuu ka diiday, markaas ayey wada tashadeen hase yeeshee ma aysan helin meel ay uga fakadaan isu dhiibidda Rasuulka SCW, markaas ayey is dhiibeen oo islaamka qaateen. Waxa ay Rasuulka SCW u shardiyeen in uu la wareego duminta Laata ee aysan iyagu gacantooda ula tegin, Rasuulkuna SCW waa ka yeelay. Rasuulku SCW wuxuu u qoray warqad, wuxuuna madax uga dhigay wiilkii ugu yaraa ee Cusmaan binu Abil-Caas maxaa yeelay isaga ayaa ugu dadaal badnaa xagga fahamka islaamka iyo qur'aanka oo maalin kasta ayuu Rasuulka SCW u tegi jirey oo ka baran jirey qur'aanka, diintana wax ka weydiin jirey.

Wafdigii waxa ay ku laabteen reerahoodii waxa ayna ka qariyeen xaqiiqadii oo dagaal ayey ku cabsi geliyeen, waxa ayna u sheegeen in uu Rasuulku SCW amray in ay joojiyaan sinada, khamriga, ribada iyo xumaanta oo dhan haddii kale uu la dagaallamayo, markaas ayey reer Thaqiif ficiloodeen oo labo beri ama saddex beri sugayeen oo diyaar u ahaayeen dagaal hase yeeshee markii dambe ayaa Alle qulubtoodii ku riday baqdin iyo argagax, waxa ayna wafdigii ku dheheen "noqda oo u oggolaada Rasuulka SCW waxa uu rabo", markaas ayey nimankii wafdiga ahaa u sheegeen xaqiiqdii iyo wixii ay kula soo heshiiyeen Rasuulka SCW, reer Thaqiifna islaamkii ayuu qaatay. Ka dibna wuxuu Rasuulku SCW diray ciidan uu hoggaaminayey Khaalid binu Waliid si uu u soo dumiyo sanamkii Laata, markaas ayey Khaalid iyo ciidankiisii baxeen oo soo dumiyeen Laata, dhulkana la simeen, ka dibna inta ay aasaaskiisii qodeen oo ay ka soo bixiyeen xuliyadihiisii iyo dharkiisii, ayey reer Thaqiifna u sheegeen in aan sanam iyo wixii Ilaahay ka soo haray oo dhami aysan waxba tarayn, markaas ayey reer Thaqiif quusteen oo ogaadeen xaqiiqdii. Khaalid iyo raggiisii waxa ay markaa ku soo laabteen Rasuulkii SCW iyo Madiina, waxa ayna u keeneen xuliyadihii iyo wixii ay meesha ka soo heleen, markaas ayuu Rasuulku SCW u qaybiyey iyagii, Allaahna ku mahdiyey guusha diinta Alle iyo ciribtirka shirkiga.

Ka dib markii uu Rasuulku SCW dhintay oo ay qabiillooyin badan ka riddoobeen diinta islaamka ayey reer Thaqiif go'aansadeen in ay diinta ka noqdaan. Cusmaan Abil-Caas oo ahaa wiilkii uu Rasuulku SCW mas'uulka uga dhigay ayaa yiri isaga oo la talinaya tolkiis "reer Thaqiifow w3axa aad ahaydeen dadkii ugu dambeeyey islaamka ee ha noqonina kuwa ugu horreeya oo ka baxa". markaas ayey ka joogsadeen gaalnimadii oo islaamkii ku sugnaadeen.

9. WAFDIGII REER BANII FASAARA

Wafdigani wuxuu Rasuulka SCW u yimid sannadkii 9aad ee hijriga, markii uu Rasuulku SCW ka soo laabtay Tabuuk, waxa ayna ahaayeen dhowr iyo toban nin, waxa ayna yimaadeen iyaga oo islaamka qiraya, dabadeedna waxa ay Rasuulka SCW u sheegteen abaar daran oo dhulkooda heshay, markaas ayuu Rasuulku SCW memberka fuulay oo Alle u baryey.

10. WAFDIGII REER NAJRAAN

Waxa uu wafdigani Rasulka SCW u yimid sannadkii 9aad ee hijriga, waxa ayna dhammaayeen 60 nin oo ay ku jiraan odayaashoodii iyo madaxdoodii. Najraan wuxuu ahaa dhul ballaaran o ka kooban 73 magaalo oo u dhexeeyey Makka iyo Yaman, waxaana dadkaan u dagaal geli jirey 100,000 oo nin, waxa ay na hasteen diinta masiixiga.

Wafdigan markii uu Madiina yimid ayaa Rasuulku SCW la kulmay oo islaamka ugu yeeray, qur'aankana ku dul akhriyey hase yeeshee way diideen, waxa ayna Rasuulka SCW weydiiyeen waxa u ka aaminsan yahay Nabi Ciise, markaas ayaa waxaa Nabiga ku soo degay aayadahan:

((TILMAANTA CIISE ALLE WAA SIDA (NABI) AADAM, WUXUU KA ABUURAY CIID MARKAASUU U YIRI AHOW WAANA AHAADAY, XAQU RABBIGAA BUU KA AHAADAY EE HA NOQONIN KUWA SHAKIYA, CIDDII KUGULA DOODDA MARKUU CILMIGU KUU YIMID KA DIB WAXAAD TIRAAHDAA KAALAYA AAN U YEERANNO CARUURTAYADA IYO CARUURTIINA HAWEENKAYAGA IYO HAWEENKIINA IYO NAFTAYADA IYO NAFTIINA, DABADEEDNA AAN HABAARTANNO OO AAN YEELNO NACALADDA ALLE BEENAALAYAASHA DUSHOODA)), (Suuratu Aali-Cimraan 59-61).

Rasuulku SCW markii uu maalinkii dambe waaberiistay ayuu u sheegay arrinka Nabi Ciise iyo tilmaamaha ay ka bixiyeen aayaduhu, ka dibna wuu ka tegey maalinkaa si ay uga soo fekeraan arrinka hase yeeshee way diideen in ay qiraan waxa uu qur'aanku ka sheegay Nabi Ciise.

Markii ay islaamkii diideen ayuu subaxdii dambe Rasuulku SCW isaga oo fulinaya arrinta ay aayaddu timaantay oo ah mubaahalada (habaartanka) ayuu nimankii ugu yeeray habaartan, wuxuuna soo kaxaystay gabadhiisii Faadumo iyo labadeedii wiil Xasan iyo Xuseen hase yeeshee nimankii markii ay arkeen in ay arrintu dhab ka tahay Rasuulka SCW aye baqeen, ka dibna inta ay tashadeen ayey isu yiraahdeen "yaannaan samayn (habaartanka). Ilaah baan ku dhaarannaye haddii uu nabi yahay oo uu na naclado waxba inaga hari maayaan innaga iyo ciribteenaba", dabdeedna Rasuulka SCW ayey u yimaadeen oo amarkoodii u bandhigeen, waxa ayna ku dheheen "wixii aad na weydiisato ayaan ku siinaynaa (oo jisyo ah)", Rasuulkuna SCW jisyadii ayuu ka yeelay wuuna la heshiiyey, wuxuuna kula heshiiye 2,000 oo xuliyadood in ay bixiyaan oo 1,000 bixiyaan bisha Rajab, kunka kalena bisha Safar, wuxuuna siiyey magan gelyada Alle iyo Rasulka SCW, wuxuuna u qoray warqad. Ka dib waxa ay Rasuulka SCW ka dalbadeen in uu ku daro Abuu Cubeyda ibnu Jarraax si loogu soo dhiibo malkii lagu heshiiyey. Dabadeedna islaamkiii ayaa ku faafay oo ummad badan ayaa islaamtay, markaas ayuu Rasuulku SCW

u diray Cali binu Abii-dhaalib si uu muslimiinta uga soo ururiyo sakada, gaaladana uga soo qaado jisyada.

11. WARQADDII BOQORRADI YAMAN

Markii uu Rasuulku SCW ka soo laabtay duullaankii Tabuuk ayaa waxaa u yimid warqad ay soo direen boqorradii Xumayr o kala ahaa: Xaarith binu Cabdi-kilaal, Nucaym binu Cabdi-Kilaal, Nucmaan binu Qiil, Hamdaan iyo Mucaafir. Ninki ay Rasuulka SCW u soo direen waxaa la oran jirey Maalik binu Murra. Waxa ayna ninkaas u soo direen si ay u ogeysiiyaan Rasuulka SCW in ay islaamka qaateen oo shirkigii iyo gaalnimadii ka baxeen, Rasuulkuna SCW wuxuu u qoray warqad uu ku caddeeyey waxa ay muslimiint leeyihiin iyo waxa dushooda ah, gaalada heshiiska lala leeyahayna wuxuu siiyey maganta Alle iyo tan Rasuulka SCW haddii ay bixiyaan waxa laga rabo oo jisyada ah, wuxuuna u diray dhulkooda rag asxaabta ka mid ah si ay dacwada islaamka ugu faafiyaan, raggaas waxaa madax u ahaa Mucaad binu Jabal.

12. WARQADDII MUSAYLAMATUL-KADDAAB

Ninkii la oran jirey Musaylama binu Xabiib oo xukumayey Yamaama wuxuu ahaa nin aad u shar badan , sheegtayna in uu yahay nabi, wuxuuna Rasulka SCW u soo diray warqaddan:

Ka socota Musaylama, (Rasuulkii Alle)

Ku socota Maxammed, Rasuulkii Alle

Nabadgelyo dushaada ha ahaato intaas ka dib waan kula wadaagsaday amarka (nabinnimada), annagu waxa aan leenahay dhulka nuskiis, qureyshna nuska kale laakiin qureysh waa dad xad gudbay.

Warqaddaas wuxuu u soo dhiibay labo nin, marki ay Rasuulka SCW u keeneen ayuu Rasuulku SCW ku yiri "maxaad ka aamminsan tihiin (ninkaas)?", markaas ayey yiraahdeen "waxa aan ka aamminsan nahay wixii uu yiri", wuxuu markaas Rasuulku SCW ku yiri "Ilaah baan ku dhaartayey rusushu in aysan wax dilin haddii aysan ahayn qoorta ayaan idinka goyn lahaa", ka dibna wuxuu Rasuulku SCW u qoray ninkaas warqaddan:

BISMILLAAHI RAXMAANI RAXIIM

Ka socota Maxammed, Rasuulkii Alle

Ku socota Musaylamatul-Kiddaab (beenlow)

Nabadgelyo qofkii hanuunka raaca dushiisa ha ahaato

Inaas ka dib dhulka Allaah ayaa iska leh ciddii uu doono oo addoomadiisa ka mid ah ayuuna dhaxalsiinayaa, ciribta dambena waxaa iska leh Mutaqiinta (kuwa Alle ka baqa).

Waqtiga uu Rasuulku SCW ninkaas warqadda u qoray wuxuu ahaa sannadkii 10aad ee hijriga, muddo yar ka dibna Rasuulka SCW waa la oofsaday hase yeeshee waqtigii Abuubakar ayaa ninkaas beenlowga ah dagaal lagu qaaday oo la dilay.

XAJATUL WADAAC

Markii la marayo bishii Dul-Qacda, sannadkii 10aad ee hijriga ayaa Rasuulku SCW ogeysiiyey dadkii muslimiinta ahaa in uu aadayo xaj. Markii waqtigii xajka la gaaray ayuu Rasuulku SCW ka soo baxay Madiina iyada oo ay 5 beri ka dhiman tahay bishii Dul-Qacda, wuxuuna sii lebbistay dharkii xajka, hadyigiisiina wuu soo qoor xiray. Waxaa Madiina ka soo raacay muslimiint aad u tiro badan, sidoo kale dhammaan dhulkii kale ee muslimiintu degganaayeen waa laga soo baxay iyada oo lagu soo ururayo Makka si xajka loo guto.

Rasuulku SCW wuxuu Madiina ka soo baxay markii uu tukaday xalaaddii duhur, ka dibna wuxuu degay meesha la yiraahdo Dul-Xuleyfa, halkaas oo uu ku tukaday salaadii casar, habeenkaasna uu u hoday. Markii maalinkii dambe la gaarayna inta uu uu qubaystay oo dhiibaystay (is carfiyey) ayuu salaaddii duhur tukaday, ka dibna isaga iyo asxaabtii waxay ay xirteen xaj iyo cumro, dabadeedna way baxeen o waxa ay aadeen Makka.

Markii ay Rasuulka SCW iyo dadkii la socday Makka gaareen waxa ay ku degeen meesha la yiraahdo Dii-dhuwan, halkaas oo ay habeenkii baryeen, dabadeedna markii ay salaaddii subax tukadeen ayuu Rasuulku SCW qubeystay oo magaaladi Makka galay, maalinkaas oo ahaa maalin Axad ah, 4tii Dul-Xaj, sannadkii 10aad ee hijriga. Rasuulku SCW wuxuu markaas galay xaramkii oo dawaafay Beytka, ka dibna orday Safwa iyo Marwa (dhexdooda). Ka dib wuxuu degay Xujuum, mana xalaal noqon Rasuulku SCW maxaa yeelay wuxuu Rasuulku SCW waday hadyi, wuxuuna asxaabta u sheegay in qofkii hadyi wada sidiisa oo kale uusan xalaal noqonayn ilaa laga gaaro maalinka 10aad oo xajku u dhammaado, qofkii aan hadyi wadinna gaabsado ka dibna uu Beytka dawaafo, Safwa iyo Marwana ordo, timahana gaabsado ka dibna uu xalaal noqdo oo wixii xaaraanta ka ahaa inta xajka lagu jiro oo dhan ay xalaal u yihiin ilaa laga gaaro maalinka 8aad ee xajka bilaabanayo, wuxuuna yiri Rasuulku SCW "haddii aanan hadyi wadi lahayn waan xalaal noqon lahaa", sidoo darteed ayaa muslimintii aan hadyiga wadin u xalaal noqdeen ilaa laga gaaray maalinkii 8aad. Waxaana Madiina hadyi ka keenay Rasuulka SCW iyo Abuu Dalxa oo keliya.

Maalinkii 8aad oo xajku bilaabanayey markii la gaaray waxuu Rasuulku SCW aaday Muna halkaas oo uu ku tukaday salaaddii duhur ilaa laga gaaray salaaddii subax ee maalinkii 9aad. Ka dibna markii ay qorraxdii bartamaha gaadhey. Dabadeedna intuu tegey togga dhexdiisa ayuu u khudbeeyey muslimiinti xajjka ka soo qayb gashay oo gaareysey 122,000 waxaa kaloo la yiraahdaa waxay gaarayeen 144,000. Khudbaddii Rasuulku SCW waxa ay ahayd sidatan:

Dadow dhegaysta hadalkayga waxaa la arkaa in aanan sannadkan ka dib idinkula kulmin halkaan. Dhiiggiina iyo maalkiinnu xaaraam ayuu iska yahay sida xurmo ahaanshaha maalinkiinnan (carafo) oo kale, bishiinnaan oo kale (Dul-Xaj), biledkiinnaan oo kale (Makka). War hooy wax walba oo arrin jaahili ahaa lugtayda hoosteeda ayuu ahaaday, dhiiggii jaahiliga (oo la kala qabay) ma jiro, Allaahna uga cabsada dumarka, waxa aad ku haysataan (haweenka) ammaanadii Alle, waxa aadna ku xalaalaysateen farjigooda kalimadda Alle, waxa aad ku leedihiin (haweenka) in aysan gogoshiinna u oggolaan axad aad kahanaysaan, haddiise ay sameeyaan garaaca garaacitaan aan wax yeelin. Iyaguna (haweenka) waxa ay idinku leeyihiin masaariiftooda iyo marashadooda si wanaagsan. Dadow Nabi igama dambeeyo, ummadna idinkama dambayso. War hooy Rabbigiin caabuda oo shantiinna (salaadood) tukada, bishiinnana (Ramadaan) sooma, maalkiinnana sakada ka bixiya naftiinna oo ku raalli ah, Rabbigiin Beytkiisana u xajiya, madaxdiinnana adeeca (wixii islaamka waafaqsan), jannada Rabbigiin ayaad gelaysaan (haddii intaas la idinka helo).

Waxa aan dhexdiinna uga tegay labo shey oo haddii aad qabsataan aydaan gadaashay lumayn: waana Kitaabka Alle iyo Sunnadayda. Waana la idinkay weydiin doonaa

(aakhiro) ee maxaad dhahaysaan? (waxay dheheen "waxa aan qiraynaa in aad gaarsiisay (diinta) oo aad gudatay (risaaladii), aadna nasteexaysay). Wuxuu markaas Rasuulku SCW saddex jeer yiri "Allahayow ka markhaati noqo".

Hadalka Rasuulka SCW waxaa dadka gaarsiinayey Rabbiic binu Umaya binu Khalaf. Markii uu Rasuulku SCW khudbaddii dhammeeyey ayaa waxaa soo degay aayaddan caddaynaysa in diintii la kaamil yeelay:

((MAANTA AYAAN IDIIN KAAMIL YEELAY DIINTIINII, KUNA TAAM YEELAY KORKIINA NIMCADAYDII, WAXAANA IDINKAGA RAALI NOQDAY ISLAAMKA DIIN AHAAN)), (Suuratul-Maa'idah 3).

Markii ay aayaddaasi soo degtay ayaa waxaa ooyey Abuubakar-siddiiq, markaas ayaa la yiri "maxaa kaa oohiyey?", wuxuu yiri "shey haddii uu kaamil noqdo, waxaa bilaabanaya nusqaantiisa". Ka dib waxaa addimay oo aqimay Bilaal, salaaddii duhur ayaana la tukaday, markii laga baxayna waxaa la aqimay oo la tukaday salaaddii casar. Habeenkii ayaa markaa loo dheelmaday Musdalifa, waxaana Rasuulka SCW rakuubka la saarnaa Usaama binu Seyd. Musdalifa markii la tegay aya makhribki iyo cishihii la wada tukaday, waxaana loo yeelay hal addin iyo labo aqim. Habeenkaasna waxa ay baryeen Musdalifa ilaa uu fajarkii ka dilaacay oo salaadii subax la tukaday. Ka dib wuxuu rasuulku SCW tegey meesha la yiraahdo Mashcarul Xaraam oo uu Allaah ku baryey. Waxa ay markaa Rasuulka SCW iyo muslimiintu soo aadeen Muna, maalinkaas oo ahaa maalinkii 10aad ee acmaasha xajka badankeed la samaynayey, waxaana Rasuulka SCW markii uu Muna u socday rakuubka la saarnaa Fadli binu Cabbaas, waxa ayna tageen meesha la yiraahdo Jasmratu-Caqaba oo ay ku sameeyeen Rawyigii (dhagax tuurashadii), wuxuuna Rasuulku SCW tuuray toddoba dhagax, markii uu mid walba tuurayeyna wuu takbiirsanayey. Rasuulku SCW wuxuu ku yiri asxaabta intii la joogey Jamratu-Caqaba "iga qaata manaasiktiinna (iga barta xajkiinna), waxaa la arkaa in aanan sannadkan ka dib xajinine", ka dbina Rasuulku SCW wuxuu sameeyey goracii oo wuxuu gowracay 63 neef oo geel ah, ka dibna Cali binu Abii-Dhaalib ayaa isna gowracay 37 neef oo geel ah.

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu tegey Xaramka oo uu Dawaafay, ka dibna markii uu duhurkii soo tukaday ayuu u tegey ilma Cabdi-Mudhalib oo xujeydii ka waraabinaya samsamka, markaas ayuu ku yiri "haddii aanan ka baqayn in la idinka qaado waa idinla shubi lahaa (biyaha)", Cabbaas ayaa markaas wiilkiisii Fadli ku yiri "u tag Ummu Fadli oo Rasuulka biyo uu cabbo uga keen" hase yeeshee Rasuulku SCW wuxuu dalbaday in laga waraabiyo samsamka, waana la waraabiyey. Dadkii ayuu markaa Rasuulku SCW maalinkaas u jeediyey khudbad isaga oo saaran rakuub, dadkuna ay qaar taagan iyo kuwo fadhiya isugu jiraan, waxa ayna ahayd khudbaddiisu sidatan:

Samanku wuxuu u wareegsanayaa sidii uu u wareegi jirey maalinkii Samawaatka iyo dhulka la abuuray, sannadkuna waa 12 bilood, waxana ka mid ah afar xurmo leh, saddex xiriirta: Dul-Qacda, Dul-Xaj iyo Muxarram iyo Rajabtii reer Mudar ee u dhexaysay labada Jamaad iyo labad Shacaan.

Rasuulku SCW isaga oo hadalkiisii sii wata wuxuu asxaabta ku yiri: "Waa bishee tani?", waxa ay dheheen "Allaah iyo Rasuulkiisa ayaa u ogaal badan", wuxuu yiri "sow Dul-Xaj ma aha?", waxa ay dheheen "haa". Wuxuu yiri "waa kuma beledkaani?", waxa ay dheheen "Allaah iyo Rasuulkiisa ayaa u ogaal badan", wuxuu yiri "sow Makka ma aha?", waxay dheheen "haa". Wuxuu yiri "waa maalinkee kani?" waxa ay dheheen "Allaah iyo Rasuulkiisa ayaa u ogaal badan", wuxuu yiri "sow Yawmu-Naxri ma aha?", waxaa la yiri "haa". Wuxuu yiri "dhiiggiina, maalkiinna iyo cirdigiinnu xaaraam buu kala yahay sida xurmada maalinkiinnan oo kale, beledkiinnan oo kale, bishiinnan oo kale. Waxaad la kulmi doontaan Rabbigiin wuxuuna idin weyniin doonaa acmaashiinnii. War hooy gadaashay ha u laabannina gaalo uu qaarkiin qaarka kale luqunta ka goynayo". Markii

uu Rasuulku SCW khudbadii dhammeeyey ayuu yiri "war ma idin gaarsiiyey?", markaas ayey yiraahdeen "haa", wuxuu yiri "Allahayow ka markhaati noqo. War hooy kan joogaa kan maqan ha gaarsiiyo".

Ka dib Rasuulku SCW markii uu xajkii gutay isaga iyo muslimiintii ka soo qayb galay xasjkaas, uuna la dardaarmay oo sagootiyey ayuu ku laabtay Madiina dhammaadkii Dul-Xaj, sannadkii 10aad ee hijriga.

CIIDANKII USAAMA BINU SAYD

Markii uu Rasuulku SCW ka soo laabtay xajatul wadaac oo uu joogay labo bilood ayaa waxaa qabtay xanuunkii uu geeriyooday, wuxuu markaa Rasuulku SCW isaga oo uu xanuunkii hayo diyaariyey ciidan aad u xoog badan oo uu ugu tala galay dawladii Roomaanka, wuxuuna cidankaas madax uga dhigay Usaama binu Sayd oo todoba iyo toban jirey, waxayna ahayd sababta uu Rasuulku SCW ciidankaan u dirayey, isaga oo maqlay in dawladdii Roomaanku ay si xun ula dhaqantay wixii ka islaamay carabtii tabaca u ahayd, sida ninkii aan soo marnay ee Farwa binu Camar oo dawladii Roomaanka mas'uulka uga ahaa Macaan.

Rasuulku SCW waxa uu ciidankaan diyaariyey bishii Safar sannadkii 11aad ee hijriga, wuxuuna Rasuulku SCW la dardaarmay hogaamiyaha ciidanka Usaama binu Sayd oo uu utilmaamay in uu socdo ilaa uu gaaro meelaha la yiraahdo Bulqaa iyo Daaruum oo dhulka falastiin ka mid ah, sidoo kale waxa uu u dardaarmay in uu tago meeshii aabihii lagu dilay. Ciidankan Usaama oo ahaa ciidan aad u xoog badan waxaa ku jiray odayaashii Muhaajiriin iyo Ansaar, oo ay ka mid ahaayeen Abuu Bakar-Sidiiq, Cumar binu Khadhaab, Abuu Cubayda ibnu Jarraax, Sacad iyo Saciid iyo rag kaleba, waxaana dadka qaarkood sheegaan in cadadka ciidanku gaarayey 30,000.

Markii uu Rasuulku SCW Ciidankii diyaariyey oo uu u doortay Usaama ayaa nin la oran jiray Ciyaash binu Abii Rabbiicul-Makhsuumi iyo rag uu ku jiro wax ka sheegeen madaxtinimada Usaama, markaas ayaa Rasuulka SCW loo soo gudbiyey hadalkoodii, Rasuulku SCW waxa uu markaa la hadlay dadkii oo uu ku yiri "hadaad wax ka sheegteen madaxtinimadiisa, waxaad horay wax uga sheegteen madaxtinimadii aabihiis (Sayd), Ilaah baan ku dhaartaye waxa uu Aabihiis u samaysnaa madaxtinimo, haduuna ahaa (Sayd) dadka kaan ugu jeclaa, kan (Usaama) ayaan ugu jeclahay dadka (Sayd) gadaashii.

Usaama iyo ciidankiisii markii ay damceen in ay baxaan ayaa Rasuulka SCW xanuunkii ku daraaday, markaas ayey dageen meesha la yiraahdo Jurfa si ay u ogaadaan xanuunka Rasuulka SCW meesha uu ku dambeeyo, markii uu Rasuulku SCW geeriyooday oo ay muslimiintii Abuu Bakar doorteenna waxa uu noqday ciidankii Usaama duullaankii ugu horeeyey ee Abuu Bakar diro, waxaa kaliya oo uu ciidankii ka soo reebay Cumar binu Khadhaab oo isna uu Usaamawaydiistay.

GEERIDII RASUULKA SCW

Markii uu Rasuulku SCW ka soo laabtay Xajatul-Wadaac, maalmo ka dib waxaa dhalatay bishii Muxarram, sannadkii 11aad ee hijriga, isla bishii ku xigtay ee Safar ayaa

Rasuulka SCW waxa ku bilaamay xanuunkii uu u geeriyoon lahaa. Rasuulka SCW geeridiisa waxaa ogeysiiyey Allaah sidii nabiyadii ka horreeyeyba, Rasuulka SCW wuu sii sheegay in aan Nabi dhiman ilaa la kala doorransiiyo labada daarood (adduun iyo aakhiro). Sidoo kale waxaa jirey arrimo badan oo muujinayey Rasuulka SCW geeridisa, waxaana ka mid ahaa:

1. Wuxuu Rasuulku SCW markii uu Mucaad binu Jamal Yaman u dirayey ku yiri "waxa la arkaa in aynaan mar dambe is arag oo aad soo martid masjidkayga iyo qabrigeyga".

2. Ramadaankii ugu dambeeyey wuxuu Rasuulku SCW ictifaafay 20 beri, halka uu kuwii ka horreeyey uu 10 beri ka ictikaafi jirey.

3. Isla Ramadaankaas ugu dambeeyey wuxuu Jibriil qur'aanka la dhammeeyey Rasuulka SCW labo mar halka uu kuwii hore hal mar la dhammayn jirey.

4. Xajatul-Wadaac wuxuu Rasuulku SCW asxaabta maalinkii Ramyiga (tuurasha) ku yiri "iga qaata manaasiktiinna, waxaa la arkaa in aanan sannad dambe soo xajine", markii Caarafo la taagnaana wuxuu yiri "waxaa la arkaa in aanan sannadkan ka dib halkaan idinkula kulmin".

5. Markii uu xajku dhammaaday ee lagu jirey Ayaamu-Tashriiqa waxaa soo degtey Suuratu-Nasri oo calaamad u ahayd geerida Rasuulka SCW.

6. Sidoo kale qur'aankii ayaa la taam yeelay oo waxaa soo degay aayadihii ugu dambeeyey.

7. Sidoo kale waxa uu Rasuulku SCW asxaabta ku yiri "ma idin gaarsiiyey (diintii)", oo uu waliba Saddex jeer ku cel celiyey, mar walbana ay lahaayeen "haa" markaasuu yiri "Allaw ka markhaati kac".

Rasuulku SCW wuxuu markaas bilaabay u tabaabushaysi iyo diyaargaroobid xagga Rabbi, wuxuuna aad u badiyey tasbiixda iyo istiqfaarta sida uu Allaahba ugu amray Suuratu-Nasri. Sidoo kale Rasuulku SCW wuxuu bilaabay sagootin oo bilowgii bishii Safar, sannadkii 11aad ee hijriga, wuxuu tegey qubuurihii shuhadadii Uxud oo uu ku soo tukaday, soona sagootiyey, ka dibna wuxuu ku soo laabtay masaajidka oo la hadlay dadkii muslimiinta ahaa, wuxuuna ku yiri "waan idiin dhammeyey (diintii) aniguna markhaati ayaan dushiinna ka ahay. Ilaah baan ku dhaartaye waaba aniga oo hadda eegaya xawdkaygii (darkaygii), waxaana la i siiyey furayaashii khasnadihii dhulka, aniguan Ilaah baan ku dhaartay eka cabsan maayo in aad gadaashay (Ilaahay u) shariik yeeshaan laakiin waxaan ka cabsanayaa in aad ku tartantaan dunida".

Sidoo kale Rasuulku SCW habeen ayuu aaday qabuurihii Baqiic oo u soo dembi dhaaf weydiiyey, ka dib Rasuulku SCW maalin ayuu ka qayb galay janaaso lagu xabaalayey qabuuraha Baqiic, markii uu ka soo laabtayna isaga oo dhex soo maraya ayaa waxaa qabtay madax xanuun iyo qandho, maalinkaas oo ahaa isniin, 29kii Safar, sannadkii 11aad ee hijriga, waana xanuunkii uu u geeriyooday, wuxuuna hayey 13 ama 14 beri.

Ka dib Rasuulka SCW markii uu xanuunkii ku soo batay wuxuu uga idan qaatay haweenkiisii in uu guriga Caa'isha joog, halkaas oo uu joogay intii uu xanuunsanaa. Ka dib maalin Arbaca ah (dhimashadiisa shan beri ka hor) ayaa waxaa Rasuulka SCW qabtay xanuun aad u daran oo uu la miyir doorsoomay, markaas ayuu yiri "igu shuba toddoba wadaamood (oo biyo ah) si aan dadka ugu baxo oo ula ballamo", markii ay ku shubeen oo uu miyirsaday ayuu masaajidkii galay oo membarkiisii ku fariistay, wuxuuna u khudbeeyey dadkii oo wuxuu yiri "Allaha naclado Yahuud iyo Nasaara waxa ay qubuurtii nabiyadooda ka dhigteen masaajid", waxaa kale oo uu yiri "ha ka

dhigannina qabrigeyga sanam la caabudo". Ka dib wuxuu Rasuulku SCW dadkii u bandhigay in ay ka aar gudato ciddii uu wax u geystay, ka dibna salaadii duhur ayuu tujiyey, wuxuuna ku laabtay meeshii isaga oo ku celinaya oraahdiisii hore, markaas ayaa nin muslimiinta ka mid ahaa yiri "saddex Dirham baan kugu lahaa", wuxuu yiri Rasuulku SCW "Fadliyow sii". Ka dib maalinkii xigey oo Khamista ahaa (dhimashadiisa 4 beri ka hor) ayuu asxaabtii ku yiri "kaalaya aan idiin qoro warqad aydaan gadaasheed lumin", markaas ayuu Cumar yiri "Rasuulka SCW xanuunkii ayaa ka qalib noqday, agtiinnana waxaa ahaaday qur'aankii oo waxaa idinku filan kitaabka Alle", dadki ayaa markaa is khilaafay oo dooday iyada oo qaar ayidayaan (ka hor imaanayaan) hadalkii Cumar qaarna leeyihiin "u keena Rasuulku SCW warqad ha idiin qoree". Markii xoogaa la buuqay ayuu Rasuulku SCW yiri "iga baxa". Sidoo kale waxuu Rasuulku SCW asxaabta u dardaarmay in Yahuud, Nasaara iyo Mushrikiin laga saaro Khaliijul-Carab.

Rasuulku SCW wuxuu isla maalinkaas tujiyey asxaabta salaaddii maqrib, wuxuuna ku akhriyey Suuratu-Mursalaat, salaaddii ku xigtay ee cishahana wuxuu damcay in uu tujiyo laakiin wuu awoodi kari waayey, wuxuu markaa amaray Abuubakar in uu dadka tujiyo, ilaa uu Rasuulku SCW ka dhintayna Abuubakar ayaa dadka tujinayey.

Maalinkii Sabtida ama Axadda ayaa Rasuulka SCW xanuunkii xoogaa ka fududaaday, markaas ayaa isaga oo labo nin garbaha hayaan salaaddii duhur u soo baxay Abuubakar oo dadka tujinaya. Abuubakar ayaa markii uu arkay dib u baxay hase yeeshee wuxuu Rasuulku SCW u ishaaray in uu joogo, wuxuuna nimankii ku yiri "i fariisiya dhinaciisa", markaas ayey fariisiyeen dhinaca bidix ee Abuubakar. Abuubakar waxa uu markaa ku dayanayey Rasuulka SCW wuxuuna dadka maqashinayey takbiirtiisa.

Ka dib wuxuu Rasuulku SCW sadaqeeyey 7 Diinaar oo uu haystay, hubkiisiina wuxuu u hibeeyey muslimiinta, canbuur bireedkiisiina nin yahuud ah ayaa rahan ugu haystay 30 saac oo qamadi ah. Maalintii isniinta (maalintii uu geeriyoodey) ayuu

Rasuulku SCW gurigii uu joogey ee Caa'isha daaha ka feyday oo fiiriyey safafkii muslimiinta, markaas ayuu u bogay oo ku qoslay, Abuubakar ayaa markaas u maleeyey in Rasuulku SCW salaadda imaanayo hase yeeshee wuxuu Rasuulku SCW u ishaaray in uu iska joogo, wuuna iska laabtay. Markii barqadii la gaaray ayuu Rasuulku SCW gabadhiisii Faadumo u yeeray, wuxuuna ku sireystay arrin markaas ayey oyday, markaas ayuu arrin kale ku sireystay markaas ayey qososhay. Waa dambe markii Faadumo la weydiiyey arrinkaas waxa ay tiri "wuxuu markii hore ii sheegay in uu xanuunka haya u dhimanayo, markaas ayaan ooyey, markii kalena wuxuu ii sheegay in aan ahay qofka ugu horreeyey oo ehelkiisa ah oo raaci doona, markaas ayaan qoslay". Sidoo kale maalinkaas waxa ay Faadumo aragtay Rasuulka SCW oo xanuun aad u darani hayo, markaas ayey tiri "aabbe waa dhibaateysan yahay", markaas ayuu Rasuulku SCW ku yiri "maanta wixii ka dambeeya aabbahaa ma dhibaatoon doono". Ka dib Rasuulku SCW isaga oo Caa'isha ku tiirsan ayaa waxaa u soo galay Cabdiraxmaan binu Abuubakar oo caday wata, markaas ayey Caa'isha aragtay Rasuulka SCW oo cadayga fiirinaya, waxa ayna fahamtay in uu jecel yahay, markaas ayey tiri "ma kaaga qaadaa", isna madaxa ayuu ugu ishaaray haa, markaas ayey uga qaadday oo u calaalisay, markii uu cadaygii dhammaystayna, gacantiisa ama fartiisa ayuu kor u taagay isaga oo indhaha saanqaafka ku fiirinaya, bishimahana dhaqdhaqaajinaya oo leh "Fi Raafiiqil-Aclaa", saddex goor ayuuna sidaas yiri, markaas ayey Caa'isha garatay in uusan adduunka dooran.

Ka dib Rasuulku SCW wuxuu geeriyoodey maalinkii Isniinta, 12kii Rabbiicul-Awal, sannadkii 11aad ee hijriga, waqti harsimadii ah, wuxuuna Rasuulku SCW jirey 63 sano.

Asxaabtii Rasuulka waxa ay arrintaasi ku noqotay lama filaan ilaa Cumar binu Khadhaab istaagay oo yiri "niman munaafaqiinta ka mid ah waxa ay leeyihiin "Rasuulkii

Alle waa dhintay" lugaha iyo gacmaha ayaan ka jarayaa haddii aan hadalkaas ka maqlo, Rasuulkii Alle Rabbigiis buu aaday sidii Muse binu Cimraanba Rabbigiis u aaday oo 40 beri u maqnaa, ka dibna u soo laabtay", markaas ayaa Abuubakar masaajidkii soo galay, isaga oo aan cidna lahadlin ayuu u gudbay gurigii oo Rasuulkii SCW intuu maradii ka qaaday wejiga ka dhunkaday yirina "Ilaahay kugu kulmin maayo labo dhimasho, tii Ilaahay kuu qoray waad hormarsatay", dabadeedna wuxuu ku soo laabtay masaajidkii, wuxuuna ku yiri Cumar "fariiso", wuxuuna la hadlay dadkii oo ku yiri "qofkii Maxammed SCW caabudi jirey, Maxammed SCW waa dhintay, qofkii Allaah caabudi jireyse Allaah waa nool yahay oo ma dhiman", wuxuuna akhriyey aayaddaan:

((NABI) MAXAMED SCW RASUUL MOOYEE WAX KALE MA AHAN, HORTIINA WAXAA TAGAY (DHINTAY) RASUULO, (HADABA) HADII UU DHINTO AMA LA DILO MA WAXAAD U LAABANAYSAAN CIRIBKIINII (GAALNIMADIINII) QOFKII U LAABTA CIRIBTIISII (GAALOOBA) WAXBA KA DHIB MAAYO ALLE, WUXUUNA (ALLE) ABAAL MARIN DOONAA KUWA SHUKRIYA (OO ALLE KA BAQA)), (Suuratu Aali-Cimraan 144).

Ka dibna iyada oo aan Rasuulkii SCW weli la aasin maalinkaas ayaa laga hadlay khilaafadii iyo qofkii loo dooran lahaa si aysan muslimiintu hoggaan la'aan u noqon, in kasta oo xoogaa laga dooday, waxaa ugu dambayntii khilaafadii loo doortay Abuubakar, Rasuulkana SCW waxaa la dhaqay maalinkii Talaadada ee ka dambaysay maalinkii uu dhintay, isaga oo aan dharkiisii laga faydin, waxaana dhaqitaankiisa u qumay adeerkiis Cabaas iyo labo wiil oo uu dhalay oo kala ahaa Fadli iyo Qatham oo gad gadinayey, Cali binu Abii-Dhaalib oo dhaqayey, Usaama binu Sayd iyo Shaqraam oo Rasuulka SCW mawlihiisa ahaa oo iyaguna biyaha ku shushubayey, Aws binu Khawli oo xabadka ku tiiriyey, waxaana Rasuulka SCW lagu kafnay sadex maro oo cad cad oo aysan ku jirin qamiis iyo cimaamad, ka dib waxaa laga wada hadlay meeshii lagu aasi lahaa Rasuulka SCW, oo leh "Nabi lama oofsado illaa waxaa lagu xabaalaa meeshiii uu ku dhintay, Dalxa ayaa markaa kor u qaaday gogoshii uu Rasuulku SCW ku jiifay, waxaana hoosteeda laga qoday qabrigii, ka dibna dadkii ayaa u soo galay toban toban iyaga oo ku tukanaya, oo waxaa ku tukaday ragii, waxaa ku xigaysaday dumarkii, ka dibna caruurtii, ilaa maalinkii Talaadada oo dhan saa ku dhamaatay, dabadeed waxaa la aasay habeenkii arbacada saqdii dhexe.

HAWEENKII RASUULKA SCW (UMAHAATUL-MUMINIIN)

Haweenkii uu Rasuulku SCW guursaday waxa ay ahaayeen Saddex iyo Toban oo uusan labo la aqal galin iyo labo adoomo ah, waxayna kala ahaayeen Saqaal uu kadhintay oo ahaa: Caa'isha bintu Abiibakar-Sidiiq, Xafsa bintu Cumar binu Khadhaab, Umu Xabiiba binu Abii-Sufyaan binu Xarbin, Umu Salama bintu Abii-Umaya binu Muqiira, Sawda bintu Samca binu Qays, Saynaba bintu Jaxshin binu ri'aab, Maymuuna binu Xaarith, Juwayriya bintu Xaarith binu Abii-Daraar, Safiya binu Xuyey binu Akhdhab, iyo labo hortiis dhimatay oo kala ahaa: Khadiija bintu Khuwaylid iyo Saynaba bintu Khusayma, iyo labo uusan la aqal galin oo kala ahaa: Asmaa bintu Nucmaan iyo Camra bintu Yasiid, iyo labo Adoomo ah o kala ahaa: Maariyatul Qibdhiya iyo Rayxaana bintu Sayd, intaas weeye haweeenkii Rasuulka SCW oo isugu jiray wuxuu la aqal galay iyo wuxuusan la aqal galin, waxaana u soo qaadanaynaa mid mid anagoo raacayna siday ukala horeeyeen:

1. Khadiija bintu Khuwaylid binu Asad waxa ay ahayd haweentiisii ugu horaysay waxaana u guuriyey Aabaheed Khuwaylid ama walaalkeed Camar binu Khuwaylid, waxayna jirtay 40 sano Rasuulkuna SCW wuxuu jiray 25 sano, waxay Rasuulka SCW hortiis soo guursatay Labo nin oo kala ahaa abii-haala binu Maalik oo ay u dhashay labo caruur ah iyo Catiiq binu Caabid oo asna ay labo caruur ah u soo dhashay. Rasuulku SCW wuxuu Khadiija qabay ilaa uu 50 sano gaaray, lamana uusan guursan. Khadiija waxa ay Rasuulka SCW u dhashay caruurtiisa oo dhan Ibraahim ma ahane.

2. Sawda bintu Samca binu Qays waxa uu Rasuulku SCW ku guursaday Makka sannadkii 11aad ee nabinimada markii ay Khadiija dhimatay waxaana u guuriyey Sulaydh binu Camar ama Abuu-Xaadhib binu Camar, waxaa isaga hortii soo guursaday ina adeerkeed Sakraan binu Camar oo kamid ahaa muslimiintii Xabashida u hijrootay ka dibna ku soo laabtay maka oo ku geeriyooday.

3. Caa'isha bintu Abii bakar-Sidiiq wuxuu Rasuulku SCW ku guursaday Makka sanadkii 11aad ee Nabinimada Sawda ka dib iyada oo lix sano jirta, wuxuuna ku dhistay Madiina iyada oo Sagaal sano jirta, waxaa u guuriyey aabeheed Abuubakar, mana guursan Rasuulku SCW bikro aan iyada ahayn oo haweenkiisa inta kale garoobo ayey ahaayeen, waxa ay ahayd haweenkiisa mida uu ugu jeclaa uguna cilmiga badnayd.

4. Xafsa bintu Cumar binu Khadhaab waxa uu Rasuulku SCW ku guursaday Madiina sannadkii 3aad ee hijriga, waxaana u guuriyey aabeheed Cumar, waxaana Rasuulka SCW hortii guursaday Khunays binu Xudaafa oo ku shahiiday dagaalkii Badar.

5. Saynaba bintu Khusayma oo lagu naanaysi jiray hooyadii masaakiinta siday ugu naxariisan jirtay oo ay ugu jilicsanayd darteed, wuxuu Rasuulku SCW guursaday sanadkii 4aad ee hijriga, waxaana u guuriyey Qabiisa binu Camar, waxaa hortiis soo guursaday Cabdullaahi binu Jaxshin oo ku shahiiday dagaalkii Uxud, waxayna dhimatay guurka Rasuulka SCW labo bilood ama Sadex bilood ka dib.

6. Umu-Salama bintu Abii-Umaya oo magaceeda la oran jiray hinda wuxuu Rasuulku SCW guursaday isla sanadkii 4aad ee hijriga waxaana u guuriyey wiilkeedii Salama ibnu Abii-Salama waxaana Rasuulka hortii kadhintay Abii-Salama binu Cabdi Asad oo magaciisa la oran jiray Cabdullaahi una dhintay dhaawac ku soo gaaray dagaalkii Uxud, waxayna usoo dhashay Abii-Salama Afar caruur ah oo kala ahaa: Salama, Cumar, Saynab, iyo Ruqiya.

7. Saynaba bintu Jaxshin binu Ri'aab wuxuu Rasuulku SCW guursaday sanadkii 5aad ee hijriga, waxa ayna ahayd Rasuulka SCW ina eedadiis waxaana hortiis soo guursaday Sayd binu Xaarith, Alle ayaana u guuriyey sababteedana waanu soo marnay.

8. Juwayriya bintu Xaarith waxa uu Rasuulku SCW guursaday sanadkii 6aad ee hijriga waxayna kamid ahayd dadkii lagu soo qabsaday duulaankii banii musdhaliq waxaana qayb ahaan u helay Thaabit binu Qays markaasuu kitaabeeyey, Rasuulka SCW ayey u timid si uu uga gudo markaasuu Rasuulku SCW ku yiri "makuu sameeyaa wax taas kaaga khayr badan?" waxay tiri "waa maxay", wuxuu yiri "waan kaa gudayaa waana ku guursanayaa", waxay tiri "waayahay". Markaasuu ka guday ka dibna guursaday.

9. Umu-Xabiiba bintu Abii-Sufyaan oo magaceeda la oran jirey Ramal wuxuu Rasuulku SCW guursaday Sanadkii 7aad ee hijriga waxaana hortii soo guursaday Cubaydilaah binu Jaxshin oo ay u wada hijroodeen Xabashida markaasuu ka ridoobay islaamkii dabadeedna ku dhintay halkaas, hase yeeshee Umu-Xabiiba islaamkeedii ayey ku sugnaatay sidaa darteed markii Rasuulku SCW uu Najaashe Asxam warqada udirayey sanadkii 7aad ayuu ku codsaday in uu kusoo meheriyo oo usoo diro Najaashana sidii ayuu yeelay, wuxuuna kusoo daray Shuraxbiiil ibnu Xasna.

10. Safiya bintu Xuyey wuxuu Rasuulku SCW guursaday sanadkii 7aad ee hijriga waxayna ahayd reer banii Israa'iil oo waxay kamid ahayd dadkii lagu soo qabsaday duulaankii Khaybar markaasuu iyada ka doortay oo xoreeyey ka dibna guursaday, waxaana isaga hortii guursaday kinaana binu Rabbiic ibnu Abil-Xaqiiq.

11. Maymuuna bintu Xaarith wuxuu Rasuulku SCW guursaday sanadkii 7aad ee hijriga markuu Cumratul-Qadaa gutay, waxaana u guuriyey adeerkiis Cabaas binu Cabdi-

Mudhalib oo ay gurigiisa joogtay walaasheed Umu Fadlina qabay, Rasuulka SCW hortiisna waxaa soo guursaday Abii Ruhmi binu Cabdi Cusaa.

Kow iyo Tobankaas ayey ahaayeen xaasaskii Rasuulka SCW marka laga reebo labadii adoomada ahaa oo kala ahaa: Maariyatu Qibdhiya oo boqorkii Isandariya xukumayey usoo hadiyeeyey sanadkii 7aad ee hijriga waana gabadha u dhashay wiilkiisii Ibraahim, iyo tan kale oo ahayd Rayxaana bintu Sayd oo kamid ahayd dadkii lagu qabsaday duulaankii banii Qurayda oo uu markaa naftiisa u doortay. Labada uusan laguri galin sidaan soo sheegnayba waa Asma bintu Nucmaan iyo Camrata binu Yasiid, lagumana tiriyo Labadaan Umuhaatul-Muminaatka, maxaa yeelay kama aysan mid ahayn xaasaskii Rasuulka SCW.

Waxaa intaa noogu dhamaaday waxyaabihii aan ka ishaarnay guurkii Rasuulka SCW, waxa ay arrintaanina ka mid tahay meelaha ay cadawga islaamku wax ka xoq xoqdaan markii ay waayeen meel ay Rasuulka SCW ceeb uga raadiyaan, iyaga oo aad isugu taxalujiya in ay ceeb u helaan shakhsiyadda nadiifka ah ee Rasuulka SCW, taas oo Alle nusqaan ka dahiray.

Haddaba haddii aan wax ka tilmaanno guurkii Rasuuulka SCW waxaa ku jiray xikmooyin badan oo Alle SW uu garanayo, waxaana xikmooyinkaas ka mid ahaa kuwakan:

1. Waxaa jiray arrimo badan oo daruuri ahaa oo ay dadka muslimiinta ahi u baahnaayeem, aysanna ogaan karin cid aan haweenkiisa ahayn sida; jiifkiisii, qubayskiisii, soo toosiddiisii, salaatu-laylkiisii, janaabadiisii, mucaamaladiisii haweenka iyo hawlihiisii khaaska ahaa oo dhan. Waxaan in badan arkaynaa in ay haweenkiisu ka wariyeen axaadiis aad u tiro badan, siiba kuwa ku saabsan arrimaha aan soo tilmaanay.

2. Guurku waxa uu ahaa sunnadii anbiyadii Ilaahay, qaarkoodna wayba ka haween badnaayeen Rasuulka SCW sida; Nabi Sulaymaan iyo Aabihii Nabi Daa'uud, sidaa darteed Rasuulku SCW waa uu guursaday, dadka muslimiinta ahna waa uu ku booriyey, waxaana dhici kari lahayd haddii uusan Rasuulku SCW guursan lahayn in dad badan oo muslimiiin ah ka tagi lahaayeen guurka, iyagoo ku dayanaya Rasuulka SCW, markaasna waxaa lumi lahayd muhiimaddii wayneyd oo ahay din la is guursado si bani aadamku u tarmo, uusanna u dabar go'in, waxaa sidoo kale dhici kari lahay din muslimiintu haddii ay guurka ka tagaan ay yaraadaan, gaaladuna ay badato, sidaa daraadeed Islaamku waa uu reebay in guurka iyo hawlaha kale ee addunkaba laga fogaado sida suufiyada qubuuraha gala ama cilmaaniyiinta dhaha konton sano ayaan ku guursanayaa. Rasuulku SCW waxa uu maqlay sadex nin oo kala go'aansaday in aysan seexan, salaatu-layl u taagnaadaan, maalinkii soomanaadaan, aysanna guursan, markaasuu Rasuulka SCW yiri "anigu waan seexdaa, waan tukadaa (salaatu-laylka), waan soomaa, waan afuraa, dumarkana waan guursadaa, qofkii sunnadayda khilaafana iga mid ma ahan (Ummadayda kama mid ahan).

3. Sidoo soo tilmaanayba dumarkii uu Rasuulku SCW guursaday waxa ay u badnaayeen dumar ragoodii oo dhintay oo dhibaataysan, sidaa daraadeed si uu ugu kaalmeeyo, diintoodana u dhawro ayuu u guursaday, sidoo kale waxa ay dumarkaasi u badnaayeen dadkii Ilaahay diintiisa ugu horeeyey oo loo dhibay Alle dartii, qaarkoodna waxa ayba ka mid ahaayeen dadkii markii dhibku ka batay u cararay dhulka Xabashida sida; Umu-Xabiiba oo markii ay dhulkaa fog taktay ninkeediina ka ridoobay, Umu-Salama iyo Sawda oo iyagana markiii ay hijrada ka soo laabteen ka dib ragoodii hinteen, sidoo kale waxa uu qaarkood u guursaday in u kaalmeeyo caruurtana la koriyo maadaama ay ragoodii u dhinteen Alle dartii.

4. Carabtu waxa ay waagaas aad u xurmayn jirtay xididka oo way qadarin jireen, sidaa darteeed waa la wada og yahay booska ay islaamka u joogeen afartii khulaaf'ul-Raashidiin oo uu Rasuulku SCW xididka la ahaa, sidoo kale qabiilooyin iyo dad awal

islaamka la dagaalamayey ayaa markii uu Rasuulku SCW la xididay dhibtii joojiyey, dabadeedna sooba islaamay, sida reer banii musdhaliq oo soo islaamay markii uu Rasuulku SCW ka guursaday Juweyriya bintu Xaarith oo aabeheed ciddaas oday u ahaa, sidoo kale Abii Sufyaan oo si daran Rasuulka iyo islaamkaba ula colaytamay markii uu Rasuulku SCW guursaday gabadhiisii Umu-Xabiiba waa soo jilcay ilaa uu ka islaamay isaga iyo qabiilkii uu madaxda u ahaa ee quraysh.

Haddaba dhawrkaas qodob oo aan soo tilmaanay iyo kuwa kaleba waxa ay ina tusinayaan xikmooyinkii iyo faa'iidooyinkii ku jiray guurkii Rasuulka SCW. Waxa ay mustashraqiinta diin laaweyaasha ahi mararka qaarkood qoraan iyaga oo raadinaya meel ay Rasuulka SCW iyo islaamkaba ceeb uga helaan in Rasuulku SCW u guursaday haweenka badan shawwo ahaan, waxaase qofkii wax garad ahi garan karaa in aysan jirin arintaas ay acdaada Alle ku mayraysanayaan, maxaa yeelay sida la wada ogsoon yahay Rasuulku SCW markuu dhalinyarada ahaa ma uusan guursan haween badan, sidoo kale ma uusan guursan gabdho yar yar ee waxa uu guursaday Khadiija oo markaa da'ahayd oo soo guursatay labo nin, isla markaana ma uusan guursan haween kale ilaa ay dhimatay isaga oo konton jira ah, markii ay dhimatayna ma uusan guursan gabar yare waxa uu guursaday Sawda oo ahayd islaan weyn oo garoob ah, sidoo kale saan soo tilmaanayba dumarkii uu Rasuulu SCW guursaday oo dhan waxa ay wada ahaayeen garoobo Caa'isha mooyee, wuxuuna haweenka badan guursaday sannadihii ugu dambeeyey cimrigiisa.

Ugu dambayntii saan soo ishaarnayba waxaa Rasuuulka SCW guurkiisa ku jirey xikmooyin uu Alle garanayo, annaguna aannaan wada koobi karin, mana haboona in qof muslim ah is waydiiyo sababta uu Alle ugu baneeyey Rasuulkiisa SCW dumarkaa badan, maxaa yeelay waxa ay taasi noqonaysaa in uusan qofku ka raali noqon xukunka Alle oo uu la dhinactamo Alle iyo Rasuulkiisa SCW, qofkii uu waxyaalahaas shaydaanku ku waswaasiyana waa qof ka shakisan diinta Alle, maxaa yeelay Alle waa Xakiim shay walbaba meeshii ku haboon dhiga, isagaana Rasuulkiisa SCW iyo Rusuhii kale ee ka haweyn badnayd Rasuulka SCW u baneeyey haweenkaa badan.

Ka dib markii uu Rasuulku SCW isu keenay sagaal haween ah (oo nikaaxiisa isugu yimid) ayaa Alle ka xarimay in uu haween dambe guursado, waliba waxaa isaga gaar looga xarimay oo lagu siyaadiyey in uu haweenkuu qabay ku badelo haween kale, wuxuuna Alle isagoo arrintaa tilmaamaya qur'aankiisa ku yiri:

((XALAAL KUUMA AHAN NABIYOW DUMAR (KALE) DIB DAMBE, KUMANA BADALI KARTID (HAWEENKA AAD QABTO) DUMAR KALE, HABA KU CAJAB GALIYO (DUMARKA KALE) WANAAGOODU, KUWAY MIDIGTAADU HANATAY MA AHANE (KUWA GAALADA LAGA QABSADO), ALLENA WAXA UU AHAADAY SHAY KASTA KII LA SOCDA)), (Suuratul-Axsaab 52)

SIFADII RASUULKA SCW

Rasuulku SCW waxa u ahaa dadka kan ugu waji qurxoon, wajigiisuna waa balaarnaa, waana wareegsanaa, waxaana lawaydiiyey saxaabiga Baraa ibnu Caasim oo lagu yiri "wejiga Rasuulku SCW ma wuxuu ahaa seef oo kale", wuxuu yiri "maya ee waxa uu ahaa dayaxa oo kale". Afkiisu waasic ayuu ahaa, indhihiisu waa madoobaayeen, waxaa loo malayn jiray in uu indha kuulan yahay, isaga oo aan indha kuulan, waxaa loo malayn jiray in uu indha kuulan, dilaacooduna waa dheeraayeen, tintiisu ma adkayn, jileec daadsana ma aysan ahayn, ee waxa ay ahayd tin isku jirta oo jilicsan, wayna badnaan jirtay oo waxa gaari jirtay dhagaha, mararka qaarkoodna waxay gaari jirtay garbaha, wayna madoobayd oo cirro wax yar buu ka lahaa, waxa uuna Anas binu Maalik oo tilmamayey sheegay in waqtigii cimrigiisa ugu dambeeyey cirradii ku taalay madixiisa iyo garkiisa aysan dhamayn 20 tin.

Rasuulka SCW midabkiisu waxa uu ahaa caddaan guduud ku jiro, ma dheerayn mana gaabnayn ee waxa uu ahaa dhex dhexaad, miisaankiisu waxa uu ahaa dhex dhexaad oo mabuurnayn, caatana ma ahayn, xabadkiisu waa balaarnaa, garbihiisuna waa kala baxsanaayeen, garabka bidix korkiisana waxaa ku yaalay khaatuma Nubuwihii oo ka samaysnaa tin meesha ku ururtay, sidoo kale gacmaha iyo lugaha wuu u waa waynaa, markuu soconayo wuu dheerayn jiray ilaa ay asxaabtu ka cabireen in markay la socdaan ay dhib ku ahayd gaaritaankiisa, markuu meel eegayana wuu wada jeensan jiray, markuu qoslayana wuu dhoolo caddeyn jiray, mararka qaarkoodna si fiican ayuu u qosli jiray ilaa ay miciyihiisu ka muuqdaan, hase yeeshee kuma qosli jirin qosol dheer oo gah gah ah. Rasuulka SCW aamuskiisu wuu badnaan jirey, markuu hadlayana waxa uu ku hadli jirey hadal kooban oo xikmo ah oo Alle ka raali yahay, siduu Alleba ku caddeeyey qur'anka.

Rasuulka SCW dabeecaddiisu aad ayey u wanaagsanayd dhinac walba, Alle ayaana meelo badan oo qur'aanka ka mid ah ku tilmaamay, waxaana ka mid ah aayaadka uu Rabbi ku tilmaamay tan.

((WAXAAD KU SUGAN TAHAY AKHLAAQ WAYN)), (Suurat Al-Qalam 4).

Sidoo kale Caa'isha markii la waydiiyey waxa ay tiri: "dabeecadiisu waxa ay ahayd qur'aanka".

Rasuulka SCW dabeecaddiisii iyo akhlaaqdiisii wanaagsanayd waxaa noogu filan siiradiisa, aad ayuuna ugu wanaagsanaa dhinac walba hadday noqoto tawaaduciisii, xishoodkiisii, runtiisii, ammaanadiisii, suhdigiisii, ikhlaaskiisii, naxariistiisii, fahamkiisii, caqligiisii, geesinimadiisii, qiiradiisii u jilicsanaantii dadka muslimiiinta ah iyo ku ad adkaantiisii caniidiinta xaqa ka hor yimid.

Wuxuu ahaa Rasuulku SCW nin Alle doortay bani aadamka oo dhan, oo uu ka dahiray

CAWAAQIB XUMIDA UU LA KULMAYO QOFKII CAAYA RASUULKA (SCW)

SomaliTalk.com Editorial Board | December 31, 2002

Waxaa na soo kedinayay maalmihii ugu danbeeyay dad ku abtirsanaya inay yihiin soomaali oo si dhiiranaan aan dheelitirsanayn ugu kacaya falal-denbiyeed aad ugu weyn miisaanka culus ee diinta islaamka. Dadkaasi, waxay si ula kac leh wax uga sheegayaan diinta muqaddaska ah ee islaamka, iyagoo aad mooddo inay xanbaarsan yihiin ama lagu soo qanciyay fikrado baadiyaysan oo loo hal-abuuray la dagaallanka islaamka iyo muslimiinta-ba.

Haddaba, bishan aan ku jirno 26-keedii ayaa waxaa bogga furan ee loogu tala galay fikradaha akhristayaasha shabakadda somalitalk.com lagu arkay qoraal ka yimid nin soomaaliyeed, kaasoo si bareero leh qoraalkiisa ku soo bandhigay af-lagaaddooyin iyo caay aan ehel u ahayn Suubbanaha Rasuulka (scw). Ninkaan oo dhab ahaantii qoraalkiisa sida ku cad si weyn jaahil uga ah shakhsiyadda weyn ee Rasuulka (scw) iyo guud ahaan aqoonta diinta islaamka ayaa ku andacooday inuu Rasuulka (scw) u yahay ummadda mid baadiyeenaya, wuxuuna isagoo soomaalida uga digaya raacista Rasuulka (scw) yiri hadal uu cinwaan uga dhigay qoraalkiisa oo uu yiri "soomaaliyeey waxaan ka xumahay in Moxamad idin baadiyeeyay", isagoo isla mar ahaantaasna aan qoraalkiisa aan ku xusin sida iyo qaabka uu u baadiyeeyay.

Iyagoo mahadsan ayeey aqristayaasha sharafta leh naga codsadeen haddaan nahay bahda somalitalk inaan jawaab celin ka bixinno qoraalkaan sida weyn meel ku dhaca ugu

ah diinta islaamka, innagoo isla markaasna dhinaceena caddaynayna cawaaqib xumida ka imaan karta Rasuulka (scw) oo la aflagaaddeeyo ama meel looga dhaco iyo guud ahaan diinta islaamka.

Eebbe (sw) ayaa weyneeyay maqaamka Rasuulka (scw)

Waxaan shaki ku jirin inuu Eebbe (sw) sarraysiiyay maqaamka iyo fadliga Suubbanaha Rasuulka (scw), isagoo ka faddilay dhammaan makhluuqaadka ku nool koonkan aynu ku noolnahay iyo addoomada suubban (malaa'igta oo kale) ee iyaga ku nool samada. Eebbe (sw) isagoo noo sheegaya siduu u maamuusay Rasuulkiisa Muxammad (scw) wuxuu yiri "waxaa mahad iska leh Allihii qur'aanka ku soo dejiyay adoonkiisa (Muxammad) oo aan qur'aanka ka yeelin mid qaloocan" suuradda al-kahf aayadda 1-aad. Wuxuu misna Eebbe (sw) yiri isagoo weli tilmaamaya sidii uu u maamuusay Rasuulkiisa Muxammad (scw) ayaa wuxuu yiri "waxaa kheyr batay Allaha qur'aanka ku soo dejiyay addoonkiisa (Muxammad) si uu (markaasi) u ahaado mid u digaya dunida" Suuradda Al-furqaan aayadda 1-aad.

Dhinaca kale, wuxuu Eebbe (sw) noo tilmaamayaa inuu Rasuulka (scw) yahay mid naga saaraya baadida iyo mugdiyada shirkiyaadka, isagoo noo saaraya iftiinka iyo hanuunka islaamka, wuxuuna yiri Eebbe (sw) "Eebbe (sw) waa kan addoonkiisa ku soo dejiyay aayado cad-cad si uu idiinkaga saaro mugdiyada, idiina saaro iftiinka, Eebba-na (sw) waa kan idiin naxariista" Suuradda Al-xadiid aayadda 9. Wuxuu Eebbe (sw) nagu addoonsaday inaan qaadanno amarrada uu na farayo Rasuulka (sw), isagoo cadaab daranna nooga digay haddaan qaadan weyno wadiiqadiisaas toosan, wuxuuna yiri "wixii uu Rasuulka (scw) idiinla yimaado qaata, wixii uu idinka reebana ka reebtoonaada, Eebbe (sw) ka cabsada, Eebbe (sw) waa mid ay ciqaabtiisu daran tahay" Suuradda Al-xashr aayadda 7.

Sidoo kale, wuxuu Eebbe (sw) nagu adkeeyay inaan ka shidaal qaadanno hanuunka Rasuulka (scw) oo aan isaga ku dayano, wuxuuna Eebbe (sw) yiri "waxaa idiinkaga sugan Rasuulka (scw) ku dayasho wanaagsan waana kuwa rajeynaya Eebbe iyo maalinta aakhiro oo in badan Eebbe (sw) xusaya" Suuradda Al-axzaab aayadda 12.

Guud ahaan mu'miniinta waxaa la faray inay si weyn u qaddariyaan una ixtiraamaan Rasuulka (scw), wuxuuna isagoo Eebbe (sw) ka hadlaya arrintaan yiri "kuwa xaqa rumeeyayow codkiina ha ka kor yeelina codka Rasuulka (scw), hana ula jahrina hadalka si aan camalkiina u burin idinkoon ogeyn" Suuradda Al-xujuraat aayadda 2aad.

Gooddi haysta qofkii dhibaato u geysta Rasuulka

Maadaama aan soo oggaanay sidii weynayd ee uu Eebbe (sw) u maamuusay una karaameeyay xabiibkiisa Suubbanaha Rasuulka (scw), ayuu misna ugu jeedinayaa gooddi daran ciddii iyaga ku tala gala dhibaataynta Rasuulka (scw) oo ay ka koow-ga tahay cayda iyo af-lagaaddada Rasuulka (scw). Wuxuu Eebbe (sw) aayad ku jirta suuradda Al-towbah ku soo gabagabeenayaa hadalkan "kuwa dhibaatada u geysanaya Rasuulka (scw) waxay mudan cadaab daran". Inkastoo ay jiraan gooddiyadaas, haddana wuxuu qur'aanka noo sheegay inay weligood jireen dad iyaga cadoow u ahaa anbiyadii Alle (sw) sida ku cad aayaddan "saasaan ugu yeelnay Nebi kasta cadoow dembiilayaal ah, Eebbe (sw) ayaa ku filan hanuuniye iyo gargaare" aayadda 31 ee suuradda Al-furqaan.

Xukunka qofkii caaya Rasuulka (scw)

Aflagaaddada iyo cayda Rasuulka (scw) waa jariimooyinka ugu waaweyn ee la galo. Ibnu Taymiyah wuxuu kitaakbiisa Assaarim Al-masluul ku leeyahay juska 3-aad bogga 983 hadalkan macnihiisu yahay "muujinta aflagaaddada iyo cayda Rasuulka (scw) ayaa ah

mid si weyn u dhaawacaysa una dhibaataynaysa guud ahaan muslimiinta". Dhammaan imaamyada iyo fuquhada islaamka waxay qabaan in cayda iyo aflagaaddada ama iyadoo meel looga dhaco sharafta Rasuulka (scw) ay ka rattibmayso kufri cad, waana sida uu qabo imaamu Shaafici iyo dhammaan fuquhada kale. Imaamu Abii Xaniifa Allaha u naxariistee wuxuu ku sheegay qofkii meel uga dhaca Rasuulka (scw) amaba beeniya inuu yahay murtad (diinta ka baxay), sidaas si la mid ah ayeey qabaan asxaabta imaamu shaacifici oo iyagu leh "qof alla qofkii ugula dhaqaaqa Rasuulka (scw) wax uu ku liidayo sida aflagaaddo iyo cayda qayaxan, Nebiga (scw) oo la ihaaneesto waa kufri ama gaalnimo..."

Ciqaabta Rabbaaniga ah ee ka dhalanaysa aflagaaddada Rasuulka (scw)

Waa hubaal inuu la kulmayo ciqaab rabbaani ah qofkii aflagaaddeeya ama caaya Rasuulka (scw), ciqaabtaasi ha noqoto mid ku timaadda isagoo saaran dunida ama ha ku timaaddo maalinta aakhiro. Imaamka weyn ee Bukhaari ayaa ku soo arooriyay kitaabkiisa saxiixa ah xaddiis uu werinayo Cabdicasiis Binu Suhayb uuna isna ka sii werinayo saxaabiga jaliilka ah ee Anas Binu Maalik isagoo leh hadalkan macnihiisu yahay "waxaa jiray nin kirishtaan ah oo soo islaamay, wuxuu bartay qur'aanka sida suuradda al-baqara iyo aala-cimraan, wuxuuna noqday markii danbe qoraagii Rasuulka (scw). Goor danbe wuxuu ku noqday gaalnimadiisii, wuxuuna dadka ku oran jiray Muxammad waxna ma yaqaano aan ka ahayn wixii aan anniga u qoray. Ilaah (sw) ayaa maalintii danbe ninkii oofsaday. Dadkiisii ayaa aasay. Markii la gaaray maalintii danbe ayaa la arkay ninkii meydka ahaa oo ay dhulkii soo tuftay oo yaala meel dibad ah, markaasay yiraahdeen waxaa qabriga ka soo saaray Muxammad iyo asxaabtiisa. Meydkii ayeey qaadeen, waxay u qodeen god kale oo si fiican loo qoday, sidii ayeey markalena ku aaseen. Hase ahaatee, maalintii kale ayeey arkeen isagoo dibadda yaalla, markaasay xaqiiqsadeen inay dhulka soo tuftay oo ayna rabin inay qaaddo ninkaas, sidii ayeeyna isaga fogeeyeen meydkoodii.

Isla xaddiis la macno dhow xaddiiska kore ayuu ku werinayaa Imaam Muslim saxiixiisa, isagoo uu ka werinaya isla saxaabigii aan xusnay ee Anas Binu Maalik isagoo leh hadalkan macnihiisu ahaa "waxaa naga mid ahaa nin najjaar ahaa oo aqristay (bartay) suuradaha al-baqara iyo aala-cimraan. Wuxuu ahaa qoraagii Rasuulka (scw) ee (waxyiga). Isagoo baxsad ah ayuu u cararay xaggii ahlu-kitaabka (nasaarada iyo yahuudda). Markii ay oggaadeen inuu ahaa qoraagii Rasuulka (scw) ee waxyiga ayeey u yimaadeen iyagoo jeclaystay siduu gacantooda ugu soo galay. Ma sii joogin jeer maalintii danbe uu Alle (sw) ka dilo. Waxay dooneen inay aasaan, markaasay u qodeen godkii ay ku aasi lahaayeen, hase ahaatee dhulkii ayaa soo tufay oo ku soo tuuray wejiyadoodii, dabadeedna way isaga tageen kadib markii ay ka quusteen aasitaankiisa, waxayna ku danbeysay cirabtiisa ciqaabtaas foosha xun oo tilmaan cad u ah been-abuurkii uu ku been abuurtay Rasuulka (scw).

Haa, sidaas ayeey ku danbeesay abaalmarinta uu ka dhaxlay fal-denbiyeedkiisa. Wuxuu Eebbe (sw) ku fadeexeeyay dadkoo dhan, inuu ka soo saaray qabrigii ay is yiraahdeen ku astura oo ku aasa. Maadaama uu is yiri ku been abuuro oo uu dhibaateeyay Rasuulka (scw) ayuu Eebbe (sw) u aaray addoonkiisa sharafta badan ee Rasuulka (scw). Haddaba, ugu danbeyntii waxaan ugu nasteexeenaynaa dadka la qalday ee aflagaadda qayaxan u geesanaya Rasuulka (scw) iyo diinta islaamka inay ka waantoobaan, ogaadaanna inuu Eebbe (sw) yahay mid xafidaya oo ilaalinaya diintiisa toosan iyo sunnada xabiibkiisa Rasuulka Muxammad (scw).

SomaliTalk.com Editorial Board
Africa/Australia/Canada/USA/Yurub

Lasoo xiriir: www.somalitalk.com/feedback

2002-12-31 | 2003-01-01
FAAFIN: SOMALITALK.COM

Baro Siiradii Rasuul

nusqaan kulligeed.

XUSUUSIN: "Dhamaan inta casharka ku xiran ama jecel in ay bartaan Siirada Xabiibkeena Maxammed SCW, ha isku dayaan in ay bartaan oo ku daydaan wuxuu Isuga samayn jirey. Yeyna inta iska aqrin faraha ka qaadin ee ku dayda isaga qofkii kaloo aad uga sheekayn kartidna u sheeg." OsmanBillad. Walaalkiin aad ku walaalowdeed Islaamka